

رِأْيُ الصَّالِحِينَ

تأليف

الإمام أبي زكريا يحيى بن شرف النووي الدمشقي

٦٣١ - ٦٧٦ هـ

باللغة الصومالية

Saad Suubban

P.O. Box 33049 Riyadh 11448

Saudi Arabia

Tel. iyo Fax No. (009661) 4591226

Handphone : (009661) 504443610

E.mail: Saadsuubban@hotmail.com

RIYAADU SAALIXIIN

(BEERTII SUUBBANAYAASHA)

W. Q.

Imaam Abuu Zakariya Yaxya Bin Sharaf An-
Nawawi

W. Tarjumay
Cabdulcasiis Xasan Yacquub

Waxaa laga dalban karaa manshuuraadkeenna oo
kutubbo iyo cajalado Islaami ah :

Saad Suubban
P.O. Box 33049 Riyad 11448
Saudi Arabia
Tel. iyo Fax No. (009661) 4591226
Handphone : (009661) 504443610
E.mail: Saadsuubban@hotmail.com

LAMA DAABACAN KARO IDAN LA'AAN

حقوق الطبع محفوظة

RIYAADUS SAALIXIIN QAYBTII. 1

TUSMADA BUUGGA

	- Hordhac _____	9-18
	- Taariikhdiis Imaam Nawawi _____	19-24
Cutbuka 1	Camal suubban lama aqbaloo haddayan niyaddu daacad aheyn oo aan dar Alle loola jeedin _____	25-34
Cutbuka 2	Towbada _____	35-51
Cutbuka 3	Sabarka iyo adkeysiga _____	52-72
Cutbuka 4	Runta iyo miraheeda _____	72-76
Cutbuka 5	Daalacashada Alle iyo u jeedkiisa addoomaha _____	76-84
Cutbuka 6	Taqwada iyo Alle ka cabsiga _____	85-88
Cutbuka 7	Yaqiinta iyo isku halleynta Alle _____	88-97
Cutbuka 8	Ku toosnaanta diinta _____	97-99
Cutbuka 9	Ka fakaridda uunka Alle iyo waxyaabaha innagu hareersan _____	99-100
Cutbuka 10	Khayr ku dadaalidda _____	100-104
Cutbuka 11	Qof walbow waa adiga iyo dadaalka _____	104-114
Cutbuka 12	Cibaado sii badinta sii cimri gabowga iyo ugu yeeridda dadka taa _____	115-119
Cutbuka 13	Wajiyada kala duwan ee kheyarka loo sameyn karo _____	119-131
Cutbuka 14	Cibaadeyso si dhexaad ah _____	131-142
Cutbuka 15	Waa inaad daa'inta oo ku sugnaataa falashada acmaasha san _____	142-144
Cutbuka 16	Dhowrista sunnada iyo habkeeda _____	144-153
Cutbuka 17	Ahmiyadda u hoggaansanka amarrada Alle iyo kan dadka ugu yeeraya, ama faraya wax san wax xunna reebaya _____	153-155
Cutbuka 18	Bidcooyinka iyo arrimaha lagu soo dirriyo diinta waa xaaraan reebban _____	156-158
Cutbuka 19	Qof walbaa wixii uu jideeyo buu leeyahay _____	159-161
Cutbuka 20	Kheyr isugu yeeridda iyo xaalka kii kheyr jideeya ama xumaan horseeda _____	161-164
Cutbuka 21	Isu kaashiga kheyarka iyo sama falka _____	164-166
Cutbuka 22	Waa in laysu naseexeeyaa _____	166-167
Cutbuka 23	Samaan faridda iyo xumaan reebidda _____	168-177

Cutbuka 24	Gooddin Rabbi oo loo gooddiyey qofka afka samaha wax ka fara, xumahana afka ka reeba, aanse ku dhaqmin isagu._____	178-179
Cutbuka 25	Waa inaad ammaanada cidda leh siisaan_____	179-187
Cutbuka 26	Reebidda dulmiga iyo xumaha iyo ka hortaggooda iyo in dhidbaha loo jaro_____	187-197
Cutbuka 27	Weyneynta waxyaalaha caaggan iyo xurmada qofka muslimka ah iyo caddeynta xaqiisa iyo u turidda iyo u naxariisashadiisa_____	197-205
Cutbuka 28	Asturidda ceebaha muslimiinta_____	206-208
Cutbuka 29	Kaalmeynta muslimiinta baahan_____	208-209
Cutbuka 30	Shafeecada (Garab siin) _____	209-210
Cutbuka 31	Sama ka talinta iyo heshiisiinta dadka_____	210-214
Cutbuka 32	Sarreynta iyo fadliga masaakiinta iyo kuwa liita ee tabarta yar bulshada muslimka ah dhexdeeda. _____	214-220
Cutbuka 33	Wanaajinta agoonta, dumarka, gabdhaha, duqeyda, kuwa tabarta yar, fuqarada, iyo masaakiinta iyo in wanaag iyo naxariis loo muujiyo, si turid iyo nugeyl lehna loola dhaqmo, waxna la siiyo. _____	221-227
Cutbuka 34	Wanaajinta dumarka_____	227-231
Cutbuka 35	Xaqa uu ninka haweeniisa ku leeyahay_____	231-234
Cutbuka 36	Masruufidda carruurta iyo ehelka_____	234-237
Cutbuka 37	Wax ka bixinta waxa aad u jeceshahay xoolahaaga iyo waxa fiican adigoo dar Alle ula jeeda_____	238-239
Cutbuka 38	Wajibka qofka ka saaran in wixii uu mas'uul ka yahay faro adeecidda Alle, ka reebona ku caasinta Alle, uuna u ciqaabo kana celiyo khilaafka amarrada Alle. _____	240-242
Cutbuka 39	Wanaajinta deriska iyo dhowrista xuquuqdiisa_____	242-246
Cutbuka 40	Wanaajinta iyo u sama falka waalidka iyo xiriirinta qaraabada. _____	246-259
Cutbuka 41	Waalid caasiyadda iyo qaraabo goynta waa xaaraan. _____	259-262

Cutbuka 42	Xurmeynta iyo u sama falka saaxiibada waalidka. qaraabada, iyo xaasaska iyo kuwa la midka ah ee mudan xurmada	262-266
Cutbuka 43	Xurmeynta ehelkii nabiga (S.C.W.) iyo fadligooda	266-268
Cutbuka 44	Qaddarinta culimada, ehlu diinka iyo wax garadka samaha ka taliya iyo in laga hormariyo kuwa kale, oo la muujiyo sharafta iyo meeqaankkooda.	268-274
Cutbuka 45	Booqashada dadka wanaagsan iyo la socodkooda iyo la fariisagooda iyo jeclaantooda iyo ka codsigooda inay ku soo booqdaan iyo booqashada meelaha xurmadda leh.	274-283
Cutbuka 46	Fadliga iyo ahmiyadda in Alle darti la isku jeclaado, layskuna soo booqdo, qofkuna u sheego ruuxii uu u jecel yahay dar Alle inuu jecel yahay, iyo qofka marka lagu wargeliyo arrintaa waxa uu oranayo.	284-288
Cutbuka 47	Calaamadaha lagu garto addoonka Alle jecel yahay, iyo arrimo la xiriira sida aad taa ku gaari laheyd, loona halgamo sidii lagu gaari lahaa.	288-291
Cutbuka 48	Ka digid in la dhibo ehlu diinka, wax garadka samaha ka taliya, duqeyda, masaakiinta, iyo fuqarada.	291-292
Cutbuka 49	U qabashada dadka wixii ka muuqda dhaqan ahaan iyo in loo daayo wixii u qarsoon oo sir ah Alle (S.W.T)	293-297
Cutbuka 50	Ka cabsashada Alle	297-306
Cutbuka 51	Rajeynta iyo in samaan laga fisho Alle	306-326
Cutbuka 52	Fadliga in khayr Alle laga fisho, aragti sannna laga heysto.	326-327
Cutbuka 53	Waa in loo dhexeeyaa oo la kulansadaa rajo iyo cabsi.	328-330
Cutbuka 54	Fadliga inuu qofka u laab kaco, una booyo cabsi Alle darteed, iyo jaceyl uu u hayo	330-334

- Cutbuka 55 Fadliga inaan dunida lagu talax tagin, laguna raalli noqdo wixii calaf ah - haba yaraadeene - iyo fadli ga fuqurada Jidka Alle ku toosan _____ 335-350
- Cutbuka 56 Fadliga gaajada kugu soo gaadha Alle darti, iyo nolosha adag, iyo in lagu noolaado cunto iyo cabi taan yar, oo laga maarmo waxa dheeriga ah xagga nolosha iyo galmada _____ 350-373
- Cutbuka 57 Fadliga qaneecada iyo dhowrsanaanta iyo in dhex dhexaad la ahaado xagga maciishada iyo wax bixinta, iyo foolxumada wax weydiisiga inay duruuf adag iyo baahi daran kuu geysa maahee. _____ 373-381
- Cutbuka 58 Guddoon oo aqbal wixii lagu siiyo adigoon weydiisan _____ 381-382
- Cutbuka 59 Xooggaaga cun, iskana daa baryda, wax bixinta iyo sadaqadana dadka ugu horree _____ 382-384
- Cutbuka 60 Deeqsinnimada iyo wax ku bixinta jidka Alle, adigoo Alle isku halleynaya _____ 384-392
- Cutbuka 61 Bakheylnimada iyo nafjecleysiga waa wax reebban _____ 392-393
- Cutbuka 62 Wax isu huridda iyo wax isu tarka _____ 393-396
- Cutbuka 63 Ku dadaalidda arrimaha la xiriira aakhirada, iyo jeclaanta waxyaalaha, meelaha, iyo camallada wanaagsan ee barakada iyo kheyarka leh. _____ 397-398
- Cutbuka 64 Fadliga maal qabeenka Alla yaqaanka ah iyo fadliga shaqeysiga maal xalaal ah iyo ku bixintiisa ilaha kheyarka. _____ 398-400
- Cutbuka 65 Xusuusnaanta geerida iyo inayan hawo kula tegin _____ 401-406
- Cutbuka 66 Fadliga inay raggu booqdaan qubuuraha iyo waxa laga rabo inuu yiraahdo booqdaha. _____ 406-407

Cutbuka 67	Waa karaahiyo in lagu duceysto dhimasho, dhibaato ku soo gaartay awgeed iyo inuu qofku dow u yeelan karo inuu jecleysto dhimashada baqdin uu ka baqayo awgeed in diinta laga fidmeeyo (markii fasahaadka iyo xumahu ba taan)	408-409
Cutbuka 68	Dhowrsashada iyo kaga bixidda shakiga yiqiin	409-413
Cutbuka 69	Habboonaanta cidla doorashada waayaha fidmada iyo fasahaadka, qofkoo ka baqaya awgeed fidmo soo gaarta diintiisa ama ka qayb qaadasho falal xaaraan ah ama shaki ku jiro bannaanidooda.	413-415
Cutbuka 70	Fadliga in dadka lagu dhex jiro oo kulamadooda la tago oo wixii khayr lagala qayb qaato, oo kooda buka la soo booqdo, oo kooda dhinta wax laga soo xabaalo oo kooda jaahilka ah la hanuuniyo oo waxa san dadka la faro, wax xunna laga reebo, in siyaalahaas oo dhan la yeelo, dhibka ka imaanahayana loo dulqaato, dhibna adigu aadan geysan	416
Cutbuka 71	Soo dhoweynta, u jabjabnaanta iyo u nuglaanta mu'miniinta.	416-420
Cutbuka 72	Isu bogidda iyo islaweynidu ma bannaana	420-424
Cutbuka 73	Dabci wanaagga	425-429
Cutbuka 74	Dul qaadashada, degdegsiinyo la'aanta, iyo wax hub sashada, iyo isu turidda	429-432
Cutbuka 75	Iska cafi oo dan ha u gelin hadallada juhalada iyo ciyaal suuqa	433-436
Cutbuka 76	u Dul qaadashada dhibta	436-437
Cutbuka 77	Ka xanaaq ku xad gudubka lagu sameeyo xeerarka iyo xukannada Alle (Sharciga Islaamka) oo garab u ahow, una hiili diinta Alle (Islaamka)	437-439

- Cutbuka 78 Waa waajib iyo xil saaran dadka loo dhiibay howlaha qaranka iyo xafiisyada guud inay dadka soo dhoweeyaan oo si naxariis leh ula dhaqmaan daacad iyo hufnaan iyo kalgaceyl ku dheehan, waana xaaraan in la khiyaano ama la dago ama dulmi loo geysto dadweynaha ama aan la tixgelin daryeelkooda, ama in laga dan la'aado baahidooda. _____ 440-442
- Cutbuka 79 Mas'uulka caadilka ah. _____ 443-444
- Cutbuka 80 Ku adeecidda dadka maamulka iyo xukunka noo haya wixii aan dambi aheyn, iyo inaan lagu adeecin wixii dambi ah ee khilaafsan Islaamka. _____ 445-449
- Cutbuka 81 Iska reebidda in la weydiistaa jagada madaxtinnimada ah iyo hoggaaminta, haddii qof loo magaacabana jago madaxtinnimo ah waa inuu ka cudur daartaa qabashadeeda, haddii uu isleeyahay waa lagaa maarmi karaa oo baahi daran laguuma qabo _____ 450-451
- Cutbuka 82 Madaxda, qaalliyayaasha, iyo howlwadeennada waxaa lagu waanin inay yeeshaan wasiirro, xoghayno iyo la taliyayaal wanaagsan. Mana bannaana inaad ku xirnaato oo xiriir la wadaagto saaxiibbo xunxun. _____ 452-453
- Cutbuka 83 Ninkii weydiista qaalinnimo ama jago maamul iyo madaxtinnimo, ama jecel oo ku dadaala waa inaan loo dhiibin jagadaa oo kale. _____ 453

BUUGGA ANSHAXA IYO ADAABTA

- Cutbuka 84 Xishoodka, fadliga iyo wanaagga isku gubaabinta xishoodka iyo in dabeecad laga yeesho iyo dhaqan. _____ 454-456
- Cutbuka 85 Sir qarinta _____ 456-459
- Cutbuka 86 Ballan oofinta iyo daacad ahaanshada _____ 459-461
- Cutbuka 87 Daa'imidda iyo ku nagaanshaha camallada wanaagsan aad caadeysatay _____ 461-462

- Cutbuka 88 Hadal san oo nugul iyo weji furnaan ku qaabil dadka. _____ 463-464
- Cutbuka 89 Fadliga caddeynta hadalka iyo u biyaanintiisa qofka loo jeedinayo iyo in lagu celceliyo hadalka haddii qofka loo wado uu fahmi waayo. _____ 464
- Cutbuka 90 Si dhug leh u dhageyso hadalka haddii uusan xaaraan aheyn, iyo soo jeedinta dhageystayaasha si ay u dhuuxaan hadalka. _____ 465
- Cutbuka 91 Is wacdiga si dhexaad ah _____ 465-467
- Cutbuka 92 Sharaf dhowrashada iyo degganaanta _____ 468
- Cutbuka 93 Degganaan ku gelidda salaadda iyo golayaasha cilmiga iyo aqoonta _____ 468-469
- Cutbuka 94 Wanaaji martida _____ 470-471
- Cutbuka 95 U bishaaree dadka ugana tahniyee wixii kheyr iyo wanaag ah oo u hirgala. _____ 471-479
- Cutbuka 96 Sagootinta saaxiibka iyo u dardaarankiisa markii uu safar u baxayo iwm. iyo in loo duceeyo lana weydiisto duco. _____ 483-484
- Cutbuka 97 La tasho dadka wanaagsan, oo ka bari Alle inuu kheyrka ku waafajiyo oo kugu hanuuniyo laba talo tii roon _____ 483-484
- Cutbuka 98 Fadliga aadista salaadda ciidda, booqashada qof ka buka, aadista xajka, ka qayb galka jihaadka, salaadda janaazada iwm adigoo jid u maraya, jid kalena aan kii hore aheyn ku soo laabanaya si aad u badisid meelaha aad cibaadada awgeed u martay. _____ 485
- Cutbuka 99 U isticmaal gacanta midig wixii fiican oo idil _____ 486-489

BUUGGA ANSHAXA IYO ADAABTA WAX CUNIDDA

- Cutbuka 100 Ku billow cunidda inaad tiraahdo Bismillaah, kagana bax xamdi iyo u mahad naqid Alle (inaad tiraahdo al-Xamdulillahaah) _____ 489-493

- Cutbuka 101 Waa inaan ceeb laga helin cuntada, lana mahdiyaa _____ 493
- Cutbuka 102 Waxa laga rabo inuu falo qofka sooman markii lagu marti qaado cunno _____ 494
- Cutbuka 103 Waxa u falayo markii qof looga wacay marti qaad, uu la socdo qofaan looga wicin _____ 494-495
- Cutbuka 104 Waa inaad cuntaa waxa ku soo xiga raashinka oo aad bartaa qofkii aan aqoon anshaxa wax cunidda _____ 495
- Cutbuka 105 Way reebban tahay inaad laba timir ama miraha kaleba aad mar keliya wada qaadato iyadoo ayan kuu idmim dadka kula jooga. _____ 496
- Cutbuka 106 Wuxuu falayo oranayona markii uu qofku wax cunahayo ha yeeshee uusan dhergeyn _____ 496-497
- Cutbuka 107 Waa in cuntada laga cunaa geesaha xeerada, qof walba docda soo xigta, mana aha in laga cunaa dhexda _____ 497-498
- Cutbuka 108 Waa karaahiyo inaad wax cuntaa adigoo ku jiifa barkin ama u jiifa hab suxul mudasho ah _____ 498-499
- Cutbuka 109 Wax ku cunidda seddex farood baa fiican-fad liga leefidda faraha-waa karaahiyo in la tirtiraa faraha intaadan leefin ka hor-fiicnaanta in la leefo xeerada iyo soo qaadashada wasladdii kaa dhacda iyo cuniddeeda- way bannaan tahay inaad ku tirtirto faraha suxullada iyo cagaha markii aad faraha ka leeftid raashinka ku haray kaddib _____ 499-501
- Cutbuka 110 Ku filnaanta Cuntada _____ 501
- Cutbuka 111 Anshaxa cabidda biyaha- iyo fadliga neefsa- shada seddex jeer weelka debeddiisa iyo ka fiicnaanta in lagu neefsado weelka gudhiisa- Qofkii loogu hor siiyo cabitaanka waa inuu u gudbivaa weelka kan midigtiisa xiga _____ 502-503

- Cutbuka 112 Waa karaahiyo in toos looga cabbaa ibta xabka _____ 503-504
- Cutbuka 113 Ma fiicna afuufidda cabitaanka _____ 505
- Cutbuka 114 Waa lagu cabbi karaa biyaha taagni, waxaase fiican in lagu cabbaa fadhi _____ 505-507
- Cutbuka 115 Qofka qaybinaya sharaabka waxaa fiican inuu noqdo qofka u dambeeya oo wax cabba _____ 507
- Cutbuka 116 Wax waa lagu cabbi karaa weel kasta oo nadiif ah aan weelasha dahabka iyo qalinka aheyn- ma bannaana in loo isticmaalo weelasha dahabka iyo qalinka cabitaanka, cunitaanka, la gelitaanka suuliga iyo waxyaalaha kaleba- Waa lagu cabbi karaa biyaha afka si toos ah adoo ka cabaya webi ama kanaal adigoon weel iyo gacan iyo wax kale midna isticmaalin _____ 508-510

BUUGGA DHARKA

- Cutbuka 117 Hannaanka iyo anshaxa xirashada dharka, waxaa fiican xirashada dharka cad cad, waxbana kuma jabna xirashada dharka guduudan, cagaaran, huruudda ah ama madow, cudbi ahaayaaye ama wax kale xariirta maahee. _____ 510-514
- Cutbuka 118 Waxaa fiican xirashada qamiiska _____ 515
- Cutbuka 119 Inta la doonayo inuu ahaado dhereka qamiiska iyo inuu joogo shaarka, surweelka, hoosguntiga iyo ci maamada, mana bannaana in dharka la sii deysto oo la jiido _____ 515-522
- Cutbuka 120 Iska deynta xirashada dharka qurxoon ee qaaliga ah tawaaduc darti _____ 522-523
- Cutbuka 121 Waxaa kheyrron inaad dhexaad ka ahaato xagga dharka iyo inaad ka maaranto dharka qaaliga ah haddii aanay baahi qasbeysa jirin ama sabab sharci ah. _____ 523

Cutbuka 122 Xariirtu ragga waa ka xaaraan, dumarkana waa u xalaal_____	523-525
Cutbuka 123 Xariirta waa xiran karaan cadh-dho qabeenka_____	525
Cutbuka 124 Ma bannaana in lagu fariisto ama la dul fuulo rukuub ay dushiisa saaran tahay harag shabeel._____	526
Cutbuka 125 Waxaad oraneyso (ku duceysaneyso) markii aad- xiraneyso dhar cusub ama joog cusub oo kabo ah_____	526-527
Cutbuka 126 Fadliga in la hormariyo dhinaca midig markii aad wax gashaneyso_____	527

**BUUGGA ANSHAXA IYO ADAABTA FARIISIGA,
SUXUL
MUDASHADA, JIIFSIGA IYO RIYADA**

Cutbuka 127 Waxa la oranayo marka la jiifsanayo_____	528-530
Cutbuka 128 Waa loo jiifsan karaa jeegada markii aan laga baqeyn inay cawradu faydanto. Wayna bannaan tahay inaad lugaha isi saarato iyo inaad fariisato lugaha oo isku kaa gashan (isdhaafsan sida istillaab) ama ku xirato (ku duubato maro iwm dhexda iyo lugaha)._____	530-531
Cutbuka 129 Anshaxa iyo adaabta fariisiga_____	532-537
Cutbuka 130 Riyada iyo waxyaalaha la xiriira_____	537-539

BUUGGA SALAANTA

Cutbuka 131 Fadliga salaanta iyo fidinteeda_____	540-543
Cutbuka 132 Sida wax loo salamayo_____	543-545
Cutbuka 133 Anshaxa iyo adaabta salaanta_____	545-546
Cutbuka 134 Fadliga ku celinta salaanta markii labada qof kulantaba ama iska hor timaaddo_____	547
Cutbuka 135 Fadliga salaanta marka la soo galayo guriga_____	548
Cutbuka 136 Salaamidda carruurta_____	548

- Cutbuka 137 Ninka oo salaama afadiisa, haweenku way salaami karaan ragga aan gayin (ragga gayana kor waa ka salaami karaan (yacni ku oran karaan as- salaa mu caleykum) haddii aamin laga yahay fidmo iyo fasahaad_____ 549-550
- Cutbuka 138 Way reebban tahay in lagala hormaro salaan gaalada iyo sida loogu jawaabayo salaantooda -wayse bannaan tahay in la salaamo kulan isugu jira muslimiin iyo gaalo_____ 550-552
- Cutbuka 139 Dadka salaan markii aad imaaneyso iyo markii aad tageysaba, ama aad la kulantid ama kala tageysaan saaxiib ama kulan_____ 552
- Cutbuka 140 Anshaxa iyo aadaabta loo idansado gelitaanka_____ 552-554
- Cutbuka 141 Waa sunno qofka idansanaya gelitaanka haddii la weydiiyo ciduu yahay, inuu sheego magaciisa oo uusan oran Aniga iwm_____ 554-555
- Cutbuka 142 Waa xaq iyo arrin la iska dooni in loo jawaabo qofkii yiraahda al-xamdulillaah markii uu hindhiso (Waxaana loogu jawaabi yarxamukallaah) mana wanaagsana in loo jawaabo haddii uusan xamdi naqin iyo waxa la falayo marka la hindhisayo iyo marka la halaaqoonayo._____ 556-558
- Cutbuka 143 Fadliga is gacan qaadidda iyo weji furnaanta marka la kulmayo, iyo fadliga dhunkashada gacanta culimada iyo dhunkashada dadka ilmahiisa kalgaceyl iyo jaceyl muujin awgeed, iyo inaad ku soo booddo ood is gaadda qaaddaan qofka ka yimid safarka iyo inay xun tahay in madaxo hoos loogu dhigo oo loo foorarsado rukuuc sidi adigoo salaan ula jeeda._____ 558-560

H O R D H A C

Sharafta iyo ahmiyadda axadiista rasuulkii Alle, Muxammad (S.C.W.) qiimaha ruuxiga iyo adaabeed ay leeyihiin ka sokow , waxaa weyneeya oy sharci u tahay seddex meeloodoo meel dadka dhulka guudkiisa ku nool. Hab nololeedkii nabiga (S.C.W.) iyo hadalladiisiina waa u fahir Qur'aanka, iyo dhammeystir. Qofka muslimka ahi waa suura gal inuu weydiiyo sugnaanta xadiis ama fal nebiga laga sheegay , laakiin mar allaale iyo markuu sugnaanteeda ogaado, waa ku waajib qofkaa inuu ugu camal falaa sida aayad Qur'aan ah.

Qur'aanka iyo axaadiista nebiga (S.C.W.) waa halka qura ay ka soo fulaan sharciga iyo xukunka Islaamka. Qur'aanku waa hadalkii Alle ee loo waxyooday nebiga (S.C.W.) . wuxuuna u yahay muslimiinta meel iyo waa ay joogaanba isha koowaad aan ka hadalka laheyn iyo ilaaliyaha xukuma xeerarka oo idil .

Nebigeennii Muxammad (S.C.W) waa rasuulkii u dambeeyey ee lagu gunaanuday rusushii Alle, risaaladiisana waa fartiintii u dambeysay ee Alle u soo diro addoomahiisa. Nabi ka dambeeyaana ma jiro. Sidaa awgeed Alle uma waxyoon oo keliya risaaladiisa nebiga, ee wuxuu ka dhigay tusaale wanaagsan ay ku daydaan Aadanahu, wuxuuna u doortay inuu noqdo rusulkiisii u dambeeyey rusushiisii (gura dambeyskii rususha) dige iyo hanuuniye u ah dadka.

Wuxuu kulansaday nebiga (S.C.W) wax kasta oo wanaag ah xagga akhlaaqda iyo dabeecadda, iyo dhaqanka, wuxuuna ahaa mid ku dhaqma ee ku socda wixii loogu waxyooday oo lagu faray Qur'aanka.

Alle wuxuu yiri kor ahaaye:

لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِّمَن كَانَ يَرْجُوا اللَّهَ وَالْيَوْمَ الْآخِرَ وَذَكَرَ اللَّهَ كَثِيرًا

' Waxaa idiinku sugan rasuulka Alle (Muxammad S.C.W.) tusaale wanaagsan ee ku dayasho leh.' Suuradda al-Axsaab: Aayadda 21 '

Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuxuu ahaa matal wanaagsan oo lagu daydo lana raaco, ereyo kale haddaynu ku niraahdo , wuxuu ahaa Qur'aan dhulka ku socda. Dhinac kasta, falalkiisa oo dhan, dhaqankiisa gurigiisa dhexdiisa iyo debeddiisaba waa wax qoran oo xafidan iyadoo faahfaahsan, si ay u noqoto hanuun iyo tusaale iyo ileys Aadanahu iftiinsado.

Hoggaamiyihii weynaa ee Hindiya ' M. K.Gaandhi ' wuxuu yiri: ' Axaadiista nebigii Islaamka waxay ka mid yihiin waxyaalaha dha-xal galka ah ay Aadanuhu heystaan, muslimiinta ka sokow',.

Liyoo Tolistooy, qoraagii Ruushka ee caanka ahaa iyo mufakirkoodii wuxuu ku ogaaday oo ku garowsaday darajadii iyo meeqaankii weynaa ee rasuulka buuggan ' Riyaadu Saaalixiin' ka ee ka kooban hadalladii nebiga (S.C.W.) isagoo (Tolistooy) mar waliba wadan jiray buuggaa.

Nuskhad Riyaadu saalixiin ah baa laga helay jubbada weyn uu gashaday intuuusan u bixin socodkiisii u dambeeyey, isagoo ku dhintay socodka beertii uu fali jiray. Nuskhad Riyaad Saalixiin ah baa laga helay oo gaaddada ugu jidha.

Qur'aanku , shaki li'i waa halka koowaad ay ka soo fulaan xeerarka Islaamka , ha yeeshee qodob kasta oo aan Qur'aanka lagu faahfaahin , waxaa lagu qeexay oo lagu caddeeyey hadallada nebiga ama dhaqankiisa ama hadallada iyo dhaqanka asxaabtiisii uu nebiguna qiray. Hadalladii iyo falalkii nebiga (S.C.W.) waxaa si daryeel leh u dhageysan jiray oo ula socday eheladiisa, iyo asxaabtiisa, kuwaa oo ku xafiday erey ama fal kasta oo ka soo baxa nebiga laabahooda. Waxayna u gudbiyeen iyagoon waxba ka beddelin facyadii ka dambeeyey. Waxay si dhab ah u rumeysnaayeen in erey kasta oo afkiisa ka soo baxa , ama fal, uu waxyi Alle yahay.

Aragtida iyo qabitaankaana waxay ka qaateen Qur'aanka kariimka , gaar ahaan aayadahan ku soo arooray Suuradda an-Najam :

وَالنَّجْمِ إِذَا هَوَىٰ ﴿١﴾ مَا ضَلَّ صَاحِبُكُمْ وَمَا غَوَىٰ ﴿٢﴾ وَمَا يَنْطِقُ عَنِ الْهَوَىٰ ﴿٣﴾ إِنْ هُوَ إِلَّا وَحْيٌ يُوحَىٰ ﴿٤﴾
عَلَّمَهُ شَدِيدُ الْقُوَىٰ ﴿٥﴾

' Waa igu xiddiga markuu hoobto'e , saaxiibkiin (waxaa loola jeedaa nabiga S.C.W.) ma dhumin , xaqana kama leexan. Kuma hadlo hawadiisa iyo hadal tororog ah ee hadalkiisu waa waxyi xagga Rabbi uga yimaada. Waxaana wax baray (oo xagga Alle ka soo gaarsiiyey) ku xoog weyn (malag Jibriil) '. Suuradda an-Najm: Aayadaha 1-5

Haddaba iyadoo la eegayo ahmiyadda ay u leeyihiin hadallada iyo dhaqanka nebiga (S.C.W) hanuunkeenna, waxaa lagama maarmaan ah in qof kasta oo muslim ah ku adkeeya aqoontiisa Qur'aanka oo uu raaciyo taa axaadiista nabiga (S.C.W.) .

Waa xaqiiq dhab ah oo jirta in meesha uu Qur'aanka ka yahay hadalkii Alle, sunnadu sidaa aheyn. Luuqda labadaba way kala duwan yihiin , dadka aqoonta u leh afka Carabiga si fudud bay u kala saari karaan. Qur'aanka shaki li'i waa mucjiso sare, aan lala tartami karin isagoo kalena la keeni karin. Insi ama jin ma jiro keeni kara xitaa aayad Quraanka ka mid ah . Waa taxaddi joogta ah, cid ku dhacdayna ayan jirn inay yiraahdaan anigaa isagoo kale keeneyna 1400 sano waqti laga joogo iyo ka badan iyo ilaa maantada la joogo. Qur'aanku waa mucjiso nool iyo xujo muujineysa runta iyo xaqnimada nabiga (S.C.W.) iyo Islaamka.

Si kastaba arrintu ha ahaatee, luqada axaadiista inkastoo ay heer ahaan gaareyn luqada Qur'aanka, waxay iyaduna ka sarreysaa qo-raallada iyo dhahdooyinka dadka iyo hal curinnadooda oo idil. Waxaa lagu tilmaamaa luuqda axaadiista luuq sare, murti badan, oo wanaag iyo qurux leh iyo hal dhac wanaagsan, wayna ka heer sarreysa suugaanta Carabta oo dhan iyo gabayadooda .

Qur'aanka kaddib, axaadiista iyo sunnaha nabiga (S.C.W.) waxay ka qaateen kaalin weyn iyo qayb lixaad leh sameynta iyo horamarinta xeerarka iyo sharciga Islaamka. Waana Qur'aanka iyo sunnada masdarka qura ee diinta hadday tahay qabitaan, cibaado, akhlaaq iyo macaamil. Qur'aanka iyo sunnadu waxay ka kooban yihiin qodobbo iyo mabaadi la xiriira qaybaha kala duwan ee nolosha qofka muslimka ah . Sidaa awgeed haddii uusan qofka muslimka ah aqoon u laheyn axaadiista iyo sunnaha nabiga way ku adkaan inuu ku noolaado nolol wanaagsan oo aayo leh adduun iyo aakhiroba, ama inuu ka hortago dhibaatooyinka nolosha, ama inuu ogaado xuuqda uu leeyhay iyo waajibaadka laga rabo.

Axaadiista iyo sunnuhu waxay ka kooban yihiin qodobbo saameynaya qaybaha nolosha oo dhan, waxaana weeye dhab ahaantii, khasnadda iyo isha laga cabbo dabeecadaha wanaagsan iyo dhaqanka suuban ee guntoodu tahay horamarinta nolosha qofka adduun iyo aakhiroba.

Inaad qaaddo dhabbaha nabiga (S.C.W.) oo raadkiisa raacdo waa inay noqotaa hadafka yo ujeeddada aad higsanyso si aad u gaarto guul iyo liibaan iyo badbaado adduun iyo aakhirba.

wuxuu Alle yiri kor ahaaye:

قُلْ إِن كُنتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ

' Ku dheh (Muxammadow S.C.W.dadka) haddii aad Alle jeceshihiin , i soo raaca, markaas buu Alle idin jeclaane.' Suuradda Aali-Cimraan : Aayadda 31

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

إِنَّا أَرْسَلْنَاكَ شَاهِدًا وَمُبَشِّرًا وَنَذِيرًا ﴿٨﴾ لَتُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ، وَتُعَزِّرُوهُ وَتُوَقِّرُوهُ
وَتُسَبِّحُوهُ بُكْرَةً وَأَصِيلًا ﴿٩﴾

" Annagaa ku dirray nabiyow si aad marag, bishaareeye , iyo dige u ahaato. Si aad idinkuna dadow Alle u rumeysaan iyo rasuulkiisa, uguna gargaataan , una weyneysaan Allena u huftaan arroor iyo galabba).

Haddana bal aynu ku hadalno ururintii iyo xifdintii axaadiista iyo sunnaha. Waayihii Islaamka ka horreeyey ee jaahiliyadda lagu jiray aad bay u yaraayeen dadka wax akhrin karay ama qori karay. Taasi waxay aheyd mar aan sameynta buugaagta habkan casriga la aqoon ayanna jirinna rugag lagu fidiyo qoraallada. Qoraagii Hangeeri - yaanka : ' Ignas Goldziher' wuxuu yiri:

' Carabtu ma jecleyn akhrinta iyo qorista , waxayna isku halleyna - yeen oo la kaashanayeen si loo xafido taariikhda iyo sugaantooda xusuustooda'. Prof. Nicholsan wuxuu ku yiri buuggiisa ' Taariikhda suugaanta Carabta: ' Qoraalka aad buu ugu yaraa Carabta, gabayadii jaahiliguna oo heer sare ahaa uurka uun baa lagu hayey mana ay diiwaan gashaneyn.' . Arrintaasi waxay keentay inay soo baxaan dad ku caan ah awoodda kor wax ka qabashada (yacni xifdinta).

Waxaa ka mid ahaa ragga sidaa lagu yiqiin ee ku caanka ahaa nin Xammaad la oran jiray, ninkaa oo xaraf kasta oo alafbeetada ka mid ah ka tirin karay gabay aad u dheer. Wuxuuna korka ka hayey 27000 oo gabay. Nin kale oo la yiraahdo Abuu Zam Zam wuxuu mar tiriyeey gabayo ay tiriyeen boqollaal gabayaa ay ku hal qabsadeen magac Cumar la yiraahdo. Waxaana jiray rag awood u lahaa inay tiriyaan gabayo si xiriir ah bil dhan joogsi iyo khalad iyo ha - kad la'aan ah.

Casrigan aan joogna xitaa waxaa jira rag awood xifdin weyn leh oo lala cajabo.

Beryahii hore axaadiista nabiga (S.C.W.) iyo sunnaha waxaa dusha ka qabtay reerhiisa iyo asxaabtiisa kuwii ugu dhowaa ee helay fursadda iyo wanaagga la socodkiisa .

Dadkaa waxay ahaayeen haddaba kuwa meel wanaagsan jooga si ay u maqlaan una xafidaan dhaqanka iyo hadallada nebiga (S.C.W.)

Dadkaa ururiya ama weriya axaadiista iyo falalka nabiga waxay ahaayeen dad suuban oo aad u dhowrsoon, oo leh dhaqan iyo da-beecad wanaagsan.

Dadkaa daacadda iyo Alle ka cabsiga badan waxay yeeli jireen inay qoraan ama korka ka qabtaan axaadiista iyo sunnaha nebiga (S.C.W.) .

Baahida loo qabo xadiisyada awgeed waxay dadka aqoonta u leh ee dusha ka haya ka akhrin jireen goobo iyo rugag laysugu yimaado oo kala duwan, masaajidda iyo meelaha lagu kulmo. Inkastoo in badan oo ka mida axaadiista la qoray, tiro badan oo wax ku ool ah baa ku xafidnayd quluubta asxaabtii aadka uga ag dhoweyd nabiga (S.C.W.)

Muddo kaddib fitnadii ka dhex dhacday taageerayaashii Cali iyo Mucaawiye, waxay qolo waliba billowday inay soo saarto axaadiis, amarro, iyo tusaalooyin nebiga (S.C.W.) laga soo xigtay si ay u difaacaan aragtidooda iyo mowqifkooda. Waqtigaa bay billaabeen kooxo munaafiqiin ah inay soo saaraan axaadiis been ah oo ay u tirinayaan nebiga (S.C.W.) Waxay qoladaa munaafiqiinta ah axaadiis badan oo been ah ku dhex dareen kuwa run ah.

Si looga hortago arrintaa, oo loo joojiyo, waxaa la dareemay baahida iyo siday lagama maarmaan u tahay in la soo saaro hab lagu baaro oo looga hortago faafitaanka xadiisyada aan la hubin oo aan ka sugnaan nebiga (S.C.W.), hab suura geliya in laga sooco xadiisyada saxa ah kuwa beenta ama daciifka ah aan sugneyn.

Sannadkii 101 (hijraddii kaddib), Cumar ibn Cabdulcasiis, oo ahaa madaxweyne Alla yaqaan ah oo dhowrsoon ee reer Banii Ummayad ah, baa wuxuu magacaabay culimo aqoon dheer leh si ay u soo saaraan xadiisyada saxiixa oo uga soocaan kuwa kale.

Culimadaa Alle yaqaannada ah waxay dejiyeen xeerar iyo habab lagu helo halka ay ka soo fuleen axaadiista iyo warbixin la xiriirta nolosha weriyayaasha xadiiska iyadoo fiiro gaar ah la siinayey aragtidooda iyo aqoontooda diiniga iyo dhaqankooda.

Dadaalkii culimadaa waxaa ka soo baxay oo ka dhashay culuum ay ka mid yihiin 'Cilmul Xadiis' - aqoonta xadiiska - , cilmurrijaal - aqoonsiga ragga xadiiska wariyey - iyo cilmul asmaa (cilmiga magacyada).

Sidaa bayna ku billaabatay in la marsiiyo xadiis kasta baaritaan adag oo laga eego xagga luqada, qaabka, ereyada iyo macnahaba, dabadeedna fikradda ama mowduuciisa sida uu u waafaqayo Qur'aanka iyo axaadiista kale iyo sida uu ula socdo dhacdooyinka taariikhiga ah ee kale ee sugan.

Intaas dabadeedna silsilad kasta oo taxan ee weriyayaasha xadiiska waxaa la marsiinayey baaritaan, taariikhdooda, runtooda, awooddooda xifdinta iyo xusuusta, dhaqankooda, waxaana arrintaa aasaas iyo saldhig u ahaa xeerarka iyo qodobbada loo dejiyey 'cilmurrijaal' ka, iyo baaritaanka gaarka ee nolosha gaarka ee sida faahfaahsan loo hayey ee la xiriiray asxaabtii rasuulka iyo taabiciintoodii.

Arrintani waa hab baaritaan sare ay soo saareen culimo muslimiin ah kun sano ka hor, si loo ogaado waxaa inay run tahay ama dhacdo taariikhi ah oo sugan iyo in kale.

Waqtigaa reer galbeedku war ma aheyn , waxayna ku jireen jahli daran iyo mugdi weyn , moogaayeenna qaybahan cilmiga muhiimka ah , baaritaanka islaamiga ah wuxuu ahaa wax ku ool iyo hab baarid cilmi ah oo heer sare ah wax loo dhigaana jirin , adduunkuna iyadoo kale la arag, ayna u badan tahay inaanay arki doonin.

Baaritaanka iyo shaqadaa adag ay la yimaadeen culimadaa waxaa ka dhashay in la qoro buugaag kala duwan oo faahfaahsan ee ka hadlaya noloshii weriyeyaasha gaar ahaan dhaqanka iyo dabeecad-doodii, iyo hufnaanta iyo runtoodii.

Habkan waxaa aad laysugu duway cilmigaa qaar ka mid ah ee la xiriira weriyeyaasha ama ururiyaasha xadiiska oo si wanaagsan looga shaqeeyey oo kalsooni leh. waxaa ka mid ahaa raggii ka shaqeeyey cilmi xadiiska oo gacanta wanaagsan ka geystay : Ibni Shihaab az-zuhri iyo Abuu Bakar ibn Xazam.

Fikrad la xiriirta sida loogu dadaalay iyo shaqada lagu bixiyey ururinta iyo kala soocidda axaadiista waxay kaaga muuqan karaan tusaalooyinkan soo socda.

Ayuub al-Ansaari wuxuu ka dhoofay Madiina oo aaday Masar si uu uga keeno hal xadiis; sidoo kale Jaabir bin Cabdullaah wuxuu ahaa safar bil si uu hal xadiis uga keeno Cabdullaahi bin Anas. Ururiye kale ee ku howlanaa ururinta axaadiista nebiga wuxuu ogaaday oo loo sheegay nin hal xadiis haya.. Sidaa buu ugu dhoofay isagoo aad u jecel inuu ninkaa la sheegay la kulmo, markii uu gaaray degaankiisii buu dadkii weydiiyey ninkii loo sheegay.. Markaasaa loo tilmaamay oo la yiri waa ninkaa. Wuxuu arkay ninkii oo isku dayaya inuu qabto faras uu lahaa isagoo ku dagayey si uu u qabto faraskiisa weel maran ugana dhigayey faraska inay cows ugu jirto iyo raa-shin. Ururiyihii markuu arkay ninkan , oo markaa dagaya xoolo, wuxuu ka qaatay fikrad ah inuusan aheyn nin buuxinaya shuruuddii laga rabay ruuxa laga xigan karo hadalladii nebiga. wuxuu is yiri kani xadiis lagama xigan karo, sidaa buuna isaga laabtay gurigiisii isagoo aan la hadlin ninkii.

Halkaana waxaa kaaga muuqanaya sida loogu dadaalay ururinta axaadiista nebiga iyo sida looga dhowray oo looga hortagay wax kasta oo khalad ah oo la gelin karo, si ay facyada dambe u gaaraan xadiisyada iyagoo sugan lagu kalsoon yahay oo aan innaba shaki iyo mugdi laheyn.

Qarnigii labaad ee Hijriyada iyo wixii ka dambeeyeyba culimo badan baa ka shaqeeyey arrimahan oo ka tegay kayd dhaxal gal ah oo la xiriira calaameynta iyo hab kala saaridda axaadiista. Waxaa ka mid ahaa culimadaas sharafta badan Abuu Jurayj oo Makkah degganaa, Imaam Maalik oo degganaa Madiina, imaam Sufyaan as-

Sawri oo degganaa Kuufa (Ciraaq). Imaam Xammaad bin Salma oo degganaa Basra (Ciraaq). Imaam Cabdullaahi ibn Mubaarik oo degganaa Khurusaan (Oosbikistaan), imaam awzaaci oo degganaa Suuriya, iyo imaam Abuu Xaniifa oo degganaa Ciraaq. Imaam Abuu Xaniifa waa aasaasaha mad-habka iyo madarasada Xanafiya-da, iimaam Maalik waa aasaasaha mad-habka iyo madarasada Maalikiyada, Imaam Shaafici waa aasaasaha mad-habka iyo madarasada Shaaficiyada , imaam Axmed bin Xanbal wuxuu aasaasay mad-habka iyo madarasada Xanbaliyada. Ha yeeshee shaqadii la qabtay illaa markaa oo aad u qiimo badneyd ma aheyn mid dhan. Tusaale ahaan kitaabka al-Muwadda ee uu Imaam Maalik uu qoray wuxuu ku soo ururiyey oo keliya 1700 oo axaadista nebiga ah (S.C.W.) Waxayse taabteen oo qura arrimo la xiriira salaadda, soonka, xajka iwm.

Sidaa awgeed baa waxaa loo baahday in la sameeyo camallo dhan oo dhinac kasta taabanaya oo lagu daro mawaadiicda kale oo dhan lana waasiciyo arrimaha ay taabanayaan si ay ugu faa'ideystaan du-nida muslimka oo dhan. Arrintaa iyagoo ka duulaya bay qaadeen culimo hor leh tillaabooyin hore leh oo lagu baarayo sugnaanta ax-aadiista .

Waxaana arrintaa u dhaqaaqay Imaam Muslim (181A.H.) iyo Imaam Bukhaari (256 H.) ..

Muhimmada koowaad ee shaqadooda waxay aheyd in la baaro ma-gacyada silsilada is daba taxan ee xadiiska (yacni in la fiiriyo (qof-ba qofkuu ka werinayo) illaa laga gaaro weriyaha nebiga ka maq-lay ama ka werinayo falka, waxaa arrintaa mid mid u eegidda barbar socotay baaritaan hoose ee dhab loo faaqidayey akhlaaqda, dhaqanka, runta, iyo garashada iyo xusuusta qof kasta oo ka mid ah weriyayaasha xadiiska. Imaam Bukhaari wuxuu dadaal gaar ah ku sii bixiyey inuu ku sameeyo baaritaan qoto dheer kana soo saaro kuwa ugu saxsan kumaankunka xadiis ee markaa wareegeysanayey.

Wuxuu kala soo baxay 600,000 oo xadiis oo hortiisa yiil oo keliya 7275 xadiis wuxuuna ku qoray kitaabkiisa saxiix al-Bukhaari.

Sidoo kale imaam Muslim wuxuu ka doortay oo kala soo baxay 300, 000 oo hortiisa tiil oo keliya 9200 xadiis .. Xadiisyada ay soo doorteen imaam Bukhaari iyo Muslim waa axaadiis ay aad u xur-meeyaan muslimiinta, uguna weyn. waxayna u arkaan inay ku xi-gaan Qur'aanka.

Muddo kaddib, labadaa kitaab waxaa soo raacay afar oo kale oo loo yaqaan sunanta afarta ah oo kala ah Imaam Abuu Daawuud (275 Hijradii kaddib) imaam Tirmidi (279 hijradii kaddib) Imaam Ibni Maajah (295 Hijradii kaddib) Imaam Nisaa'i (303 Hijradii kaddib)

Waxaa sidoo kale jira ururin muhiim ah uu leeyahay Imaam Axmed bin Xanbal (241 Hijradii kaddib) oo loo yaqaan musnid imaam Axmed. Ururinta xadiisyada iyo sunnaha nebiga (S.C.W.). ahmi - yaddooda diineed ka sokow waa axaadiis saxiix ah oo sugan iyo qorid maalin kasta ah oo la xiriirta dhacdooyinka taariikheed ee maalmihii hore ee Islaamka. Waa kutub looga faa'ideysan karo xagga taariikhda iwm. Aqoon yahan Hangeeriyaan ah oo la yiraahdo ' Ignaz Goldzher' wuxuu ku sheegay qaybta labaad ee buuggiisa ' Muslim studies' ' inay axaadiistaani ay ifinayaan habka horumarka iyo fiditaanka Islaamka waayahii hore iyo dhacdooyinka taarii - kheed ee waayahaa hadday tahay xag siyaasad , bulsho, iyo dhaqan iyo dhaqaale.

Xadiisyada la soo ururiyey aad bay u badan yihiin waana qaybo tiro badan aan u fudadeyn qof kasta inuu akhriyo, fahmo oo uu xusuusnaado si uu ugu camal falo. Sidaa awgeed waxay aheyd laga maarmaan in la diyaariyo oo la isku dubbarido buug ka kooban axaadiis xul ah oo u muhiim ah nolosha qofka muslimka ah si ay uga faa'ideystaan kuwaa aan fursadda badan u heli karin inay akhriyaan oo ka faa'ideystaan buugaagta badan ee la xiriira axaadiista nebiga (S.C.W.).

Buugga shuruudaha buuxin kara waa buugga la yiraahdo oo la magac baxay ' Riyaadus Saalixiin ' ama ' beertii suubbanayaasha ' . oo laba qaybood ah. waxaa qoray buuggan caalimkii iyo muxadiskii weynaa , Imaam Muxyaddiin Abuu Sakariya Yaxyaa bin Sharaf An nawawi oo ku dhashay Nawaa oo ah magaalo ku taal Suuriya. Sheekhaa oo noolaa intii u dhaxeysay 631 Hijaradii kaddib (1233 dhalashadii Ciise kaddib) ilaa 676 Hijradii kaddib (1278 dhalashadii Ciise kaddib).

Imaam Nawawi wuxuu ku dadaalay inuu doorto 1900 oo xadiis oo ku jira Muslim iyo Bukhaari iyo mid ama labo kutubta kale ee axaadiista sida Muwadda'a uu qoray imaam Maalik. Axaadiista buuggan oo mas'alooyin kala duwan taabanaya.

Mu'allifkaa caalimka ah wuxuu hor dhac uga dhigay axaadiista aayado Qur'aan ah oo la xiriira axaadiista isla mowduucna yihiin. Wuxuu aayadaha hor dhac uga dhigay cutub walba axaadiista uu ka kooban yahay.

Arrintaasi oo qiimo gaara u sii yeeleysa buugga, ayideysana inay sunnadu tahay tan fasirta oo faahfaahisa Qur'aanka meelaha uu dumarka ku sameeyey . Nuskhadda asalka ee Carabiga ah axaadiista qaar baa soo noqnoqanaya oo cutubyo kala duwan soo hoos galaya, halka tarjumada aan ka deynay wixii soo noqnoqonaya innagoo tilmaameyna tiradii iyo cutubkii aan ku soo marnay.

Howshan waa tarjumad qaybta koowaad ee Riyaadhka, waxaynuna ku dadaalnay inay tarjumadu naska Carabiga ku dhisnaato xaraf ahaan iyadoo macnihii si cad loo muujinayo.

Shakhsiyadda Imaam Nawawi uma baahna carrifid , waayo caan buu ka yahay oo waa laga yaqaan dunida Islaamka.

Waxaa innagu filan inuu ka mid yahay culimada waaweyn xagga aqoonta xadiiska, xikmad iyo cilmi badan lagu yaqaan, sharaf iyo xushmad leh oo naf hurid badan. isagoo ka tegay raaxo adduun oo naftiisa u huray fidinta diinta iyo u adeeggeeda. Wuxuu ka mid yahay culimada tusaalaha loogu soo qaato arrimo badan..

Imaam Nawawi wuxuu qoray kutub badan , gaar ahaan kutub la xiiriira axaadiista iyo shuruuxdooda. Laakiin kitaabkiisan ah " Riyaadus Saalixiin' Wuxuu ka mid yahay kutubtiisa kuwa ugu muhimsan, uguna nafac badan , waana kitaab caan ah

Boqollaalkii sano ee u dambeeyey oo dhan wuxuu ahaa kitaab loo noqdo oo lala kaashado fidinta diinta iyo hirgelinteeda.

Maadaamuuna kitaabka asalkiisu Carabi yahay, uma suura galeyso dad badan oo Muslimiin ah oo aan afka Carabiga aqoon u laheyn inay faa'ido kala baxaan. Inkastoo kitaabkan loo turjumay afaf badan, haddana waa markii ugu horreysay uu ku soo baxo Carabi - Soomaali. Haddaba waxaan u soo gudbineynaa tarjumadan Soomaaliga ah ee kitaabka ' Riyaadus Saalixiin' dadka Soomaalida ah meelay joogaanba.

Buggan sidoo kale wuxuu aad u kaalmeyn doonaa Alle idanki dhallinyarada Soomaaliyeed wiilal iyo gabdhaba ee dadaalka ugu jira barashada diinta. Kuwaa oo ku kala nool Soomaaliya, Jabuuti, Itoobiya, Kenya, iyo meelo kala duwan ee Afrikada ah, Yurub, Aasiya , Carabta, iyo Ameerika.

Wuxuu u suura gelin doonaa inshaa laah inay ku saleeyaan nolosha iyo dhaqankooda diinta Islaamka.

Waa in maanka iyo maskaxda lagu hayaa in aqoon Islaami ah oo sax ah ay dhiseyso nolol macno iyo qiimo leh oo mira dhalisa , laguna liibaano adduun iyo aakhiraba.

Islaamku waa manhaj dhan iyo hannaan dhisaya qayb kasta oo nolosha ka mid ah waayo waa risaaladii u dambeysay ee ka timaadda xagga Rabbi , Alle, kor ahaaye.

Islaamku wuxuu u dejiyey nidaam iyo xeer, oo u jecexay dhabbo wanaagsan dhinac kasta nolosha , waana hannaan iyo hab nololeed

sare iyo caqiido wanaagsan oo miro leh iyo camal fal.

Walaalaheen Soomaaliyeed ee ku nool dalalka shisheeyaha waxay la kulmaan dhibaatooyin kala duwan , kuma noola oo keliya dhul fog oo shisheeye, ee waxaa taa ugu sii daran inay ku dhex nool yihiin degaan aan Islaam aheyn , oo aan laga aqoon dhaqanka iyo caadooyinka muslimiinta. Noloshu lagu noolaado dalalka shaki li'i waxay leedahay soo jiidasho maadaamay ka hormareen xagga culuunta maaddiga ah iyo tiknoolajiyada taa oo farxad iyo rayrayn ku abuuri karta qofka halkaa taga isagoo ka yimi Soomaaliya.

Waase in la ogaado in quruxda iyo dhaldhalaalka dunidaasi ku hormartay culuunta maaddiga oo lagu daganaado, dabadeedna iyagii la iska daba galo oo waxooda oo dhan xaq la moodo ay tahay arrin u horseedeysa facyadaa halkaa tagay wareer, baaba'a iyo burbur. Waxaasu iyo quruxdaasi waa dhalanteed iyo wirwir sideed wax waarayana maahaa, qiimo ay leeyhiin baaba iska yar haddii ayan qofku u wehlin taa iimaan iyo caqiido suuban iyo u camal falasho aakhiro iyo dabeecad san iyo xishood.

Waxaynu ognahay inay dad badan oo Soomaali ah ay ku nool yihiin dalal kala duwan oo Yurubta iyo Maraykanka ah. Dadka way ku adkaan inay diintooda dhowrtaan haddayan helin oo aan la barin diinta hadday tahay caqiido, cibaadaad, akhlaaq, macaamil, iwm.

Waxaa la rajeynayaa in buuggan uu u suuragelin doono dadka Soomaaliyeed waa iyo meel ay joogaanba inay diintooda ku dhaqmaan.

Cabdulcasiis Xasan Yacquub

Taariikhdi Imaam Nawawi oo kooban

Imaam Muxyaddiin Abuu Zakariya bin Sharaf an-Nawawi , wuxuu caan ku yahay magaca Imaam Nawawi , naynaastiisuna waa Muxyaddiin, kunyadiisuna waa Abuu Zakariya (kunya waxaa la yiraahdaa magac qof lagu dhajiyo ee uu leeyahay aabbhihi ama hooyadi ama mid ka mid ah ilmahiisa) (Abuu Zakariya waxaa loola jeedaa Zakariyah aabbhihi) . Sidoo kale waxaa la oran jiray Xaazim, oo ah magac awoowgiis Xaasim An-nawawi, wuxuu dhashay imaamka bishii Muxarram, sannadkii 631 (Hijradii kaddib) oo waafaqsan 1233 (dhalashadii Ciise kaddib)

Wuxuuna ka dhashay qoys wanaagsan oo ku noolaa Nawa, oo ah tuulo u dhow Dimishiq. Halkaa buuna ku qaatay carruurnimadiisa oo ku qaan gaaray kuna xafiday Qur'aanka kariimka ah.

Macallin Marakashi , oo ah caalim ku noolaa Nawa , wuxuu yiri:

' Waxaan ku arkay Sheekh Nawawi tuulada Nawa isagoo 10 jir ah. Wiilasha kale ee la da'da ah waxay ku qasbi jireen inuu la ciyaaro, laakiin sheekhu ma uusan jeclaan jirin inuu la ciyaaro. Wuxuu ku howlaan jiray waxbarashadiisa .. Haddii ay wiilasha ku qasbaan inuu la ciyaaro sheekhu waxaa dhici jirtay arrintaa siduu uga xun yahay iyo in laga mashquuliyo waxbarashadiisa inuu ilmeeyo'. Wuxuu intaa ku daray macallin Marakash : ' Waxaan billaabay inaan jeclaado Imaam Nawawi wixii ka billowday waqtigaa.

Wuxuu doonayey Imaam Nawawi aabbhihi inuu howlahiisa iyo shaqooyinkiisa wax kaga dhiibo. Imaam Nawawise isagoo doonayey awgeed inuu waxbarashada ka yool gaaro ma jecleysan arrintaa . Wuxuu Ilaahay u diyaarinayey howl weyn oo wanaagsan. Sidaa awgeed wuxuu muujiyey Imaam Nawawi inuusan niyad u heyn agaasinka xoolaha aabbhihi iyo ka shaqeynta howlahiisa ganacsiyeed.

Imaam Nawawi yaraantiisii buu wuxuu ku dhammeeyey xifdintá Qur'aanka kariimka ah, kaddibna wuxuu qaaday tillaabooyinkii cilmiga raacashada.

Imaam Nawawi Aabbhihi wuxuu dareemey markaa rabitaanka iyo doonista xoogga leh iyo garashada iyo garaadka uu Alle ku manneystay wiilkiisa. isagoo tixgelinaya doonistiisa waxbarashada aabbhihi wuxuu go'aansaday inuu ka shaqeeyo sida uu wiilkiisa waxbarasho wanaagsan ku heli lahaa . Sidaa awgeed wuxuu u qaaday Dimishiq , oo aheyd markaa xarunta cilmiga iyo culimada.

Wuxuu wax ka dhigtay ugu horreynba macallin Kamaal bin Axmed

Imaam Nawawi wuxuu yiri:

'Markii aan da' ahaan gaaray 19 sano, aabbahay wuxuu ii kaxeeyey Dimishiq, waxaana halkaa ka galay dugsiga " Rawaax' waxaan dhiganayey mac-hadkaa labo sano. Intii aan joogay dugsigii Ra - waaxa. Waxaan ku noolaa cuntada laga bixiyo dugsiga. Waxaana i suuragashay inaan 4 bilood iyo bar gudahood korka ka wada qabto buugga la yiraahdo ' Tanbiih' dabadeedna waxaan du - sha ka qabtay qaybo ka mid ah kitaabka ' Muhaddab'. laakiinse in badan oo waqtigeysiga ka mid ah waxaan siin jiray hab faalleynta iyo sharaxaadda buugaagta xadiiska iyo sixiddooda. Markii uu macal - linkeyga Isxaaq Maqrabi (Allaha u naxariistee) arkay horumarka aan sameeyey iyo niyadda weyn aan u hayo waxbarashada wuxuu billaabay inuu i jeclaado oo si gaar ah u daneeyo isagana xilsaaro waxbarashadeyda. Sannadka Markuu ahaa 650.(Hijrada kaddib) waxaan la xajiyey aabbahay dabadeedna waxaan joognay bil iyo bar magaalada Madiina.

Waxbarashadiisii

Caddaa' ud diin bin Cataar wuxuu sheegay in Sheekh Nawawi uu ku yiri: Waxaan dhigtaa oo bartaa labo iyo toban maaddo maalin kasta oo ka qaataa macallimiinteyda . Waxaa ka mid ah duruusta uu qaadanayey ' Saxiix Muslim ' (oo ah buug axaadiis ah) , Naxwo, sarfi, Fiqi iyo kuwo kale ; Imaam Nawawi wuxuu kaloo yiri: Alle wuu ii barakeeyey waqtigeysiga iyo xusuusteydaba wuxuuna ii suura geliyey inaan gaaro culuun aan rabay barashadeeda.

Imaamku wuxuu yiri: Waxaan mar is iri waa inaad barataa dhakh - tarnimada si aan hadafkaa u gaarana waxaan soo iibsaday buugag ka hadlaya daawada, waase wadi kari waayey markaas baan iska daayey markii aan arkay inaan u janjeerin cilmigaa. Waana iska ii - biyey buugtii aan u soo iibsaday inaan ka barto.

Macallimiintisii

Imaam Nawawi wuxuu ka bartay cilmiga xadiiska muxadasiin horseed ku ahaa cilmiga xadiiska waqtigaa, fiqigana wuxuu ka bar - tay culimo waaweyn. Macallimiintii uu wax ka bartay way bad - naayeen , waxaana ka mid ahaa:

1. Abuu Ibraahiim Isxaaq bin Axmed al-Maqrabi,
2. Abuu Muxammad Cabdu Raxmaan bin Nuux al-Maqdisi,
3. Abuu Xafs Cumar bin Ascad Ar-Rabiica,
4. Abul Xasan Arbali,
5. Abuu Isxaaq Ibraahiim Muraadi,

6. Abul Baqaa Khaalid bin Yuusuf Nablusi,
 7. Diyaa bin Tassaam al-Xanafi,
 8. Abul Cabbaas Axmad Misri
 9. Abul Cabdullaah Jiyaani,
 10. Abul Fatax Cumar bin Bandar,
 11. Abuu Isxaaq Waasti,
 12. Abuu Cabbaas Maqribi
 13. Abuu Muxammad Tanuukhi,
 14. Abuu Muxammad Cabdur Raxmaan Cambari,
 15. Abul Faraj Maqdisi,
 16. Abuu Muxammad Ansaari,
- iyo kuwo kale oo badan.

Kuwani waa macallimiintii uu wax ka bartay Imaam Nawawi.

Ardaydiisii

Sidii Macallimiintiisii, ardaydii Imaam Nawawi aad bay u badnaa -
yeen. Waxaana ka mid ahaa ardaydiisii:

1. Calaa'udiin bin Athar
 2. Abul Cabbaas Axmad bin Ibraahiim
 3. Abul Cabbaas Jacfari
 4. Abul Cabbaas Axmad bin Faraj
 5. Ra -
shiid Ismaaciil bin Mucallim al-Xanafi
 6. Abuu Cabdullaahi Xan-
bili,
 7. Abul Cabbaas Waasti
 8. Jamaaluddiin Sulaymaan bin Cu-
mar al-Daraa'ii
 9. Abul Faraj Maqdisi
 10. Badar Muxammad bin
Ibraahiim
 11. Sulaymaan Muxammad bin Abii Bakar
 12. Shihaab
Muxammad bin Cabdul Khaaliq
 13. Sharaf Xibbullaah
 14. Abul
Xajaaj Mazani
- iyo kuwo kale oo badan.

Taqwadiisii

Imaam Nawawi ma aheyn callaama aqoon badan oo keliya , wu -
xuu ahaa sidoo kale ruux cibaado iyo Alle ka cabsi badan, oo salaad
iyo soon badan. Wuxuu mar waliba raaci jiray sunnaha nebiga
(S.C.W.) wuxuuna ku noolaan jiray cunto yar mana jecleen israaf-
ka iyo raaxada badan. Dharkiisu wuxuu ahaa dhexdhexaad. culimo
iyo caamaba wuxuu ahaa nimay qaddariyaan wanaaggiisa darti oo
ay ka haybeystaan. Waxay mar waliba isku dayi jireen inay wax
siiyaan wuuse ka diidi jiray. Adduun iyo raaxadiisna ma doondooni
jirin. Sheekhu marnaba ma yeelin in mishaar loogu qoro dacwada
iyo howlahiisii diineed ama kaalmo lagu siiyo iwm.

Imaamku wuxuu ku shuqlanaan jiray fidinta diinta iyo bariddeeda
dadka ama salaad iyo daacad iwm.

Nasiinadiisu aad bay u yareyd, waxaana dhici jirtay inuu maalin iyo
habeen dhan ku joogo qado keliya iyo xoogaa biyo ah uu cabbay.

Howlahii uu qabtay:

Wuxuu noolaa imaam Nawawi oo keliya 46 sano inkastoo ay tahay muddo gaaban, haddana wuxuu sheekhu qoray kutub badan oo mawaadiic kala duwan ka hadlaya oo mid kasta qiimo iyo dhaxal gal yahay.

Waxaana ka mid ah wax qabadka iyo wax soo saarka Sheekha:

1. Sharxidda kitaabka ' Saxiixul Muslim' buuggan Imaam Nawawi wuxuu ka yiri : Sharaxan waxaan ku soo gudbiyey aqoon wanaagsan iyo cilmi dhaxal gal ah.'
2. Al-Minhaaj fii Sharax Muslim bin al-Xajjaaj.' Buuggan sharaxa ah wuxuu imam Nawawi ka yiri: Haddii aan tixgelineyn wahsiga iyo sabar yaraanta akhristayaasha, waxaan ku dari lahaa buuggan arrimo badan waxaana gaarsiin lahaa ilaa iyo 100 mujallad, laakiinse sababtaa aan soo sheegay baa keentay inaan soo koobo. Sharaxa buuggan wuxuu hadda ka kooban yahay oo qura laba mujalladood. Sheekh Shamsuddiin Muxammad bin Yuusuf qunfi al-Xanafi (oo dhintay 788 Hijradii kaddib) baa isna soo gaabiyey buuggan.
3. Riyaadhu Saalixiin'. Tarjumad Soomaali ah oo buuggan waa kan aynu halkan ku soo gudbineyno. Waa soo ururin in ku dhow 2000 oo xadiis oo xul iyo wada saxiix ah wax yar maahee. Waxaana la socda aayado Qur'aan ah oo taakuleynaya, lana xiriira mawaadiicda ay axaaadiistu ka hadlayaan.
4. Kitaabbur Rawdah.' oo ah soo koobid iyo soo gaabin sharaxa ka-biir raafici.'
5. Sharaxa Muhazzab.'
6. Tahdiibul Asmaa wasifaat
7. Kitaabul Azhar
8. Arbaciin (afartan xadiis)
9. ' Taqriib'
10. Irshaad fii culuumil Xadiis
11. Kitaabul Mubaahamaat
12. ' Cizzah'
13. Baatiyaan
14. ' Manaasik'
15. Sharax Saxiixul Bukhaari (ma dhameystirin oo waa naaqs).
16. Sharaxa Sunan abii Daawuud (ma dhammeystirin oo waa naaqs).
17. Dabaqaat fuqahaa ashaaficiyyah'.
18. Risaalata istixbaab alqiyaam la ahlulfadal
19. Risaala fii Qiyaamul Ghanaym,'
20. Fataawa.'

21. Jamcus sunnah.'
22. Khulaasatul Axkaam.'
23. Manaaqibu shaafici.'
24. Bustaanul Caarifiin.'
25. Mukhtasir Usudul Ghaabah.'
26. Xilyatul Abraar
27. Al-Asmaa Walluqaat
28. al-Maqaasid
29. At-tabyaan fii Adaabi xamlatal Qur'aan.

Dhimashadiisii

Sannadkii 676 (Hijraddii kaddib) Imaam Nawawi wuxuu u celiyey kutubtii u soo amaahday oo dhan dadkii kala lahaa , dabadeedna wuxuu booqday qubuurahii macallimiintiisii iyo culimadii una soo duceeyey . Arrinka iyo munaasabaddaa aad bay u laab kicisay heer ay indhahiisu ilmeeyeen. Markaa kaddib wuxuu soo salaamay saa - xiibbadiis iyo dadkii uu jeclaa wuxuuna dabadeed u laabtay magaaladiisii Nawaa.

Koox macaariftiisa ka mid ah baa markii uu ka baxayey Dimishiq sagootiday, waxay weydiiyeen : Goormaan kulmeynaa mar labaad.'

Imaam Nawawi wuxuu yiri: Waayo kaddib.

Dadkii meesha joogay waxay u qaateen inuu ula jeedo maalinta qiyaame. Markaa kaddib imaamku wuxuu booqday baytul Maqdis (Qudus) oo masjidka al-Aqsa ku soo tukaday, dabadeedna booqday qabrigii nebi Ibraahiim (C.S.) kaddibna wuxuu u laabtay magaaladiisii Nawaa. Markii uu tagayba waa uu xanuunsaday wuxuuna dhintay habeen Arbaco 14kii Bishii Rajab 676 (Hijraddii kaddib) aabbihi oo markaa nool.

Markii ay maqleen geeridii Imaamka Reer Dimishiq iyo dadkii ku noolaa meelaha u dhow waxay u soo baxeen ka qayb galka janaasadiisii, muslimiintu dhammaantood waxay ku qaabileen geeridiisa murugo iyo tiiraanyo iyo naxdin.

Qaalligii qaalliyaasha (madaxii xeer ilaaliyayaasha) ee Dimishiq markaa, Cizzuddiin Muxammad bin Saa'igh wuxuu ka qayb galay ku tukashada janaasadii imaamka isagoo ay wehliyaan duqey iyo odayaaal iyo culimo badan. wayna u duceeyeen. Gabayo dhowr ah baa laga tiriyey imaamka iyo siday muslimiintii markaa joogtay uga xumaadeen geeridiisa iyo murugada ay ku qaabileen warkeeda. Sheekh Waliyudduun bin Khadiib (Allaha u naxariistee) oo Ah isku dubbiradaha kitaabka Mishkaat wuxuu u hibeeyey buuggiisa ' Akmal fii asmaaur rijaal) imaam Nawawi.

**ERAYO LA SOO GAABIYAY IYO WAXA AY KA TAAGAN
YIHIIN**

S.W.T. (Subxaanahu watacaalaa)
(Alle hufnaa oo sare ahaaye)

S.C.W. (Sallal laahu caleeyhi wasallam)
(nabad iyo naxariis Alle dushiisa ha ahaato).

AK.R. (Alle ha ka Raalli noqdee.)

C.S. (Caleyhi Salaam)
(Nabadi dushiisa ha ahaato)

بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِیْمِ

١ - باب الإخلاص وإحضار النية في جميع الأعمال والأقوال والأحوال البارزة والخفية

CUTUBKA KOOWAAD

CAMAL SUUBBAN LAMA AQBALO HADDII AYAN NIY-
ADDU DAACAD AHEYN OO AAN DAR ALLE LOOLA JEE-
DIN

Alle wuxuu yiri kor ahaaye:

﴿ وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ حُنَفَاءَ وَيُقِيمُوا الصَّلَاةَ ، وَيُؤْتُوا الزَّكَاةَ ، وَذَلِكَ دِينُ الْقِيَمَةِ ﴾ [البينة : ٥]

1."Lama farin (dadka) waxaan ahayn inay Alle oo keliya caabu-
daan, iyagoo diinta (yacni maqalka iyo hoggaansanka) u gooni
yeelaya, iyo inay salaadda oogaan, sekadana bixiyaan sidaasaana
ah diinta toosan"

Suurada al Bayyina: aayada 5.

2. Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ لَنْ يَنَالَ اللَّهُ لُحُومَهَا وَلَا دِمَاؤَهَا وَلَكِنْ يَنَالُهُ التَّقْوَى مِنْكُمْ ﴾
[الحج : ٣٧]

' Ma ah Hilibkoodu iyo dhiiggooda midna waxaa gaaraya Alle,
waase daacadnimada iyo dhowrsanaanta xaggiina ka ahaatay
waxa gaaraya Alle'. Suuradda al-Xaj: Aayadda 37

Wuxuu kaloo yir Alle weyne kor ahaaye:

﴿ قُلْ إِنْ تَخَفُوا مَا فِي صُدُورِكُمْ أَوْ تُبْدُوهُ يُعَلِّمَهُ اللَّهُ ﴾ [آل عمران ٢٩]

3.. "Dheh (Muxammadow S.C.W.) : Haddii aad qarisaan waxa
laabihiinna ku jira, ama aad muujisaanba, Alle waa og yahay" .

Suurada aali Cimraan aayadda 29.

١ - وعن أمير المؤمنين أبي حفص عمر بن الخطاب بن نفيل بن عبد العزى بن رباح بن عبد الله بن قريط بن رزاح بن عدي بن كعب بن لؤي بن غالب القرشي العدوي رضي الله عنه قال : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « إِنَّمَا الْأَعْمَالُ بِالنِّيَّاتِ ، وَإِنَّمَا لِكُلِّ أَمْرٍ مَّا نَوَى ، فَمَنْ كَانَتْ هِجْرَتُهُ إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ فَهَجْرَتُهُ إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ ، وَمَنْ كَانَتْ هِجْرَتُهُ لِدُنْيَا يُصِيبُهَا ، أَوْ امْرَأَةٍ يَنْكِحُهَا فَهَجْرَتُهُ إِلَى مَا هَاجَرَ إِلَيْهِ » . مُتَّفَقٌ عَلَى صِحَّتِهِ . رَوَاهُ إِمَامَا الْمُحَدِّثِينَ ؛ أَبُو عَبْدِ اللَّهِ مُحَمَّدُ بْنُ إِسْمَاعِيلَ بْنُ إِبْرَاهِيمَ بْنِ الْمُغْبِرَةَ بْنِ بَرْدِزْبَةَ الْجُعْفِيُّ الْبُخَارِيُّ ، وَأَبُو الْحُسَيْنِ مُسْلِمُ بْنُ الْحَجَّاجِ بْنِ مُسْلِمٍ الْقُشَيْرِيُّ النَّيْسَابُورِيُّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا فِي كِتَابَيْهِمَا اللَّذَيْنِ هُمَا أَصْحُ الْكُتُبِ الْمَصْنُفَةِ .

1. Cumar bin Khaddaab (A.K.R.) wuxuu yiri: " Waxaan maqlay rasuulka (S.C.W.) oo leh: ' Niyaddaa saldhig ah (xag Alle) mudnaanshada in qofka laga abaal mairyo camalkiisii iyo in kale, qof walbaana wixii uu camalkiisa ula jeedo xagga niyada buu leeyahay. Qofkii Alle iyo rasuulkiisa dartood u soo haajirey waa u siidaas, qofkii arrin adduunyo la xiriidha ama naag guursigeed u soo haajireyna iyagu leeyahay (oo Alle waxba kama sugayo)"..
(Bukhaari iyo Muslim)

٢ - وعن أم المؤمنين أم عبد الله عائشة رضي الله عنها قالت : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « يَغْزُو جَيْشُ الْكَعْبَةِ فَإِذَا كَانُوا بِبَيْدَاءِ مِنَ الْأَرْضِ يُخَسَفُ بِأَوْلِهِمْ وَآخِرِهِمْ » . قَالَتْ : قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ كَيْفَ يُخَسَفُ بِأَوْلِهِمْ وَآخِرِهِمْ وَفِيهِمْ أَسْوَأُهُمْ وَمَنْ لَيْسَ مِنْهُمْ ؟ قَالَ : « يُخَسَفُ بِأَوْلِهِمْ وَآخِرِهِمْ ثُمَّ يُبْعَثُونَ عَلَى نِيَّاتِهِمْ » مُتَّفَقٌ عَلَيْهِ . هَذَا لَفْظُ الْبُخَارِيِّ .

2. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Nabigu (S.C.W) wuxuu yiri:
" Ciidan baa Kacbada ku soo duuli doona, kolkay soo gaaraan dhul siman oo Madiina u dhow, markaasaa kan u horreeya iyo kan u dambeeyaba dhulka lala goyn doonaa "
Waxay tiri: Waxaan iri oo rasuul Alloow sidee kan u horreeya iyo kan u dambeeyaba dhulka loola goynayaa, sow kuma jiraan kuwo ay soo kaxaysteen oo aan ku raacsanayn (camalkaa), iyo kuwo aan kaba tirsanaynba? Rasuulka Alle (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: " Waa lala goynayaa ciidanka oo idil dhulka kan u horreeya

iyo kan u dambeeyaba, dabadeedna maalinta qiyaamo hadba sida camalka iyo niyooyinkoodii aheyd baa loo soo bixinayaa (oo lagu abaal marinayaa) ". (Muslim iyo Bukhaari)

Weerooyinka xadiiskase Bukhaari baa leh.

٣ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : قال النبي ﷺ : « لَا هِجْرَةَ بَعْدَ الْفَتْحِ ، وَلَكِنْ جِهَادٌ وَنِيَّةٌ ؛ وَإِذَا اسْتَفْرْتُمْ فَأَنْفِرُوا » مُتَّفَقٌ عَلَيْهِ .

3. Caa'isha (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in nabigu (S.C.W.) yiri: " Kolba haddii ay muslimiinta Makka qabsadeen oo ay beel Islaam noqotay, haajirid looma baahna, laakiin niyo iyo jihaad baa jiraya, ee markii jihaad u soo baxa la idin yiraahdo (oo uu Imaamka idiinku yeero) u soo baxa". (Bukhaari iyo Muslim)

٤ - وعن أبي عبد الله جابر بن عبد الله الأنصاري رضي الله عنهما قال : كُنَّا مَعَ النَّبِيِّ ﷺ فِي غَزَاةٍ فَقَالَ : « إِنَّ بِالْمَدِينَةِ لَرِجَالًا مَا سِرْتُمْ مَسِيرًا ، وَلَا قَطَعْتُمْ وَاوِيًا ، إِلَّا كَانُوا مَعَكُمْ حَبْسَهُمُ الْمَرَضُ » . وَفِي رَوَايَةٍ : « إِلَّا شَرَكُوكُمْ فِي الْأَجْرِ » رَوَاهُ مُسْلِمٌ .

ورواه البخاري عن أنس رضي الله عنه قال : رَجَعْنَا مِنْ غَزْوَةِ تَبُوكَ مَعَ النَّبِيِّ ﷺ فَقَالَ : « إِنَّ أَقْوَامًا خَلَفْنَا بِالْمَدِينَةِ مَا سَلَكْنَا شِعْبًا وَلَا وَاوِيًا ، إِلَّا وَهُمْ مَعَنَا ؛ حَبْسَهُمُ الْعُدْرُ » .

4. Jaabir bin Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: Annagoo duullaan ah oo nebiga la soconna buu wuxuu nagu yiri: Madiina waxaa jira rag meeshii aad martaan iyo toggii aad ka tallawdaanba ajarka idinla wadaaga, oo ay jirro reebtay, ha yeeshee niyadooda aheyd hadduusan cudurku reebin inay idinla socdaan" (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa ah oo Muslim ku taal: " Ajarka way idinla wadaagaan".

Imaam Bukhaarina wuxuu soo weriyey inuu Anas (A.K.R) yiri: "Annagoo nabiga (S.C.W.) la soconna oo duullaankii Tabuuk ka soo laabannay buu wuxuu yiri : "Waxaa jira dad Madiina inooka haray, oo dhudhubtii aan xullo iyo toggii aan ka tallownaba ina wehliya, oo qalbiga iyo niyada ka jeclaa inay inala socdaan, haddayan duruufi reebteen)".

٥ - وعن أبي يزيد معن بن يزيد بن الأحنس - رضي الله عنهم - وهو وأبوه وجدّه صحابيون - قال : كان أبي يزيد أخرج دنائير يتصدق بها ، فوضعها عند رجل في المسجد ، فجيئت فأخذتها فأتيتها بها . فقال : وآلله ما إياك أردت ، فخاصمته إلى رسول الله ﷺ فقال : « لك ما نويت يا يزيد ، ولك ما أخذت يا معن » رواه البخاري .

5. Macan bin Yasiid ibn Akhnas (A.K.R.) Macan, aabihi, iyo awoowgiba waxay ka mid ahaayeen asxaabtii nebiga (SCW). Macan wuxuu yiri: " Aabbahay Yasiid baa dhowr Diinaar oo uu sadaqaysanayey ag dhigay nin masaajidka joogay, markaasaan inta qaatay ula imid aabbahay, wuxuu igu yiri: Adiga kulama aannan rabin lacagtaa, dabadeedna waxaan isula tagnay oo u gar dhigannay nabiga (S.C.W.). Wuxuu ku yiri nabigu (S.C.W.) aabbahay: Yasiidow adigu wixii aad niyootey baad leedahay (oo lacagtaa waa kuu sadaqo) , anna wuxuu igu yiri nabigu (S.C.W.): Macanow adna wixii aad qaadatay baad leedahay." (Bukhaari)

٦ - وعن أبي إسحاق سعد بن أبي وقاص ، مالك بن أهيّب بن عبد مناف بن زهرة بن كلاب بن مرة بن كعب بن لؤي القرشيّ الزهريّ رضي الله عنه ؛ أحد العشرة المشهود لهم بالجنة ، رضي الله عنهم ، قال : جاءني رسول الله ﷺ يعوذني عام حجة الوداع من وجع اشتدّ بي ، فقلت : يا رسول الله إني قد بلغ بي من الوجع ما ترى ، وأنا ذو مال ولا يرثني إلا ابنة لي ، أفأتصدق بثلثي مالي ؟ قال : « لا » ، قلت : فالشطر يا رسول الله ؟ فقال : « لا » ، قلت : فالثلث يا رسول الله ؟ قال : « الثلث والثلث كثير - أو كبير - إنك إن تذر ورثتك أغنياء خير من أن تذرهم عالة يتكففون الناس ، وإنك لن تنفق نفقة تبتغي بها وجه الله إلا أجرت عليها حتى ما تجعل في في امرأتك » ، قال : فقلت : يا رسول الله أخلف بعد أصحابي ؟ قال : « إنك لن تخلف فتعمل عملاً تبتغي به وجه الله إلا أزددت به درجة ورفعة ، ولعلك أن تخلف حتى يتفجع بك أقوام ويضرّ بك آخرون . اللهم أمض لأصحابي هجرتهم ولا تردهم على أعقابهم ، لكن البائس سعد بن خولة » يرثي له رسول الله ﷺ أن مات بمكة . متفق عليه .

6. Sacad ibn abii waqaas (A.K.R.) (oo ka mid ah tobankii loogu bishaareeyey jannada) wuxuu yiri nabigaa (S.C.W) i soo booqday anigoo aad u xanuunsanaya. Arrintanina waxay dhacday kolkuu rasuulku gutay xajkii sagootiga, markaasaan waaxaan ku iri: Rasuul Alloow (S.C.W.) waa aad aragtaa sida xaal-kaygu yahay. Waxaana aan leeyahay xoolo badan, wax i dhax-lana gabar kaliyaan leeyahay, ee maalkayga seddex meelood labo ma sadaqaystaa? Wuxuu yiri nabigu (S.C.W.): ' Maya' Waxaan iri: Barna rasuul Alloow ? Wuxuu yiri : Maya. Waxaan iri: seddex meeloodoo meelna? Wuxuu yiri: ' Haah, iyadaana waliba badan. Dadka dhaxalkaaga leh inaad ka tagtid iyagoo hodan ah baa ka khayr badan inaad ka tagtid iyagoo sabool ah oo aad ku qasabto inay dadka gacmaha u hoorsadaan. Sadaqo kasta oo aad wejiga Alle ula baxdidna ajar baad ka heleysaa, xataa raashin xoogaa ah oo aad haweentaada afkeeda gelisidba ha ahaatee, Alle wuu kaa ajar siin. dabadeed waxaan iri: " Rasuul-kii Alloow saaxiibaday ma ka harayaa? Wuxuu yiri rasuulkii Alle (S.C.W.): kama aad hareysid. Camalkii aad fasho oo aad Alle darti ula jeeddidba ajar iyo derejaad ka sii helaysaa, waxaana laga yaabaa inaad muddo noolaato oo cimri dherer lagu siiyo oo ay markaas qoon muslimiin ah kaa faa'iidaystaan , qoon gaala ahina gacnataada lagu ciqaabo. Kaddibna rasuulkii Alle Ilaahay buu baryey oo yiri : Alloow asxaabtayda hijradoodii ka yeel mid dhan oo guuleysta gadaalna ha u celin. Waxaase in loo murugoodo leh Sacad ibnu Khawla ee gadaal looga soo tagey, Mak-kana ku dhintay, rasuulkii Allena (S.C.W.) naxariis iyo samaan buu Alle uga baryey. (Bukhaari iyo Muslim)

٧ - وعن أبي هريرة عبد الرحمن بن صخر رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إن الله لا ينظر إلى أجسامكم ، ولا إلى صوركم ، ولكن ينظر إلى قلوبكم [وأعمالكم] » رواه مسلم .

7. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuxuu yiri: "Alle fiirin maayo jirkiinna iyo suuraddiinna toonna, ee wuxuu fiirinayaa qalbiyadiinna iyo camalladiinna". (Muslim)

٨ - وعن أبي موسى عبد الله بن قيس الأشعري رضي الله عنه قال : سئل رسول الله ﷺ عن الرجل يُقاتل شجاعةً ، ويُقاتل حميةً ، ويُقاتل رياءً ، أي ذلك في سبيل الله ؟

فقال رسول الله ﷺ : « من قاتل لتكون كلمة الله هي العليا فهو في سبيل الله » متفق عليه .

8. Abuu Muusa al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaa Rasuulkii Alle S.C.W. la weydiiyey: ' Nin geesinnimo u diriraya iyo mid ficilo qabiil (ama qaran) u diriraya iyo mid istus u diriraya, intaas koodee baa jidka Alle ku diriraya? Wuxuu ku jawaabay rasuulkii Alla (S.C.W.): ' Kan u dirira inay diintii Alle kor noqoto baa jidkii Alle ku diriraya".

(Bukhaari iyo Muslim)

٩ - وعن أبي بَكْرَةَ نُفَيْعِ بْنِ الْحَارِثِ الثَّقَفِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ النَّبِيَّ ﷺ قَالَ : « إِذَا تَقَى الْمُسْلِمَانِ بِسَيْفَيْهِمَا فَالْقَاتِلُ وَالْمَقْتُولُ فِي النَّارِ » قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ هَذَا الْقَاتِلُ فَمَا بَالُ الْمَقْتُولِ ؟ قَالَ : « إِنَّهُ كَانَ حَرِيصًا عَلَى قَتْلِ صَاحِبِهِ » مُتَّفَقٌ عَلَيْهِ .

9. Abuu Bakrah Nufayc ibn al -Xaaris as-Saqfi (A.K.R.) wuxuu yiri: Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuxuu yiri: "Markii ay laba qof oo muslim ahi seef iskala hor yimaadaan dilaha iyo la diluhuba waa ehlu naar. " Waxaan iri: ' Rasuul Alloow kan diley walaalki garannaye kan la dilay muxuu galabsaday oo naarta loo geynayaa?" Wuxuu ku jawaabay (S.C.W.) "Inuu saaxiibki dilo buu isna doonayey".

(Bukhaari iyo Muslim)

١٠ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « صَلَاةُ الرَّجُلِ فِي جَمَاعَةٍ تَزِيدُ عَلَى صَلَاتِهِ فِي سُوقِهِ وَبَيْتِهِ بضعًا وَعِشْرِينَ دَرَجَةً وَذَلِكَ أَنْ أَحَدُهُمْ إِذَا تَوَضَّأَ فَأَحْسَنَ الْوُضُوءَ ؛ ثُمَّ أَتَى الْمَسْجِدَ لَا يُرِيدُ إِلَّا الصَّلَاةَ ، لَا يَنْهَزُهُ إِلَّا الصَّلَاةَ : لَمْ يَخْطُ خُطْوَةً إِلَّا رُفِعَ لَهُ بِهَا دَرَجَةٌ : وَحُطَّ عَنْهُ بِهَا خَطِيئَةٌ حَتَّى يَدْخُلَ الْمَسْجِدَ ، فَإِذَا دَخَلَ الْمَسْجِدَ كَانَ فِي الصَّلَاةِ مَا كَانَتِ الصَّلَاةُ هِيَ تَحْسِبُهُ ؛ وَالْمَلَائِكَةُ يُصَلُّونَ عَلَى أَحَدِكُمْ مَا دَامَ فِي مَجْلِسِهِ الَّذِي صَلَّى فِيهِ يَقُولُونَ : اللَّهُمَّ أَرْحَمَهُ ؛ اللَّهُمَّ اغْفِرْ لَهُ ؛ اللَّهُمَّ تَبَّ عَلَيْهِ ، مَا لَمْ يُؤْذِ فِيهِ مَا لَمْ يُحْدِثْ فِيهِ » مُتَّفَقٌ عَلَيْهِ ؛ وَهَذَا لَفْظُ مُسْلِمٍ .

وقوله ﷺ : « يَنْهَزُهُ » هُوَ يَفْتَحُ الْيَأْيَ وَالْهَاءِ وَبِالزَّيِّ : أَي يُخْرِجُهُ وَيَنْهَضُهُ .

10. Abuu Hurayrah (AK.R.) wuxuu yiri: Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuxuu yiri: "Salaadda uu qofku jameeco ahaan (masjidka) ugu tukadaa waxay salaaddiisa uu guriga ku tukado iyo tan uu dukaankiisa iwm ku tukado dheer tahay dhowr iyo

labaatan darajo." Maxaa yeelay, qofku markii uu weesaysto oo weesada hagaajiyo, dabadeedna uu masjidka aado isagoo aan wax kale salaadda ma ahee u aadayn, wax kale salaadda ma ahee u socon, waxaa tallaabadii uu qaadaba loogu dhaafaa dambi, derajana waa loogu kordhiyaa ilaa uu masjidka ka galo. Markii uu masjidka galana wuxuu la mid yahay isagoo salaad ku jira inta uu salaadda sugayo, marba hadduusan cidna dhibaato u geysanna, weesadiina qabo malaa' igtu waa u ducaynaysaa markii uu tukado oo uu fadhiyo meeshii uu ku tukadey, iyadoo leh; Alloow u naxariiso, Allow u dambi dhaaf, Alloow ka too-bad aqbal".
(Bukhaari iyo Muslim)

١١ - وعن أبي العباسِ عبدِ اللهِ بنِ عباسِ بنِ عبدِ المطلبِ رضيَ اللهُ عنهما ، عن رسولِ اللهِ ﷺ فيما يروي عن ربه تبارك وتعالى قال : « إِنَّ اللَّهَ كَتَبَ الْحَسَنَاتِ وَالسَّيِّئَاتِ ثُمَّ بَيَّنَ ذَلِكَ : فَمَنْ هَمَّ بِحَسَنَةٍ فَلَمْ يَعْمَلْهَا كَتَبَهَا اللَّهُ تَبَارَكَ وَتَعَالَى عِنْدَهُ حَسَنَةً كَامِلَةً ؛ وَإِنْ هَمَّ بِهَا فَعَمِلَهَا كَتَبَهَا اللَّهُ عَشْرَ حَسَنَاتٍ إِلَى سَبْعِمِائَةٍ ضِعْفٍ إِلَى أَضْعَافٍ كَثِيرَةٍ ، وَإِنْ هَمَّ بِسَيِّئَةٍ فَلَمْ يَعْمَلْهَا كَتَبَهَا اللَّهُ تَعَالَى عِنْدَهُ حَسَنَةً كَامِلَةً ، وَإِنْ هَمَّ بِهَا فَعَمِلَهَا كَتَبَهَا اللَّهُ سَيِّئَةً وَاحِدَةً » متفقٌ عليه .

11. Cabdullaah ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu ka weriyey nabiga (S.C.W.) xadiisul-qudsi uu Rasuulku Rabbigi ka soo weriyey: kaasoo ah in xumaanaha iyo samaanahaba Alle jirsiyey, mid walbana uu caddeeyey, qofkii wax san ku hammiya oo aan falin hal darajo oo buuxdaa loo qoraa (oo samaan ah) , haddii uu falana Alle wuxuu ku abaal mariyaa toban darajo iyo ilaa toddoba boqol oo laba laab ah iyo labalaabyo kale oo fara badan. Haddii uu xumaan ku fekeru oo uusan falinna hal derejo oo buuxdaa Alle agtiisa looga qoraa (oo samaan ah) , haddii uu ku fekeru oo falana hal xumaan ah oo keliyaa Alle u qoraa".
(Bukhaari iyo Muslim)

١٢ - وعن أبي عبد الرحمن عبدِ اللهِ بنِ عمرَ بنِ الخطابِ رضيَ اللهُ عنهما قال : سمعتُ رسولَ اللهِ ﷺ يقول : « انطلقَ ثلاثة نفرٍ ممن كان قبلكم حتى آواهم المبيتُ إلى غارٍ فدخلوه ، فأنحدرت صخرةٌ من الجبلِ فسدت عليهم الغارُ ؛ فقالوا : إنه لا يُنجيكم من هذه الصخرةِ إلا أن تدعوا اللهَ تعالى بصالحِ أعمالكم .

قال رجلٌ مِنْهُمْ : اللَّهُمَّ كَانَ لِي أَبَوَانِ شَيْخَانِ كَبِيرَانِ ، وَكُنْتُ لَا أُغْبِقُ قَبْلَهُمَا أَهْلًا وَلَا مَالًا ، فَنَأَى بِي طَلَبُ الشَّجَرِ يَوْمًا فَلَمْ أُرِحْ عَلَيْهِمَا حَتَّى نَامَا ، فَحَلَبْتُ لَهُمَا غُبُوقَهُمَا فَوَجَدْتُهُمَا نَائِمَيْنِ ، فَكَرِهْتُ أَنْ أُوقِظَهُمَا وَأَنْ أُغْبِقَ قَبْلَهُمَا أَهْلًا أَوْ مَالًا ، فَلَبِثْتُ - وَالْقَدْحُ عَلَى يَدَيَّ - أَنْتَظِرُ اسْتِيقَازَهُمَا حَتَّى بَرِقَ الْفَجْرُ وَالصَّبِيَّةُ يَتَضَاغُونَ عِنْدَ قَدَمَيَّ ، فَاسْتَيْقَظَا فَشَرِبَا غُبُوقَهُمَا . اللَّهُمَّ إِنْ كُنْتُ فَعَلْتُ ذَلِكَ ابْتِغَاءً وَجْهَكَ فَفَرُجْ عَنَّا مَا نَحْنُ فِيهِ مِنْ هَذِهِ الصَّخْرَةِ ، فَاَنْفَرَجْتَ شَيْئًا لَا يَسْتَطِيعُونَ الْخُرُوجَ مِنْهُ .

قال الآخر : اللَّهُمَّ إِنَّهُ كَانَتْ لِي ابْنَةٌ عَمَّ كَانَتْ أَحَبَّ النَّاسِ إِلَيَّ - وَفِي رِوَايَةٍ : كُنْتُ أَحِبُّهَا كَأَشَدِّ مَا يُحِبُّ الرَّجَالُ النِّسَاءَ - فَأَرَدْتُهَا عَلَى نَفْسِهَا فَامْتَنَعَتْ مِنِّي حَتَّى أَلَمْتُ بِهَا سَنَةً مِنَ السِّنِينَ فَجَاءَتْني فَأَعْطَيْتُهَا عِشْرِينَ وَمِائَةَ دِينَارٍ عَلَى أَنْ تُخَلِّيَ بَيْنِي وَبَيْنَ نَفْسِهَا فَفَعَلَتْ ، حَتَّى إِذَا قَدَرْتُ عَلَيْهَا - وَفِي رِوَايَةٍ : فَلَمَّا قَعَدْتُ بَيْنَ رِجْلَيْهَا - قَالَتْ : اتَّقِ اللَّهَ وَلَا تَفْضُ الْخَاتَمَ إِلَّا بِحَقِّهِ ، فَانْصَرَفْتُ عَنْهَا وَهِيَ أَحَبُّ النَّاسِ إِلَيَّ وَتَرَكْتُ الذَّهَبَ الَّذِي أُعْطَيْتُهَا ، اللَّهُمَّ إِنْ كُنْتُ فَعَلْتُ ذَلِكَ ابْتِغَاءً وَجْهَكَ فَافْرُجْ عَنَّا مَا نَحْنُ فِيهِ ، فَاَنْفَرَجْتَ الصَّخْرَةَ ، غَيْرَ أَنَّهُمْ لَا يَسْتَطِيعُونَ الْخُرُوجَ مِنْهَا .

وَقَالَ الثَّلَاثُ : اللَّهُمَّ اسْتَأْجَرْتُ أَجْرَاءً وَأَعْطَيْتُهُمْ أَجْرَهُمْ غَيْرَ رَجُلٍ وَاحِدٍ تَرَكَ الَّذِي لَهُ وَذَهَبَ ، فَثَمَرْتُ أَجْرَهُ حَتَّى كَثُرَتْ مِنْهُ الْأَمْوَالُ ، فَجَاءَني بَعْدَ حِينٍ فَقَالَ : يَا عَبْدَ اللَّهِ أَدِّ إِلَيَّ أَجْرِي ، فَقُلْتُ : كُلُّ مَا تَرَى مِنْ أَجْرِكَ : مِنَ الْإِبِلِ وَالْبَقَرِ وَالْغَنَمِ وَالرَّقِيقِ . فَقَالَ : يَا عَبْدَ اللَّهِ لَا تَسْتَهْزِئْ بِي ! فَقُلْتُ : لَا أَسْتَهْزِئُ بِكَ ، فَأَخَذَهُ كُلَّهُ فَاسْتَأْفَقَهُ فَلَمْ يَتْرُكْ مِنْهُ شَيْئًا : اللَّهُمَّ إِنْ كُنْتُ فَعَلْتُ ذَلِكَ ابْتِغَاءً وَجْهَكَ فَافْرُجْ عَنَّا مَا نَحْنُ فِيهِ فَانْفَرَجْتَ الصَّخْرَةَ فَخَرَجُوا يَمْشُونَ « متفقٌ عليه .

12. Cabullaah ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay rasuulkii Alle (S.C.W.) oo leh: "Seddex nin oo ummadihii idinka horreeyey ahaa baa safar meel isugu raacay, waxay socdaanba habeenkii bay dabeyl daran darteed gebi galeen oo u hoydeen, dhagax wayn baa inta soo ruqay gebigii afka ka awdey. Mid ka mid ahaa ayaa wuxuu yiri: wax kale oo maanta dha-

gaxaan inaka faydaya lama arko inaan Alle ku barinno maahee camalladeennii wanaagsanaa wax ka mid ah . Markaa baa mid wuxuu yiri, Alloow waxaan lahaa laba waalid oo ahaa waayeel da' ah oo aanan fiid gooyada caano siintooda ka hor marin jiray carruurteyda iyo ehelkeyga intiisa kale oo dhan. Markaasay maalin daaq raadintii ila fogaatey oo aanan soo dheelman jee-ray gam'een. goortaan imid baan fiidgooyadii u soo lisay mise waa hurdaan, inaan toosiyaa oo aan hurdadooda ka qaso waa i dhibtay, inaan carruurteyda iyo ehelkeyga kale ka hor mariyaana waa i dhibtay oo aan caanaha siiyo iyaga ka hor. waan sugay, anigoo weelkii gacmaha ku haya oo toosidooda dhowraya jeer waaggii dillaacay, carruurtiina hoostayday intaas qaylinayeen Markay kaceen bay caanahoodii dhameen. Alloow haddaan saas falay anigoo raalli gelintaada u dan leh, waxaan na haysta naga saar oo dhagaxaan naga feyd. Dhagaxii xoogaa aysan ka bixi karin buu feydmay. midkii labaad baa yiri: Alloow waxaa jirtey gabar adeerkay dhalay oo aan jeclaa intii uu nin naag je-claado oo aan markaas inta damaaciyey, isu kay diidday; daba-deedna waa' dambe bay abaar xumi gabadhii kudhacday, markaa-say ii timid iyadoo caawimaad iga dooneysa, waxaan siiyey boqol iyo labaatan Diinaar anoo ku shardiyeey inay isu kay dhiib-to. Markaa bay yeeshay, markii aan lugaheedii ku fariistay bay tiri: Alle ka cabso, oo xaaraan ha igu qodob goyn'; markaasaan ka kacay oo ka tegey anigoo aad u doonayey, lacagtii aan sii-yayna u dhaafay. Alloow haddaan saas falay anigoo raalli ge-lintaada u dan leh, waxaan na haysta naga saar. xoogaa kale ay-san weli ka bixi karin baa dhagaxii ka sii faydmey. Kii seddex-aad baa isna yiri: "Alloow niman baan kula heeshiiyey inay ii shaqeeyaan waa ii shaqeeyeen, dabadeedna xaqoodii baan siiy-ey, hal nin oo aanan soo doonin xaqiisa maahee. waan-uga sha-qeysiiyey lacagtiisii, wixii aan xoolaha u galiyeyna faa'ido badan bay keeneen oo miro dhaleen. Waa dambe buu ninkaasi soo laabtay oo yiri: 'Addoon Alloow i sii xaqaygii . waxaan ku iri: Maalka aad aragto oo dhan oo geel, lo, ari iyo addoommo lehi-ba waa xaqaagii. Wuxuu yiri: Ha igu jeesjeesin addoon Alloow. Waxaan iri: Kugu jees jeesi maayo. Markaa buu kaxaystay isa-goo aan waxba ka tegin. Alloow haddaan saas falay anigoo raalli gelintaada u dan leh waxaan na haysta naga saar. Markaasaa dhagixii feydmay oo ay ka baxeen iyagoo nabad ah".

(Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah: Xadiiskan faa'idooyin badan baa laga kororsana-yaa. Waxaa ka mid faa'idooyinka xadiiskan, inuu qofku dalbo naxariista Alle iyo gargaarkiisa hadday dhibaato la soo gudboo-naato, qofkana uu ka yeesho acmaashiisii suubbaneyd wax uu dhibaataada kaga gudbo iyo gaashaan uu ka hortago, naxariista Allena iyo gargaarkiisa ku helo. qodob kale waxaa weeye ajarka badan ee ku jira iyo samaanta lagu helo u baari ahaanta waalid-

ka. Sidoo kale wuxuu xadiiska tilmaamayaa ahmiyadda ay laheyd dhowrsanaanta, oofinta ballanta , daryeelka bulshada, iyo xajinta ammaanooyinka iyo gudidda xuquuqda dadka iyo si dhan u oofintooda.

wuxuu kaloo xadiiska daaha ka qaaday in daacadnimada ay tahay saldhigga abaal marinta camallada, sida uu ahaaba cinwaan-ka cutubkan. hadal iyo dabuubti, xagga Islaamka qowl iyo ficil wuxuu qof la imaanayo waa in Alle lagu ogaadaa oo loola jee- daa, raalli gelinti looga dan leeyahay, ee ma aha in loola jeedo adduun ku hel, ama munaafqimo, ama magac doonasho, ama maal ku raadin.

٢ - باب التوبة

CUTUBKA 2

Toobada

Culimadu waxay yiraahdeen : Waa waajib in dembi walba laga toobad keenaa, waxayna toobadu leedahay shuruudo dhowr ah, oo marna seddex ah, marna afar ah. Mar waa seddex oo waa markii uu dembigu yahay wax addoonka iyo Rabbigiis ka dhexeeya, markaasna waxay shuruuddu tahay inuu qofku dembigii ka fuqo, iyo inuu ka shalaayo, iyo tan seddexaad oo ah inuu qofku go'aansado inuusan dembigaas u noqon dib dambe. Marka kale oo ay shuruudda afarta tahayna waa markii uu dembigu lug ku leeyahay xaq Aadane, oo waa in xaqaas Aadane la gudo oo laga xalaaloobo, hadduu maal yahay la gudo, hadduu qadaf ama qaan yahay qofkii oo la isu dhii-bo, gudayayaa iyo cafiyayaaba, iyo hadduu xan yahay oo iyadana laga codsado cafis, waxaa iyaduna waajib ah in dambiyada oo dhan laga toobad keeno, haddii uu qofku qaar ka toobad keenana waa ka ansaxaysaa toobadu, oo qaarkaas waa laga cafinayaa, dembigii uusan ka toobad keeninna waa ku harayaa oo laga cafiyi maayo, jeer uu ka toobad keeno. Toobadu inay waajib tahay Qur'aanka iyo sunnahaa caddeynaya, ummaduna waa ay isku raacsan tahay.

Alle kor ahaaye wuxuu yiri :

قال الله تعالى : ﴿ وَتُوبُوا إِلَى اللَّهِ جَمِيعاً أَيُّهَا الْمُؤْمِنُونَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴾ [النور : ٣١] .

4. " Alle u wada toobad keena kuwa xaqa rumeeyow, aad liibaanteene." Suuradda an-Nuur: Aayadda 31

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ اسْتَغْفِرُوا رَبَّكُمْ ثُمَّ تُوبُوا إِلَيْهِ ﴾ [هود : ٣] .

5. (Waxaan idin leeyahay oo idin kugu yeeri) : Rabbigiin cafis iyo dambi dhaaf weydiista, oo u noqda Alle idinkoo toobad keenooyin ah.' Suuradda Huud : Aayadda 3

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا تُوبُوا إِلَى اللَّهِ تَوْبَةً نَّصُوحاً ﴾ [التحریم : ٨] .

6. " Kuwa xaq rumeeyow! Alle u toobad keena toobad san. " Suuradda at-Taxriim : Aayadda 8

١٣ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : سمعتُ رسولَ الله ﷺ يقول : « وَاللَّهِ إِنِّي لَأَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ فِي الْيَوْمِ أَكْثَرَ مِنْ سَبْعِينَ مَرَّةً » رواه البخاري .

13. Abuu Hureyrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay rasuulkii Alle (S.C.W.) oo leh: "Wallaahi maalintii waxaan Alle dembi dhaaf waydiistaa oo u toobad keena wax toddobaatan jeer ka badan". (Bukhaari)

١٤ - وعن الأغر بن يسار المزني رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « يَا أَيُّهَا النَّاسُ تَوْبُوا إِلَى اللَّهِ وَاسْتَغْفِرُوهُ فَإِنِّي أَتُوبُ فِي الْيَوْمِ مِائَةَ مَرَّةٍ » رواه مسلم .

14. Aqirr ibn Yasaar al-Muzani (A.K.R.) wuxuu sheegay inuu Rasuulku (S.C.W.) ku waanin jiray asxaabtiisa: ' Alle u toobad keena dadyahow, oo dambi dhaaf weydiista, anigu maalintii boqol jeer baan toobad keenaaye." (Muslim)

١٥ - وعن أبي حمزة أنس بن مالك الأنصاري خادم رسول الله ﷺ رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لِلَّهِ أَفْرَحُ بِتَوْبَةِ عَبْدِهِ مِنْ أَحَدِكُمْ سَقَطَ عَلَى بَعِيرِهِ وَقَدِ أَضَلَّهُ فِي أَرْضِ فَلَاةٍ » متفق عليه .

وفي رواية لمسلم : « لِلَّهِ أَشَدُّ فَرَحًا بِتَوْبَةِ عَبْدِهِ حِينَ يَتُوبُ إِلَيْهِ مِنْ أَحَدِكُمْ كَانَ عَلَى رَاحِلَتِهِ بِأَرْضِ فَلَاةٍ ، فَانْفَلَتَتْ مِنْهُ وَعَلَيْهَا طَعَامُهُ وَشَرَابُهُ فَأَيْسَ مِنْهَا ، فَآتَى شَجَرَةً فَأَصْطَجَعَ فِي ظِلِّهَا وَقَدْ أَيْسَ مِنْ رَاحِلَتِهِ ، فَبَيْنَمَا هُوَ كَذَلِكَ إِذْ هُوَ بِهَا قَائِمَةً عِنْدَهُ ، فَأَخَذَ بِخَطَامِهَا ثُمَّ قَالَ مِنْ شِدَّةِ الْفَرَحِ : اللَّهُمَّ أَنْتَ عَبْدِي وَأَنَا رَبُّكَ ، أَخْطَأُ مِنْ شِدَّةِ الْفَرَحِ » .

15. Anas ibn Maalik (A.K.R.) oo adeege u ahaa nabiga (S.C.W.) Wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Wuxuu Alle ugu farxaa toobada addoonkiisa si ka daran sida midkiin ugu farxo awrkiisii oo inta hayjad kaga dhumay uu markaas helay." (Bukhaari iyo Muslim)

Weedha Muslim waxay intaa raacineysaa: Wuxuu Alle ugu farxaa markuu adoonkiisu u toobad keeno, sida midkiin rakuub uu watey oo hayjad marayey oo ay raashinkiisa iyo biyihisuba u saarnaayeen, dabadeed uu halkaas rakuubkii kaga dhumay biyihii iyo baadkiina kala tagey, dabadeedna doondoonaay oo waayey, oo markaas geed iska hoos jiifsaday isagoo quustay, oo isagoo saas ku sugan

markaas indhaha kala qaaday mise waa rakuubkiisii oo kor taagan, markaasuu yiri; inta hoggaankiisa qabsaday oo farixii ka batay; Al-loow addoonkaygii baad tahay, aniguna Rabbigaagii, wuxuu ugu dhacay carrab taraaraxaas farax taraar darteed iyo isagoo doonayey inuu u mahad noqo Rabiggi, una qiro abaalka iyo fadligaa.

١٦ - وعن أبي موسى عبد الله بن قيس الأشعري رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إن الله تعالى يبسط يده بالليل ليتوب مسيء النهار ، ويبسط يده بالنهار ليتوب مسيء الليل حتى تطلع الشمس من مغربها » رواه مسلم .

16. Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K .R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Alle kor ahaaye habeenkii buu gacantiisa soo fidiyaa, si uu u toobad keeno qofkii maalintii dambaabay, maalintiina gacantiisuu soo fidiyaa si uu u toobad keeno qofkii habeenkii dambaabey, jeer ay qorraxdu bugux (yacni galbeed) ka soo baxdo (maalinta qiyaamaha.)" (Muslim)

١٧ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ تَابَ قَبْلَ أَنْ تَطْلُعَ الشَّمْسُ مِنْ مَغْرِبِهَا تَابَ اللَّهُ عَلَيْهِ » رواه مسلم .

17. Abuu Hureyrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Rasuulku (S.C.W.) wuxuu yiri: "Alle waa ka toobad aqbalaa addoomahiisa inta aysan qorraxdu bugux (galbeed) ka soo bixin (maalinta qiyaamaha) (Muslim)

١٨ - وعن أبي عبد الرحمن عبد الله بن عمر بن الخطاب رضي الله عنهما عن النبي ﷺ قال : « إن الله عز وجل يقبل توبة العبد ما لم يغرغر » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

18. Cabdullaah ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Alle, Rabbiga cisada iyo maamuuska, toobada addoonka waa uu ka aqbalaa inta uusan dhuun yeeris (geerida) gaarin (Tirmidi, waana xadiis xasan ah)

١٩ - وعن زر بن حبيش قال : أتيت صفوان بن عسال رضي الله عنه أسأله عن المسح على الخفين فقال : ما جاء بك يا زر ؟ فقلت : آبتغاء العلم فقال : إن الملائكة تضع أجنحتها لطالب العلم رضي بما يطلب . فقلت : إنه قد حك في صدري المسح على الخفين بعد الغائط والبول ، وكنت امرأة من

أَصْحَابُ النَّبِيِّ ﷺ فَجِئْتُ أَسْأَلُكَ هَلْ سَمِعْتَهُ يَذْكُرُ فِي ذَلِكَ شَيْئًا؟ قَالَ : نَعَمْ ،
 كَانَ يَأْمُرُنَا إِذَا كُنَّا سَفْرًا - أَوْ مُسَافِرِينَ - أَنْ لَا نَنْتَرِعَ خِيفَانَا ثَلَاثَةَ أَيَّامٍ وَلِيَالِيَهُنَّ إِلَّا مِنْ
 جَنَابَةِ ، لَكِنْ مِنْ غَائِطٍ وَبَوْلٍ وَنَوْمٍ . فَقُلْتُ : هَلْ سَمِعْتَهُ يَذْكُرُ فِي الْهَوَى شَيْئًا؟
 قَالَ : نَعَمْ ، كُنَّا مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فِي سَفَرٍ ، فَبَيْنَا نَحْنُ عِنْدَهُ إِذْ نَادَاهُ أَعْرَابِيٌّ
 بِصَوْتٍ لَهُ جَهْوَرِيٌّ : يَا مُحَمَّدُ ، فَأَجَابَهُ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ نَحْوًا مِنْ صَوْتِهِ :
 « هَاؤُمُ » فَقُلْتُ لَهُ : وَيْحَكَ أَغْضُضُ مِنْ صَوْتِكَ فَإِنَّكَ عِنْدَ النَّبِيِّ ﷺ ، وَقَدْ
 نَهَيْتَ عَنْ هَذَا ! فَقَالَ : وَاللَّهِ لَا أَغْضُضُ . قَالَ الْأَعْرَابِيُّ : الْمَرْءُ يُحِبُّ الْقَوْمَ وَلَمَّا
 يَلْحَقُ بِهِمْ؟ قَالَ النَّبِيُّ ﷺ : « الْمَرْءُ مَعَ مَنْ أَحَبَّ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » . فَمَا زَالَ يُحَدِّثُنَا
 حَتَّى ذَكَرَ بَابًا مِنَ الْمَغْرِبِ مَسِيرَةَ عَرَضِهِ أَوْ يَسِيرُ الرَّكَّابِ فِي عَرَضِهِ أَرْبَعِينَ أَوْ سَبْعِينَ
 عَامًا . قَالَ سُفْيَانُ أَحَدُ الرُّوَاةِ : قَبْلَ الشَّامِ ، خَلَقَهُ اللَّهُ تَعَالَى يَوْمَ خَلَقَ السَّمَاوَاتِ
 وَالْأَرْضَ مَفْتُوحًا لِلتَّوْبَةِ لَا يُغْلَقُ حَتَّى تَطْلُعَ الشَّمْسُ مِنْهُ . رواه الترمذي وغيره
 وقال : حديث حسن صحيح .

19. Zirr Ibn Xubaysh (A.K.R.) wuxuu yiri: waxaan u tegey Saf-
 waan ibn Cassaal (A.K.R.) anigoo raba inaan ka wareysto masaxa
 kabaha buudka gacmaha la kor mariyo marka la weesaysanayno.
 Wuxuu i weydiiyey : Zirrow, maxaad doonaysey? Waxaan ku jaw-
 aabay, 'Cilmi doon baan ahaa.' Wuxuu yiri: Malaa'igtu garbahay u
 raaricisaa qofka cilmi doonka ah, raalli ay ka tahay waxa uu doo-
 nayo awgeed. Waxaan u sheegay inuu wareer iga galay arrinta ku
 saabsan marinta gacmaha dusha sare uu ka mariyo kabaha buudka
 qofka weeseysanaya, kaadi ama saxaro kaddib. adigaana arrin-
 taas kuu soo aadey oo asxaabtii Nabiga (S.C.W.) ka mid ah. ee wax
 ma ka maqashay nabiga arrintaas la xiriirta? Wuxuu yiri: Haah,
 Wuxuu na oran jirey markaan safar nahay ha siibina buudkiinna
 seddex maalmood iyo habeennadooda, inaad isku junubtaan ma
 ahee oo ha u siibina hurdo iyo saxaro iyo kaadi dartood.

Waxaan iri: Ma ka maqashay isagoo ka hadlaya wax jeclaan-
 ta? Wuxuu yiri: Haah, annagoo musaafir ah oo Nebiga (S.C.W.) la
 soconna baa maalin nin reer miyi ahi Nebiga (S.C.W.) tannaago
 dheer Wuxuu ku yiri: Muxammadow. Wuxuu yiri : Nabigu
 (S.C.W.) sidiisii oo kale buu ugu dhawaaqay oo yiri: Heeh, waa i
 kane. Waxaan ku iri ninkii reer miyiga ahaa: Balaayo ha kugu
 dhacdee; Ha u hadlin kor markaad Nebiga (S.C.W.) la joogtid. Si-
 daas buu Alle ina faraye (yacni inaan kor loo hadlin markaan ne-
 biga la joogno). Isagoo ii jawaabaya wuxuu yiri: Uma dhigayo hoos

codkeyga, haddana isagoo hadalka u wada nabiga (S.C.W.) mar labaad wuxuu yiri: Ka warran qof jecel qoon uusan weli ka soo mid noqon muxuu xaalkiisu noqonayaa? Wuxuu yiri nabigu (S.C.W): " Maalinta qiyaame qofka wuxuu ka mid noqonayaa qoonka uu jecel yahay". Dabadeedna hadalkii uu inoo waday buu meesha ka sii waday ilaa uu sheegay irrid bugux jirta kan wax fuu-shani balleceeda u socda afartan ama todobaatan sano. Sufyaan oo dadka xadiiska weriyey ka mid ahi wuxuu intaa raaciyey: Waa irrid xagga Suuriya jidha. Wuxuuna Alle abuuray maalintii uu cirarka iyo dhulka abuuray. Wuxuu u furan yahay toobada , lamana xirayo jeer ay qorraxdu ka ka soo baxdo xagga galbeed". (Tirmidi) iyo kuwo kale baa weriyey, wuxuuna yiri: waa xadiis, xasan saxiix ah.

٢. - وعن أبي سعيد سعد بن مالك بن سنان الخدري رضي الله عنه ، أن

نبي الله ﷺ قال : « كان فيمن كان قبلكم رجل قتل تسعة وتسعين نفساً ، فسأل عن أعلم أهل الأرض ، فدل على راهب . فأتاه فقال : إنه قتل تسعة وتسعين نفساً فهل له من توبة ؟ فقال : لا ، فقتله فكمّل به مائة ، ثم سأل عن أعلم أهل الأرض ، فدل على رجل عالم فقال : إنه قتل مائة نفس فهل له من توبة ؟ فقال : نعم ، ومن يحول بينه وبين التوبة ؟ انطلق إلى أرض كذا وكذا فإن بها أناساً يعبدون الله تعالى فاعبد الله معهم ، ولا ترجع إلى أرضك فإنها أرض سوء ، فانطلق حتى إذا نصف الطريق أتاه الموت ، فاختصمت فيه ملائكة الرحمة وملائكة العذاب . فقالت ملائكة الرحمة : جاء تائباً ، مقبلاً بقلبه إلى الله تعالى ، وقالت ملائكة العذاب : إنه لم يعمل خيراً قط ، فاتاهم ملك في صورة آدمي فجعلوه بينهم - أي حكماً - فقال : قيسوا ما بين الأرضين فألى أيتها كان أدنى فهو له . فقاوسا فوجدوه أدنى إلى الأرض التي أراد ، فقبضته ملائكة الرحمة » متفق عليه .

وفي رواية في الصحيح : « فكان إلى القرية الصالحة أقرب بشبر فجعل من

أهلها » .

وفي رواية في الصحيح « فأوحى الله تعالى إلى هذه أن تباعدي ، وإلى هذه أن تقربي ، وقال : قيسوا ما بينهما ، فوجدوه إلى هذه أقرب بشبر فغفر له » . وفي رواية : « فنأى بصدري نحوها » .

20. Abuu Saciid al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Nin ka mid ahaa ummadihii idinka horreeyey, oo diley sagaal iyo sagaashan qof, baa dadkii weydiiyey yaa u aqoon badan dunida? waxaa loo tilmaamay nin suufi ah (oo adduun iska nacay). (Dilahii is keenay isagoo ictiraafsan dambigiisa) baa u teg-ey suufigii oo ku yiri: waxaan diley sagaal iyo sagaashan qof. ee wax toobad ah ma leeyahay? Suufigii wuxuu ku jawaabay: ' Maya'. Ninkii wuxuu dilay suufigii sidoo kale oo boqol kaga dhigay. Dili- hii baa misna weydiiyey dadkii: Yaa u cilmi roon dadka aduunka ? waxaa loo tilmaamay nin caalim ah. Markaa buu u tegey oo ku yiri: Waxaan diley boqol qof ee toobad ma leeyahay? wuxuu yiri caa- limkii : 'Haah, waxba ma jiraan kala dhex gali kara adiga iyo too- bada: Tag oo aad dhulkaa . Waxaa ku nool dhulkaa dad dhowr- soon oo suubbanayaal ah oo Alle caabuda ee Alle la caabud hana ku soo noqon dhulkaaga waayo waa dhul shar badan. Ninkii dhul- kaa buu aaday. Markuu kala bar marayaa mawdkii u yimid. Muran iyo dood baa wuxuu ka dhex billowday malaa'igtii cadaabta iyo malaa'igtii naxariista la xiriira cidda nafta ka qaadeysa. Malaaigtii naxariistu waxay tiri: Marba hadduu soo toobad keenay oo qalbigii- su Alle u soo jeensadey (innagaa nafta ka saareyna oo xilkiisu ina saaran yahay) ; malaaigtii cadaabtuna waxay tiri: weligiisba ma uu sameyn wax khayr ah (sidaa awgeed innagaa xilkiisa leh). Waxaa markaas u yimid malag suurad Aadane leh, waana u gar dhigteen, wuxuu yiri malaggii: Cabbira inta labada dhul u dhaxaysa, tii u xi- gaa leh. Markaasay cabbireen mise dhulkii uu u socdey buu xigaa. waxaa xilkiisii markaa qaaday malaa'igtii naxariista."

(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay oranaysaa: "Dhulkii dadka fiicnaa buu taako u dhawaadey, markaasaa dadkaas laga mid yeelay" .

Werin kale waxay aheyd: "Allaa labada dhul midna fogow yiri, midna soo dhowow yiri, wuxuu Alle yiri markaas: Qiyaasa inta u dhexaysa, mise tan (dhulka dadkii fiicnaa) bay taako u dhowdahay oo wuu u dambi dhaafay". Xadiis kalena wuxuu ahaa: Wuxuu ugu soo dhowaaday dhulkii uu u socday laab ku socod iyo xamaarasho.

٢١ - وعن عبد الله بن كعب بن مالك ، وكان قائد كعب رضي الله عنه من بينه حين عمي قال : سمعت كعب بن مالك رضي الله عنه يحدث بحديثه حين تخلف عن رسول الله ﷺ في غزوة تبوك . قال كعب : لم أتخلف عن رسول الله ﷺ في غزوة غزاهما قط إلا في غزوة تبوك ، غير أنني قد تخلفت في غزوة بدر ، ولم يعاتب أحد تخلف عنه ؛ إنما خرج رسول الله ﷺ والمسلمون

يُرِيدُونَ عَيْرَ قُرَيْشٍ حَتَّى جَمَعَ اللَّهُ تَعَالَى بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ عَدُوِّهِمْ عَلَى غَيْرِ مِيعَادٍ .
وَلَقَدْ شَهِدْتُ مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ لَيْلَةَ الْعَقَبَةِ حِينَ تَوَاقَفْنَا عَلَى الْإِسْلَامِ ، وَمَا أَحِبُّ
أَنْ لِي بِهَا مَشْهَدٌ بَدْرٍ ، وَإِنْ كَانَتْ بَدْرٌ أَذْكَرُ فِي النَّاسِ مِنْهَا . وَكَانَ مِنْ خَبْرِي حِينَ
تَخَلَّفْتُ عَنْ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فِي غَزْوَةِ تَبُوكَ أَنِّي لَمْ أَكُنْ قَطُّ أَقْوَى وَلَا أَيْسَرَمَنِي حِينَ
تَخَلَّفْتُ عَنْهُ فِي تِلْكَ الْغَزْوَةِ ، وَاللَّهُ مَا جَمَعْتُ قَبْلَهَا رَاجِلَتَيْنِ قَطُّ حَتَّى جَمَعْتُهُمَا فِي
تِلْكَ الْغَزْوَةِ وَلَمْ يَكُنْ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ يُرِيدُ غَزْوَةَ إِلَّا وَرَى بِغَيْرِهَا حَتَّى كَانَتْ تِلْكَ
الْغَزْوَةُ ، فَغَزَاهَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ فِي حَرٍّ شَدِيدٍ ، وَأَسْتَقْبَلَ سَفَرًا بَعِيدًا وَمَفَازًا ،
وَأَسْتَقْبَلَ عَدَدًا كَثِيرًا ، فَجَلَى لِلْمُسْلِمِينَ أَمْرُهُمْ لِيَتَأَهَّبُوا أَهْبَةَ غَزْوِهِمْ فَأَخْبَرَهُمْ
بِوَجْهِهِمُ الَّذِي يُرِيدُ ، وَالْمُسْلِمُونَ مَعَ رَسُولِ اللَّهِ كَثِيرٌ وَلَا يَجْمَعُهُمْ كِتَابٌ حَافِظٌ
(يُرِيدُ بِذَلِكَ الدِّيَوَانَ) قَالَ كَعْبٌ : فَقَلَّ رَجُلٌ يُرِيدُ أَنْ يَتَغَيَّبَ إِلَّا ظَنَّ أَنَّ ذَلِكَ
سَيَخْفَى بِهِ مَا لَمْ يَنْزِلْ فِيهِ وَحْيٌ مِنَ اللَّهِ ، وَغَزَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ تِلْكَ الْغَزْوَةَ حِينَ
طَابَتِ الثَّمَارُ وَالظَّلَالُ ، فَأَنَا إِلَيْهَا أَصْعَرُ ، فَتَجَهَّزَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ وَالْمُسْلِمُونَ
مَعَهُ وَطَفِيقْتُ أَغْدُو لَكِي أَتَجَهَّزَ مَعَهُ ، فَأَرْجِعُ وَلَمْ أَقْضِ شَيْئًا ، وَأَقُولُ فِي نَفْسِي :
أَنَا قَادِرٌ عَلَى ذَلِكَ إِذَا أَرَدْتُ ، فَلَمْ يَزَلْ يَتِمَادَى بِي حَتَّى اسْتَمَرَ بِالنَّاسِ الْجِدُّ ،
فَأَصْبَحَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ غَادِيًا وَالْمُسْلِمُونَ مَعَهُ وَلَمْ أَقْضِ مِنْ جِهَازِي شَيْئًا ، ثُمَّ
غَدَوْتُ فَرَجَعْتُ وَلَمْ أَقْضِ شَيْئًا ، فَلَمْ يَزَلْ ذَلِكَ يَتِمَادَى بِي حَتَّى أَسْرَعُوا وَتَفَارَطَ
الْغَزْوُ ، فَهَمَمْتُ أَنْ أَرْتَجِلَ فَأَدْرِكَهُمْ ، فَيَا لَيْتَنِي فَعَلْتُ ، ثُمَّ لَمْ يُقَدِّرْ ذَلِكَ لِي ،
فَطَفِيقْتُ إِذَا خَرَجْتُ فِي النَّاسِ بَعْدَ خُرُوجِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ يَحْزُنُنِي أَنِّي لَا أَرَى لِي
أُسْوَةً ، إِلَّا رَجُلًا مَغْمُوصًا عَلَيْهِ فِي النِّفَاقِ ، أَوْ رَجُلًا مَمَّنَّ عَذَرَ اللَّهُ تَعَالَى مِنَ
الضُّعْفَاءِ ، وَلَمْ يَذْكُرْنِي رَسُولُ اللَّهِ ﷺ حَتَّى بَلَغَ تَبُوكَ ، فَقَالَ وَهُوَ جَالِسٌ فِي
الْقَوْمِ بِتَبُوكَ : « مَا فَعَلَ كَعْبُ بْنُ مَالِكٍ » ؟ فَقَالَ رَجُلٌ مِنْ بَنِي سَلِمْةَ : يَا
رَسُولَ اللَّهِ حَبَسَهُ بُرْدَاهُ وَالنَّظْرُ فِي عِطْفِيهِ . فَقَالَ لَهُ مُعَاذُ بْنُ جَبَلٍ رَضِيَ اللَّهُ
عَنْهُ : بِئْسَ مَا قُلْتَ ! وَاللَّهِ يَا رَسُولَ اللَّهِ مَا عَلِمْنَا عَلَيْهِ إِلَّا خَيْرًا ، فَسَكَتَ
رَسُولُ اللَّهِ ﷺ . فَبَيْنَا هُوَ عَلَى ذَلِكَ رَأَى رَجُلًا مَبِيضًا يَزُولُ بِهِ السَّرَابُ ، فَقَالَ
رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « كُنْ أَبَا خَيْثَمَةَ » ، فَإِذَا هُوَ أَبُو خَيْثَمَةَ الْأَنْصَارِيُّ - وَهُوَ الَّذِي
تَصَدَّقَ بِصَاعِ التَّمْرِ حِينَ لَمَزَهُ الْمَنَافِقُونَ .

قَالَ كَعْبٌ : فَلَمَّا بَلَغَنِي أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَدْ تَوَجَّهَ قَافِلًا مِنْ تَبُوكَ حَضْرَنِي
 بَنِي ، فَطَفِئْتُ أَتَذَكُرُ الْكَذِبَ وَأَقُولُ : بِمِمْ أَخْرُجُ مِنْ سَخَطِهِ غَدًا؟ وَأَسْتَعِينُ عَلَى ذَلِكَ
 بِكُلِّ ذِي رَأْيٍ مِنْ أَهْلِي ، فَلَمَّا قِيلَ : إِنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَدْ أَظَلَّ قَادِمًا ، زَاحَ عَنِّي
 الْبَاطِلُ حَتَّى عَرَفْتُ أَنِّي لَنْ أَنْجُو مِنْهُ بِشَيْءٍ أَبَدًا ، فَاجْتَمَعْتُ صِدْقَهُ وَأَصْبَحَ
 رَسُولُ اللَّهِ ﷺ قَادِمًا ، وَكَانَ إِذَا قَدِمَ مِنْ سَفَرٍ بَدَأَ بِالْمَسْجِدِ فَرَكَعَ فِيهِ رَكَعَتَيْنِ ثُمَّ
 جَلَسَ لِلنَّاسِ ، فَلَمَّا فَعَلَ ذَلِكَ جَاءَهُ الْمُخَلَّفُونَ يَعْتَذِرُونَ إِلَيْهِ وَيَحْلِفُونَ لَهُ ،
 وَكَانُوا بِضِعَاً وَثَمَانِينَ رَجُلًا ، فَقَبِلَ مِنْهُمْ عِلَانِيَتَهُمْ وَبَايَعَهُمْ وَأَسْتَغْفَرَ لَهُمْ وَوَكَّلَ
 سَرَائِرَهُمْ إِلَى اللَّهِ تَعَالَى ، حَتَّى جِئْتُ ، فَلَمَّا سَلَّمْتُ تَبَسَّمَ تَبَسُّمَ الْمُغْضَبِ . ثُمَّ
 قَالَ : « تَعَالَ » ، فَجِئْتُ أَمْشِي حَتَّى جَلَسْتُ بَيْنَ يَدَيْهِ فَقَالَ لِي : « مَا خَلَّفَكَ ؟ أَلَمْ
 تَكُنْ قَدْ آبَتَعْتَ ظَهْرَكَ » ؟ قَالَ قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنِّي وَاللَّهِ لَوْ جَلَسْتُ عِنْدَ
 غَيْرِكَ مِنْ أَهْلِ الدُّنْيَا لَرَأَيْتُ أَنِّي سَأَخْرُجُ مِنْ سَخَطِهِ بِعُذْرٍ ؛ لَقَدْ أُعْطِيتُ جَدَلًا ،
 وَلَكِنِّي وَاللَّهِ لَقَدْ عَلِمْتُ لَئِنْ حَدَّثْتُكَ الْيَوْمَ حَدِيثَ كَذِبٍ تَرْضَى بِهِ عَنِّي لَيُوشِكَنَّ اللَّهُ
 يُسَخِطُكَ عَلَيَّ ، وَإِنْ حَدَّثْتُكَ حَدِيثَ صِدْقٍ تَجِدُ عَلَيَّ فِيهِ إِنِّي لَأَرْجُو فِيهِ عُقْبَى
 اللَّهِ عَزَّ وَجَلَّ ، وَاللَّهِ مَا كَانَ لِي مِنْ عُذْرٍ ، وَاللَّهِ مَا كُنْتُ قَطُّ أَقْوَى وَلَا أَيْسَرَ مِنِّي
 حِينَ تَخَلَّفْتُ عَنْكَ . قَالَ : فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « أَمَا هَذَا فَقَدْ صَدَقَ ، فَقُمْ
 حَتَّى يَقْضِيَ اللَّهُ فِيكَ » . وَسَارَ رِجَالٌ مِنْ بَنِي سَلِمْةَ فَاتَّبَعُونِي فَقَالُوا لِي : وَاللَّهِ مَا
 عَلِمْنَاكَ أَذْنِبْتَ ذَنْبًا قَبْلَ هَذَا لَقَدْ عَجَزْتَ فِي أَنْ لَا تَكُونَ آعْتَذَرْتَ إِلَى
 رَسُولِ اللَّهِ ﷺ بِمَا اعْتَذَرَ بِهِ الْمُخَلَّفُونَ ، فَقَدْ كَانَ كَأَنَّكَ كَأَنَّكَ ذَنْبَكَ اسْتَغْفَارُ
 رَسُولِ اللَّهِ ﷺ لَكَ . قَالَ : فَوَاللَّهِ مَا زَالُوا يُؤْتِنُونِي حَتَّى أَرَدْتُ أَنْ أَرْجِعَ إِلَى
 رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَأَكْذِبَ نَفْسِي ، ثُمَّ قُلْتُ لَهُمْ : هَلْ لَقِيَّ هَذَا مَعِيَ مِنْ أَحَدٍ ؟
 قَالُوا : نَعَمْ لَقِيَهُ مَعَكَ رَجُلَانِ قَالَا مِثْلَ مَا قُلْتَ ، وَقِيلَ لَهُمَا مِثْلَ مَا قِيلَ لَكَ ، قَالَ
 قُلْتُ : مَنْ هُمَا ؟ قَالُوا : مُرَارَةُ بْنُ الرَّبِيعِ الْعَمْرِيُّ ، وَهَلَالُ بْنُ أُمَيَّةَ الْوَاقِفِيُّ ؟
 قَالَ : فَذَكَرُوا لِي رَجُلَيْنِ صَالِحَيْنِ قَدْ شَهِدَا بَدْرًا فِيهِمَا أُسْوَةٌ ، قَالَ : فَمَضَيْتُ حِينَ
 ذَكَرُوهُمَا لِي . وَنَهَى رَسُولُ اللَّهِ ﷺ عَنْ كَلَامِنَا أَيُّهَا الثَّلَاثَةُ مِنْ بَيْنِ مَنْ تَخَلَّفَ عَنْهُ
 فَاجْتَنَبْنَا النَّاسَ - أَوْ قَالَ : تَغَيَّرُوا لَنَا - حَتَّى تَنَكَّرْتُ لِي فِي نَفْسِي الْأَرْضِ ، فَمَا

هِيَ بِالْأَرْضِ الَّتِي أَعْرِفُ ، فَلَبِثْنَا عَلَى ذَلِكَ خَمْسِينَ لَيْلَةً . فَأَمَّا صَاحِبَايَ
فَأَسْتَكْنَا وَقَعَدَا فِي بُيُوتِهِمَا بَيْكِيَان . وَأَمَّا أَنَا فَكُنْتُ أَشَبَّ الْقَوْمِ وَأَجْلَدُهُمْ
فَكُنْتُ أَخْرَجُ فَأَشْهَدُ الصَّلَاةَ مَعَ الْمُسْلِمِينَ ، وَأَطُوفُ فِي الْأَسْوَاقِ وَلَا يُكَلِّمُنِي
أَحَدٌ ، وَآتَى رَسُولَ اللَّهِ ﷺ فَأَسْلَمَ عَلَيْهِ وَهُوَ فِي مَجْلِسِهِ بَعْدَ الصَّلَاةِ ، فَأَقُولُ فِي
نَفْسِي : هَلْ حَرَّكَ شَفْتَيْهِ بَرْدَ السَّلَامِ أَمْ لَا ؟ ثُمَّ أَصَلِّي قَرِيباً مِنْهُ وَأَسَارِقُهُ النَّظَرَ ،
فَإِذَا أَقْبَلْتُ عَلَى صَلَاتِي نَظَرَ إِلَيَّ وَإِذَا التَّفْتُ نَحْوَهُ أَعْرَضَ عَنِّي ، حَتَّى إِذَا طَالَ ذَلِكَ
عَلَيَّ مِنْ جَفْوَةِ الْمُسْلِمِينَ مَشَيْتُ حَتَّى تَسَوَّرْتُ جِدَارَ حَائِطِ أَبِي قَتَادَةَ وَهُوَ ابْنُ
عَمِّي وَأَحَبُّ النَّاسِ إِلَيَّ ، فَسَلَّمْتُ عَلَيْهِ فَوَاللَّهِ مَا رَدَّ عَلَيَّ السَّلَامَ ، فَقُلْتُ لَهُ : يَا أَبَا
قَتَادَةَ أَنْشُدْكَ بِاللَّهِ هَلْ تَعَلَّمَنِي أَحِبُّ اللَّهُ وَرَسُولَهُ ﷺ ؟ فَسَكَتَ ، فَعُدْتُ فَنَاشَدْتُهُ
فَسَكَتَ ، فَعُدْتُ فَنَاشَدْتُهُ ، فَقَالَ : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ . ففَاضَتْ عَيْنَايَ ، وَتَوَلَّيْتُ
حَتَّى تَسَوَّرْتُ الْجِدَارَ ، فَبَيْنَا أَنَا أَمْشِي فِي سُوقِ الْمَدِينَةِ إِذَا نَبْطِيٌّ مِنْ نَبْطِ أَهْلِ
الشَّامِ مِمَّنْ قَدِمَ بِالطَّعَامِ يَبِيعُهُ بِالْمَدِينَةِ يَقُولُ : مَنْ يَدُلُّ عَلَيَّ كَعْبُ بْنُ مَالِكٍ ؟
فَطَفِقَ النَّاسُ يُشِيرُونَ لَهُ إِلَيَّ حَتَّى جَاءَنِي فَدَفَعَ إِلَيَّ كِتَاباً مِنْ مَلِكِ غَسَّانَ ، وَكُنْتُ
كَاتِباً . فَقَرَأْتُهُ فَإِذَا فِيهِ : أَمَا بَعْدُ فَإِنَّهُ قَدْ بَلَّغْنَا أَنَّ صَاحِبَكَ قَدْ جَفَاكَ وَلَمْ يَجْعَلْكَ اللَّهُ
بِدَارِ هَوَانٍ وَلَا مَضِيعَةٍ ، فَالْحَقُّ بِنَا نَوَاسِكَ ، فَقُلْتُ حِينَ قَرَأْتَهَا : وَهَذِهِ أَيْضاً مِنْ
الْبَلَاءِ ، فَتَيَمَّمْتُ بِهَا التَّنُورَ فَسَجَرْتُهَا ، حَتَّى إِذَا مَضَتْ أَرْبَعُونَ مِنَ الْخَمْسِينَ
وَأَسْتَلَبْتُ الْوَحْيَ إِذَا رَسُولُ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ يَأْتِينِي ، فَقَالَ : إِنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ
يَأْمُرُكَ أَنْ تَعْتَزَلَ أَمْرَاتِكَ ، فَقُلْتُ : أَطْلُقُهَا أَمْ مَاذَا أَفْعَلُ ؟ فَقَالَ : لَا ، بَلِ اعْتَزَلْهَا
فَلَا تَقْرَبَنَّهَا ، وَأَرْسَلَ إِلَيَّ صَاحِبِي بِمِثْلِ ذَلِكَ . فَقُلْتُ لِأَمْرَاتِي : الْحَقِّي بِأَهْلِكَ
فَكُونِي عِنْدَهُمْ حَتَّى يَقْضِيَ اللَّهُ فِي هَذَا الْأَمْرِ . فَجَاءَتِ امْرَأَةُ هِلَالِ بْنِ أُمَيَّةَ
رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَقَالَتْ لَهُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنَّ هِلَالَ بْنِ أُمَيَّةَ شَيْخٌ ضَائِعٌ لَيْسَ لَهُ
خَادِمٌ ، فَهَلْ تَكْرَهُ أَنْ أَخْدُمَهُ ؟ قَالَ : « لَا ، وَلَكِنْ لَا يَقْرَبَنَّكَ » فَقَالَتْ : إِنَّهُ وَاللَّهِ مَا
بِهِ مِنْ حَرَكَةٍ إِلَى شَيْءٍ ، وَوَاللَّهِ مَا زَالَ يَبْكِي مُنْذُ كَانَ مِنْ أَمْرِهِ مَا كَانَ إِلَى يَوْمِهِ
هَذَا . فَقَالَ لِي بَعْضُ أَهْلِي : لَوْ اسْتَأْذَنْتَ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ فِي أَمْرَاتِكَ فَقَدْ أُذِنَ
لِامْرَأَةِ هِلَالِ بْنِ أُمَيَّةَ أَنْ تَخْدُمَهُ ؟ فَقُلْتُ : لَا اسْتَأْذِنُ فِيهَا رَسُولَ اللَّهِ ﷺ ، وَمَا
يُدْرِينِي مَاذَا يَقُولُ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ إِذَا اسْتَأْذَنَتْهُ فِيهَا ، وَأَنَا رَجُلٌ شَابٌّ ! فَلَبِثْتُ بِذَلِكَ

عَشْرَ لَيَالٍ فَكَمَلْنَا خَمْسُونَ لَيْلَةً مِنْ حِينَ نُهِيَ عَنْ كَلَامِنَا . ثُمَّ صَلَّيْتُ صَلَاةَ
الْفَجْرِ صَبَاحَ خَمْسِينَ لَيْلَةً عَلَى ظَهْرِ بَيْتٍ مِنْ بُيُوتِنَا ، فَبَيْنَا أَنَا جَالِسٌ عَلَى الْحَالِ
الَّتِي ذَكَرَ اللَّهُ تَعَالَى مِنَّا ، قَدْ ضَاقَتْ عَلَيَّ نَفْسِي وَضَاقَتْ عَلَيَّ الْأَرْضُ بِمَا رَحُبَتْ ،
سَمِعْتُ صَوْتَ صَارِخٍ أَوْفَى عَلَيَّ سَلْعٌ (٢) يَقُولُ بِأَعْلَى صَوْتِهِ : يَا كَعْبُ بْنُ مَالِكٍ
أَبْشِرْ ، فَخَرَرْتُ سَاجِدًا ، وَعَرَفْتُ أَنَّهُ قَدْ جَاءَ فَرَجٌ . فَاذَنْ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ النَّاسَ
بِتَوْبَةِ اللَّهِ عَزَّ وَجَلَّ عَلَيْنَا حِينَ صَلَّيْتُ صَلَاةَ الْفَجْرِ فَذَهَبَ النَّاسُ يُبَشِّرُونَنَا . فَذَهَبَ
قَبْلَ صَاحِبِي مُبَشِّرُونَ وَرَكَضَ إِلَيَّ رَجُلٌ فَرَسًا وَسَعَى سَاعٍ مِنْ أَسْلَمَ قَبْلِي ، وَأَوْفَى
عَلَى الْجَبَلِ ، فَكَانَ الصَّوْتُ أَسْرَعَ مِنَ الْفَرَسِ ، فَلَمَّا جَاءَنِي الَّذِي سَمِعْتُ صَوْتَهُ
يُبَشِّرُنِي نَزَعْتُ لَهُ ثَوْبِي فَكَسَوْتُهُمَا إِيَّاهُ بِبُشْرَاهُ ، وَاللَّهُ مَا أَمْلِكُ غَيْرَهُمَا يَوْمَئِذٍ ،
وَأَسْتَعْرْتُ ثَوْبَيْنِ فَلَبِسْتُهُمَا ، وَأَنْطَلَقْتُ أَنَا مُمْ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ يَتَلَقَانِي النَّاسُ فُوجًا
فُوجًا يُهَنِّئُونَنِي بِالتَّوْبَةِ وَيَقُولُونَ لِي : لَتَهْنِكَ تَوْبَةُ اللَّهِ عَلَيْكَ . حَتَّى دَخَلْتُ الْمَسْجِدَ
فَإِذَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ جَالِسٌ حَوْلَهُ النَّاسُ ، فَقَامَ طَلْحَةُ بْنُ عُبَيْدِ اللَّهِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ
يَهْرُولٌ حَتَّى صَافَحَنِي وَهَنَانِي ، وَاللَّهُ مَا قَامَ رَجُلٌ مِنَ الْمُهَاجِرِينَ غَيْرُهُ - فَكَانَ
لَا يَنْسَاهَا لِطَلْحَةَ - . قَالَ كَعْبٌ : فَلَمَّا سَلَّمْتُ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ قَالَ وَهُوَ
يَبْرُقُ وَجْهُهُ مِنَ السُّرُورِ : « أَبْشِرْ بِخَيْرِ يَوْمٍ مَرَّ عَلَيْكَ مُدٌّ وَلَدَتِكَ أُمَّكَ » فَقُلْتُ :
أَمِنْ عِنْدِكَ يَا رَسُولَ اللَّهِ أَمْ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ ؟ قَالَ : « لَا ، بَلْ مِنْ عِنْدِ اللَّهِ عَزَّ
وَجَلَّ » ، وَكَانَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ إِذَا سُرَّ اسْتَنَارَ وَجْهُهُ حَتَّى كَانَ وَجْهُهُ قِطْعَةً قَمَرٍ وَكُنَّا
نَعْرِفُ ذَلِكَ مِنْهُ ، فَلَمَّا جَلَسْتُ بَيْنَ يَدَيْهِ قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنَّ مِنْ تَوْبَتِي أَنْ
أَنْخَلِعَ مِنْ مَالِي صَدَقَةً إِلَى اللَّهِ وَإِلَى رَسُولِهِ . فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « أَمْسِكْ
عَلَيْكَ بَعْضَ مَالِكَ فَهُوَ خَيْرٌ لَكَ » . فَقُلْتُ : إِنِّي أَمْسِكُ سَهْمِي الَّذِي بِخَيْرٍ .

وَقُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى إِنَّمَا أَنْجَانِي بِالصِّدْقِ ، وَإِنْ مِنْ تَوْبَتِي أَنْ لَا أُحَدِّثَ إِلَّا صِدْقًا مَا بَقِيَتْ ، فَوَاللَّهِ مَا عَلِمْتُ أَحَدًا مِنَ الْمُسْلِمِينَ أَبْلَاهُ اللَّهُ تَعَالَى فِي صِدْقِ الْحَدِيثِ مُنْذُ ذَكَرْتُ ذَلِكَ لِرَسُولِ اللَّهِ ﷺ أَحْسَنَ مِمَّا أَبْلَانِي اللَّهُ تَعَالَى ، وَاللَّهِ مَا تَعَمَّدْتُ كِذْبَةً مُنْذُ قُلْتُ ذَلِكَ لِرَسُولِ اللَّهِ ﷺ إِلَى يَوْمِي هَذَا ، وَإِنِّي لَأَرْجُو أَنْ يَحْفَظَنِي اللَّهُ تَعَالَى فِيمَا بَقِيَ ، قَالَ : فَأَنْزَلَ اللَّهُ تَعَالَى : ﴿ لَقَدْ تَابَ اللَّهُ عَلَى النَّبِيِّ وَالْمُهَاجِرِينَ وَالْأَنْصَارِ الَّذِينَ اتَّبَعُوهُ فِي سَاعَةِ الْعُسْرَةِ ﴾ حَتَّى بَلَغَ : ﴿ إِنَّهُ بِهِمْ رُؤُوفٌ رَحِيمٌ ﴾ وَعَلَى الثَّلَاثَةِ الَّذِينَ خَلَفُوا حَتَّى إِذَا ضَاقَتْ عَلَيْهِمُ الْأَرْضُ بِمَا رَحُبَتْ ﴿ حَتَّى بَلَغَ : ﴿ اتَّقُوا اللَّهَ وَكُونُوا مَعَ الصَّادِقِينَ ﴾ [التوبة : ١١٧ - ١١٩] قَالَ كَعْبٌ : وَاللَّهِ مَا أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيَّ مِنْ نِعْمَةٍ قَطُّ بَعْدَ إِذْ هَدَانِي اللَّهُ لِلْإِسْلَامِ أَعْظَمَ فِي نَفْسِي مِنْ صِدْقِي رَسُولَ اللَّهِ ﷺ أَنْ لَا أَكُونَ كَذِبْتُهُ ، فَأَهْلِكَ كَمَا هَلَكَ الَّذِينَ كَذَبُوا ؛ إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى قَالَ لِلَّذِينَ كَذَبُوا حِينَ أَنْزَلَ الْوَحْيَ شَرًّا مَا قَالَ لِأَحَدٍ ، فَقَالَ اللَّهُ تَعَالَى : ﴿ سَيَحْلِفُونَ بِاللَّهِ لَكُمْ إِذَا انْقَلَبْتُمْ إِلَيْهِمْ لِيُتَعَرَّضُوا عَنْهُمْ فَأَعْرِضُوا عَنْهُمْ إِنَّهُمْ رَجَسٌ وَمَا وَاهُمْ جَهَنَّمَ جَزَاءً بِمَا كَانُوا يَكْسِبُونَ . يَحْلِفُونَ لَكُمْ لِيَتَرْضَوْا عَنْهُمْ فَإِنْ تَرْضَوْا عَنْهُمْ فَإِنَّ اللَّهَ لَا يَرْضَى عَنِ الْقَوْمِ الْفَاسِقِينَ ﴾ [سورة التوبة : ٩٥ - ٩٦] قَالَ كَعْبٌ : كُنَّا خُلَفْنَا أَيُّهَا الثَّلَاثَةُ عَنْ أَمْرِ أَوْلَيْكَ الَّذِينَ قَبِلَ مِنْهُمْ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ حِينَ خَلَفُوا لَهُ فَبَايَعَهُمْ وَأَسْتَغْفَرَ لَهُمْ وَأَرْجَأَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ أَمْرَنَا حَتَّى قَضَى اللَّهُ تَعَالَى فِيهِ بِذَلِكَ . قَالَ اللَّهُ تَعَالَى : ﴿ وَعَلَى الثَّلَاثَةِ الَّذِينَ خَلَفُوا ﴾ وَلَيْسَ الَّذِي ذَكَرَ مِمَّا خَلَفْنَا تَخَلُّفًا عَنِ الْغَزْوِ ، وَإِنَّمَا هُوَ تَخْلِيفُهُ إِيَّانَا وَإِرْجَاؤُهُ أَمْرَنَا عَمَّنْ حَلَفَ لَهُ وَاعْتَذَرَ إِلَيْهِ فَقَبِلَ مِنْهُ . مَتَّفَقٌ عَلَيْهِ .

وفي رواية : أَنَّ النَّبِيَّ ﷺ خَرَجَ فِي غَزْوَةِ تَبُوكَ يَوْمَ الْخَمِيسِ وَكَانَ يُحِبُّ أَنْ يَخْرُجَ يَوْمَ الْخَمِيسِ .

وفي رواية : وَكَانَ لَا يَقْدَمُ مِنْ سَفَرٍ إِلَّا نَهَارًا فِي الضُّحَى ، فَإِذَا قَدِمَ بَدَأَ بِالْمَسْجِدِ فَصَلَّى فِيهِ رَكَعَتَيْنِ ثُمَّ جَلَسَ فِيهِ .

21. Cabdullaah ibn Kacab ibn Maalik (A.K.R.) oo aabbihi Kacab hagi jirey markuu indha beelay, wuxuu yiri: waxaan maqlay aabbahay Kacab ibn Maalik oo ka sheekaynaya waagii uu nabiga (S.C.W.) ka haray oo aheyd duullaankii Tabuuk. Wuxuu yiri Kacab:

Ma jirin duullaan aanan Nabiga (S.C.W.) kala qayb gelin duullaankii Tabuuk ma ahee iyo kii Beder oo aan isaga cidna lagu canaanan maxaa yeelay Nabiga (S.C.W.) iyo raggii Beder raacay waxay doonteen safarkii Qureysh ee badeecad siday, iyagoo aan dooneyn inay la dagaalaan, saa Allaa falay si aysan ku tala gelin, colkii Quraysheed iyo iyagiina wada kulmiyey. Waxaan Nabiga (S.C.W.) la joogey habeenkii togga Caqabah markii aan kor yeelidda diinta islaamka axdiga kula galeyney in Beder habeenkaas la iigu badalana u shallaayi maayo, inkastoo ay dadku badiyaan hadal haynta Beder.

Duullaankii Tabuuk oo aan Nebiga (S.C.W.) ka haray haddaan xaalkeyga ka warramo siduu ahaa, waxaan markaas ahaa markii aan u xoog iyo xoolaba roonaa, waxayna ahayd markii iigu horreysey laba rakuubood aan yeesho, Nabiga (S.C.W.) markii uu duullaan qaadayo waxaa caado u ahaan jirey inuusan daaha ka qaadin arrimaha la xiriira oo dhan waqti dambe maahee. Laakiinse markaas qorraxdu aad bay u kululeyd, safar dheer iyo dhul dhib badan oo bah gooyo ahna waa la marayey, col weyn oo xoog lehna waa loo socdey.

sidaa awgeed buu rasuulkii Alle (S.C.W.) Daboolka uga qaaday meesha loo socdo, si loogu diyaar groobo. waxaa baxay col weyne aad u culus, oo aan wax la diiwaan gelin karo ahayn, ninkii damco inuu maqnaado kama uu baqayn in la ogaado, haddaan waxyi ka soo dagin. Duullaankaas wuxuu Rasuulku (S.C.W.) qaaday goor ay mirihii soo go' ayaan, hooska geedahuna macaan yahay, anigana sahlashaa i gashay. Rasuulkii (S.C.W.) waa uu diyaar garoobey, muslimiintiina waa la diyaargarobeen, aniguna inaan diyaar garoobaan u kallahaa, anoo aan waxba qabanna waa soo noqdaa, waxaan is leeyahay waxba ma ahoo waa kuu fududdahay markii aad doonto, iska daba wareeg ma aan deyn jeer ay Nebigii (S.C.W.) iyo muslimiintii dhaqaaqeen anigoo aan waxba diyaarsan.

Duullaankii caaradkuu la baxay oo waa tegey, wax weli ii diyaar ahina ma jirin, waxaan is iri alleylehe raro, oo gaar, la iimase qaddarin, magacay ba'ye bal maan falo, markii uu Nebigii (S.C.W.) tegey yaan calool xumo iyo murugo bilaabay markii aan dadka soo dhex galo laguma arko qof aan ku dayan karo, oo weheshan karo ragga joogaa waa nin munaafaqnimo lagu yiqiin iyo nin jihaadka aan awood u lahayn oo Alle ka cafiyey.

Nabigii (S.C.W.) ima uu xusuusan ilaa uu Tabuuk gaarey, markii uu Tabuuk tegey buu wuxuu yiri isagoo fadhiya: Kacab ibn Maa-lik muxuu falay? wuxuu yiri nin reer banii Salamah ahi dharkiisii baa reebay iyo hadba gees is ka dhugasho. Mucaad ibn Jabal baa wuxuu ku yiri ninkii reer banii Salamah: wax daran baad ku hadashay! wallaahi rasuul Alloow kuma aannu ogin waxaan khayr ahayn, rasuulkii Alle (S.C.W.) waxba ma oran oo waa iska aamusay.. Nin bidhaamaya oo wirwirayaa meel fog ka soo muuqday, wuxuu yiri rasuulkii Alle (S.C.W.): Abuu Khaysama noqo, mise waa abuu Khaysama laftigiisii oo ahaa ninkii suuska timirta ah sad-

aqaysan jirey oo ay munaafiqiintu ku durayeen. Markii aan maqlay inuu Nebigii (S.C.W.) soo laabtay oo soo socdo yaa walwakii iga batay oo been inaan sheegaa igu soo dhacday, waxaan is weydii-nayey sidee Nebiga (S.C.W.) uga maslaxdaa arrintaa maanta. Wixii wax garanayey oo ehelkayga ahaa baan kala tashaday, markii aan maqlay in uu Rasuulka (S.C.W.) soo ogog yeeshay, yaa tashwiish-kii oo dhammi iga ba' ay oo waxaan go' aan saday inaan runta sheego, mar haddaan haysan wax aan kaga badbaadi karo. Nabi-gii (S.C.W.) waa yimid. Sidii ay caadadiisu ahaydna kolkuu safar-rada ka yimaado masjidkuu ku soo hormaray oo laba rakcadood ku tukaday, oo dabadeed fariistay si uu dadkii ugu qaabilo. markuu si-daa yeelay baa waxaa u yimid raggii haray oo dhowr iyo siddeetan nin gaaraya, waa u cudur daarteen waana dhaarteen, waana uu ka yeelay oo u dembi dhaaf dalbay waxooda u qarsoonna Alluu u daayey. markaasaan anna imid oo salaamay suu inta dhoolbiray buu wuxuu yiri isagoo caro laga dareemayo: Kaalay, waa u i mid oo hor fariistay. wxuu yiri (S.C.W.): "Maxaa ku reebay?" sow Alle kama aadan gadan rakuubkaaga?" Waxaan iri: Rasuul Alloow (S.C.W.) wallaahay haddaan maanta cid kale oo adduun ag joogi lahaa cudur daar aan kaga fakado ma waayeen waana doodi aqaan, laakiinse waxaan ogahay, haddaan maanta kuu sheego been aan kugu raalli gelinayo, waxaan halis u ahay in Alle iigu caroodo, had-daan run kuu sheegana iyadaan xag Alle aayaha dambe ku rajo fii-canahay. waa sidaase wallaahaanan wax cudur daar ah haysan, wal-laahi baysan jirin mar aan ka xoog iyo xoolo roonaa markaan kaa haray. Markaan sidaas iri buu wuxuu yiri Rasuulkii Alle (S.C.W.): Kanu run buu sheegay. Haddaba iska tag inta Alle xaalkaaga wax ka oranayo. Rag reer banii Salimah ah baa inta i soo raacay i yiri: waxaynu ognahay inaad hadda ka hor wax aadan bi'in; ma wa-xaad kari weydey inaad Nebiga u cudur daaratid sidii ay raggii kale oo kaa horreeyeyba ugu cudurdaarteen? Nebiga oo kuu dembi dhaaf dalba baa qaladkaaga oo dhan ku filnayde, waa igu celceli-yeen oo sidaas wadnaha iiga qabteen ilaa aan ku fakarey tolow ne-bigu ma ku noqotaa oo hadalkaagii hore ma beenisaa. Waxaan wey-diiyey: Cid sidaan yeelay oo kale yeeshay ma garanaysaan? waxay yiraahdeen: Haah, labo nin baa sidaada oo kale yiri oo sidaada oo kale lagu yiri; waxaan iri: oo waa labadee? waxay yiraahdeen waa Muraara bin Rabiic al-Camri iyo Hilaal bin Umayyah al-Waaqifi, mise waa laba nin oo wanaagsan oo Bader ka qayb galay, oo lagu dayan karo markii ay ii sheegeen baan ku sii adkeystay mowqof-kaygii hore. Wixii rag haray, Nebigu (S.C.W.) seddexdayadii buu amray inaan dadku nala hadlin, markaasaa dadkiiba naga cararay oo dhulkii nagu yaraaday oo nin qalaad aan noqday. Konton ha-been baan sidaas ku jirney. Labadayadii saaxiib ceeb iyo calool xumo bay guriga la fariisteen. Aniguse dhallinyaraan ahaa firfir-coon oo salaaddaan dadka la tukan jirey, carradaydana waa aan mari jirey, wax ila hadlana ma jirin. Rasuulkana (S.C.W.) inta u tago baan salaami jirey markuu inta tukado fadhiyo, markaasaan is

oran jirey tolow bishimaha ma dhaqdhaqaaajiyey oo salaanta ma kaa qaaday . Intaan ku ag tukadaan isha ku xadi jirey markaasuu markaan ka jeensadana i fiiriyaa, markaan eegana iga jeensadaa. Arrintii waa igu dheeraatay, goyntii ay muslimiintu igu sameeyeen waa i dhibtay. waxaan gaarey inaan fuulo derbigii Abu Qataadah oo aan ilma adeer ahayn, dadkana aan ugu jeclaa,waa salaamay, salaantiina waa iga qaadi waayey. Waxaan ku iri abuu Qataadow Alle baan kugu dhaariyaye, ma aad igu og tahay inaan Alle iyo Rasuulkiisa jeclahay ? waa iga aamusay, waa ku celiyey oo dhaariyey , waa iga aamusay, misna waa ku celiyey oo dhaariyey, kolkuu i yiri: Alle iyo rasuulkiisaa og. Markaasay ilmo iga soo qubatay, derbigiina aan ka soo degey. suuqii baan u soo baxay mise nin reer Shaam ah oo raashin gasac ah wataa baa dadka i weydiinaya oo leh: yaa Kacab ibn Maalik i tusaya waa la ii soo tilmaamay. waa ii yimid wuxuu ii dhiibay waraaq uu iiga wadey boqorkii reer Qassaan. waxaan ahaa qoraa saa waan akhristay, mise waxaa ku taal; waxaa nasoo gaarey saaxiibkaa inuu ku gooyey, Allena kuma badin dulli, iyo darxumo ee noo imow annagaa ku wanaajinayna'e. Markaan akhriyey baan waxaan iri: tanna waa imtixaan kale, markiiba waxaan ku riday tinnaarka oo ku gubey. Kontonkii markii ay afartan maalmood tagtay waxyina uusan soo degin baa nin uu Nabigu (S.C.W.) soo diray ii yimid oo yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku soo faray inaad haw-eentaada ka tagtid. Waxaan iri : Ma furaa mise maxaan falaa? Wuxuu yiri: Mayee ha taaban oo keliya. labadaydii saaxiibna sidaa-soo kaluu u faray. Sidaa awgeed baan xaaskaygii ka codsaday inay ciddeedii la joogto bal inta arrintaan Alle si ka oranayo. xaaskii Hilaal ibn Umayyah baa iyaduna Nebiga (S.C.W.) u tagtay oo tiri: Rasuul Alloow Hilaal ibn Umayyah waa sheyb aan tabar lahayn, aan daryeeli karin naftiisa keligi, adeegena ma leh, marka ma aad diideysaa inaan u adeego? Wuxuu yiri: Maya, laakiinse yuusan kuu dhowaan, Waxay tiri: Dan kama leh dumar. tan iyo maalintii uu arriinkaanu billowday ilaa haatanna, waa uu ooyayey. Ehelkaygii baa qaarkood igu yiraahdeen: Maad Nebiga (S.C.W.) weydiisatid inuu xaaskaaga kuu idmo, Hilaal bin Ummayaba waa u idmay xaaskiisu inay u adeegto' e? Waxaan iri: Kuma dhibayo nabiga (S.C.W.) weydiisiga idan kaa oo kale ah, saa wuxuu oranayo ma garanayo'e, aniguna waxaan ahay nin dhallinyaro ahe(oo Hilaal oo kale ma ahi). Sidaasna toban beri baan ku jirnay oo kontonkii habeen ay noogu buuxsameen, tan iyo markii nala gooyey. waxaan tukadey salaad subax, waxay ahayd habeenkii kontonaad subaxiisii dambe, anigoo fadhiya gurigeyga, naftaydiina ciriiryootey oo dhulkii ballaarnaa sidii Alle naga sheegay igu yaraaday, baan waxaan maqlay nin buur korkeed ka dhawaaqaya oo leh: Kacab ibn Maaligoow bishaarayso. markaasaan sujuud shukri la dhacay, oo waxaan gartay in faraj yimid. Rasuulku (S.C.W.) markii uu salaaddii subax tujiyey buu dadkii u sheegay in Alle naga tobad aqbalay, markaasaa dadkii noo soo kala orday iyagoo noo bishaaraynaya. Labadaydii saaxiib dad baa aaday. Anigana ninbaa faras xaggayga u soo fuu-

lay, nin kale oo reer Aslam ah baa isna xaggayga u soo orday oo buur dhaladeed fuulay oo iiga dhawaaqay. saa dhawaaqiibaa fa-raskii ka soo hor maray markuu ii yimid ninkii aan codkiisa maqlay oo ii bishaareeyay baan labadaydii go' siiyay, bishaaradiisii darteed. Ilaahay baan ku dhaartay maalintaa dhar kale ma haysan, sidaa awgeed baan laba go' u soo deyntey oo maalintaas wax kale ma aan haysan, Dabadeedna Nabigii (S.C.W.) baan aadey si aan qaddirinta iyo tixgelinta iyo mahadda aan u hayo ugu jeediyo. Intaan u socdayna rasuulka dadku waxay iila kulmayeen koox, koox, iyadoo toobad aqbalka iigu tahniyaday- naya. Masjidkii baan soo galay, waxaan arkay nebigii (S.C.W.) oo fadhiya dadkiina hareero fadhiyaan. waxaa soo kacay oo igu soo orday Dalxah bin Cubeydullaah waana i salaamay oo ii tahniyadeeyey, isaga keliyaana muhaajirintii iiga soo istaagay - Kacab Dalxah ma illoobi jirin. Waxaan salaamay Nebigii (S.C.W.) oo wajigiisu farxad la ifayo, Wuxuu yiri bishaarayso waa maalintii kuugu khayr badnayd oo ku soo martatan iyo markii ay hooyadaa ku dhashay. Waxaan iri: Rasuul Alloow ma xaggaaga mise waa xag Alle? Wuxuu ku jawaabay : Mayee waa xag Alle.

Nabigu (S.C.W.) markuu farxo waxaad moodi jirtey in wejigiisa gabal dayax ahi saaran yahay, siduu u dhalaalayo, oo aan uga garanayno. Markii aan hortiiisa fariistey baan waxaan iri: Nebi Alloow maalkayga oo dhan hor Alle ma u sadaqaystaa toobada la iga aqbalay awgeed? Wuxuu yiri: maalkaaga wax ka hayso sidaasaa ku fiican. Waxaan iri: saamigii aan Khaybar ka helay baan la harayaa. Waxaan iri: Rasuul Alloow runtii baa Alle igu badbaadiyey, toobadkeenkeygana waxaa ka mid ahaanaya, inaan sheegin waxaan run ahayn inta aan noolahay. Wallaahay garanmaayo muslimiinta imtixaanka Alle i mariyey mid ka wanaagsan qof uu mariyey, ilaa maalintii aan hadalkaas nebiga u sheegay tan iyo maanta uma qasnaan inaan been sheego, inta cimriga iiga hartayna in Alle iga dhawraan rajeynayaa. Wuxuu Alle soo dejiyey Aayadahan:

"Alle waa ka toobad aqbalay Nabiga iyo Muhaajiriintii iyo Ansaartii raacay saacaddii dhibaatada, markii qaar ka mid ah qalbiyadoodu ku sigteen inay qalloocdaan kaddib; dabadeedna waa ka toobad aqbalay, waa u turid iyo naxariis badan yahaye iyo seddaxdii dib loo dhigay jeer dhulkii ku yaraaday wuxuu ballaarraa. naftoodiina ku ciriiryootay ayna yaqiinsadeen inaan Alle meel looga irkadaa jirin isaga maahee, dabadeedna uu toobadii ka yeelay si ay u toobad keenaan, Alle isagaa toobad aqbalaha naxariista badan ahe. Kuwa xaq rumeeyoow dhowra waajibka iyo xilka uu Alle idin saaray oo run sheegyada ka mid ahaada" Suurada at-Towba: Aayadaha 117-119

Wuxuu yiri Kacab: Wallaahay garanmaayo nicmo Alle ii galay intii uu diinta igu hanuuniyey kaddib oo ka weyn runtii aan Nabiga (S.C.W.) u sheegay, maxaa yeelay haddaan maalintaas been u sheegi lahaa, waa aan halligmi lahaa, sidii ay u halligmeen kuwii beenta u sheegay oo Alle ka soo dejiyey wax cid lagu sheego wixii u xumaa. Wuxuu yiri Alle weyne: "Waa idiin dhaaran doonaan markii aad u noqotaan si aad isaga deysaan, ee iska daaya waa qurune, hoyaadkooduna waa Jahannama oo jaasadii wixii ay kasbadeen ah, waa idiin dhaaranayaan, si aad uga raalli noqotaan, haddii aad ka raalli noqotaanna Alle raalli kama noqdo qoon faasiqiin ah." Suurada Attowba: Aayadaha: 95-96.

wuxuu yiri Kacab (A.K.R.): Seddexdayada waa na loo kaadiyey, kuwaasna nebigu (S.C.W.) waa uu ka yeelay markii ay u dhaarteen, waana u dembi dhaaf dalbay, axdina waa uu la galay, ilaa Alle arrimaha sidaas aan soo sheegnay u kala xugmiyey. Marka Alle leeyahay: (Seddexdii dib loo dhigay) dib u dhiggaasi ma aha hariddii aan duullaanka ka harnay, ee waa dib u dhigiddii Nebigu (S.C.W.) nala sugayey in xaalkayaga Alle wax ka yeelo, markii uu iyaga dhaartii ka aqbalay.

Werin kale oo xadiiska wuxuu sheegayey inuu Nebigu (S.C.W.) Tabuuk u duuley maalin Khamiis ah, jeclaana inuu khamiisaha baxo. Xadiis kalena wuxuu lahaa: "Safarka wuxuu ka imaan jirey nabigu maalintii, weliba barqadii, wuxuuna ku soo hormari jirey masjidka oo inta labo rakcadood ku tukado, fariisan jirey".

٢٢ - وَعَنْ أَبِي نُجَيْدٍ « بَضِمَ النَّوْنِ وَفَتِحَ الْجِيمِ » عِمْرَانَ بْنِ الْحُصَيْنِ الْخُزَاعِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا أَنَّ أَمْرَأَةً مِنْ جُهَيْنَةَ أَتَتْ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ وَهِيَ حُبْلَى مِنَ الزَّوْنِ فَقَالَتْ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَصَبْتُ حَدًّا فَأَقِمَهُ عَلَيَّ ، فَدَعَا نَبِيُّ اللَّهِ ﷺ وَلَيْهَا فَقَالَ : « أَحْسِنِ إِلَيْهَا فَإِذَا وَضَعْتَ فَأُتِنِي » فَفَعَلَ فَأَمَرَ بِهَا نَبِيُّ اللَّهِ ﷺ ، فَشُدَّتْ عَلَيْهَا ثِيَابُهَا ، ثُمَّ أَمَرَ بِهَا فَرُجِمَتْ ، ثُمَّ صَلَّى عَلَيْهَا . فَقَالَ لَهُ عُمَرُ : تُصَلِّي عَلَيْهَا يَا رَسُولَ اللَّهِ وَقَدْ زَنْتُ ؟ قَالَ : « لَقَدْ تَابَتْ تَوْبَةً لَوْ قُسِمَتْ بَيْنَ سَبْعِينَ مِنْ أَهْلِ الْمَدِينَةِ لَوَسِعَتْهُمْ ، وَهَلْ وَجَدْتَ أَفْضَلَ مِنْ أَنْ جَادَتْ بِنَفْسِهَا لِلَّهِ عَزَّ وَجَلَّ ؟ ! » رواه مسلم .

22. Abuu Nujayd Cimraan bin Xusayn (A.K.R.) wuxuu yiri: Ha - weeney reer Juhayna ah baa Nebiga (S.C.W.) u timid iyadoo ilmo wacal ah uurkiis leh oo tiri: Rasuul Alloow (S.C.W.) waxaan galay dambi ee sida Qur'aanka dhigayo ha layga yeelo. Nabigu (S.C.W.) Markaasuu wuxuu u cid diray waligeedii oo faray inuu wanaajiyo una keeno kaddib markii ay dhasho. Ninkii mas'uulkeeda ahaa Sidii buu yeelay, oo wuxuu u keenay nebiga (S.C.W.) wuxuuna amray nabigu in xadkii lagu fuliyo. Saa dharkeedii baa lagu xirxiray , misna in la dhagaxyeeyo illaa ay ka dhimato buu amray. waana la dhagaxyeey illaa naftii ka baxday. Dabadeedna rasuulkii Alle (SCW) waa uu ku tukadey. Cumar (A.K.R.) baa yiri: oo rasuul Alloow ma intay dhilleysatay baad ku tukanaysaa? Rasuulkii Alla (S.C.W.) Wuxuu yiri: Haah, waxay toobad keentay toobad keen deeqi lahaa haddii loo qaybsho toddobaatan qof oo dadka reer Madiina ah. Towbad keen tani ka wanaagsan oo ka darajo badan ma jirto, bal eeg arrinteeda waxay dooratay inay runta sheegto iyadoo og inay nafta sidaa ku weyneyso iyadoo Alle raalli gelinti sidaa u yeeleysa". (Musim)

٢٣- وعن ابن عباسٍ وأَنَسِ بْنِ مَالِكٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَالَ : « لَوْ أَنَّ لِابْنِ آدَمَ وَادِيًا مِنْ ذَهَبٍ أَحَبَّ أَنْ يَكُونَ لَهُ وَادِيَانِ ، وَلَنْ يَمْلَأَ فَاهُ إِلَّا التُّرَابَ ، وَيَتُوبُ اللَّهُ عَلَى مَنْ تَابَ » متفقٌ عليه .

23. Ibn Cabbaas iyo Anas ibn Maalik (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (S.C.W.) yiri: " Ina Aadane hadduu leeyahay tog dahab ah, wuxuu jeclaan lahaa inuu labo sii yeesho, afkiisana (damaciisa) waxaa oo keliya buuxin kara ciidda qabriga (taasi waa markuu dhinto). Allena waa ka toobad aqbalayaa kii toobad keena" (Bukhaari iyo Muslim)

٢٤- وعن أبي هريرة رضي الله عنه أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَالَ : « يَضْحَكُ اللَّهُ سُبْحَانَهُ وَتَعَالَى إِلَى رَجُلَيْنِ يَقْتُلُ أَحَدُهُمَا الْآخَرَ يَدْخُلَانِ الْجَنَّةَ ، يُقَاتِلُ هَذَا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَيُقْتَلُ ، ثُمَّ يَتُوبُ اللَّهُ عَلَى الْقَاتِلِ فَيُسَلِّمُ فَيُسْتَشْهَدُ » متفقٌ عليه .

24. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle weyne kor ahaaye, wuxuu ku qoslaa laba nin oo midkooda hore kan kale diley labaduna Jannada wada gali doonaan (dhimashadooda kaddib). midkood oo horay loo dilay isagoo jidka Alle u diriraya jannadii buu galay. Markaa kaddib, Buu Alle u na-xariisanayaa kii wax dilay kaa oo gali Islaamka, oo u diriri jidka Alle oo loo dilayana (sidaana isna jannada ku galaya) . (Bukhaari iyo Muslim)

٣ - باب الصبر

CUTUBKA 3 Sabarka iyo adkeysiga

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَصْبِرُوا وَصَابِرُوا ﴾ [آل عمران : ٢٠٠]

7. " Kuwa xaqa rumeeyow sabra, oo sabarka ku tartama, oo heegan ahaada iyo kuwo adkeysiga badan, xilka Alle idin saarayna dhowra aad liibaantaane". Suuradda aali Cimraan: Aayadda 200.

Wuxuu kaloo yir kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَلَنَبْلُوَنَّكُمْ بِشَيْءٍ مِّنَ الْخَوْفِ وَالْجُوعِ وَنَقْصٍ مِّنَ الْأَمْوَالِ وَالْأَنْفُسِ وَالثَّمَرَاتِ وَبَشِّرِ الصَّابِرِينَ ﴾ [البقرة : ١٥٥]

8. ' Waxaan idinku imtaxaani doonaa wax cabsi la yiraahdo iyo gaajo iyo nusqaan naf iyo maal iyo miroba leh, ee sabrayaasha u bishaaree" Suuradda al-Baqara: aayadda 155.

Wuxuu kaloo yiri hufnaaye:

وقال تعالى : ﴿ إِنَّمَا يُوفَى الصَّابِرُونَ أَجْرَهُمْ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴾ [الزمر : ١٠]

9. "Sabrayaasha waxaa la siin ujuuradooda xisaab la'aan. "
Suuradda az-Zumar: Aayadda 5

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَلَمَن صَبَرَ وَغَفَرَ إِنَّ ذَلِكَ لَمِنَ عَظْمِ الْأُمُورِ ﴾ [الشورى : ٤٣]

10. "Kii sabra oo iska cafiya, taasaa arrimaha tooda la go' aansado ah" Suuradda ash-Shuura : Aayadda, 43.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ أَسْتَعِينُوا بِالصَّبْرِ وَالصَّلَاةِ إِنَّ اللَّهَ مَعَ الصَّابِرِينَ ﴾ [البقرة : ١٥٣]

11. Kuwa xaqa rumeeyow! kaalmaysta sabarka iyo salaadda. Alle sabrayaashuu la jiraaye". Suuradda al-Baqarah : Aayadda 153.

Wuxuu yiri oo kale kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَلَنَبْلُوَنَّكُمْ حَتَّىٰ نَعْلَمَ الْمُجَاهِدِينَ مِنْكُمْ وَالصَّابِرِينَ ﴾
[محمد : ٣١] وَالآيَاتُ فِي الْأَمْرِ بِالصَّبْرِ وَبَيَانِ فَضْلِهِ كَثِيرَةٌ مَعْرُوفَةٌ .

12. "Waa idin imtixaanaynaa jeer aan soo saarno kuwiinna jihadaaya iyo kuwa sabraya" Suuradda Muxammad: Aayadda 31.

Waxaa jira Aayado badan oo ka hadlaya wanaagga sabarka iyo ajarkiisa iyo inay isfaraan muslimiinta.

٢٥ - وعن أبي مالك الحارث بن عاصم الأشعري رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « الطُّهُورُ شَطْرُ الْإِيمَانِ ، وَالْحَمْدُ لِلَّهِ تَمْلَأُ الْمِيزَانَ ، وَسُبْحَانَ اللَّهِ وَالْحَمْدُ لِلَّهِ تَمْلَأُنِ - أَوْ تَمْلَأُ - مَا بَيْنَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ ، وَالصَّلَاةُ نُورٌ ، وَالصَّدَقَةُ بُرْهَانٌ ، وَالصَّبْرُ ضِيَاءٌ ، وَالْقُرْآنُ حُجَّةٌ لَكَ أَوْ عَلَيْكَ . كُلُّ النَّاسِ يَغْدُو^(٣) فَبَائِعٌ نَفْسَهُ فَمَعْتَقُهَا أَوْ مُؤَبِّقُهَا » رواه مسلم .

25. Abuu Maalik Xaaris ibn Caasim al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.)wuxuu yiri: Daahirnimadu (nadaafaddu) waxay u dhigantaa iimaanka barkiis. inaad tiraahdo ' Alxamdu Lillaah' oo macnaheedu yahay (ammaan iyo mahad oo dhan Alle baa leh) waxay ka qayb qaadataa miisaanka camalka qofka inuu cuslaado; ku dhawaaqidida ' Subxaanal -laah (Alle baa ceeb iyo nuqsan ku hufan oo kaamil ah) iyo Alxamdu Lillaah (Ammaan oo idil waxaa leh Alle) baa ku filan inay buuxiyaan cirarka iyo dhulka inta u dhexeysa (oo kheyrr iyo barako ka buuxiyaan). salaadduna waa nuur, sadaqaduna waa caddeyn (muujineysa iimaanka qofka) inaad sabartana waa wax wanaagsan sida iftiinka, Qur' aankuna waa kuu xujo ama kugu xujo. Qof kasta wuxuu subaxa ugu baryaa isagoo u diyaar ah inuu naftiisa iib geeyo markaasay noqdaan mid soo xoreeya, iyo mid soo halliga". (Muslim)

Fiiro gaar ah: Waagu markuu baryaba qofku wuxuu ku mashquuli maalintiisaasi shaqooyinkeeda haddii uu xusuusnaado Alle oo labadiisa indhood hor dhigo maalinta qiyaame markuu wax qabana-yaba , oo xumaha ka dhowrsado, samahana u dheereeyo. markaa wu xuu ka xoreynayaa naftiisa cadaabta maalintaa; haddii uu ka doortana danahiisa adduunka (iyo kasabkeeda) tan aakhiro, markaa waa isaga shaki li'i kan khasaaray ee nafti haligga ah.

٢٦ - وعن أبي سعيد سعد بن مالك بن سنان الخدري رضي الله عنهما : أن ناساً من الأنصار سألوا رسول الله ﷺ فأعطاهم ، ثم سألوه فأعطاهم ، حتى نفذ ما عنده ، فقال لهم حين أنفق كل شيء بيده : « ما يكن عندي من خير فلن أدخره عنكم ، ومن يستعفف يعفه الله ، ومن يستغن يغنيه الله ، ومن يتصبر يصبره الله . وما أعطي أحد عطاء خيراً وأوسع من الصبر » متفق عليه .

26. Abuu Saciid Sacad bin Maalik bin Sinaan al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: Dad ka mid ah ansaarta baa waxay ka codsadeen nebiga (S.C.W.) inuu wax siiyo, wuuna siiyey; haddana way weydiis-teen mar labaad wuuna siiyey jeer ay ka dhamaadeen wixii uu hayey. Dabadeedna wuxuu yiri nabigu: Haddii aan wax hayoba, kama labo laabaynayo inaan idin siiyo . Ogaadase: Qofkii isdhawra Allaa dhawra; qofkii isdeeqtoonsiiyana Alle waa deeqtoonsiiyaa, qofkii sabrana Alle waa sabarsiiyaa. Qofnana lama siin gallad ka wanaagsan oo ka khayr badan sabarka iyo isu dhiibidda Alle'.
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٧ - وعن أبي يحيى صهيب بن سنان رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « عَجَباً لِأَمْرِ الْمُؤْمِنِ إِنَّ أَمْرَهُ كُلَّهُ لَهُ خَيْرٌ وَلَيْسَ ذَلِكَ لِأَحَدٍ إِلَّا لِلْمُؤْمِنِ : إِنْ أَصَابَتْهُ سَرَّاءٌ (٤) شَكَرَ فَكَانَ خَيْراً لَهُ ، وَإِنْ أَصَابَتْهُ ضَرَّاءٌ صَبَرَ فَكَانَ خَيْراً لَهُ » رواه مسلم .

27. Abuu Yaxyaa Suhayb ibn Sinaan (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Arrinta qofka mu' minka ahi waa wax wanaagsan oo la yaab leh. Waa u kheyir wax waliba. Sifada iyo tilmaantaana waxaa iska leh mu'minka oo keliya cid kalena lama wadaagto. Haddii uu helo wax wanaagsan' wuxuu ku shukriyaa Alle taana waa u khayr; haddii ay dhibaato la soo gudboonaatona waa sabraa, qaddarka iyo qadaha Allena raalli ka noqdaa, taasina sidoo kale waa u khayr".
(Muslim)

٢٨ - وعن أنس رضي الله عنه قال : لَمَّا ثَقُلَ النَّبِيُّ ﷺ جَعَلَ يَتَغَشَّاهُ الْكَرْبُ فَقَالَتْ فَاطِمَةُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ : وَاکْرَبَ أَبْتَاهُ . فَقَالَ : « لَيْسَ عَلَيَّ أَيْبُكَ كَرْبٌ بَعْدَ الْيَوْمِ » فَلَمَّا مَاتَ قَالَتْ : يَا أَبْتَاهُ أَجَابَ رَبًّا دَعَاهُ ، يَا أَبْتَاهُ جَنَّةُ الْفِرْدَوْسِ مَاوَاهُ (٧) ، يَا أَبْتَاهُ إِلَى جَبْرِيَلٍ نَنَعَاهُ ؛ فَلَمَّا دُفِنَ قَالَتْ فَاطِمَةُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهَا : أَطَابَتْ أَنْفُسُكُمْ أَنْ تَحْتُوا عَلَيَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ التُّرَابَ ؟ رواه البخاري .

28. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Markuu xanuunka nabiga (S.C.W.) ku batay oo uu gaaray heer uu mar mar la miyir beelo. Faadumo (A.K.R.) waxay kor u tiri: Aah, Daranaa xanuunka haya aabbahay. Aabbihii sharafta iyo darajada badnaa wuxuu ku yiri: Dhibaato kale ma arkayo aabbahaa maanta dabadeed.' Markii uu dhintay bay waxay tiri: Aah, aabbahay! wuxuu maqlay yeeritaanka Rabbigi; Aah, aabbahay! jannatul Firdoows baa waxay noqotay hoyaadkiisa. Aah' aabbow! Waxaynu u sheegeynaa malag Jabriil geeridaada. Markii qabriga la dhigayna waxay tiri: Sidee bay naftiinnu idiin sii-say inaad rasuulkii Alle ciid ku rogtaan (macnaha aastaan)?

(Bukhaari)

٢٩- وعن أبي زيد أسامة بن زيد بن حارثة مولى رسول الله ﷺ وحبّه وابن حبه رضي الله عنهما ، قال : أرسلت بنت النبي ﷺ إن أباي قد احتضر فأشهدنا ، فأرسل يقرئ السلام ويقول : « إن لله ما أخذ وله ما أعطى وكل شيء عنده بأجل مسمى فلتصبر ولتحتسب » فأرسلت إليه تقسيم عليه ليأتينها . فقام ومعه سعد بن عبادة ، ومعاذ بن جبل ، وأبي بن كعب ، وزيد بن ثابت ، ورجال رضي الله عنهم ، فرفع إلى رسول الله ﷺ الصبي ، فأقعدته في حجره ونفسه تققع ، ففاضت عيناه فقال سعد : يا رسول الله ما هذا ؟ فقال : « هذه رحمة جعلها الله تعالى في قلوب عباده » وفي رواية : « في قلوب من شاء من عباده ، وإنما يرحم الله من عباده الرحماء » متفق عليه .

ومعنى « تققع » تتحرك وتضطرب .

29. Usaamah bin Zayd bin Xaarisah (A.K.R.) oo ahaa addoon nebiga xoreeyey iyo saxaabi uu aad u jeclaa rasuulku (S.C.W.) wuxuu yiri Usaamah: gabadh uu dhalay nebiga (S.C.W.) baa u soo cid dirsatay nabiga wiilkeedii oo sakaraad ahaa oo dhimasho ku dhow darteed. Wuxuu u diray nabigu gabadhiisaas salaan iyo fartiin ah: ' Alle isagaa leh wixii uu bixiyo oo gallad ah, isaganaa leh wixii uu qaato. Wax walbaana muddo go'an bay u leeyihiin . Ee u sheeg inay u sabarto (qaddarka Alle) rajeysona naxariista iyo ajarkiisa ? mar labaad bay u soo cid dirtay iyadoo ku adkaynaysa (oo ku baryeysa wajiga Alle) inuu u yimaado. Markaa buu kacay oo aaday gurigeeda isagoo ay wehliyaan Sacad ibn Cubaadah (A.K.R.) Mucaad ibn Jabal (A.K.R.), Ubayya ibn Kacab (A.K.R.) , Zayd bin Thaa-bit (A.K.R.) iyo rag kale. Markii uu gaaray halkii ay joogeen, baa wiilkii yaraa loo dhiibay nebiga (S.C.W.) Wuxuuna saaray dhabtiisa, Markuu arkay nafta oo ka sii gureysa iyo siduu sakaraad u ya-

hay wiilku, waxay indhahii nabigu (S.C.W.) bilaabeen inay sii daa -
yaan ilmo. Markaasuu yiri Sacad (A.K.R.) : Nebi Alloow waa
maxay waxakani? Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: "Waa
naxariis Alle geliyey quluubta addoomahiisa" Werin kalena wa-
xay oranaysay: (quluubta ciddii uu doono oo addoomahiisa ka
mida) Allena wuxuu u naxariistaa addoomahiisa kuwa naxariista
leh.') (Bukhaari iyo Muslim)

٣٠ - وعن صهيب رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « كان ملك فيمن كان
قبلكم وكان له ساحر فلما كبر قال للملك : إني قد كبرت فأبعث إلي غلاماً أعلمه
السحر ؛ فبعث إليه غلاماً يعلمه ، وكان في طريقه إذا سلك راهباً (٤) ، فقعده إليه
وسمع كلامه فأعجبه ، وكان إذا أتى الساحر مرَّ بالراهب وقعد إليه ، فإذا أتى
الساحر ضربته ، فشكا ذلك إلى الراهب فقال : إذا خشيت الساحر فقل : حبسني
أهلي ، وإذا خشيت أهلك فقل : حبسني الساحر .

فَبَيْنَمَا هُوَ عَلَى ذَلِكَ إِذْ أَتَى عَلَى دَابَّةٍ عَظِيمَةٍ قَدْ حَبَسَتِ النَّاسَ فَقَالَ : الْيَوْمَ
أَعْلَمُ السَّاحِرُ أَفْضَلُ أَمْ الرَّاهِبُ أَفْضَلُ ؟ فَأَخَذَ حَجْرًا فَقَالَ : اللَّهُمَّ إِنْ كَانَ أَمْرُ
الرَّاهِبِ أَحَبَّ إِلَيْكَ مِنْ أَمْرِ السَّاحِرِ فَاقْتُلْ هَذِهِ الدَّابَّةَ حَتَّى يَمْضِيَ النَّاسُ ، فَرَمَاهَا
فَقَتَلَهَا وَمَضَى النَّاسُ ، فَأَتَى الرَّاهِبَ فَأَخْبَرَهُ . فَقَالَ لَهُ الرَّاهِبُ : أَيُّ بَنِي أَنْتَ الْيَوْمَ
أَفْضَلُ مِنِّي قَدْ بَلَغَ مِنْ أَمْرِكَ مَا أَرَى ، وَإِنَّكَ سَتُبْتَلَى ، فَإِنْ آبَتُلَيْتَ فَلَا تَدُلُّ
عَلَيَّ ؛ وَكَانَ الْغُلَامُ يُبْرِيءُ الْأَكْمَةَ وَالْأَبْرَصَ ، وَيَدَاوِي النَّاسَ مِنْ سَائِرِ
الْأَدْوَاءِ . فَسَمِعَ جَلِيسُ لِلْمَلِكِ كَانَ قَدْ عَمِيَ ، فَاتَاهُ بِهِدَايَا كَثِيرَةٍ فَقَالَ : مَا هَهُنَا
لَكَ أَجْمَعُ إِنْ أَنْتَ شَفَيْتَنِي ، فَقَالَ : إِنِّي لَا أَشْفِي أَحَدًا إِنَّمَا يَشْفِي اللَّهُ تَعَالَى ،
فَإِنْ آمَنْتَ بِاللَّهِ تَعَالَى دَعَوْتُ اللَّهَ فَشَفَاكَ ، فَآمَنَ بِاللَّهِ تَعَالَى فَشَفَاهُ اللَّهُ تَعَالَى ،
فَأَتَى الْمَلِكَ فَجَلَسَ إِلَيْهِ كَمَا كَانَ يَجْلِسُ ، فَقَالَ لَهُ الْمَلِكُ : مَنْ رَدَّ عَلَيْكَ بَصْرَكَ ؟
قَالَ : رَبِّي ، قَالَ : أَوْلَكَ رَبٌّ غَيْرِي ؟ قَالَ : رَبِّي وَرَبُّكَ اللَّهُ ، فَأَخَذَهُ فَلَمْ يَزَلْ
يُعَذِّبُهُ حَتَّى دَلَّ عَلَى الْغُلَامِ ، فَجِيءَ بِالْغُلَامِ ، فَقَالَ لَهُ الْمَلِكُ : أَيُّ بَنِي قَدْ بَلَغَ
مِنْ سِحْرِكَ مَا تُبْرِيءُ الْأَكْمَةَ وَالْأَبْرَصَ وَتَفْعَلُ وَتَفْعَلُ ! فَقَالَ : إِنِّي لَا أَشْفِي أَحَدًا ،
إِنَّمَا يَشْفِي اللَّهُ تَعَالَى . فَأَخَذَهُ فَلَمْ يَزَلْ يُعَذِّبُهُ حَتَّى دَلَّ عَلَى الرَّاهِبِ ؛ فَجِيءَ

بِالرَّاهِبِ فَقِيلَ لَهُ : أَرْجِعْ عَنْ دِينِكَ ، فَأَبَى ، فَدَعَا بِالْمِنْشَارِ فَوَضِعَ الْمِنْشَارُ فِي
 مَفْرِقِ رَأْسِهِ ، فَشَقَّهُ حَتَّى وَقَعَ شِقَّاهُ ، ثُمَّ جِيءَ بِجَلِيسِ الْمَلِكِ فَقِيلَ لَهُ : أَرْجِعْ
 عَنْ دِينِكَ ، فَأَبَى ، فَوَضِعَ الْمِنْشَارُ فِي مَفْرِقِ رَأْسِهِ ، فَشَقَّهُ بِهِ حَتَّى وَقَعَ شِقَّاهُ ، ثُمَّ
 جِيءَ بِالْغُلَامِ فَقِيلَ لَهُ : أَرْجِعْ عَنْ دِينِكَ ، فَأَبَى ، فَدَفَعَهُ إِلَى نَفَرٍ مِنْ أَصْحَابِهِ
 فَقَالَ : أَذْهَبُوا بِهِ إِلَى جَبَلٍ كَذَا وَكَذَا فَاصْعِدُوا بِهِ الْجَبَلَ ، فَإِذَا بَلَغْتُمْ ذُرْوَتَهُ فَإِنْ
 رَجَعَ عَنْ دِينِهِ وَإِلَّا فَاطْرَحُوهُ . فَذْهَبُوا بِهِ فَصَعِدُوا بِهِ الْجَبَلَ ، فَقَالَ : اللَّهُمَّ اكْفِنِيهِمْ
 بِمَا شِئْتَ ، فَرَجَفَ بِهِمُ الْجَبَلُ فَسَقَطُوا ، وَجَاءَ يَمْشِي إِلَى الْمَلِكِ ، فَقَالَ لَهُ
 الْمَلِكُ : مَا فَعَلَ أَصْحَابُكَ ؟ فَقَالَ : كَفَانِيهِمُ اللَّهُ تَعَالَى ، فَدَفَعَهُ إِلَى نَفَرٍ مِنْ
 أَصْحَابِهِ فَقَالَ : أَذْهَبُوا بِهِ فَأَحْمِلُوهُ فِي قُرْقُورٍ وَتَوَسَّطُوا بِهِ الْبَحْرَ ، فَإِنْ رَجَعَ عَنْ دِينِهِ
 وَإِلَّا فَأَقْدِفُوهُ . فَذْهَبُوا بِهِ فَقَالَ : اللَّهُمَّ اكْفِنِيهِمْ بِمَا شِئْتَ ، فَاثْكَفَاتُ بِهِمُ السَّفِينَةُ
 فَغَرِقُوا ، وَجَاءَ يَمْشِي إِلَى الْمَلِكِ . فَقَالَ لَهُ الْمَلِكُ : مَا فَعَلَ أَصْحَابُكَ ؟ فَقَالَ :
 كَفَانِيهِمُ اللَّهُ تَعَالَى . فَقَالَ لِلْمَلِكِ : إِنَّكَ لَسْتَ بِقَاتِلِي حَتَّى تَفْعَلَ مَا أَمُرُكَ بِهِ .
 قَالَ : مَا هُوَ ؟ قَالَ : تَجْمَعُ النَّاسَ فِي صَعِيدٍ وَاحِدٍ وَتَصْلُبُنِي عَلَى جِدْعٍ ، ثُمَّ
 خُذْ سَهْمًا مِنْ كِنَانَتِي ، ثُمَّ ضَعِ السَّهْمَ فِي كَبِدِ الْقَوْسِ ثُمَّ قُلْ : بِسْمِ اللَّهِ رَبِّ
 الْغُلَامِ ، ثُمَّ آرِمْنِي ، فَإِنَّكَ إِذَا فَعَلْتَ ذَلِكَ قَتَلْتَنِي ، فَجَمَعَ النَّاسَ فِي صَعِيدٍ
 وَاحِدٍ ، وَصَلَبَهُ عَلَى جِدْعٍ ، ثُمَّ أَخَذَ سَهْمًا مِنْ كِنَانَتِهِ ، ثُمَّ وَضَعَ السَّهْمَ فِي كَبِدِ
 الْقَوْسِ ، ثُمَّ قَالَ : بِسْمِ اللَّهِ رَبِّ الْغُلَامِ ، ثُمَّ رَمَاهُ فَوَقَعَ فِي صُدْغِهِ ، فَوَضَعَ يَدَهُ
 فِي صُدْغِهِ فَمَاتَ ، فَقَالَ النَّاسُ : آمَنَّا بِرَبِّ الْغُلَامِ ، فَأَتَى الْمَلِكُ فَقِيلَ لَهُ :
 أَرَأَيْتَ مَا كُنْتَ تَحْذَرُ قَدْ وَاللَّهِ نَزَلَ بِكَ حَذْرُكَ . قَدْ آمَنَ النَّاسُ . فَأَمَرَ بِالْأَخْذِ
 بِأَفْوَاهِ السَّكِّ فَخُذَتْ وَأُضْرِمَ فِيهَا النَّيرَانَ وَقَالَ : مَنْ لَمْ يَرْجِعْ عَنْ دِينِهِ فَأَقْحَمُوهُ
 فِيهَا ، أَوْ قِيلَ لَهُ : اقْتَحِمْ فَفَعَلُوا حَتَّى جَاءَتْ أَمْرَأَةٌ وَمَعَهَا صَبِيٌّ لَهَا ، فَتَقَاعَسَتْ
 أَنْ تَقَعَ فِيهَا ، فَقَالَ لَهَا الْغُلَامُ : يَا أُمَّهُ أَصْبِرِي فَإِنَّكَ عَلَى الْحَقِّ « رواه مسلم .

« ذُرْوَةُ الْجَبَلِ » أَعْلَاهُ ، وَهِيَ « بَكَسْرِ الذَّالِ الْمُعْجَمَةِ وَضَمِّهَا »
 وَ« الْقُرْقُورُ » : بَضْمِ الْقَافَيْنِ نَوْعٌ مِنَ السُّفُنِ وَ« الصَّعِيدُ » هُنَا : الْأَرْضُ الْبَارِزَةُ

وَالْأَخْدُودُ « الشُّقُوقُ فِي الْأَرْضِ كَالنَّهْرِ الصَّغِيرِ ، وَ« أَضْرِمَ » : أَوْقَدَ ،
 وَ« انْكَفَأَتْ » أَي : انْقَلَبَتْ ، وَ« تَقَاعَسَتْ » : تَوَقَّفَتْ وَجَبِنَتْ .

30. Suhayb ar-Roomi wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri "Ummadihii idinka horreeyey waxaa jirey boqor lahaa falanfallow (u shaqeyn jiray) , Markii uu falanfallowgii goboobey, wuxuu ku yiri boqorkii : Maadaama aan sii gaboobayo, waxaan codsan inaad keento wiil aan baro falka. Sidaa buu boqorkii ugu soo diray wiil dhalinyaro ah si loo baro falka. jidka wiilku soo maro markuu u soo socdo falanfallowga waxaa degganaa raahib (nin aakhiro u go'doomay oo adduun iska nacay oo isaga tegey kaasoo uu wiilku caadeystay inuu la fariisto oo dhegeysto hadalkiisa. Waxaa aad u cajabiyey wiilkii uuna la yaabay hadalka raahibkaa sidaa awgeed Mar kasta oo uu falanfallowga u socdo , wuxuu la fariisan jiray raahbika jidkiisa ah. Arrintaas oo daahin jidhay. Falanfallowguna markaa wuu dili Jirey, wiilkii yaraa wuxuu uga cawday raahibkii arrintaa. markaa buu ku yiri: Markii aad ka baqdid falanfallowga ku dheh: reerkayagii baa i soo daahiyey , Markii aad ka baqdid na inay su'aalo ku weydiiyaan reerkaaga ku dheh: Waxaan ku soo daahay falanfallowgii. Xaaladdan waxay socotay muddo. Mar waxaa dhacday in wiilkii yaraa arkay bahal weyn oo isku gooyey jidkii dadka Wiilkii yaraa wuxuu hoos iskula hadlay: Maantaan kala ogaan karaa kii wanaagsan falanfallowga ama raahibka. markaa buu inta qaatay dhagax yiri: Alloow haddii aad dhaqanka raahibka ka jeceshahay kan falanfallowga sabab dhimashada bahalkan , si ay dadku awood ugu yeeshaan inay jidka maraan. Dabadeedna wuxuu ku dhuftay bahalka dhagaxii oo ku dilay, taa oo u suura gelisay inay dadku jidka maraan; wiilkii yaraa wuxuu u sheegay raahibkii wixii dhacay, kaa oo yiri : Maandhoow adaa maanta iga fadli badan, waxaadna gaartay heer dhib kugu soo gaari karo. ee haddii ay taasi dhacdo oo lagu qabto ha i soo tilmaamin.

Wiilkii wuxuu billaabay inuu daaweeyo dad ka sheeganaya indha la'aan oo ku dhashay , baras iyo cudurra kale. Warkaa wuxuu gaaray nin boqorka ka ag dhowaa oo indho beelay. Wuxuu u tegey wiilkii yaraa isagoo hadiyooyin badan u sida oo yiri : Waxan oo dhan adaa leh haddaad i biskeyneyso.' Wiilkii wuxuu ku yiri: Anigu waxba ma biskeeyo. Waa Alle oo keliya kan wax biskeeya. ee haddii aad islaameyso waxaan kuu baryayaa Alle Isagaana ku siin caafimaad. Markaa buu Alle rumeeyey oo islaamay, Allena araggii u soo celiyey. Wuxuu markaa kaddib aaday shaqadiisa oo fariistay halkiisii. Boqorkii baa wuxuu weydiiyey: Yaa kuu soo celiyey araggaagii ? Ninkii wuxuu ku jawaabay: Rabbigay. wuxuu yiri bo-

qorkii ma Rabbi aan aniga ahayn baad leedahay? Wuxuu ku jawaabay: Alle baa ah Rabbigaa iyo Rabbigayba . Boqorkii wuxuu amar ku siiyey raggiisii in la qabto kuwaasoo qabtay aadna u ciqaabay ilaa uu sheegay magaca wiilkii yaraa kaa oo loo keenay boqorkii oo ku yiri: Maandhow falkaagii ma wuxuu gaarey inaad in -dho malaasnaha, baras qabeenka iyo cudurrada kaleba daaweysid? Wiilkii wuxuu yiri: anigu qofna ma biskeeyo, ee Allaa wax biskeeya. Isagana markaa waa la qabtay oo la ciqaabay ilaa uu boqorkii u sheegay magaca iyo cinwaanka raahibkii. Raahibkii baa inta la soo qabtay oo lagu yiri Islaamka ka noqo, diiday. Markaa buu boqorkii wuxuu dirsaday miinshaar oo la saaray bartanka madaxa raahibkii waxaana loo kala gooyey laba jeex: Dabadeedna kii boqorka ka ag dhawaa baa loo yeeray oo la yiri: Islaamka ka noqo. isaguna waa diidey, markaa baa laba jeex loo kala gooyey. Dabadeedna, Wiilkii baa loo yeeray, oo lagu yiri: Islaamka ka noqo, isaguna waa uu diidey inuu sidaa yeelo. Boqorkii Wuxuu u dhiibay wiilkii koox raggiisa ka mid ah oo ku yiri: buur hebba geeya oo goortii aad dhaladeeda gaartaan hadduu weli ku sii adkeysto diintiisa ka soo tuura buurta dhaladeeda. waxay geeyeen buurtii dhaladeeda . meeshaa buu wiilkii Rabbi ku baryey oo yiri: Alloow, igu caawin inaad iiga samata bixiso tani sidii aad doonto oo kula gudboon. Markaa baa dhul gariir buurtii gil gilay, raggii boqorkana ka soo dhaceen. Wiilkii baa ku soo laabtay boqorka kaa oo weydiiyey: Maxaa ku dhacay raggii kula socday? Wuxuu ugu jawaabay: Allaa iga badbaadiyey. waxaa misna loo dhiibey koox kale oo rag ah kuwaa oo la faray inay ku qaadaan doon yar oo badda bartankeeda geeyaan haddii uu ku sii adkeystana diiddada ah inuu islaamka ka noqdo , ay ku ridaan badda. Sidaa bay kula taageen. markaa buu wiilkii Rabbigi baryey oo yiri: Alloow iiga dhici nimankan si kasta oo aad jeceshahay. Doontii baa degtay culeys awgi raggii boqorkana wada hafteen, wiilkiina isagoo soconayo buu mar labaad boqorkii u yimid, Boqorkii baa weydiiyey: Maxaa ku dhacay raggii kula socdey? wuxuu ugu jawaabay: Allaa ii soo gurmaday oo iiga gargaaray. Wuxuu intaa raaciyey: i dili karimaysid jeer aad yeeshid waxa aan ku faro. Boqorkii baa yiri: oo waa ma xay? Wiilkii wuxuu ku jawaabay: Isugu keen dadka meel bannaan oo fagaara ah iguna xir geed jirridiis.' Dabadeed kala soo bax ga-booyahayga leeb markaa intaad ku qabato leebka qaansada dhexdeeda dheh: Bismillaah - ku billaabid Magaca Alle -, Rabbiga wiilka, dabadeedna igu soo gan leebka adigoo igu soo abbaaraya. Haddii aad sidaa yeesho waxaad awood u yeelan inaad i disho. Boqorkii sidii buu yeelay. Dadkii buu isugu keenay meel bannaan oo fagaara , wiilkii waxaa lagu xiray jirrid geed timireed. Boqorkii wuxuu kala soo baxay leeb ga-booyihiisii inta ku qabtay qaansadii dhexdeeda buu wuxuu yiri: Bismillaah - Ku billaabid Magaca Alle-, Rabbiga wiilkan, oo ku gamay. Leebkii wuxuu kaga dhacay wiilkii dhafoorka wiilkiina intuu dhafoorka gacanta saaray buu dhintay.

Markii ay arkeen taa dadkii waxay mar wada yiraahdeen: Waxaan rumaynay Rabbiga wiilka. Boqorkii baa loo sheegay oo lagu yiri: Eeg! wixii aad ka taxaddaraysey inay kugu yimaadaan baa dhacaye; dadkii waxay rumeeyeen Rabbiga wiilka. oo wada islaameen. Boqorkii wuxuu amray in booraamo laga qodo waddooyinka afkooda; Markii la diyaarshey baa dab lagu shiday. Dabadeed waxaa dadkii lagu yiri oo ogeysiis lagu bixiyey in qofkii diida inuu ka noqdo Islaamka, lagu tuuri doono godod dab lagu huriyey ama la fari doono inuu ku boodo gododkaa dabka ah. Sidaa bay arrintu aheyd oo dadkii way diideen inay Islaamka ka noqdaan sidaa awgeed baa loogu guray godadkii dabka lagu huriyey. Waxay socoto arrintaa oo dadka sidaa loogu guro godadkaa dabka ah. Waxaa timid haweeney ilmo yar sidata inay gasho bay ka dib guryootay, ilmi-hii yaraa ay sidatay baase ku dhiirra galiyey oo ku yiri: hooyo! sabar; adigaa xaq ku taagane" (Muslim)

٣١ - وعن أنس رضي الله عنه قال : مرَّ النبيُّ ﷺ على امرأةٍ تَبْكِي عِنْدَ قَبْرِ ، فقال : « أَتَقِي اللهَ وَأَصْبِرِي » فقالت : إِيكَ عَنِّي ؛ فَإِنَّكَ لَمْ تُصَبِّ بِمُصِيبَتِي ، وَلَمْ تَعْرِفْهُ ، فَقِيلَ لَهَا : إِنَّهُ النَّبِيُّ ﷺ فَأَتَتْ بَابَ النَّبِيِّ ﷺ ، فَلَمْ تَجِدْ عِنْدَهُ بَوَائِينَ ، فقالت : لَمْ أَعْرِفْكَ ، فقال : « إِنَّمَا الصَّبْرُ عِنْدَ الصَّدْمَةِ الْأُولَى » متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : تبكي على صبيِّ لها .

31. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaa mar dhacday in Nabigu (S.C.W.) soo ag maray haweeney uu ka dhintay wiilkeedii kuna booyeysay qabrigiisa dushiisa. Markaa buu wuxuu ku yiri: Alle ka cabso oo sabar. Haweentii iyadoon garaneyn ciduu ahaa ayey si caro leh ku tiri: iga tag; waxa igu dhacay kuguma dhicine. xoogay kaddib qof baa u sheegay inuu ahaa nabiga (S.C.W) Markaasay aaday gurigii nebiga (S.C.W.) markii ay weyday wax adeege ama waardiye ah oo iridka jooga, ayey gudaha gashay kuna tiri: Kuma aan garaneyn.' Wuxuu yiri (S.C.W) : "Sabarka waxaa loola jeedaa inaad yeelato adkeysii oo aad isu dhiibto (Qaddarka Alle) marka ay kuugu hor leedahay dhibaataadu.'

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٢ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « يَقُولُ اللَّهُ تَعَالَى : مَا لِعَبْدِي الْمُؤْمِنِ عِنْدِي جَزَاءٌ إِذَا قَبِضْتُ صَفِيَّهُ ^(١) مِنْ أَهْلِ الدُّنْيَا ثُمَّ أَحْتَسِبُهُ إِلَّا الْجَنَّةَ » رواه البخاري .

32. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu soo weriyey in nebigu (S.C.W.) yiri: "Alle kor ahaaye wuxuu leeyahay: Uma hayo abaal-gud kaga wanaagsan jannada, Addoonkayga sabra, oo Alle kaga ajar suga, oo adkeysta, markii aan ka oofsada mid ka mid ah ga-calladiisa ee ka mid ah kuwa uu ugu jecel yahay adduunka."

(Bukhaari)

٣٣ - وعن عائشة رضي الله عنها أنها سألت رسول الله ﷺ عَنِ الطَّاعُونَ ، فَأَخْبَرَهَا أَنَّهُ « كَانَ عَذَابًا يَبْعَثُهُ اللَّهُ تَعَالَى عَلَى مَنْ يَشَاءُ ، فَجَعَلَهُ اللَّهُ رَحْمَةً لِلْمُؤْمِنِينَ ، فَلَيْسَ مِنْ عَبْدٍ يَقَعُ فِي الطَّاعُونَ فَيَمُوتُ فِي بَلَدِهِ صَابِرًا مُحْتَسِبًا يَعْلَمُ أَنَّهُ لَا يَصِيْبُهُ إِلَّا مَا كَتَبَ اللَّهُ لَهُ إِلَّا كَانَ لَهُ مِثْلُ أَجْرِ الشَّهِيدِ » رواه البخاري .

33. Caa'isha (A.K.R.) waxay sheegtay inay mar weydiisay Nebiga (S.C.W.) waxa uu daacuunka yahay. Nabigu (S.C.W.) wuxuu u sheegay inuu daacuunku yahay ciqaab Alle ku sallido ciddii uu doono; ha yeeshee wuxuu kaga dhigay naxariis iyo kheyrr Musli-miinta. Haddii uu addoonka Alle ku dhaco daacuun oo uu iska joo-go magaaladiisa isagoo ku sabraya, kana ajar sugaya Alle, oo da-reensan in waxa ku dhici doono ay yihiin oo keliya wixii Alle u qo-ray, kaa shaki li'i wuxuu yeelan doonaa abaal iyo ajar la mid ah kan uu helayo qof shahiitay - haddii uu daacuunkaa u dhinto.'

(Bukhaari) .

٣٤ - وعن أنس رضي الله عنه قال : سمعتُ رسولَ الله ﷺ يقول : « إِنَّ اللَّهَ عَزَّ وَجَلَّ قَالَ : إِذَا آتَلَيْتُ عَبْدِي بِحَبِيبَتِي فَصَبَرَ عَوَّضَتْهُ مِنْهُمَا الْجَنَّةَ » يريد عينيه ، رواه البخاري .

34. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: " Wuxuu yiri Alle kor ahaaye: Markii aan wax gaarsiyo addoonkayga labada ugu muhimsan uguna qaalisan xub-nahiisa (yacni indhahiisa) uuna muujiyo sabar iyo adkeysi la xi-riira waxaa soo gaaray, Waxaan siiyaa janno beddelkooda."

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٥ - وعن عطاء بن أبي رباح قال : قال لي ابن عباس رضي الله عنهما : ألا أريك امرأة من أهل الجنة ؟ فقلت : بلى ، قال : هذه المرأة السوداء أتت النبي ﷺ فقالت : إني أضرع ، وإني أتكشفت ، فادع الله تعالى لي . قال : « إن شئت صبرت ولك الجنة ، وإن شئت دعوت الله تعالى أن يعافيك » فقالت : أصبر ، فقالت : إني أتكشفت فادع الله أن لا أتكشفت ، فدعأ لها . متفق عليه .

35. Caddaa bin abii Rabaax (A.K.R.) wuxuu sheegay in ibn Cabbaas ku yiri: ma ku tusaa naag ehlu jannaha ka mid ah? Wuxuu yiri: 'Haah.' Ibn Cabbaas wuxuu ii tilmaamay markaa naag madow oo yiri : naagtani waxay u timi nabiga (S.C.W.) oo tiri: 'Rasuul Allow, waxaan qabaa suuxdin, marka laygu kacana jirkeyga wuu feedmaa ee Alle ii bari. Wuxuu yiri (S.C.W.): 'haddii aad dooratid inaad sabarto adoo qaba cudurkan , waxaad leedahay janno, haddii aadse doontid Alle waa kuu baryayaa inuu ku caafiyo.' Waxay tiri: waan u dulqaadanayaa anigoo sabarka la kaashanaya, laakiinse Alle iiga bari inuusan dharka iga feydmin oo aan xoorin marka laygu kaco. waana uga baryey middaa ay codsatay.

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٦ - وعن أبي عبد الرحمن عبد الله بن مسعود رضي الله عنه قال : كَأَنِّي أَنْظُرُ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ يَحْكِي نَبِيًّا مِنَ الْأَنْبِيَاءِ صَلَّى اللَّهُ وَسَلَّمَ عَلَيْهِمْ ، ضَرْبَهُ قَوْمُهُ فَأَدَمَوْهُ وَهُوَ يَمْسَحُ الدَّمَ عَنْ وَجْهِهِ وَهُوَ يَقُولُ : « اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِقَوْمِي فَإِنَّهُمْ لَا يَعْلَمُونَ » متفق عليه .

36. Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu sheegay inuu xusuusto sida inuu u muuqdo nabigii (S.C.W.) mar uu ka sheekeynayey xaalad soo martay nabi kaasoo ay aad u dileen una dhaawaceen dadkiisii heer uu aad u dhiig baxay wuxuuna ka tirayey dhiigga wajigiisa, isagoo ducadan leh: 'Alloow qoomkayga u dembi dhaaf wax ma ay oga'e".

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٧ - وعن أبي سعيد وأبي هريرة رضي الله عنهما عن النبي ﷺ قال : « مَا يُصِيبُ الْمُسْلِمَ مِنْ نَصَبٍ وَلَا وَصَبٍ وَلَا هَمٍّ وَلَا حُزْنٍ وَلَا أَذَى وَلَا غَمٍّ ، حَتَّى الشُّوْكَةُ يُشَاكُّهَا إِلَّا كَفَّرَ اللَّهُ بِهَا مِنْ خَطَايَاهُ » متفق عليه . « وَالْوَصَبُ » : المرض .

37. Abuu Saciid iyo Abuu Hureyrah (A.K.R) waxay yiraahdeen: Nebigu (S.C.W) wuxuu yiri: " Wixii daal , cudur, hammi, murugo, dhib, iyo feker ah oo soo gaara qofka muslimka ah, xataa qodax

hadday muddo, Alle wuxuu ugu dhaafaa hadduu ku sabro dambiya-
da (yaryarka ah). (Bukhaari iyo Muslim)

٣٨ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه قال : دخلت على النبي ﷺ وهو يُوعكُ فقلت : يا رسول الله إنك تُوعكُ وِعكاً شديداً ، قال : « أَجَلٌ إِنِّي أُوَعكُ كَمَا يُوعكُ رَجُلَانِ مِنْكُم » قلتُ : ذلك أن لك أجريين ؟ قال : « أَجَلٌ ذَلِكَ كَذَلِكَ ، مَا مِنْ مُسْلِمٍ يُصِيبُهُ أذى ، شوكةٌ فما فوقها إلا كفر الله بها سيئاته ، وخطت عنه ذنوبه كما تحط الشجرة ورقها » متفق عليه .

وَ « الوَعكُ » : مَغثُ الحُمى ، وَقيلَ : الحُمى .

38. Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: ' Waxaan booqday nebiga (S.C.W) oo qandhaysan.' Markaa baan waxaan ku iri: : Nabi Alloow! qandho xoog leh baa ku haysa. Wuxuu yiri: "Runtii xoogga qandhadeyda waxay le'eg tahay mid heysa laba qofood". Waxaan iri: Waxaa taa ugu wacan laba ajar baad leedahay? wuxuu yiri (S.C.W.) : ' Waa sidaas'. Wuxuuna intaa sii raaciyey : Qofka muslimka ahi wixii gaara oo dhib leh (qodox yarba ha ahaatee) iyo wixii ka weynba, Alle wuxuu ugu cafiyaa hadduu ku sabro qaar ka mid ah dembiyadiisa (yaryar) dambiyadaasoo kaga dhaca sida caleentu geedka uga dhacdo" . (Bukhaari iyo Muslim)

٣٩ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ يُردِ الله به خيراً يُصِبْ مِنْهُ » . رواه البخاري .

وَصَبَطُوا « يُصِبْ » بفتح الصاد وكسرهما .

39. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Markii uu Alle doonayo inuu kheyr siiyo qof wuxuu ku imtixaana inuu marsiiyo xoogaa dhibaato ah". (markaa haddii uu ku sabro wuu mutaa haddii kalena may) . (Bukhaari iyo Muslim)

٤٠ - وعن أنس رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لا يَتَمَنَّيَنَّ أَحَدُكُمُ الْمَوْتَ لضرِّ أَصَابِهِ ، فَإِنْ كَانَ لَا بُدَّ فاعلًا فليقل : اللَّهُمَّ أَحِينِي مَا كَانَتِ الْحَيَاةُ خَيْرًا لِي ، وَتَوَفَّنِي إِذَا كَانَتِ الْوَفَاةُ خَيْرًا لِي » متفق عليه .

40. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkiinna yuusan jecleysan dhimashada dhibaato soo gaar-

tay awgeed. Haddii uu qofku huri waayo oo dhibaataadu meel xun ka gaadho ha yiraahdo: Alloow i noolee inta ay noloshu ii fiican tahay, inaad i oofsato baana jeclaan lahaa haddii ay geeridu ii fiican tahay.'
(Bukhaari iyo Muslim)

٤١ - وعن أبي عبد الله خباب بن الأرت رضي الله عنه قال : شكّونا إلى رسول الله ﷺ وهو متوسدٌ بردةً له في ظل الكعبة، فقلنا : ألا تستنصر لنا ألا تدعو لنا ؟ فقال : « قد كان من قبلكم يؤخذ الرجل فيحفر له في الأرض فيجعل فيها ، ثم يؤتى بالمنشار فيوضع على رأسه فيجعل نصفين ، ويمشط بأمشاط الحديد ما دون لحمه وعظمه ، ما يصده ذلك عن دينه ، والله ليتمن الله هذا الأمر حتى يسير الراكب من صنعاء إلى حضرموت لا يخاف إلا الله والذئب على غنمه ، ولكنكم تستعجلون » رواه البخاري .

وفي رواية : وهو متوسدٌ بردةً وقد لقينا من المشركين شدةً .

41. Abuu Cabdullaah Khabbaab ibn Arat (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan uga eed sheegannay nabiga (S.C.W.) dhibaataada iyo culeyska siyaadada ah ay nagu hayeen gaaladii reer Makkah. Wuxuu markaa nabigu jiifay hooska Kacbada, isagoo ka dhigtay barkin go'iisii . Waxaynu ka codsannay oon ku niri: Maxaad Alle kaalmo inooga baryi weyday? maxaad Alle hiil inoogu waydiin weyday? Wuxuu ku jawaabay : Waxaa dhici jiray Ummadihii idinka horreeyey dhexdood, in nin la soo qaban jirey, waxaana lagu ridi jiray god looga qoday dhulka , markaas baa laba looga kala dhigi jiray miinshaar madaxiisa la kor yeelay , ama hilibkiisaa firitaan looga fiiqi jiray lafahiisa shanlooyin bir ah, waxaas oo idilna ma keeni jirin inuu diintiisa ka noqdo. Waxaa hubaal ah inuu Alle kor yeeli uuna hirgelin Islaamka illaa rukuub fuushanahu uu isaga socdo Sanca iyo Xadramuud isagoo aan waxba ka baqayn Alle maahée iyo khatarta yeeyda ay u leedahay arigiisa. Laakiinse waxaad u muuqataan sida inuu idinku jiro degdeg badan.'

(Bukhaari iyo Muslim)

٤٢ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه قال : لما كان يوم حنينٍ آثر رسول الله ﷺ ناساً في القسمة ، فأعطى الأقرع بن حابس مائة من الإبل ، وأعطى عيينة بن حصن مثل ذلك ، وأعطى ناساً من أشراف العرب وآثرهم يومئذٍ في القسمة . فقال رجلٌ : وآلله إن هذه قسمة ما عدل فيها ، وما أريد فيها وجه الله ، فقلت :

وَاللَّهِ لِأَخْبِرَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ ، فَاتَيْتُهُ فَأَخْبَرْتُهُ بِمَا قَالَ ، فَتَغَيَّرَ وَجْهُهُ حَتَّى كَانَ كَالصَّرْفِ . ثُمَّ قَالَ : « فَمَنْ يَعْدِلُ إِذَا لَمْ يَعْدِلِ اللَّهُ وَرَسُولُهُ ؟ » ثُمَّ قَالَ : « يَرْحَمُ اللَّهُ مُوسَى قَدْ أُوْذِيَ بِأَكْثَرِ مِنْ هَذَا فَصَبِرَ » . فَقُلْتُ : لَا جَرَمَ لَا أَرْفَعُ إِلَيْهِ بَعْدَهَا حَدِيثًا . متفقٌ عليه .

وَقَوْلُهُ « كَالصَّرْفِ » هُوَ بِكَسْرِ الصَّادِ الْمُهْمَلَةِ : وَهُوَ صِبْغٌ أَحْمَرٌ .

42. Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Duullaankii Xuneyn kolkay aheyd, nabigu (S.C.W.) si uu u soo dumo quluubta rag Islaamka ku cusbaa buu ragga qaar u sed buuriyey qaybintii qaniimada. . Wuxuu siiyey Aqrac ibn Xaabis iyo Cuyaynah ibn Xisan keeba boqol halaad, wuxuuna muujiyey xoogaa ka soo dhoweyn ah dadka kale qaar ka mida duqaydii Carbeed. Nin baa arrintaa ka hor yimid oo yiri: Tani ma aha qaybin caddaaladi ku jirto loolana jee-do dar Alle. (markaan maqlay hadalkii ninkaa) waxaan go'aansaday inaan u sheego nabiga (S.C.W.) (hadalkaa ku tiri ku teenta ah ee lagu hadlay) Markii uu maqlay arrintan wejiga nabiga (S.C.W.) waa is beddeley oo caasaan buu noqday wuxuuna yiri: Yaa caddaalad haddaba falaya haddii ayan Alle iyo Rasuulkiisu falin.', wuxuu intaa sii raaciyey : Alloow u naxariiso Muuse (nabad korkiisa ha ahaatee) Waxaa loo geystay dhibaato intaas in ka badan, wuuse u sabray". Markaan taa maqlay baan waxaan nafteyda ku iri: Dib dambe uma sheegi doono arrin tanoo kale ah nabiga (S.C.W) oo tan ka dambeysa. (Bukhaari iyo Muslim)

٤٣ - وعن أنس رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِذَا أَرَادَ اللَّهُ بَعْبِدِهِ الْخَيْرَ عَجَّلَ لَهُ الْعُقُوبَةَ فِي الدُّنْيَا ، وَإِذَا أَرَادَ اللَّهُ بَعْبِدِهِ الشَّرَّ أَمْسَكَ عَنْهُ بِذَنْبِهِ حَتَّى يُوَافِيَ بِهِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » .

وَقَالَ النَّبِيُّ ﷺ : « إِنَّ عِظَمَ الْجَزَاءِ مَعَ عِظَمِ الْبَلَاءِ ، وَإِنَّ اللَّهَ تَعَالَى إِذَا أَحَبَّ قَوْمًا آتَبَلَاهُمْ ، فَمَنْ رَضِيَ فَلَهُ الرِّضَا ، وَمَنْ سَخِطَ فَلَهُ السُّخْطُ » . رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

43. Anas ibn Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Markuu Alle la damco kheyrr addoonkiisa, Wuxuu ku marsiiyaa xoogaa dhibaatooyin ah adduunka goor hore. Markii uu shar u qorana iyo xumaan , wuu ugu seeta dheereeyaa adduunkan, laakiinse wuxuu ka gudaan oo mudankiisa mariyaa maalinta qiyaas-

mo.' Wuxuu kaloo yiri :Oo keliya camalkii weyn baa leh abaal marin weyn, Markii uu Allena, kor ahaaye, uu qoon jeclaado waa imtixaanaa. Markaasna kii qaataa oo ka gudba imtixaanka Allaa raalli ka noqdo, kiina ku sabri waayo imtixaankaa caro Alle baa ku dhacda".
(Tirmidi)

Wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah.

٤٤ - وعن أنس رضي الله عنه قال : كان ابنُ لأبي طلحة رضي الله عنه يشتكي ، فخرج أبو طلحة ، فقبض الصبي ، فلما رجع أبو طلحة قال : ما فعل ابني ؟ قالت أم سليم وهي أم الصبي : هو أسكن ما كان ، فقربت له العشاء فتعشى ، ثم أصاب منها ، فلما فرغ قالت : واروا الصبي فلما أصبح أبو طلحة أتى رسول الله ﷺ فأخبره ، فقال : « أعرستم الليلة ؟ » قال : نعم ، قال : « اللهم بارك لهما » ، فولدت غلاماً ، فقال لي أبو طلحة : أحمله حتى تأتي به النبي ﷺ ، وبعث معه بتمرات ، فقال : « أمعه شيء ؟ » قال : نعم ، تمرات ، فأخذها النبي ﷺ فمضغها ، ثم أخذها من فيه فجعلها في في الصبي ، ثم حنكه وسماه عبد الله . متفق عليه .

وفي رواية للبخاري : قال ابنُ عيينة : فقال رجلٌ من الأنصار : فرأيت تسعة أولادٍ كلهم قد قرؤوا القرآن ، يعني من أولاد عبد الله المولود .

وفي رواية لمسلم : مات ابنُ لأبي طلحة من أم سليم فقالت لأهلها : لا تحدثوا أبا طلحة بابنه حتى أكون أنا أحدثه ، فجاء فقربت إليه عشاءً فأكل وشرب ، ثم تصنعت له أحسن ما كانت تصنع قبل ذلك ، فوقع بها . فلما أن رأت أنه قد شبع وأصاب منها قالت : يا أبا طلحة رأيت لو أن قوماً أعاروا عاريتهم أهل بيتٍ فطلبوا عاريتهم ، ألهم أن يمنعوهم ؟ قال : لا ، فقالت : فأحتسب ابنك ، قال : فعضب ، ثم قال : تركتني حتى إذا تلطخت ، ثم أخبرني بابني ؟ ! فانطلق حتى أتى رسول الله ﷺ فأخبره بما كان فقال رسول الله ﷺ : « بارك الله في ليلتكما » ، قال : فحملت . قال : وكان رسول الله ﷺ في سفرٍ وهي معه ، وكان رسول الله ﷺ إذا أتى المدينة من سفرٍ

لَا يَطْرُقُهَا طُرُقًا فَدَنُوا مِنَ الْمَدِينَةِ ، فَضَرَبَهَا الْمَخَاضُ ، فَاحْتَبَسَ عَلَيْهَا أَبُو طَلْحَةَ ، وَأَنْطَلَقَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ . قَالَ : يَقُولُ أَبُو طَلْحَةَ : إِنَّكَ لَتَعْلَمُ يَا رَبُّ أَنَّهُ يُعْجِبُنِي أَنْ أَخْرَجَ مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ إِذَا خَرَجَ وَأَدْخَلَ مَعَهُ إِذَا دَخَلَ وَقَدْ احْتَبَسْتُ بِمَا تَرَى ، تَقُولُ أُمُّ سَلِيمٍ : يَا أَبَا طَلْحَةَ مَا أَجِدُ الَّذِي كُنْتُ أَجِدُ أَنْطَلِقُ ، فَأَنْطَلِقْنَا وَضَرَبَهَا الْمَخَاضُ حِينَ قَدِمَا فَوَلَدَتْ غُلَامًا . فَقَالَتْ لِي أُمِّي : يَا أَنْسُ لَا يُرْضِعُهُ أَحَدٌ حَتَّى تَعْدُو بِهِ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، فَلَمَّا أَصْبَحَ احْتَمَلْتُهُ فَأَنْطَلَقْتُ بِهِ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، وَذَكَرَ تَمَامَ الْحَدِيثِ .

44. Anas ibn Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Abuu Dalxa wuxuu lahaa wiil xanuunsan. Abuu Dalxa ayaa dan ka yeeshay debedda oo baxay wiilkiina wuxuu dhintay intuu maqnaa. Markuu soo noqday Abuu Dalxa buu xaaskiisii weydiyey: Ka warran wiilkii? Um Sulaym, xaaskiisii, oo wiilkana hooyadiis aheyd, waxay ku jawaabtay: 'Ka xasilloon intii hore.' Dabadeed waxay u keentay cashadii oo hor dhigtay. Markii uu casheeyey buu la seexday oo u tagay. Ugu dambeyntii warkii bay shaaca ka qaadday oo ku tiri: U howl gal aasidda wiilka. Markii uu waagii beryey buu abuu Dalxa Nebigii (S.C.W.) aadey oo u sheegay xaalkii. Wuxuu weydiyey nabigu (S.C.W.) : "Xalay ma isu tagteen?" Abuu Dalxa wuxuu yiri: Haah, markaasuu nabigu (S.C.W.) yiri: "Alloow labadaba barakee" kaddib waxay dhashay wiil. Abuu Dalxaa wuxuu ka codsaday Anas inuu u qaado wiilkaa dhashay Nebga (S.C.W.) wuxuuna horay u sii qaatay dhowr xabbo oo timir ah sidoo kale. Nabigii buu u geeyey oo weydiyey: "Ma wax baa wehliya?" Wuxuu yiri: 'Haah, xabbado timir ah'. Nebigu (S.C.W.) inta xabbad timir ah qaatay oo calaliyey buu wiilkii afka u geliyey inta uu barakaynayeyna wuxuu u bixiyey Cabdullaah'. (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale oo Bukhaari leeyahay baa waxay intaa ku daraysaa: ibnu Cuyayna wuxuu yiri: Nin ansaar ka mid ahaa baa wuxuu ii sheegay inuu arkay sagaal wiil oo uu Cabdullaahigan dhalay oo mid kasta oo ka mid ah Qur'aanka dusha ka qabtay oo bartay.

Xadiis Muslim Weriyeey oo arrintan la xiriira Wuxuu leeyahay: Markii uu wiilkii Abuu Dalxa ay Ummu Sulaym u dhashay dhintay Waxay ku tiri reerkii intiisii kale: Ha u sheegina Abuu Dalxa geerida wiilka, anigaa u sheegayee. Markii uu yimid cashadii bay u keentay oo hor dhigtay isaguna cunay. Dabadeedna waxay isu soo qurxisay oo u soo labbisatay si wanaagsan ay bilic iyo qurux ka muuqata sidii ay caadadeedu aheyd, wayna isu tageen. markaa kaddib bay waxay tiri: Abuu Dalxoow, bal ka warran haddii ay qolo alaabo ka soo ammaansato qolo kale, oo ay dabadeed ammaa-

nadoodii u soo doontaan ma inay heystaan oo u diidaan bay xaq u leeyihiin? Wuxuu ku jawaabay: ' May', Markaa bay waxay ku tiri: Haddaba Rajee oo sug inuu ajar iyo abaal Alle kaa siiyo waxaa ku yimid wiilkaagii. Abuu Dalxa intuu carooday buu wuxuu yiri: Waxaad iga qarisay xaalkii wiilka oo dib dhigtay illaa aan isu tag-nay '. Markaa buu ka tegey oo uu aadey Nebigii (S.C.W.) una sheegay wixii dhacay. Wuxuu yiri : 'Allaha idiin barakeeyo ha-beenkiinna.' kaddibna uur bay yeelatay. waa dambe nabiga (S.C.W.) safar buu ahaa , Abuu Dalxa iyo xaaskiisii umm Sulaym baana la socday. Waxaa caado u ahaa nebiga (S.C.W.) in markii uu safarka ka soo noqdo uusan Madiina guuro habeen ku soo gelin. kolkay Madiina u soo dhawaadeen, fooshii xanuunkedii baa ku billaabatay. Sidaa awgeed Abuu Dalxaa ku haray nebigiina (S.C.W.) horay u sii socday. Markaa buu Abuu Dalxa Alle baryey oo wuxuu yiri: Rabbiyoow! waad og tahay sida aan u jeclahay inaan la socdo Nebiga (S.C.W.) markuu tegayo, iyo inaan la noqdo markii uu noqonayo, haddana halkaan baan ku xayiranahay howshan xaaskeyga la soo gudboonaatay awgeed, waad aragtaa.' Markuu sidaa yiri bay Umm Sulaym tiri: Abuu Dalxa, waa iga ba'ay xanuunkii ee ina wad. halkii bay ka dhaqaaqeen waxayna dhashay wiil markii ay Madiina gaareen. Anas (A.K.R.) isagoo hadalkii sii wata wuxuu yiri : waxay Hooyaday i tiri: Anasoow waa inayan cidna nuujin wiilka jeer loo geeyo nebiga (S.C.W.) berrito.' Markii uu waagii beryey baan waxaan u geeyey nebigan (S.C.W.) . Xadiiska intiisa kale wuxuu la mid yahay kaan kor ku soo xusnay.

٤٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « لَيْسَ الشَّدِيدُ بِالصُّرْعَةِ ، إِنَّمَا الشَّدِيدُ الَّذِي يَمْلِكُ نَفْسَهُ عِنْدَ الْغَضَبِ » متفقٌ عليه .

« وَالصُّرْعَةُ » بضم الصادِ وَفَتْحِ الرَّاءِ وَأَصْلُهُ عِنْدَ الْعَرَبِ مَنْ يَصْرَعُ النَّاسَ كَثِيرًا .

45. Abuu Hurayrah (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (S.C.W.) yiri: "nin adayg iyo xoog badne ma aha kaa legda ee ka xoog badiya asaaggi; ee nin adayg waxaa ah kii naftiisa celiya goorta uu caroodo) (Bukhaari iyo Muslim)

٤٦ - وعن سُلَيْمَانَ بْنِ صُرَدٍ رضي الله عنه قال : كُنْتُ جَالِسًا مَعَ النَّبِيِّ ﷺ ، وَرَجُلَانِ يَسْتَبَانِ ، وَاحِدُهُمَا قَدْ أَحْمَرَ وَجْهَهُ ، وَأَنْتَفَخَتْ أَوْدَاجُهُ . فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « إِنِّي لَأَعْلَمُ كَلِمَةً لَوْ قَالَهَا لَذَهَبَ عَنْهُ مَا يَجِدُ ، لَوْ قَالَ : أَعُوذُ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ . ذَهَبَ عَنْهُ مَا يَجِدُ » . فَقَالُوا لَهُ : إِنَّ النَّبِيَّ ﷺ قَالَ : « تَعَوَّذُ بِاللَّهِ مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ » متفقٌ عليه .

46. Sulaymaan bin Surad (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay inuu la fadhiyey nebiga (S.C.W.) Markii ay laba nin isku dhaceen oo is dhaafsadeen hadallo kulkulul. Wajiga mid labadii ka mid ah baa casaan noqday xawl mariiddadiisiina kareen. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Haddii uu oran lahaa weedh (duco) aan garanayo, way ka baabi'i lahaayeen waxa hayaa. Weedhaa waxaa weeye: Acuudu billaahi minashaydaanir rajiiim (Waxaan Alle ka magan galayaa sheydaanka dhagaxa lagu soo celiyo, ee naxariistii Alle laga fo-geeyey). Markaa bay waxay gaarsiiyeen ducadan ninkii xaalkiisu sida la sheegay ahaa. (Bukhaari iyo Muslim)

٤٧ - وعن معاذ بن أنس رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال : « مَنْ كَظَمَ غَيْظًا ، وَهُوَ قَادِرٌ عَلَى أَنْ يُنْفِذَهُ ، دَعَاهُ اللَّهُ سُبْحَانَهُ وَتَعَالَى عَلَى رُؤُوسِ الْخَلَائِقِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ حَتَّى يُخَيَّرَهُ مِنَ الْحُورِ الْعِينِ مَا شَاءَ » رواه أبو داود ، والترمذي وقال : حديث حسن .

47. Mucaad bin Anas (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in nebigu (S.C.W.) yiri: " Qofka isagoo aar goosan kara (gef laga galay darti) is qabta oo qarsada caradiisa, waxaa loo saari doonaa gees keligi wuxuuna uga yeeri Alle weyne, kor ahaaye, maxfalka maalinta qiyaamo, oo siin si uu u kala doorto xuura ceynta cad cad ee indha ha waasica ee qurxoon leh.' (Abuu Daawuud iyo Tirmidi)

Wuxuuna yiri Tirmidi waa xadiis xasan ah.

٤٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه ، أن رجلاً قال للنبي ﷺ أوصيني . قال : « لا تَغْضَبْ » فرَّدَ مراراً ، قال : « لا تَغْضَبْ » رواه البخاري .

48. Abuu Hurayrah (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in uu nin Nebiga (S.C.W.) ka codsaday inuu u dardaarmo. Nebigu (S.C.W.) wuxuu kula dardaarmay: " Yaaney kaa xoog badin caradu". Ninkii baa ku celceliyey codsigiisii dhowr jeer . Nebiguna mar waliba wuxuu ku lahaa: Yaaney kaa xoog badin caradu." (Bukhaari iyo Muslim)

٤٩ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَا يَزَالُ الْبَلَاءُ بِالْمُؤْمِنِ وَالْمُؤْمِنَةِ فِي نَفْسِهِ وَوَلَدِهِ وَمَالِهِ حَتَّى يَلْقَى اللَّهَ تَعَالَى وَمَا عَلَيْهِ خَطِيئَةٌ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

49. Abuu Hurayrah (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (S.C.W.) yiri: " Qofka muslimka ahi lab ama dheddig kuu ahaadaba wuxuu u bandhignaanaayaa imtixaanno iyo dhibaatooyin (adduunkan) soo gaari naftiisa, ilmahiisa, iyo maalkiisaba jeer uu Alle kala kulmo (maalinta qiyaamo) isagoon wax dembi ah laheyn.' (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah oo saxiix ah.

٥٠ - وعن ابن عباس رضي الله عنهما قال : قَدِمَ عُمَيْرُ بْنُ حِصْنٍ ، فَتَزَلَّ عَلَيَّ ابْنُ أَخِيهِ الْحُرُّ بْنُ قَيْسٍ ، وَكَانَ مِنَ النَّفَرِ الَّذِينَ يُدْنِيهِمْ عُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ ، وَكَانَ الْقُرَاءُ أَصْحَابَ مَجْلِسِ عُمَرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ وَمُشَاوَرَتِهِ كَهَوْلًا كَانُوا أَوْشُبَانًا ، فَقَالَ عُمَيْرُ لِابْنِ أَخِيهِ : يَا ابْنَ أَخِي لَكَ وَجْهٌ عِنْدَ هَذَا الْأَمِيرِ فَاسْتَأْذِنْ لِي عَلَيْهِ ، فَاسْتَأْذَنَ فَأَذِنَ لَهُ عُمَرُ . فَلَمَّا دَخَلَ قَالَ : هِيَ يَا ابْنَ الْخَطَّابِ ، فَوَاللَّهِ مَا تُعْطِينَا الْجَزَلَ وَلَا تَحْكُمُ فِينَا بِالْعَدْلِ . فَغَضِبَ عُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ حَتَّى هَمَّ أَنْ يُوقِعَ بِهِ . فَقَالَ لَهُ الْحُرُّ : يَا أَمِيرَ الْمُؤْمِنِينَ إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى قَالَ لِنَبِيِّهِ ﷺ : ﴿ خُذِ الْعَفْوَ وَأْمُرْ بِالْعُرْفِ وَأَعْرِضْ عَنِ الْجَاهِلِينَ ﴾ [الأعراف : ١٩٩] وَإِنَّ هَذَا مِنَ الْجَاهِلِينَ ، وَاللَّهِ مَا جَاوَزَهَا عُمَرُ حِينَ تَلَاهَا ، وَكَانَ وَقَافًا عِنْدَ كِتَابِ اللَّهِ تَعَالَى . رواه البخاري .

50. Cabdullaah Ibn Cabbaaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Cuyaynah ibn Xisn baa Madiina yimid, Wuxuuna ku soo degey wiilkii walaalkiis Xurr ibn Qays, oo ka mid ahaa xaafidiintii Cumar uu soo dhaway-san jirey oo la taliyayaashiisa ka mid ahaa. Cuyaynah Wuxuu ku yiri Xurr: adeer, adaa weji ku leh amiirka'e, idan ii weydii aan ku arko. Sidii buu yeelay Xurr oo wuxuu u weydiiyey Cumar idankii, Cumarna waa uu u idmay. Markii uu Cuyaynah uu u soo galay Cumar ayuu wuxuu ku yiri: ina Khaddaaboow, nama siisid wax badan, noolamana dhaqantid si caddaalad iyo sinnaan leh . Cumar inta xanaaqey buu damcay inuu waxyeelo, markaa buu Xurr wuxuu yiri: amiirul-mu'iniinoow Alle kor ahaaye wuxuu Nebigiisa (S.C.W.) ku yiri: ' Cafiska caadeyso (Muxammadow) , farna samaanta iyo isu naxariisashada, isagana jeenso jaahiliinta. (Suuradda al-Acraaf: Aayadda 199). Kanuna (Cuyaynah) wuxuu ka mid yahay jaahiliinta.' Markii uu akhriyey Xurr aayaddan buu Cumar degay oo kama nuuxsan kursigiisii . Wuxuu mar walba ahaa mid ku adag oo raaca Kitaabka Alle, oo xudduuddiisa ku istaaga, oo dhowra sinnba aan u dhaafin.' (Bukhaari iyo Muslim)

٥١ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « إِنَّهَا سَتَكُونُ بَعْدِي
 أَثَرَةٌ وَأُمُورٌ تُنْكَرُونَهَا ! » قَالُوا : يَا رَسُولَ اللَّهِ فَمَا تَأْمُرُنَا ؟ قَالَ : « تُؤَدُّونَ الْحَقَّ
 الَّذِي عَلَيْكُمْ ، وَتَسْأَلُونَ اللَّهَ الَّذِي لَكُمْ » متفق عليه .
 « وَالْأَثَرَةُ » : الْإِنْفِرَادُ بِالشَّيْءِ عَمَّنْ لَهُ فِيهِ حَقٌّ .

51. Cabdullaah Ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.)
 wuxuu yiri: ' Dabaday waxaa dhici doona eex waxaadna arki doon-
 taan waxyaalo aydan raalli ka noqon doonin. Nin saxaabi ah baa
 weydiyey: Rasuul Alloow, maxaad na faraysaa inaan falno hadday
 arrimahaasoo kale dhacaan? Wuxuu yiri : Ka soo baxa Waajibka
 iyo xilalka idin saaran, Allana weydiista deeqda iyo kheyriiisa. '
 (Bukhaari iyo Muslim)

٥٢ - وعن أبي يحيى أسيد بن حُضَيْرٍ رضي الله عنه أن رجلاً من الأنصار قال : يَا
 رَسُولَ اللَّهِ أَلَا تَسْتَعْمِلُنِي كَمَا اسْتَعْمَلْتَ فَلَانًا فَقَالَ : « إِنَّكُمْ سَتَلْقَوْنَ بَعْدِي أَثَرَةً
 فَاصْبِرُوا حَتَّى تَلْقَوْنِي عَلَى الْحَوْضِ » متفق عليه .

« وَأُسَيْدٌ » بِضَمِّ الهمزة . « وَحُضَيْرٌ » : بِحَاءٍ مَهْمَلَةٍ مضمومة وضاد معجمة
 مفتوحة والله أعلم .

52. Abuu Yaxya Usaid ibn Xuzayr (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin an-
 saarta ka mid ah baa yiri: Rasuul Alloow maad shaqo i siisid wa-
 naagsan oo agaasime iga dhigtid, sida aad ugu magacowdayba sha-
 qo hebel iyo hebel? Wuxuu (S.C.W.) ku jawaabay: " Waxaad arki
 doontaan eex dabaday ee sabra inta aad igula kulmeysaan xawdka
 Kawsar ee jannada dhexdeeda ah." (Bukhaari iyo Muslim)

٥٣ - وعن أبي إبراهيم عبد الله بن أبي أوفى رضي الله عنهما أن رسول الله ﷺ
 فِي بَعْضِ أَيَّامِهِ الَّتِي لَقِيَ فِيهَا الْعَدُوَّ ، أَنْتَظَرَ حَتَّى إِذَا مَالَتِ الشَّمْسُ قَامَ فِيهِمْ
 فَقَالَ : « يَا أَيُّهَا النَّاسُ لَا تَتَمَنَّوْا لِقَاءَ الْعَدُوِّ ، وَأَسْأَلُوا اللَّهَ الْعَافِيَةَ ، فَإِذَا لَقَيْتُمُوهُمْ
 فَاصْبِرُوا ، وَأَعْلَمُوا أَنَّ الْجَنَّةَ تَحْتَ ظِلَالِ السُّيُوفِ » .

ثُمَّ قَالَ النَّبِيُّ ﷺ : « اللَّهُمَّ مُنْزِلَ الْكِتَابِ ، وَمُجْرِي السَّحَابِ ، وَهَازِمَ
 الْأَحْزَابِ ، اهْزِمْهُمْ وَأَنْصِرْنَا عَلَيْهِمْ » متفق عليه .

53. Cabdullaah ibn abii Awfaa (A.K.R.) wuxuu sheegay in nebigu (S.C.W.) uu mar duullaan ahaa, intuu sugayey inay qorraxdu dhacdo, buu istaagey oo khudbad u jeediyey asxaabtiisii : Wuxuu yiri : Ha kicinnina dagaal oo weydiista Alle nabad iyo ammaan, markiise aad madaxa isla gashaan cadowga, adkeysta oo sabra, xusuusnaadana inay jannadii taal hooska seefaha. Kaddibna Alle buu baryey isagoo leh: Alloow, soo dejiyey kitaabka, , socodsiiyey da-ruuraha, jebiyey kooxihii isa soo baheystay ee gaalada ahaa, jebi gaalada oo nooga hiilli ". (Bukhaari iyo Muslim)

٤ - باب الصدق

C UTUBKA 4

RUNTA IYO MIRAHEEDA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى: ﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَكُونُوا مَعَ الصَّادِقِينَ ﴾ [التوبة : ١١٩]

13. ' Kuwa xaqa rumeeyoow! dhowra xilka iyo waajibkuu Alle idin saaray, oo ka mid ahaada run sheegeyaasha.' Suuradda at-Towba: Aayadda 119.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaye:

وقال تعالى: ﴿ وَالصَّادِقِينَ وَالصَّادِقَاتِ ﴾ [الأحزاب : ٣٥]

14. ' Ragga run sheegayaasha ah ee isu dhiiba Alle, iyo dumarka run sheegooyinka ah (liibaan baa u ahaatay.) Al-Axzaab: 35

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى: ﴿ فَلَوْ صَدَقُوا اللَّهَ لَكَانَ خَيْرًا لَهُمْ ﴾ [محمد : ٢١] .

15. " Daacad iyo hadal san . Dabadeed, marka Arrin la go'aansho, Haddii ay daacad u yihiin Alle waxay u roon tahay iyaga. ' Suuradda Muxammad: Aayadda 21

٥٤ - فالأول : عن ابن مسعود رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إِنَّ الصُّدْقَ يَهْدِي إِلَى الْبِرِّ ، وَإِنَّ الْبِرَّ يَهْدِي إِلَى الْجَنَّةِ ، وَإِنَّ الرَّجُلَ لَيَصْدُقُ حَتَّى يُكْتَبَ عِنْدَ

اللَّهِ صِدْقًا ، وَإِنَّ الْكَذِبَ يَهْدِي إِلَى الْفُجُورِ ، وَإِنَّ الْفُجُورَ يَهْدِي إِلَى النَّارِ ، وَإِنَّ
الرَّجُلَ لَيَكْذِبُ حَتَّى يُكْتَبَ عِنْدَ اللَّهِ كَذَابًا « متفق عليه .

54. Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in nebigu (S.C.W.) yiri: Runtu waxay kugu hoggaamisaa dhabbaha samaanta iyo falalka suubban. Samaan falidduna waxay xaartaa jidka uu qofku u mari lahaa jannada. Markii uu qofku caadeystana inuu ku hadlo run waxaa Alle agti looga magacaabaa runlow. Beentuna waxay kugu hoggaamisaa xumaanta, xumaantuna waxay kugu hoggaamisaa wax xille falid iyo faajirmimo. Markii uu qofku been caadeystana waxaa Alle agti looga magacaabaa Beenlow".

(Bukhaari iyo Muslim)

٥٥ - الثاني : عن أبي محمد الحسن بن علي بن أبي طالب رضي الله عنهما قال : حَفِظْتُ مِنْ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ : « دَعُ مَا يَرِيْبُكَ إِلَى مَا لَا يَرِيْبُكَ ؛ فَإِنَّ الصِّدْقَ طُمَأْنِينَةٌ ، وَالْكَذِبَ رِيْبَةٌ » رواه الترمذي وقال : حديث صحيح .

قوله : « يَرِيْبُكَ » هو بفتح الياء وضمها : ومعناه أترك ما تشكُّ في حِلِّهِ وَاعْدِلْ إِلَى مَا لَا تَشْكُ فِيهِ .

55. Abuu Muxammad al-Xasan ibn Cali (A.K.R.) wuxuu sheegay inuu ka bartay ereyadan soo socda nabiga (S.C.W.) : Ka tag wixii aad ka shaki santahay, oo raac wixii aan ku jirin laheynta shaki. Maxaa yeelay runtu waa raaxo qalbiga uu ku dego, beentuna waa welwel iyo welbahaar ."

(Tirmidi)

Wuxuuna yiri waa xadiis saxiix ah.

٥٦ - الثالث : عن أبي سفيان صخر بن حرب رضي الله عنه في حديثه الطويل في قصة هِرْقَل ، قال هِرْقَلُ : فَمَاذَا يَأْمُرُكُمْ - يعني النبي ﷺ - قال أبو سفيان قلت : يقول : « أَعْبُدُوا اللَّهَ وَحْدَهُ لَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا ، وَأَتْرَكُوا مَا يَقُولُ آبَاؤُكُمْ » وَيَأْمُرُنَا بِالصَّلَاةِ ، وَالصِّدْقِ ، وَالْعَفَافِ ، وَالصَّلَاةِ . متفق عليه .

56. Abuu Sufyaan Sakhar bin Xarb (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay oo ka mid ahaa xadiiskiisii dheeraa oo uu Hiraqal kaga warramayey in Hiraqal uu weydiiyey: Muxuu isagu (wuxuu ula jeedaa nabiga (S.C.W.) idin faraa, Abuu Sufyaanna wuxuu yiri: Wuxuu ina faraa: Caabuda Alle oo keliya waxbana ha u shariig yeelina, oo ka taga wixii ay aabbayaashiin oran jireen, Wuxuu kaloo na faraa salaadda, run sheegidda, dhowrsanaan iyo xoojinta xiriirka qaraabada aad ku xoojisid kaalmeynta kuwaa kuu dhow oo qaraabada kula ah."

(Bukhaari Iyo Muslim)

٥٧ - الرابع : عن أبي ثابت ، وقيل : أبي سعيد ، وقيل أبي الوليد ، سهل بن حنيف وهو بدرى رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال : « مَنْ سَأَلَ اللَّهَ تَعَالَى الشَّهَادَةَ بِصِدْقٍ بَلَغَهُ مَنَازِلَ الشُّهَدَاءِ وَإِنْ مَاتَ عَلَى فِرَاشِهِ » رواه مسلم .

57. Sahal bin Xunayf (A.K.R.) oo raggii Bader ka qayb galay ka mid ahaa wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofkii Alle ka barya si kal iyo laab ah shahiidnimo, wuxuu Alle gaarsiiyaa oo u qoraa darajada shahiidyada, xitaa hadduu ku dhinto sariirtiisa ."
(Bukhaari iyo Muslim)

٥٨ - الخامس : عن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « غَزَا نَبِيٌّ مِنَ الْأَنْبِيَاءِ صَلَوَاتُ اللَّهِ وَسَلَامُهُ عَلَيْهِمْ فَقَالَ لِقَوْمِهِ : لَا يَتَّبِعَنِي رَجُلٌ مَلَكَ بُضْعَ أَمْرَةٍ وَهُوَ يُرِيدُ أَنْ يَبْنِي بِهَا وَلَمَّا يَبْنِي بِهَا ، وَلَا أَحَدٌ بَنَى بُيُوتًا لَمْ يَرْفَعْ سُقُوفَهَا ، وَلَا أَحَدٌ اشْتَرَى عَنَمًا أَوْ خِلْفَاتٍ وَهُوَ يَتَّظَرُ أَوْلَادَهَا . فَغَزَا فَدَنَا مِنَ الْقَرْيَةِ صَلَاةَ الْعَصْرِ أَوْ قَرِيبًا مِنْ ذَلِكَ ، فَقَالَ لِلشَّمْسِ : إِنَّكَ مَأْمُورَةٌ وَأَنَا مَأْمُورٌ ، اللَّهُمَّ أَحْسِنِهَا عَلَيْنَا ، فَحَبِسَتْ حَتَّى فَتَحَ اللَّهُ عَلَيْهِ ، فَجَمَعَ الْغَنَائِمَ فَجَاءَتْ - يَعْنِي النَّارَ - لِتَأْكُلَهَا فَلَمْ تَطْعَمْهَا ، فَقَالَ : إِنَّ فِيكُمْ غُلُولًا ، فَلْيَبَايِعْنِي مِنْ كُلِّ قَبِيلَةٍ رَجُلٌ ، فَلَزِقَتْ يَدُ رَجُلٍ بِيَدِهِ فَقَالَ : فِيكُمْ الْغُلُولُ فَلْتَبَايِعْنِي قَبِيلَتِكَ ، فَلَزِقَتْ يَدُ رَجُلَيْنِ أَوْ ثَلَاثَةَ يَدَيْهِ فَقَالَ : فِيكُمْ الْغُلُولُ فَجَاؤُوا بِرَأْسٍ مِثْلِ رَأْسِ بَقْرَةٍ مِنَ الذَّهَبِ ، فَوَضَعَهَا فَجَاءَتْ النَّارُ فَأَكَلَتْهَا . فَلَمْ تَحُلْ الْغَنَائِمُ لِأَحَدٍ قَبْلَنَا ، ثُمَّ أَحَلَّ اللَّهُ لَنَا الْغَنَائِمَ لَمَّا رَأَى ضَعْفَنَا وَعَجْزَنَا فَأَحَلَّهَا لَنَا » متفق عليه .

« الْخِلْفَاتُ » بفتح الخاء المعجمة وكسر اللام : جمع خلفة وهي الناقة

الحامل .

58. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: (Nebi nebiyadii hore ka mid ahaa goor uu jihaad u baxayey (dagaal loola jeedo kor yeelidda kelimadda Alle) wuxuu ka dhex yiri qoomkiisii nin naag mehersadey oo aan weli dhisan ama nin dhisay gidaarro guri aanse weli dedin oo kor u bannaan yihiin ama nin soo iibsaday ari ama halo riman oo sugaya dhalmada ilmahooda midkoodna waa inuusan i soo raacin. . Dabadeed wuxuu u kici - timay magaaladii, uu u socday. Wuxuuna gaaray goor casar gaab ah, markaa buu wuxuu ku yiri qorraxdii : Waxaad ku socotaa amar-ka Alle, aniguna waxaan ku socdaa oo la ii diray dagaal dar Alle

ah. Markaa buu Alle baryey oo yiri: Alloow meesheeda qorraxda noogu celi; waa ay istaagtey ilaa uu Alle siiyey guushii oo uu beeshii qabsaday. Markaa kaddib waxaa la isu keenay xoolahii laga helay dagaalka si loo gubo qurbaan ahaan. Dabkiise waa uu gubi waayey. Dabadeed wuxuu yiri : Qaar idin ka mid ah baa qarsday qayb ka mid xoolahii dagaalka laga helay ee qabiilo walba nin ha i gacan qaado oo cahdi hor leh ha igula galo kor yeelidda diinta. si-dii baa la yeelay, nin baa markaa gacantiisii ku dhegtey wuxuuna ku yiri: Rag qabiildaada ah baa qarsday wax ka mid ah qaniimadii dagaalka, ee qof qof ragga qabiilkiinna ah ha ii gacan qaadeen. labo ilaa seddex nin bay gacantoodii gacantiisa ku dhegtay. wuxuuna ku yiri: idinka weeyaan ragga dambiilayaasha ku ah qarsashada qaniimada. Markaa bay waxay keeneen madax aad madax lo'aad mooddo oo dahab ah, waxaana lagu daray qaniimadii iyo xoolahii dagaalka lagu soo furtay dabkiina waa gubay. Wuxuu nabigu intaa raaciyey: Qaniimadu ama xoolaha dagaalka jihaadka ah lagu helo xalaal uma ahayn wixii inaka horreeyey. Allaa inoo xalaaleeyey, markuu arkay tabar yarida iyo dhaqaalo xumideenna."

(Bukhaari iyo Muslim)

٥٩ - السادس : عن أبي خالد حكيم بن حزام رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « البَّيْعَانِ بِالْخِيَارِ مَا لَمْ يَتَفَرَّقَا ، فَإِنْ صَدَقَا وَبَيْنَا بُورِكٌ لَهُمَا فِي بَيْعِهِمَا ، وَإِنْ كَتَمَا وَكَذَبَا مُحِقَتْ بَرَكَةُ بَيْعِهِمَا » متفقٌ عليه .

59. Xakiim ibn Xizaam (A.K.R.) wuxuu yiri: nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Heshiika wax kala gadasho waa laga noqon karaa inta ayan kala tegin labada wax kala gadanaysa. Haddii ay sheegaanna runta oo ay caddeeyaan wax waliba oo la xiriira badeecada iyo iibkooda, waa loo barakeeyaa labadaba; haddii ayse been ku hadlaan oo ay qariyaan waxaa loo baahan yahay in la caddeeyo oo daaha laga qaado , barakada iibkaasi waa laga qaadaa.'

(Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah:

Runtu guud ahaan waxaa loola jeedaa inaad ku hadasho run, Islaam ahaan runta waa wax macno ballaaran, oo waxaa soo galaya ka run sheeggidda camal kasta oo aad qabaneyso. Qofkuna waxay hadalladiisu iyo camalkiisu toosayaan markii ay is waafaqaan waxa uu ku hadlayo iyo waxa uu uurka ku heysto, taa baana la yiraa run. Imaam Ghazaali wuxuu sheegay lix nooc oo ay runtu u kala qayb-santo:

1. inaad run ku hadasho;
2. inay niyaddaadu run iyo daacad tahay.
3. inay run kaa tahay guddoonka iyo go'aanka aad qaadaneysa.
4. inaad si run iyo daacadnimo ah aad u fuliso go'aankaas.
5. inaad si run iyo daacad ah howsha aad qabaneysa u gudato.
6. inay run iyo dhab ka ahaato diinta iyo iimaanka aad sheeganeysa. oo qowl iyo ficilb aad u muujiso.

Waa la arki inay runtu tahay aasaaska samaan falidda. Qofka aan runlowga aheyn, wuxuu ku heysanayaa qalbigiisa nooc kasta oo xumaan ah; qofkase runlowga ah wuxuu awood u yeelanayaa inuu gaaro samaan iyo kheyir waliba si fudud oo aan dhib laheyn. Qofka tilmaamaha wanaagsan aan kor ku soo xusnay leh waxaa la oran karaa waa qof runlow ah.

٥ - باب المراقبة

CUTUBKA 5

DAALACASHADA ALLE IYO U JEEDKIISA ADDOOMAHA

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى: ﴿الَّذِي يَرَاكَ حِينَ تَقُومُ وَتَقْلُبُكَ فِي السَّاجِدِينَ﴾
[الشعراء : ٢١٩]

16. " Waa kan ku arka marka aad kacayso iyo marka aad wax ka sujuudaysaba" Suuradda Ash-Shucaraa: Aayadaha: 218 - 219.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى: ﴿وَهُوَ مَعَكُمْ أَيْنَ مَا كُنْتُمْ﴾ [الحديد : ٤]

17. " Waa uu idinla joogaa (macnaha idinka warqabaa Ilaahay) meel aad joogtaanba". Suuradda al-Xadiid : Aayadda 4

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى: ﴿إِنَّ اللَّهَ لَا يَخْفَىٰ عَلَيْهِ شَيْءٌ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي السَّمَاءِ﴾
[آل عمران : ٥]

18. " Ma jiraan wax Alle ka qarsoon oo cirka iyo dhulka ku sugan". Suuradda aali-Cimraan: Aayadda 5

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ إِنَّ رَبَّكَ لَبِالْمِرْصَادِ ﴾ [الفجر : ١٤]

19. " Rabbigaa kaabiguu joogaa (oo u darban yahay abaal marinta).
Suuradda al-Fajar: Aayadda 14.

Wuxuu kaloo yiri sare ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ يَعْلَمُ خَائِنَةَ الْأَعْيُنِ وَمَا تُخْفِي الصُّدُورُ ﴾ [غافر : ١٩]

20. " Wuxuu og yahay Rabbil Cisa Wajalaala wixii ay ishu khiya-
aanto iyo wixi ay laabtu qarinarsaba" Suuradda Qaafir: Aayadda
19.

٦. - فالأول : عن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال : بَيْنَمَا نَحْنُ جُلُوسٌ عِنْدَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ذَاتَ يَوْمٍ ، إِذْ طَلَعَ عَلَيْنَا رَجُلٌ شَدِيدُ بَيَاضِ الثِّيَابِ ، شَدِيدُ سَوَادِ الشَّعْرِ ، لَا يُرَى عَلَيْهِ أَثَرُ السَّفَرِ ، وَلَا يَعْرِفُهُ مِنَّا أَحَدٌ ، حَتَّى جَلَسَ إِلَى النَّبِيِّ ﷺ ، فَأَسْنَدَ رُكْبَتَيْهِ إِلَى رُكْبَتَيْهِ ، وَوَضَعَ كَفَّيْهِ عَلَى فَخْذَيْهِ وَقَالَ : يَا مُحَمَّدُ أَخْبِرْنِي عَنِ الْإِسْلَامِ ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « الْإِسْلَامُ أَنْ تَشْهَدَ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ وَتُقِيمَ الصَّلَاةَ ، وَتُؤْتِيَ الزَّكَاةَ ، وَتَصُومَ رَمَضَانَ ، وَتَحُجَّ الْبَيْتَ إِنْ آسَظَعْتَ إِلَيْهِ سَبِيلًا » . قَالَ : صَدَقْتَ . فَعَجَبْنَا لَهُ يَسْأَلُهُ وَيُصَدِّقُهُ^(٣) ، قَالَ : فَأَخْبِرْنِي عَنِ الْإِيمَانِ . قَالَ : « أَنْ تُؤْمِنَ بِاللَّهِ ، وَمَلَائِكَتِهِ ، وَكُتُبِهِ ، وَرُسُلِهِ ، وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ، وَتُؤْمِنَ بِالْقَدْرِ خَيْرِهِ وَشَرِّهِ » . قَالَ : صَدَقْتَ . قَالَ : فَأَخْبِرْنِي عَنِ الْإِحْسَانِ . قَالَ : « أَنْ تَعْبُدَ اللَّهَ كَأَنَّكَ تَرَاهُ فَإِنْ لَمْ تَكُنْ تَرَاهُ فَإِنَّهُ يَرَاكَ » . قَالَ : فَأَخْبِرْنِي عَنِ السَّاعَةِ . قَالَ : « مَا الْمَسْئُولُ عَنْهَا بِأَعْلَمَ مِنَ السَّائِلِ » . قَالَ : فَأَخْبِرْنِي عَنِ أَمَارَاتِهَا . قَالَ : « أَنْ تَلِدَ الْأُمَةُ رَبَّتَهَا ، وَأَنْ تَرَى الْحُفَاةَ الْعُرَاةَ الْعَالَةَ رِعَاءَ الشَّاءِ يَتَطَاوَلُونَ فِي الْبُنْيَانِ » . ثُمَّ أَنْطَلَقَ فَلَبِثْتُ مَلِيًّا ثُمَّ قَالَ : « يَا عُمَرُ أَتَدْرِي مِنَ السَّائِلِ ؟ » قُلْتُ : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ . قَالَ : « فَإِنَّهُ جِبْرِيلُ أَتَاكُمْ يَعْلَمُكُمْ دِينَكُمْ » . رواه مسلم .

ومعنى « تَلِدُ الْأُمَّةُ رَبَّتَهَا » أَي سَيِّدَتَهَا ؛ ومعناه : أن تَكْثُرَ السَّرَارِي حَتَّى تَلِدَ الْأُمَّةَ السَّرِيَّةَ بِنْتًا لِسَيِّدِهَا وَبِنْتُ السَّيِّدِ فِي مَعْنَى السَّيِّدِ وَقِيلَ غَيْرُ ذَلِكَ . وَ« الْعَالَةُ » : الْفُقَرَاءُ . وَقَوْلُهُ « مَلِيًّا » أَي زَمَانًا طَوِيلًا وَكَانَ ذَلِكَ ثَلَاثًا .

60. Cumar bin Khaddaab (A.K.R.) wuxuu yiri: " Annagoo maalin la fadhinna nebiga (S.C.W.) si kedis ah nin baa soo muuqday kaa-soo ay dharkiisu ahaayeen kuwa aad u cad. timahiisuna ay aad u madoobaayeen, ayanna ka muuqan wax astaaan safar ah, cid gara-neysana ayan nagu jirin. Wuxuu la fariistay nebiga (S.C.W.) oo jilbaha jilbaha u saaray, bawdyahiisana calaacalahiisa saartay , oo yiri: Muxammodoow waa maxay Islaamku? Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Islaam Waxaa weeye inaad qirto ilaah xaq ah aan Alle ahayni inuusan jirin iyo in Muxammad yahay Rasuulkiisii, iyo inaad Salaadda aad oogtid, Sekadana aad bixisid (oo ah xaqa sa-bookka iyo baahnaha) , Bisha Ramadaanna soontid, soona xajidid haddii aad kartid (mar nolosha) . Ninkii wuxuu yiri: waa runtaa. Waxaan markaas la yaabnay inuu wax su'aalayo (sida qofaan wax garaneyn) waa runtaana leeyahay oo wuxuu sugayaa inay jawaabtu sax tahay.

Dabadeedna wuxuu yiri: Wax iiga sheeg Iimaanka?Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waa inaad rumaysaa Alle iyo malaa'igtiisa iyo rusushiisa iyo kutubtiisa, iyo maalinta dambeysa ee aakhiro, iyo qaddarka khayrkiisa iyo sharkiisaba. Ninkii wuxuu yiri: waa runtaa ee haddaba ixsaankana ii sheeg?.' Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: waa inaad Alle u caabuddid sidii adigoo u jeeda, illeen haddii aadan adigu u jeedin isagaa kuu jeeda'e. Ninkii wuxuu yiri: Maalinta qiyaamo goortay tahay ii sheeg. Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuxuu yiri: taa iskuma dhaanno, oo cid og ma jirto (goortay qiyaamuhu dhici) Alle maahee. Ninkii wuxuu yiri: waa hagaag, ee wax iiga sheeg calaamooyinka maalinta qiyaamaha iyo astaamaha muujinaya inay soo dhowdahay. Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: waa inay addoontu wax u dhasho sayidkeeda, oo aad aragto ari jirtii cagaha caddayd ee qaawanayd ee cayrta ahayd oo dhismayaal ku tartamaysa. Dabadeed waa uu tegey ninkii, cabbaar baana halkii joogay. Nebigu (S.C.W.) wuxuu igu yiri :Cumarooow ma garaneysey ninkii wax Su'aalayey ciduu ahaa? Waxaan iri: Alle iyo Rasuulkiisa baa iiga cilmi roon. Markaa buu wuxuu yiri: wuxuu ahaa Jabriil oo idiinku yimid inuu idin baro mabaadida iyo qodobbada aasaaska u ah diintiinna ."

Fiiro gaar ah: Imaam Nawawi wuxuu yiri inay addoonta wax u dhasho sayidkeeda iyo qofka iska leh waxaa loola jeedaa inay badan doonaan dumarka addoomaha ah ee ku hoos nool boqoradda iyo suldaannada kuwaasoo laga yaabo inay carruur u dhalaan sayidkooda ama carruurtiisa oo markaa caado iyo dhaqan ahaan loo yi-

raahdo waa reer boqor, halka ay hooyadood weli tahay addoon ku-waa ay dhashay ka amar qaadaneysa; ama waxaa loola jeedi karaa inay carruurta ay ku caasin doonaan waalidkood carruurta oo hooyooyinkood ula dhaqmi doona sida ay yihiin booyoosoyin ama addoomo guriga u jooga.

٦١ - الثاني : عن أبي ذر جُنْدُبِ بْنِ جُنَادَةَ وَأَبِي عَبْدِ الرَّحْمَنِ مَعَاذِ بْنِ جَبَلٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا عَنْ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ قَالَ : « أَتَى اللَّهَ حَيْثَمَا كُنْتُ وَأَتْبَعَ السَّيِّئَةَ الْحَسَنَةَ تَمَحُّهَا ، وَخَالَقِيَ النَّاسَ بِخُلُقِي حَسَنٍ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

61. Abuu Darr iyo Mucaad ibn Jabal (A.K.R.) waxay yiraahdeen: Nebigu (S.C.W) wuxuu yiri: "Alle ka cabso, meel aad joogtidba, samaanna ka daba gee xumaantii kaa dhacda waa ay dhaqaysaaye, kulana dhaqan dabci wanaagsan dadka". (Tirmidi)
Wuxuuna yiri waa xadiis cuskasho iyo sanad wanaagsan leh)

٦٢ - الثالث : عن ابن عباس رضي الله عنهما قال : كنت خلف النبي ﷺ يوماً فقال : « يَا غُلَامُ إِنِّي أَعَلِّمُكَ كَلِمَاتٍ : أَحْفَظِ اللَّهَ يَحْفَظْكَ ، أَحْفَظِ اللَّهَ تَجِدْهُ تُجَاهَكَ ، إِذَا سَأَلْتَ فَاسْأَلِ اللَّهَ ، وَإِذَا اسْتَعْنَيْتَ فَاسْتَعِنْ بِاللَّهِ ، وَاعْلَمْ : أَنَّ الْأُمَّةَ لَوِ اجْتَمَعَتْ عَلَى أَنْ يَنْفَعُوكَ بِشَيْءٍ ، لَمْ يَنْفَعُوكَ إِلَّا بِشَيْءٍ قَدْ كَتَبَهُ اللَّهُ لَكَ ، وَإِنْ اجْتَمَعُوا عَلَى أَنْ يَضُرُّوكَ بِشَيْءٍ لَمْ يَضُرُّوكَ إِلَّا بِشَيْءٍ قَدْ كَتَبَهُ اللَّهُ عَلَيْكَ ، رُفِعَتِ الْأَقْلَامُ وَجَفَّتِ الصُّحُفُ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

وفي رواية غير الترمذي : « أَحْفَظِ اللَّهَ تَجِدْهُ أَمَامَكَ ، تَعْرِفْ إِلَى اللَّهِ فِي الرَّخَاءِ يَعْرِفَكَ فِي الشَّدَّةِ ، وَاعْلَمْ : أَنَّ مَا أَخْطَأَكَ لَمْ يَكُنْ لِيُصِيبِكَ ، وَمَا أَصَابَكَ لَمْ يَكُنْ لِيُخْطِئَكَ ، وَاعْلَمْ : أَنَّ النَّصْرَ مَعَ الصَّبْرِ ، وَأَنَّ الْفَرْجَ مَعَ الْكَرْبِ ، وَأَنَّ مَعَ الْعُسْرِ يُسْرًا » .

62. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu yiri: anigoo maalin Nebiga (S.C.W.) daabbad (xoolo ah) la saaran gadaashina fadhiya buu Wuxuu yiri: "Maandhow, waxaan doonayaa inaan ku baro kelmedo ee iga xafid kelmadahan: Taxaddar oo fuli Alle wuxuu ku amray oo si wanaagsan u ilaali. . Alle ha iskakaa xilsaaro oo ha ku dhowro'e. Waana inaad dhowrtaa xuquuqdiisa, Waxaad mar walba ka heli doontaa la jirkaaga; haddii aad wax dooneyso, Alle weydiiso, mar-kii aad kaalmo dooneysidna, ka dalab Alle oo keliya kaalmo.

Waxaadna ogaataa haddii ay ummaddu isugu tagto inay wax ku tar-to, kuma tari karto wax Alle kuu qoray maahee, haddii ay isugu tagto inay wax ku yeeshana kuma yeeli karto wax Alle kuu qoray maahee. Qalinkii waa la joojiyey, wixii lagu qorayna buugga qad-darka iyo waraaqihiisiina waa qallaleen." (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis sanad wanaagsan oo cuskasho leh.

Kutub kale oo sunanka ah waxay dhigayaan siyaadadan: Fuli oo dhowr amarrada Alle, waxaad ka heli hortaada'e; Xusuusnow Alle goorta barwaaqada, wuxuu ku xusuusanayaa goorta dhibta. Waxaadna ogsoonaataa wax kugu dhacay inuusan ku seegeen, Wax ku seegeyna uusan kugu dheceen. Waxaad ogaataa in guushu ay sa-barka ku jirto, kurbedana ferej ku xigo; culeyskana fudayd ka dambeeyo."

٦٣ - الرابع : عن أنس رضي الله عنه قال : إِنَّكُمْ لَتَعْمَلُونَ أَعْمَالًا هِيَ أَدْقُ فِي أَعْيُنِكُمْ مِنَ الشَّعْرِ كُنَّا نَعُدُّهَا عَلَى عَهْدِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ مِنَ الْمُؤَبَّاتِ . رواه البخاري .

وقال : « الْمُؤَبَّاتُ » : الْمُهْلِكَاتُ .

63. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: " Waxaa (badanaa) aad fashaan waxyaalo tin idin kala yar (oo waxba aan idiin kugu fadhin, dembi inay yihiinna aadan u qabin sida aad u yareysaneysaan) ha yeeshee waagii Nebiga (S.C.W.) aan ku tirin jirney waxyaalaha lagu rogma-do ee halista ah". (Bukhaari)

٦٤ - الخامس : عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى يَغَارُ ، وَغَيْرَةُ اللَّهِ تَعَالَى ، أَنْ يَأْتِيَ الْمَرْءُ مَا حَرَّمَ اللَّهُ عَلَيْهِ » متفق عليه .

و« الْغَيْرَةُ » : بفتح الغين ، وَأَضْلَاهَا الْأَنْفَةُ .

64. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri Alle kor ahaaye waa qiiroodaa, waxayna timaaddaa qiiradiisu markuu arko qof ku dhex jira fal uu ka reebay, markaasoo uu qiir-oodo, kana caroodo taa , qofkiisana ciqaab uu ka muto inuu too-bad keeno maahee qofku, ama Alle naxariistiisa haleesho.'

(Bukhaari iyo Muslim)

٦٥ - السادس : عن أبي هريرة رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّهُ سَمِعَ النَّبِيَّ ﷺ يَقُولُ : « إِنْ ثَلَاثَةٌ مِنْ بَنِي إِسْرَائِيلَ : أَبْرَصٌ ، وَأَقْرَعٌ ، وَأَعْمَى ، أَرَادَ اللَّهُ أَنْ يَبْتَلِيَهُمْ فَبَعَثَ إِلَيْهِمْ مَلَكًا ، فَأَتَى الْأَبْرَصَ فَقَالَ : أَيُّ شَيْءٍ أَحَبُّ إِلَيْكَ ؟ قَالَ : لَوْنٌ حَسَنٌ ، وَجِلْدٌ حَسَنٌ ، وَيَذْهَبُ عَنِّي الَّذِي قَدْ قَدَّرَنِي النَّاسُ ؛ فَمَسَحَهُ فَذَهَبَ عَنْهُ قَدْرُهُ وَأَعْطِيَ لَوْنًا حَسَنًا . فَقَالَ : فَأَيُّ الْمَالِ أَحَبُّ إِلَيْكَ ؟ قَالَ : الْإِبِلُ - أَوْ قَالَ : الْبَقْرُ - شَكَّ الرَّأْيِي ، فَأَعْطِيَ نَاقَةً عَشْرَاءً فَقَالَ : بَارَكَ اللَّهُ لَكَ فِيهَا .

فَأَتَى الْأَقْرَعَ فَقَالَ : أَيُّ شَيْءٍ أَحَبُّ إِلَيْكَ ؟ قَالَ : شَعْرٌ حَسَنٌ ، وَيَذْهَبُ عَنِّي هَذَا الَّذِي قَدَّرَنِي النَّاسُ ؛ فَمَسَحَهُ فَذَهَبَ عَنْهُ وَأَعْطِيَ شَعْرًا حَسَنًا . قَالَ : فَأَيُّ الْمَالِ أَحَبُّ إِلَيْكَ ؟ قَالَ : الْبَقْرُ ، فَأَعْطِيَ بَقْرَةً حَامِلًا ، وَقَالَ : بَارَكَ اللَّهُ لَكَ فِيهَا .

فَأَتَى الْأَعْمَى فَقَالَ : أَيُّ شَيْءٍ أَحَبُّ إِلَيْكَ ؟ قَالَ : أَنْ يَرُدَّ اللَّهُ إِلَيَّ بَصْرِي فَأُبْصِرُ النَّاسَ ؛ فَمَسَحَهُ فَرَدَّ اللَّهُ إِلَيْهِ بَصْرَهُ . قَالَ : فَأَيُّ الْمَالِ أَحَبُّ إِلَيْكَ ؟ قَالَ : الْغَنَمُ ، فَأَعْطِيَ شَاةً وَالِدًا ، فَأَنْتَجَ هَذَانِ وَوَلَدَ هَذَا ، فَكَانَ لِهَذَا وَادٍ مِنَ الْإِبِلِ ، وَلِهَذَا وَادٍ مِنَ الْبَقْرِ ، وَلِهَذَا وَادٍ مِنَ الْغَنَمِ .

ثُمَّ إِنَّهُ أَتَى الْأَبْرَصَ فِي صُورَتِهِ وَهَيْئَتِهِ ، فَقَالَ : رَجُلٌ مَسْكِينٌ قَدْ أَنْقَطَعَتْ بِي الْجِبَالُ فِي سَفَرِي فَلَا بَلَغَ لِي الْيَوْمَ إِلَّا بِاللَّهِ ثُمَّ بِكَ ، أَسْأَلُكَ بِالَّذِي أَعْطَاكَ اللَّوْنَ الْحَسَنَ ، وَالْجِلْدَ الْحَسَنَ ، وَالْمَالَ ، بَعِيرًا أَتَبَلَّغُ بِهِ فِي سَفَرِي ، فَقَالَ : الْحَقُّوقُ كَثِيرَةٌ . فَقَالَ : كَأَنِّي أَعْرِفُكَ ، أَلَمْ تَكُنْ أَبْرَصَ يَقْدُرُكَ النَّاسُ فَقِيرًا فَأَعْطَاكَ اللَّهُ !؟ فَقَالَ : إِنَّمَا وَرِثْتُ هَذَا الْمَالَ كَابِرًا عَنْ كَابِرٍ ، فَقَالَ : إِنْ كُنْتَ كَاذِبًا فَصَيِّرْكَ اللَّهُ إِلَى مَا كُنْتَ .

وَأَتَى الْأَقْرَعَ فِي صُورَتِهِ وَهَيْئَتِهِ ، فَقَالَ لَهُ مِثْلَ مَا قَالَ لِهَذَا ، وَرَدَّ عَلَيْهِ مِثْلَ مَا رَدَّ هَذَا ، فَقَالَ : إِنْ كُنْتَ كَاذِبًا فَصَيِّرْكَ اللَّهُ إِلَى مَا كُنْتَ .

وَأَتَى الْأَعْمَى فِي صُورَتِهِ وَهَيْئَتِهِ ، فَقَالَ : رَجُلٌ مَسْكِينٌ وَابْنُ سَبِيلٍ

انْقَطَعَتْ بِي الْجِبَالُ فِي سَفَرِي ، فَلَا بَلَاغَ لِي الْيَوْمَ إِلَّا بِاللَّهِ ثُمَّ بِكَ ، أَسْأَلُكَ بِالَّذِي
رَدَّ عَلَيْكَ بَصْرَكَ شَاءَ أَتَبَلَّغُ بِهَا فِي سَفَرِي ؟ فَقَالَ : قَدْ كُنْتُ أَعْمَى فَرَدَّ اللَّهُ إِلَيَّ
بَصْرِي فَخُذْ مَا شِئْتَ وَدَعْ مَا شِئْتَ فَوَاللَّهِ لَا أَجْهَدُكَ الْيَوْمَ بِشَيْءٍ أَخَذْتَهُ لِلَّهِ عَزْرٌ
وَجَلٌّ . فَقَالَ : أَمْسِكْ مَا لَكَ فَإِنَّمَا ابْتَلَيْتُمُ ، فَقَدْ رَضِيَ اللَّهُ عَنْكَ ، وَسَخِطَ عَلَيَّ
صَاحِبِيكَ « متفقٌ عليه .

و « النَّاقَةُ الْعُشْرَاءُ » بِضَمِّ الْعَيْنِ وَفَتْحِ الشَّيْنِ وَبِالْمَدِّ : هِيَ الْحَامِلُ . قَوْلُهُ :
« أَنْتَجَ » وَفِي رِوَايَةٍ « فَتَنَجَ » مَعْنَاهُ : تَوَلَّى نِتَاجَهَا ، وَالنَّاتِجُ لِلنَّاقَةِ كَالْقَابِلَةِ لِلْمَرَاةِ .
وَقَوْلُهُ : « وَوَلَدَ هَذَا » هُوَ بِتَشْدِيدِ اللَّامِ : أَي تَوَلَّى وِلَادَتَهَا ، وَهُوَ بِمَعْنَى أَنْتَجَ فِي
النَّاقَةِ ، فَالْمَوْلَدُ ، وَالنَّاتِجُ ، وَالْقَابِلَةُ بِمَعْنَى ؛ لَكِنْ هَذَا لِلْحَيَوَانِ وَذَلِكَ لِغَيْرِهِ .
وَقَوْلُهُ : « انْقَطَعَتْ بِي الْجِبَالُ » هُوَ بِالْحَاءِ الْمَهْمَلَةِ وَالْبَاءِ الْمَوْحَدَةِ : أَي
الْأَسْبَابُ . وَقَوْلُهُ : « لَا أَجْهَدُكَ » مَعْنَاهُ : لَا أَشُقُّ عَلَيْكَ فِي رَدِّ شَيْءٍ تَأْخُذُهُ أَوْ
تَطْلُبُهُ مِنْ مَالِي . وَفِي رِوَايَةِ الْبُخَارِيِّ : « لَا أَحْمَدُكَ » بِالْحَاءِ الْمَهْمَلَةِ وَالْمِيمِ
وَمَعْنَاهُ : لَا أَحْمَدُكَ بِتَرْكِ شَيْءٍ تَحْتَاجُ إِلَيْهِ ، كَمَا قَالُوا : لَيْسَ عَلَيَّ طَوْلُ الْحَيَاةِ
نَدَمٌ : أَي عَلَيَّ فَوَاتِ طَوْلِهَا .

65. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: Alle si uu u imtixaano seddex nin oo reer bani Is- raa' iil ah _ mid baras qabeen ah, kan kalena bidaarle timihii ka bideen, kan seddexaadna indhool _ wuxuu u soo diray malag qaab Aadane leh. Malaggii wuxuu u yimid baras qabeenkii wuxuuna weydiyey: Maxaad wax ugu jeceshahay? Wuxuu yiri: ' Midab iyo dub Wanaagsan iyo inaan ka bogsado cudurkan dadkii igu nacay.' Malaggii baa gacantiisii mariyey korkiisii markaasaa cudurkii ka ba' ay, jirkiisiina yeeshay midab wanaagsan. Malaggii baa sii weydiyey maal waxa uu ugu Jecel yahay? Ninkii wuxuu yiri: Geel ama lo' (weriyihii xadiiska baa shakiyey labadaas miduu yiri). Ninkii sidaa baa waxaa lagu siiyey hal riman oo toban sidda ah; malaggiina yiri: Allaha kuu barakeeyo.

Markaa kaddib buu wuxuu u tagey malaggii kii timuhu ka bideen oo weydiyey: Maxaad wax ugu jeceshahay ? Ninkii wuxuu ku ja - waabay: Timo qurxoon iyo inaan ka bogsado cudurkan dadku igu nacay. Malaggii baa gacantiisii mariyey madaxiisii, cudurkiina waa laga bogsiiyey. waxaana la siiyey timo wanaagsan. Dabadeedna

malaggii baa sii weyddiiyey: Maal maxaad ugu jeceshahay ?Ninkii wuxuu yiri: Lo'. markaa baa sac rimman la siiyey; malaggina yiri:

Allaha kuu barakeeyo.

Markaa kaddib malaggii wuxuu u yimid ninkii indhaha la'aa oo weyddiiyey: Maxaad wax ugu Jeceshahay ? Wuxuu yiri: in Alle araggayga ii soo celiyo oo aan dadka arko hareerahayga ah. Malaggii baa gacanta mariyey indhaha indhoolkii Allaana araggiisii u soo celiyey. Dabadeedna malaggii baa wuxuu weyddiiyey: Maal waxa uu uu jecel yahay ?Ninkii wuxuu yiri: ' Ari ' . markaa baa la siiyey ri rimman oo ilama sidata. Xoolihii baa kullugoodba u tar-may oo u batay oo mid wuxuu yeeshay kadin geel ah , kii kalena wuxuu yeeshay lo' fadhi ah, kii seddexaadna wuxuu yeeshay dii-gaanyo ari ah.

Muddo kaddib, buu malaggii soo booqday kii barasqabeenka ahaa malaggiyoo u eg sidii uu isagu kaa ahaan jirey oo ku yiri: Waxaan ahay nin sabool ah, oo baahan, safar ah, sahaydiina ka go'-day, Alle dabadina ciirsi aan adiga ahayn heysan si aan u gaaro meeshii aan u socday. Waxaan kugu weydiisanayaa magaca Allihii ku siiyey midabka iyo dubka wanaagsan iyo maalka inaad i siiso rati aan safarka u kaalmaysto. Ninkii wuxuu muujiyey inuusan kari karin inuu wax u qabto malaggii oo wuxuu yiri: qaaman badan baan ku jiraa oo layga rabo inaan gudo. Malaggii wuxuu yiri: waxaad mooddaa inaan hadda ka hor ku arkay. Sow ma aadan ahayn barasqabeenkii, dadku ka carari jiray, fiqiirnkana ahaa, Allena uu deeqda siiyey? Ninkii wuxuu yiri: Mayee waxaan ka dhaxalay maalkan awoowayaalkey. Malaggii wuxuu yiri: Haddii aad been sheegaysid, sidaadii hore Allaha kuu celiyo. Dabadeedna wuxuu u yimid kii ay timihu ka bidi jireen isagoo sidii uu ahaan jirey oo kale ah, oo yiri wixii uu kan hore yiri oo kale, isna sidii barasqabeenkii ku jawaabay oo kale buu ku jawaabay. isagana sidoo kale wuxuu ku yiri: haddii aad been sheegaysid, sidaadii hore Allaha kuu celiyo.

Kaddib malaggii wuxuu booqday kii indhaha la'aa isagoo malaggu iska soo dhigay sidii uu ahaan jirey oo kale kaa indhoolaha ahaa oo ku yiri: Waxaan ahay nin sabool ah, safar ah, sahaydiina ay ka go'day Alle dabadina aan wax ciirsi heysan ii suura geliya inaan gaaro meeshii aan u socday. Waxaan Allihii araggaaga kuu soo celiyey kugu weydiisanayaa ri' aan safarka u kaalmaysto. Ninkii wuxuu yiri: Alleylehe indhool waa ahaa araggaygiina Alle waa ii soo celiyey ee wixii aad doontana kaxayso, wixii aad doontana ka tag, Allaan ku dhaartay, inaanan kuu diideyn wax aad dooneyso inaad ku qaadato magaca Alle, Rabbiga cisada iyo sharafta iyo weynanka u saaxiib ahaaday. Malaggii wuxuu yiri: Heyso xoolahaaga oo

dhan. Seddexdiina waa la idin wada imtixaanay. Alle, run ahaan, raalli buu kaa yahay, wuuna u careysan yahay labadaadii saaxiib." (Bukhaari iyo Muslim)

٦٦ - السابع : عن أبي يعلى شداد بن أوس رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « الْكَيْسُ مَنْ دَانَ نَفْسَهُ ، وَعَمِلَ لِمَا بَعْدَ الْمَوْتِ ، وَالْعَاجِزُ مَنْ أَتْبَعَ نَفْسَهُ هَوَاهَا وَتَمَنَّى عَلَى اللَّهِ الْأَمَانِيَّ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

قال الترمذي وغيره من العلماء : معنى « دَانَ نَفْسَهُ » : حاسبها .

66. Abuu Yaclaa Shaddaad ibn Aws (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Qof caqli lihi waa kii naftiisa iyo jirkiisa xaaraan ka dhowra iyo wax dhibaya, naftiisana wax xille leh ka fo-geeya kuna dadaalo wixii anfacaya geerida kaddib; Caaquna waa kii naftiisa xarigga uga fura wax kasto ay doonto, hawa raaca ah Allena ka sugaya fulinta ididdiillada iyo hawadiisa xun". (Tirmidi)

Sh. al-Baani wuxuu yiri xadiiskan waa daciif, xujo iyo cuskasho aan gelin. inkastoo uu macno ahaan sax yahay .

٦٧ - الثامن : عن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مِنْ حُسْنِ إِسْلَامِ الْمَرْءِ تَرْكُهُ مَا لَا يَعْنِيهِ » حديث حسن رواه الترمذي وغيره .

67. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofka Islaam wanaaggiisa waxaa ka mid ah inaanu isku howlin arrimo aan faa'ido ugu jirin adduunka ama aakhiradiisa" (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah.

٦٨ - التاسع : عن عُمَرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنِ النَّبِيِّ ﷺ قَالَ : « لَا يُسْأَلُ الرَّجُلُ فِيمَ ضَرَبَ أُمَّرَأَتَهُ » رواه أبو داود وغيره .

68. Cumar ibn Khaddaab (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Xaq iyo dow ma aha in maxaad u dishay la yiraahdo nin naagtiisa u dilay (inuu toosiyo). (Abuu Daawuud iyo rag kale baa weriyey).

Sh. al-Baani wuxuu yiri xadiiskan waa daciif, aan xujo ahaan loo soo qaadan kareyn.

٦ - باب في التقوى

CUTUBKA 6

Taqwada iyo Alle ka cabsiga

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى: ﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ حَقَّ تَقَاتِهِ ﴾
[آل عمران : ١٠٢]

21. " Kuwa xaqa rumeeyoow dhowra xilka iyo waajibka Alle uu idin saaray dhowrid dhan". Suuradda aali-Cimraan: Aayadda 102

وقال الله تعالى: ﴿ فَاتَّقُوا اللَّهَ مَا اسْتَطَعْتُمْ ﴾ [التغابن : ١٦] .

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: "Dhowra xilka iyo waajibka Alle uu idin saaray intii karaankiinna ah". Suuradda al-Taghaabun: Aayadda 16

وقال تعالى: ﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَقُولُوا قَوْلًا سَدِيدًا ﴾

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

[الأحزاب : ٧٠]

22. Kuwa xaqa rumeeyow dhowra cahdiga Alle iyo xilka uu idiin saaray, wax sanna ku hadla". Suuradda al-Axsaab: Aayadda 70

وقال تعالى: ﴿ وَمَنْ يَتَّقِ اللَّهَ يَجْعَلْ لَهُ مَخْرَجًا (٣) وَيَرْزُقْهُ مِنْ حَيْثُ لَا يَحْتَسِبُ ﴾ [الطلاق : ٢-٣]

23. Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye : ' Qofkii Alle ka cabsada oo waajibkii iyo xilkii uu saaray guta, irkad buu u yeelayaa, meel uusan fiilaynna waa ka irsaaqayaa". Suuradda ad-Dalaaq Aayadaha 2-3

وقال تعالى: ﴿ إِنْ تَتَّقُوا اللَّهَ يَجْعَلْ لَكُمْ فُرْقَانًا وَيُكَفِّرْ عَنْكُمْ سَيِّئَاتِكُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ الْعَظِيمِ ﴾ [الأنفال : ٢٩]

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

24. "Haddii aad Alle ka cabsataan oo xilka iyo waajibka uu idin saaray gudataan wuxuu idin siinayaa iftiin aad ku kala saartaan xaqa iyo baadlka, wuxuuna asturayaa xumaanahiinna, wuuna idiin dembi dhaafayaa. Allaa dambi dhaafe deeq badane ahe." Suuradda al- Anfaal: Aayadda 29

٦٩ - فالأول : عن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قيل : يا رسول الله من أكرم الناس ؟ قال : « أتقاهم » . فقالوا : ليس عن هذا نسألك ، قال : « فيوسف نبي الله بن نبي الله بن نبي الله بن خليل الله » قالوا : ليس عن هذا نسألك ، قال : « فعن معادين العرب تسألوني ؟ خيارهم في الجاهلية خيارهم في الإسلام إذا فقهوا » متفق عليه .

و« فقهوا » بضم القاف على المشهور وحكي كسرهما : أي علموا أحكام الشرع .

69. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebiga (S.C.W.) waxaa la weydiyey: Yaa ugu sharaf iyo xurmad badan dadka dhexdiisa oo ugu gobsan? Wuxuu yiri: Kan ugu Alle cabsida badan. Asxaabtii rasuulka Waxay yiraahdeen: "Sidaa kuma aannu weydiin" Wuxuu yiri: Marka waa Yuusuf oo nebi ahaa oo ina nebi ahaa (nabi Yacquub) oo ina nebi ka sii ahaa (nabi isxaaq), oo ina nabi ka sii ahaa (nabi Ibraahim), Alle saaxibki. Waxay yiraahdeen: Sidaasna kuma aannu weydiin. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Haddaas ma lafaha Carab-baad i weydiiseen. Marka ogaada kuwaa lahaa sharafta iyo xurmadda Islaamka ka hor, baa sharaf iyo xurmad badan markii ay Islaamaanna, waase markii ay diinta dhuuxaan, oo dhaqan geliyaan.

٧ - الثاني : عن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إن الدنيا حلوة خضرة ، وإن الله مستخلفكم فيها فينظر كيف تعملون ، فاتقوا الدنيا واتقوا النساء ؛ فإن أول فتنة بني إسرائيل كانت في النساء » رواه مسلم .

70 Abuu Saciid al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Adduunyadu waa doog waana macaan tahay. Allena xilkeedii buu idiin dhiibay, oo inaad danjireyaal ka noqotaan buu idiin doortay, si uu u eego habka aad uga howlgaleysaan oo aad ugu dhaqantaan adduunka. Marka iska jira dhal dhalaalka adduunka iyo soo jiidashadeeda dhalanteedka ah, iyo fasaadka ka dhalanaya la xiriir (aan sharci aheyn) ee dumarka (iyo in hawooyinkooda aan sharciga waafaqsaneyn laga yeelo). Reer banii Israa'iil fidmadii u horraysey waxay kaga timid xagga dumarka." (Muslim)

٧١ - الثالث : عن ابن مسعود رضي الله عنه أن النبي ﷺ كان يقول :

« اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ الْهُدَى وَالتُّقَى وَالْعَفَافَ وَالْغِنَى » رواه مسلم .

71. Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in nebigu (S.C.W.) ku duceysan jirey: " Alloow waxaan kaa baryayaa hanuun, Dhowris xilka iyo waajibka aad i saartay, dhawrsanaan iyo kheyx xaggaaga ah (iyo ka deeqtoonaan Aadane)"

(Muslim)

٧٢ - الرابع : عن أبي طريفٍ عديِّ بن حاتمٍ الطائيِّ رضي الله عنه قال : سمعتُ رسولَ الله ﷺ يقول : « مَنْ حَلَفَ عَلَى يَمِينٍ ثُمَّ رَأَى أَنْتَقَى لِلَّهِ مِنْهَا فَلْيَأْتِ التَّقْوَى » رواه مسلم .

72. Caddayi ibn Xaatim (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in nebigu (S.C.W.) yiri: " Haddii uu qof ku dhaarto oo ballan qaado inuu camal falaa oo dabadeed arkaa camal kale oo ka wanaagsan kii hore, waa inuu falaa camalka wanaagsan ee dambe.'

(Muslim)

٧٣ - الخامس : عن أبي أَمَامَةَ صُدَيْي بنِ عَجْلَانَ الْبَاهِلِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَخُطُبُ فِي حِجَّةِ الْوُدَاعِ فَقَالَ : « اتَّقُوا اللَّهَ وَصَلُّوا حَمْسَكُمْ ، وَصُومُوا شَهْرَكُمْ ، وَأَدُّوا زَكَاةَ أَمْوَالِكُمْ ، وَأَطِيعُوا أَمْرَاءَكُمْ تَدْخُلُوا جَنَّةَ رَبِّكُمْ » رواه الترمذي ، في آخر كتاب الصلاة ، وقال : حديث حسن صحيح .

73. Abuu Umaamah al-Baahili (A.K.R.) wuxuu sheegay inuu dhaageystay khudbadii nebiga (S.C.W.) uu jeediyey xajkii sagootiga khudbaddaas oo uu ku yiri: " Xurmad iyo tixgelin gaara siiya Alle iyo amarradiisa, oo ooga shanta salaadood maalin waliba, bisha Ramadaan sooma, bixiya sekada, maqlana oo adeeca kuwa xilka

iyo mas'uuliyadda idin haya (oo waxaan xumaan aheyn ku adeeca)

Waxaad geli doontaan markaa Jannada Rabbigiin. '

(Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis Xasan ah.

Fiiro gaar ah: luqad ahaan macnaha taqwada waa inad ka joogto oo aad naftaada ka celiso wixii u xun oo dhib u leh. Xagga Xadiiska iyo Qur'aankase taqwo waxaa loola jeedaa inaad maanka joogto ugu heyso Alle, ood ka cabsato, xusuusnaato daa'in iyo abad , wu-

xuu ku faray ku fartoonto, wuxuu kaa reebayna ka reebtoonto, taasna waxay kuu horseedeysaa oo ku siineysa aragti iyo ileys aad ku kala saarto samaha iyo xumaanta, dareenka iyo fahamkaasi qofku wuxuu ku hoggaaminayaa xagga samaha iyo kheyarka, kana hor istaagayaa xumaha iyo sharka oo idil.

٧ - باب في اليقين والتوكل

CUTUBKA 7

Yaqiinta iyo Isku Halleynta Alle

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى: ﴿وَلَمَّا رَأَى الْمُؤْمِنُونَ الْأَحْزَابَ قَالُوا: هَذَا مَا وَعَدَنَا اللَّهُ وَرَسُولُهُ، وَصَدَقَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ، وَمَا زَادَهُمْ إِلَّا إِيمَانًا وَتَسْلِيمًا﴾ [الأحزاب:

٢٢٢]

26. " Markii mu'miniintii dhabta ahaa ay kooxihii isa soo baheystay ee gaalada ahaa arkeen waxay yiraahdeen: Waa kan wixii ay Alle iyo rasuulkiisu noo yaboohaan. , Alle iyo rasuulkiisu run bay sheegeen . Umana kordhin waxaan aheyn iimaan, isdhiibid iyo sugnaasho." Suuradda al-Axsaab: Aayadda 22

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne kor ahaaye :

، وقال تعالى: ﴿الَّذِينَ قَالَ لَهُمُ النَّاسُ إِنَّ النَّاسَ قَدْ جَمَعُوا لَكُمْ فَاخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَانًا وَقَالُوا: حَسْبُنَا اللَّهُ وَنِعْمَ الْوَكِيلُ، فَانْقَلَبُوا بِنِعْمَةٍ مِنَ اللَّهِ وَفَضْلٍ لَمْ يَمْسَسْهُمْ سُوءٌ وَاتَّبَعُوا رِضْوَانَ اللَّهِ، وَاللَّهُ ذُو فَضْلٍ عَظِيمٍ﴾ [آل عمران:

[١٧٣ - ١٧٤]

27. " Waa kuwii dadku ku yiri: Dadkii baa isu kiin soo bahaystay, ee ka cabsada. (Khatartii lagu handaday)waxba uma dhiman iimaan uun baa u siyaaday maahee waxayna yiraahdeen: Allaa nagu filan wax la' isku halleeyana u fiican" Waxay markaas la laabteen nicmo iyo gallad Alle, dhibaata ma taaban. Waxayna raaceen raallinnimadii Alle, Allena waxaa u sugnaaday gallad aan go'eyn" Suuradda aali-Cimraan Aayadaha: 173-174.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: ، وقال تعالى :

﴿ وَتَوَكَّلْ عَلَى الْحَيِّ الَّذِي لَا يَمُوتُ ﴾ [الفرقان : ٥٨]

28. " Talo saaro oo isku hallee noolaha aan dhimanayn"
Suuradda al-Furqaan: Aayadda 58.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

، وقال تعالى : ﴿ وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ ﴾ [إبراهيم : ١١]

29. " Mu'miniintu Alle oo keliya ha talo saarteen, oo ha isku halleeeyaan "Suuradda Ibraahiim: Aayadda 11.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

، وقال تعالى : ﴿ فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ﴾ [آل عمران : ١٥٩] ،

30. " Markii aad go'aan gaartid, Alle oo keliya talo saaro oo isku hallee." Suuradda ali-Cimraan Aayadda 159.

Wuxuu kaloo Alle yiri hufnaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَمَنْ يَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ فَهُوَ حَسْبُهُ ﴾ [الطلاق : ٣] : أي كافيهِ

31. " Qofkii Alle talo saarta oo isku halleeeya waa ku filan yahay"
Suuradda ad- Dalaq Aayadda:3

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ الَّذِينَ إِذَا ذُكِرَ اللَّهُ وَجِلَتْ قُلُوبُهُمْ ^(١) وَإِذَا

تُلِيَتْ عَلَيْهِمْ آيَاتُهُ زَادَتْهُمْ إِيمَانًا وَعَلَىٰ رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ ﴾ [الأنفال : ٢] ،

32. " Waa iyaga oo qura mu'miniinta dhabta ah kuwa markii Alle la xuso qalbiyadoodu baqaan, markii aayadihiisa loo akhriyana ii-maanka uga kordho, Rabbigoodna ku kalsoon ee talo saarta".
Suuradda al- Anfaal: Aayadda 2

٧٤ - فالأول : عن ابن عباس رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ :
« عُرِضَتْ عَلَيَّ الْأُمَّمُ ، فَرَأَيْتُ النَّبِيَّ وَمَعَهُ الرَّهَيْطُ ، وَالنَّبِيَّ وَمَعَهُ الرَّجُلُ
وَالرَّجُلَانِ ، وَالنَّبِيَّ لَيْسَ مَعَهُ أَحَدٌ إِذْ رُفِعَ لِي سَوَادٌ عَظِيمٌ فَظَنَنْتُ أَنَّهُمْ أُمَّتِي فَقِيلَ
لِي : هَذَا مُوسَى وَقَوْمُهُ ، وَلَكِنْ أَنْظُرْ إِلَى الْأُفُقِ ، فَنَظَرْتُ فَإِذَا سَوَادٌ عَظِيمٌ ، فَقِيلَ
لِي : أَنْظُرْ إِلَى الْأُفُقِ الْآخِرِ ، فَإِذَا سَوَادٌ عَظِيمٌ ، فَقِيلَ لِي : هَذِهِ أُمَّتُكَ وَمَعَهُمْ
سَبْعُونَ أَلْفًا يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ بَغَيْرِ حِسَابٍ وَلَا عَذَابٍ » ، ثُمَّ نَهَضَ فَدَخَلَ مَنْزِلَهُ
فَخَاضَ النَّاسُ فِي أَوْلِيَّتِكَ الَّذِينَ يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ بِلاَ حِسَابٍ وَلَا عَذَابٍ ، فَقَالَ
بَعْضُهُمْ : فَلَعَلَّهُمُ الَّذِينَ صَحِبُوا رَسُولَ اللَّهِ ﷺ ، وَقَالَ بَعْضُهُمْ : فَلَعَلَّهُمُ الَّذِينَ
وُلِدُوا فِي الْإِسْلَامِ فَلَمْ يُشْرِكُوا بِاللَّهِ - وَذَكَرُوا أَشْيَاءَ - فَخَرَجَ عَلَيْهِمْ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ
فَقَالَ : « مَا الَّذِي تَخُوضُونَ فِيهِ ؟ » فَأَخْبَرُوهُ فَقَالَ : « هُمُ الَّذِينَ لَا يَرْقُونَ . وَلَا
يَسْتَرْقُونَ ، وَلَا يَتَطَيَّرُونَ ؛ وَعَلَى رَبِّهِمْ يَتَوَكَّلُونَ » فَقَامَ عُكَّاشَةُ بْنُ مُحَصِّنٍ
فَقَالَ : آدُعُ اللَّهَ أَنْ يَجْعَلَنِي مِنْهُمْ فَقَالَ : « أَنْتَ مِنْهُمْ » ثُمَّ قَامَ رَجُلٌ آخَرَ فَقَالَ :
آدُعُ اللَّهَ أَنْ يَجْعَلَنِي مِنْهُمْ فَقَالَ : « سَبَقَكَ بِهَا عُكَّاشَةُ » مَتَّفَقٌ عَلَيْهِ .

« الرَّهَيْطُ » بضم الراء تصغير رهط ، وهم دون عشرة أنفس : و« الْأُفُقُ »
الناحية والجانب . و« عُكَّاشَةُ » بضم العين وتشديد الكاف وبتخفيفها ، والتشديد
أفصح .

74. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri:
" Waxaa laygu tusay (riyoo ama ilhaan) Ummada badan. Markaa-
saan waxaan arkay Nebi dhowr qof ay ka raacday ummadiisa, na-
biyaalna waxaa raacay oo ay wateen qof iyo labo ummaddiisa ka
mida, nebina arkay aan qofna raacin dadkiisii. Misna si kedis wa-
xaan arkay higil madow waxaan moodey ummaddaydii, waxaase
laygu yiri: Waa Muuse iyo ummaddiisii ee xaggaa sare eeg. Waa
eegay mise higil madow baa ka muuqda. misna waxaa la yiri: xag-
ga kalena eeg , waa eegey higil madow baa ka muuqda. Markaa baa
waxaa la igu yiri: Waa Taas ummaddaadii, waxaana ka mid ah tod-
dobaatan kun oo qof oo jannada galaya xisaab ama ciqaab la'aan.
Dabadeedna nabigu (S.C.W.) inta kacay buu qolkiisii galay, as-
xaabtiisiina waxay bilaabeen inay isweydiyaan qoladaas la sheegay
inay galayaan jannada xisaab ama dhib la'aanta. Qaar waxay yi-
raahdeen: Waxay noqon karaan dadkii waqtiga nabiga joogay ee

rumeeyey . Qaarna waxay yiraahdeen: waxay noqon karaan dadkii diinta ku dhashay oo aan Alle waxba u shariig yeelin. waxyaalo kalena waa la sheegsheegay. Nebigii baa (S.C.W.) intuu maqlay ka soo baxay qolkisii oo weydiiyey: Maxaad ka sheekaynaysaan? waa loo sheegay . Wuxuu yiri: " Waa dadka' aan tahliisha tufin, loona tufin, waxna aan baasaysanin, Rabbigoodna talo saarta. Cukaasha ibn Muxsin (A.K.R.) baa inta istaagey yiri: iigu ducee in Alle iga mid dhigo kuwaa. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Adigu Ka mid baad tahay. Nin kaloo saxaabi ah baa isna istaagey oo yiri: Anigana Alle ii bari inuu iga mid dhigo. Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku ja - waabay: Cukaasha ayaa kaaga hormaray."

٧٥ - الثاني : عن ابن عباس رضي الله عنهما أيضاً أن رسول الله ﷺ كان يقول : « اللَّهُمَّ لَكَ أَسَلَمْتُ ، وَبِكَ آمَنْتُ ، وَعَلَيْكَ تَوَكَّلْتُ ، وَإِلَيْكَ أُنَبْتُ ، وَبِكَ خَاصَمْتُ . اللَّهُمَّ أَعُوذُ بِعِزَّتِكَ ؛ لَا إِلَهَ إِلَّا أَنْتَ أَنْ تُضِلَّنِي ، أَنْتَ الْحَيُّ الَّذِي لَا يَمُوتُ وَالْجِنُّ وَالْإِنْسُ يَمُوتُونَ » متفقٌ عليه ، وهذا لفظ مسلم واختصره البخاري .

75. Ibn Cabbaas (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in nebigu (S.C.W.) ku duceysan jiray: " Alloow Adiga ayaan isku kaa dhii-bey, Adiga ayaana aan ku rumeeyey, Adiga ayaana ku talo saartay, Adiga ayaan kuu soo noqday, Adiga ayaana arrintayda ugu xukuntamayaa oo gar soor uga dhiganayaa, Alloow! awooddaadaan magan u ahay; ilaah xaq ahi ma jiro adiga maahee, ee Alloow iga dhowr ka dhumid xaqa aan ka lumo. Adiga weeyaan noolaaha aan dhimanayn, halka Jinka iyo Insigu dhimanayaan.'

(Bukhaari iyo Muslim)

٧٦ - الثالث : عن ابن عباس رضي الله عنهما أيضاً قال : (حَسْبُنَا اللَّهُ وَنَعْمَ الْوَكِيلُ ، قَالَهَا إِبْرَاهِيمُ ﷺ حِينَ أُلْقِيَ فِي النَّارِ ، وَقَالَهَا مُحَمَّدٌ ﷺ حِينَ قَالُوا : إِنَّ النَّاسَ قَدْ جَمَعُوا لَكُمْ فَاخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَانًا وَقَالُوا : حَسْبُنَا اللَّهُ وَنَعْمَ الْوَكِيلُ) رواه البخاري .

وفي رواية له عن ابن عباس رضي الله عنهما قال : (كَانَ آخِرَ قَوْلِ إِبْرَاهِيمَ ﷺ حِينَ أُلْقِيَ فِي النَّارِ : حَسْبِي اللَّهُ وَنَعْمَ الْوَكِيلُ) .

76. Ibn Cabbaas (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in nebi Ibraahiim markii dabka lagu riday erayadii uu ku dhawaaqay ay ahaayeen:

' Xasbunallaah wanicmal wakiil.'

" Waxaa igu filan Alle, wax la isku halleeyana waxaa u fiican Isaga.' Sidaa oo kalena waxaa yiri rasuulkii Alle Muxammad (S.C.W.) kolkii loo sheegay in dad isu soo baheystay oo sidaa awgeed la yiri naftiinna u baqa, arrintanina waxay oo keliya u kordhisay isaga iyo muslimiintii imaankii ay ku qabeen Alle, waxayna yiraahdeen isaga iyo muslimiintii: Waxaa nagu filan Alle Laysku halleeyaa fiicanna waa Isaga." (Bukhaari)

٧٧ - الرابع : عن أبي هريرة رضي الله عنه ، عن النبي ﷺ قال : « يَدْخُلُ الْجَنَّةَ أَقْوَامٌ أَفْتَدَتْهُمْ مِثْلُ أَفْنِدَةِ الطَّيْرِ » رواه مسلم .

قيل : معناه متوكلون وقيل قلوبهم رقيقة .

77. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu sheegay in nebigu (S.C.W.) yiri "Dad badan waxay geli doonaan jannada kuwaa oo ay quluubtooda noqon doonto sida quluubta shimbiraha, taana macnaheeda waxaa weeye quluubtooda waxay noqoneysaa sida quluubta shimbiraha, mise waxay noqon doonaan kuwa qaneeco leh, ama quluubtooda noqon doonta mid jilicsan cabsi Alle darteed, (taa oo keeneyna inay jannada galaan)" (Muslim)

٧٨ - الخامس : عن جابر رضي الله عنه أنه غزا مع رسول الله ﷺ قَبْلَ نَجْدٍ ، فَلَمَّا قَفَلَ رسول الله ﷺ قَفَلَ مَعَهُمْ ، فَأَدْرَكَتْهُمْ الْقَائِلَةُ فِي وادٍ كَثِيرِ الْعِضَاءِ ، فَنَزَلَ رسول الله ﷺ وَتَفَرَّقَ النَّاسُ يَسْتَظِلُّونَ بِالشَّجَرِ ، وَنَزَلَ رسول الله ﷺ تَحْتَ سَمْرَةٍ فَعَلَّقَ بِهَا سَيْفَهُ وَنَمَنَا نَوْمَةً ، فَإِذَا رسول الله ﷺ يَدْعُونَا وَإِذَا عِنْدَهُ أَعْرَابِيٌّ ، فَقَالَ : « إِنَّ هَذَا أَخْتَرَطَ عَلَيَّ سَيْفِي وَأَنَا نَائِمٌ فَاسْتَيْقِظْتُ وَهُوَ فِي يَدِهِ صَلْتًا ، قَالَ : مَنْ يَمْنَعُكَ مِنِّي ؟ قُلْتُ : اللهُ - ثلاثاً - » وَلَمْ يُعَاقِبْهُ وَجَلَسَ ، متفقٌ عليه .

وَفِي رِوَايَةٍ قَالَ جَابِرٌ : كُنَّا مَعَ رسول الله ﷺ بِذَاتِ الرَّقَاعِ ، فَإِذَا أَتَيْنَا عَلَى شَجَرَةٍ ظَلِيلَةٍ تَرَكَنَاهَا لِرَسُولِ اللهِ ﷺ ، فَجَاءَ رَجُلٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ وَسَيْفٌ رسول الله ﷺ مَعْلُوقٌ بِالشَّجَرَةِ فَاخْتَرَطَهُ فَقَالَ : تَخَافُنِي ؟ قَالَ : « لَا » ، فَقَالَ : فَمَنْ يَمْنَعُكَ مِنِّي ؟ قَالَ : « اللهُ » .

وَفِي رِوَايَةٍ أَبِي بَكْرٍ الْإِسْمَاعِيلِيِّ فِي صَحِيحِهِ فَقَالَ : مَنْ يَمْنَعُكَ مِنِّي ؟ قَالَ : « اللهُ » . قَالَ : فَسَقَطَ السَّيْفُ مِنْ يَدِهِ ، فَأَخَذَ رسول الله ﷺ السَّيْفَ فَقَالَ : « مَنْ يَمْنَعُكَ مِنِّي ؟ » . فَقَالَ : كُنْ خَيْرًا أَخِي . فَقَالَ : « تَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللهُ وَأَنِّي

رسول الله؟ قال: لا، ولكنني أعاهدك أن لا أقاتلك، ولا أكون مع قوم يُقاتلونك، فخلّى سبيله، فأتى أصحابه فقال: «جئتم من عند خير الناس».

قوله: «قفل» أي رجع. و«العضاء» الشجر الذي له شوك، و«السمرة» بفتح السين وضم الميم: الشجرة من الطلح، وهي العظام من شجر العضاء، و«أخترط السيف» أي سله وهو في يده. «صلتاً» أي مسلولاً، وهو بفتح الصاد وضمها.

78. Jaabir (A.K.R.) wuxuu sheegay inuu la socday nebiga (S.C.W.) oo dagaal jihaad ah ugu socday dhinaca Najd, markii dagaalkii dhammaadayna uu la soo laabtay. goor harsimaad ah baa wuxuu duulkii soo gaaray tog leh geedo qodxa badan, halkaasoo rasuulku (S.C.W.) harsday geed qurac ah, asxaabtiisiina ay kala firidhay iyadoo qof waliba har wanaagsan dayanayo. Nabigu wuxuu surtay seeftiisii laan ka mid laamihii geedka, seexadayna. Innaguna sidoo kale baynu u nasaneynay, mise goor dambe baan maqallay Nebigii (S.C.W.) oo noo yeeraya. waa u nimid si degdeg ah mise nin reer miyi ah baa agtiisa fadhiya. Nabigu (S.C.W.) wuxuu innagu yiri: "Ninkani anigoo hurda yuu seeftaydii iila baxay. Waxaan toosay iyadoo gacanta ugu jirta oo gal la' wuxuuna igu yiri: Yaa hadda iga kaa badbaadin kara? Waxaan ku iri: Alle baa iga kaa badbaadinaya" kuna celceliyey weedhaa seddex jeer. Nabigu (S.C.W.) sare buu u soo fariistay, waxnana ma yeelin ninkaasi"

(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale ee xadiiska oo isla jaabir (A.K.R.) laga soo xigtay waxay aheyd: Waxaynu la soconnay rasuulkii Alle (S.C.W.) dagaalkii Daatir Rigaac. Waxaan nimid geed hoos weyn markaasaan uga tagtay (Nebiga) inuu ku nasto. Waxaa yimid nin mushrig ah arkayna seeftii nabiga (S.C.W.) oo geedka ku suran, seeftii buu inta galka kala baxay buu ku yiri: Miyaad iga baqeyn? Wuxuu ku jawaabay nabigu: 'May' Dabadeed ninkii wuxuu yiri: yaa weeye kaa iga kaa badbaadinaya? Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: Allaah" Abuubakar Ismaaciili wuxuu intaa ku daray oo kitaabkiisii ku qor-naa: Markii uu nebigo (S.C.W.) yiri Alle baa iga kaa badbaadinaya ayaa ninkii gacantiisii seeftii ka dhacday; markaasaa Nebigo (S.C.W.) inta qaatay ku yiri: Yaa hadda adiga iga kaa badbaadinaya? Ninkii wuxuu yiri: Noqo qaataa kheyrr leh. Nabigu (S.C.W.) wuxuu weydiyey: Ma aad qireysaa ilaah xaq ah aan Alle ahayni inuusan jirin, iyo inaan aniguna ahay Rasuulkiisii? Ninkii waa diiday wuxuuna yiri: Laakiinse waxaan kaa ballan qaadayaa inaan kula diririn, cid kula diriraysana kuula soo safan. Nabigu (S.C.W.) waa uu sii daayey. Qoladiisii buu ku laabtay oo ku yiri: Waxaan idiinka soo laabtay oo xaggiisa ka imid ninkii u fiicnaa dadka.

٧٩ - السادس : عن عُمر رضي الله عنه قال : سمعتُ رسول الله ﷺ يقول : « لَوْ أَنْكُمْ تَتَوَكَّلُونَ عَلَى اللَّهِ حَقَّ تَوَكُّلِهِ لَرَزَقَكُمْ كَمَا يَرْزُقُ الطَّيْرَ ، تَغْدُو خِمَاصًا وَتَرُوحُ بِطَانًا » . رواه الترمذي . وقال : حديث حسن .

معناه : تَذْهَبُ أَوَّلَ النَّهَارِ خِمَاصًا : أَي ضَامِرَةَ الْبُطُونِ مِنَ الْجُوعِ وَتَرْجِعُ آخِرَ النَّهَارِ بِطَانًا . أَي مُمْتَلِئَةَ الْبُطُونِ .

79. Cumar bin Khaddaab (A.K.R.) wuxuu yiri: " Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W) oo leh: Haddii aad taladiinna oo dhan saarataan Alle oo u rumeysaan si dhan oo dhab ah wuxuu idiin irsaaqi doonaa sida uu u irsaaqo shimbiraha. Waxay kallahaan subaxii iyagoo calool maran, waxayna soo noqdaan iyagoo calool buuxa oo dheregsan galabtii.' (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah.

٨٠ - السابع : عن أبي عمارة البراء بن عازب رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ : « يَا فُلَانُ إِذَا أَوَيْتَ إِلَى فِرَاشِكَ فَقُلْ : اللَّهُمَّ أَسَلَمْتُ نَفْسِي إِلَيْكَ ، وَوَجَّهْتُ وَجْهِي إِلَيْكَ ، وَفَوَّضْتُ أَمْرِي إِلَيْكَ ، وَأَلْجَأْتُ ظَهْرِي إِلَيْكَ رَغْبَةً وَرَهْبَةً إِلَيْكَ ، لَا مَلْجَأَ وَلَا مَنْجَا مِنْكَ إِلَّا إِلَيْكَ آمَنْتُ بِكِتَابِكَ الَّذِي أَنْزَلْتَ ؛ وَبِنَبِيِّكَ الَّذِي أَرْسَلْتَ . فَإِنَّكَ إِنْ مِتُّ مِنْ لَيْلَتِكَ مِتُّ عَلَى الْفِطْرَةِ ، وَإِنْ أَصْبَحْتَ أَصْبَحْتَ خَيْرًا » متفق عليه .

وفي رواية في الصحيحين عن البراء قال : قال لي رسول الله ﷺ : « إِذَا أَتَيْتَ مَضْجِعَكَ فَتَوَضَّأْ وَضُوءَكَ لِلصَّلَاةِ ، ثُمَّ أَضْطَجِعْ عَلَى شِقِّكَ الْأَيْمَنِ ، وَقُلْ - وَذَكَرَ نَحْوَهُ - ثُمَّ قَالَ : وَاجْعَلْهُنَّ آخِرَ مَا تَقُولُ » .

80. Baraa ibn Caazib (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W) .ii dardaarmay oo igu yiri: Markii aad seexanaysid habeenkii ku ducayso ducadan: Allaahumma aslamtu nafsii ileyka , wawajahtu wajhii ileyka , wafawwad-tu amrii ileyka , walja'tu dahrii ileyka, raqbatan wa rahbatan ileyka, laa maljaa walaa manjaa minka illaa ileyka, aamantu bikitaabika alladii ansalta, wanabiyyaka alladii arsalta. oo macnaheedu yahay :

' Alloow adaan naftayda kuu dhiibey, wejigayga kuu jeediyeey, arinkayga kuu bandhigay, dhabarkayga ku magan geliyeey, cabsi iyo rajo aan kugu qabo awgeed meel loo hirtaa oo lagaaga carari karo, iyo meel la nabad galo midna ma jirto xaggaaga maahee. Waxaan

rumeeyey kitaabka aad soo dejisey iyo nebiga aad soo dirsatay.
Marka haddaad habeenkaa dhimato waxaad dhiman adigoo xalay
dhalay ka ah dambi oo dhan, haddii uu waagu kuu beryana khayr
buu kuula beryayaa" (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale oo isla Baraa laga soo xigtay waxay aheyd: Nebigaa
(S.C.W.) wuxuu igu yiri: "Markii aad u diyaargarowdo inaad see-
xatid weeseysa, dabadeedna dhinaca midig u jiiifso oo ku duceysa
ducadii aynu soo sheegnay hana ahaato ducadaa hadalkaaga kuwii
u dambeeyey (intaadan seexan ka hor.) (Bukhaari iyo Muslim)

٨١ - الثامن : عن أبي بكر الصديق رضي الله عنه عبد الله بن عثمان بن عامر بن
عمر بن كعب بن سعد بن تيم بن مرة بن كعب بن لؤي بن غالب القرشي التيمي
رضي الله عنه - وهو وأبوه وأمه صحابة - رضي الله عنهم - قال : نظرت إلى
أقدام المشركين ونحن في الغار وهم على رؤوسنا فقلت : يا رسول الله لو أن
أحدهم نظر تحت قدميه لأبصرنا . فقال : « ما ظنك يا أبا بكر بأثنين الله
تألهما » متفق عليه .

81. Abuu Bakar as-Siddiiq (A.K.R.) bin Cabdullaah bin Cusmaan
bin Caamir bin Cumar bin Kacab bin Sacad bin Taym bin Murrāh
bin Kacab bin Luway bin Qaalib al-Qurashi al-Taymii oo isaga iyo
aabihi iyo hooyadi intaba saxaabi ahaa waxaa laga soo xigtay: ha-
dalkan: Kolkii Rasuulkii Alle (S.C.W.) iyo anigu aan ku dhuuma-
neynay godkii ayna na baadi goobayeen qolooyinka Makka, ayaan
waxaan arkay cagihii mushrikiinta oo dushayada ah oo godka af-
kiisa debedda ku sugan. Waxaana iri: Rasuul Alloow, haddii uu
midkood cagihiiisa fiirin lahaa waa ina arki lahaa. wuxuu yiri: '
Abuu Bakarow bal ka warran labo Alle uu ku yahay seddex. '
(Bukhaari iyo Muslim)

٨٢ - التاسع : عن أم المؤمنين أم سلمة واسمها هند بنت أبي أمية حذيفة
المخزومية رضي الله عنها أن النبي ﷺ كان إذا خرج من بيته ، قال : « بسم الله
توكلت على الله ، اللهم إني أعوذ بك أن أضل أو أضل . أو أزل أو أزل ، أو
أظلم أو أظلم ، أو أجهل أو يُجهل عليّ » . حديث صحيح ، رواه أبو داود ،
والترمذي وغيرهما بأسانيد صحيحة قال الترمذي : حديث حسن صحيح وهذا
لفظ أبي داود .

82. Umm Salamah (A.K.R.) (Hooyadii mu'miniinta) waxay tiri: Nebigu (S.C.W.) markuu guriga ka baxayo wuxuu oron jirey duca-dan: Bismillaah , tawakaltu calallaah, Allaahumma innii acuudu bika an adilla aw udalla, aw azilla , aw uzalla, aw adlima aw udlama, aw ajhala aw yujhala calayya.' oo macnaheedu yahay " Waxaan ku baxayaa magaca Alle, anigoo kalsooni buuxda ku qaba. Alloow, waxaan kaa magan gelayaa inaan wax dhunsho ama la i dhumio ama aan sidbado ama la isidbiyo , ama aan wax dulmiyo ama la i dulmiyo ama aan wax ku edebdarrooda ama la igu edeb darroodo".

(Waa Xadiis saxiix ah, waxaana weriyey Tirmidi &Abuu daawuud)

٨٣ - العاشر : عن أنس رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ قَالَ - يَعْنِي إِذَا خَرَجَ مِنْ بَيْتِهِ - بِسْمِ اللَّهِ تَوَكَّلْتُ عَلَى اللَّهِ ، وَلَا حَوْلَ وَلَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللَّهِ ، يُقَالُ لَهُ : هُدَيْتَ وَكُفَيْتَ وَوُقِيْتَ ، وَتَنَحَّى عَنْهُ الشَّيْطَانُ » رواه أبو داود والترمذي ، والنسائي وغيرهم . وقال الترمذي : حديث حسن ، زاد أبو داود : « فيقول - يعني الشيطان - لشيطان آخر : كَيْفَ لَكَ بِرَجُلٍ قَدْ هُدِيَ وَكُفِيَ وَوُقِيَ ؟ » .

83. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) Wuxuu yiri: " Qofkii yiraahda markuu guriga ka baxayo: Bismillaahi, tawakaltu, calallaah, walaa xawla walaa quwwata illaa billaah, oo macnaheedu yahay (Waxaan ku baxayaa magaca Alle, anigoo kalsooni buuxda ku qaba iskuna halleynaya; Waa Alle midka bixiya awoodda xumaha iyo gefka lagaga leexo, ama bixiya awoodda aad samo ku fasho" Ninkii sidaa yiraahdaa waa nin xaqii la tusay, xumaan iyo sharna laga hayey, shaydaankuna waa ka fogaadaa"

(Tirmidi, Nisaa'i, iyo Abuu Daawuud)

Abuu Daawuud wuxuu ku kordhiyey: ' Shaydaan baana wuxuu ku yiraahdaa mid kale oo saaxiibkii ah ' Maxaad ka tareysaa nin la hanuuniyey, la kaafiyey, oo la dhowrayna? '

٨٤ - وعن أنس رضي الله عنه قال : كان أخوانِ عليَّ عهد النبي ﷺ وَكَانَ أَحَدُهُمَا يَأْتِي النَّبِيَّ ﷺ وَالْآخَرُ يَحْتَرِفُ ، فَشَكَا الْمُحْتَرِفُ أَخَاهُ لِلنَّبِيِّ ﷺ فَقَالَ : « لَعَلَّكَ تُرْزَقُ بِهِ » رواه الترمذي بإسناد صحيحٍ على شرطِ مسلم .

« يحترف » : يكتسب ويتسبب .

84. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yir: Waqtigii Nebiga (S.C.W.) waxaa jirey laba nin oo walaalo ah; midkood nebigo (S.C.W.) u adeegi jiray, midna camalkiisuu raacan jiray. Maalin baa kan dambe nebiga (S.C.W.) uga soo eed sheegtay walaalki una sheegay inuusan noloshiisa wax u kasban. Nabigu (S.C.W.) wuxuu ugu jawaabay: waxaa laga yaabaa in laguga irsaaqo dartiis ."
(Tirmidi baa sanad saxiix ku weriyey)

Fiiro gaar ah: Tawakkul waa eray af Carabi ah, luqad ahaanna waxaa weeye inaad ku tiirsanaato cid uun . Diin ahaan waxaa loola jeedaa tawakulka inaad Ilaahay ku kalsoonaato, ku tiirsanaato, isku halleyso, imaankana ku qabto oo aad talo saaratid. Waase in la kala saaraa tawakulka iyo tawaakulka. Nimanka suufiyiinta waxay ka qaateen macno ah in meel layska fadhiyo, oo aan la xoogsan, wax sabab ahna aan lala iman. Taasoo runtii ceeb ku ah diinta, waxna u dhimeysa bilicda iyo wanaaggeeda.

Waxaa la doonayaa inaad Alle talo saarato adigoo wixii sabab ahaa oo aad kartey oo dhan la yimid, aad yiqiinsatidna marka qorshe iyo hab maamul wanaagsan aad arrintii ku sameyso inay isku dubba dhaceyso oo ay guuleysaneyso hadday dani inoogu jidho Allena uu gacan nagu siinayo. Sidaa baana Tawakkulka dhabta ah.

٨ - باب في الاستقامة

CUTUBKA 8

Ku Toosnaanta Diinta

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى: ﴿ فَاسْتَقِمْ كَمَا أُمِرْتَ ﴾ [هود : ١١٢]

33. ' Ugu toosnow siraadka mustiqiimka ah (jidka toosan ee xaqa ah) sida lagu faray" Suuradda Huud: Aayadda 112.

Wuxuu kaloo yiri sare ahaaye:

﴿ إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّهُ ثُمَّ اسْتَقَامُوا تَتَنَزَّلُ عَلَيْهِمُ الْمَلَائِكَةُ أُنْ لَا تَخَافُوا وَلَا تَحْزَنُوا وَأَبْشِرُوا بِالْجَنَّةِ الَّتِي كُنْتُمْ تُوعَدُونَ . نَحْنُ أَوْلِيَاؤُكُمْ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَفِي الْآخِرَةِ وَلَكُمْ فِيهَا مَا تَشْتَهِي أَنْفُسُكُمْ وَلَكُمْ فِيهَا مَا تَدْعُونَ نُزُلًا مِنْ غَفُورٍ رَحِيمٍ ﴾

[فصلت : ٣٠ - ٣٢]

34. ' Kuwa yiraahda: Rabbigayo waa Allaah; dabadeedna toosnaada, malaa'ig baa ku soo degta (kuwaa markay dhimanayaan oo ay naftu ka sii baxeyso) ku leh: Ha cabsannina, ha murugoonnina, oo ku bishaareysta Jannadii la idiin yaboohay. Annagaa ah gacalkiin idin dhowraya adduun iyo aakhiroba. Xagga Jannadana waxaa idiin yaal wixii ay naftiinnu rabto oo dhan iyo wixii aad u yeerataanba'e. waana martiqaad ka sugnaaday dambi dhaafe naxariis badan" Suuradda Fusilat: Aayadaha 30-32

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne:

وقال تعالى: ﴿ إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّهُ ثُمَّ اسْتَقَامُوا فَلَا خَوْفَ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ أُولَئِكَ أَصْحَابُ الْجَنَّةِ خَالِدِينَ فِيهَا جَزَاءً بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ ﴾ [الأحقاف : ١٣ - ١٤] .

35 ' Kuwii yiri: Rabbigayo Waa Alle, dabadeedna xaqa ku toosnaaday oo aan dhinacna uga leexin, cabsi korkooda ahaanmayso iyo murugo. Waana ehlu Janno kuwaaasu, dhexdeedayna ku waaayaan,, Camalkii wanaagsanaa ay falan jireen darti" Suuradda al-Axqaaf: Aayadaha 13,14.

٨٥- وعن أبي عمرو وقيل : أبي عمرة سفيان بن عبد الله رضي الله عنه قال : قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ قُلْ لِي فِي الْإِسْلَامِ قَوْلًا لَا أَسْأَلُ عَنْهُ أَحَدًا غَيْرَكَ . قال : « قُلْ : آمَنْتُ بِاللَّهِ : ثُمَّ اسْتَقِمَّ » رواه مسلم .

85. Sufyaan ibn Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: waxaan ka codsaday Rasuulkii Alle (S.C.W.) arrintan anigoo ku iri : Waxaad iga siisaa cashar dhan iyo daris waantow iyo hanuun leh Islaamka oo aanan dabadaa waydiineyn cid kale. Wuxuu yiri (S.C.W.): " Dheh: Alle ayaan Rumeeyey, dabadeedna xaqa raac oo ku toosnow".
(Muslim)

٨٦- وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « قَارِبُوا وَسَدِّدُوا ، وَأَعْلَمُوا أَنَّهُ لَنْ يَنْجُو أَحَدٌ مِنْكُمْ بِعَمَلِهِ » قالوا : وَلَا أَنْتَ يَا رَسُولَ اللَّهِ ؟ قال : « وَلَا أَنَا إِلَّا أَنْ يَتَغَمَّدَنِي اللَّهُ بِرَحْمَةٍ مِنْهُ وَفَضْلٍ » رواه مسلم .

وَالْمُقَارَبَةُ : الْقَصْدُ الَّذِي لَا غُلُوَّ فِيهِ وَلَا تَقْصِيرَ . وَالسَّدَادُ : الإِسْتِقَامَةُ وَالْإِصَابَةُ . وَ« يَتَغَمَّدَنِي » : يَلْبَسُنِي وَيَسْتَرُنِي .

قال العلماء : مَعْنَى الاستِقَامَةِ لُزُومُ طَاعَةِ اللَّهِ تَعَالَى ، وَهِيَ مِنْ جَوَامِعِ
الْكَلِمِ وَهِيَ نِظَامُ الْأُمُورِ ؛ وَبِاللَّهِ التَّوْفِيقُ .

86. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Raaca mabaadida iyo qodobbada diinta oo si wanaagsan u dhowra, ahaadna xaqaaniyaal jidka Alle ku toosan: oo ogaada inuusan qofkiinna camalkiisa ku badbaadi karin. Nin baa wuxuu weydiiyey: Ma xataa adiga nabi Alloow? Wuxuu yiri: ' xataa aniga, in Alle naxariistiisa iyo galladdiisa i dhex geliyo maahee'. (Muslim)

Fiiro gaar ah : Culimadu waxay yiraahdaan ku toosnaanta xaqa waxaa loola jeedaa inaad Alle adeecdo, oo awaamirtiisa aad fuliso qowl iyo ficil; farid iyo reebid, iyo inaad noolaato nolol aad ugu hoggaan santahay addoon dhab ahna ugu tahay Allahii ku abuuray.

٩ - باب في التفكير في عظيم مخلوقات الله تعالى

CUTUKA 9

Ka Fakaridda Uunka Ilaahay iyo Waxyaabaha inagu hareersan.

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى : ﴿ إِنَّمَا أَعْظَمَكُمْ بِوَاحِدَةٍ أَنْ تَقُومُوا لِلَّهِ مِثْلَىٰ خِزْفٍ ثُمَّ تَتَفَكَّرُونَ ﴾ [سبأ : ٤٦]

36. " Ku dheh (Muxammadow) Waxaan idinku waaninayaa hal mas' alo, waa inaad dar Alla laba labo iyo mid mid ugu istaagtaan dabadeedna fekertaan" Suuradda Saba: Aayadda 46.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَآخْتِلَافِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ آيَاتٍ لِأُولِي الْأَلْبَابِ الَّذِينَ يَذْكُرُونَ اللَّهَ قِيَامًا وَقُعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِهِمْ وَيَتَفَكَّرُونَ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ رَبَّنَا مَا خَلَقْتَ هَذَا بَاطِلًا سُبْحَانَكَ ﴾ [آل عمران : ١٩٠ - ١٩١] .

37. ' Abuurista cirarka iyo dhulka iyo isdhaafka habeenka iyo maalinta, calaamooyinbaa ku jira muujinaya (awoodda iyo ku keli ahaanshada Alle maamulka uunka iyo mulkiisa iyo mudnaantiisa keligi cibaadada) waxayna ugu jirtaa kuwa wax garadka ah. Kuwa xusa Alle, joog, fadhi, iyo jiiifba, oo ka fakara abuurista cirarka iyo dhulka oo (yiraahda) Rabbiyoow waxakan dheel uma aadan abuuran. Adaa Hufan! Innaga dhowr cadaabta naarta. Suuradda aali-Cimraan : Aayadaha 190-191.

Wuxuu kaloo yiri Alle hufnaaye:

وقال تعالى : ﴿ أَفَلَا يَنْظُرُونَ إِلَى الْإِبِلِ كَيْفَ خُلِقَتْ وَإِلَى السَّمَاءِ كَيْفَ رُفِعَتْ وَإِلَى الْجِبَالِ كَيْفَ نُصِبَتْ وَإِلَى الْأَرْضِ كَيْفَ سُطِحَتْ فَذَكَرْ إِنَّمَا أَنْتَ مُذَكَّرٌ ﴾
[الغاشية : ١٧ - ٢١]

38. ' Ma waysan fiirinayn geela , sida loo abuuray? iyo cirka, sida loo bilay? iyo buuraha, sida loo qotomiyey? iyo dhulka, sida loo goglay? Waani, waaniye kaliyaad tahaye" Suuradda Al-Qaashiya: Aayadaha 17-21

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne:

وقال تعالى : ﴿ أَفَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرُوا ﴾ [محمد : ١] .

39. "Ma weysan dhulka marin oo fiirin ciribta qoomankii iyaga ka horreeyey ? Suuradda Muxammad; Aayadda10.

والآيات في الباب كثيرة .

ومن الأحاديث الحديث السابق : « الْكَيْسُ مَنْ دَانَ نَفْسَهُ » .

١٠ - باب المبادرة إلى الخيرات

C U T U B K A 10 KHAYR KU DADAALIDDA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى : ﴿ فَاسْتَبِقُوا^(٤) الْخَيْرَاتِ ﴾ [البقرة : ١٤٨]

40. ' Khayraadka ku tartama" Suuradda al-Baqara: Aayadda 148.

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَسَارِعُوا إِلَىٰ مَغْفِرَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ أُعِدَّتْ لِلْمُتَّقِينَ ﴾ [آل عمران : ١٣٣] .

41. " U tartama dambi dhaafka Rabbiggiin iyo Janno balleceedu le'egyahay cirarka iyo dhulka oo loo diyaariyey kuwa iska dhowra xumaha " Suuradda aali-Cimraan : Aayadda 133.

٨٧ - فَأَلَّوْا : عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « بَادِرُوا بِالْأَعْمَالِ فتنًا كقطع الليل المظلم ، يُصبح الرجل مؤمناً ويُمسي كافراً ، ويُمسي مؤمناً ويصبح كافراً ، يبيع دينه بعرضٍ من الدنيا » رواه مسلم .

87. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Ku dadaala Camalka san, waqtina ha luminina aad ku sameyn kartaan camal suuban waxaa imaan doona dhowaan fidmooyin iyo fasaad sida habeen madow ah oo qofka waagu u beryayo isagoo Mu' min ah, isagoo gaal ahna gabbalku u dhacayo, ama isagoo mu'min ah gabbalku u dhacayo, isagoo gaal ahna waagu u beryayo. Wuxuu diyaar qofkii u noqon inuu diintiisa siisto xoogaa wax adduun ah". (Muslim).

٨٨ - الثاني : عن أبي سرّوعة - بكسر السين المهملة وفتحها - عقبه بن الحارث رضي الله عنه قال : صَلَّيْتُ وَرَاءَ النَّبِيِّ ﷺ بِالْمَدِينَةِ الْعَصْرَ ، فَسَلَّمَ ثُمَّ قَامَ مُسْرِعًا فَتَخَطَّى رِقَابَ النَّاسِ إِلَى بَعْضِ حُجَرِ نِسَائِهِ ، فَفَزَعَ النَّاسُ مِنْ سُرْعَتِهِ ، فَخَرَجَ عَلَيْهِمْ فَرَأَى أَنَّهُمْ قَدْ عَجِبُوا مِنْ سُرْعَتِهِ قَالَ : « ذَكَرْتُ شَيْئًا مِنْ تَبَرِّ عِنْدَنَا فَكْرِهْتُ أَنْ يَحْسِنِي فَأَمَرْتُ بِقِسْمَتِهِ » رواه البخاري .

وفي رواية له « كُنْتُ خَلَفْتُ فِي الْبَيْتِ تَبْرًا مِنَ الصَّدَقَةِ فَكْرِهْتُ أَنْ أُبَيِّتَهُ » .
« التَّبْرُ » قِطْعُ ذَهَبٍ ، أَوْ فِضَّةٍ .

88. Cuqbah ibn Xaaris (A.K.R) wuxuu yiri: Waxaan kula tukadey Nebiga (S.C.W.) Salaad Casar magaalada Madiina. Markii uu salaama naqsaday buu inta deg deg u kacay oo dadkii dhexmaray buu wuxuu aadey guryahiisii. Markii deg degtiisa la arkay baa la naxay. Kolkuu soo laabtay, buu wuxuu yiri isagoo sharxaya waxa uu keenay degdegta: Waxaan xusuustay wax xoogaa qalin ama dahab ceeriin ah oo guriga yiil, marka arrintaa baa i welwel gelisay. Waxaan hadda soo qorsheeyey in la qaybshaa" (Bukhaari)

Werin kale oo xadiiska waxay ahayd: "Waxaan guriga uga soo tegey wax xoogaa dahab ceeriin ah oo sadaqo ah, marka waxaan rabin inuu igu baryo" (Bukhaari)

٨٩- الثالث : عن جابر رضي الله عنه قال : قال رجل للنبي ﷺ يوم أحد : أرأيت إن قتلت فأين أنا ؟ قال : « في الجنة » فألقى تمرات كُن في يده ، ثم قاتل حتى قُتل . متفق عليه .

89. Jaabir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin baa maalintii Uxud Nebiga (S.C.W.) wuxuu ku yiri: Haddii la igu dilo dagaalka xaggee aada-yaa? Wuxuu ugu jawaabay: ' Jannada ' Ninkii xabbado timir ah oo gacantiisa ku jirey buu inta tuuray dagaalkii galay dirirayna jeer u shahiiday. (Bukhaari iyo Muslim)

٩٠- الرابع : عن أبي هريرة رضي الله عنه قال : جاء رجل إلى النبي ﷺ فقال : يا رسول الله أي الصدقة أعظم أجراً ؟ قال : « أن تصدق وأنت صحيحٌ شحيحٌ تخشى الفقر وتأمل الغنى ، ولا تمهل حتى إذا بلغت الحلقوم قلت لفلان كذا ولفلان كذا وقد كان لفلان » متفق عليه .

« الحلقوم » : مجرى النفس . و« المريء » : مجرى الطعام والشراب .

90. Abuu Hureyrah (A..K.R.) wuxuu yiri: Nin baa Nebiga (S.C.W.) u yimid oo weydiiyey: Sadaqada tebaa u ajar badan? Wuxuu ku jawaabay (S.C.W.): ' Tii aad bixiso adoo caafimaad qaba, oo lexe jeclo ku hayso, oo faqri ka baqaya, inaad wax koror-sataana ay kugu jirto oo jecel. Ha u dib dhigin bixinta sadaqada inta ay naftu dhuunta ka imanayso, markaasna aad dhahdo : hebel baa intaas leh, hebelna intaas, oo ah goor ay iyadii yeesheen hebel iyo hebel .' (Bukhaari iyo Muslim)

٩١- الخامس : عن أنس رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ أخذ سيفاً يوم أحدٍ فقال : « مَنْ يَأْخُذْ مِنِّي هَذَا » ؟ فَبَسَطُوا أَيْدِيَهُمْ كُلُّ إِنْسَانٍ مِنْهُمْ يَقُولُ : أَنَا أَنَا قَالَ : « فَمَنْ يَأْخُذُهُ بِحَقِّهِ » ؟ فَأَحْجَمَ الْقَوْمُ فَقَالَ أَبُو دُجَانَةَ رضي الله عنه : أَنَا أَخْذُهُ بِحَقِّهِ فَفَلَقَ بِهِ هَامَ الْمُشْرِكِينَ ، رواه مسلم .

اسم أبي دجانة : سماك بن خرشة . قوله : « أَحْجَمَ الْقَوْمُ » : أي توقفوا . و« فَلَقَ بِهِ » أي شق « هَامَ الْمُشْرِكِينَ » : أي رؤوسهم .

91. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebiga (S.C.W.) wuxuu kor u qaaday seef maalintii Uxud oo yiri: Yaa seeftan iga qabanaya? Nin walbaa inta soo taagey gacmaha buu yiri : Aniga, Aniga. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Yaa mudankeeda ku qaadanaaya oo guda-naya xilkeeda?" Saa waa la is buurtay. Abuu Dujaanah (A.K.R.) baa yiri: ' Anigaa mudankeeda ku qaadanaaya oo guda-naya xilkeeda' markaasuu weecda kaga dhigay mushrikiintii.' (Muslim)

٩٢ - السادس : عن الزبير بن عدي قال : أتينا أنس بن مالك رضي الله عنه فشكونا إليه ما نلقى من الحجاج . فقال : « اضربوا فإنه لا يأتي زمان إلا والذي بعده شر منه حتى تلقوا ربكم » ، سمعته من نبيكم ﷺ . رواه البخاري .

92. Zubayr ibn Cadiy wuxuu yiri: waxaan u tagnay Anas ibn Maalik annagoo uga eed sheeganayna dhibta Xajjaaj bin Yuusuf (oo ahaa xaakim daalim ah waqtigii xukunkii reer Ummaya) . Wu - xuu innagula taliyey inaan sabarno yirina: Saman waliba kan xiga ka shar badan oo ka xun. Waxaan sidaas ka maqlay Nebigii (S.C.W.). (Bukhaari)

٩٣ - السابع : عن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « بادروا بالأعمال سبعا ، هل تنتظرون إلا فقراً منسياً ، أو غنى مطغياً ، أو مرضاً مفسداً ، أو هرمًا مُفندا ، أو موتاً مجهزاً ، أو الدجال فشر غائب ينتظر ، أو الساعة فالساعة أذهى وأمر » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

93. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waqti ha luminina oo fasha camal san ka hor intaan toddoba arrimood oo dhib ah idin qabsan middood. Dabadeed ka digid awgeed buu u tiriyeey, faqri feker leh, ama maal kibir leh, ama bugtu silic leh, ama gobow Cantatab leh, ama geeri kedis ah , ama soo if baxa Dajjaalka. Waxyaabahaas oo idil waa wax la sugo oo shar badan; ama Saacadda qiyaame, saacaddaana adag oo daran!" (Tirmidi baa weriyey oo yiri; waa xadiis xasan ah)

Xadiiskan sanadkiisa dacfi baa ku jira sidaa waxaa yiri alBaani.

٩٤ - الثامن : عنه أن رسول الله ﷺ قال يوم خيبر : « لأُعطين هذه الرؤية رجلاً يحب الله ورسوله يفتح الله على يديه » قال عمر رضي الله عنه : ما أحببت الإمارة إلا يومئذ ، فتساورت لها رجاء أن أدعى لها ، فدعا رسول الله ﷺ علي بن أبي

طالب رضي الله عنه فأعطاه إياها وقال : « أمشِرِ وَلَا تَلْتَفِتْ حَتَّى يَفْتَحُ اللَّهُ عَلَيْكَ » فَسَارَ عَلِيٌّ شَيْئًا ثُمَّ وَقَفَ وَلَمْ يَلْتَفِتْ فَصَرَخَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ عَلَيَّ مَاذَا أَقَاتِلُ النَّاسَ ؟ قَالَ : « قَاتِلُهُمْ حَتَّى يَشْهَدُوا أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ ، فَإِذَا فَعَلُوا فَقَدْ مَنَعُوا مِنْكَ دِمَاءَهُمْ وَأَمْوَالَهُمْ إِلَّا بِحَقِّهَا وَحَسَابُهُمْ عَلَيَّ اللَّهُ » رواه مسلم .

« فَتَسَاوَرْتُ » هو بالسین المهملة : أي وثبت متطلعاً .

94. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Maalintii dagaalkii Khaybar, nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waxaan u dhiibayaa calanka nin Alle iyo rasuulkiisuba jecel yihiin oo guusha Alle isaga raacin doono. Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Marnaba ma doonin madaxnimo, laakiinse maalintaas keliyaan jeclaaday in fursaddaas la i siiyo. Wuxuuse nebigu (S.C.W.) u yeeray Cali ibn abii Daalib una dhiibey calankii oo yiri: " Soco oo gadaal ha soo dhugan jeer guusha Alle ku siiyo" Cali (A.K.R.) markii sidaa lagu yiriba, inta xoogaa socday oo markaa istaagey isagoo aan gadaal soo dhugan ku weydiiyey cod sare su'aashan: Rasuulkii Alloow (S.C.W.) maxaan dadka ku la diriraa? Wuxuu ku jawaabay : " La dirir intay ka qiraan inuusan jirin cid caabudaad mudan Alle maahee, iyo in Muhammad yahay rasuulkiisii. Haddii ay sidaas yeelaan, dhiiggooda iyo maalkoodiiba waa in la nabad geliyaa oo aan lagu xadgudbin. (dabcan) waxaa saaran wixii xil iyo waajib ah oo shareecadu fartay sharcigaana lala tiigsan haddii ay la yimaadaan ashahaadada wax waxyeelaya, Waxayna saaran tahay xisaabintooda oo ku shaqo leh wixii u qarsoon Alle.' (Muslim)

١١ - باب في المجاهدة

CUTUBKA 11

Qof Walbow waa adiga iyo Dadaalkaa

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى : ﴿ وَالَّذِينَ جَاهَدُوا فِينَا لَنَهْدِيَنَّهُمْ سُبُلَنَا وَإِنَّ اللَّهَ لَمَعَ

الْمُحْسِنِينَ ﴾ [العنكبوت : ٦٩]

42. " Kuwa daraaddayo u dadaaley waxaan hubaashii ku hanuuni-naynaa jidadkayaga, Allena wuxuu la jiraa samaanfalayaasha " Suuradda al-Cankabuut : Aayadda 69.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَأَعْبُدْ رَبَّكَ حَتَّىٰ يَأْتِيَكَ الْيَقِينُ ﴾ [الحجر : ٩٩]

43. "Rabbigaa Caabud jeer ay yaqiintu (geerida) kuu timaaddo"
Suuradda al-Xijr : Aayadda 99

Wuxuu kaloo Alle yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَأَذْكُرْ اسْمَ رَبِّكَ وَتَبَتَّلْ إِلَيْهِ تَبْتِيلًا ﴾ [المزمّل : ٨]
: أَي انْقَطِعْ إِلَيْهِ .

44. "Xus magac Rabbigaa, xaggiisana go'id u go' ". Suuradda al-Muzammil: Aayadda 8

Wuxuu kaloo yiri Alle weyne kor ahaaye:

وقال سبحانه وتعالى : ﴿ فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَهُ ﴾
[الزلزلة : ٧]

45. " Qofkii fala wax saxar le'eg oo khayr ah waa uu Arkayaa"
Suuradda al-Zalalah: Aayadda 7

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَمَا تَقَدَّمُوا لَأَنْفُسِكُمْ مِنْ خَيْرٍ تَجِدُوهُ عِنْدَ اللَّهِ هُوَ خَيْرًا
وَأَعْظَمَ أَجْرًا ﴾ [المزمّل : ٢٠]

46. ' Wixii aad Naftiinna u hormarisaan oo khayr ah, Alle agti baad ka helaysaan isagoo sii weyn oo sii khayr badan" Suuradda al-Muzammil : Aayadda 20

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَمَا تَنْفِقُوا مِنْ خَيْرٍ فَإِنَّ اللَّهَ بِهِ عَلِيمٌ ﴾ [البقرة : ٢٧٣]

47. ' Wixii aad bixisaan oo khayr ahba Alle waa og yahay" Suuradda al-Baqarah : Aayadda 273

والآيات في الباب كثيرة معلومة . وأما الأحاديث :

٩٥ - فالأول : عن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى قَالَ : مَنْ عَادَى لِي وَلِيًّا فَقَدْ آذَنْتُهُ بِالْحَرْبِ ، وَمَا تَقَرَّبَ إِلَيَّ عَبْدِي بِشَيْءٍ أَحَبَّ إِلَيَّ مِمَّا افْتَرَضْتُ عَلَيْهِ ، وَمَا يَزَالُ عَبْدِي يَتَقَرَّبُ إِلَيَّ بِالنَّوَافِلِ حَتَّى أُحِبَّهُ ، فَإِذَا أَحْبَبْتُهُ كُنْتُ سَمْعَهُ الَّذِي يَسْمَعُ بِهِ ، وَبَصَرَهُ الَّذِي يُبْصِرُ بِهِ ، وَيَدَهُ الَّتِي يَبْطِشُ بِهَا ، وَرِجْلَهُ الَّتِي يَمْشِي بِهَا ، وَإِنْ سَأَلَنِي أُعْطِيْتُهُ ؛ وَلَئِنْ اسْتَعَاذَنِي لِأَعِيذَنَّهُ » رواه البخاري .

« آذَنْتُهُ » : أعلمته بآني محارب له . « استَعَاذَنِي » روي بالنون وبالباء .

95. Abuu Hurayrah (A.K.R.) waxaa lagaa soo xigtay in nabigu (S.C.W.) yiri: Alle kor ahaaye wuxuu yiri: Qofkii qof mu'min ah colaadiya, waa ruux dagaal aniga igula jira. Mana jiraan wax addoonkaygu iigu soo dhawaado oo aan ka jeclahay wixii aan ku waajibiyey, mar kasta oo uu addoonkaygu sunnooyinka iigu soo dhawaadana (faralka kaddib) waa aan ku sii jeclaadaa. Markii aan jeclaadana waxaan noqdaa maqalkiisa uu wax ku maqlayo iyo araggiisa uu wax ku arkayo iyo gacantiisa uu wax ku qabanayo iyo lugtiisa uu ku soconayo. Haddii uu wax i weydiistana waa siinayaa, haddii uu i magan galana waa magan gelinayaa'. (Bukhaari)

٩٦ - الثاني : عن أنس رضي الله عنه عن النبي ﷺ فيما يرويه عن ربه عز وجل قال : « إِذَا تَقَرَّبَ الْعَبْدُ إِلَيَّ شَبْرًا تَقَرَّبْتُ إِلَيْهِ ذِرَاعًا ، وَإِذَا تَقَرَّبَ إِلَيَّ ذِرَاعًا تَقَرَّبْتُ مِنْهُ بَاعًا وَإِذَا أَتَانِي يَمْشِي أَتَيْتُهُ هَرْوَلَةً » رواه البخاري .

96. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle kor ahaaye wuxuu yiri: Addoonku markii uu taako ii soo dhowaado, dhudhun baan u soo dhawaadaa, markii uu dhudhun ii soo dhawaadana, baac (dhererka labada gacmood marka la fidiyo in le'eg) baan u soo dhowaadaa, markii uu iigu yimaadana soo socod waxaan ugu imaadaa orod". (Bukhaari)

٩٧ - الثالث : عن ابن عباس رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ : « نِعْمَتَانِ مَغْبُونٌ فِيهِمَا كَثِيرٌ مِنَ النَّاسِ : الصَّحَّةُ ، وَالْفَرَاغُ » رواه البخاري .

97. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri:

" Dad badan baa ku hodan oo aan waxba ka faa'idin labo nicmo; oo kala ah caafimaad qabka iyo kansho (fursad) haysashada,

(markaas bayan u caabudin Alle sida uga badan ee waajibka ah inay u caabudaan.) (Bukhaari)

٩٨ - الرابع : عن عائشة رضي الله عنها أن النبي ﷺ كَانَ يَقُومُ مِنَ اللَّيْلِ حَتَّى تَتَفَطَّرَ قَدَمَاهُ فَقُلْتُ لَهُ : لِمَ تَصْنَعُ هَذَا يَا رَسُولَ اللَّهِ وَقَدْ غَفَرَ اللَّهُ لَكَ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِكَ وَمَا تَأَخَّرَ ؟ قَالَ : « أَفَلَا أُحِبُّ أَنْ أَكُونَ عَبْدًا شَكُورًا » متفقٌ عليه . هذا لفظ البخاري .

98. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu caa-deystay inuu taagnaado in badan waqtiga uu tukanayo Salaatu laylka habeenkii illaa caguhu jeex jeexmeen; markaasaan waxaan ku iri: Rasuul Alloow, maxaad sidaas u yeelaysaa, maadaamuu Alle kuu dhaafay dembigaagiiba mid hore iyo mid dambaba? Wuxuu yiri: " Sow ma aha inaan addoon shukriya ahaado?" (Bukhaari iyo Muslim)

٩٩ - الخامس : عن عائشة رضي الله عنها أنها قالت : كان رسول الله ﷺ إِذَا دَخَلَ الْعَشْرَ أَحْيَا اللَّيْلَ ، وَأَيْقَظَ أَهْلَهُ ، وَجَدَّ وَشَدَّ الْمِئْزَرَ . متفقٌ عليه .

والمراد : العشر الأواخر من شهر رمضان . و« المِئْزَرُ » : الإزار ، وهو كناية عن اعتزال النساء . وقيل : المراد تَشْمِيرُهُ لِلْعِبَادَةِ ، يُقَالُ : شَدَدْتُ لِهَذَا الْأَمْرِ مِئْزَرِي : أَي تَشَمَّرْتُ وَتَفَرَّغْتُ لَهُ .

99. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Markii ay tobanka maalmood ee dambe ee bisha Ramadaan soo galaan nabiga (S.C.W.) waxaa caado u aheyd inuu habeenkii oo dhan cibaado iyo salaad ku soo jeedo, ehelkiisana isla ujeeddadaa u kiciyo, Salaadda buuna badsan jiray oo ku dadaali jirey, guntigana u adkaysan jirey " (Bukhaari iyo Muslim)

١٠٠ - السادس : عن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « الْمُؤْمِنُ الْقَوِيُّ خَيْرٌ وَأَحَبُّ إِلَى اللَّهِ مِنَ الْمُؤْمِنِ الضَّعِيفِ وَفِي كُلِّ خَيْرٍ . اِخْرَضَ عَلَى مَا يَنْفَعُكَ ، وَأَسْتَعِنَ بِاللَّهِ وَلَا تَعْجِزْ . وَإِنْ أَصَابَكَ شَيْءٌ فَلَا تَقُلْ لَوْ أَنِّي فَعَلْتُ كَانَ كَذَا وَكَذَا ، وَلَكِنْ قُلْ : قَدَّرَ اللَّهُ ، وَمَا شَاءَ فَعَلَ فَإِنَّ لَوْ تَفْتَحُ عَمَلَ الشَّيْطَانِ » رواه مسلم .

100. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle wuxuu in badan jecel yahay mu'minka adag oo ka jecel yahay kan jilicsan, midkood walbaana waa fiican yahay. Ku dadaal oo dalab wixii wax ku taraya oo anfacaad kuu leh adduunka iyo aakhirada. mar walibana Alle kaalmo weydiiso ha iscada-dawalin oo ha is dhiibin . haddii ay wax kugu dhacaanna ama dhi-baato kugu timaaddo ha oran haddaan sidaas iyo sidaa yeeli lahaa sidaa iyo sidaa bay arrin noqon laheyd; waxaadse dhahdaa oo ke-liya: Qaddarallaahu wamaa shaa'a facal' . Oo macnaheedu yahay :Waa qaddar Alle isagaana wixii uu doonoba fala." Maxaa yeeley kelmedda ah: "Haddaan" waxay oo keliya fur furtaa irdaha camal shaydaanka" . (Muslim)

١٠١ - السابع : عنه أن رسول الله ﷺ قال : « حُجِبَتِ النَّارُ بِالشُّهُوتِ ، وَحُجِبَتِ الْجَنَّةُ بِالْمَكَارِهِ » متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : « حُفَّتْ » بدل « حُجِبَتِ » وَهُوَ بِمَعْنَاهُ : أي بينه وبينها هذا الحِجَابُ فإذا فعله دخلها .

101. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Naarta waxaa laga helaa oo ay ku gabban tahay waxyaalaha ay naftu jeceshahay ee macmacaanka adduunka ah gadaashooda, Jannadana waxaa lagu xayndaabay camal adag oo ay naftu neceb tahay" (Bukhaari iyo Muslim)

١٠٢ - الثامن : عن أبي عبد الله حُذَيْفَةَ بْنِ الْيَمَانِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا قَالَ : صَلَّيْتُ مَعَ النَّبِيِّ ﷺ ذَاتَ لَيْلَةٍ فَأَفْتَحَ الْبَقْرَةَ ، فَقُلْتُ : يَرْكَعُ عِنْدَ الْمَائَةِ ، ثُمَّ مَضَى . فَقُلْتُ : يُصَلِّي بِهَا فِي رَكْعَةٍ فَمَضَى ، فَقُلْتُ : يَرْكَعُ بِهَا ثُمَّ أَفْتَحَ النِّسَاءَ فَقَرَأَهَا ، ثُمَّ أَفْتَحَ آلَ عِمْرَانَ فَقَرَأَهَا ، يَقْرَأُ مُتْرَسِّلاً إِذَا مَرَّ بِآيَةٍ فِيهَا تَسْبِيحٌ سَبَّحَ ، وَإِذَا مَرَّ بِسُؤَالٍ سَأَلَ ، وَإِذَا مَرَّ بِتَعَوُّذٍ تَعَوَّذَ ، ثُمَّ رَكَعَ فَجَعَلَ يَقُولُ : « سُبْحَانَ رَبِّيَ الْعَظِيمِ » فَكَانَ رُكُوعُهُ نَحْوًا مِنْ قِيَامِهِ ثُمَّ قَالَ : « سَمِعَ اللَّهُ لِمَنْ حَمِدَهُ رَبَّنَا لَكَ الْحَمْدُ » ثُمَّ قَامَ طَوِيلًا قَرِيبًا مِمَّا رَكَعَ ثُمَّ سَجَدَ فَقَالَ : « سُبْحَانَ رَبِّيَ الْأَعْلَى » فَكَانَ سُجُودُهُ قَرِيبًا مِنْ قِيَامِهِ . رواه مسلم .

102. Xudayfah ibn Yamaan (A.K.R.) wuxuu yiri: Habeen baan sa-laatul leyl la tukaday nebiga (S.C.W.) . wuxuu billaabay akhrinta Suuradda al- Baqarah. waxaan islahaa wuxuu ku rukuuci doonaa

Aayadda boqolaad, waa uu sii wadayse akhrintii. Haddana waxaan is iri ragcadda horuu ku dhammaynayaa suuradda al-Baqarah, Waa uu sii wadayse akhrinteeda oo markaa billaabay aali-Cimraan , dabadeedna suuradda an-Nisaa. Wuxuu u akhrinayey si kala dhig dhigan oo loo bogayo oo cad. Goortuu akhriyo Aayad ay tasbiixi ku jirto, waa tasbiixsadaa oo Ilaahayammaanaa, ceeb iyo nuqsaanna ka hufaa, markuu gaaro meel weydiisi leh Alluu wax wey-diiistaa , markuu soo gaaro meel cowdu ballaysi lehna waa cowdu billays-taa, oo Ilaahay buu ka magan galaa sida naarta iwm. Dabadeed waa uu rukuucay wuxuu ku celceliyey ducada: Subxaana Rabbiyal Cadiim (Waxaa ceeb iyo nuqsaan ka hufan oo kaamil ah Rabbigaya weyn" wuxuu rukuuc-sanaa intii uu taagnaa oo kale. Dabadeedna waa istaagay oo yiri: Samical-laahu liman xamidah Rabbanaa lakal Xamd (Alle waa maqlayaa midka u mahad celinaya oo xusaya Rabbigayow Adigay mahaddu kuu sugnaatay). Dabadeed wuxuu taagnaadey in badan oo intii uu rukuucsanaa ku dhow. Dabadeedna waa sujuudey oo yiri: Subxaana Rabbiyal Aclaa (Waxaa ceeb iyo nuqsaan ka hufan oo kaamil ah Rabbigaya Sare) wuxuuna sujuudsanaa intii uu taagnaa oo kale.

(Muslim)

١٠٣ - التاسع : عن ابن مسعود رضي الله عنه قال : صَلَّيْتُ مَعَ النَّبِيِّ ﷺ لَيْلَةً ، فَأَطَالَ الْقِيَامَ حَتَّى هَمَمْتُ بِأَمْرِ سُوءٍ ! قِيلَ : وَمَا هَمَمْتَ بِهِ ؟ قَالَ : هَمَمْتُ أَنْ أَجْلِسَ وَأَدْعُهُ . متفقٌ عليه .

103. Ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Habeen waxaan salaatul leyl la tukaday nebiga (S.C.W.). Markaasuu istaaggii dheereeyey jeer aan fekeray inaan falo waxille. Waxaa la weydiiyey: Maxay aheyd waxaasi xun? Wuxuu yiri: Inaan iska fariisto, oo aan ka goosto nebiga (salaaddii). (Bukhaari iyo Muslim)

١٠٤ - العاشر : عن أنس رضي الله عنه عن رسول الله ﷺ قال : « يَتَّبِعُ الْمَيِّتَ ثَلَاثَةٌ : أَهْلُهُ وَمَالُهُ وَعَمَلُهُ ، فَيَرْجِعُ أَثْنَانِ وَيَبْقَى وَاحِدٌ : يَرْجِعُ أَهْلُهُ وَمَالُهُ ، وَيَبْقَى عَمَلُهُ » متفقٌ عليه .

104. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Seddex waxyaalood baa raaca meydka: Ehelkiisa, maalkiisa iyo camalkiisa - Labada hore waa ka soo noqdaan (ehelkiisa iyo maalkiisa) kan seddexaadna waa ku haraa (oo ah camalkiisa.) (Bukhaari iyo Muslim)

١٠٥ - الحادي عشر : عن ابن مسعود رضي الله عنه قال : قال النبي ﷺ :
« الْجَنَّةُ أَقْرَبُ إِلَى أَحَدِكُمْ مِنْ شِرَاكِ نَعْلِهِ ، وَالنَّارُ مِثْلُ ذَلِكَ » رواه البخاري .

105. Ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Jannadu idiinkaga dhow kabtiinna suunkeeda, waana sidoo kale Naartuna". (Bukhaari)

١٠٦ - الثاني عشر : عن أبي فراسٍ ربيعة بن كعب الأسلمي خادم رسول الله ﷺ ، ومن أهل الصفة رضي الله عنه قال : كُنْتُ أُبَيْتُ مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَاتِيهِ بِوُضُوئِهِ وَحَاجَتِهِ فَقَالَ : « سَلْنِي » فَقُلْتُ : أَسْأَلُكَ مُرَافَقَتَكَ فِي الْجَنَّةِ . فَقَالَ : « أَوْ غَيْرَ ذَلِكَ » ؟ قُلْتُ : هُوَ ذَاكَ قَالَ : « فَأَعِنِّي عَلَى نَفْسِكَ بِكَثْرَةِ السُّجُودِ » رواه مسلم .

106. Abii Firaas Rabiicah ibn Kacab (A.K.R.) oo adeege rasuulka ahaa iyo mid ka mid ah raggii Suffa wuxuu yiri: Waxaan habeenka isku dhaafin jiray la joogidda nebiga (S.C.W.) waxaana u keeni jiray biyo uu ku weeseysto iyo kuwo uu la galo suuliga. Maalin buu wuxuu igu yiri : " I weydiiso waxaad rabto? " Waxaan iri: Waxaan ku weydiisanaya inaan rafiiq kugula ahaado Jannada. Wuxuu i weydiyey: " Wax kalase?" Waxaan iri: Waa taas keliya oo ah inaan jannada kugula rafiiqo. Wuxuu yiri: Haddaba igu caawi sujuudda (salaadaha sunnooyinka ah) oo aad badiso." (Muslim)

١٠٧ - الثالث عشر : عن أبي عبد الله ويقال : أبو عبد الرحمن ثوبان مولى رسول الله ﷺ رضي الله عنه قال : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « عَلَيْكَ بِكَثْرَةِ السُّجُودِ ؛ فَإِنَّكَ لَنْ تَسْجُدَ لِلَّهِ سَجْدَةً إِلَّا رَفَعَكَ اللَّهُ بِهَا دَرَجَةً ، وَحَطَّ عَنْكَ بِهَا خَطِيئَةٌ » رواه مسلم .

107. Thowbaan (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: " Badi sujuudda (salaadaha sunnada ah) Sujuud waliba waxay kor u dhigeysaa meeqaankaaga hal derejo, kaana ti-reysaa mid ka mid ah dembiyadaada". (Muslim)

١٠٨ - الرابع عشر : عن أبي صفوان عبد الله بن بسرٍ الأسلمي رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « خَيْرُ النَّاسِ مَنْ طَالَ عُمُرُهُ وَحَسَنَ عَمَلُهُ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن . « بسر » بضم الباء وبالسين المهملة .

108. Abii Safwaan Cabdullaah ibn Busril Aslami (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Dadka waxaa u kheyrron qofkii cimrigiisu dheeraado, camalka iyo dhaqankiisuna suubbanaado" (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah.

١٠٩ - الخامس عشر : عن أنس رضي الله عنه قال : غَابَ عَمِّي أَنَسُ بْنُ النَّضْرِ رضي الله عنه عن قتال بدرٍ فقال : يا رَسُولَ اللَّهِ غِيبْتُ عَنْ أَوَّلِ قِتَالٍ قَاتَلْتِ الْمُشْرِكِينَ لَيْتَ اللَّهُ أَشْهَدَنِي قِتَالَ الْمُشْرِكِينَ لَيُرِينَ اللَّهُ مَا أَصْنَعُ . فَلَمَّا كَانَ يَوْمَ أَحَدٍ أَنْكَشَفَ الْمُسْلِمُونَ فَقَالَ : اللَّهُمَّ اعْتَذِرْ إِلَيْكَ مِمَّا صَنَعَ هَؤُلَاءِ - يَعْنِي أَصْحَابَهُ - وَأَبْرَأُ إِلَيْكَ مِمَّا صَنَعَ هَؤُلَاءِ - يَعْنِي الْمُشْرِكِينَ - ثُمَّ تَقَدَّمَ فَاسْتَقْبَلَهُ سَعْدُ بْنُ مُعَاذٍ فَقَالَ : يَا سَعْدُ بْنُ مُعَاذِ الْجَنَّةِ وَرَبِّ الْكَعْبَةِ إِنِّي أَجِدُ رِيحَهَا مِنْ دُونِ أَحَدٍ . قَالَ سَعْدُ : فَمَا اسْتَطَعْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ مَا صَنَعَ ! قَالَ أَنَسُ : فَوَجَدْنَا بِهِ بَضْعًا وَثَمَانِينَ ضَرْبَةً بِالسَّيْفِ ، أَوْ طَعْنَةً بِرُمْحٍ ، أَوْ رَمِيَّةً بِسَهْمٍ ، وَوَجَدْنَاهُ قَدْ قُتِلَ وَمِثْلَ بِهِ الْمُشْرِكُونَ فَمَا عَرَفَهُ أَحَدٌ إِلَّا أُخْتَهُ بِنَانِهِ . قَالَ أَنَسُ : كُنَّا نَرَى أَوْ نَظُنُّ أَنْ هَذِهِ الْآيَةُ نَزَلَتْ فِيهِ وَفِي أَشْبَاهِهِ : ﴿ مِنْ الْمُؤْمِنِينَ رِجَالٌ صَدَقُوا مَا عَاهَدُوا اللَّهَ عَلَيْهِ ﴾ [الأحزاب : ٣٣] إِلَى آخِرِهَا ، مَتَّفَقٌ عَلَيْهِ .

قوله : « لَيُرِينَ اللَّهُ » روي بضم الباء وكسر الراء : أي لِيُظْهِرَنَّ اللَّهُ ذَلِكَ لِلنَّاسِ ، وَرُوي بفتحهما ومعناه ظاهر ، والله أعلم .

109. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Adeer kay Anas ibn Nadar baa wuxuu ka maqnaaday dagaalkii beder. Wuxuu ku yiri : nabiga (S.C.W.) : Rasuul Alloow! waxaa Alle qaddaray inayan ii suura gelin inaan kaala qayb galo dagaalkii u horreeyey oo aad la gashay mushrikiinta. Haddii aan helo fursad aan kula dagaalo mushrikiinta Alle (wuu ii suura gelin doonaa) inaan muujiyo dagaal aqoonteyda. Maalintii dagaalkii Uxud dhacay bay muslimiintii kala yaaceen oo jab soo gaaray. Wuxuu yiri: Alloow adaan kaaga cudur daartey waxa ay muslimiintu faleen, ka barii yeelayaana naf-tayda waxa ay gaaladu faleen.' . Dabadeedna wuxuu sii aaday ho-

ray jidkana wuxuu kula kulmay Sacad ibn Mucaad. Wuxuu yiri: Sacad ibn Mucaadoow Rabbigii Kacbada ayaan ku dhaarane waa Jannadii , waxay iiga carfeysaa udgoonkii jannada Uxud sokadeeda. Sacad wuxuu yiri: Rasuul Alloow ma sifeyn karo waxa uu fallay (oo geesinnimo iyo dagaal aqoon ah). Anas bin Maalik wuxuu yiri: Waxaan ku aragnay jirkiisa dhowr iyo siddeetan dhaawac oo seef iyo waran iyo fallaar ah, sidaa buu ku shahiitay oo loo dilay. intaana ugama harina mushrikiintu waxay kidfeen jirkiisa oo gobol gobol ka dhigeen, sanko iyo dhegaha ka jareen heer qof garta la waayey walaashiis oo garatay maahee farihiisii. Anas wuxuu qabay inay aayaddan soo socota ay tilmaameyso isaga iyo wixii la mid ah:

' Waxaa ka mid ah mu'mininta rag ka run sheegay wixii ay kula galeen axdiga Alle. Qaar way ka soo baxeen axdigii iyo ballantii ay qaadeen oo waxay ku hureen naftooda dagaalka Waxaana jira kuwo kale oo dhowraya. Wax dacfi iyo dabacsanaan ah kuma dhicin ga'aanka iyo axdigoodii haba yaraatee." Suuradda al-Axsaab: Aayadda 23 (Bukhaari iyo Muslim)

١١٠ - السادس عشر : عن أبي مسعود عقبة بن عمرو الأنصاري رضي الله عنه قال : لما نزلت آية الصدقة كنا نحامل على ظهورنا ، فجاء رجل فتصدق بشيء كثير فقالوا : مرأء (٤) ، وجاء رجل آخر فتصدق بصاع فقالوا : إن الله لغني عن صاع هذا! فنزلت : ﴿ الَّذِينَ يَلْمُزُونَ الْمُطَّوِّعِينَ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ فِي الصَّدَقَاتِ وَالَّذِينَ لَا يَجِدُونَ إِلَّا جُهْدَهُمْ ﴾ [التوبة : ٧٩] الآية . متفق عليه .
 و« نَحَامِلُ » بضم النون وبالحاء المهملة : أي يحمل أحدنا على ظهره بالأجرة ويتصدق بها .

110. Abuu Mascuud Cuqbah ibn Camar (A.K.R.) wuxuu yiri: Markii ay aayaddii fareysay sadaqada soo degtay baan waxaan billownay inaan dhabarkayaga wax ku xamaalanno si aan u shaqeysanno, waxna aan ula baxno (wax ka mid ah waxa aan shaqey-sannay) sadaqo ahaan. Nin naga mid ahaa baa xoolo badan keenay oo sadaqa ah. Munaafiqiintii waxay ku sheegeen inuu sidaa u yeelay istustus . Nin kalaa wuxuu baxshay suus timir ah, Markaa bay waxay yiraahdeen: Alle waa ka deeqtoon yahay timirtiisa.'

Markaasay soo degtey: " Kuwa tarta ku tiqaya kuwaa mu'miniinta ah ee la baxa sadaqooyinka iyagoo raalli ah iyo kuwa aan heli karin waxaan aheyn dadaalkooda, ee ku jeesjeesaya, Allaa ku jeesjeesaya iyagana. waxayna yeelan doonaan cadaab xanuun badan " .

(Bukhaari iyo Muslim)

١١١ - السابع عشر : عن سعيد بن عبد العزيز عن ربيعة بن يزيد عن أبي إدريس الخولاني عن أبي ذر جندب بن جنادة رضي الله عنه عن النبي ﷺ فيما يروي عن الله تبارك وتعالى أنه قال : « يَا عِبَادِي إِنِّي حَرَمْتُ الظُّلْمَ عَلَى نَفْسِي وَجَعَلْتُهُ بَيْنَكُمْ مُحَرَّمًا فَلَا تَظَالَمُوا ، يَا عِبَادِي كُلُّكُمْ ضَالٌّ إِلَّا مَنْ هَدَيْتُهُ فَاسْتَهْدُونِي أَهْدِكُمْ ، يَا عِبَادِي كُلُّكُمْ جَائِعٌ إِلَّا مَنْ أَطْعَمْتُهُ فَاسْتَطْعِمُونِي أُطْعِمْكُمْ ، يَا عِبَادِي كُلُّكُمْ عَارٍ إِلَّا مَنْ كَسَوْتُهُ فَاسْتَكْسُونِي أَكْسُكُمْ ، يَا عِبَادِي إِنَّكُمْ تُخْطِئُونَ بِاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ وَأَنَا أَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا فَاسْتَغْفِرُونِي أَغْفِرْ لَكُمْ ، يَا عِبَادِي إِنَّكُمْ لَنْ تَبْلُغُوا ضُرِّي فَتَضُرُّونِي ، وَلَنْ تَبْلُغُوا نَفْعِي فَتَنْفَعُونِي . يَا عِبَادِي لَوْ أَنَّ أَوْلَكُمْ وَآخِرَكُمْ وَإِنْسَكُمْ وَجَنَّتُمْ كَانُوا عَلَى أَتْقَى قَلْبِ رَجُلٍ وَاحِدٍ مِنْكُمْ مَا زَادَ ذَلِكَ فِي مُلْكِي شَيْئًا ، يَا عِبَادِي لَوْ أَنَّ أَوْلَكُمْ وَآخِرَكُمْ وَإِنْسَكُمْ وَجَنَّتُمْ كَانُوا عَلَى أَفْجَرِ قَلْبِ رَجُلٍ وَاحِدٍ مِنْكُمْ مَا نَقَصَ ذَلِكَ مِنْ مُلْكِي شَيْئًا ، يَا عِبَادِي لَوْ أَنَّ أَوْلَكُمْ وَآخِرَكُمْ وَإِنْسَكُمْ وَجَنَّتُمْ قَامُوا فِي صَعِيدٍ وَاحِدٍ فَسَأَلُونِي فَأَعْطَيْتُ كُلَّ إِنْسَانٍ مَسْأَلَتَهُ مَا نَقَصَ ذَلِكَ مِمَّا عِنْدِي إِلَّا كَمَا يَنْقُصُ الْمَخِيطُ إِذَا أُدْخِلَ الْبَحْرَ ، يَا عِبَادِي إِنَّمَا هِيَ أَعْمَالُكُمْ أُحْصِيهَا لَكُمْ ثُمَّ أُوَفِّيكُمْ بِهَا ، فَمَنْ وَجَدَ خَيْرًا فَلْيَحْمَدِ اللَّهَ وَمَنْ وَجَدَ غَيْرَ ذَلِكَ فَلَا يَلُومَنَّ إِلَّا نَفْسَهُ . »

قال سعيد : كان أبو إدريس إذا حَدَّثَ بهذا الحديث جثا على ركبتيه ، رواه

مسلم .

ورويانا عن الإمام أحمد بن حنبل رحمه الله قال : ليس لأهل الشام حديث

أشرف من هذا الحديث .

111. Saciid bin Cabdul Casiis wuxuu ka soo xigtay Rabiica bin Yaziid, oo isna ka soo xigtay Cali Idriis al-Khawlaani, oo isna ka soo xigtay Abuu Darr (A.K.R.) oo sheegay inuu Rasuulkii Alle yiri: ' Alle kor ahaaye wuxuu yiri: Addoommadaydoow anigu waan ka xaaraantimeeyey nafteyda dulmiga, waxaana ka dhigay xaaraan dhexdiinna. Ee cidna yaan la dulim; Addoommadaydoow, dhammaantiin waa aad wada dhunsan tihiin mid aan hanuuniyo maahee ee hunuun i weydiista aan idin hanuuniyo'e. Addoommadaydoow dhammaantiin waa aad wada baahan tihiin mid aan quudiyo maahee, ee quud i weydiista aan idiin quudiyo,e. Addommadaydoow

dhammaantiin waa aad wada arradan tihii mid aan hu' siiyo ma ahee ee hu' i weydiista aan idin arad tiro'e. Addoommadaydoow, habeen iyo maalinba waa aad gefeysaan aniguna dambiyada oo dhan baan dhaafaa , ee dambi dhaaf i weydiista aan idiin dembi dhaaf'o'e. Addoommadaydoow, awood uma yeelan kartaan inaad dhib ii geystaan, sidoo kalena awood uma yeelan kartaan inaad waxtar iyo wanaag ii gashaan. Addoommadaydoow, haddii kiinni u horeeyey iyo kiinnii u dembeeyey iyo jin iyo insiigiinnuba aad yeelataan qofkiinna u taqwo iyo Alle ka cabsi badan qalbigiisa, waxay taas u mulkigayga ku kor dhinayso lama arko. Addoommadaydoow, haddii kiinnii u horeeyey iyo kiinna u dambeeyaba iyo jinkiinna iyo insiigiinnuba aad yeelataan qofkiinna u faajirsan qalbigiisawax ay taas u mulkigayga ka dhimayso lama arko. Addoommadaydoow, haddii kiinnii u horeeyey iyo kiinnii u dambeeyey iyo insiigiinna iyo jinkiinnuba aad ban soo wada istaagtaan oo i baridaan oo aan ruux walba siiyo wixii uu iga baryey , wax ay taa iga naaqusinayso lama arko waa uun sida irbad bad la dhex geliyey oo laga soo bixiyey. Addoommadaydoow, anigu waxaan qof waliba u tixgelin cawlalkiisa oo qof waliba ka jaza siin. Marka qofkii abaalgud wanaagsan hela iyo kheyra waa inuu Alle uga mahad celiyaa taa, kii wax kale lagu abaal mariyaana yuusan ku eedin taa cid aan naftiisa aheyn.

(Muslim)

Saciid ibn Cabdulcasiis wuxuu yiri: Abuu Idriis al-Khawlaani kolkuu xadiiskan sheegayo jilbaha ayuu dhulka dhigan jiray xurmo iyo qaddarin Alle (S.W.T.) awgi.

Fiiro gaar ah: Mujaahida waxaa la yiraa in loo halgamo arrin wanaagsan oo xaq ah ama dar Alle sida fidinta iyo kor yeelidda diinta Islaamka. Culimaduna waxay yiraahdaan taa baa ah jihaad kan u wanaagsan. Xadiisyada qaarbaa waxay leeyihiin inuu qofku ka hortago sharka ka dhici kara, xumahana naftiisa kala dagaalo iyo hawada xun baa ah jihaad kan u wanaagsan..

١٢ - باب الحث على الازيد من الخير في اواخر العمر

C U T U B K A 12

CIBAADO SII BADINTA SII CIMRI GABOWGA IYO UGU YEERIDDA DADKA TAA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى: ﴿أَوْ لَمْ نَعْمَرْكُمْ مَا يَتَذَكَّرُ فِيهِ مَنْ تَذَكَّرَ وَجَاءَكُمْ النَّذِيرُ﴾
[فاطر : ٣٧] قال ابن عباس والمُحَقِّقُونَ معناه : أَوْ لَمْ نَعْمَرْكُمْ سِتِّينَ سَنَةً ؟
وَيُؤَيِّدُهُ الحديث الذي سنذكره إن شاء الله تعالى ، وقيل : معناه ثمانينَ عَشْرَةَ سَنَةً
وقيل : أَرْبَعِينَ سَنَةً ، قاله الحسن والكلبي ومسروق ونُقِلَ عن ابن عباس أيضاً .
وَنَقَلُوا أَنَّ أَهْلَ المَدِينَةِ كانوا إذا بَلَغَ أَحَدُهُمُ أَرْبَعِينَ سَنَةً تَفَرَّغَ لِلعِبَادَةِ وقيل : هو
الْبُلُوغُ

48 " Mawaannaan idiin siin cimri in mid waansamayaa ku waansa-
mi karo? diguhuna (nebi Muxammad s.c.w.) uusan idiin imaan?)
Suuradda Faadir: Aayadda 37

. وقوله تعالى: ﴿ وَجَاءَكُمْ النَّذِيرُ ﴾ قال ابن عباس والجمهور : هو
النبي ﷺ وقيل : الشَّيْبُ قاله عِكْرِمَةُ وابن عُيَيْنَةَ وغيرهما . والله أعلم .

Imaam Nawawi wuxuu yiri sida ay yiraahdeen Ibni Cabaas iyo rag
kaleba cimri dhererka waa ilaa lixdan jir. qaar waxay ku sheegaan
qaan gaaridda (yacni waa 18 jir) bay yiraahdeen ; iimaammada Xa-
san, Kalabi, iyo Masruuq waxay ku fasireen 40 jir. Madiina Culim-
adeedii waxay oran jireen qofku markuu gaaro 40 jir waxaa la gud-
boon cibaado sii badinta.

١١٢ - فالأول : عن أبي هريرة رَضِيَ اللهُ عنه عن النبي ﷺ قال : « أَعْذَرَ اللهُ إِلَى
أَمْرِي إِذَا بَلَغَ أَجَلُهُ حَتَّى بَلَغَ سِتِّينَ سَنَةً » رواه البخاري .

قال العلماء معناه : لَمْ يَتْرُكْ لَهُ عُدْرًا إِذْ أَمَهَلَهُ هَذِهِ المُدَّةَ . يقال : أَعْذَرَ
الرَّجُلَ إِذَا بَلَغَ الغَايَةَ فِي العُدْرِ .

112. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri "Alle Fursad buu siiyey uu ku toobad keeni karo qof uu u kaadiyey ilaa uu lixdan ka gaarey." (Bukhaari)

١١٣ - الثاني : عن ابن عباس رضي الله عنهما ، قال : كان عمر رضي الله عنه يُدْخِلُنِي مَعَ أَشْيَاحِ بَدْرٍ فَكَانَ بَعْضُهُمْ وَجَدَ فِي نَفْسِهِ فَقَالَ : لِمَ يَدْخُلُ هَذَا مَعَنَا وَلَنَا أَبْنَاءٌ مِثْلُهُ ؟ ! فَقَالَ عُمَرُ : إِنَّهُ مَنْ حَيْثُ عَلِمْتُمْ ! فَدَعَانِي ذَاتَ يَوْمٍ فَأَدْخَلَنِي مَعَهُمْ فَمَا رَأَيْتُ أَنَّهُ دَعَانِي يَوْمَئِذٍ إِلَّا لِيُرِيَهُمْ قَالَ : مَا تَقُولُونَ فِي قَوْلِ اللَّهِ ﴿ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴾ ؟ فَقَالَ بَعْضُهُمْ : أَمْرُنَا نَحْمَدُ اللَّهَ وَنَسْتَغْفِرُهُ إِذَا نَصَرْنَا وَفَتَحَ عَلَيْنَا ، وَسَكَتَ بَعْضُهُمْ فَلَمْ يَقُلْ شَيْئًا . فَقَالَ لِي : أَكْذَلِكُ ؛ تَقُولُ يَا ابْنَ عَبَّاسٍ ؟ فَقُلْتُ : لَا . قَالَ : فَمَا تَقُولُ ؟ قُلْتُ : هُوَ أَجَلُ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ أَعْلَمَهُ لَهُ قَالَ : ﴿ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴾ وَذَلِكَ عِلْمٌ أَجَلِكُ ﴿ فَسَبَّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَاسْتَغْفِرْهُ إِنَّهُ كَانَ تَوَّابًا ﴾ فَقَالَ عُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ : مَا أَعْلَمُ مِنْهَا إِلَّا مَا تَقُولُ ، رَوَاهُ الْبُخَارِيُّ .

113. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Cumar (A.K.R.) baa wuxuu ila fariisin jirey si aan talada wax ugu yeesho duqaydii ka qayb gashay dagaalkii Badar. Qaar asxaabtii ka mid ah (odayaasha soo xaadira fadhiga) bay yari dhibtay oo yiri: Muxuu Cumar wiilka noola fariisinayaa oo uu uga qayb gelin wada tashigeenna, isagoo wiilkani wiilashayada la fac ah? Cumar baa wuxuu ku yiri: Wuxuu ka soo jeedaa halka aad wax ka barateen (guriga nabiga (S.C.W.)). Wuxuu igu casumay maalin golahiisii iyagoo jooga, waxaana u qaatay inuu sidaa u yeelay oo keliya inuu tusiyo meherada iyo aqoontayda. Wuxuu weydiyey: Maxaad ka leedihiin qowlka Alle ee ah: 'Idaa jaa nasrullaah walfatxu (Haddii uu hiilka Alle yimaado iyo furashada) qaarkood waxay yiraahdeen: Aayaddan waxaa nalaku faray inaan Alle mahadinno oo dembi dhaaf weydiisanno markii uu noo hiilliyo oo guusha na siiyo. Qaarna waa aammuseen oo waxba ma oran. Cumar baa wuxuu igu yiri: Ibn Cabbaas? Ma sidaasad adna leedahay? Waxaan iri: 'May'. Markaa buu i yiri maxaad leedahay? Waxaan iri: waa ajashii nebiga (S.C.W.) oo la ogeysiiyey, macnuhuna waa; (markii ay hiilka Alle iyo guushu furasho yimaadaan) taasi waa Calaamaddii ajashaada'e (ku tasbiixso mahadda Rabbigaa dembi dhaafna weydiiso; Run ahaantii isagu Alle waa toobad aqbale naxariis taaga (fidiya)). Cumar (A.K.R.) Wuxuu yiri: Uma aqaan si aan ahayn sidaas aad ku sheegtay (ina Cabbaasow). (Bukhaari)

١١٤ - الثالث : عن عائشة رَضِيَ اللهُ عَنْهَا قالت : ما صَلَّى رسول الله ﷺ صلاةً بَعْدَ أَنْ نَزَلَتْ عَلَيْهِ ﴿ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴾ إِلَّا يَقُولُ فِيهَا : « سُبْحَانَكَ رَبَّنَا وَبِحَمْدِكَ ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي » متفقٌ عليه .

وفي رواية في الصحيحين عنها : كَانَ رسول الله ﷺ يُكثِرُ أَنْ يَقُولَ فِي رُكُوعِهِ وَسُجُودِهِ : « سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ رَبَّنَا وَبِحَمْدِكَ اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي » ، يَتَأَوَّلُ الْقُرْآنَ . معنى : « يَتَأَوَّلُ الْقُرْآنَ » أي يعمل ما أمر به في القرآن في قوله تعالى : ﴿ فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَأَسْتَغْفِرْهُ ﴾ .

وفي رواية لمسلم : كان رسول الله ﷺ يُكثِرُ أَنْ يَقُولَ قَبْلَ أَنْ يَمُوتَ : « سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ وَبِحَمْدِكَ أَسْتَغْفِرُكَ وَأَتُوبُ إِلَيْكَ » . قالت عائشة : قلت : يا رسول الله ما هذه الكلمات التي أراك أحدثتها تقولها ؟ قال : « جُعِلَتْ لِي عَلَامَةً فِي أُمَّتِي إِذَا رَأَيْتَهَا قُلْتُهَا ﴾ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴿ » إلى آخرِ السورة .

وفي رواية له : كان رسول الله ﷺ يُكثِرُ مِنْ قَوْلِ : « سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ » . قالت : قلت : يا رسول الله أراك تُكثِرُ مِنْ قَوْلِ سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ ؟ فقال : « أَخْبَرَنِي رَبِّي أَنِّي سَأَرَى عَلَامَةً فِي أُمَّتِي إِذَا رَأَيْتَهَا أَكْثَرْتُ مِنْ قَوْلِ : سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ فَقَدْ رَأَيْتَهَا : ﴿ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴾ فَتَحَ مَكَّةَ ، ﴿ وَرَأَيْتَ النَّاسَ يَدْخُلُونَ فِي دِينِ اللَّهِ أَفْوَاجًا . فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَأَسْتَغْفِرْهُ إِنَّهُ كَانَ تَوَّابًا ﴾ » .

114. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Nebigu (S.C.W.) Markii ay soo degtey suuradda (An-nasar - idaa jaa-) kaddib. Nabiga (S.C.W.) wuxuu oran jiray salaaddii uu tukadaba: (Subxaanaka, Rabbanaa-wabixamdika. Allaahummaqfirlii).

" Rabbiyoow adaa hufan oo aan ku mahadinayaa, Alloow ii dembi dhaaf "

(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa leh oo isla Caa'isha laga soo weriyey, oo Bukhaari iyo Muslim ku sugan: Nebigu (S.C.W.) wuxuu badin jirey intuu ru-kuucsan yahay ama sujuudsan yahay qowlka ah (subxaanaka Rabbanaa wa bixamdika Allaahummaqfirlii)

١١٤ - الثالث : عن عائشة رَضِيَ اللهُ عَنْهَا قالت : ما صَلَّى رسول الله ﷺ صلاةً بَعْدَ أَنْ نَزَلَتْ عَلَيْهِ ﴿ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴾ إِلَّا يَقُولُ فِيهَا : « سُبْحَانَكَ رَبَّنَا وَبِحَمْدِكَ ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي » متفقٌ عليه .

وفي رواية في الصحيحين عنها : كَانَ رسول الله ﷺ يُكثِرُ أَنْ يَقُولَ فِي رُكُوعِهِ وَسُجُودِهِ : « سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ رَبَّنَا وَبِحَمْدِكَ اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي » ، يَتَأَوَّلُ الْقُرْآنَ . معنى : « يَتَأَوَّلُ الْقُرْآنَ » أي يعمل ما أمر به في القرآن في قوله تعالى : ﴿ فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَاسْتَغْفِرْهُ ﴾ .

وفي رواية لمسلم : كان رسول الله ﷺ يُكثِرُ أَنْ يَقُولَ قَبْلَ أَنْ يَمُوتَ : « سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ وَبِحَمْدِكَ أَسْتَغْفِرُكَ وَأَتُوبُ إِلَيْكَ » . قالت عائشة : قلت : يا رسول الله ما هذه الكَلِمَاتُ الَّتِي أَرَاكَ أَحَدَثْتَهَا تَقُولُهَا ؟ قال : « جُعِلَتْ لِي عَلَامَةً فِي أُمَّتِي إِذَا رَأَيْتَهَا قُلْتُهَا ﴾ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحِ ﴿ » إلى آخرِ السورة .

وفي رواية له : كان رسول الله ﷺ يُكثِرُ مِنْ قَوْلِ : « سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ » . قالت : قلتُ : يا رسول الله أَرَاكَ تُكثِرُ مِنْ قَوْلِ سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ ؟ فقال : « أَخْبَرَنِي رَبِّي أَنِّي سَأَرَى عَلَامَةً فِي أُمَّتِي إِذَا رَأَيْتَهَا أَكْثَرْتُ مِنْ قَوْلِ : سُبْحَانَ اللَّهِ وَبِحَمْدِهِ أَسْتَغْفِرُ اللَّهَ وَأَتُوبُ إِلَيْهِ فَقَدْ رَأَيْتَهَا : ﴿ إِذَا جَاءَ نَصْرُ اللَّهِ وَالْفَتْحُ ﴾ فَتَحَ مَكَّةَ ، ﴿ وَرَأَيْتَ النَّاسَ يَدْخُلُونَ فِي دِينِ اللَّهِ أَفْوَاجًا . فَسَبِّحْ بِحَمْدِ رَبِّكَ وَاسْتَغْفِرْهُ إِنَّهُ كَانَ تَوَّابًا ﴾ » .

114. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Nebigu (S.C.W.) Markii ay soo degtey suuradda (An-nasar - idaa jaa-) kaddib. Nabiga (S.C.W.) wuxuu oran jiray salaaddii uu tukadaba: (Subxaanaka, Rabbanaa-wabixamdika. Allaahummaqfirlii).

" Rabbiyoow adaa hufan oo aan ku mahadinayaa, Alloow ii dembi dhaaf " (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa leh oo isla Caa'isha laga soo wariyey, oo Bukhaari iyo Muslim ku sagan: Nebigu (S.C.W.) wuxuu badin jirey intuu ru-kuucsan yahay ama sujuudsan yahay qowlka ah (subxaanaka Rabbanaa wa bixamdika Allaahummaqfirlii)

" Rabbiiyow adaa hufan oo aan ku mahadinaynaa, Allow ii dembi dhaaf" (isagoo Quraanka ka shidaal qaadanaya, kuna fartoomaya"

Werin kale oo Muslim ku sugan ayaa iyana ahayd:Nebigu (S.C.W) .dhimashadiisii horteedii wuxuu ku celcelin jirey qowlka:
'Subxaanaka Allaahumma wabixamdika astaqfiruka wa-atuubu ilayk'

" Rabbiiyow adaa hufan oo aan ku mahadineynaa, Alloow adaan dambi dhaaf ku weydiisanayaa, kuuna toobad keeni".

Waxaan (aniga Caa'isha ah) weydiiyey:): Rasuul Alloow waa maxay kelmedahaan aad leedahay oo aadan awel oran jirin ? Wuxuu yiri" Ummaddayda dhexdeeda la ii yeelay calaamo markii aan arko aan iraaqdo kelmadahaa; Markaa buu akhriyey suuradda An-nasar - idaa jaa'a -.

Werin kale waxay leedahay : Nebiga (S.C.W.) wuxuu in badan oran jirey: ' Subxaanallaah wa bixamdihi, astaqfirullaaha wa atuubu ileyh'

" Alloow adaa hufan oo mahad leh, Alle ayaan dambi dhaaf weydii-sanayaa , oo aan u toobad keeni" .

Caa'ishaa waxay ku tiri: Rasuul Alloow waa adiga ku celcelinaya (subxaanallaahi wa bixamdih, Astaqfirullaaha wa atuubu ileyh) ee maxaa dhacay ?Wuxuu yiri: ' Rabbigaybaa wuxuu ii sheegay inaan ummaddayda calaamad ka arki doono, markii aan arkana , aan badsado qowlka ah : ' Subxaanallaahi wa bixamdih astaqfirullaaha wa atuubu ileyhi' waana arkay calaamaddaa. Imaashada hiilka Alle iyo guushu waa-furashada Makkah -calaamadduna waxay aheyd inaan arko dadkii oo soo galaya diinta Alle iyagoo rac rac iyo kooxo ah Markaana waxaa la i faray : Ku tasbiixso mahadda Rabbigaa, dembi dhaafna weydiiso. Isagu Alle waa naxariis badane toobad aqba-la.'

١١٥ - الرابع : عن أنس رضي الله عنه قال : إن الله عز وجل تابَعَ الوحيَ على رسولِ الله ﷺ قَبْلَ وفاتِهِ حَتَّى تُوفِّيَ أَكْثَرَ ما كانَ الوحيَ عَلَيْهِ ، متفقٌ عليه .

115. Anas (A.K.R.)wuxuu yiri: " Alle weyne kor ahaaye waxyiga waa iska daba keenayey markii uu Nebigu (S.C.W.) dhiman rabey oo waxyigu sidii hore waa ka badnaa ilaa uu ka dhintay "
(Bukhaari iyo Muslim)

١١٦ - الخامس : عن جابر رضي الله عنه قال : قال النبي ﷺ : « يُبْعَثُ كُلُّ عَبْدٍ عَلَى مَا مَاتَ عَلَيْهِ » رواه مسلم .

116. Jaabir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri:
' addoon walba wixii iyo xaaladii uu ku sugnaa markii uu dhintay
baa lagu soo bixinayaa' (Muslim)

١٣ - باب في بيان كثرة طرق الخير

CUTUBKA 13

Wajiyada kala duwan ee kheyrka loo sameyn karo.

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى : ﴿ وَمَا تَفَعَّلُوا مِنْ خَيْرٍ فَإِنَّ اللَّهَ بِهِ عَلِيمٌ ﴾ [البقرة : ٢١٥]

49. " Wixii khayr ah oo aad fashaanba Alle waa og yahay" Suuradda Al-Baqarah: Aayadda 215

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَمَا تَفَعَّلُوا مِنْ خَيْرٍ يَعْلَمُهُ اللَّهُ ﴾ [البقرة : ١٩٧]

50. " Wixii aad fashaan oo khayr ahba Alle waa og yahay"
Suuradda Al-baqara; aayadda 197

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَهُ ﴾ [الزلزلة : ٧]

51. " Qofkii fala wax saxar le'e g oo khayr ah waa arkayaa"
Suuradda al-Zalzalalah : aayadda 7

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ مَنْ عَمِلَ صَالِحًا فَلِنَفْسِهِ ﴾ [الجاثية : ١٥]

52. " Kii camal wanaagsan falaa , naftiisaa leh"
Suuradda al-Jaathiya : Aayadda 15

Waxaana jira aayado badan oo ka hadlaya mowduucan, iyo axaa-diisyo dhowr ah oo nabiga ka sugnaaday (S.C.W.)

١١٧ - الأول : عن أبي ذر جُنْدَبِ بْنِ جُنَادَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ : قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَيُّ الْأَعْمَالِ أَفْضَلُ ؟ قَالَ : « الْإِيمَانُ بِاللَّهِ وَالْجِهَادُ فِي سَبِيلِهِ » . قُلْتُ : أَيُّ الرَّقَابِ أَفْضَلُ ؟ قَالَ : « أَنْفُسُهَا عِنْدَ أَهْلِهَا وَأَكْثَرُهَا ثَمَنًا » . قُلْتُ : فَإِنْ لَمْ أَفْعَلْ ؟ قَالَ : « تُعِينُ صَانِعًا أَوْ تَصْنَعُ لِأَخْرَقَ » . قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَرَأَيْتَ إِنْ ضَعُفْتُ عَنْ بَعْضِ الْعَمَلِ ؟ قَالَ : « تَكْفُ شَرِّكَ عَنِ النَّاسِ فَإِنَّهَا صَدَقَةٌ مِنْكَ عَلَى نَفْسِكَ » متفقٌ عليه .

« الصَّانِعُ » بالصاد المهملة هذا هو المشهور ، وروي « ضائعاً » بالمعجمة : أي ذا ضياعٍ مِنْ فقرٍ أو عيالٍ ، ونحو ذلك و« الأخرقُ » الذي لا يُتَقَنُّ ما يُحَاوِلُ فِعْلَهُ .

117. Abuu Darr (A.K.R.)-Wuxuu yiri: Waxaan weydiiyey rasuulkii Alle (S.C.W.) camalka kiisa u wanaagsan una ajar badan? Wuxuu yiri: Alloo la rumeeyo iyo jidkiisoo loo jihaado (yacni dadaal badan lagu bixiyo sida diintiisa loo kor yeeli lahaa, taana loo diriro).' Waxaan weydiiyey, addoon la xoreeyana kee u khayr badan ?Wuxuu yiri: Tii u lacag badan oo dadkeedu u jecel yihiin.' Waxaan weydiiyey: Haddii aanan karinna inaan saas falo (lacag yaraan awgeed). ' Wuxuu yiri: ' Markaa caawin qof hawl haya ama wax u samee qof wax sameysan la' ama farsamo xumaynaya. ' Waxaan weydiiyey : Qofkii aan taa awoodinna.' Wuxuu yiri: Naftaada ka celi oo ka qabo inay cid dhibaato u geystao , waayo sidaas waxaa ugu sugan ajar iyo kheyr naftaada.' (Bukhaari iyo Mus lim)

١١٨ - الثاني : عن أبي ذر أيضاً رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَالَ : « يُصْبِحُ عَلَى كُلِّ سُلَامَى مِنْ أَحَدِكُمْ صَدَقَةٌ ، فَكُلُّ تَسْبِيحَةٍ صَدَقَةٌ ، وَكُلُّ تَحْمِيدَةٍ صَدَقَةٌ ، وَكُلُّ تَهْلِيلَةٍ صَدَقَةٌ ، وَكُلُّ تَكْبِيرَةٍ صَدَقَةٌ ، وَأَمْرٌ بِالْمَعْرُوفِ صَدَقَةٌ . وَنَهْيٌ عَنِ الْمُنْكَرِ صَدَقَةٌ ، وَيُجْزَى مِنْ ذَلِكَ رَكْعَتَانِ يَرْكَعُهُمَا مِنَ الضُّحَى » رواه مسلم .

« السُّلَامَى » بضم السين المهملة وتخفيف اللام وفتح الميم : المفصل .

118. Abuu Darr (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Markii aad soo kacdo waaberiga sadaqaa lagu leeyahay xu-

bin kasta oo ka mida jirkaaga. Marka Alle hufid walbaa (yacni inaad tiraahdo Subxaanal-Laah) waa sadaqo, Mahdin kastoo oo aad mahdisaa Alle (yacni inaad tiraahdo al-Xamdu Lillaah) waa sadaqo, inaad tiraahdo laa ilaaha illal Laah waa sadaqo, inaad tiraahdo Allaahu Akbar waa sadaqo, Samaan la faraa waa sadaqo, xumaan la reebaa waa sadaqo. Laba rakcadood oo barqadii la tukado baana gudaya oo u dhigma intaa oo dhan.' (Muslim)

١١٩ - الثالث : عنه قال : قال النبي ﷺ : « عُرِضَتْ عَلَيَّ أَعْمَالُ أُمَّتِي حَسَنَهَا وَسَيِّئَهَا فَوَجَدْتُ فِي مَحَاسِنِ أَعْمَالِهَا الْأَذَى يُمَاطُ عَنِ الطَّرِيقِ ، وَوَجَدْتُ فِي مَسَاوِيءِ أَعْمَالِهَا النَّخَاعَةَ تَكُونُ فِي الْمَسْجِدِ لَا تُدْفَنُ » رواه مسلم .

119. Abuu Darr (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Waxaa la i tusay camalka ummaddayda mid xun iyo mid sanba. Camalka san waxaa ka mid ahaa oo aan arkay, wixii dhib leh oo laga qaado jidka la maro, camalka xunna waxaa ka mid ahaa xaako taal ayadoo aan la xabaalin masjidka" (Muslim)

١٢٠ - الرابع : عنه أن ناساً قالوا : يا رسول الله : ذهب أهل الدُّثُرِ بالأجورِ ، يُصَلُّونَ كَمَا نُصَلِّي ، وَيَصُومُونَ كَمَا نَصُومُ ، وَيَتَصَدَّقُونَ بِفُضُولِ أَمْوَالِهِمْ ، قال : « أوليسَ قد جعلَ اللهُ لَكُمْ ما تصدَّقونَ به : إنَّ بِكُلِّ تَسْبِيحَةٍ صَدَقَةٌ ، وَكُلِّ تَكْبِيرَةٍ صَدَقَةٌ ، وَكُلِّ تَحْمِيدَةٍ صَدَقَةٌ ، وَكُلِّ تَهْلِيلَةٍ صَدَقَةٌ ، وَأَمْرٌ بِالْمَعْرُوفِ صَدَقَةٌ وَنَهْيٌ عَنِ الْمُنْكَرِ صَدَقَةٌ وفي بُضْعٍ أَحَدِكُمْ صَدَقَةٌ » قالوا : يا رسولَ اللهِ آياتي أَحَدُنَا شَهْوَتُهُ وَيَكُونُ لَهُ فِيهَا أَجْرٌ ؟ قال : « أَرَأَيْتُمْ لَوْ وَضَعَهَا فِي حَرَامٍ أَكَانَ عَلَيْهِ وَزْرٌ ؟ فَكَذَلِكَ إِذَا وَضَعَهَا فِي الْحَلَالِ كَانَ لَهُ أَجْرٌ » رواه مسلم .

« الدُّثُرُ » بالثاء المثلثة : الأموال وَاجِدْهَا : دَثْر .

120. Abuu Darr (A.K.R.) Wuxuu yiri; Qaar asxaabtii ka mida baa waxay ku yiraahdeen nebiga (S.C.W.) dadkii maalka lahaa baa ajarkii oo dhan xaabsaday. waxay u tukadaan oo u soomaan sidayada oo kale, xoolohooda dheeraadka ah waa sadaqaystaan (taa oo aan annagu laheyn) Wuxuu yiri: " Sow idinba la idin ma siin wax aad sadaqaysataan? Alle hufid kastaa (macnaha inaad tiraahdo subxaanal -laah) waa sadaqo, Alle weyneyn kastaa (macnaha inaad tiraahdo Allaahu akbar) waa sadaqo, Alle ammaan kastaa (oo ah inaad tiraahdo al-Xamdu lillaah) waa sadaqo, Alle waxidid kastaa (oo ah inaad tiraahdo laa ilaaha illal laah)) waa sadaqo, sa-

maanta oo la is faraa waa sadaqo, xumaanta oo la is ka reebaana waa sadaqo; markii uu qofkiin xaaskiisa u galmoodaana waa sadaqo. Waxay weydiiyeen : Rasuul Alloow (S.C.W.) ma suura gal baa inta qofkayo xaaskiisa u tago si uu naftiisa ugu raaxeeyo oo ay ugu sugnaato arrintaa ajar ?' Wuxuu yiri: ' Haddii uu xaraan u galmoon lahaa sow ma fuuleen dambi ? Sidaasoo kale buu markuu xalaal u galmoodana u leeyahay ajar ". (Muslim)

١٢١ - الخامس : عنه قال : قال لي النبي ﷺ : « لَا تَحْقِرَنَّ مِنَ الْمَعْرُوفِ شَيْئًا وَلَوْ أَنْ تَلْقَى أَخَاكَ بِوَجْهِ طَلْقٍ » رواه مسلم .

121. Abuu Darr (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebiga (S.C.W.) wuxuu igu yiri: " Ha u arkin xitaa samaanta tan u yar waxaan wax ku ool aheyn balse waa wax ku oole fal. Xitaa walaalkaa oo aad waji furan tustid oo aad kula kulantid waa camal san oo sadaqa ah.' (Muslim)

١٢٢ - السادس : عن أبي هريرة رَضِيَ اللهُ عَنْهُ قال : قال رسول الله ﷺ : « كُلُّ سُلَامَى مِنَ النَّاسِ عَلَيْهِ صَدَقَةٌ كُلَّ يَوْمٍ تَطْلُعُ فِيهِ الشَّمْسُ : تَعْدِلُ بَيْنَ الْإِثْنَيْنِ صَدَقَةٌ ، وَتُعِينُ الرَّجُلَ فِي دَابَّتِهِ ، فَتَحْمِلُهُ عَلَيْهَا أَوْ تَرْفَعُ لَهُ عَلَيْهَا مَتَاعَهُ صَدَقَةٌ ، وَالْكَلِمَةُ الطَّيِّبَةُ صَدَقَةٌ ، وَبِكُلِّ خَطْوَةٍ تَمْشِيهَا إِلَى الصَّلَاةِ صَدَقَةٌ ، وَتُمْيِطُ الْأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ صَدَقَةٌ » متفقٌ عليه .

ورواه مسلم أيضاً من رواية عائشة رَضِيَ اللهُ عَنْهَا قالت : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّهُ خُلِقَ كُلُّ إِنْسَانٍ مِنْ بَنِي آدَمَ عَلَى سِتِّينَ وَثَلَاثِمِائَةَ مِفْصَلٍ ، فَمَنْ كَبَّرَ اللَّهَ وَحَمِدَ اللَّهَ وَهَلَّلَ اللَّهَ وَسَبَّحَ اللَّهَ وَاسْتَغْفَرَ اللَّهَ وَعَزَلَ حَجْرًا عَنْ طَرِيقِ النَّاسِ أَوْ شَوْكَةً أَوْ عَظْمًا عَنِ طَرِيقِ النَّاسِ أَوْ أَمَرَ بِمَعْرُوفٍ أَوْ نَهَى عَنِ مُنْكَرٍ عَدَدَ السِّتِّينَ وَالثَّلَاثِمِائَةِ فَإِنَّهُ يَمْشِي يَوْمَئِذٍ وَقَدْ زَحَرَ نَفْسَهُ عَنِ النَّارِ » .

122. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebiga (S.C.W.) wuxuu igu yiri: " Sadaqaa lagu leeyahay xubin kasta oo qofka jirkiisa ka mida maalin walba oo qorraxi soo baxdo, (wayna badan yihiin irdaha kheyrka iyo wejiyada ajar sadaqo lagu helo) tusaale inaad si xaq ah iyo caddaalad ugu garsoortaa laba qof waa sadaqo; inaad ku gacan

siisid qof si uu u kaxeysto gaadiidkiisa ama kor wax ula saartid waa sadaqo, kelmed wanaagsani waa sadaqo, tallaabo kasta oo aad qaaddid adoo salaad u socda waa sadaqo; ka qaadidda wax keeni kara dhib oo waddada la maro yaal waa sadaqo.'

(Bukhaari iyo Muslim)

Muslimna wuxuu weriyey oo laga soo xigtay Caa' isha (A.K.R.) in Nebigu (S.C.W.) yiri: " Aadanaha qof walba waxaa loo abuuray 360 xubnood , marka qofkii weyneeya Alle (macnaha yiraahda: Allaahu akbar), Allena ammaana (macnaha yiraahdo Alxamdu lillaah) , sugana waxdaaniyadiisa (macnaha yiraahdo laa ilaaha illal laah) oo hufana (macnaha waa yiraahda subxaanallaah), weydiista Alle dambi dhaaf (macnaha yiraahda astaqfirullaah) , ka qaada dhagax ama qodax, ama laf, iwm waddada ay maraan dadka, samaantana fara xumaantana reeba, waxyaabahaasina ay tiro ahaan gaaraan 360 wuxuu qofkaas gabbal dhacsanayaa isagoo naftiisii ka durkiyey (yacni ka fogeeyey) naar " . (Bukhaari iyo Muslim)

١٢٣ - السابع : عنه عن النبي ﷺ قال : « مَنْ غَدَا إِلَى الْمَسْجِدِ أَوْ رَاحَ ، أَعَدَّ اللَّهُ لَهُ فِي الْجَنَّةِ نُزُلًا كُلَّمَا غَدَا أَوْ رَاحَ » متفقٌ عليه .
« النَّزْلُ » القوت والرزق وما يُهيأ للضيف .

123. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii masjidka salaad awgeed u kallaha subaxa hore ama u carraaba galabkii, Alle hufnaa oo kor ahaaye, wuxuu ugu diyaariyaa martiqaad jannada, markasta oo uu salaad u socdo" .
(Bukhaari iyo Muslim)

١٢٤ - الثامن : عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « يَا نِسَاءَ الْمُسْلِمَاتِ لَا تَحْقِرَنَّ جَارَةَ لِحَارَتِهَا وَلَوْ فَرَسَنَ شَاةٍ » متفقٌ عليه .

قال الجوهرى : الفرسين من البعير كالحافر من الدابة قال : وَرُبَّمَا اسْتُعِيرَ فِي الشَّاةِ .

124. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) isagoo la hadlaya dumarka wuxuu yiri: " Dumarka muslimadaha ahoow , Ha yareysannina inay middiin kasta oo cid deris la ahi u dirto xitaa waxa wax ugu yar ri' majinteedba ha ahaatee hadiyad ahaan deriskeeda" .
(Bukhaari iyo Muslim)

١٢٥ - التاسع : عنه عن النبي ﷺ قال : « الإِيمَانُ بَضْعٌ وَسَبْعُونَ أَوْ بَضْعٌ وَسِتُّونَ شُعْبَةً : فَأَفْضَلُهَا قَوْلُ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، وَأَدْنَاهَا إِمَاطَةُ الْأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ ، وَالْحَيَاءُ شُعْبَةٌ مِنَ الْإِيمَانِ » متفقٌ عليه .

« البِضْعُ » من ثلاثة إلى تسعة بكسر الباء وقد تفتح . و« الشُّعْبَةُ » : القطعة .

125. Abuu Hurayrah (A.K.R) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Iimaanku waa dhowr iyo lixdan ama dhowr iyo toddobaatan qaybood waxaana u sarreeya laa ilaaha illal laah - qiritaanka ilaah ma jiro xaq ah aan Alle aheyn - waxaana u hooseeya jidka oo laga qaado wixii dhib leh. xishoodkuna waa qayb iimaanka ka mid ah".
(Bukhaari iyo Muslim)

١٢٦ - العاشر : عنه أن رسول الله ﷺ قال : « بَيْنَمَا رَجُلٌ يَمْشِي بِطَرِيقٍ أَشْتَدَّ عَلَيْهِ الْعَطَشُ ، فَوَجَدَ بَيْتًا فَنَزَلَ فِيهَا فَشَرِبَ ، ثُمَّ خَرَجَ فَإِذَا كَلْبٌ يَلْهَثُ يَأْكُلُ الثَّرَى مِنَ الْعَطَشِ ، فَقَالَ الرَّجُلُ : لَقَدْ بَلَغَ هَذَا الْكَلْبُ مِنَ الْعَطَشِ مِثْلَ الَّذِي كَانَ قَدْ بَلَغَ مِنِّي فَنَزَلَ الْبَيْتَ فَمَلَأَ خُفَّهُ مَاءً ثُمَّ أَمْسَكَهُ فِيهِ حَتَّى رَقِيَ فَسَقَى الْكَلْبَ فَشَكَرَ اللَّهُ لَهُ فَغَفَرَ لَهُ » قالوا : يا رسول الله إن لنا في البهائم أجرًا؟ فقال : « في كلِّ كَبِدٍ رَطْبَةٍ أَجْرٌ » متفقٌ عليه .

وفي رواية للبخاري : « فَشَكَرَ اللَّهُ لَهُ فَغَفَرَ لَهُ فَأَدْخَلَهُ الْجَنَّةَ » وفي رواية لهما : « بَيْنَمَا كَلْبٌ يُطِيفُ بِرَكِيَّةٍ قَدْ كَادَ يَقْتُلُهُ الْعَطَشُ إِذْ رَأَتْهُ بَغِيٌّ مِنْ بَغَايَا بَنِي إِسْرَائِيلَ ، فَنَزَعَتْ مُوقَهَا فَاسْتَقَتْ لَهُ بِهِ فَسَقَتْهُ فَغَفَرَ لَهَا بِهِ » . « الموقُ » : الخف . و« يُطِيفُ » يدور حول « رَكِيَّةٍ » وهي البئر .

126. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Nin jid hayaa aad u harraaday, wuxuu helay ceel, inta galay buu ka soo cabbey biyo oo ka dhergay, markuu soo baxay buu wuxuu arkay Eey haraadyoonaya oo rayska leef leefaya haraad awgiis. Wuxuu kula hadlay ninkii naftiisii Alleylehe Eygaan waxaa haya haraad kii i hayey oo kale ah. Wuxuu mar labaad galay ceelkii oo kabhiisii buudka ahaa soo buuxiyey oo afka ku soo qaaday oo soo baxay oo Eeygii siiyey suu u cabbo. Markaasaa Alle mahdiyey falka ninkan una dembi dhaafay . Nabiga (S.C.W.) ayaa la

weydiyey : Rasuul Alloow ma ajar baan ka heleynaa u naxariisashada xoolaha? Wuxuu yiri: wax kasta oo beer qoyanba u naxariisashadooda ajar bay leedahay" . (Bukhaari iyo Muslim)

Werinta Bukhaari wuxuu ku soo gunaanuday : Allaa mahdiyey falkiisa oo u dambi dhaafay, jannana geliyey" (Bukhaari)

Werin kale oo xadiiska ah baa waxay iyana ahayd: " Eey ceel ku wareegaya oo inuu harraad u dhinto u dhow baa naag xun (dhillo) Yuhuudiyad ah aragtay, markaasay inta buudkeedii u bixisay bay biyo ugu soo dartay, oo ku waraabisay. Alle, Naxariis badnaha ah , baa ugu dembi dhaafay naxariisteedaasi awgeed.

(Bukhaari iyo Muslim)

١٢٧ - الحادي عشر : عنه عن النبي ﷺ قال : « لَقَدْ رَأَيْتُ رَجُلًا يَتَقَلَّبُ فِي الْجَنَّةِ فِي شَجَرَةٍ قَطَعَهَا مِنْ ظَهْرِ الطَّرِيقِ كَأَنَّهُ تُؤْذِي الْمُسْلِمِينَ » . رواه مسلم .

وفي رواية : « مَرَّ رَجُلٌ بِغُصْنِ شَجَرَةٍ عَلَى ظَهْرِ طَرِيقٍ فَقَالَ : وَاللَّهِ لَأُنْحِيَنَّ هَذَا عَنِ الْمُسْلِمِينَ لَا يُؤْذِيهِمْ . فَأَدْخَلَ الْجَنَّةَ » .

وفي رواية لهما : « بَيْنَمَا رَجُلٌ يَمْشِي بِطَرِيقٍ وَجَدَ غُصْنَ شَوْكٍ عَلَى الطَّرِيقِ فَأَخْرَهُ فَشَكَرَ اللَّهُ لَهُ فَغَفَرَ لَهُ » .

127. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Waxaan arkay nin jannada ku daansha daanshoonaya , taasna waxaa u sabab ahaa geed uu ka gooyey jidka, oo dhibi jirey muslimiinta " . (Muslim)

Werin kale oo xadiiska waxay ahayd: " Nin baa wuxuu arkay laan ku soo baxday jid. Wuxuu yiri: wallee tan waa aan goynayaa si aysan muslimiinta u dhibin .Markaasaa jannada la galiyey falkaa san awgi"

Werin kalena waxay iyana ahayd: " Nin dhabbo hayaa wuxuu arkay laan qodox leh oo dhabbada ku soo baxday markaasuu ka baneeyey. Markaasaa Allaa mahdiyey falkiisaasi oo u dambi dhaafay". (Bukhaari iyo muslim)

١٢٨ - الثاني عشر : عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ تَوَضَّأَ فَأَحْسَنَ الْوُضُوءِ ، ثُمَّ أَتَى الْجُمُعَةَ فَاسْتَمَعَ وَأَنْصَتَ غُفِرَ لَهُ مَا بَيْنَهُ وَبَيْنَ الْجُمُعَةِ وَزِيَادَةُ ثَلَاثَةِ أَيَّامٍ ، وَمَنْ مَسَّ الْحَصَا فَقَدْ لَغَا » رواه مسلم .

128. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W) wuxuu yiri: " Qofkii weeseysta oo weesada hagaajiya, dabadeedna salaada jimcaha aada oo dhegeysta khudbadda Jimcaha si dhug leh oo aamus ah , dambiyadii ka dhacay aan kabaa'irta aheyn laga soo bilaabo jimcihii tegey illaa iyo kii kale iyo weliba saddex beri oo dheeraad ah waa loo dhaafaa, qofkii isku shuqliyaana quruurux waqtiga khudbadda socoto wax san ma uusan falin" . (Muslim)

١٢٩ - الثالث عشر : عنه أن رسول الله ﷺ قال : « إِذَا تَوَضَّأَ الْعَبْدُ الْمُسْلِمُ ، أَوْ الْمُؤْمِنُ فَغَسَلَ وَجْهَهُ خَرَجَ مِنْ وَجْهِهِ كُلِّ خَطِيئَةٍ نَظَرَ إِلَيْهَا بِعَيْنَيْهِ مَعَ الْمَاءِ ، أَوْ مَعَ آخِرِ قَطْرِ الْمَاءِ ، فَإِذَا غَسَلَ يَدَيْهِ خَرَجَ مِنْ يَدَيْهِ كُلِّ خَطِيئَةٍ كَانَتْ بَطَشَتْهَا يَدَاهُ مَعَ الْمَاءِ ، أَوْ مَعَ آخِرِ قَطْرِ الْمَاءِ حَتَّى يَخْرُجَ نَقِيًّا مِنَ الذُّنُوبِ ، فَإِذَا غَسَلَ رِجْلَيْهِ خَرَجَتْ كُلُّ خَطِيئَةٍ مَسَّتْهَا رِجْلَاهُ مَعَ الْمَاءِ أَوْ مَعَ آخِرِ قَطْرِ الْمَاءِ حَتَّى يَخْرُجَ نَقِيًّا مِنَ الذُّنُوبِ » رواه مسلم .

129. Abuu Hureyrah (A.K.R) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Marka uu qofka muslimka ahi weeseysto oo wejiga dhaqo waxaa biyaha raaca wixii dembi ahaa oo ay ishiisu fiirisay, markii uu gacmaha dhaqana waxaa biyaha raaca wixii dembi ahaa oo ay gacaniisu fashay, markii uu lugaha dhaqana waxaa biyaha raaca wixii dambi ah oo lugihiisu u socdeen, markaasuu ahaanayaa qof dembiyada (yar yar aan kabaa'irta aheyn) nadiif ka ah.' (Muslim)

١٣٠ - الرابع عشر : عنه عن رسول الله ﷺ قال : « الصَّلَاةُ الْخَمْسُ ، وَالْجُمُعَةُ إِلَى الْجُمُعَةِ ، وَرَمَضَانَ إِلَى رَمَضَانَ مُكْفَرَاتٌ لِمَا بَيْنَهُنَّ إِذَا اجْتَنِبْتَ الْكِبَائِرُ » رواه مسلم .

130. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Shanta salaadood (oo si rigele iyo joogto ah jamaacad ahaan masjidka loogu tukado) waxay tiraan dambiyada yar yar, haddii dambiyada kabaa'irta (halista) ah (sida shirkiga, sixirka, dilka gardarrada ah, dhilleysiga, ribada, dhilleysi ku xamashada dumarka dhowrsoon, u dhabar jeedinta cadowga maalin dagaal dar Alle ah iwm) la iska jiro markaa waa loo dhaafaa dambiyada yaryar inta u dhaxeeyso labo Jimco iyo labo Ramadaan" . (Muslim)

١٣١ - الخامس عشر : عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « أَلَا أُدْلِكُمْ عَلَى مَا يَمْحُو اللَّهُ بِهِ الْخَطَايَا وَيَرْفَعُ بِهِ الدَّرَجَاتِ » ؟ قَالُوا : بَلَى يَا رَسُولَ اللَّهِ ، قَالَ : « إِسْتِغْثَارُ »

الْوُضُوءِ عَلَى الْمَكَارِهِ وَكَثْرَةَ الْخَطَا إِلَى الْمَسَاجِدِ ، وَأَنْتِظَارُ الصَّلَاةِ بَعْدَ الصَّلَاةِ
فَذَلِكُمْ الرَّبَاطُ (٢) » رواه مسلم .

131. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Miyaan idin tusaa wax Alle ku dhaafo dembiyadiina, de-rejooyinkiinnana ku kor yeelo? Asxaabtii waxay yiraahdeen: Haah Rasuul Alloow (S.C.W.) , Wuxuu yiri: waa weesada oo la taam yeelo gooraha la dhibsanayo, iyo aadista masjidka si noqnoqod leh si aad ugu la soo tukatid (jamaacada) iyo salaaddii xigtay oo la sugo markay midi dhammaato kaddib. Waa sidan jihaadkiinna dar-ka Alle ah (ama wataas u heeggan ahaanta jihaadkuye) " .
(Muslim)

Fiiro gaar ah: Ujeeddada xadiiska waxaa weeye nadaafada (sida weeseysiga, qusliga) salaadaha iyo caabudaadda Alle oo loo guto si dadaal leh iyo dhowris, waa wax wanaagsan sida jihaadka jidka Alle.

١٣٢ - السادس عشر : عن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ صَلَّى الْبُرْدَيْنِ دَخَلَ الْجَنَّةَ » متفق عليه .
« الْبُرْدَانِ » : الصبح والعصر .

132. Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K.R.) Wuxuu yiri Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: (qofkii si joogta ah , waqtigii salaadda ugu tukada masjidka (jamaaca ahaan) salaadda subax (Fajar) iyo salaada Casar wuxuu geli doonaa jannada'.
(Bukhaari iyo Muslim)

١٣٣ - السابع عشر : عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِذَا مَرَضَ الْعَبْدُ أَوْ سَافَرَ كُتِبَ لَهُ مِثْلَ مَا كَانَ يَعْمَلُ مُقِيمًا صَحِيحًا » رواه البخاري .

133. Abuu Muusaa Al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri " Markuu addoonku bukoodo ama safro, waxaa loo qoraa camalkii uu fali jiray markii uu fayooobaa ama markii uu negaa".
(Bukhaari)

١٣٤ - الثامن عشر : عن جابر رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « كُلُّ مَعْرُوفٍ صَدَقَةٌ » رواه البخاري . ورواه مسلم من رواية حذيفة رضي الله عنه .

134. Jaabir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Ca-
mal kasta oo wanaagsan waa sadaqo. (Bukhaari)
Muslim wuxuu weriyey isla xadiiska oo laga soo xigtay Xudayfah.
(A.K.R.).

١٣٥ - التاسع عشر : عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَا مِنْ مُسْلِمٍ يَغْرِسُ غَرْسًا إِلَّا كَانَ مَا أَكَلَ مِنْهُ لَهُ صَدَقَةٌ ، وَمَا سُرِقَ مِنْهُ لَهُ صَدَقَةٌ ، وَلَا يَرَزُؤُهُ أَحَدٌ إِلَّا كَانَ لَهُ صَدَقَةٌ » رواه مسلم . وفي رواية له : « فَلَا يَغْرِسُ الْمُسْلِمُ غَرْسًا فَيَأْكُلُ مِنْهُ إِنْسَانٌ وَلَا دَابَّةٌ وَلَا طَيْرٌ إِلَّا كَانَ لَهُ صَدَقَةٌ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ . وفي رواية له : « لَا يَغْرِسُ الْمُسْلِمُ غَرْسًا وَلَا يَزْرَعُ زَرْعًا فَيَأْكُلُ مِنْهُ إِنْسَانٌ وَلَا دَابَّةٌ وَلَا شَيْءٌ إِلَّا كَانَتْ لَهُ صَدَقَةٌ » .

135. Jaabir (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "
Qof kasta oo muslim ah oo wax beeraa wixii laga cunaaba (oo ay
cunaan shimbiro iyo xoolo) waa u sadaqo xaggiisa, wixii laga xa-
daana sidoo kale waa sadaqo , wixii laga lunshaana waa u sada-
qo". (Muslim)

Werin kale waxay leedahay: " Wixii qofka muslimka ahi beero oo
dad cuno ama duunyo ama shimbiriba waa u sadaqo , ilaa maalinta
(Muslim)

Werin kale waxay iyana leedahay : " Wixii qofka muslimka ahi
beero ama tallaalo oo markaas dad ka cuno ama duunyo ama wax
kaleba waa u sadaqo" Labadaa xadiisba waxaa ka weriyey rasuulka
Anas bin Maalik (A.K.R.) .

١٣٦ - العشرون : عنه قال : أراد بنو سَلَمَةَ أَنْ يَنْتَقِلُوا قَرَبَ الْمَسْجِدِ فَبَلَغَ ذَلِكَ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ لَهُمْ : « إِنَّهُ قَدْ بَلَغَنِي أَنَّكُمْ تُرِيدُونَ أَنْ تَنْتَقِلُوا قَرَبَ الْمَسْجِدِ » ؟ فَقَالُوا : نَعَمْ يَا رَسُولَ اللَّهِ قَدْ أَرَدْنَا ذَلِكَ فَقَالَ : « بَنِي سَلَمَةَ دِيَارُكُمْ تُكْتَبُ آثَارُكُمْ ، دِيَارُكُمْ تُكْتَبُ آثَارُكُمْ » رواه مسلم . وفي رواية : « إِنَّ بِكُلِّ خَطْوَةٍ دَرَجَةٌ » رواه مسلم .

136. Jaabir (A.K.R.) wuxuu yiri: Reer banii Salamah yaa damcay
inay masjidka (rasuulka S.C.W.) agtiisa u soo guuraan, markuu
ogaaday Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku yiri: " Waxaa ii soo gaaray oo
aan ogaaday inaad rabtaan inaad u soo guurtaan masjidka agtiisa?
Waxay yiraahdeen: Haah, Rasuul Alloow, waa damacnay sidaas

inaan yeelno.' Wuxuu yiri: " Reer salamoow, meeshhiinna jooga, raadkiinnaa la idiin qorayaaye, meeshhiinna, raadkiinnaa la idiin qorayaaye". (Muslim)

Werin kale waxay ahayd: " Tallaabo kastaaba oo aad masjidka u qaaddaan derajo bay kor idiin qaadeysaa. Bukhaarina wuxuu soo weriyey isla macnaha oo laga soo weriyey Anas (A.K.R.).

١٣٧ - الحادي والعشرون : عن أبي المنذر أبي بن كعب رضي الله عنه قال : كَانَ رَجُلٌ لَا أَعْلَمُ رَجُلًا أَبْعَدَ مِنَ الْمَسْجِدِ مِنْهُ ، وَكَانَ لَا تُخْطِئُهُ صَلَاةٌ ، فَقِيلَ لَهُ أَوْ فَقُلْتُ لَهُ : لَوْ أَشْتَرَيْتَ حِمَارًا تَرَكَبُهُ فِي الظُّلْمَاءِ وَفِي الرَّمْضَاءِ ؟ فَقَالَ : مَا يَسْرُنِي أَنْ مَنَزَلِي إِلَى جَنْبِ الْمَسْجِدِ إِنِّي أُرِيدُ أَنْ يُكْتَبَ لِي مَمْشَايَ إِلَى الْمَسْجِدِ وَرَجُوعِي إِذَا رَجَعْتُ إِلَى أَهْلِي فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « قَدْ جَمَعَ اللَّهُ لَكَ ذَلِكَ كُلَّهُ » رواه مسلم .

وفي رواية : « إِنَّ لَكَ مَا أَحْتَسِبْتِ » . « الرَّمْضَاءُ » : الأَرْضُ التي أصابها الحر الشديد .

137. Abuu Mundir Ubayy ibn Kacab (A.K.R.)Wuxuu yiri: Waxaa jiray nin gurigiisu uu xoogaa ka fogaa masjidka, hayeeshee aysan salaadi dhaafi jirin (salaadda jamaacada) . Waxaa lagu yiri ama aan aniguba ku iri : Maxaad u gadan weydey dameer aad kaxeysatid markii mugdiga jiro iyo kulaylka? Wuxuu yiri: Ma rabo in gurigayga ku soo dhowaado masjidka. Waxaan rabaa in u socodkayga masjidka iyo noqodka aan reerkayga u socdoba la iigu qoro xisaabteyda inay dar Alle tahay. Nebigu (S.C.W.) wuxuu ku yiri ninkaa: " Alle wuxuu kuugu daray waxaasoo idil xisaabtaadii " . (Muslim)

Werin kale baa waxay ku dareysaa intaa: " Arrimaahaas oo idil ca-malka san ah waxaa laguugu qoray camal san ahaan xisaabtaada " .

١٣٨ - الثاني والعشرون : عن أبي محمد عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ : « أَرْبَعُونَ خَصْلَةً أَعْلَاهَا مَنِيحَةُ الْعَنْزِ مَا مِنْ عَامِلٍ يَعْمَلُ بِخَصْلَةٍ مِنْهَا رَجَاءً ثَوَابَهَا وَتَصَدِيقَ مَوْعُودِهَا إِلَّا أَدْخَلَهُ اللَّهُ بِهَا الْجَنَّةَ » رواه البخاري .

« الْمَنِيحَةُ » : أَنْ يُعْطِيَهُ إِيَّاهَا لِأَيِّهَا لَبَنَهَا ثُمَّ يَرُدُّهَا إِلَيْهِ .

138. Cabdullaah ibn Camar ibn Caas (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waxaa jira Afartan nooc oo camal wa-naagsan ah_ tan u sarraysaa tahay amaah ku bixinta hal caano badan leh, qofkii mid ka mid ah sameeya isagoo rajeynaya ajarkeeda oo is leh hel waxaa laysu yaboohay oo la isu ballan qaaday waxay ku hoggaamin falaheeda jannada ". (Bukhaari)

١٣٩ - الثالث والعشرون : عن عدي بن حاتم رضي الله عنه قال : سمعت النبي ﷺ يقول : « اتقوا النار ولو بشق تمره » . متفق عليه .

وفي رواية لهما عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « ما منكم من أحد إلا سيكلمه ربه ليس بينه وبينه ترجمان ، فينظر أيمن منه فلا يرى إلا ما قدم . وينظر أشأم منه فلا يرى إلا ما قدم ، وينظر بين يديه فلا يرى إلا النار تلقاء وجهه فاتقوا النار ولو بشق تمره ، فمن لم يجد فبكلمة طيبة » .

139. Caddi ibn Xaatim (A.K.R.) wuxuu yiri: " Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh : " Ka gaashaanta Naarta, oo kaga gaashaanta xitaa bixin xabbad timir ah jabkeed (ama wax le'eg) oo sadaqo ah" (Bukhaari iyo Muslim)

wuxuu kaloo Caddi yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri : " Qof kasta oo idin ka mid ahba Rabbbigiisaa la hadli doona iyadoo uusan u dhaxeyn tarjumaan, Wuxuu fiirinayaa qofkii midigtiisa, markaasoo arkayaa camalkiisii; Wuxuu fiirinayaa bidixdiisa wuxuuna arki oo keliya camalkiisii. Wuxuu fiirinayaa hortiisa wuxuu oo keliya arki doonaa naartii oo hortiisa ka muuqata, ee naarta kaga gaashaanta xabbad timir ah jeexeedba ha ahaatee oo aad sadaqo ahaan u bixisaan, qofkii aan heli karinna inuu yiraahdo erey san ". (Bukhaari iyo Muslim)

١٤٠ - الرابع والعشرون : عن أنس رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إن الله ليرضى عن العبد أن يأكل الأكلة فيحمده عليها أو يشرب الشربة فيحمده عليها » رواه مسلم .

و« الأكلة » بفتح الهمزة : وهي الغدوة أو العشوة .

140 Anas (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Markii uu addoonka Alle wax cuno oo uu Alle mahdiyo (macnaha yiraahdo al-xamdulillaah) iyo markii uu wax cabbo oo uu mahdiyo Alle (yacni yiraahdo al-xamdulillaah), sidaa Waxay raalli gelisaa Alle". (Muslim)

١٤١ - الخامس والعشرون : عن أبي موسى رَضِيَ اللهُ عَنْهُ عن النبي ﷺ قال : « عَلَى كُلِّ مُسْلِمٍ صَدَقَةٌ » قال : أَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَجِدْ ؟ قال : « يَعْمَلُ بِيَدَيْهِ فَيَنْفَعُ نَفْسَهُ وَيَتَصَدَّقُ » قال : أَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ ؟ قال : « يُعِينُ ذَا الْحَاجَةِ الْمَلْهُوفَ » قال : أَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ قال : « يَأْمُرُ بِالْمَعْرُوفِ أَوْ الْخَيْرِ » قال : أَرَأَيْتَ إِنْ لَمْ يَفْعَلْ ؟ قال : « يُمْسِكُ عَنِ الشَّرِّ فَإِنَّهَا صَدَقَةٌ » متفقٌ عليه .

141 Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Qof kasta oo muslim ah sadaqaa laga rabaa. Waxaa la weydiiyey: Haddii uusan heli karinna? Nabigu (S.C.W.) Wuxuu ku jawaabay : Waa inuu ku shaqeystaa labadiisa gacmood si uu naftiisa wax u taro , ugalana baxo (waxaas uu shaqeystay wax ka mid ah sadaqo) . Asxaabtii waxay yiraahdeen haddii uusan karinna inuu shaqeysto. Nabigu (S.C.W) wuxuu yiri: Waa inuu caawinaa Qof dhibaateysan oo sabool ah ama baahi qaba. Asxaabtii waxay yiraahdeen haddii uusan karinna taa qudheeda? Nabigu (S.C.W) wuxuu yiri: Waa inuu faraa dadka kale inay axsaan faalaan. Asxaabtii waxay yiraahdeen ka warran hadduu taana ka gaabiyo? Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waa inuu ka ilaaliyaa naftiisa inuu falo wax xumaan ah ama ka dhaco xadgudb Taasiba waa sadaqo uu naftiisa u hormarsanayo.' (Bukhaari iyo Muslim)

١٤ - باب في الاقتصاد في الطاعة

C U T U B K A 14

CIBAADEYSO SI DHEXAAD AH

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى : ﴿ طه مَا أَنْزَلْنَا عَلَيْكَ الْقُرْآنَ لِتَشْقَى ﴾ [طه : ١]

53. " Dhaa haa. Qur'aanka kuuguma aannu soo dejin inaad ku dhibtooto'. Suuradda Daaha: Aayadda 1.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ ﴾ [البقرة : ١٨٥]

54. "Alle wuxuu idin la rabaa fudayd ee culays iyo dhib idin lama rabo" Suuradda Al Baqarah: Aayadda 185.

١٤٢ - وعن عائشة رضي الله عنها أن النبي ﷺ دخل عليها وعندها امرأة قال : « مَنْ هَذِهِ ؟ » قالت : هَذِهِ فُلَانَةٌ تَذْكُرُ مِنْ صَلَاتِهَا قَالَ : « مَهْ عَلَيْكُمْ بِمَا تَطِيقُونَ ، فَوَاللَّهِ لَا يَمَلُّ اللَّهُ حَتَّى تَمَلُّوا » وَكَانَ أَحَبُّ الدِّينِ إِلَيْهِ مَا دَاوَمَ صَاحِبُهُ عَلَيْهِ . متفقٌ عليه .

و« مَهْ » كَلِمَةٌ نَهَى وَزَجَرَ . وَمَعْنَى « لَا يَمَلُّ اللَّهُ » لَا يَقْطَعُ ثَوَابَهُ عَنْكُمْ وَجَزَاءَ أَعْمَالِكُمْ وَيُعَامِلُكُمْ مُعَامَلَةَ الْمَالِ حَتَّى تَمَلُّوا فَتَتْرَكُوا ، فَيَنْبَغِي لَكُمْ أَنْ تَأْخُذُوا مَا تَطِيقُونَ الدَّوَامَ عَلَيْهِ لِيَدُومَ ثَوَابُهُ لَكُمْ وَفَضْلُهُ عَلَيْكُمْ .

142. Caa'isha (A.K.R.)Waxay tiri: Nebigaa (S.C.W.) mar ii soo galay iyadoo ay haweeney ila fadhiday. Wuxuu i weydiyey: " tani waa tuma? Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri : ' Waa hebla ee lagu yaqaan salaad badnida. Isagoo hadal u jeedinaya wuxuu yiri: I dhaageysta. ' Waxaa la idinka rabaa inaad tukataan oo keliya inta aad ku gudan kadhaan si fudud. Alle baan ku dhaaran, Alle idinka daali maayo inaad adinku daashaan maahee. Alle wuxuu jecel yahay salaadaha cibaadeystuhu sida fudud u gudan karo, uuna daa'imo" .
(Bukhaari iyo Muslim)

١٤٣ - وعن أنس رضي الله عنه قال : جَاءَ ثَلَاثَةٌ رَهْطٍ إِلَى بُيُوتِ أَزْوَاجِ النَّبِيِّ ﷺ يَسْأَلُونَ عَنْ عِبَادَةِ النَّبِيِّ ﷺ فَلَمَّا أُخْبِرُوا كَانَهُمْ تَقَالُوهَا وَقَالُوا : أَيْنَ نَحْنُ مِنَ النَّبِيِّ ﷺ وَقَدْ غَفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ وَمَا تَأَخَّرَ . قَالَ أَحَدُهُمْ : أَمَا أَنَا فَأُصَلِّي اللَّيْلَ أَبَدًا ، وَقَالَ الْآخَرُ : وَأَنَا أَصُومُ الدَّهْرَ أَبَدًا وَلَا أَفْطِرُ ، وَقَالَ الْآخَرُ : وَأَنَا أَعْتَزِلُ النِّسَاءَ فَلَا أَتَزَوَّجُ أَبَدًا ، فَجَاءَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ إِلَيْهِمْ فَقَالَ : « أَنْتُمْ الَّذِينَ قُلْتُمْ كَذَا وَكَذَا ؟ أَمَا وَاللَّهِ إِنِّي لأُخْشَاكُمْ لِلَّهِ وَأَتَقَاكُمْ لَهُ لِكِنِّي أَصُومُ وَأُفْطِرُ وَأُصَلِّي وَأَرْقُدُ وَأَتَزَوَّجُ النِّسَاءَ فَمَنْ رَغِبَ عَنْ سُنَّتِي فَلَيْسَ مِنِّي » متفقٌ عليه .

143. Anas (A.K.R.)Wuxuu yiri: Mar waxaa dhacay seddex nin inay yimaadeen si ay uga wareystaan reerahii Nebiga (S.C.W.) sida ay tahay cibaadadiisa. Markii loo sheegay bay toodii la yaraatay oo yiraahdeen nebigii Alle dembigiisa u dhaafey mid hore iyo mid dambaba yaa sidaa ahe innagu xaggee joognaa?. Midkood baa yiri: Anigu wixii hadda ka dambeeya waxaan ku jirayaa habeenkii oo idil salaad. Kii labaadna wuxuu yiri: Aniguna wixii maanta ka dambeeya soon baan wadayaa afurina maayo. Kii seddexaad wuxuu yiri: aniguna naagahaan ka fogaanayaa oo weligeey guursan-

maayo. Nabigaa (S.C.W.) markaa yimid oo weydiiyey: " Ma idin-kaa sidaas iyo sidaas yiri? Haddaba i dhageysta, Waxaan ka cabsadaa Alle si aydan uga cabsan, anigaana idiin kugu gudan og xilka iyo arrimahuu waajibiyey, waana soomaa oo afuraa, oo tukadaa oo seexdaa, oo haweenka guursadaa, qofkii sunnahayga ka jeesadaana iga mid maha". (Bukhaari iyo Muslim)

١٤٤ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه ، أن النبي ﷺ قال : « هَلَكَ الْمُتَنَطِّعُونَ » قالها ثلاثاً ، رواه مسلم .

« الْمُتَنَطِّعُونَ » المتعمقون المشددون في غير موضع التشديد .

144. Ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W) wuxuu yiri: ' Qallafsanayaashaa - yacni Dadka xadka gooya oo xag jirsada - (markay gudanayaan waajibaadkooda diiniga ah) baa ba'ay oo balaanbalay.' Wuxuu ku celceliyey weedhaa seddex jeer.' (Muslim)

١٤٥ - عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إِنَّ الدِّينَ يُسْرٌ وَلَنْ يُشَادَّ الدِّينَ إِلَّا غَلْبُهُ ، فَسَدِّدُوا وَقَارِبُوا وَأَبْشِرُوا ، وَأَسْتَعِينُوا بِالْغَدْوَةِ وَالرُّوحَةِ وَشَيْءٍ مِنَ الدُّلْجَةِ » رواه البخاري .

وفي رواية له : « سَدِّدُوا وَقَارِبُوا وَاعْدُوا وَرُوحُوا ، وَشَيْءٍ مِنَ الدُّلْجَةِ ، الْقَصْدَ الْقَصْدَ تَبَلُّغُوا » .

قوله « الدِّينُ » هو مرفوع على ما لم يسم فاعله . وروي منصوباً وروي « لن يشادَّ الدينَ أحدٌ » . وقوله ﷺ : « إِلَّا غَلْبُهُ » : أي غلبه الدين وَعَجَزَ ذَلِكَ الْمُشَادُّ عَنْ مَقَاوِمَةِ الدِّينِ لِكَثْرَةِ طُرُقِهِ . وَ« الْغَدْوَةُ » : سير أول النهار . وَ« الرُّوحَةُ » آخِرُ النَّهَارِ . وَ« الدُّلْجَةُ » آخِرُ اللَّيْلِ .

وهذا إستعارة وتمثيل ، ومعناه : أَسْتَعِينُوا عَلَى طَاعَةِ اللَّهِ عَزَّ وَجَلَّ بِالأَعْمَالِ فِي وَقْتِ نَشَاطِكُمْ وَفَرَاغِ قُلُوبِكُمْ بِحَيْثُ تَسْتَلِدُونَ العِبَادَةَ وَلَا تَسَامُونَ وَتَبَلُّغُونَ مَقْصُودَكُمْ ، كَمَا أَنَّ المُسَافِرَ الحَادِقَ يَسِيرُ فِي هَذِهِ الأَوْقَاتِ وَيَسْتَرِيحُ هُوَ وَدَابَّتُهُ فِي غَيْرِهَا فَيَصِلُ المَقْصُودَ بِغَيْرِ تَعَبٍ ، وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

145. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri : " Fulinta qodobbada iyo awaamirta diinta wax adag maa-ha oo waa fududdahay. Qofkii isku adkeeyana waa ku adkaana-yaa, sidaa awgeed dhexaad ahaada, una fuliya waajibaadka diinta si waafaqsan awoodiinna, oo bishaaraysta, oo ku raadsada hiilka iyo gargaarka Alle salaad badan aad tukataan subaxii, galabtii, iyo qaybo ka mid habeenkii " . (Bukhaari)

Werin kale oo Bukhaari dhigayo waxay ahayd: Dhexdhexaad ahaada, waajibaadka diintana u fuliya sida aad u awooddaan oo karaan-kiin ah, Salaadahana la imaada subaxii iyo galabtii, iyo qaybo ka mida habeenkii , dhexdhexaadna wax ku wada aad gaartaan dantiinna'e" .

Fiiro gaar ah: Soo jeedinta subax, galab, iyo salaadaha habeenka waxay muujin in saacadaha qofku karo inuu si wacan u tukado oo khushuuc leh gaarona dantiisa. Salaadaha xiriirka ah se ee badan waqti kastana la tukado waxay qofka ka qaadayaan degannaantii iyo khushuucii la rabay, sidaa awgeed qofka awood uma yeelanayo inuu ku caddaalad falo dhexdhexaadna ku ahaado arrimaha la xiriira diintiisa iyo dunidiisa.

١٤٦ - وعن أنس رضي الله عنه قال : دَخَلَ النَّبِيُّ ﷺ الْمَسْجِدَ فَإِذَا حَبْلٌ مَمْدُودٌ بَيْنَ السَّارِيَتَيْنِ فَقَالَ : « مَا هَذَا الْحَبْلُ » ؟ قَالُوا : هَذَا حَبْلٌ ، لِزَيْنَبَ فَإِذَا فَتَرَتْ تَعَلَّقَتْ بِهِ . فقال النبي ﷺ : « حُلُوهُ لِيُصَلَ أَحَدُكُمْ نَشَاطَهُ فَإِذَا فَتَرَ فَلْيَرْقُدْ » متفقٌ عليه .

146. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaa mar dhacday in nebiga (S.C.W.) yimid masjidka , wuxuu arkay xarig ku xiran laba tiir dhexdood. Wuxuu weydiyey sababta xarigga loogu xiray labada tiir dhexdood. Asxaabtii waxay yiraahdeen: Zaynab baa xirtay xarigga si ay ugu nasato oo u cuskato markii ay ku daasho salaadaha. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Fura. Waa inaad tukataan in-taad fir fircoon tihiin. Markii aad dareentaan daal waa inaad baxdaan si aad u nasataan. (Bukhaari iyo Muslim)

١٤٧ - وعن عائشة رضي الله عنها أن رسول الله ﷺ قال : « إِذَا نَعَسَ أَحَدُكُمْ وَهُوَ يُصَلِّي فَلْيَرْقُدْ حَتَّى يَذْهَبَ عَنْهُ النَّوْمُ فَإِنَّهُ إِذَا صَلَّى وَهُوَ نَاعِسٌ لَا يَدْرِي لَعَلَّهُ يَذْهَبُ يَسْتَغْفِرُ فَيَسُبُّ نَفْسَهُ » (٤) متفقٌ عليه .

147. Caa'i sha (A.K.R.) waxay tiri : Nebiga (S.C.W.) wuxuu yiri: Haddii ay qofkiin lulmo qabato isagoo tukanaya waa inuu baxaa oo

seexdaa illaa ay hurdadu ka ba'do uuna soo kaco isagoo firfircoon oo maankiisu joogo; maxaa yeelay haddii uu qofku salaad wado isagoo hurdeysan, ma garanayo hadallada uu ku dhawaaqayo; waxaa laga yaabaa inuu is caayo isagoo dembi dhaaf weydiiso is leh.'
(Bukhaari iyo Muslim)

١٤٨ - وعن أبي عبد الله جابر بن سمرة رضي الله عنهما قال : كُنْتُ أَصَلِّي مَعَ النَّبِيِّ ﷺ الصَّلَوَاتِ فَكَانَتْ صَلَاتُهُ قَصْدًا وَخُطْبَتُهُ قَصْدًا . رواه مسلم .
قوله : « قَصْدًا » : أي بين الطول والقصر .

148. Abuu Cabdullaah Jaabir ibn Sumrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan la tukan jirey Nebiga (S.C.W.) salaadaha. Salaadihiisa iyo khudbaddiisuba waxay ahaan jireen dhexdhexaad" .
(Muslim)

١٤٩ - وعن أبي جحيفة وهب بن عبد الله رضي الله عنه قال : أَخَى النَّبِيُّ ﷺ بَيْنَ سَلْمَانَ وَأَبِي الدَّرْدَاءِ فَرَارَ سَلْمَانُ أَبَا الدَّرْدَاءِ فَرَأَى أُمَّ الدَّرْدَاءِ مُتَبَدِّلَةً فَقَالَ : مَا شَأْنُكَ ؟ قَالَتْ : أَخُوكَ أَبُو الدَّرْدَاءِ لَيْسَ لَهُ حَاجَةٌ فِي الدُّنْيَا فَجَاءَ أَبُو الدَّرْدَاءِ فَصَنَعَ لَهُ طَعَامًا فَقَالَ لَهُ : كُلْ فَإِنِّي صَائِمٌ ، قَالَ : مَا أَنَا بِأَكِلٍ حَتَّى تَأْكُلَ ، فَلَمَّا كَانَ اللَّيْلُ ذَهَبَ أَبُو الدَّرْدَاءِ يَقُومُ فَقَالَ لَهُ : نَمْ ، فَنَامَ ، ثُمَّ ذَهَبَ يَقُومُ فَقَالَ لَهُ : نَمْ . فَلَمَّا كَانَ آخِرُ اللَّيْلِ قَالَ سَلْمَانُ : قُمْ الْآنَ ، فَصَلِّ يَا جَمِيعًا فَقَالَ لَهُ سَلْمَانُ : إِنَّ لِرَبِّكَ عَلَيْكَ حَقًّا وَإِنَّ لِنَفْسِكَ عَلَيْكَ حَقًّا ، وَلَا هَلِكَ عَلَيْكَ حَقًّا ، فَأَعْطِ كُلَّ ذِي حَقٍّ حَقَّهُ ، فَاتَى النَّبِيُّ ﷺ فَذَكَرَ ذَلِكَ لَهُ فَقَالَ النَّبِيُّ ﷺ : « صَدَقَ سَلْمَانُ » رواه البخاري .

149. Abuu Juxayfah Wahab ibn Cabdullaah (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Nebigaa (S.C.W.) wallaaleeyey Salmaan iyo Abuu Dardaa, (A.K.R.) Mar baa waxaa dhacday inuu Salmaan soo aaday si uu booqdo abuu Dardaa (A.K.R.) , wuxuu arkay xaaskiisiiyoo dhaaraan qabta (dhar xun) Wuxuu weydiyey waxa ku dhacay? Waxay tiri: walaalkaa abuu Dardaa xaal adduunyo dan kama laha (iyo dumarba taasooy ula jeeday inuu mar walba salaad ku howlan yahay). Markiiba Abuu Dardaa (A.K.R.) baa yimid oo u sameeyey xoogaa cunto ah Salmaan (A.K.R.) kana codsaday inuu cunaa isagoo oo ku yiri: Kaalama qaybgalayo waayo waa aan soomanahay. Salmaan (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan cunayaa oo keliya, haddii aad ila cunaysid. . Markaasuu Abuu Dardaaa (A.K.R.) la cunay.

Habeenkii buu abuu Dardaa (A.K.R.) salaatu leyl u kacay. Salmaan baa ka codsady inuu seexdo saa waa uu seexday . Muddo kaddib buu misna u kacay abuu Dardaa salaatu leyl, isla sidii buu uga codsaday inuu seexdo.. Markii gelin dembeedkii habeenka la gaarey buu Salmaan (A.K.R.) yiri: Haatan kac waa waqtigeediiye, oo wada tukadeen. Dabadeedna Salmaan (A.K.R.) wuxuu yiri: Shaki ma leh Rabbigaa xaq buu kugu leeyahay ; naftaaduna xaq-bay kugu leedahay ; xaaskaaguna xaq bay kugu leedahay. ee mid walbaa xaqa uu leeyahay sii . Labadoodii baa waxay u tageen Nabigii (S.C.W.) oo sidii u sheegeen. Nabigu (S.C.W.) Wuxuu yiri : Wuxuu Salmaan leeyahay waa sax " .

(Bukhaari iyo Muslim)

١٥. - وعن أبي محمد عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما قال : أخبر النبي ﷺ أني أقول : وَاللَّهِ لأصومَنَّ النَّهَارَ ، وَلَأَقُومَنَّ اللَّيْلَ مَا عِشْتُ . فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « أَنْتَ الَّذِي تَقُولُ ذَلِكَ » ؟ فَقُلْتُ لَهُ : قَدْ قُلْتُهُ بِأَبِي أَنْتَ وَأُمِّي يَا رَسُولَ اللَّهِ . قَالَ : « فَإِنَّكَ لَا تَسْتَطِيعُ ذَلِكَ فَصُمْ وَأَفِطِرْ ، وَنَمْ وَقُمْ ، وَصُمْ مِنَ الشَّهْرِ ثَلَاثَةَ أَيَّامٍ فَإِنَّ الْحَسَنَةَ بِعَشْرِ أَمْثَالِهَا وَذَلِكَ مِثْلُ صِيَامِ الدَّهْرِ » قُلْتُ : فَإِنِّي أُطِيقُ أَفْضَلَ مِنْ ذَلِكَ قَالَ : « فَصُمْ يَوْمًا وَأَفِطِرْ يَوْمَيْنِ » قُلْتُ : فَإِنِّي أُطِيقُ أَفْضَلَ مِنْ ذَلِكَ قَالَ : « فَصُمْ يَوْمًا وَأَفِطِرْ يَوْمًا فَذَلِكَ صِيَامُ دَاوُدَ ﷺ ، وَهُوَ أَعْدَلُ الصِّيَامِ » .

وفي رواية : « هو أفضل الصيام » فقالت : فإنني أطيع أفضل من ذلك . فقال رسول الله ﷺ : « لا أفضل من ذلك » ولأن أكون قبلت الثلاثة الأيام التي قال رسول الله ﷺ ، أحب إلي من أهلي ومالي .

وفي رواية : « ألم أخبر أنك تصوم النهار وتقوم الليل » ؟ قلت : بلى يا رسول الله قال : « فلا تفعل : صم وأفطر ، ونم وقم فإن لجسدك عليك حقا ، وإن لعينيك عليك حقا ، وإن لزورك عليك حقا ، وإن لحسبك أن تصوم في كل شهر ثلاثة أيام ، فإن لك بكل حسنة عشر أمثالها ، فإن ذلك صيام الدهر » فشددت فشددت علي ، قلت : يا رسول الله إنني أجد قوة قال : « صم صيام نبي الله داود ولا تزدد عليه » قلت : وما كان صيام داود ؟ قال :

« نِصْفَ الدَّهْرِ » فَكَانَ عَبْدُ اللَّهِ يَقُولُ بَعْدَمَا كَبِرَ : يَا لَيْتَنِي قَبِلْتُ رُخْصَةَ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ .

وفي رواية : « أَلَمْ أُخْبِرْ أَنَّكَ تَصُومُ الدَّهْرَ ، وَتَقْرَأُ الْقُرْآنَ كُلَّ لَيْلَةٍ ؟ » فقلت : بَلَى يَا رَسُولَ اللَّهِ ، وَلَمْ أُرِدْ بِذَلِكَ إِلَّا الْخَيْرَ قَالَ : « فَصُمْ صَوْمَ نَبِيِّ اللَّهِ دَاوُدَ ، فَإِنَّهُ كَانَ أَعْبَدَ النَّاسِ ، وَاقْرَأِ الْقُرْآنَ فِي كُلِّ شَهْرٍ » قلت : يَا نَبِيَّ اللَّهِ إِنِّي أُطِيقُ أَفْضَلَ مِنْ ذَلِكَ ؟ قَالَ : « فَاقْرَأْهُ فِي كُلِّ عَشْرِينَ » قلت : يَا نَبِيَّ اللَّهِ إِنِّي أُطِيقُ أَفْضَلَ مِنْ ذَلِكَ ؟ قَالَ : « فَاقْرَأْهُ فِي كُلِّ عَشْرٍ » قلت : يَا نَبِيَّ اللَّهِ إِنِّي أُطِيقُ أَفْضَلَ مِنْ ذَلِكَ ؟ قَالَ : « فَاقْرَأْهُ فِي كُلِّ سَبْعٍ وَلَا تَزِدْ عَلَى ذَلِكَ » فَشَدَّدْتُ فَشَدَّدَ عَلَيَّ وَقَالَ لِي النَّبِيُّ ﷺ : « إِنَّكَ لَا تَدْرِي لَعَلَّكَ يَطُولُ بِكَ عُمْرٌ » قَالَ : فَصِرْتُ إِلَى الَّذِي قَالَ لِي النَّبِيُّ ﷺ . فَلَمَّا كَبِرْتُ وَوَدِدْتُ أَنِّي كُنْتُ قَبِلْتُ رُخْصَةَ نَبِيِّ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ .

وفي رواية : « وَإِنَّ لِي وَلَدَكَ عَلَيْكَ حَقًّا » .

وفي رواية : « لَا صَامَ مَنْ صَامَ الْأَبَدَ » . ثلاثاً .

وفي رواية : « أَحَبُّ الصِّيَامِ إِلَى اللَّهِ تَعَالَى صِيَامُ دَاوُدَ ، وَأَحَبُّ الصَّلَاةِ إِلَى اللَّهِ تَعَالَى صَلَاةُ دَاوُدَ : كَانَ يَنَامُ نِصْفَ اللَّيْلِ ، وَيَقُومُ ثَلَاثَةً ، وَيَنَامُ سُدُسَهُ ، وَكَانَ يَصُومُ يَوْمًا وَيَفْطُرُ يَوْمًا ، وَلَا يَفِرُّ إِذَا لَاقَى » .

وفي رواية : أَنكَحَنِي أَبِي امْرَأَةً ذَاتَ حَسَبٍ وَكَانَ يَتَعَاهَدُ كِتْمَهُ - أَي : امْرَأَةً وَوَلَدِهِ - فَيَسْأَلُهَا عَنْ بَعْلِهَا . فَتَقُولُ لَهُ : نَعَمْ الرَّجُلُ مِنْ رَجُلٍ لَمْ يَطَأْ لَنَا فِرَاشًا وَلَمْ يُفْتَسْ لَنَا كَنَفًا مُنْذُ أَتَيْنَاهُ . فَلَمَّا طَالَ ذَلِكَ عَلَيْهِ ذَكَرَ لِلنَّبِيِّ ﷺ فَقَالَ : « أَلْقِنِي بِهِ » فَلَقِيْتُهُ بَعْدُ فَقَالَ : « كَيْفَ تَصُومُ ؟ » قُلْتُ : كُلَّ يَوْمٍ ، قَالَ : « وَكَيْفَ تَحْتِمُ ؟ » قُلْتُ : كُلَّ لَيْلَةٍ ، وَذَكَرَ نَحْوَمَا سَبَقَ ، وَكَانَ يَقْرَأُ عَلَى بَعْضِ أَهْلِهِ السَّبْعَ الَّذِي يَقْرؤُهُ يَعْزِضُهُ مِنَ النَّهَارِ لِيَكُونَ أَحْفَ عَلَيْهِ بِاللَّيْلِ وَإِذَا أَرَادَ أَنْ يَتَقَوَّى أَفْطَرَ أَيَّامًا وَأَحْصَى وَصَامَ مِثْلَهُنَّ كَرَاهِيَةً أَنْ يَتْرَكَ شَيْئًا فَارَقَ عَلَيْهِ النَّبِيُّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ .

كل هذه الروايات صحيحة ، مُعظمها في الصحيحين ، وقليل منها في أحدهما .

150. Abuu Muxammad Cabdullaah ibn Camar ibn Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaa loo sheegay nabiga (S.C.W.) inaan ku dhaartay inaan wadayo soon maalintii oo dhan oo tukado salaado sunno ah habeenkii oo dhan inta aan noolahay . Nabigu (S.C.W) wuxuu i weydiiyey: " Ma adigaa sidaas yiri ? Waxaan ku jawaabay : Rasuul Allow, aabahay iyo hooyaday baan kugu furane waan iri si-

daa. Wuxuu yiri nabigu (S.C.W.) : Ma awoodi kartid inaad ku socoto sidaas. Waa soomi kartaa hayeeshee waa inaad marna afurtaa seexo oo u kac (habeenii qayb ka mida haddi aad doonto salaatu leyl). Soon seddex maalmood bil walba qiimaha halkii samaanba waa toban laab, sidaasna waxay la mid noqon bishii oo la wada soomay, taasina waa sida adigoo weligaa sooman. Waxaan iri: Intaas ka badan baan awoodaa. Nabigu (S.C.W.) Wuxuu yiri : Marka maalin soon laba maalmoodna afur. Waxaan iri: Ka badan baan awoodaa. Wuxuu yiri: ' Waa hagaag, haddaba maalinna soon maalinna afur.' Sidaasi waa soonkii nabi Daawuud oo soon dhexdhexaad ah werin kale baa leh waa kan ugu fiican soon. Waxaan iri: Ka badan baan awoodaa.' Nabigu (S.C.W.) Wuxuu yiri : Wax taa ka fiican ma jiro. Markii uu Cabdullaah duqoobay waxaa ii habboonaa buu yiri inaan maalintii yeelo taladii nabiga (S.C.W.) oo aheyd inaan saddex maalmood ka soomo bishii. Taa baana uga qiimo badnaan laheyd oo uu ka jeclaan lahaa maalka iyo carruurtiisa .

Werin kalena waxay leedahay: Nabigaa (S.C.W) wuxuu yiri: Sida la sheegay maxaa ka jira inaad soonto maalin kasta , tukatana salaado sunno ah habeenkii oo dhan? Waan qirtay oo waxaan iri: Rasuul Alloow arrintaa waa jirtaa. Wuxuu yiri: " Ha yeelin sidaa. Soon oo afur, seexo una kac salaad. Maxaa yeelay jirkaagu xaq buu kugu leeyahay, oo ishaadu xaq bay kugu leedahay, oo xaaskaagu xaq bay kugu leedahay, oo martidaadu xaq bay kugu leedahay. waxaana kugu filan inaad bil walba seddex beri ka soontid , maxaa yeelay samaan kasta ajarkeedu waa toban laab qiimo ahaan. Sidaa waxay le'eg tahay bil soonkeed, taasina waxay la mid tahay sannad dhan soomid. Cabdullaah wuxuu yiri: Marka anaa arrinta adkeeyey markaasaa la igu adkeeyey. Waxaan ku iri Rasuulkii Alle (S.C.W): Waxaan dareemayaa xoog iyo adadkaan aan ku soomi karo intaas in ka badan. Wuxuu yiri: Marka soon soonkii Daawuud, nebigii Alle, waxna haku darin.' Waxaan weydiiyey: Sidee ahaa soonkii nabi Daawuud? Wuxuu yiri: Sannad barkiisuu ahaa) - soon maalin dhaaf ah. Markii uu gaboobey Cabdullaah wuxuu oran jirey: Alla bal maan yeelo sidii uu Nebigu (S.C.W.) igula taliyey (oo aheyd inaan dhexdhexaad ahaado soonka iyo salaadahaba).

Werin kalena waxay aheyd : Maxaa ka jira waxa la ii sheegay inaad soonto maalin kasta aad akhridana Qur'aanka oo dhammi habeen waliba? Waxaan iri : Waa run Rasuulkii Alloow (S.C.W.) waxaan taa ula jeedaa inaan khayr falo. Wuxuu yiri: Marka waxaad soontaa soonkii Daawuud, nabigii Alle. Maxaa yeelay isagaa dadka u cibaado badnaa. oo dhammee akhrinta Qur'aanka bishiiba mar .Waxaan iri: Nebi Alloow intaas ka badan baan awoodaa. Wuxuu yiri: Marka dhammee akhrintiisa mar labaatankii beriba. Waxaan iri Nabi Alloow intaas ka badan baan awoodaa. Wuxuu yiri : Haddaba dhammee akhrintiisa mar tobankii beriba.' Waxaan iri: Nabi Allow waxaan awoodaa intaas ka badan. Wuxuu yiri: ' Waa hagaag' , had-daba dhammee akhrintiisa todobaadkiiba mar. oo ha dhammeyn akhrintiisa waqtigaa ka hor.' Marka anaa arrinta isku adkeeyey markaasaa la igu adkeeyey. Nebigu (S.C.W.) wuxuu igu yiri: "Ma ogid waa intaasoo aad cimri dheeraataa'. Sidii bay noqotay uu nabigu (S.C.W.) sheegay: in badan baan noolaa. Markii aan gaboobey baan garwaaqsday inay ii wanaagsaneyd inaan yeelo taladii uu igu-la taliyey Nebiga (S.C.W.).

Werin kale baa waxay aheyd: Carruurtaadana xaqbay kugu leedahay.

Werin kale baa iyana waxay sheegeysaa : Ninkii weligi soomnaada soonba uma jiro (oo lagama aqbalayo). wuxuuna ku celceliyey hadalkaa seddex jeer.'

Werin kalena waxay aheyd : Alle kor ahaaye soon wuxuu ugu jecel yahay soonkii nabi Daawuud, salaadna wuxuu ugu jecel yahay salaaddii nabi Daawuud. Wuxuu nasan jiray qaybta hore ee habeenka, markaa kaddib kolkii saq dhexe la gaaro buu salaatulay (Tahajjud) tukan jiray seddex meelood meel habeenka (laga soo billaabo lix saac habeennimo illaa toban saac habeennimo), dabadeedna wuu seexan jiray lixmeeloodka meesha hartay oo dhan (labada saac ee ka hartay waaberiga). Sidoo kale waxaa caado u aheyd inuu u soomo maalin dhaaf.Weligina isuma jilcin (usuma dhiibin ama dhabar ma jeedin) markii ay la soo gudboonaato inuu la kulmo cadow (gaalo).

Werin kale waxay iyaduna ahayd oo laga soo xigtay Cabdullaah ibn Camar ibn al-Caas: inuu Aabbihi u guuriyey gabar qoys wanaagsan ka dhalatay, iyo in aabbihi ay caado u aheyd inuu ka waraysto ninkeeda (Cabdullaah ibn Camar ibn al-Caas) . Waxay oran jidhay waa nin fiican laakiinse sidii aan isu guursannay gogolna igulama seexan, ma uu feedinna tafteeda . Markii ay xaalka muddo taagneyd oo daba dheeraatay buu Cabdullaah Aabbihi la socodsiiyey arrinkaa Nebiga (S.C.W.) markaa buu Nabigu wuxuu yiri u sheeg wiilkaaga Cabdullaah inuu ii yimaado. Markii aan u

imid nabiga (S.C.W.). buu wuxuu i weydiyey sidee u soontaa?
Waxaan iri: Waxaan soomaa maalin walba . Wuxuu haddana i wey-
diiyey inta ay igu qaadato dhammeynta akhrinta Qur'aanka? Wa-
xaan ku jawaabay inaan habeen walba dhammeeyo. Dabadeedna
wuxuu xusay xadiisyadii hore.

Markuu Cabdullaah ibn Camar gaboobay wuxuu yeeli jiray inuu u
qaybiyo toddobada qaybood ee Qur'aanka qaar ka mida reerkiisa, si
ay howsha uga fududaato habeenkii, sidoo kale markuu doonayo in
looga gargaaro soonkiisa wuxuu yeeli jiri inuu maalmaha qaar
wada afuro , intoo kalena ka soomo. Wuxuu nacayey inuu joojiya
xaalkii nabigu kaga tagay (S.C.W.).

Imaam Nawawi wuxuu leeyehay axaadiistaan aan soo marnay oo
dhan waa wada saxiix, badankoodna Bukhaari iyo Muslim baa dhi-
gaya .

١٥١- وعن أبي رُبَيْعٍ حَنْظَلَةَ بْنِ الرَّبِيعِ الْأَسَيْدِيِّ الْكَاتِبِ أَحَدِ كِتَابِ
رَسُولِ اللَّهِ ﷺ قَالَ : لَقِينِي أَبُو بَكْرٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ فَقَالَ : كَيْفَ أَنْتَ يَا حَنْظَلَةُ ؟
قُلْتُ : نَافِقَ حَنْظَلَةَ ! قَالَ : سُبْحَانَ اللَّهِ مَا تَقُولُ ؟! قُلْتُ : نَكُونُ عِنْدَ
رَسُولِ اللَّهِ ﷺ يُذَكِّرُنَا بِالْجَنَّةِ وَالنَّارِ كَأَنَّا رَأَيْ عَيْنٍ فَإِذَا خَرَجْنَا مِنْ عِنْدِ
رَسُولِ اللَّهِ ﷺ عَافَسْنَا الْأَزْوَاجَ وَالْأَوْلَادَ وَالضَّيْعَاتِ نَسِينَا كَثِيرًا ، قَالَ أَبُو بَكْرٍ رَضِيَ
اللَّهُ عَنْهُ : فَوَاللَّهِ إِنَّا لَنَلْقَى مِثْلَ هَذَا ، فَانْطَلَقْتُ أَنَا وَأَبُو بَكْرٍ حَتَّى دَخَلْنَا عَلَى
رَسُولِ اللَّهِ ﷺ . فَقُلْتُ : نَافِقَ حَنْظَلَةَ يَا رَسُولَ اللَّهِ ! فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « وَمَا
ذَاكَ » ؟ قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ نَكُونُ عِنْدَكَ تُذَكِّرُنَا بِالنَّارِ وَالْجَنَّةِ كَأَنَّا رَأَيْ الْعَيْنِ ،
فَإِذَا خَرَجْنَا مِنْ عِنْدِكَ عَافَسْنَا الْأَزْوَاجَ وَالْأَوْلَادَ وَالضَّيْعَاتِ نَسِينَا كَثِيرًا . فَقَالَ
رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ إِنْ لَوْ تَدُومُونَ عَلَيَّ مَا تَكُونُونَ عِنْدِي وَفِي
الذِّكْرِ لَصَافِحَتْكُمْ الْمَلَائِكَةُ عَلَيَّ فُرُشِكُمْ وَفِي طُرُقِكُمْ ، لَكِنْ يَا حَنْظَلَةُ سَاعَةٌ
وَسَاعَةٌ (١) » ثَلَاثَ مَرَّاتٍ ، رَوَاهُ مُسْلِمٌ .

قولُهُ « رَبِيعِي » بِكسر الراء . وَ « الْأَسَيْدِيِّ » بِضم الهمزة وفتح السين وبعدها
ياء مشددة مكسورة . وقوله : « عَافَسْنَا » هو بِالعينِ وَالسينِ المهملتين أي :
عالجنا ولاعبنا . وَ « الضَّيْعَاتُ » : المعاييش .

151. Abii Ribci Xandalah ibn Rabiic al-Usaydi, oo ka mid ahaa qo-raayaashii iyo xoghayntii nabiga (S.C.W.) baa wuxuu sheegay in ay Abuu Bakar mar wada kulmeen Markaas buu Abuu Bakar ku yiri : Sidee tahay, Xandalah ? Waxaan iri (aniga Xandalah ah) : Abuubakarow Xandala waa munaafaqoobey. Wuxuu yiri Abuu Bakar: subxaanallaah; maxaad tiri Xandalah? Xandalah wuxuu yiri (isagoo sharxaya sababta uu u munaafaqoobay) : Abuu Bakarow markii aan Nebiga (S.C.W.) la joogno oo uu naarta iyo Jannada nooga sheekeeyo, waxaan noqonnaa sidii iyagoo noo muuqda., markii aan Nebiga (S.C.W.) ka ag tagnana oo aan ku mashquulno xaasaskayaga, carruurta, dhulalka, iyo beeraha iyo danaha adduun , markaana waan hilmaamnaa in badan oo ah wixii uu rasuulka innagu waaninayey . Abuu Bakar (A.K.R.) wxuu yiri: Alle baan ku dhaartay, annagana sidaasoo kalaa na haysata. Markaa bay labaduba isku raaceen oo u galeen Nebiga (S.C.W). Xandalah wuxuu yiri: Nebi Alloow Xandalah waa munaafaqoobey. Nebigu (S.C.W.) wuxuu weydiiyey waxa uu ula jeedo. Waxaan iri: Nabi Alloow markii aan kula joogno oo aad Jannada iyo naarta ka sheekaynaysid , waxaan noqonnaa sidii aan arkeyno jannadii iyo naartii oo ay inoo muuqdaan, isla markii aan agtaada ka tagnana waxaan ku mashquulnaa xaasaskayaga, carruurta , dhulalka, beeraha, iyo danahayaga adduun, dabadeedna waa aan hilmaamnaa in badan oo waanooyinkaaga ah. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Alle baan ku dhaaran oo ah kay naftaydu gacantiisu ku jidho, haddaad mar walba ahaan laheydeen sida aad tihiin marka aad ila joogtaan, oo aad xuseysaan Alle, malaa'ig baa soo degi laheyd si ay idiin gacan qaaddo markii aad joogtaan sariirihiinna iyo waddooyinkaba. Laakiinse Xandalooow (xaaladaha uu qofku ku sugnaan iimaanka sare oo sida aad noqotaan ah markii aad ila joogtaan) waa wax dhaca marmar. Wuxuu ku celceliyey kelmaddaas seddex jeer "

(Muslim)

١٥٢ - وعن ابن عباس رضي الله عنهما قال : بينما النبي ﷺ يخطب إذا هو برجل قائم فسأل عنه فقالوا : أبو إسرائيل نذر أن يقوم في الشمس ولا يقعد ، ولا يستظل ولا يتكلم ، ويصوم ، فقال النبي ﷺ : « مرؤه فليتكلم وليستظل وليقعد وليتم صومه » رواه البخاري .

152. Ibn Cabbaas (A.K.R.) Wuxuu yiri: Mar nebigoo (S.C.W.) noo khudbeenaya baa wuxuu arkay nin taagan (kuwii fadhiyey ee kulankaa soo xaadiray dhexdood). Dadkii buu ka wareystay. Waxaa loo sheegay in la yiraahdo Abuu Israa'iil. Wuxuuna nidrey oo uu ku dhaartay (baa la yiri) inuu taagnaanayo qorraxda oo uusanba fariisan doonin , oo harsan doonin oo uusan cidnana la hadli doonin, uuna soomo. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Fara inuu hadlo,

harsado, oo fariisto, laakiin ha taam yeelo oo ha dhammeystiro
soonkiisa.' (Bukhaari)

١٥ - باب في المحافظة على الأعمال

CUTUBKA 15

WAA INAAD DAA'INTAA OO KU SUGNAATAA FALASHA- DA ACMAASHA SAN

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى: ﴿ أَلَمْ يَأْنِ لِلَّذِينَ آمَنُوا أَنْ تَخْشَعَ قُلُوبُهُمْ لِذِكْرِ اللَّهِ وَمَا نَزَلَ مِنَ الْحَقِّ وَلَا يَكُونُوا كَالَّذِينَ أُوتُوا الْكِتَابَ مِنْ قَبْلُ فَطَالَ عَلَيْهِمُ الْأَمَدُ فَقَسَتْ قُلُوبُهُمْ ﴾ [الحديد : ١٦]

55. " Ma waysan u soo dhawaan quluubta mu'miniintu inay u khu-shuucdo waanada Alle iyo waxa soo degey oo xaqa ah, iyo inaysan la mid noqon kuwii awel kitaabka la siiyey oo markii waqtigii ku dheeraaday ay quluubtoodii qallashay " Suuradda Al-Xadiid: Aay-adda 16.

Wuxuu kaloo Alle yiri kor ahaaye

وقال تعالى: ﴿ وَقَفَّيْنَا بِعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ وَآتَيْنَاهُ الْإِنجِيلَ وَجَعَلْنَا فِي قُلُوبِ الَّذِينَ اتَّبَعُوهُ رَأْفَةً وَرَحْمَةً وَرَهَابَانِيَّةً ابْتَدَعُوهَا مَا كَتَبْنَاهَا عَلَيْهِمْ إِلَّا ابْتِغَاءَ رِضْوَانِ اللَّهِ فَمَا رَعَوْهَا حَقَّ رِعَايَتِهَا ﴾ [الحديد : ٢٧]

56. " Waxaan ka daba geyney Ciisihii ina Maryam ahaa, oo aan Injiil siinnay , kuwii isaga raacayna waxaan quluubtooda yeellay turid iyo naxariis. Laakiinse suufinnimo bay unkadeen oo aannaan ku waajibin ay ula jeedeen doonidda Raallinnimada Alle. ha yee-shee aysan ilaalin dawgii ay lahayd" Suuradda : Al-Xadiid : -
Aay adda 27.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى: ﴿ وَلَا تَكُونُوا كَالَّذِي نَفَضَتْ غَزْلَهَا مِنْ بَعْدِ قُوَّةٍ أَنْكَاثًا ﴾ [النحل : ٩٢]

57. " Ha noqonnina sidii tii xariggeeda oo xoog lahaa misna nuda-
ha u kidfaysey" Suuradda An-Naxal: aayadda 92.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى: ﴿وَأَعْبُدْ رَبَّكَ حَتَّىٰ يَأْتِيَكَ الْيَقِينُ﴾ [الحجر : ٩٩] .

58. " Rabbigaa Caabud jeer ay yaqiintu (geeridu) ku timaaddo"
Suuradda Al-Xijr: Aayadda 99.

وأما الأحاديث فمنها :

حديث عائشة : (وَكَانَ أَحَبُّ الدِّينِ إِلَيْهِ مَا دَاوَمَ صَاحِبُهُ عَلَيْهِ) وَقَدْ سَبَقَ فِي
الْبَابِ قَبْلَهُ .

Xadiisyadana waxaa ka mid ah xadiiskii Caa'isha oo aan ciwaan-
kii kan ka horeeyey ku soo marnay, ahaana Alle wuxuu jecel ya-
hay daa'imadda iyo daryeelidda gudashada awaamirta diinta (Is-
laamka).

١٥٣ - وعن عمر بن الخطاب رَضِيَ اللهُ عَنْهُ قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللهِ ﷺ : « مَنْ نَامَ
عَنْ حِزْبِهِ مِنَ اللَّيْلِ أَوْ عَنْ شَيْءٍ مِنْهُ فَقَرَأَهُ مَا بَيْنَ صَلَاةِ الْفَجْرِ وَصَلَاةِ الظُّهْرِ كُتِبَ لَهُ
كَأَنَّمَا قَرَأَهُ مِنَ اللَّيْلِ » رواه مسلم .

153. Cumar bin Khaddaab (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.)
Wuxuu yiri: " Haddii uu qofku illoobo inuu akhriyo xisbigiisii (yacni inuu tukado salaadahiisa iskiis ah ee isagu doonay aan lagu waajibin) ama qaar ka mid ah, oo uu habeenkii ka seexo, wuxuu heli isla ajarkii haddii uu akhriyo (tukado) waqti kasta oo ka mida ah inta u dhaxeysa salaadda Subax iyo salaadda Duhur maalinta xigta.'
(Muslim)

١٥٤ - وعن عبد الله بن عمرو بن العاص رَضِيَ اللهُ عَنْهُمَا قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللهِ ﷺ : « يَا عَبْدَ اللهِ لَا تَكُنْ مِثْلَ فُلَانٍ كَانَ يَقُومُ اللَّيْلَ فَتَرَكَ قِيَامَ اللَّيْلِ » متفقٌ عليه .

154. Cabdullaah bin Camar bin Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu igu yiri: " Cabdullaahiyoow ha noqon sida hebel, kaa oo tukan jirey salaatu leyl, mar kaasuu iska daayay muddo kaddib"
(Bukhaari iyo Muslim)

١٥٥ - وعن عائشة رَضِيَ اللهُ عنها قالت : كان رسول الله ﷺ إِذَا فَاتَتْهُ الصَّلَاةُ مِنَ اللَّيْلِ مِنْ وَجَعٍ أَوْ غَيْرِهِ صَلَّى مِنَ النَّهَارِ ثِنْتَيْ عَشْرَةَ رَكْعَةً ، رواه مسلم .

155. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Markii uu nebiga (S.C.W.) uu tukan waayo habeenkii salaatul leyl xanuun darti ama sabab kale , wuxuu tukan jiray labo iyo toban rakcadoo maalintii" .
(Muslim)

Fiiro gaar ah: Xadiisyadani waxay muujinayaan naxariista nabiga (S.C.W.) isagoo baray kuna hanuuniyey ummaddiisa inay camal suubban fashaan si deggan oo caqli fiyow iyo qalbi xaadir ah leh, iyo inay Alle caabudaan iyagoon xad gudbin , jirkooda dhibaato u geysan, ama aan danahooda adduun iska xirxiran oo ka tegin , sidaana ay ku raadiyaan raallinamadiisa. Waana si ka duwan oo ka baxsan kuwaa khilaafaya hanuunka iyo tusaalaha nabiga (S.C.W.) oo naftooda gelinaya dhibaato iyo ciriiri ay xammili karin iyagoo cibaadeysi ka wada, kaddibna daalaya oo ka tagaya cibaadadii, sidaana isku dhaafinaya ajarkii iyo abaal marintii ay heli lahaayeen. Dhaqanka rasuulka iyo aayadaha Qur'aanka intuba waxay ina baryaan inaan u tukanno sida toosan ee wanaagsan, ahaannana kuwa daa'ima oo ku toosa oo aan ka leexan jidka xaqa ah.

١٦ - باب في الأمر بالمحافظة على السنة و آدابها

C U T U B K A 16

DHOWRISTA SUNNADA IYO HABKEEDA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى : ﴿ وَمَا آتَاكُمُ الرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَاكُمْ عَنْهُ فَانْتَهُوا ﴾
[الحشر : ٧]

59. " Wixii uu Rasuulku idin siiyo ama faro qaata , wixii uu idinka reebana ka hara " Suuradda Al-Xashar: Aayadda 7.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَمَا يَنْطِقُ عَنِ الْهَوَىٰ . إِنْ هُوَ إِلَّا وَحْيٌ يُوحَىٰ ﴾
[النجم : ٣ - ٤]

60. " Hawadiisa ka uu hadli maayo ee waa waxyi loo waxyoodey"
Suuradda An-Najam: Aayadaha 3-4.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ
ذُنُوبَكُمْ ﴾ [آل عمران : ٣١]

61. " Ku dheh (Muxammadow S.C.W., dadka) haddii aad Alle je-
ceshihiin i soo raaca: Alle wuu idiin jeclaan oo idiin dembi dhaa-
fiye" . Suuradda Aali-Cimraan: aayadda 13.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِمَنْ كَانَ يَرْجُو اللَّهَ
وَالْيَوْمَ الْآخِرَ ﴾ [الأحزاب : ٢١]

62." Rasuulka Alle ku dayasho wanaagsan baa idiinku sugnaa-
tay, waa qofkii ay ku weyn yihiin Alle iyo maalinta Aakhiro" .
Suuradda Al-Axsaab: Aayadda 21.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا
فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا ^(١) مِمَّا قَضَيْتَ وَيُسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴾ [النساء : ٦٥]

63. "Waa igu Rabbigaaye rumayn mayaana jeer ay kuugu yimaa-
daan xugminta wixii ay isku qabtaan , dabadeedna wixii aad
go'aamiso ku qancaan oyan wax dhibsi iyo culeys ah iska dareemin,
hoggaansamidna u hoggaansamaan" Suuradda An-Nisaa: Aayadda
65.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ فَإِنْ تَنَازَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ إِنْ كُنْتُمْ تُؤْمِنُونَ
بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ﴾ [النساء : ٥٩]

64." Haddii aad wax isku qabataan; ula noqda Alle iyo Rasuulka(
yacni u bandhiga Qur'aanka iyo sunnada) . " Suuradda An-
Nisaa: Aayadda: 59.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ مَنْ يُطِعِ الرَّسُولَ فَقَدْ أَطَاعَ اللَّهَ ﴾ [النساء : ٨٠]

65. " Qofkii Rasuulka Adeecaa Alluu Addeecay " Suuradda An-Nisaa: Aayadda: 80.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَإِنَّكَ لَتَهْدِي إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ صِرَاطِ اللَّهِ ﴾
[الشورى : ٥٢ - ٥٣]

66." Waxaad wax ku hanuuninaysaa (Muxammadow S.C.w.) Jid toosan"
Suuradda Ash-Shuura: Aayadda 53.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ فَلْيَحْذَرِ الَّذِينَ يُخَالِفُونَ عَنْ أَمْرِهِ أَنْ تُصِيبَهُمْ فِتْنَةٌ أَوْ يُصِيبَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴾ [النور : ٦٣]

67. " Ha iska jireen kuwa amarkiisa khilaafaya inay fidmo , ama cadaab xanuun badani ku dhacdo" Suuradda An-Nuur: Aayadda 63.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى : ﴿ وَأَذْكُرَنَّ مَا يُتْلَى فِي بُيُوتِكُنَّ مِنْ آيَاتِ اللَّهِ وَالْحِكْمَةِ ﴾
[الأحزاب : ٣٤] والآيات في الباب كثيرة .

68." Jooga guryihiinna (dumarka muslimka ahow, oo waxaan dan weyn aheyn ha u bixina) oo ha u muujinnina quruxda iyo bilicdiinna (intii la banneeyey inaad u muujin kartaan maahee) oo ha ku dayinnana dumarka jaahilka ah ee jirkooda u muujiya (ragga gay-aankooda ah) Daa'imana dumarka muslimka ahow oogidda sa-laadda oo bixiya sakada adeecana oo maqla Alle iyo rasuulkiisa oo waxay idin fareen ku fartooma, waxay idinka reebeenna ka reebtooma , xusana oo barta waxa guryihiinna Aayado Alle iyo xigmad lagu akhriyayo " Suuradda Al-Axsaab: Aayadda 34.

١٥٦ - فالأول : عن أبي هريرة رَضِيَ اللهُ عنه عن النبي ﷺ قال : « دَعُونِي مَا تَرَكَتُمْ ، إِنَّمَا أَهْلَكَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ كَثْرَةَ سُؤَالِهِمْ وَاخْتِلَافُهُمْ عَلَى أَنْبِيَائِهِمْ ، فَإِذَا نَهَيْتُمْ عَنْ شَيْءٍ فَاجْتَنِبُوهُ وَإِذَا أَمَرْتُمْ بِأَمْرٍ فَاتُوا مِنْهُ مَا اسْتَطَعْتُمْ » متفقٌ عليه .

156. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Ha igu dhibina weydiimo la xiriira waxyaalo aan ka hadlin, maxaa yeelay ummadahii idinka horreeyey waxaa rogey su' aal badnidoodii (iyo weydiintoodii weydiimo badan aan loo baahneyn, bar faa'ido ahna aan lagu arag) iyo ku dhiirranaantoodii inay khilaa-faan nebiyadoodii. Sidaa awgeed wixii aan idinka reebo ka fogaa-da, Wixii aan idin farana fuliya intii karaankiin ah".

(Bukhaari iyo Muslim)

١٥٧ - الثاني : عن أبي نَجِيحِ الْعِرْبَاضِ بْنِ سَارِيَةَ رَضِيَ اللهُ عنه قال : وَعَظَنَا رَسُولُ اللهِ ﷺ مَوْعِظَةً بَلِيغَةً وَجَلَّتْ مِنْهَا الْقُلُوبُ وَذَرَفَتْ مِنْهَا الْعُيُونُ فَقُلْنَا : يَا رَسُولَ اللهِ كَانَتْهَا مَوْعِظَةٌ مُودَّعٌ فَأَوْصِنَا قَالَ : « أُوصِيكُمْ بِتَقْوَى اللهِ وَالسَّمْعِ وَالطَّاعَةِ وَإِنْ تَأَمَّرَ عَلَيْكُمْ عَبْدٌ حَبَشِيٌّ ، وَإِنَّهُ مَنْ يَعِشْ مِنْكُمْ فَسِيرَى اخْتِلَافًا كَثِيرًا ، فَعَلَيْكُمْ بِسُنَّتِي وَسُنَّةِ الْخُلَفَاءِ الرَّاشِدِينَ الْمَهْدِيِّينَ عَضُوا عَلَيْهَا بِالنَّوَاجِدِ ، وَإِيَّاكُمْ وَمُحَدَّثَاتِ الْأُمُورِ فَإِنَّ كُلَّ بَدْعَةٍ ضَلَالَةٌ » . رواه أبو داود ، والترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

« النَّوَاجِدُ » بالذال المعجمة : الأنيابُ وقيل الأضرأسُ .

157. Abuu Najiix Cirbaad bin Saariyah (A.K.R.) wuxuu yiri: " Ne-bigaa (S.C.W.) wuxuu na wacdiyey wacdi ilma naga keenay oo cabsi gelisay qalbiyadeenna. Waxaan ku niri waxaad mooddaa wac-digan inuu yahay dardaarankii u dambeeyey, ee inoo dardaaran wax badan oo wanaag iyo waano ah. Markaa buu wuxuu yiri: Wa-xaan idinkula dardaarmayaa cabsida Alle iyo (dhowrsita xilalka iyo waxyaalaha uu idinku waajibiyey iyo ka fogaanshaha wuxuu idinka reebay) iyo is maqal iyo is addeecid xitaa addoon haddii madax la idiinkaga dhigo. Tan kale qofkiinnii sii noolaadaa wu-xuu arki doonaa iskhilaaf tira badan ee waxaan idinku ogahay sun-nadayda iyo sunnada hoggaamiyeyaasha hanuunsan (Abuubakar, Cumar, Cusmaan iyo Cali) , goos dambeedyada ku qabsada, arri-maha gadaal ka imaadka ahna (bidcada ah diinta lagu kordhiyo ama laga naaquisiyo) iska jira , maxaa yeelay bidca kasta baadi bay salka ku heysaa oo kugu hoggaamin".

(Abuu Daawuud iyo Tirmidi oo yiri: waa xadiis xasan saxiix ah)

١٥٨ - الثَّالِثُ : عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَالَ : « كُلُّ أُمَّتِي يَدْخُلُونَ الْجَنَّةَ إِلَّا مَنْ أَبِي » . قِيلَ : وَمَنْ يَا أَبِي يَا رَسُولَ اللَّهِ ؟ قَالَ : « مَنْ أَطَاعَنِي دَخَلَ الْجَنَّةَ وَمَنْ عَصَانِي فَقَدْ أَبِي » رواه البخاري .

158. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Ummadeyda jannaday wada gelayasaa kuwii igu tacadiya maah ee oo diida jannada. Waxaa la weydiiyey: Rasuulkii Al-loow (S.C.W.) oo waa kuwee kuwaa ? Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: Qofkii i adeecaa jannaduu geli doonaa, qofkii caasi igu noqdaana waa qof taxaddi igu sameeyey (oo jannada ma gali doono) . (Bukhaari)

١٥٩ - الرابع : عن أبي مسلم وقيل أبي إياس سلمة بن عمرو بن الأكوع رضي الله عنه أن رجلاً أكل عند رسول الله ﷺ بِشِمَالِهِ فَقَالَ : « كُلُّ يَمِينِكَ » قَالَ : لَا أَسْتَطِيعُ . قَالَ : « لَا أَسْتَطَعْتُ » مَا مَنَعَهُ إِلَّا الْكِبْرُ فَمَا رَفَعَهَا إِلَى فِيهِ . رواه مسلم .

159. Abuu Muslim waxaa la oran jiray sidoo kale Abuu Ayaaz Salamah ibn Camar (A.K.R.) Wuxuu yiri: Ninbaa billaabay inuu wax ku cunaa gacantiisa bidix isagoo la jooga nebiga (S.C.W.). nabiganu wuxuu faray inuu gacantiisa midig wax ku cuno. Wuxuu yiri ninkii : Ma karo inaan yeelo sidaa. Waxay aheyd oo keliya kibirkiiisa waxaa u diiday inuu adeecaa amarrada nabiga (S.C.W.). Sidaa awgeed buu wuxuu nabigu ku yiri ' Ha awoodin' . Wixii markaa ka dambeeyey waxaa dhacday in ninkaasi uusan kor u soo qaadi karin gacantiisa oo uusan gaarsiin karin afkiisa". (Muslim)

١٦٠ - الخامس : عن أبي عبد الله النعمان بن بشير رضي الله عنهما قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « لَتَسَوْنَ صُفُوفَكُمْ أَوْ لِيَخَالِفَنَّ اللَّهُ بَيْنَ وُجُوهِكُمْ » متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : كان رسول الله ﷺ يُسَوِّي صُفُوفَنَا حَتَّى كَأَنَّمَا يُسَوِّي بِهَا الْقَدَاحَ حَتَّى إِذَا رَأَى أَنَا قَدْ عَقَلْنَا عَنْهُ ثُمَّ خَرَجَ يَوْمًا فَقَامَ حَتَّى كَادَ أَنْ يُكَبِّرَ فَرَأَى

رَجُلًا بَادِيًا صَدْرُهُ فَقَالَ : « عِبَادَ اللَّهِ لَتُسَوَّنَ صُفُوفُكُمْ أَوْ لَيُخَالِفَنَّ اللَّهُ بَيْنَ
وَجُوهِكُمْ » .

160. Nucmaan bin Bashiir (A.K.R.) wuxuu yiri: "Waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: Waa inaad toosisaan oo sintaan safafka (kolka salaadda) haddii aydun yeelinna Alle dhexdeenna colaad iyo khilaaf buu dhigayaa (macnaha taa waxay idinka dhex abuureysaa cadaawad iyo is khilaaf". (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kalena oo Muslim dhigayo waxay ahayd Nabigu (S.C.W.) safafkuu simi jirey sidii isagoo isku cabiray. Sidaa buuna yeeli jiray jeeruu arkay inaan garowsannay fahamnayna ahmiyadda iyo qii-maheeda. Maalin buu wuxuu yimid masjidka si uu inoo tujiyo, isagoo ku dhawaaqi raba takbiiradii ixraamka ee salaadda lagu galo buu wuxuu arkay nin laabtiisu soo baxsan tahay, markaa buu yiri isagoo arrintaa ka hadlaya: Addoomma Alloow, safafka sinta oo toosiya, haddii kale Alle wuxuu abuuri colaad iyo khilaaf dhexdiinna". (Muslim)

١٦١ - السادس : عن أبي موسى رضي الله عنه قال : احترق بيت بالمدينة على
أهله من الليل فلما حدث رسول الله ﷺ بشأنهم قال :

« إِنَّ هَذِهِ النَّارَ عَدُوٌّ لَكُمْ فَإِذَا نِمْتُمْ فَأَطْفِئُوهَا عَنْكُمْ » متفق عليه .

161. Abuu Muusaa (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Guri baa habeen Madiina gubtay, dadkii lahaana ku gubteen. Markii dhacdadaas loo sheegay Nebiga (S.C.W.) wuxuu yiri: " Dabku waa cadowgiinii ee markii aad seexanaysaan iska bakhtiiya".

(Bukhaari iyo Muslim)

١٦٢ - السابع : عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ مَثَلَ مَا بَعَثَنِي اللَّهُ بِهِ مِنَ
الْهُدَى وَالْعِلْمِ كَمَثَلِ غَيْثٍ أَصَابَ أَرْضًا فَكَانَتْ مِنْهَا طَائِفَةٌ طَيِّبَةٌ ؛ قَبِلَتِ الْمَاءَ
فَأَنْبَتِ الْكَلَاءَ وَالْعُشْبَ الْكَثِيرَ ، وَكَانَ مِنْهَا أَجَادِبُ أَمْسَكَتِ الْمَاءَ فَنَفَعَ اللَّهُ بِهَا
النَّاسَ فَشَرِبُوا مِنْهَا وَسَقَوْا وَزَرَعُوا ، وَأَصَابَ طَائِفَةٌ مِنْهَا أُخْرَى إِنَّمَا هِيَ قِيَعَانُ لَا
تُمْسِكُ مَاءً وَلَا تُنْبِتُ كَلَاءً . فَذَلِكَ مَثَلُ مَنْ فَقَهُ فِي دِينِ اللَّهِ وَنَفَعَهُ مَا بَعَثَنِي اللَّهُ بِهِ
فَعَلِمَ وَعَلِمَ وَمَثَلُ مَنْ لَمْ يَرْفَعْ بِذَلِكَ رَأْسًا وَلَمْ يَقْبَلْ هُدَى اللَّهِ الَّذِي أُرْسِلْتُ بِهِ »
متفق عليه .

« فَقَهُ » بضم القاف على المشهور وقيل بكسرها : أي صار فقيهاً .

162. Abuu Muusaa wuxuu kaloo yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Hanuunka iyo cilmiga Alle ii soo dhiibay (si aad ileys iyo iftiin uga heshaan oo jahliga idinku daayo) waxay la mid yihiin Roob ku da'ay dhul meel fiican tahay oo biyaha cabbeyso oo naq doog ah ka soo baxayaan; meelina adag tahay oo biyaha celinayso oo Alle dadka ku Anfacayo oo ay ka cabbayaan, beerahana ku wa-raabsanayaan. Biyaha roobkaas oo sidoo kale gaaray meel kale oo gabaahirig ah aan biyana celinayn baadna ka soo baxayn. sidaas waxaa la mataal ah ; qof diinta Alle fahmay oo intifaacsaday waxa Alle iigu soo dhiibay (dadka) iyo kuwa bartay oo qaaruun kale sii baray. tusaalaha dambena waa sida qofka aan u soo jeensan , baran-na xikmadda iyo sunnadeyda, aan sidoo kalena aqbalin hanuunka Alle iigu soo dhiibay.' (Bukhaari iyo Muslim)

١٦٣ - الثامن : عن جابر رَضِيَ اللهُ عَنْهُ قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللهِ ﷺ : « مَثَلِي وَمَثَلُكُمْ كَمَثَلِ رَجُلٍ أَوْقَدَ نَارًا فَجَعَلَ الْجَنَادِبُ وَالْفَرَاشُ يَقَعْنَ فِيهَا وَهُوَ يَذُبُّهُنَّ عَنْهَا وَأَنَا آخِذٌ بِحُجْرَتِكُمْ عَنِ النَّارِ وَأَنْتُمْ تَقْلِتُونَ مِنْ يَدَيَّ » رواه مسلم .

« الْجَنَادِبُ » : نَحْوُ الْجَرَادِ وَالْفَرَاشِ ، هَذَا هُوَ الْمَعْرُوفِ الَّذِي يَقَعُ فِي النَّارِ . وَ« الْحُجْرُ » جَمْعُ حُجْرَةٍ وَهِيَ مَعْقَدُ الْإِزَارِ وَالسَّرَاوِيلِ .

163. Jaabir (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Aniga iyo idinku waxaan la matal nahay nin inta dab shitay; ay markaas balanbaalistii iyo cayayaankii bilaabeen inay ku soo ordaan kuna soo daataan, isaguna ninkii dabka shitay ka celcelinayo. Anigu ninkaa baan la mid ahay waxaan isku dayayaa inaan guntiga idin qabto (si aan idiinka badbaadiyo) naar, idinkuna waad ka fakaneysaan gacanteyda " . (Muslim)

١٦٤ - التاسع : عنه أن رسول الله ﷺ أمر بلعق الأصابع والصحفة وقال : « إنكم لا تدرون في أيها البركة » رواه مسلم .

وفي رواية له : « إذا وقعت لُقْمَةٌ أَحَدِكُمْ فَلْيَأْخُذْهَا فَلْيَمِطْ مَا كَانَ بِهَا مِنْ أَدَى وَلْيَأْكُلْهَا وَلَا يَدْعُهَا لِلشَّيْطَانِ ، وَلَا يَمَسَّ يَدَهُ بِالْمَنْدِيلِ حَتَّى يَلْعَقَ أَصَابِعَهُ فَإِنَّهُ لَا يَدْرِي فِي أَيِّ طَعَامِهِ الْبَرَكَةُ » .

وفي رواية له : « إن الشَّيْطَانَ يَحْضُرُ أَحَدَكُمْ عِنْدَ كُلِّ شَيْءٍ مِنْ شَأْنِهِ حَتَّى يَحْضُرَهُ عِنْدَ طَعَامِهِ فَإِذَا سَقَطَتْ مِنْ أَحَدِكُمْ اللَّقْمَةُ فَلْيَمِطْ مَا كَانَ بِهَا مِنْ أَدَى فَلْيَأْكُلْهَا وَلَا يَدْعُهَا لِلشَّيْطَانِ » .

164. Jaabir (A.K.R.) wuxuu kaloo yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu amray muslimiinta in faraha la leefo, la nadiifiyana weelasha (marka raashinka laga cuno kaddib) wuxuuna yiri:" Ma garan kartaan qaybtee baa cunnadu barakadu ku jirtaa" . (Muslim)

Werin kalena waxay ahayd oo Muslim ku taal: " Haddii ay midkiin ka dhacdo waslad, waa inuu soo qaadaa , ka nadiifiyaa wixii gaaray oo boor iwm ah. oo markaas cunaa, oo waa inuusan uga tegin shaydaanka. Waa inuusanna qofku marin gacantiisa istiraashada is-agoos aan ka leefin (cuntada haraaga ku ah) farahiisa, maxaa yeelay ma oga qofku qaybtee baa cuntada barakeysan - macnaha ay barakadu ku jirtaa" .

Werin kale oo Muslim ku taal baa waxay leedahay: " in nabigu (S.C.W.) uu sheegay in sheydaanku mar iyo munaasabad kasta xaa-dir yahay xitaa markii aad wax cunaysid. Sidaa awgeed, haddii ay qofkiin ka dhacdo waslad (ama rudmad) waa inoo qaataa , ka nadiifiyaa boorka iwm., oo markaas cunaa uusan uga tegin shaydaanka.'.

١٦٥ - العاشر : عن ابن عباس رَضِيَ اللهُ عَنْهُمَا قَالَ : قَامَ فِينَا رَسُولُ اللهِ ﷺ بِمَوْعِظَةٍ فَقَالَ : « يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّكُمْ مَحْشُورُونَ إِلَى اللَّهِ تَعَالَى حُفَاةَ عُرَاةٍ غُرْلًا ، ﴿ كَمَا بَدَأْنَا أَوَّلَ خَلْقٍ نُعِيدُهُ وَعَدْنَا عَلَيْنا إِنَّا كُنَّا فَاعِلِينَ ﴾ [الأنبياء : ١٠٤] أَلَا وَإِنَّ أَوَّلَ الْخَلَائِقِ يُكْسَى يَوْمَ الْقِيَامَةِ إِبْرَاهِيمَ ﷺ ، أَلَا وَإِنَّهُ سَيُجَاءُ بِرِجَالٍ مِنْ أُمَّتِي فَيُؤْخَذُ بِهِمْ ذَاتَ الشَّمَالِ . فَأَقُولُ : يَا رَبِّ أَصْحَابِي فَيُقَالُ : إِنَّكَ لَا تَدْرِي مَا أَحَدْتُوا بَعْدَكَ فَأَقُولُ كَمَا قَالَ الْعَبْدُ الصَّالِحُ : ﴿ وَكُنْتُ عَلَيْهِمْ شَهِيدًا مَا دُمْتُ فِيهِمْ . فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِي كُنْتَ أَنْتَ الرَّقِيبَ عَلَيْهِمْ وَأَنْتَ عَلَى كُلِّ شَهِيدٍ ﴾ إِلَى قَوْلِهِ : ﴿ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴾ [المائدة : ١١٧] فَيُقَالُ لِي : إِنَّهُمْ لَمْ يَزَالُوا مُرْتَدِّينَ عَلَيَّ أَعْقَابِهِمْ مُنْذُ فَارَقْتَهُمْ « متفقٌ عليه .

« غُرْلًا » : أَيِ غَيْرِ مَخْتُونِينَ .

165. Ibn Cabbaas (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W.) mar naga dhex istaagey, si uu innogu khudbeeyo oo wuxuu yiri: " Dadoow waxaa la idin soo bixinayaa oo la idiin soo kulmin Alle weyne xaggiisa idinkoo cagacad oo qaawan oo buurya qab ah .Siduu yiriba sare ahaaye:

' Sidii aan u billownay oo ay ahaayeen abuurkoodii hore, sidaa baan ku soo bixineynaaa, waan ballan qaadnay , sidaa baynuna yeeli doonaa.' Suuradda .Al-Anbiyaa: Aayadda 103

Dadkana maalinta qiyaamaha Nebi Ibraahiim baa dhar loo hor siinayaa. Waxaana la keeni doonaa rag ummaddayda ah, waxaa la marinayaa xagga bidix, oo naarta u dhow. Waxaan oranayaa: Rabbi-yoow kuwani waa asxaabtaydii. Markaa baa waxaa laygu oran doonaa: Ma ogid dabadaa waxay la yimaadeen oo bidca ah, hal abuurreena. Markaasaan oranayaa sidii uu addoonkii suubbanaaba Ciise , wiilkii Maryam, yiri: " Intii aan dhexdooda joozey baan u war hayey, markii aad i oofsatayna Adaa Adigu ahaa kan ilaalina-yey, Adaana wax walba markhaati ka ah. Haddii aad cadaabaysana waa addoommadaadii, haddii aad u dhaafaysana Adaa Adigu ah awood badnaha xigmadda badan" Suuradda Al-Maa'ida: Aayadaha 117 -118.

Waxaa haddana la ii sheegi doonaa in tan iyo markii aan ka tagay (dhimashadeyda kaddib) inay ku jireen xaalad ah inay ka noqdaan diinta iyo waxyaalaha ay fareyso' . (Bukhaari iyo Muslim)

١٦٦ - الحادي عشر : عن أبي سعيد عبد الله بن مغلل رضي الله عنه قال : نهى رسول الله ﷺ عن الخذف وقال : « إنه لا يقتل الصيد ولا ينكأ العدو وإنه يفتق العين ويكسر السن » متفق عليه .

وفي رواية أن قريبا لابن مغلل خذف فنهاه وقال : إن رسول الله ﷺ نهى عن الخذف وقال : « إنها لا تصيد صيدا » ثم عاد ، فقال : أحذثك أن رسول الله ﷺ نهى عنه ثم عدت تخذف ! لا أكلمك أبداً .

166. Abuu Saciid Cabdullaah bin Muqaffal (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) Wuxuu reebay farganka, wuxuuna yiri: " Shiishka noocan ah kuuma dilo ugaar kaama ceshana cadowga, waxayse dhaawac gaarsiisaa indhaha, jebisaana ilig." (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kalena waxay ahayd: Nin ay qaraabo dhow yihiin Cabdullaah bin Muqaffal baa fargan qof ku tuuray. Markaa buu Cabdullaah bin Muqaffal ka reebay oo yiri: Nebigu (S.C.W.) farganka waa reebay wuxuuna yiri: Ugaar ma dilo. Ninkii ma uusan maqlin oo dan uma gelin hadalkii lagu yiri oo wuxuu halkii ka sii waday fargan tuurkii. Markaa buu Cabdullaah bin Muqaffal ku yiri: waxaan kuu sheegay inuu Nebigu (S.C.W.) reebay fargankan adiguna waad sii tuuraysaa, weligay kulama hadli doono mar kale.'

١٦٧ - وَعَنْ عَابِسِ بْنِ رَبِيعَةَ قَالَ : رَأَيْتُ عُمَرَ بْنَ الْخَطَّابِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ يُقْبَلُ الْحَجَرَ ، يَعْنِي الْأَسْوَدَ ، وَيَقُولُ : أَعْلَمُ أَنَّكَ حَجَرٌ مَا تَنْفَعُ وَلَا تَضُرُّ وَلَوْلَا أَنِّي رَأَيْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يُقْبَلُكَ مَا قَبَّلْتُكَ . متفقٌ عليه .

167. Caabis bin Rabiicah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan arkay Cumar bin Khaddaab oo Xajarul aswadka dhunkanaya (Kacbada dhexdeeda) oo leh: Waa aan ogahay inaad dhagax tahay oo aadan dhib iyo dheef toonna lahayn, haddii aanan arag Rasuulkii Alle (S.C.W.) oo ku dhunkanayana, marnaba kuma dhunkadeen".
(Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah:

Dhowrista iyo ilaalinta sunnada nabiga (S.C.W.) iyo inaad adoo raalli ah , aad aqbashaa waa waajib iyo xil saaran qof kasta oo Muslim ah goor iyo waa walbaba, sida ay ku dhawaaqeen aayadaha Qur'aanka, Alle weynaa oo kor ahaaye ma saarin rususha xil ah oo keliya inay diinta dadka gaarsiyaan, bal wuxuu ka yeelay macallimiin, hanuuniyayaal, toosiyayaal, iyo tusaale lagaga daydo dhaqanka suubban, si falalka iyo hadalladooda ileys looga dhigto mugdiga lagu iftiinsado, iyo dhabbo la raaco. Taasina waa lagama maarmaan si ay dadku u ogaadaan in adeecidda rasuulka Alle ay tahay cibaa-do. Alle wuxuu yiri: Kii rasuulka adeecaa, wuxuu adeecay Alle.'

١٧ - باب في وجوب الانقياد لحكم الله

C U T U B K A 17

AHMIYADDA U HOGGAANSANKA AMARRADA ALLE IYO
KAN DADKA UGU YEERAYA, AMA FARAYA WAX SAN
WAX XUNNA REEBAYA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى : ﴿ فَلَا وَرَبِّكَ لَا يُؤْمِنُونَ حَتَّى يُحَكِّمُوكَ فِيمَا شَجَرَ بَيْنَهُمْ ثُمَّ لَا يَجِدُوا فِي أَنْفُسِهِمْ حَرَجًا مِمَّا قَضَيْتَ وَيَسَلِّمُوا تَسْلِيمًا ﴾ [النساء : ٦٥]

69. " Waa igu Rabbigaaye ma ayan rumayn(xaqa) jeer ay kuugu yimaadaan xugminta wixii ay isku qabtaan dabadeedna ku qancaan wixii aad go'aamiso wax dhibsi iyo culeys ahna ka gelin, hoggaansamidna hoggaansamaan" . Suuradda.An-Nisaa: Aayadda 65.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى: ﴿ إِنَّمَا كَانَ قَوْلَ الْمُؤْمِنِينَ إِذَا دُعُوا إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ لِيَحْكُمَ بَيْنَهُمْ أَنْ يَقُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴾ [النور: ٥١].

70. " Hadalka mu'miniinta (dhabta ah) markii loogu yeero inay Alle iyo Rasuulkiisu u gar sooraan waa inay yiraahdaan: waan maqleynaa oo adeeceynaa. Waana kuwaas kuwa iyagu liibaanaya" Suuradda : An-Nuur: Aayadda 51.

وفيه من الأحاديث : حديث أبي هريرة المذكور في أول الباب قبله وغيره من الأحاديث فيه .

١٦٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : لَمَّا نَزَلَتْ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ : ﴿ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَإِنْ تُبَدُّوا مَا فِي أَنْفُسِكُمْ أَوْ تُخْفَوُهُ يُحَاسِبْكُمْ بِهِ اللَّهُ ﴾ [البقرة : ٢٨٤] الآية أَشْتَدَّ ذَلِكَ عَلَى أَصْحَابِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَاتَرَوْا رَسُولَ اللَّهِ ﷺ ثُمَّ بَرَكَوْا عَلَى الرُّكْبِ فَقَالُوا : أَيُّ رَسُولِ اللَّهِ كَلَّفْنَا مِنَ الْأَعْمَالِ مَا نَطِيقُ : الصَّلَاةَ وَالْجِهَادَ وَالصِّيَامَ وَالصَّدَقَةَ وَقَدْ أَنْزَلْتَ عَلَيْكَ هَذِهِ الْآيَةَ وَلَا نَطِيقُهَا . قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « أَتُرِيدُونَ أَنْ تَقُولُوا كَمَا قَالَ أَهْلُ الْكِتَابِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ : سَمِعْنَا وَعَصَيْنَا ؟ بَلْ قُولُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا غُفْرَانَكَ رَبَّنَا وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ » فَلَمَّا أَقْرَأَهَا الْقَوْمُ ، وَذَلَّتْ بِهَا أَلْسِنَتُهُمْ أَنْزَلَ اللَّهُ تَعَالَى فِي إِثْرِهَا : ﴿ آمَنَ الرَّسُولُ بِمَا أُنزِلَ إِلَيْهِ مِنْ رَبِّهِ وَالْمُؤْمِنُونَ كُلٌّ آمَنَ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ لَا نُفِرُّ بَيْنَ أَحَدٍ مِنْ رُسُلِهِ وَقَالُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا غُفْرَانَكَ رَبَّنَا وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ ﴾ [البقرة : ٢٨٥] فَلَمَّا فَعَلُوا ذَلِكَ نَسَخَهَا اللَّهُ تَعَالَى فَأَنْزَلَ اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ : ﴿ لَا يُكَلِّفُ اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا لَهَا مَا كَسَبَتْ وَعَلَيْهَا مَا اكْتَسَبَتْ رَبَّنَا لَا تُؤَاخِذْنَا إِنْ نَسِينَا أَوْ أَخْطَأْنَا ﴾ [البقرة : ٢٨٦] قَالَ : نَعَمْ ﴿ رَبَّنَا وَلَا تَحْمِلْ عَلَيْنَا إَصْرًا كَمَا حَمَلْتَهُ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِنَا ﴾ قَالَ : نَعَمْ ﴿ رَبَّنَا وَلَا تَحْمِلْنَا مَا لَا طَاقَةَ لَنَا بِهِ ﴾ قَالَ : نَعَمْ ﴿ وَاعْفُ عَنَّا وَارْحَمْنَا أَنْتَ مَوْلَانَا فَانصُرْنَا عَلَى الْقَوْمِ الْكَافِرِينَ ﴾ قَالَ : نَعَمْ . رواه مسلم .

168. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebiga (S.C.W.) markii ay ku soo degtey aayaddan: " Alle wuxuu leeyahay waxa cirarka iyo dhulka ku sugan; Haddii aad muujisaan waxaa maankiinna ku jira iyo haddii aad qarisaanba, Alle waa idiin xisaabayaa" Suuradda al-Baqara: Aayadda 248.

Asxaabtiisii aad bay ugu cuslaatay taasi, markaasay aadeen Nebiga (S.C.W.) oo intay jilbaha ku soo fariisteen, bay waxay ku yiraahdeen; Rasuulkii Alloow (S.C.W.) waxaa naloo xilsaaray howlo iyo waajibyo aan awoodi karno, ay ka mid yihiin salaad, jihaad, soon, sako, I.W.M.haatanna waxaa kugu soo degtey aayaddaan oo aannaan awoodi u lahayn .Wuxuu yiri: " Ma waxaad rabtaan inaad sidii ehlu kitaabkii idinka horreeyey oo kale tiraahdaan : Waan maqallay, yeeli meynana? Mayee waxaad tiraahdaan; maqallay, oo yeellay. ee Rabbiyoow dembi dhaafkaaga na sii, xaggaagaa noqodku ahaadaye". Markii ay sidii yeeleen oo yiraahdeen baa markiiba Alle wuxuu soo dejiyey:

"Rasuulku waa rumeeyey wixii xagga Rabbigi looga soo dejiyey, (sidoo kale bayna yeeleen mu'miniintu. Mid walbaa Alluu rumeeyey iyo Malaa' igtiiisa iyo Kutubtiisa iyo Rusushiisa _ iyagoo leh rusushiisa midna gees u bixinmayno _ waxayna yiraahdeen: waannu maqli, oo yeeli (wax kasta oo aad in farto) ee (na sii) dambi dhaafkaaga Rabbiyoow , xaggaagaa noqodku ahaadaye" Suuradda Al-Baqarah: Aayadda 285.

Markii ay sidaas yeeleen buu uga noqday xukunkiisaasi, soona dejiyey markaa aayadahan: " Alle nafna waxayan awood u laheyn ma saaro. Wixii ay shaqaysato bayna leedahay naf kasta, wixii ay galabsato baana loo raacanayaa. Rabbiyoow ha noo qaban haddii aan halmaanno ama gefno. (Alle Wuxuu yiri waa yahay) . Rabbiyoow ! Culaysna ha na saarin sidii aad kuwii naga horreeyey u saartay (Alle Wuxuu yiri waa yahay) . Rabbiyoow! Wax aannaan karinna hana saarin (Alle wuxuu yiri waa yahay) . Oo na cafi, oo noo dembi dhaaf, oo noo naxariiso. Adigaa gacalkayagii ahe iyo gargaaraheenna ee gaalada nooga hiili . (Alle wuxuu yiri waa yahay) Suuradda Al-Baqarah: Aayadda 286. (Muslim)

١٨ - باب في النهي عن البدع ومحدثات الأمور

CUTUBKA 18

BIDCOOYINKA IYO ARRIMAHA LAGU SOO DIRRIYO DIINTA WAA XAARAAN REEBBAN

Alle kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى:

﴿ فَمَاذَا بَعْدَ الْحَقِّ إِلَّا الضَّلَالُ ﴾ [يونس : ٣٢]

71. " Xaq maxaa ka soo hara oo aan baadinnimo ahayn" Suuradda Yuunis: Aayadda 32.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى:

﴿ مَا فَرَطْنَا فِي الْكِتَابِ مِنْ شَيْءٍ ﴾ [الأنعام : ٣٨]

72. " Kitaabka (Looxa maxfuudka) waxba kuma aannu dhaafin" Suuradda Al-Ancaam: Aayadda 38

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى:

﴿ فَإِنْ تَنَازَعْتُمْ فِي شَيْءٍ فَرُدُّوهُ إِلَى اللَّهِ وَالرَّسُولِ ﴾ [النساء : ٥٩]
أَيِ الْكِتَابِ وَالسُّنَّةِ .

73. " Haddii aad wax isku qabataan u celiya Alle iyo Rasuulka (yacni u bandhiga Qur'aanka iyo sunnada) " . Suuradda .An- Nisaa: Aayadda 59.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى:

﴿ وَأَنْ هَذَا صِرَاطِي مُسْتَقِيمًا فَاتَّبِعُوهُ وَلَا تَتَّبِعُوا السُّبُلَ فَتَفَرَّقَ بِكُمْ عَنْ سَبِيلِهِ ﴾
[الأنعام : ١٥٣]

74. " Jidkaygii oo toosan wakaase raaca, jidad kale ha raacina yaysan jidkiisa idinka dhumine" Suuradda Al-Ancaam: Aayadda 153.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى:

﴿ قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ ﴾
[آل عمران : ٣١]

75. " Ku dheh (Muxammadow, S.C.W. dadka) haddii aad Alle jecshihiin i soo raaca Alle waa idin jeclaanayaa oo idiin dambi dhaafayaaye" Suuradda Aali-Cimraan 31.

١٦٩ - عن عائشة رَضِيَ اللهُ عَنْهَا قَالَتْ : قَالَ رَسُولُ اللهِ ﷺ : « مَنْ أَحَدَّثَ فِي أَمْرِنَا هَذَا مَا لَيْسَ مِنْهُ فَهُوَ رَدٌّ » متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : « مَنْ عَمِلَ عَمَلًا لَيْسَ عَلَيْهِ أَمْرُنَا فَهُوَ رَدٌّ » .

169. Caa'isha (A.K.R.) Waxay tiri: Nebiga (S.C.W.) wuxuu yiri: " Haddii uu qof isku dayo inuu ku soo daro arrinkayagaan (diinta Islaamka) waxaan ka mid aheyn , waa in lagu diiddaa (qofka bidci-daa la yimidna waa in la ceebeeya, oo la dhaleeceeyaa (haddii uu ku sii socdo kaddib markii laga waaniyo oo xaqa loo caddeeyo) ".
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale oo Muslim ku taal waxay ahayd: " Haddii uu qof keeno ama falo wax arrinkayaga (diinta Islaamka) ka baxsan, oo aan anigu jideyn, waa in lagu diidaa (oo waa in qofkaa ka mas'uulka ah ama bidcadaa wata la ceebeeyaa, haddii uu ku sii socdo kaddib markii laga waaniyo oo xaqa loo caddeeyo) ".
(Bukhaari iyo Muslim)

١٧٠ - وعن جابر رَضِيَ اللهُ عَنْهُ قَالَ : كَانَ رَسُولُ اللهِ ﷺ إِذَا خَطَبَ أَحْمَرَّتْ عَيْنَاهُ وَعَلَا صَوْتُهُ وَأَشْتَدَّ غَضَبُهُ حَتَّى كَأَنَّهُ مُنْذِرُ جَيْشٍ يَقُولُ : « صَبَّحَكُمْ وَمَسَّكُمْ » وَيَقُولُ : « بُعِثْتُ أَنَا وَالسَّاعَةُ كَهَاتَيْنِ » وَيَقْرُنُ بَيْنَ أَضْبَعِيهِ السَّبَابَةَ وَالْوُسْطَى وَيَقُولُ : « أَمَا بَعْدُ فَإِنَّ خَيْرَ الْحَدِيثِ كِتَابُ اللهِ وَخَيْرَ الْهَدْيِ هَدْيُ مُحَمَّدٍ ﷺ وَشَرُّ الْأُمُورِ مُحَدَّثَاتُهَا وَكُلُّ بِدْعَةٍ ضَلَالَةٌ » ثُمَّ يَقُولُ : « أَنَا أَوْلَى بِكُلِّ مُؤْمِنٍ مِنْ نَفْسِهِ ، مَنْ تَرَكَ مَالًا فَلْأَهْلِهِ ، وَمَنْ تَرَكَ دِينًا أَوْ ضِيَاعًا فَآلِيَّ وَعَلَيَّ » رواه مسلم .

170. Jaabir (A.K.R.) Wuxuu yiri: Markii uu nebigu (S.C.W.) uu inoo khudbaynayo indhahaa gaduudan jirey, codkiisana kor buu ahaan jiray, waxaadna moodi jirtey sida inuu inooga digayo col inagu soo food leh . Wuxuu oran jiray : War cadowgii wuxuu idin soo hayaa subaxan, ama cadowga wuxuu xaggiina u soo dhiitinayaa fiidkii. Wuxuu kaloo oran jirey: Soo diriddaydii iyo soo bixinta Saacadda waa laba wada socda oo isugu lammaanan sida labadayda farood (intuu far dhexaadda iyo murugsatada isku lammaaniyey) Dabadeedna wuxuu oran jirey, intaas kaddib, hadal waxaa ugu sita kitaabka Alle, hanuunna waxaa ugu sita hanuunkii Muxammad

(S.C.W.) arrimahana waxaa ugu shar badan in arrimo cusub lagu daro caqiidada Islaamka iyo iimaanka iyo guud ahaan waxa lagu daro diinta oo aan ka mid aheyn ee bidcada ah. Bidcid kastaana waa baadi iyo habow. dabadeedna wuxuu oran jirey ; Anigaa mu'min walba naftiisa ka xiga (yacni waxaan ahay kheyr iyo samaan la doone muslimiinta) (Sidaa daraaddeed) Haddii uu qof muslim ah ka tago xoogaa hanti ah waxaa leh dadkiisa. Haddii uu dhinta oo uu ka tagaana deymo iyo carruur dayacan anigaa u xilsaaran. oo dusha u dhiganaya bixinta deymahiisa iyo daryeelka carruurtiisa".
(Muslim)

Waxaa kale oo ciwaankaan soo gelaya xadiiskii aan ku soo dhaafnay ciwaankii ilaalinta sunnada oo uu warinayey Cirbaad ibn Saariyah ee tiradiisu aheyd 157 cutubka 14 ee loo noqon karo.

FIIRO GAAR AH:

Wuxuu yiri Qaadi Ciyaadh qofkii curiya ama keena isagoo ka mid dhigaya Islaamka arrin cusub aan ku jirin Qur'aanka iyo sunnaha nabiga (S.C.W.) waa in la dhaleeceeyaa (ama loo arkaa khaa'in ka noqday diintii) Waayo diinta Islaamka waa ebyan tahay oo ka dhan tahay dhinac kasta , mana jirto baahi in wax lagu soo dirriyaa ah, hadday tahay siyaadin ama naaqusin. Sidaa awgeed, qofka taa isku dayaya waa qof doonaya inuu keeno oo ku soo daro shareecada wax xun oo aan ciribtooda la mahdin doonin.

Iimaanku wuxuu ku kooban yahay in la rumeeyo oo la raaco wax-yiga Ilaahiga ah, iyo sunnaha iyo dhaqanka nabiga (S.C.W.) iyo asxaabtiisa . Sidaa awgeed qofka sidaa ah(ee doonayo inuu wax ku daro mabaadida diinta iyo qodobbadeeda ama wax ka naaqusiyo ee sidaa ula kaca u yeelaya) waa in loo arkaa qofka qof Islaamkii khaa'imaya oo luggooyo la doonaya muslimiinta . Intaanan tillaabada ku habboon laga qaadinna waxaa wanaagsan in loo caqli celiyo oo loo naseexeeyo, xaqa loo caddeeyo, jahliga laga saaro, intaa kaddib haddii uu ku sii adkeysto fidinta bidcada iyo hirgelinteeda , waa in mowqaf cad laga istaagaa oo dadka looga digaa.

QOF WALBAA WIXII UU JIDEEYO BUU LEEYA-HAY

قال الله تعالى : Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ وَالَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا هَبْ لَنَا مِنْ أَزْوَاجِنَا وَذُرِّيَّاتِنَا قُرَّةَ أَعْيُنٍ وَاجْعَلْنَا لِلْمُتَّقِينَ

إِمَامًا ﴾ [الفرقان : ٧٤]

76. " Iyo kuwa yiraahda: Rabbiyow ubadkayaga iyo afooyinkayaga ilqabowski naga sii , Tusaale wacanna innaga dhig ay ku daydaan kuwo xaqa raaca xumahana iska dhowra". Suuradda Al-Furqaan: Aayadda : 24.

وقال تعالى : Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَاجْعَلْنَا لَهُمْ أُيْمَةً يَهْتَدُونَ بِأَمْرِنَا ﴾ [الأنبياء : ٧٣] .

77. " Waxaan ka dhignay (nebiyadii iyo saalixiinta) madax amar-kayaga wax ku hanuuniya" . Suuradda Al-Anbiyaa: Aayadda 73.

١٧١- وعن أبي عمرو جرير بن عبد الله رضي الله عنه ، قال كنا في صدر النهار عند رسول الله ﷺ فجاءه قوم غرأة مجتابي النمار أو العباء متقلدي السيوف ، عامتهم بل كلهم من مضر ، فتمعروا وجه رسول الله ﷺ لما رأى بهم من الفاقة ، فدخل ثم خرج فأمر بلالاً فأذن وأقام ثم صلى ثم خطب فقال : ﴿ يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ ﴾ « إلى آخر الآية : ﴿ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا ﴾ [النساء : ١] وَالآيَةُ الْأُخْرَى الَّتِي فِي آخِرِ الْحَشْرِ : ﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَلْتَنْظُرْ نَفْسٌ مَا قَدَّمَتْ لِغَدٍ ﴾ [الحشر : ١٨] تَصَدَّقَ رَجُلٌ مِنْ دِينَارِهِ مِنْ دِرْهِمِهِ مِنْ تَوْبِهِ مِنْ صَاعٍ بُرِّهِ مِنْ صَاعٍ تَمْرِهِ - حَتَّى قَالَ - وَلَوْ بِشِقِّ تَمْرَةٍ « فَجَاءَ رَجُلٌ مِنَ الْأَنْصَارِ بَصُرَةً كَادَتْ كَفَّهُ تَعَجُّزُ عَنْهَا بَلْ قَدْ عَجَزَتْ . ثُمَّ تَتَابَعَ النَّاسُ حَتَّى رَأَيْتُ كَوْمَيْنِ مِنْ طَعَامٍ وَثِيَابٍ حَتَّى رَأَيْتُ وَجْهَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ

يَتَهَلَّلُ كَأَنَّهُ مُذَهَبَةٌ . فقال رسول الله ﷺ : « مَنْ سَنَّ فِي الْإِسْلَامِ سُنَّةً حَسَنَةً فَلَهُ أَجْرُهَا وَأَجْرُ مَنْ عَمِلَ بِهَا بَعْدَهُ مِنْ غَيْرِ أَنْ يَنْقُصَ مِنْ أَجْرِهِمْ شَيْءٌ ، وَمَنْ سَنَّ فِي الْإِسْلَامِ سُنَّةً سَيِّئَةً كَانَ عَلَيْهِ وِزْرُهَا وَوِزْرُ مَنْ عَمِلَ بِهَا مِنْ بَعْدِهِ مِنْ غَيْرِ أَنْ يَنْقُصَ مِنْ أَجْرِهِمْ شَيْءٌ » رواه مسلم .

171. Jariir bin Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaynu joognay oo xaadir ka aheyn kulan uu innagu wehliyey nebiga (S.C.W.) maalin goor Duhur aheyd. Waxaa noo yimid dad aad u arradan oo wax jeex jeexan qaba oo seefo sita oo reer Mudar badankoodu yahay ama wad ahaaba. Markaasaa nebigu (S.C.W.) surrucaaday waxa faqri ka muuqanaya awgeed. Markaasuu inta soo kacay oo qolkiisa aaday buu haddaana soo baxay oo Bilaal wuxuu faray inuu addimo waayo waxay aheyd waqtigii salaadda. inta na tujiyey nabigu (S.C.W.) buu khudbad jeediyey oo yiri: War dadoow dhowra oo ilaaliya xilka iyo waajibkuu Alle idin saaray, Allahaa oo naf keliya idinka abuuray (Aadam) , iyadiina afadeeda ka abuuray (Xaawo) oo labadooda ka firdhiyey rag tira badan iyo haweenba. Al-lena ka cabsada , kan aad weydiisataan xuquuqdiinna, oo riximka ha goynina. Alle waa idin eegahayaaye" .Suuradda An-Nisaa: Aayadda 1.

Kaddibna wuxuu akhriyey aayad kale oo ku jirta suuradda al-Xashar ee ah:

" Kuwa xaqa rumeeyoow ! Dhowra xilka iyo waajibkuu Alle idiin saaray. oo nafi ha fiiriso waxay berirto (qiyaamaha) u hor marsatay Allana ka cabsada . Alle waxa aad faleysaan waa ka warqabaaye" . Suuradda Al-Xashar: Aayadda 18.

Markaa kaddib nabigu (S.C.W.) wuxuu faray nin walbaa oo dadkii salaadda joogay ka mid ahaa inuu wax ku sadaqaysto dadkaa qofba wixii uu heli karo. hadday Diinaar tahay, Dirham , dhar , bur , timir, ilaa uu gaarsiiyey xabad timir ah jeexeedba Allaha ka dhigo'e. Markay maqleen taa baa Nin ansaar ka mid ah wuxuu

keenay kolay culayskiisa uu qaad i la yahay , kaddibna dadkii baa iska daba yimid , ilaa wixii la isu keenay ay gaareen laba tuur oo

dhar iyo cunto ah. Markaa baa waxaan arkay wejigii Nebigoo (S.C.W.) oo u ifaya una dhalaalaya sida dahab oo kale.

Wuxuu markaas Nebigu (S.C.W.) yiri: "Qofkii diinta islaamka dhexdeeda jideeya wax khayr ah, wuxuu leeyahay ajarka waxaas iyo ajarka cid Alla ciddii waxaas ku dhaqanta isaga dabadi iyadoo aan iyagana ajarkooda waxba laga nusqaaminahayn. Qofkii diinta islaamka dhexdeeda wa xun jideeyana wuxuu leeyahay ciqaabta-dembigaa, waana loo ciqaabi sidoo kale cid Alla ciddii waxaas ku dhaqanta isaga dabadi, iyadoo aan iyagana waxba laga nusqaaminahayn dambiga ay galeen, iyo ciqaabta u dhigan.."

(Muslim)

١٧٢ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال : « لَيْسَ مِنْ نَفْسٍ تُقْتَلُ ظُلْمًا إِلَّا كَانَ عَلَى ابْنِ آدَمَ الْأَوَّلِ كِفْلٌ مِنْ دَمِهَا ، لَأَنَّهُ كَانَ أَوَّلَ مَنْ سَنَّ الْقَتْلَ » متفقٌ عليه .

172. Ibn Mascuud (A.K.R.) Wuxuu yiri: nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Naf kasta oo xaqdarro lagu dilo dembigeeda waxbuu ku leeyahay ina Aadankii ugu horreeyey (Qaabiil) , maxaa yeelay wuxuu ahaa qofkii ugu horreeyey oo dilka jideeyey, markuu dilay walaalkiis (Haabiil)" . (Bukhaari iyo Muslim)

٢٠ - باب في الدلالة على خير والدعاء إلى هدى أو ضلالة

C U T U B K A 20

KHAYR ISUGU YEERIDDA, IYO XAALKA KII KHEYR JI-
DEEYA AMA XUMAAN HORSEEDA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

قال تعالى :

﴿ وَادْعُ إِلَى رَبِّكَ ﴾ [القصص : ٨٧]

78. " Ugu yeer (dadka) xagga Rabbigaa" Suuradda : Al -Qasas:
Aayadda 87.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ آذُعْ إِلَى سَبِيلِ رَبِّكَ بِالْحِكْمَةِ وَالْمَوْعِظَةِ الْحَسَنَةِ ﴾ [النحل : ١٢٥]

79. " Ugu yeer jidka Rabbigaa si xigmad iyo waano wanaagsan leh " Suuradda An-Naxal : Aayadda 125.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَى ﴾ [المائدة : ٢]

80. " Isu kaalmaysta samaanta iyo ilaalinta xilka iyo arrimaha Alle waajibiyey" Suuradda. Al-Maa'idah: Aayadda 2.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَلَتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ ﴾ [آل عمران : ١٠٤] .

81. " Ha idinku jireen dad khayrka wax ugu yeera" Suuradda Aali-Cimraan: Aayadda 104

١٧٣ - وعن أبي مسعود عقبة بن عمرو الأنصاري البدرى رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ دَلَّ عَلَى خَيْرٍ فَلَهُ مِثْلُ أَجْرِ فَاعِلِهِ » رواه مسلم .

173. Abuu Mascuud Cuqbah ibn Camar al-Ansari al-Badri (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii khayr dadka tusaa kii falaa ajarka uu heli mid la mida baa loo dhigi." . (Muslim)

١٧٤ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه . أن رسول الله ﷺ قال : « مَنْ دَعَا إِلَى هُدًى كَانَ لَهُ مِنَ الْأَجْرِ مِثْلُ أُجُورِ مَنْ تَبِعَهُ لَا يَنْقُصُ ذَلِكَ مِنْ أُجُورِهِمْ شَيْئاً ، وَمَنْ دَعَا إِلَى ضَلَالَةٍ كَانَ عَلَيْهِ مِنَ الْإِثْمِ مِثْلُ آثَامِ مَنْ تَبِعَهُ لَا يَنْقُصُ ذَلِكَ مِنْ آثَامِهِمْ شَيْئاً » رواه مسلم .

174. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii dadka hanuun ugu yeeraa wuxuu leeyahay ajarka ay leeyihiin oo kale wixii isaga raaca ee samaha fala; iyadoo aan iyagana ajarkooda waxba laga nusqaamin. Sidaa oo kale qofkii dadka habow ugu yeeraa wuxuu leeyahay ciqaabta iyo dembiga ay leeyihiin wixii isaga raaca iyadoo aan waxba laga nusqaaminayn ciqaabta ay leeyihiin iyana ee dambigaa la xiriira" . (Muslim)

١٧٥ - وعن أبي العباس سهل بن سعد الساعدي رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال يوم خيبر: «لأعطينن هذه الراية غداً رجلاً يفتح الله على يديه، يحب الله ورسوله ويحبه الله ورسوله»، فبات الناس يدوكون ليلتهم أيهم يعطاها. فلما أصبح الناس غدواً على رسول الله ﷺ كلهم يرجون أن يعطاها فقال: «أين علي بن أبي طالب؟» فقيل: «يا رسول الله هو يشتكي عينيه». قال: «فأرسلوا إليه» فأتى به فبصق رسول الله ﷺ في عينيه ودعا له فبرىء حتى كأن لم يكن به وجع فأعطاه الراية. قال علي رضي الله عنه: «يا رسول الله أقاتلهم حتى يكونوا مثلنا؟» فقال: «انفذ علي رسلك حتى تنزل بساحتهم ثم ادعهم إلى الإسلام وأخبرهم بما يجب عليهم من حق الله تعالى فيه فوالله لأن يهدي الله بك رجلاً واحداً خير لك من حمر النعم» متفق عليه.

قوله: «يدوكون»: أي يخوضون ويتحدثون. وقوله «رسلك» بكسر الراء وبفتحها لغتان والكسر أفصح.

175. Abuu Cabbaas Sahal ibn Saacidi (A.K.R.) Wuxuu yiri: Intaan dagaalka la qaadin maalintii Khaybar nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Berri waxaan calanka u dhiibayaa nin Alle guusha siin doono oo jecel Alle iyo Rasuulkiisaba , Alle iyo Rasuulkiisuna jecel yihiin. Habeenkii oo dhan baa la isla lahaa talow yaa loo dhiibi doonaa calanka. Markii uu waagii baryey baa Nebigii (S.C.W.) loo jarmaaday iyadoo nin walbaa is leeyahay adigaa lagu siinayaa. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Mee Cali bin abii Daalib ? waxaa loo sheegay in indhahu xanuunayaan. Nabigu (S.C.W.) wuxuu dadkii faray in loo cid diraa.Markii uu yimid, buu rasuulkii Alle indhaha kaga tufay oo u duceeyey; markaasaa xanuunkii ka ba'ay. Markaa buu rasuulkii Alle u dhiibay calankii. Wuxuu yiri Cali (A.K.R.): Nebi Alloow dagaalka ma aan ku wadayaa jeer ay muslim noqdaan innagoo kale ah ? Nabigu (S.C.W.) Wuxuu ku jawaabay : tag adigoo ku socda orodkaaga caadiga ah illaa aad ka gaartid meel ku dhow carrigooda markaana ugu yeer inay Islaamka qaataan oo u sheeg waxa ay diinta fareyso oo uu ku waajib yeelay Alle. Waxaan ku dhaaran Alle, Xitaa haddii Alle dartaa hal qof keliya ku soo hanuuniyaa, taa baa wax badan kaaga wanaagsan oo kuu dhaanta tiro dhan oo aad qayb u yeelato oo geel gadgaduudan ah (halo geel oo qaali ah) .
(Bukhaari iyo Muslim)

١٧٦ - وعن أنس رضي الله عنه أن فتىً من أسلم قال : يا رسول الله إني أريد الغزوة وليس معي ما أتجهز به ؟ قال : « ائت فلاناً فإنه قد كان تجهز فمرض » فأتاه فقال : إن رسول الله ﷺ يُقرئك السلام ويقول : أعطني الذي تجهزت به فقال : يا فلانة أعطيه الذي تجهزت به ولا تحبسي منه شيئاً ، فوالله لا تحبسي منه شيئاً فيبارك لك فيه . رواه مسلم .

176. Anas (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nin dhallinyaro ah oo ka tirsan qabiilka Aslam baa u yimid nebiga (S.c.W.) oo ku yiri: Rasuulkii Alloow, Waxaan doonayaa inaan ka qayb qaato jihaadka, wax aan ku diyaar goroobana ma heysto oo qalab iyo hub ah (aan jihaadka ugala qayb galo). Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: U tag hebel hebel , wuxuu u sameeyey diyaargarooob dhan jihaadka, waase bu-kooday. Ninkii dhallinyarada ahaa wuxuu u tegey ninkan loo sheegay oo yiri: Nebigii Alle waa uu ku soo salaamayey wuxuuna ku soo faray inaad i siiso wixii aad ku diyaar garowdey ood jihaadka ugu tala gashay. Wuxuu ninkii faray xaaskiisa inay siiso qalabkiisii oo dhan uu jihaadka ugu tala galay ninkaa dhallinyarada ah oo ay waxba ka reebin. Alle baan ku dhaaran, Haddii aadan la harin waxba , Alle barako iyo kheyr buu ku siin falkaasi awgi.'. (Muslim)

٢١ - باب في التعاون على البر والتقوى

C U T U B K A 21

ISU KAASHIGA KHEYRKA IYO SAMA FALKA

قال الله تعالى :
Alle kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَى ﴾ [المائدة : ٢]

82. " Isu kaashada ilaalinta iyo dhowrista xilka Alle idin saaray iyo samaan falidda"Suuradda Al-Maa'idah: Aayadda 2

وقال تعالى :
Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَالْعَصْرَ إِنَّ الْإِنْسَانَ لَفِي خُسْرٍ . إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَتَوَاصَوْا بِالْحَقِّ وَتَوَاصَوْا بِالصَّبْرِ ﴾ [العصر : ١ - ٢] قال الإمام الشافعي رَجِمَهُ اللَّهُ كَلَامًا مَعْنَاهُ : إِنَّ النَّاسَ أَوْ أَكْثَرَهُمْ فِي غَفْلَةٍ عَنِ تَدْبِيرِ هَذِهِ السُّورَةِ .

83. " Waayahaan ku dhaartaye Aadanuhu khasaaruu ku sugan yahay kuwa xaqa rumeeyey ma ahee oo camalka wanaagsan falay, oo xaqa isu dardaarmay, samirkana isu dardaarmay " Suuradda Al-Casar.

١٧٧ - وعن أبي عبد الرحمن زيد بن خالد الجهني رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ جَهَّزَ غَازِيًا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَقَدْ غَزَا وَمَنْ خَلَفَ غَازِيًا فِي أَهْلِهِ بِخَيْرٍ فَقَدْ غَزَا » متفق عليه .

177. Abuu Cabdur Raxmaan Zayd ibn Khaalid al-Juhani (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Ninkii diyaariya oo qalabeeya nin mujaahid ah oo dar Alle u jihaadaya waa sida isagoo jihaadkii ka qayb galay (oo u diriray Alle darti) ninkii daryeela oo dhaqaaleeyana nin mujaahid ah oo Alle darti jihaad ugu maqan reerkiisii oo u sii hayaa waa sida nin isagu jihaadkii ka qayb qaatay, oo diriray" . (Bukhaari iyo Muslim)

١٧٨ - عن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ بعث بعثاً إلى بني لحيانٍ من هذيلٍ فقال : « لِيَتَّبِعْتُ مِنْ كُلِّ رَجُلَيْنِ أَحَدُهُمَا وَالْأَجْرُ بَيْنَهُمَا » رواه مسلم .

178. Abuu Saciid Al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W.) wuxuu u diray qolo dagaalyahanno ah inay dagaal jihaad ah ku qaadaan qabiil la yiraahdo Bani Laxyaan oo ka tirsan reer Hudeyl wuxuuna ku yiri nimankii dagaalyahannada uu u dirayey qoladaa: Labadii ninba waa inuu mid isu diyaariyaa inuu jihaadkaa aado oo ka qayb galo . Laakiin labaduba waxay leeyihiin ajar isku mid ah.' (Muslim)

١٧٩ - وعن ابن عباس رضي الله عنهما أن رسول الله ﷺ لَقِيَ رَجُلًا بِالرُّوحَاءِ فقال : « مَنْ الْقَوْمُ » ؟ قالوا : المسلمون ، فقالوا : من أنت ؟ قال : « رسول الله » ، فرفعت إليه امرأةً صبياً فقالت : أَلِهَذَا حَجٌّ ؟ قال : « نَعَمْ وَلَكِ أَجْرٌ » رواه مسلم .

179. Ibn Cabbaas (A.K.R.) Wuxuu yiri : nebigaa (S.C.W.) kula kulmay qoon awr fuusahan meesha Raxwaa la yiraahdo wuxuuna weydiyey cidda ay yihiin . Waxay u sheegeen inay yihiin muslimiin. Iyaguna waxay weydiyeen cid uu yahay wuxuu yiri " Ra-

suulkii Alle" Markaasaa haweeney inta ilma kor u qaadday tiri ;
kan xaj ma aadi karaa? Wuxuu yiri: Haah, Ajar baana kuugu su-
gan.' (Muslim)

١٨٠ - وعن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه عن النبي ﷺ أنه قال : « الْخَازِنُ
الْمُسْلِمُ الْأَمِينُ الَّذِي يُنْفَذُ مَا أُمِرَ بِهِ فَيُعْطِيهِ كَامِلًا مَوْفِرًا طَيِّبًا بِهِ نَفْسُهُ فَيَدْفَعُهُ إِلَى
الَّذِي أُمِرَ لَهُ بِهِ أَحَدُ الْمُتَصَدِّقِينَ » متفقٌ عليه .

وفي رواية « الَّذِي يُعْطِي مَا أُمِرَ بِهِ » وضبطوا « الْمُتَصَدِّقِينَ » بفتح القاف مع
كسر النون على التثنية ، وعكسه على الجمع وكلاهما صحيح .

180. Abuu Muusaa Al-Ashcari (A.K.R) Wuxuu yiri: Nebigu
(S.C.W.) Wuxuu yiri : " Khasnajiga muslimka ah ee aamminka
ah waa kaa guta xilka iyo howlaha loo dhiibay ee lagu aaminay,
bixinaya wixii bixi la yiraahdo isagoo siinaya wixii sii la yiri oo
dhan ciddii lagu yiri sii, isagoo raalli ah, uur fayow. Khasnajigaa
wuxuu la mid yahay kii wax sadaqeystay . (Bukhaari iyo Muslim)

٢٢ - باب في النصيحة

CUTUBKA 23

WAA IN LAYSU NASEEXEEYAA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri: قال تعالى :

﴿ إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ ﴾ [الحجرات : ١٠]

84." Mu'mininta uunbaa walaalo ah" . Suuradda Al-Xujuraat: Aay-
adda 10

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: oo uu ka soo weriyey inuu Nuux
(C.S) yiri isagoo dadkiisii la hadlaya:

وقال تعالى إخباراً عن نوحٍ ﷺ : ﴿ وَأَنْصَحُ لَكُمْ ﴾ [الأعراف : ٦٢]

85. " Waa aan idiin naseexaynayaa" Suuradda. Al-Acraaf Aayadda
26

Huud Alle wuxuu sheegay inuu yiri: وعن هود ﷺ :

﴿ وَأَنَا لَكُمْ نَاصِحٌ أَمِينٌ ﴾ [الأعراف : ٦٨] .

85a. " Waxaan idiin ahay naseexo wadeen aammin ah" . Suuradda Al Acraaf: Aayadda 68.

١٨١ - فالأول : عن أبي رُقَيْبَةَ تَمِيمِ بْنِ أَوْسِ الدَّارِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ النَّبِيَّ ﷺ قَالَ : « الدِّينُ النَّصِيحَةُ » قلنا : لِمَنْ ؟ قال : « لِلَّهِ وَلِكِتَابِهِ وَلِرَسُولِهِ وَلِأَيِّمَةِ الْمُسْلِمِينَ وَعَامَّتِهِمْ » رواه مسلم .

181. Tamiim ibn Aws Ad-daari (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Diintu waa waano. Waxaannu niri: Rasuul-kii Alloow yay u tahay ? Wuxuu yiri : waxay u tahay Alle, Qur'aanka, rasuulkiisa, iyo muslimiinta -dawladda iyo dadweynaba" (Muslim)

١٨٢ - الثاني : عن جرير بن عبد الله رضي الله عنه قال : بَايَعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ عَلَى إِقَامِ الصَّلَاةِ وَإِيتَاءِ الزَّكَاةِ وَالنُّصْحِ لِكُلِّ مُسْلِمٍ . متفقٌ عليه .

182. Jariir bin Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: " Waxaan Rasuulka Alle Axdi kula galay inaan salaadda oogo oo sekada bixiyo, iyo inaan wanaag la jeclaado qofkasta oo muslim ah oo u naseexeeyo" (Bukhaari iyo Muslim)

١٨٣ - الثالث : عن أنس رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « لا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّى يُحِبَّ لِأَخِيهِ مَا يُحِبُّ لِنَفْسِهِ » متفقٌ عليه .

183. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkiin mu'min dhan noqon mahayo jeer uu walaalkiis Islaamka la jeclaado waxa uu naftiisa la jecel yahay". (Bukhaari iyo Muslim)

٢٣ - باب في الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر

CUTUBKA 23

SAMAAN FARIDDA IYO XUMAAN REEBIDDA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ وَلَتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ ﴾ [آل عمران : ١٠٤]

86. "Ha idinka mid noqdeen dad khayrka wax ugu yeera oo samaanta fara, xumaantana reeba, kuwaasaa iyagu kuwa liibaaney ahe" Suuradda Aali-Cimraan 104.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ كُنْتُمْ خَيْرَ أُمَّةٍ أُخْرِجَتْ لِلنَّاسِ تَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَتَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ ﴾ [آل عمران : ١١٠]

87. " Waxaad tihiin ummaddii u khayr badanayd oo dadka loo soo saaray : Waxaad fartaan samaanta iyo dhaqank wanaagsan , reeb-taanna xumaanta iyo edebdarrada '. Suuradda Aali Cimraan: Aayadda 110.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ خُذِ الْعَفْوَ وَأْمُرْ بِالْعُرْفِ وَأَعْرِضْ عَنِ الْجَاهِلِينَ ﴾ [الأعراف : ١٩٩]

88. " Cafiska caadeyso (Muxammadow S.C.W.) , samaatana far, isagana jeeso jaahiliinta ". Suuradda Al-Acraaf: Aayadda 199.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَالْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ يَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ ﴾ [التوبة : ٧١]

89. " Mu'miniinta iyo Mu'minaduhu waa is yihiin oo hiil baa ka dhexeeya iyo isu gargaar, Waxay faraan samaanta, reebaanna xumaanta" Suuradda At-Tawba: Aayadda : 71 .

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ لَعِنَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ بَنِي إِسْرَائِيلَ عَلَى لِسَانِ دَاوُدَ وَعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ ذَلِكَ بِمَا عَصَوْا وَكَانُوا يَعْتَدُونَ . كَانُوا لَا يَتَنَاهَوْنَ عَنْ مُنْكَرٍ فَعَلُوهُ لَبِئْسَ مَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ﴾

[المائدة : ٧٨]

90. " Reer Israa'iil kuwoodii gaaloobey waxaa lagu nacladay car-rabkii Daawuud iyo Ciisaa, wiilkii Maryam. Maxaa yeelay waa caasiyoobeen oo xad gudbayaal noqdeen. Iskama ay reebi jirin xumaantii ay sameeyaan . Wax xillay falayeene" . Suuradda: Al-Maa-idah: Aayadaha 78,79 .

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَقُلِ الْحَقُّ مِنْ رَبِّكُمْ فَمَنْ شَاءَ فَلْيُؤْمِنْ وَمَنْ شَاءَ فَلْيُكْفُرْ ﴾ [الكهف : ٢٩]

91. ' Dheh (waa) xaqii oo ka yimid xagga Rabbigiin. Ee kii rabaa ha rumeeyo, kii rabaana ha gaaloobo." Suuradda al-Kahaf: Aayadda 29.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ فَأَصْدَعُ بِمَا تُؤْمَرُ ﴾ [الحجر : ٩٤]

92. "Caddee waxa xagga Alle lagaa amrayo". Suuradda : Al-Xijr : Aayadda 94.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ فَأَنْجَيْنَا الَّذِينَ يَنْهَوْنَ عَنِ السُّوءِ وَأَخَذْنَا الَّذِينَ ظَلَمُوا بِعَذَابٍ بَئِيسٍ بِمَا كَانُوا يَفْسُقُونَ ﴾ [الأعراف : ١٦٥]

93. " Kolkay iska illoobeen waxay culimadoodii ku waanineysay. Waxaan badbaadinay kuwii xumaanta reebayey , marsiinnayna dulmiile yaashii cadaab xun faasiqnimadoodii darteed". Suuradda : Al Acraaf : Aayadda : 165

وَالآيَات فِي الْبَاب كَثِيرَةٌ مَعْلُومَةٌ . وَأَمَّا الْآحَادِيث :

١٨٤ - فالأول : عن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه قال سمعت رسول الله ﷺ يقول : « مَنْ رَأَى مِنْكُمْ مُنْكَرًا فَلْيُغَيِّرْهُ بِيَدِهِ ، فَإِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَبِلِسَانِهِ ، فَإِنْ لَمْ يَسْتَطِعْ فَبِقَلْبِهِ وَذَلِكَ أَضْعَفُ الْإِيمَانِ » رواه مسلم .

184. Abuu Saciid Al-Khudri (A.K.R.) Wuxuu yiri: waxaan ma-qalay Nebiga (S.C.W.) oo leh : " Ninkiinnii xumaan arkaa, waa inuu ku saxaa gacantiisa, haddii uusan karinna inuu sidaa yeelo, waa inuu ku reebaa xumaanta carrabkiisa, haddii uusan karinna inuu ku reebo carrabka, waa inuu ugu yaraan u arkaa xagga qalbiga arrin fool xun aan loo baahneyn, in la suuliyana mudan; oo uu kahdona , tanina waa heerka ugu hooseeya ee iimaanka" . (Muslim)

١٨٥ - الثاني : عن ابن مسعود رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « مَا مِنْ نَبِيٍّ بَعَثَهُ اللَّهُ فِي أُمَّةٍ قَبْلِي إِلَّا كَانَ لَهُ مِنْ أُمَّتِهِ حَوَارِيُونَ وَأَصْحَابٌ يَأْخُذُونَ بِسُنَّتِهِ وَيَقْتَدُونَ بِأَمْرِهِ ، ثُمَّ إِنَّهَا تَخْلُفُ مِنْ بَعْدِهِمْ خُلُوفٌ يَقُولُونَ مَا لَا يَفْعَلُونَ وَيَفْعَلُونَ مَا لَا يُؤْمَرُونَ ، فَمَنْ جَاهَدَهُمْ بِيَدِهِ فَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَمَنْ جَاهَدَهُمْ بِقَلْبِهِ فَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَمَنْ جَاهَدَهُمْ بِلِسَانِهِ فَهُوَ مُؤْمِنٌ ، وَلَيْسَ وَرَاءَ ذَلِكَ مِنَ الْإِيمَانِ حَبَّةٌ خَرْدَلٍ » رواه مسلم .

185. Ibn Mascuud (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Nebiyadii iga horreeyey oo dhan Nebi walbaa wuxuu lahaan jirey xer iyo asxaab, ummaddiisa ka soo raaci jrey oo sunnadiisa qaadan jirey awaamirtiisana ku dhaqmi jirey . dabadeedna waxaa ku xigsan jirey qooman oranaya wax aysan falayn oo falaya wax aan la farin. Kuwa tilmaamaha leh qofkii gacantiisa kula jihaadaa waa mu'min; kii carrabkiisa kula jihaadaa waa mu'min; kii qalbiga kula jihaadaa (oo ka kahda, nacana xumaanta ay falayaan) waa mu'min. , mu'minnimo saxar le' eg oo intaas ka dambaysaana ma jirto" . (Muslim)

١٨٦ - الثالث : عن أبي الوليد عبادة بن الصامت رضي الله عنه قال : بَايَعْنَا رَسُولَ اللَّهِ ﷺ عَلَى السَّمْعِ وَالطَّاعَةِ ، فِي الْعُسْرِ وَالْيُسْرِ وَالْمَنْشَطِ وَالْمَكْرَهُ ، وَعَلَى أَثَرَةٍ عَلَيْنَا ، وَعَلَى أَنْ لَا نُنَازِعَ الْأَمْرَ أَهْلَهُ إِلَّا أَنْ تَرَوْا كُفْرًا بَوَاحًا عِنْدَكُمْ مِنَ اللَّهِ تَعَالَى فِيهِ بُرْهَانٌ ، وَعَلَى أَنْ نَقُولَ بِالْحَقِّ أَيُّنَمَا كُنَّا لَا نَخَافُ فِي اللَّهِ لَوْمَةَ لَائِمٍ . متفق عليه .

« الْمَنْشَطُ وَالْمَكْرَهُ » بفتح ميميهما : أي في السهل والصعب .
« الأثره » : الاختصاص بالمشترك وقد سبق بيانها . « بَوَاحًا » بفتح الباء الموحدة وبعدها واو ثم ألف ثم حاء مهملة : أي ظاهراً لا يحتمل تأويلًا .

186. Abul Waliid Cubaadah bin Saamit (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Waxaannu Nebiga (S.C.W.) axdi kula gallay inaan maqallo iyo inaan adeecno duruuf kasta oo jidha goorta ladnaanta iyo goorta lurnaanta, goorta xiisa qabka ama goorta wahsidaba; iyo inaan ka raalli noqonno haddii cid noolaga roonaado, ama nalaga kor yeelo. oo laxa jeclo iyo u kala roonaan la arko, iyo inaannaan talada kula murmin dadka haya (madaxda) inaan aragno gaalnimo iska cad oo aan xag Alle daliil uga hayno ma ahee, amarka Alle idin siiyeyna iyo wuxuu idin kula ballamay waa inaad xaqa iyo runta sheegtaan duruuf kasta oo aad ku sugan tihinba, oo aydan uga haybaysan (Yacni xaqa aydaan uga aamusin) mid wax canaanta canaanti".

(Bukhaari iyo Muslim)

١٨٧ - الرابع : عن النعمان بن بشير رضي الله عنهما عن النبي ﷺ قال : « مَثَلُ الْقَائِمِ فِي حُدُودِ اللَّهِ وَالْوَاقِعِ فِيهَا كَمَثَلِ قَوْمٍ آسْتَهُمُوا عَلَى سَفِينَةٍ فَصَارَ بَعْضُهُمْ أَعْلَاهَا وَبَعْضُهُمْ أَسْفَلَهَا وَكَانَ الَّذِينَ فِي أَسْفَلِهَا إِذَا اسْتَقَوْا مِنَ الْمَاءِ مَرُّوا عَلَى مَنْ فَوْقَهُمْ فَقَالُوا : لَوْ أَنَا خَرَقْنَا فِي نَصِيبِنَا خَرْقًا وَلَمْ نُؤْذِ مَنْ فَوْقَنَا فَإِنْ تَرَكَوهُمْ وَمَا أَرَادُوا هَلَكُوا جَمِيعًا وَإِنْ أَخَذُوا عَلَى أَيْدِيهِمْ نَجَوْا وَنَجَّوْا جَمِيعًا » رواه البخاري .

« الْقَائِمُ فِي حُدُودِ اللَّهِ تَعَالَى » معناه : المنكر لها القائم في دفعها وإزالتها : وَالْمُرَادُ بِالْحُدُودِ مَا نَهَى اللَّهُ عَنْهُ ؛ وَ« آسْتَهُمُوا » اقترعوا .

187. Nucmaan ibn Bashiir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Matala iyo tusaalaha qofka dhowra xuduudda Alle iyo kan aan danta u gelin waxay la mid yihiin sidii qolo doon fuushan oo ku qori tuurtay qolada dabaqa sare ee doonta fuuleysa iyo qolada dabaqa hoose fuuleysa . Qoladii dabaqa hoose fuushanayd waxaa qasab ku ahaa kolkay biyo rabto inay dabaqa kore u doonato. arrintaasoo yari dhib u keentay qoladii dabaqa sare ee doonta, fuushaneyd. Markaa bay waxay qoladii dabaqa hoose fuushaneyd u soo jeediyeen qoladii dusha fuulneyd inay ka oggolaadaan inay dabaqa hoose meel ka faruurtaan si ay biyo u helaan iyagoon cidna dhib u geysan . Marka haddii ay qoladii dusha sare saarneyd arrintaa ka yeelaan waa ay wada rogmanayaan, haddii ay ka qabtaanna waa ay badbaadahayaan iyaga iyo inta kale oo dhanba".

(Bukhaari)

١٨٨ - الخامس : عن أم المؤمنين أم سلمة هند بنت أبي أمية حذيفة رضي الله عنها عن النبي ﷺ أنه قال : « إِنَّهُ يُسْتَعْمَلُ عَلَيْكُمْ أَمْرَاءُ فَتَعْرِفُونَ وَتُنْكِرُونَ فَمَنْ

كَرِهَ فَقَدْ بَرِيءٌ ، وَمَنْ أَنْكَرَ فَقَدْ سَلِمَ ، وَلَكِنْ مَنْ رَضِيَ وَتَابَعَ « قالوا : يا رسول الله ألا نُقَاتِلُهُمْ ؟ قال : « لا ، مَا أَقَامُوا فِيكُمْ الصَّلَاةَ » رواه مسلم .

معناه : مَنْ كَرِهَ بِقَلْبِهِ وَلَمْ يَسْتَطِعْ إِنْكَاراً بِيَدِهِ وَلَا لِسَانٍ فَقَدْ بَرِيءٌ مِنَ الْإِثْمِ وَأَدَّى وَظِيْفَتَهُ ، وَمَنْ أَنْكَرَ بِحَسَبِ طَاقَتِهِ فَقَدْ سَلِمَ مِنْ هَذِهِ الْمَعْصِيَةِ وَمَنْ رَضِيَ بِفِعْلِهِمْ وَتَابَعَهُمْ فَهُوَ الْعَاصِي .

188. Ummul Mu'miniin Ummi Salamah (A..K.R.) Waxay tiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Rag baa madax la idiinka dhigi doonaa waxaad ku arki doontaan falal qaarkood (diinta waafaqsan) qaarna (ayan waafaqsaneyn). Marka qofkii muujiyaa naceyb arinkoodaasi ah (yacni wixii ay diinta ku khilaafeen) waa badbaadey, qofkii ka carooda oo ku diidaana waa badbaaday, laakiinse waxaa hoogaya qofkii raaca oo raalli ka noqda (munkarkooda). Dadkii markaa la joogay waxay yiraahdeen Rasuul Alloow ma waanaan la dagaallamayn? Wuxuu yiri: 'Maya' inta ay idinla tukanyaan". (Muslim)

١٨٩ - السادس : عن أم المؤمنين أم الحكم زينب بنت جحش رضي الله عنها أن النبي ﷺ دخل عليها فرعاً يقول : « لا إله إلا الله ، وَبِئْسَ لِلْعَرَبِ مِنْ شَرِّ قَدِ اقْتَرَبَ ، فُتِحَ الْيَوْمَ مِنْ رَدْمٍ يَأْجُوجَ وَمَأْجُوجَ مِثْلَ هَذِهِ » ، وَحَلَّقَ بِأَصْبَعِيهِ الْإِبْهَامِ وَالَّتِي تَلِيهَا فَقُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَنْهَلِكُ وَفِينَا الصَّالِحُونَ ؟ قال : « نَعَمْ إِذَا كَثُرَ الْخَبْثُ (١) » متفقٌ عليه .

189. Ummul mu'miniin Zaynab bintu Jaxash (A.K.R.) Waxay sheegtay in : Mar nebigu (S.C.W.) u soo galay isagoo naxsan oo yiri: " Laa ilaaha illal laah " - Ilaah xaq ah ma jiro aan Alle aheyn - Wuxuu baa'ba ahaan Carab korkooda shar soo food haya awgi. Wax baa laga furay maanta qaddar yar ah derbigii celinayey Yuuj iyo Maajuuj. Duleelka laga furay oo ah intaa; intuu farta iyo suulka goobo ka dhex sameeyey. Waxaan ku iri: Oo Rasuul Alloow ma iyadoo dad fiicani nagu jiraan baa nala rogayaa? Wuxuu yiri: Haah, markii ay waxa xumi bataan". (Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah: Imaam Nawawi isagoo xadiisyadan sharxaya wuxuu yiri : " Qofkii u arka wixii sharciga khilaafaya oo dhan xagga qalbiga wax xun, ee aan awood laheyn inuu ku joojiyaa gacantiisa ama carrabkiisa, qofka sidaa ah dambi ma leh. waayo waajibkii waa uu

gutay; qofkii uga hortagaana hadba inta karaankiisu yahay xag Alle waa ka dhowran yahay oo dambi ma soo gaarayo. , ha yeeshee qofkii oggolaada falka xun, oo raallinnimo muujiya waa kaa dambii-laha, daa'in Alle u caroonayo.

١٩٠ - السابع : عن أبي سعيد الخُدري رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « أَيَاكُمْ وَالْجُلُوسَ فِي الطَّرِيقَاتِ » فقالوا : يا رسول الله ما لنا مِنْ مَجَالِسِنَا بُدُّ نَتَحَدَّثُ فِيهَا . فقال رسولُ الله ﷺ : « فَإِذَا أَبَيْتُمْ إِلَّا الْمَجْلِسَ فَأَعْطُوا الطَّرِيقَ حَقَّهُ » قالوا : وما حقُّ الطَّرِيقِ يا رسولَ الله ؟ قال : « غَضُّ الْبَصَرِ وَكَفُّ الْأَذَى وَرَدُّ السَّلَامِ وَالْأَمْرُ بِالْمَعْرُوفِ وَالنَّهْيُ عَنِ الْمُنْكَرِ » متفقٌ عليه .

190. Abuu Saciid Al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Iska jira inaad jidadka fariisataan. Asxaabtii waxay yiraahdeen : Rasuulkii Allow, meel kale oo aan ku beddelanno ma lihin. Ma jirto meel kale oo aan fariisan karno, arrimahaana aan ku gurfeyno. Waana meelaha aan ku sheekaysanno oo ma deyn karno. Wuxuu yiri: Waa yahaye haddii aydaan deyn karin marka jidka dawgiisa mariya. Asxaabtii waxay weydiyeen waxa uu yahay dowga jidka? Wuxuu yiri: Waa indhaha oo aad hoos u dab-cisaan (oydan ku eegin dumarka jidka maraya), iyo ka qaadista jidadka wixii dhib leh, salaanta oo la naqo, faridda Samaanta iyo reebidda xumaanta ".
(Bukhaari iyo Muslim)

١٩١ - الثامن : عن ابن عباس رضي الله عنهما أن رسول الله ﷺ رأى خاتماً مِنْ ذهبٍ في يد رجلٍ فنزعه فطرحه وقال : « يَعْمَدُ أَحَدُكُمْ إِلَى جَمْرَةٍ مِنْ نَارٍ فَيَجْعَلُهَا فِي يَدِهِ » ! فَقِيلَ لِلرَّجُلِ بَعْدَ مَا ذَهَبَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : خُذْ خَاتَمَكَ انْتَفِعْ بِهِ . قال : لا والله لا آخُذُهُ أَبَدًا وَقَدْ طَرَحَهُ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ . رواه مسلم .

191. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W.) wuxuu arkay nin kaatun dahab ahi ay ugu jirto farta . Nabigu (S.C.W.) inta ka siibey faraantiigii fartiisa buu tuuray isagoo leh: Kiinii doonaya inuu dhuxul naar ah gacanta ku qaato, bal ha ku qaato. Markii uu Nebigu (S.C.W.) tegey baa la yiri ninkii kaatunkaaga qaado oo si kale ugu intifaac. Markaa buu wuxuu yiri: Alle baan ku dhaaran, marba hadduu rasuulkii Alle tuuray faraantigaa inaan waligey qaadan'.
(Muslim)

١٩٢ - التاسع : عن أبي سعيد الحسن البصري أن عائذ بن عمرو رضي الله عنه دخل على عبيد الله بن زياد فقال : أي بُنيّ إني سمعت رسول الله ﷺ يقول : « إِنَّ شَرَّ الرَّعَاءِ الْحُطَمَةُ » فَإِيَّاكَ أَنْ تَكُونَ مِنْهُمْ فَقَالَ لَهُ : اجْلِسْ فَإِنَّمَا أَنْتَ مِنْ نُخَالَةٍ أَصْحَابِ مُحَمَّدٍ ﷺ فقال : وهل كانت لهم نُخَالَةٌ إِنَّمَا كَانَتِ النُّخَالَةُ بَعْدَهُمْ وَفِي غَيْرِهِمْ . رواه مسلم .

192. Abuu Saciid Xasan al-Basri (Allaha u naxariistee) wuxuu yiri Caa'id ibn Camar (A.K.R.) baa wuxuu soo booqday Cubay-dullah ibn Ziyaad kuna yiri: Maandhoow waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: " Madax waxaa u shar badan oo u liita kan dadka sida xun ula dhaqma. ee iska jir kana digtoonow inaad ka mid noqota kuwaa sidaa ah. Wuxuu yiri: Fariiso Waxaa ka tahay buunsho oo kale asxaabtii Muxammed (S.C.W.) dhexdooda. Caa'id bin Camar wuxuu weydiiyey: ' Oo ma rag buunsha ah bay lahaayeen asxaabtii rasuulka S.C.W.? Jawaabtu waa maya, kuwa buunshaha oo kale ah dabadood bay yimaadeen, kamana tirsaneyn iyaga".
(Muslim)

١٩٣ - العاشر : عن حذيفة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ لَتَأْمُرَنَّ بِالْمَعْرُوفِ وَلَتَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ أَوْ لَيُوشِكَنَّ اللَّهُ أَنْ يَبْعَثَ عَلَيْكُمْ عِقَابًا مِنْهُ ثُمَّ تَدْعُوهُ فَلَا يُسْتَجَابُ لَكُمْ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

193. Xudayfah (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Naftayda kan ay gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye (oo ah Alle) ama samaanta farte, xumaantana reebte, ama Alle wuu idin ciqaa-bi. dabadeedna intaad baridaan, buusan idinka aqbaleyn ducada. (Tirmidi baa soo weriyey oo yiri waa xadiis xasan saxiix ah) .

١٩٤ - الحادي عشر : عن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « أَفْضَلُ الْجِهَادِ كَلِمَةٌ عَدْلٍ عِنْدَ سُلْطَانٍ جَائِرٍ » رواه أبو داود ، والترمذي وقال : حديث حسن .

194. Abuu Saciid Al-khudri (A.K.R.)Wuxuu yiri : Nebigu (S.C.W.) Wuxuu yir: " Jihaadka wanaagsan (Halganka ah Alle darti) waa inaad ku hadasho wax xaq, run iyo caddaalad ah suldaan daalim ah horti." (Abuu Daawuud &Tirmidi)
Tirmidi wuxuu yiri waa xadiis xasan ah

١٩٥ - الثاني عشر : عن أبي عبد الله طارق بن شهاب البجليّ الأحمسيّ رضي الله عنه أن رجلاً سأل النبي ﷺ وقد وضع رجله في الغرّز : أيّ الجهاد أفضل ؟ قال : « كَلِمَةٌ حَقٌّ عِنْدَ سُلْطَانٍ جَائِرٍ » رواه النسائي بإسناد صحيح .

« الغرّز » بغير معجمة مفتوحة ثم راء ساكنة ثم زاي ، وهو ركاب كورّ الجمل إذا كان من جلد أو خشب وقيل : لا يختص بجلد وخشب .

195. Abuu Cabdullaah Daariq ibn Shihaab al-Bajli al-Axmasi (.A.K.R.) wuxuu yiri nin baa wuxuu nabiga (S.C.W.) weydiyey isagoo nabigu hashiisa fuulaya nooca ugu wanaagsan jihaadka? Wuxuu yiri: Runta oo aad ku hadasho suldaan daalim ah horti". (Waxaa sanad saxiix ah ku weriyey Nisaa' i)

١٩٦ - الثالث عشر : عن ابن مسعود رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ أَوَّلَ مَا دَخَلَ النَّقْصُ عَلَى بَنِي إِسْرَائِيلَ أَنَّهُ كَانَ الرَّجُلُ يَلْقَى الرَّجُلَ فَيَقُولُ : يَا هَذَا اتَّقِ اللَّهَ وَدَعْ مَا تَصْنَعُ فَإِنَّهُ لَا يَحِلُّ لَكَ ، ثُمَّ يَلْقَاهُ مِنَ الْغَدِ وَهُوَ عَلَى حَالِهِ ، فَلَا يَمْنَعُهُ ذَلِكَ أَنْ يَكُونَ أَكِيلَهُ وَشَرِيبَهُ وَقَعِيدَهُ ، فَلَمَّا فَعَلُوا ذَلِكَ ضَرَبَ اللَّهُ قُلُوبَ بَعْضِهِمْ بِبَعْضٍ » ثم قال : « لَعْنُ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ بَنِي إِسْرَائِيلَ عَلَى لِسَانِ دَاوُدَ وَعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ ذَلِكَ بِمَا عَصَوْا وَكَانُوا يَعْتَدُونَ ، كَانُوا لَا يَتَنَاهَوْنَ عَنْ مُنْكَرٍ فَعَلُوهُ لَبِئْسَ مَا كَانُوا يَفْعَلُونَ ، تَرَى كَثِيرًا مِنْهُمْ يَتَوَلَّوْنَ الَّذِينَ كَفَرُوا لَبِئْسَ مَا قَدَّمَتْ لَهُمْ أَنْفُسُهُمْ - إِلَى قَوْلِهِ - ﴿ فَاسِقُونَ ﴾ [المائدة : ٧٨-٨١] ثم قال : « كَلَّا وَاللَّهِ لَتَأْمُرَنَّ بِالْمَعْرُوفِ وَلَتَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَلَتَأْخُذَنَّ عَلَى يَدِ الظَّالِمِ ، وَلَتَأْطِرُنَّهُ عَلَى الْحَقِّ أَطْرًا ، وَلَتَقْصُرُنَّهُ عَلَى الْحَقِّ قَصْرًا ، أَوْ لَيَضْرِبَنَّ اللَّهُ بِقُلُوبِ بَعْضِكُمْ عَلَى بَعْضٍ ، ثُمَّ لَيَلْعَنَنَّكُمْ كَمَا لَعَنَهُمْ » رواه أبو داود ، والترمذي وقال : حديث حسن (١) .

هذا لفظ أبي داود ، ولفظ الترمذي ، قال رسول الله ﷺ : « لَمَّا وَقَعَتْ بَنُو إِسْرَائِيلَ فِي الْمَعَاصِي نَهَتْهُمْ عُلَمَاؤُهُمْ فَلَمْ يَنْتَهُوا فَجَالَسُوهُمْ فِي مَجَالِسِهِمْ وَوَاكَلُوهُمْ وَشَارَبُوهُمْ فَضَرَبَ اللَّهُ قُلُوبَ بَعْضِهِمْ بِبَعْضٍ وَلَعَنَهُمْ عَلَى لِسَانِ دَاوُدَ

وَعِيسَى ابْنِ مَرْيَمَ ذَلِكَ بِمَا عَصَوْا وَكَانُوا يَعْتَدُونَ « فَجَلَسَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ وَكَانَ مُتَكِنًا فَقَالَ : « لَا ، وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ حَتَّى تَأْطِرُوهُمْ عَلَى الْحَقِّ أَطْرًا » .
 قوله « تَأْطِرُوهُمْ » : أي تعطفوهم . ولتَقْصُرُنَّهُ : أي لتحبسُنَّهُ .

196. Ibn Mascuud (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Baladii ugu horreysay ee ku fidday Reer Israa' iil dhexdooda waxay aheyd inta nin Markuu la kulmo nin kale yiraahdo: Alle ka cabso oo iska daa waxaad samaynayso waa xaaraane? buu misna markuu berrito la kulmo isagoo sidiisii ah, iskala fariisan jirey oo wax iskala cuni jirey, waxna iskala cabbi jiray. markii ay si daas yeeleen oo dambiilayaashoodii xiriirka ka goosan waayeen markii ay xumaha ku madax adeegeen baa Alle isku mid ka dhigey qalbiyadoodii (oo ka yeelay qalbiyo madow dambi awgi) daba-deedna rasuulkii Alle wuxuu akhriyey aayaddan:

" Carruurtii Israa' iil kuwoodii gaaloobay waxaa lagu nacladay car-rabkii Daawuud iyo Ciisaa, wiilkii Maryam, maxaa yeelay waa caa-siyoobeen oo xad gudbayaal noqdeen. Iskama ay reebi jirin xu-maantii ay samaynayaan wax xilley fali jireene. Waxaad arkaysaa in badan oo ka mid ah oo gaalada saaxiib ka dhiganaya. wax xun bay noftood u hormariseye)ilaa laga gaaro (waa faasiqiine). Suu-radda Al-Maa'idah: Aayadaha 78-81.

Dabadeedna wuxuu yiri nabigu (S.C.W.) : "Dhabtii ma aha sida aad moodeysaan, Alle baan ku dhaartay waa inaad samaanta is far-taan, xumaha iska reebtaan, gacantana qabataan kii dulmi wada oo xaqa ku sandulleysaan oo ku qasabtaan, haddii aydun sidaa yee-lin Alle wuu idin ciqaabi idinka iyo xumaan falayaashaba , idiin nacladina sidii Yuhuudda. (Waxaa weriyay Abuu Daawuud iyo Tir-midi oo yiri;waa xadiis xasan ah).

Tirmidi wuxuu yiri xadiiskani waa xadiis xasan ah, wuxuuna ku soo weriyey ereyadan:

" Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Kolkay carruurtii Israa'iil dambi ga-leen, markii hore kuwoodii toosnaa baa isku dayey inay dambiga ka qabtaan, laakiinse dan uma gelin. Markaa bay iska daayeen oo ku eegteen dambigii, oo cunid iyo cabid iyo fadhiba la wadaageen halka laga rabey inay Alle darti u gooyaan marba hadday xumaha ku adkeysteen oo ay wax ka qaban waayeen. Sidaa awgeed waxaa nacladay Daawuud iyo Ciisaa , wiilkii Maryam, caasiyoobiddoodii iyo xadgudubkoodii awgeed bayna u nacladeen. Weriyaha xadiiska wuxuu sheegay in rasuulku (S.C.W) oo diran barbarku u saarnaa,

intuu sare u soo fariistay yiri: Alle baan ku dhaaran oo ah kan ay gacantiisu nafteyda ku jirto, inaydun guul gaareyn oo aydaan kheyre heleyn inaad ku sandulleysaan xaqa maahee wixii xumo la soo baxa.

Sh. al-Baani wuxuu yiri xadiiskan waa daciif.

١٩٧ - الرابع عشر : عن أبي بكر الصديق رضي الله عنه قال : يا أيها الناس إنكم تقرأون هذه الآية : ﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا عَلَيْكُمْ أَنْفُسُكُمْ لَا يَضُرُّكُمْ مَنْ ضَلَّ إِذَا أَهْتَدَيْتُمْ ﴾ [المائدة : ١٠٥] وإني سمعت رسول الله ﷺ يقول : « إِنَّ النَّاسَ إِذَا رَأَوْا الظَّالِمَ فَلَمْ يَأْخُذُوا عَلَى يَدَيْهِ أَوْشَكَ أَنْ يَعْتَمَهُمُ اللَّهُ بِعِقَابٍ مِنْهُ » رواه أبو داود ، والترمذي ، والنسائي بأسانيد صحيحة .

197. Abuu Bakar as-Sidiiq (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Muslimiintooy waxaad akhrisaan aayaddaan:

"Kuwa xaqa rumeeyoow! naftiinnaa la idin raaciyey, mid dhumayna wax idinka dhimi maayo haddii aad hanuuntaan, xag Alle buuna noqodkiinna wada yahay, markaasuu idiinka warramayaa wixii aad fali jirteen". Suuradda Al-Maa'idah: Aayadda 105

Aniguna waxaan maqlay Nebiga (S. C.W.) oo leh: " Markii ay Dadku arkaan qof dulmi wada, haddii ay gacmaha qaban waayaan waxay halis u yihiin in Alle ka simo ciqaabtiisa "

Waxaa Sanadyo saxiixa ku wariyey Abuu Daawuud iyo Tirmidi iyo Nisaa'i .

Fiiro gaar ah:

Waxaa waajib ku ah qof kasta inuu faro dadka inay wanaag falaan iyo samaan, shardina ma aha in kan samaanta faraya uu noqdo nin wanaagsan. Waa sidaase, dadka ehlu cilmiga waxaa laga doonayaa inay naftooda ka dhaqan geliyaan waxay dadka kale ugu yeerayaan.

٢٤ - باب تغليظ عقوبة من أمر بمعروف
أو نهى عن منكر وخالف قوله فعله

C U T U B K A 24

GOODDIN RABBI OO LOO GOODDIYEY QOFKA AFKA SA-
MAHA WAX KA FARA , XUMAHANA AFKA KA REEBA ,
AANSE KU DHAQMIN ISUGU

قال الله تعالى : Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ أَتَأْمُرُونَ النَّاسَ بِالْبِرِّ وَتَنْسَوْنَ أَنْفُسَكُمْ وَأَنْتُمْ تَتْلُونَ الْكِتَابَ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴾
[البقرة : ٤٤]

94. " Dadka ma samaan baad faraysaan, marka aad idinku naftiinna halmaamaysaan (inaad wanaagga fashaan) ? idinkoo kitaabka akh-riyaya ma waydaan laheyn garaad iyo garasho". Suuradda: Al-Baqarah: Aayadda 44.

وقال تعالى : Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لِمَ تَقُولُونَ مَا لَا تَفْعَلُونَ ؟ كَبُرَ مَقْتًا عِنْدَ اللَّهِ أَنْ تَقُولُوا مَا لَا تَفْعَلُونَ ﴾ [الصف : ٢ - ٣]

95. " Kuwa xaqa rumeeyow maxaad u leedihiin wax aydaan falayn caro-weyn bay Alle agti keenaysaa inaad tiraahdaan wax aydaan falayn ". Suuradda As-Saf: Aayadda 23.

وقال تعالى إخباراً عن شعيب عليه السلام : Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَمَا أُرِيدُ أَنْ أُخَالِفَكُمْ إِلَىٰ مَا أَنْهَأَكُمُ عَنْهُ ﴾ [هود : ٨٨] .

96. "Mana aan rabo inaan idiin daba maro waxa aan idinka ree-bayo". Suuradda Huud:Aayadda 88.

١٩٨ - وعن أبي زيد أسامة بن حارثة رضي الله عنهما قال : سمعت رسول الله صلى الله عليه وسلم يقول : « يُؤْتَى بِالرَّجُلِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ فَيُلْقَى فِي النَّارِ ، فَتَنْدَلِقُ أَقْتَابُ بَطْنِهِ فَيَدُورُ بِهَا كَمَا يَدُورُ الْحِمَارُ فِي الرَّحَا ، فَيَجْتَمِعُ إِلَيْهِ أَهْلُ النَّارِ فَيَقُولُونَ : يَا فَلَانُ مَا لَكَ ؟ أَلَمْ تَكُنْ تَأْمُرُ بِالْمَعْرُوفِ وَتَنْهَى عَنِ الْمُنْكَرِ ؟ فَيَقُولُ : بَلَى كُنْتُ أَمْرُ

بِالْمَعْرُوفِ وَلَا آتِيهِ وَأَنْهَى عَنِ الْمُنْكَرِ وَآتِيهِ « متفقٌ عليه .

قوله : « تَنْدَلِقُ » هو بالبدالِ المهملة ، ومعناه تَخْرُجُ . وَ « الْأَقْتَابُ » :
الأمعاء ، واحدها قِتْبٌ .

198. Abuu Zayd Usaama bin Zayd (A.K.R.)Wuxuu yiri: " Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: " Maalinta qiyaamaha nin baa la keenayaa oo naarta lagu tuurayaa , markaas baa xiidmuhu soo dhacayaan oo markaasuu soconayaa isagoo wareegeysanaya hayana xiidmahiisa sida dameerku garan garta ugu wareego. ehlu naarkaa isugu imaanaya oo oranaya hebeloow maxaa kugu dhacay? Sowtii aad samaanta fari jirtey, xumaantana reebi jirtey ?Wuxuu oranayaa waa jirtaa. Laakiinse samaanta waa aan fari jirey , mana fali jirin; xumaantana waa reebi jirey anigaase fali jiray.".
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٥ - باب الأمر بأداء الأمانة

C U T U B K A 25

WAA INAAD AMMAANADA CIDDA LEH SIISAAN

قال الله تعالى : Alle weyne kor ahaay e wuxuu yiri:

﴿ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَنْ تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَىٰ أَهْلِهَا ﴾ [النساء : ٥٨]

97. " Alle wuxuu idin amrayaa inaad ammaanada cidda leh siisaan"
Suuradda : An-Nisaa: Aayadda 58.

وقال تعالى : Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ إِنَّا عَرَضْنَا الْأَمَانَةَ (١) عَلَى السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَالْجِبَالِ فَأَبَيْنَ أَنْ يَحْمِلْنَهَا وَأَشْفَقْنَ مِنْهَا وَحَمَلَهَا الْإِنْسَانُ إِنَّهُ كَانَ ظَلُومًا جَهُولًا ﴾ [الأحزاب : ٧٢] .

98" Ammaanada waxaan u soo bandhignay cirarka iyo dhulka iyo buuraha, markaasay diideen inay qaadaan oo ka cabsadeen . Aadanahaana qaaday . Shaki li'i Aadanahu waa dulmi falaa jahli qa-been ah " Suuradda Al- Axsaab: Aayadda 72.

١٩٩ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « آيَةُ الْمُنَافِقِ ثَلَاثٌ (١) : إِذَا حَدَّثَ كَذَبَ ، وَإِذَا وَعَدَ أَخْلَفَ ، وَإِذَا أَوْثِمَنَ خَانَ » متفقٌ عليه .

وفي رواية : « وَإِنْ صَامَ وَصَلَّى وَرَعِمَ أَنَّهُ مُسْلِمٌ » .

199. Abuu Hurayra (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Munaafaqu saddex calaamuu leeyahay markuu hadlayo wuxuu ku hadlaa been; tan labaad markuu ballan qaado waa ka baxaa; tan saddexaad markii la aamminana waa khiyaanaa" .
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kalaa ahayd: " Walow uu salaado, oo soomo, oo uu isu arko inuu yahay Muslim".

٢٠٠ - وعن حذيفة بن اليمان رضي الله عنه قال : حدثنا رسول الله ﷺ حديثين قد رأيتُ أحدهما وأنا أنتظرُ الآخر: حدثنا « أن الأمانة نزلت في جذرِ قلوبِ الرجال ثم نزل القرآن فعلموا من القرآن وعلموا من السنة » ثم حدثنا عن رفع الأمانة فقال : « يَنَامُ الرَّجُلُ النَّوْمَةَ فَتُقْبَضُ الْأَمَانَةُ مِنْ قَلْبِهِ ، فَيَظَلُّ أَثْرَهَا مِثْلَ الْوَكْتِ ، ثُمَّ يَنَامُ النَّوْمَةَ فَتُقْبَضُ الْأَمَانَةُ مِنْ قَلْبِهِ ، فَيَظَلُّ أَثْرَهَا مِثْلَ أَثْرِ الْمَجْلِ ، كَجَمْرِ دَخَرَجْتَهُ عَلَى رِجْلِكَ فَتَنْفِطُ فَتَرَاهُ مُنْتَبِراً وَلَيْسَ فِيهِ شَيْءٌ » ثُمَّ أَخَذَ حَصَاةً فَدَخَرَجَهُ عَلَى رِجْلِهِ « فَيُصْبِحُ النَّاسُ يَتَبَايَعُونَ ، فَلَا يَكَادُ أَحَدٌ يُؤَدِّي الْأَمَانَةَ حَتَّى يُقَالَ : إِنَّ فِي بَنِي فُلَانٍ رَجُلًا أَمِينًا ، حَتَّى يُقَالَ لِلرَّجُلِ : مَا أَجْلَدَهُ مَا أَظْرَفَهُ مَا أَعْقَلَهُ ، وَمَا فِي قَلْبِهِ مِثْقَالُ حَبَّةٍ مِنْ خَرْدَلٍ مِنْ إِيْمَانٍ . وَلَقَدْ أَتَى عَلَيَّ زَمَانٌ وَمَا أَبَالِي أَيُّكُمْ بَايَعْتُ : لئن كَانَ مُسْلِمًا، لَيَرُدَّنَّهُ عَلَيَّ دِينُهُ وَإِنْ كَانَ نَصْرَانِيًّا أَوْ يَهُودِيًّا لَيَرُدَّنَّهُ عَلَيَّ سَاعِيهِ ، وَأَمَّا الْيَوْمَ فَمَا كُنْتُ أَبَايَعُ مِنْكُمْ إِلَّا فُلَانًا وَفُلَانًا » متفقٌ عليه .

قوله « جَذْرٌ » بفتح الجيم وإسكان الذال المعجمة . وهو أصل الشيء .
و« الْوَكْتِ » بالتاء المثناة من فوق : الأثر اليسير . و« الْمَجْلُ » بفتح الميم وإسكان الجيم وهو تَنْفِطٌ في اليد ونحوها من أثر عمل وغيره . قوله : « مُنْتَبِراً » : مرتفعاً .
قوله : « سَاعِيهِ » : الوالي عليه .

200. Xudayfah bin Yamaan (A.K.R.) Wuxuu yiri: " Nebiga (S.C.W.) laba xadiis oo uu noo sheegay midna waa aan arkay (oo waa dhabowday) midna waa aan sugayaa inay dhacdo. Nabigu (S.C.W.) Wuxuu noo sheegay inay ammaanadu markii hore ku weyneyd oo meel wanaagsan kaga tiil qalbiga. Markii uu Qur'aanka soo dagayna , wuu ku sii baraarujiiyey oo ku adkeeyey , waxaa laga sii bartay sidoo kale dhaqanka rasuulka. dabadeedna wuxuu noo sheegay in ammaanada nalaga qaadi doono oo wuxuu yiri: Nin baa seexanaya markuu soo kaco wuxuu arkayaa ammaanadii oo qalbigiisa laga qaaday , xoogaase raadkeedii ah uu ku haray qalbigiisa; Markaasuu misna seexanayaa intii ku hartay ammaanadii baa qalbigiisa laga qaadayaa, oo waxaa lagu dhaafayaa sida calaamad yar oo qalbiga ku yaal ilaa ay la mid noqoto meel dhuxuli kaa gubtey, oo inta soo foocday haddana maran). (dabadeedna rasuulka S.C.W.) inta quruurux soo qaaday buu bilaabay inuu cagtiisa ku tuuraa) Markaa waxay dadku soo kacayaan subaxii oo u baxayaan inay wax kala gataan iyadoo aanu lagu arag qof aammin ah oo ammaanada guta. Heer la gaaro in la yiraahdo: waxaa ku jira nin qura wax aamin ah reer hebel iyo reer hebel. Waxaa dhacaysa dhinaca kale in la yiraahdo nin ku dagan danaha aduunka oo keliya : hebel waa wax garad,waa nin rag ah, waa meel mar, iyadoo aan qalbigiisa wax iimaan ah lagu arag. Xudayfah (A.K.R.) wuxuu kaloo yiri: Waxaan anigu soo maray mar aanan u meel dayi jirin qofka aan wax ka gadanayo, oo aan oran jirey: Hadduu muslim yahayna diintiisaa damaanad kaafi ah oo celineysa, hadduu Yuhuud ama Kirishtaan yahayna mas' uulkiisa baa damaan wanaagsan ahaa. Maantase cidaan wax ka gato ma jiro aan hebel iyo hebel aheyn" . (Bukhaari iyo Muslim)

٢٠١ - وعن حُذَيْفَةَ وَأَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا قَالَا : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « يَجْمَعُ اللَّهُ تَبَارَكَ وَتَعَالَى النَّاسَ فَيَقُومُ الْمُؤْمِنُونَ حَتَّى تُزَلْفَ لَهُمُ الْجَنَّةُ فَيَأْتُونَ آدَمَ صَلَوَاتُ اللَّهِ عَلَيْهِ فَيَقُولُونَ : يَا أَبَانَا اسْتَفْتِحْ لَنَا الْجَنَّةَ فَيَقُولُ : وَهَلْ أَخْرَجَكُم مِّنَ الْجَنَّةِ إِلَّا خَطِيئَةٌ أَبِيكُمْ ، لَسْتُ بِصَاحِبِ ذَلِكَ ، أَذْهَبُوا إِلَى ابْنِي إِبْرَاهِيمَ خَلِيلِ اللَّهِ . قَالَ : فَيَأْتُونَ إِبْرَاهِيمَ فَيَقُولُ : لَسْتُ بِصَاحِبِ ذَلِكَ إِنَّمَا كُنْتُ خَلِيلًا مِنْ وَرَاءَ وَرَاءَ ، اعْمَدُوا إِلَى مُوسَى الَّذِي كَلَّمَهُ اللَّهُ تَكْلِيمًا . فَيَأْتُونَ مُوسَى فَيَقُولُ : لَسْتُ بِصَاحِبِ ذَلِكَ ، أَذْهَبُوا إِلَى عِيسَى كَلِمَةِ اللَّهِ وَرُوحِهِ فَيَقُولُ عِيسَى : لَسْتُ بِصَاحِبِ ذَلِكَ ، فَيَأْتُونَ مُحَمَّدًا ﷺ فَيَقُومُ فَيُؤَدِّنُ لَهُ ، وَتُرْسَلُ الْأَمَانَةُ وَالرَّحْمُ فَتَقُومَانِ جَنْبَتِي الصِّرَاطِ يَمِينًا وَشِمَالًا فَيَمُرُّ أَوْلَاكُمْ كَالْبَرْقِ » قُلْتُ : يَا أَبِي وَأُمِّي أَيُّ شَيْءٍ كَمَرُ الْبَرْقِ ؟ قَالَ : « أَلَمْ تَرَوْا كَيْفَ يَمُرُّ وَيَرْجِعُ فِي

طَرْفَةَ عَيْنٍ ، ثُمَّ كَمَرَ الرِّيحِ ، ثُمَّ كَمَرَ الطَّيْرَ ، وَأَشَدَّ الرِّجَالَ تَجْرِي بِهِمْ أَعْمَالُهُمْ ، وَنَبِيُّكُمْ قَائِمٌ عَلَى الصِّرَاطِ يَقُولُ : رَبِّ سَلِّمْ سَلِّمْ ، حَتَّى تَعْجِزَ أَعْمَالُ الْعِبَادِ ، حَتَّى يَجِيءَ الرَّجُلُ لَا يَسْتَطِيعُ السَّيْرَ إِلَّا زَحْفًا ، وَفِي حَافَتِي الصِّرَاطِ كَلَالِيْبُ مَعْلَقَةٌ مَأْمُورَةٌ بِأَخْذِ مَنْ أَمَرَتْ بِهِ ، فَمَخْذُوشُ نَاجٍ ، وَمُكَرَّدَسٌ فِي النَّارِ « وَالَّذِي نَفْسُ أَبِي هُرَيْرَةَ بِيَدِهِ إِنَّ قَعْرَ جَهَنَّمَ لَسَبْعُونَ خَرِيفًا . رواه مسلم .

قوله « وراء وراء » هو بالفتح فيهما . وقيل بالضم بلا تنوين ومعناه : لست بتلك الدرجة الرفيعة وهي كلمة تذكر على سبيل التواضع . وقد بسطت معناها في شرح صحيح مسلم ، والله أعلم .

201. Xudayfah iyo Abuu Hurayrah (A.K.R.) waxay yiraahdeen Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Maalinta qiyaamaha Alle weyne kor ahaaye dadkii oo dhan buu isu keenayaa, mu'iniintana waxaa la istaajin doonaa meel ku dhow Jannada. Waxay marka hore u tegi doonaan Adam (nabad dushiisa ha ahaatee) waxay ku oron doonaan: Aabboow noo codso in jannada na loo furo . ' Wuxuu ku ja-waabi :Waa gefkii Aabbihiin waxa keenay in la idinka soo saaro jannada, waxba idiinma qaban karo. u taga wiilkaygii, nabi Ibraahiim saaxiibkii Alle. Markaa waxay u tegi doonaan nabi Ibraahiim , isagoo ku oran doona : Anigu ma ahi mid mudan inuu sidaa yeelo, arrintu waa adag tahay. Wax kale anigu maan aheyn, waxaan ahaa oo keliya saaxiibka Alle (sidaa wuxuu u oranayaa jajabnaan iyo tawaaduc darti) . U taga Muuse (buu oran) oo ah kii uu Alle toos ula hadlay. Muuse bay u tagi wuxuu ku oran doonaa: Anigu ma ahi mid leh oo mudan arrintaa ee u taga Ciise, kelmeddii Alle iyo ruuxdiisii. Isuguna wuxuu oran : Taas kuma fiicni. Markaasay nabi Muxammad (S.C.W.) u imaan doonaan. Horay buu iman Alle weyne kor ahaaye wuxuu u oggolaanayaa inuu shafeeco si jannada loo galo. Ammaanadii iyo riximnimadiina waa la soo deynayaa oo siraadkay labada dhinac midig iyo bidix ka kala istaagayaan (si-raadka oo ah buundo dul marta naarta Jahannama oo dadkoo dhammi kor mari doonaan maalinta qiyaame)) Qaybta ugu horreysa ee dadka waxay ku mari doonaan sida hillaaca. Waxaan weydiiyey (Aabbahay iyo hooyaday baan kugu furine) maxaa taa loola jeedaa? Wuxuu yiri: Sow ma aadan arag siduu iftiinka hillaaca u gudbo una soo noqdo il biriqsi gudaheed? Dabadeed qolada xigta waxay u marayaan sida dabeysha, qolada saddexaadna waxay u marayaan sida shimbiraha duula, qolada xigta waxay u marayaan sida rag kuwa u dheereeya, kala duwnaantaana waxaa keenay Camal falkii siduu ahaa intii adduunka la joogay. Waqtigaana nebigii-nu siraadka buu taagan yahay isagoo leh: Rabbiyoow nabad geli ,

Rabbiyoow nabad geli. Markii ay hoos u dhacaan camallada dadka oo soo nuxuusaan, orodka waa yaraanayaa illaa uu qof yimaado aan socon karin ee salka ku guuranaya. Siraadka labadiisa dhinac waxaa ka taagan kallaaliib biro ah oo xag Alle ka amran oo ciddii qabo la yiraahdo qabanaysa, mid bay xagtin gaari iyo daqar ha yeeshee la badbaadinayo, mid naartaa lagu tuurayaa. Abuu Hurayrah wuxuu yiri: kan ay nafta Abuu Hurayrah gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye Jahannama salkeedu waa ilaa todobaatan gu'inta loo soconayo". (Muslim)

٢٠٢ - وعن أبي خبيب « بضم الخاء المعجمة » عبد الله بن الزبير رضي الله عنهما قال : لَمَّا وَقَفَ الزُّبَيْرُ يَوْمَ الْجَمَلِ دَعَانِي فَقُمْتُ إِلَى جَنْبِهِ فَقَالَ : يَا بُنَيَّ إِنَّهُ لَا يُقْتَلُ الْيَوْمَ إِلَّا ظَالِمٌ أَوْ مَظْلُومٌ ، وَإِنِّي لَا أُرَانِي إِلَّا سَاقِتُلُ مَظْلُومًا وَإِنْ مِنْ أَكْبَرَ هَمِّي لَدِينِي ، أَفْتَرَى دَيْنَنَا يُبْقِي مِنْ مَالِنَا شَيْئًا ؟ ثُمَّ قَالَ : يَا بُنَيَّ بَعْ مَا لَنَا وَأَقْضِ دِينِي ، وَأَوْصِي بِالْثُلُثِ وَثُلُثِهِ لِبَنِيهِ ، يَعْنِي بَنِي عَبْدِ اللَّهِ بْنِ الزُّبَيْرِ ثُلُثُ الثُّلُثِ . قَالَ : فَإِنْ فَضَلَ مِنْ مَالِنَا بَعْدَ قَضَاءِ الدَّيْنِ شَيْءٌ فَثُلُثُهُ لِبَنِيكَ قَالَ هِشَامُ : وَكَانَ بَعْضُ وَلَدِ عَبْدِ اللَّهِ قَدْ وَازَى بَعْضَ بَنِي الزُّبَيْرِ خَبِيبٌ وَعَبَّادٌ ، وَلَهُ يَوْمَئِذٍ تِسْعَةٌ بَيْنَ وَتِسْعَ بَنَاتٍ . قَالَ عَبْدُ اللَّهِ : فَجَعَلَ يُوصِينِي بِدِينِهِ وَيَقُولُ : يَا بُنَيَّ إِنْ عَجَزْتَ عَنْ شَيْءٍ مِنْهُ فَاسْتَعِنْ عَلَيْهِ بِمَوْلَايَ . قَالَ : فَوَاللَّهِ مَا دَرَيْتُ مَا أَرَادَ حَتَّى قُلْتُ : يَا أَبَتِ مَنْ مَوْلَاكَ ؟ قَالَ : اللَّهُ . قَالَ : فَوَاللَّهِ مَا وَقَعْتُ فِي كُرْبَةٍ مِنْ دِينِهِ إِلَّا قُلْتُ : يَا مَوْلَى الزُّبَيْرِ أَقْضِ عَنْهُ دَيْنَهُ فَيَقْضِيَهُ . قَالَ : فَقَتِلَ الزُّبَيْرُ وَلَمْ يَدَعْ دِينَارًا وَلَا دِرْهَمًا إِلَّا أَرْضَيْنِ ، مِنْهَا الْغَابَةُ وَإِحْدَى عَشْرَةَ دَارًا بِالْمَدِينَةِ ، وَدَارَيْنِ بِالْبَصْرَةِ ، وَدَارًا بِالْكُوفَةِ ، وَدَارًا بِمِصْرَ . قَالَ : وَإِنَّمَا كَانَ دَيْنُهُ الَّذِي كَانَ عَلَيْهِ أَنَّ الرَّجُلَ كَانَ يَأْتِيهِ بِالْمَالِ فَيَسْتَوِدِعُهُ إِيَّاهُ فَيَقُولُ الزُّبَيْرُ : لَا ، وَلَكِنْ هُوَ سَلَفٌ إِنِّي أَخْشَى عَلَيْهِ الضَّيْعَةَ . وَمَا وَلِي إِمَارَةً قَطُّ وَلَا جَبَايَةً وَلَا شَيْئًا إِلَّا أَنْ يَكُونَ فِي غَزْوٍ مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ أَوْ مَعَ أَبِي بَكْرٍ وَعُمَرَ وَعُثْمَانَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ ، قَالَ عَبْدُ اللَّهِ : فَحَسِبْتُ مَا كَانَ عَلَيْهِ مِنَ الدَّيْنِ فَوَجَدْتُهُ أَلْفِي أَلْفٍ وَمِائَتِي أَلْفٍ ! فَلَقِي حَكِيمُ بْنُ حِزَامٍ عَبْدَ اللَّهِ بْنَ الزُّبَيْرِ فَقَالَ : يَا أَبْنَ أَخِي كَمْ عَلَى أَخِي مِنَ الدَّيْنِ ؟ فَكَتَمْتُهُ وَقُلْتُ : مِائَةٌ أَلْفٍ . فَقَالَ حَكِيمٌ : وَاللَّهِ مَا أَرَى أَمْوَالَكُمْ تَسَعُ هَذِهِ . فَقَالَ عَبْدُ اللَّهِ : أَرَأَيْتَكَ إِنْ كَانَتْ أَلْفِي أَلْفٍ ؟ وَمِائَتِي أَلْفٍ ؟ قَالَ : مَا أَرَاكُمْ تُطِيقُونَ

هذا ، فَإِنْ عَجَزْتُمْ عَنْ شَيْءٍ مِنْهُ فَاسْتَعِينُوا بِي ، قَالَ : وَكَانَ الزُّبَيْرُ قَدْ اشْتَرَى الْغَابَةَ بِسَبْعِينَ وَمِائَةَ أَلْفٍ ، فَبَاعَهَا عَبْدُ اللَّهِ بِالْأَلْفِ وَسِتِّمِائَةِ أَلْفٍ ، ثُمَّ قَامَ فَقَالَ : مَنْ كَانَ لَهُ عَلَى الزُّبَيْرِ شَيْءٌ فَلْيُؤَاغِبْنَا بِالْغَابَةِ ، فَاتَاهُ عَبْدُ اللَّهِ بْنُ جَعْفَرٍ ، وَكَانَ لَهُ عَلَى الزُّبَيْرِ أَرْبَعَمِائَةِ أَلْفٍ ، فَقَالَ لِعَبْدِ اللَّهِ : إِنْ شِئْتُمْ تَرَكْتُهَا لَكُمْ ؟ قَالَ عَبْدُ اللَّهِ : لَا ، قَالَ : فَإِنْ شِئْتُمْ جَعَلْتُموها فيما تُؤَخَّرُونَ إِنْ إِخْرْتُمْ ، فقال عَبْدُ اللَّهِ : لَا ، قَالَ : فَاقْطَعُوا لِي قِطْعَةً ، قَالَ عَبْدُ اللَّهِ : لَكَ مِنْ هَهْنَا إِلَى هَهْنَا . فَبَاعَ عَبْدُ اللَّهِ مِنْهَا فَقَضَى عَنْهُ دَيْنَهُ وَأَوْفَاهُ ، وَبَقِيَ مِنْهَا أَرْبَعَةُ أَشْهُمٍ وَنِصْفٌ ، فَقَدِمَ عَلَى مُعَاوِيَةَ وَعِنْدَهُ عَمْرُوبُ بْنُ عُثْمَانَ ، وَالْمُنْدِرُ بْنُ الزُّبَيْرِ ، وَأَبْنُ زَمْعَةَ فَقَالَ لَهُ مُعَاوِيَةُ : كَمْ قُومَتِ الْغَابَةُ ؟ قَالَ : كُلُّ سَهْمٍ بِمِائَةِ أَلْفٍ ، قَالَ : كَمْ بَقِيَ مِنْهَا ؟ قَالَ : أَرْبَعَةُ أَشْهُمٍ وَنِصْفٌ ، فقال الْمُنْدِرُ بْنُ الزُّبَيْرِ : قَدْ أَخَذْتُ مِنْهَا سَهْمًا بِمِائَةِ أَلْفٍ ، قَالَ عَمْرُوبُ بْنُ عُثْمَانَ : قَدْ أَخَذْتُ مِنْهَا سَهْمًا بِمِائَةِ أَلْفٍ . وقال أَبُو زَمْعَةَ : قَدْ أَخَذْتُ سَهْمًا بِمِائَةِ أَلْفٍ ، فَقَالَ مُعَاوِيَةُ : كَمْ بَقِيَ مِنْهَا ؟ قَالَ : سَهْمٌ وَنِصْفُ سَهْمٍ ، قَالَ : قَدْ أَخَذْتُهُ بِخَمْسِينَ وَمِائَةِ أَلْفٍ . قَالَ : وَبَاعَ عَبْدُ اللَّهِ بْنُ جَعْفَرٍ نَصِيْبَهُ مِنْ مُعَاوِيَةَ بِسِتِّمِائَةِ أَلْفٍ ، فَلَمَّا فَرَّغَ أَبُو الزُّبَيْرِ مِنْ قِضَاءِ دَيْنِهِ ، قَالَ أَبُو الزُّبَيْرِ : أَقْسِمُ بَيْنَنَا مِيرَاثَنَا ، قَالَ : وَاللَّهِ لَا أَقْسِمُ بَيْنَكُمْ حَتَّى أَنْادِيَ بِالْمَوْسِمِ أَرْبَعَ سَنِينَ : أَلَا مَنْ كَانَ لَهُ عَلَى الزُّبَيْرِ دَيْنٌ فَلْيَأْتِنَا فَلْنَقْضِهِ . فَجَعَلَ كُلُّ سَنَةٍ يُنَادِي فِي الْمَوْسِمِ ، فَلَمَّا مَضَى أَرْبَعُ سَنِينَ قَسَمَ بَيْنَهُمْ وَدَفَعَ الثُّلُثَ . وَكَانَ لِلزُّبَيْرِ أَرْبَعُ نِسْوَةٍ ، فَأَصَابَ كُلُّ امْرَأَةٍ أَلْفٌ أَلْفٌ وَمِائَتَا أَلْفٍ ، فَجَمِيعُ مَالِهِ خَمْسُونَ أَلْفٌ أَلْفٌ وَمِائَتَا أَلْفٍ . رواه البخاري .

202. Abuu Khubayb Cabdullaah bin Zubayr (A.K.R.) wuxuu sheegay (in bishii Jamaadul Awwal, sannadkii 36aad ee Hijriyada) isagoo markaa Zubayr u socda inuu ka qayb galo dagaalkii Jamal inta uu ii soo cid diray, baan aaday, oo ag istaagay. Wuxuu igu yiri: Maandhow ama kan dulmi wadeenka ah baa la dili maanta ama kan la dulmay. Waxaana hubaa in maanta la i dili doono anigoo dulmane ah . Waxaan aad uga wal walsanahay hab qaybinta maalkeyga. Ma kula tahay inay wax ka soo harayaan guryaha iyo dhalkeyga marka deynta la igu leeyahayay la bixiyo? Dabadeedna wuxuu yiri: Maandhow deynta iga bixi markaad iibiso hantideyda ma guurtda ah. Markaad deynta iga bixiso hadday wax soo haraan saddex meelood oo meelna waa uu ka dardaarmay oo waa dhaxal, saddex meeloodkeed yacni marka sagaal meelood laga

dhigo meel (wixii soo hara) waxaa leh wiilashaada (Wiilasha Cabdullaah bin Zubayr). Intaa kaddib haddii wax siyaado ah ay soo haraan, seddex meeloodka baaqigan waxaa leh wiilashaada (wiilasha Cabdullah). Hishaam wuxuu yiri wiilashii Cabdullaahi qaarkood waxay ku da' ahaayeen Khubaib iyo Cabbaad oo uu dhalay Zubayr, wuxuuna lahaa 9 wiil iyo 9 gabdhood. Wuxuu intaa ii sharxayey sida maalkiisa loo qaybin lahaa, markaa kaddib buu wuxuu yiri: Maandhoow, haddii ay dhacdo in aad deynta wax ka mid ah bixin weydo, la kaasho sayidkeyga aan muto, kaalmona weydiiso. garan-na aan mayn wuxuu ula jeedo mudaneheyga sayidkeyga ah jeer aan weydiyey oo iri Aabboow mudanahaagu waa kee ?wuxuu yiri: Waa ' Alle' Aniguna sidaa uu igula dardaarmay baan yeelay oo markastoo ay dhib igu noqoto inaan gudo qayb ka mid ah deyntiisa, waxaan ku duceysanayey oo aan lahaa: " Zubayr Gacaliyihiiisa iyo Gargaarihiisow deynka ka gud oo ka bixi. " Waana ka bixinayey. Zubeyr waa la diley oo shahiiday. Markii uu dhintayna kama tagin Dirham iyo Diinnaar (yacni wax lacag caddaan ah) ee wuxuu ka tagay dhulal xoogaa ah, oo midkood ku yiil Qaabah, iyo kow iyo toban daar oo Madiina ku yiil iyo labo daarood oo ku yiil Basra iyo daar ku tiil Kuufah, iyo mid ku tiil Masar. Deynta uu qabaana waxay ku timid haddii uu qof u yimaado, isagoo weydiisanaya inuu wax uu leeyahay ammaano ahaan ugu hayo. Zubayr (A.K.R.) ma oggolaan jirin inuu kaga aqbalaa ammaana ahaan, baqdin uu ka qabo inay lunto awgeed wuxuuse u qaadan jiray deyn ahaan. Weligiisna ma aqbalin inuu jago madaxtinnimo ah qabto, ama jago ah sako soo ururiye. wuxuu lahaa sharafta inuu kala qayb gelay duulli-maadyo xaq iyo jihaad dar Alle ah nebiga (S.C.W.) , Abuu Bakar , Cumar iyo Cusmaan (A.K.R.) (qaniimona qayb wuu ku yeeshay, oo xoolo waa ka soo galeen) . Cabdullaahi Wuxuu diyaariyey qoraal deymaha aabbihiis la xiriira waxayna gaareen laba malyan iyo laba boqol oo kun. Xakiim ibn Xisaam oo aan kulannay baa yiri: Adeer intee walaalkay lagu leeyahay deyn ahaan? Anigoo ka qarinaya xaaladda jidha baan waxaan iri: boqol kun, Xakiim wuxuu yiri: Ma filayo in maalkiinnu qiimahaa dabooli karo. Waxaan iri : Ka warran haddaba hadday tahay labo malyan iyo laba boqol oo kun? Wuxuu yiri: Ma filayo inaad taas itaal u heli kadhaan, haddii ay dhacdo inaad bixin weydaan qayb ka mid ah, ila soo xiriira si aan gacan uga geysto.

Zubeyr wuxuu kala soo baxay awel dhulka ku yaal Qaabah boqol iyo toddobaatan kun. Cabdullaahi wuxuu ku iibiyey hal malyan iyo lix boqol oo kun, Dabadeedna wuxuu ogeysiis ku bixiyey :Qofkii Zubayr wax ku lahaa ha noogu yimaado Qaabah. Cabdullaah bin Jacfar baa u yimid oo yiri: Waxaan ku lahaa Zubeyr afar boqol oo kun, waase idiin deynayaa, haddii aad rabtaan

Cabdullaahi wuxuu yiri: Maya, ma doonayo inaad cafido. Ibn Jac-

far wuxuu yiri: Haddaas waa dambaynayaa, oo diyaar baan u ahay inaan dib idiin kaga dhigo haddaad doontaan. Cabdullaahi wuxuu yiri: Maya , taa xitaa ma doonayo. Ibn Jacfar wuxuu yiri: Marka dhulka qaar ii gooya. Isla markiibaa Cabdullaahi dhulkii buu u cabbirey oo ku yiri: halkaan ilaa halkaasaad leedahay. Habkaa buu Cabdullaah ku guday oo kaga baxshay deynkii aabihi Zubayr isagoo iibiyey dhulalkiisii. Markii uu deyntii baxshay aabihi baa waxaa haray afar jaamood iyo bar. Markaa kaddib Cabdullaah wuxuu booqday Amiir Mucaawiye oo ay la joogeen markaa Camar ibn Cusmaan, Mundir Ibn Zubayr iyo ibn Zamcah. Mucaawiyaa wuxuu weydiiyey Cabdullaah ibn Zubayr inta lagu qiimeeyey dhulka Qaabah ku yaal? Wuxuu ku jawaabay Cabdullaah waa boqol kun jaamadiiba. . Markaa buu Mucaawiye wuxuu weydiiyey intee haatan ka haray dhulka ? Cabdullaah wuxuu yiri: Afar jaamood iyo bar. Mundir ibn Zubayr baa wuxuu yiri: Jaan anaa ku qaatay boqol kun . Camar ibn Cusmaanna wuxuu yiri: anna jaan baan ku qaatay boqol kun. ibn Samcana wuxuu yiri: Aniguna jaam baan ku qaadanayaa boqol kun. Mucaawiye wuxuu yiri markaa kaddib: Intee in le'eg baa dhulkii ka haray ?Cabdullaah ibn Zubair wuxuu yiri: Hal jaan iyo bar. Mucaawiyaa iyana ku qaatay boqol iyo konton kun. Waa dambe buu Cabdullaah ibn Jacfar wuxuu intiisii ka sii iibiyey Mucaawiye oo ka siiyey lix boqol oo kun .

(Weriyeaasha xadiiska waxay sheegaan in Cabdullaah bin Jacfar dhulkaa loo siiyey deyntii uu ku lahaa Zubar awgi uu ka iibiyey Amiir Mucaawiye kuna siiyey lix boqol oo kun halkaas oo uu ka faa'iday laba boqol oo kun) . Markii uu Cabdullaah ibn Zubair dhammeeyey deyntii bay carruurtii Zubayr (A.K.R.) yiraahdeen; Dhaxalka iyo wuxuu odayga ka tagay intii hartay inoo qaybi. Laakiinse Cabdullaah ibn Zubayr wuxuu yiri: Alle baan ku dhaaran inaan idiin qaybinayn jeer aan afar xaj oo xiriir ah aan yaboohiyo hadday jidho cid wax ku leh Zubayr inay inoo yimaadaan oo xaqooda qaataan haddii ay jiraan wax deyn ama xaq ay ku leeyihiin. Sidaa buu yeelay oo arrintaa wuxuu naadinayey muddo afar sano ah. dabadeedna wuxuu u qaybiyey dhaxalkii warasadii Zubayr (A.K.R.) hab waafaqsan sidoo loo faray. Zubayr afar xaas buu lahaa mid walbaa waxay heshay hal malyan iyo laba boqol oo kun. Isu geynna maalkiisa oo dhammi wuxuu noqday konton malyan iyo laba boqol oo kun oo Dirham " .

(Bukhaari)

Fiiro gaar ah: Xilka iyo ammaanada oo la guto iyo wixii lagu balamay oo laga soo baxo , waa qodobka aasaaska u ah howl iyo heshiis kasta. Ujeeddaduna waa inuu qofku yeesho damiir nool oo garowsada xilalka iyo waajibaadka saaran una gutaa si ammaana leh iyo hufnaan. Qofkuna waa inuu xuquuqda ay dadka leeyihiin siiyaa oo u oofiyaa dib u dhig la'aan. Taas baana la yiraahdaa ammaano.

Alle weyne kor ahaaye, wuxuu ku magacaabay waxyaabaha ad-duunka ka jira ee galladiisa ah dadka uu ku manneystay ammaanoooyin. Taana macnaheedu waxaa weeye in waxa adduunka ka jira oo idil iyo arrimaheeda inuu ammaano ahaan inoogu dhiibay, sidaa awgeed waxaa nalaka doonayaa inaan ka soo baxno oo gudanno xilka iyo waajibaadka aan qaadnay Alle xaggiisa si daacadnimo ku jidho iyo hufnaan, haddaynu taa fali weynana waxaa naloola dhaqmayaa sida khaa'imiin xil gab ah, iyo ammaana dayac.

٢٦ - باب تحريم الظلم والأمر برد المظالم

C U T U B K A 26

REEBIDDA DULMIGA IYO XUMAHA IYO KA HORTAG-GOODA IYO IN DHIDBAHA LOO JARO

Alle kor weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ مَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ حَمِيمٍ وَلَا شَفِيعٍ يُطَاعُ ﴾ [غافر : ١٨] .

99. " (Goorta) ay daallimiintu waayayaan wax saaxiib ah, iyo shafeeco qaade la maqlo" .Suuradda Qaafir: Aayadda 18.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَمَا لِلظَّالِمِينَ مِنْ نَصِيرٍ ﴾ [الحج : ٧١] .

100. " Daallimiintu wax u hiiliyo malaha " Suuradda Al-Xaj : Aayadda 71.

Xadiisyadana waxaa ka mid ah, xadiiskii ugu dambeeyey cinwaan-kii ahaa dadaalka oo uu weriyey Abu Darr (A.K.R.), waa xadiiska tiradiisu tahay 111, cutubka 11.

٢٠٣ - وعن جابر رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « اتَّقُوا الظُّلْمَ فَإِنَّ الظُّلْمَ ظُلُمَاتٌ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، وَاتَّقُوا الشُّحَّ فَإِنَّ الشُّحَّ أَهْلَكَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ ؛ حَمَلَهُمْ عَلَى أَنْ سَفَكُوا دِمَاءَهُمْ وَأَسْتَحَلُّوا مَحَارِمَهُمْ » رواه مسلم .

203. Jaabir bin Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: " Nebiga (S.C.W) wuxuu yiri: ' Iska jira xaqdarrada, maalinta qiyaamo xaq-

darradu waxay noqon oo isu beddeli gudcurro badan oo madow iyo mugdi badan, kana ilaasha naftiinna oo iska jira mudulnimada iyo nafjecleysiga (maal iyo madaxtinnimo jaceyl) , nafjecleysi iyo mudulnimo waxay rogtay qoomankii idin ka horreeyey oo ku kalliftay inay dhiig iska qubaan oo wixii ka xaaraansanaa xalaasha-daan". (Muslim)

٢٠٤ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « لَتَوَدُّنَّ الْحُقُوقَ إِلَى أَهْلِهَا يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، حَتَّى يُقَادَ لِلشَّاةِ الْجَلْحَاءِ مِنَ الشَّاةِ الْقَرْنَاءِ » رواه مسلم .

204. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Wax walbaa waa loo kala xaq qaadayaa , Qof walibana Alle xaqiisa waa uu kaga gudayaa kii ka duudsiyey. ilaa rida seenyoon looga xaq qaado oo looga gooyo wixii dulmi ka soo gaaray rida geesaha leh" . (Muslim)

٢٠٥ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما قال : كُنَّا نَتَحَدَّثُ عَنْ حَجَّةِ الْوَدَاعِ وَالنَّبِيِّ ﷺ بَيْنَ أَظْهُرِنَا ، وَلَا نَدْرِي مَا حَجَّةُ الْوَدَاعِ حَتَّى حَمِدَ اللَّهُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ وَأَثْنَى عَلَيْهِ ثُمَّ ذَكَرَ الْمَسِيحَ الدَّجَالَ فَاطْنَبَ فِي ذِكْرِهِ ، وَقَالَ : « مَا بَعَثَ اللَّهُ مِنْ نَبِيٍّ إِلَّا أَنْذَرَهُ أُمَّتَهُ ؛ أَنْذَرَهُ نُوحٌ وَالنَّبِيُّونَ مِنْ بَعْدِهِ ، وَإِنَّهُ إِنْ يَخْرُجَ فِيكُمْ فَمَا خَفِيَ عَلَيْكُمْ مِنْ شَأْنِهِ فَلَيْسَ يَخْفَى عَلَيْكُمْ ، إِنْ رَبَّكُمْ لَيْسَ بِأَعْوَرَ وَإِنَّهُ أَعْوَرَ عَيْنِ الْيَمْنَى ، كَانَ عَيْنُهُ عَيْنَةً طَافِيَةً . أَلَا إِنَّ اللَّهَ حَرَّمَ عَلَيْكُمْ دِمَاءَكُمْ وَأَمْوَالَكُمْ كَحُرْمَةِ يَوْمِكُمْ هَذَا ، فِي شَهْرِكُمْ هَذَا ، أَلَا هَلْ بَلَّغْتُ ؟ قَالُوا : نَعَمْ ، قَالَ : « اللَّهُمَّ أَشْهَدُ » ثَلَاثًا « وَبِلَكُمْ - أَوْ وَبِحُكْمِ - ، انظروا : لَا تَرْجِعُوا بَعْدِي كُفَّارًا يَضْرِبُ بَعْضُكُمْ رِقَابَ بَعْضٍ » رواه البخاري ، وروى مسلم بعضه .

205. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Maalin, kulan uu innagu wehliyey nabigu (S.C.W.) waxaynu ka sheekaysanaynay xajka sagootiga mana garanayn waxa loola jeeday, jeer Nebigu (S.C.W.) (istaagey oo Alle mahdiyey oo ammaanay oo misna Masiixud-Dajaal (Sheydaanka isha tiran ee wareegaya shartana badan) ka sheekeeyey oo ku dheeraaday oo yiri: " Ma uu jiro Nebi Alle soo diray aan ummaddiisii uga digin (shartiisa) , Nuux baana uga digey iyo Nebiyadii ka dambeeyey oo dhan. Haddii uu idinku soo baxana , xalkiisa idinkama qarsoomayo. Sidaad og tihiin Rabbigiin ma il la'a , meesha uu Dajaalku il la'yahay. isha midig baa cad oo u eg mir canab ah oo buqsan. Is jira, Alle wuu idinka xaaraantimeeyey inaad dhiig iska daadisaan, ama maalkiinna iska dhacdaan; Arrimahaasi

waa xaaraan caaggaan inaad ku xadgudubtaan sida uu xadgudubka uga xaaraameeyey maalintaan iyo bishaan , iyo beladkaan (Makka) aad joogtaan. Nin walbow is ilaali ! Mawaanan idin gaarsiin (oo aan idin barin awaamirta Alle oo dhan iyo wuxuu idin faray) Asxaabtii waxay yiraahdeen: Haah. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alloow ka marag ahow " seddex jeerna ku celceliyey weedhaas . Wuxuuna hadalkiisii ku gunaanuday: iga dhuuxa waxaan idin leeyahay! waa inaydaan gaalo noqon dabadey (marka la i oofsado) , oo ha billaabina inaad isdishaan oo iska daadisaan dhiig dhexdiinna. (Bukhaari iyo Muslim oo qayb ka wariyey xadiiska).

٢٠٦ - وعن عائشة رضي الله عنها أن رسول الله ﷺ قال : « مَنْ ظَلَمَ قَيْدَ شِبْرٍ مِنَ الْأَرْضِ طَوْقَهُ مِنْ سَبْعِ أَرْضِينَ » متفقٌ عليه .

206. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: " Nebiga (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii xaqdarro ku qaata taako dhulka ka mid ah , wuxuu Alle ku cadaabaa maalinta qiyaamo in loo suro toddoba dhul qoortiisa". (yacni wixii uu xaqdarrada ku qaatay) (Bukhaari iyo Muslim)

٢٠٧ - وعن أبي موسى رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ اللَّهَ لَيَمْلِي لِلظَّالِمِ ، فَإِذَا أَخَذَهُ لَمْ يُفْلِتْهُ » ، ثُمَّ قَرَأَ : ﴿ كَذَلِكَ أَخْذُ رَبِّكَ إِذَا أَخَذَ الْقُرَى وَهِيَ ظَالِمَةٌ إِنَّ أَخْذَهُ أَلِيمٌ شَدِيدٌ ﴾ [هود : ١٠٢] متفقٌ عليه .

207. Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle dulmiilaha waa u kaadiyaa oo wax tilaabo ah kama qaado (si uu koobka dambiyadiisa ugu buuxsamo) , dabadeedna markii uu qabto si uu uga gooyo oo ugu qaado dambigiisa, ma sii daayo. Markaa buu wuxuu akhriyey aayaddan Qur'aanka:

" Waa sidaasoo kale qabashada Rabbigaa, markii uu beel daalimad ah qabto. Qabashadiisu waa mid adag oo xanuun badan ". (Bukhaari iyo Muslim)

٢٠٨ - وعن معاذ رضي الله عنه قال : بَعَثَنِي رَسُولُ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ : « إِنَّكَ تَأْتِي قَوْمًا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ فَادْعُهُمْ إِلَى شَهَادَةِ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَنِّي رَسُولُ اللَّهِ ، فَإِنْ هُمْ أَطَاعُوا لِذَلِكَ فَأَعْلِمُهُمْ أَنَّ اللَّهَ قَدِ افْتَرَضَ عَلَيْهِمْ خَمْسَ صَلَوَاتٍ فِي كُلِّ يَوْمٍ وَنَيْلَةٍ ، فَإِنْ أَطَاعُوا لِذَلِكَ فَأَعْلِمُهُمْ أَنَّ اللَّهَ قَدِ افْتَرَضَ عَلَيْهِمْ صَدَقَةً تُؤْخَذُ مِنْ أَعْيُنِيائِهِمْ فَرُدُّ عَلَى قُرَائِهِمْ ، فَإِنْ هُمْ أَطَاعُوا لِذَلِكَ فَإِيَّاكَ وَكُرَائِمَ أَمْوَالِهِمْ

وَأَتَتْ دَعْوَةَ الْمَظْلُومِ فَإِنَّهُ لَيْسَ بَيْنَهَا وَبَيْنَ اللَّهِ حِجَابٌ « متفقٌ عليه .

208. Mucaad ibn Jabal (A.K.R.) wuxuu yiri: " Nebiga (S.C.W.) baa wuxuu ii magacaabay (Guddoomiyaha Yaman) oo wuxuu igu yiri: Xusuusnow! Waxaad u tegi doontaa qoon ehlu kitaab ah (Yuhuud iyo Kirishtaan) ee waxaad ugu yeertaa inay qiraan ilaah xaq aan Alle ahayni inuusan jirin, iyo inaan anigu Rasuulkii Alle ahay. Markii ay aqbalaan taa, u sheeg in Alle ku waajibiyeey shan salaadood maalintii iyo habeenkii, Markii ay aqbalaan tani markaa u sheeg in Alle ku waajibiyeey sako, kuwooda wax leh laga qaadayo oo la siinayo kuwooda aan wax haysan ee saboolka ah. Markii ay kaa oggoladaan taa, ha ka qaadin hantidooda kuwa u wanaagsan ee isha lagu hayo sako ahaan. Iskana jir habaarka qofka dulman, maxaa yeelay lagama soo cesho xag Alle." .
(Bukhaari iyoMuslim)

٢٠٩ - وعن أبي حميد عبد الرحمن بن سعد الساعدي رضي الله عنه قال :
أَسْتَعْمَلُ النَّبِيَّ ﷺ رَجُلًا مِنَ الْأَزْدِ يُقَالُ لَهُ : ابْنُ اللَّتْبِيَةِ عَلَى الصَّدَقَةِ ، فَلَمَّا قَدِمَ
فَالَ : هَذَا لَكُمْ ، وَهَذَا أُهْدِي إِلَيَّ ، فَقَامَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ عَلَى الْمِنْبَرِ فَحَمِدَ اللَّهَ
وَأَثْنَى عَلَيْهِ ، ثُمَّ قَالَ : « أَمَا بَعْدُ ، فَإِنِّي أَسْتَعْمِلُ الرَّجُلَ مِنْكُمْ عَلَى الْعَمَلِ مِمَّا
وَلَانِي اللَّهُ ، فَيَأْتِي فَيَقُولُ : هَذَا لَكُمْ وَهَذَا هَدِيَّةٌ أُهْدِيَتْ إِلَيَّ ، أَفَلَا جَلَسَ فِي بَيْتِ
أَبِيهِ أَوْ أُمِّهِ حَتَّى تَأْتِيَهُ هَدِيَّتُهُ إِنْ كَانَ صَادِقًا !! وَاللَّهِ لَا يَأْخُذُ أَحَدٌ مِنْكُمْ شَيْئًا بِغَيْرِ حَقِّهِ
إِلَّا لَقِيَ اللَّهَ تَعَالَى يَحْمِلُهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، فَلَا أَعْرِفَنَّ أَحَدًا مِنْكُمْ لَقِيَ اللَّهَ يَحْمِلُ بَعِيرًا
لَهُ رُغَاءٌ ، أَوْ بَقْرَةً لَهَا خُورٌ ، أَوْ شَاةٌ تَيْعُرُ » ثُمَّ رَفَعَ يَدَيْهِ حَتَّى رُؤِيَ بَيَاضُ إِبْطِئِهِ
فَقَالَ : « اللَّهُمَّ هَلْ بَلَغْتُ » متفقٌ عليه .

209. Abuu Xumayd Cabdur Raxmaan Ibn Saadis-Saacidi (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W.) Wuxuu u xilsaaray nin reer Azdi ah oo la yiraahdo Ibn Lutbiyya inuu soo ururiyo sako. Markii uu ku soo laabtay (Madiina) ibn Lutbiyya buu yiri: Intaan tirada badan adaa leh, waa waxa aan soo ururiyeey sako ahaan, intaan oo dhanna hadiyad ahaan anaa la i soo siiyey. Sidaa markuu yiri buu Nebigu (S.C.W.) inta kacay oo minbarka fuulay buu jeediyey khudbo. Wuxuu marka hore ammaanay oo hufay Alle dabadeetana yiri intaas kaddib: Waxaan wakiishay midkiin si uu howl iigu soo qabto ah xilkii Alle i dhiibey. Markii uu howsha soo bogo buu ninkaa soo laabanayaa isagoo leh: intaa waa xoolihiinnii, intaanna anaa la i soo siiyey hadiyad ahaan. Haddii uu run sheegayo muxuu guriga hooyadi ama Aabbihi u fariisan waayey illaa uu qof ugu yimaado,

oo hadiyado u keena! Alle baan ku dhaaran qofkii wax aan xaqiisii ahayn qaata, wuxuu maalinta qiyaame Alle la kulmayaa isagoo dhabarka ku sida wixii uu ku qaatay xaqdarrada. ee yaanan arag qof idin ka mid ah oo Alle la kulmay isagoo xambaarsan hal guuxaysa ama lo' qeelyeysa ama ri ciyeysa (macnaha isagoo ku laran xoolihii iyo hantidii uu xaqdarrada ku qaatay) . Dabadeedna isagoo gacmahiisa kor u qaadaya ilaa caddaanta kilkiilooyinkiisu muuqdeen , buu wuxuu yiri: ' Alloow ma gaarsiiyey wixii aad i fartay ' oo seddex jeer ku celceliyey. (Bukhaari iyo Muslim)

٢١٠ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « مَنْ كَانَتْ عِنْدَهُ مَظْلَمَةٌ لِأَخِيهِ مِنْ عَرَضِهِ أَوْ مِنْ شَيْءٍ فَلْيَتَحَلَّلْهُ مِنْهُ الْيَوْمَ قَبْلَ أَنْ لَا يَكُونَ دِينَارٌ وَلَا دِرْهَمٌ ؛ إِنْ كَانَ لَهُ عَمَلٌ صَالِحٌ أُخِذَ مِنْهُ بِقَدْرِ مَظْلَمَتِهِ ، وَإِنْ لَمْ يَكُنْ لَهُ حَسَنَاتٌ أُخِذَ مِنْ سَيِّئَاتٍ صَاحِبِهِ فَحُمِلَ عَلَيْهِ » رواه البخاري .

210. Abuu Hurayrah (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qof kastoo Muslim ah oo walaalkiis xaq darro ka wadoow, ha ahaato sharafkiisa oo uu meel kaga dhacay , ama wax kaleba'e ha is kala xaalo oo cafis ha ka helo maanta (inta adduunka la joogo) inta aanay iman waqti uusan heysaneyn Dirham iyo Diihaar toonna (yacni qofku uusan shilinna heysan). Haddii dulmiilaha u leeyahay wax camal wanaagsan ah (oo xisaabtiisa ku jidha) waxaa laga goynayaa xisaabtiisa in xaq darradii le'eg, haddii uusan dulmilaha camal wanaagsan lahayna , dembiyadii kii la dulmay lahaa baa xisaabta dulmilaha lagu darayaa in xaq darradii uu ka galay le'eg." (Bukhaari)

٢١١ - وعن عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما عن النبي ﷺ قال : « الْمُسْلِمُ مِنَ سَلِمَ الْمُسْلِمُونَ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ ، وَالْمُهَاجِرُ مَنْ هَجَرَ مَا نَهَى اللَّهُ عَنْهُ » متفق عليه .

211. Cabdullaah ibn Camar ibn al-Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Muslim waxaa ah qofkii ay afkiisa iyo addinkiisa muslimiintu ka nabad galaan, Muhaajirna waxaa ah qofkii ka hara oo ka taga wixii Alle ka reebay.' (Bukhaari iyo Muslim)

٢١٢ - وعنه رضي الله عنه قال : كَانَ عَلَى ثَقَلِ النَّبِيِّ ﷺ رَجُلٌ يُقَالُ لَهُ كِرْكِرَةٌ فَمَاتَ فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « هُوَ فِي النَّارِ » فَذَهَبُوا يَنْظُرُونَ إِلَيْهِ فَوَجَدُوا عَبَاءَةً قَدْ غَلَّهَا رَوَاهُ الْبُخَارِيُّ .

212. Wuxuu kaloo yiri saxaabigaa kor ku xusan : Nin la yiraahdo Kirkira oo u xilsaanaa arrimaha ku gaarka ah nebiga (S.C.W.) baa dhintay . Nabiguna (S.C.W.) wuxuu yiri: Naartuu galay. Asxaabtii rasuulka (S.C.W.) baa waxay aadeen guriga ninkaa dhintay, si ay u soo eegaan arrinta taa keentay mise waxay ka heleen ci-maamad uu xaday". (Bukhaari)

٢١٣ - وعن أبي بكره نُفَيْعِ بْنِ الْحَارِثِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنِ النَّبِيِّ ﷺ قَالَ : « إِنَّ الزَّمَانَ قَدْ اسْتَدَارَ كَهَيْئَةِ يَوْمٍ خَلَقَ اللَّهُ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ : السَّنَةُ اثْنَا عَشَرَ شَهْرًا ، مِنْهَا أَرْبَعَةٌ حُرْمٌ : ثَلَاثٌ مُتَوَالِيَاتٌ : ذُو الْقَعْدَةِ وَذُو الْحِجَّةِ وَالْمُحَرَّمُ ، وَرَجَبٌ مُضَرٌ الَّذِي بَيْنَ جُمَادَى وَشَعْبَانَ ، أَيُّ شَهْرٍ هَذَا ؟ قُلْنَا : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ ، فَسَكَتَ حَتَّى ظَنْنَا أَنَّهُ سَيَسْمِيهِ بِغَيْرِ اسْمِهِ قَالَ : « أَلَيْسَ ذَا الْحِجَّةِ ؟ » قُلْنَا : بَلَى . قَالَ : « فَأَيُّ بَلَدٍ هَذَا ؟ » قُلْنَا : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ ، فَسَكَتَ حَتَّى ظَنْنَا أَنَّهُ سَيَسْمِيهِ بِغَيْرِ اسْمِهِ قَالَ : « أَلَيْسَ الْبَلَدَةَ ؟ » قُلْنَا : بَلَى . قَالَ : « فَأَيُّ يَوْمٍ هَذَا ؟ » قُلْنَا : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ ، فَسَكَتَ حَتَّى ظَنْنَا أَنَّهُ سَيَسْمِيهِ بِغَيْرِ اسْمِهِ . قَالَ : « أَلَيْسَ يَوْمَ النَّحْرِ ؟ » قُلْنَا : بَلَى . قَالَ : « فَإِنَّ دِمَاءَكُمْ وَأَمْوَالَكُمْ وَأَعْرَاضَكُمْ حَرَامٌ ، كَحُرْمَةِ يَوْمِكُمْ هَذَا فِي بَلَدِكُمْ هَذَا فِي شَهْرِكُمْ هَذَا ، وَاسْتَلْقُونَ رَبِّكُمْ فَيَسْأَلُكُمْ عَنْ أَعْمَالِكُمْ ، أَلَا فَلَا تَرْجِعُوا بَعْدِي كُفَارًا يَضْرِبُ بَعْضُكُمْ رِقَابَ بَعْضٍ ، أَلَا لِيَبْلُغَ الشَّاهِدُ الْغَائِبَ ، فَلَعَلَّ بَعْضٌ مَن يَبْلُغُهُ أَنْ يَكُونَ أَوْعَى لَهُ مِنْ بَعْضٍ مَن سَمِعَهُ » ثُمَّ قَالَ : « أَلَا هَلْ بَلَّغْتُ ؟ أَلَا هَلْ بَلَّغْتُ ؟ » قُلْنَا : نَعَمْ . قَالَ : « اللَّهُمَّ أَشْهَدُ » متفقٌ عليه .

213. Abuu Bakar Nufayc ibn Xaaris (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Waqtigu wuxuu ku socdaa sidii loogu tala galay tan iyo maalintii Alle Abuuray cirarka iyo dhulka.Sannadku wuxuu ka kooban yahay laba iyo taban bilood oo afar bilood da-gaal iyo dulmi caaggan yahay (afartaa bilood) ay seddex isku xi-gaan waxayna kala yihiin: : Dul Qacdah, Dul Xaj iyo Muxarram, bilna waa Rajab oo u dhexaysa jamaadka dambe iyo Shacbaan,

oo ah bishii ku weyneyd oo ay dagaal iyo dulmiba aad uga caagayeen dhexdeeda qabiilka Mudar. Nabigu (S.C.W.) baa dabadeed wuxuu weydiiyey: Bishaanu waa tuma? Waxaynu niri: Alle iyo Rasuulkiisaa og. Sidaa markaynu niri buu cabbaar aamusay ilaa aan is niri magac hor leh buu u bixin doonaa bishan. Markaa buu wuxuu yiri: Sow Dul Xaj ma aha? Waxaynu niri: Haah, way tahay. Dabadeedna wuxuu na weydiiyey: Maxaa la yiraahdaa baladkan? Waxaynu niri: Alle iyo Rasuulkiisaa og. Markaasuu cabbaar aamusay ilaa aan is niri magac hor leh buu siin doonaa. Dabadeedna wuxuu yiri: Sow beledkii caagganaa ma aha (in dagaal iyo dulmi lagu dhex sameeyo). Waxaynu niri: Haah wuu yahay. Dabadeedna wuxuu na weydiiyey: Maanta waa maalinma? Waxaynu niri: Alle iyo rasuulkiisaa og. Markaasuu haddana cabbaar aamusay ilaa aan isniri magac hor leh buu siin doonaa. Dabadeedna wuxuu yiri: Sow maalintii gawraca xoolaha ma aha? Waxaynu niri: Haah. Markaa buu wuxuu yiri: Dhiiggiinna iyo maalkinna iyo sharaftiinnuba waa idinka caaggan yihiin oo waa xaaraan inaad isku xad gudubtaan, sida ay u caaggan yihiin xadgudubka, dulmigu-na xaaraan u yahay maalintiinaan iyo magaaladiinaan iyo bishiinna tanba. Ma foga maalinta aad Alle la kulmi doontaan. Wuuna idiin xisaabinayaa oo qof walba iyo waa camalkiisa intuu adduunka joogay. Sidaa awgeed is jira oo ha noqonnina dabaday gaalo qaar-kiinba qaar dilayo. Kuwiinna hadda goob joogga ahi ha gaarsiiyeen fartiintan kuwa maqan. waxaa laga yaabaa mid la gaarsiiyey inuu uga dhug roonaada kan dhagaysanaya. Misna wuxuu yiri: "Markaa kaddib buu laba jeer weydiiyey: Ma waanan idin soo gaarsiin wuxuu Alle idin faray" Waxaynu niri: Haah, Gacaliye. Wuxuu markaa yiri: Alloow marag ahoow". (Bukhaari iyo Muslim)

٢١٤ - وعن أبي أمامة إياس بن ثعلبة الحارثي رَضِيَ اللهُ عَنْهُ أَنَّ رَسُولَ اللهِ ﷺ قَالَ: « مَنْ اقْتَطَعَ حَقَّ امْرِئٍ مُسْلِمٍ بِيَمِينِهِ فَقَدْ أَوْجَبَ اللهُ لَهُ النَّارَ ، وَحَرَّمَ عَلَيْهِ الْجَنَّةَ ؛ فَقَالَ رَجُلٌ : وَإِنْ كَانَ شَيْئاً يَسِيرًا يَا رَسُولَ اللهِ ؟ فَقَالَ : « وَإِنْ قَضِيًّا مِنْ أَرَاكَ » رواه مسلم .

214. Abuu Umaamah Iyaas ibn Thaclaba (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle wuxuu u waajibiyey naar oo uu gelin, qofkii qof Muslim ah xaqiisa ku duudsiya oo kaga qaada dhaar been ah, waana ka xaaraatinimeeyey jannada. Saxaabi baa yiri: Rasuul Alloow, ma xitaa haddii ay wax yar yihiinna. Wuxuu yiri nabigu (S.C.W.): Xataa haddii uu yahay caday (qori geed laga jabsado)". (Muslim)

٢١٥ - وعن عَدِيِّ بْنِ عُمَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ :
 « مَنْ اسْتَعْمَلَنَاهُ مِنْكُمْ عَلَى عَمَلٍ ، فَكَتَمْنَا مَخِيطًا ، فَمَا فَوْقَهُ ، كَانَ غُلُولًا يَأْتِي بِهِ
 يَوْمَ الْقِيَامَةِ » فَقَامَ رَجُلٌ أَسْوَدٌ مِنَ الْأَنْصَارِ ، كَأَنِّي أَنْظُرُ إِلَيْهِ ، فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ
 أَقْبَلْ عَنِّي عَمَلِكَ ، قَالَ : « وَمَا لَكَ ؟ » قَالَ : سَمِعْتُكَ تَقُولُ كَذَا وَكَذَا ، قَالَ :
 « وَأَنَا أَقُولُهُ الْآنَ : مَنْ اسْتَعْمَلَنَاهُ عَلَى عَمَلٍ فَلْيَجِيءْ بِقَلْبِهِ وَكَثِيرِهِ ، فَمَا أُوتِيَ مِنْهُ
 أَخَذَ ، وَمَا نُهِيَ عَنْهُ أَنْتَهَى » رواه مسلم .

215. Caddiyy ibn Cumayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: Markii aan u magacaabo qof idinka mid ah shaqo, haddii uu qofkaa iga qarsado xitaa cirbad iyo wax ka yar. Falkaa waa ku tuugo; wuuna keeni doonaa waxaa maalinta qiyaamo. Markaasaa nin madow oo Ansaar ka mid ah baa istaagey nabiga (S.C.W.) horti, waa sida anigoo arkaya sida aan u xusuusto, kaa oo yiri: Rasuul Alloow fadlan iga cafi shaqada aad ii dhiibtay. Rasuulkii Alle baa weydiiyey ninkaa sababta arrintaa keentay. Ninkii wuxuu yiri: waxaan maqlay hadda waxa aad tiri. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Haddana mar labaad baan leeyahay oo aan ku celinayaa in qofkii aan shaqo (qaran) u dhiibno waa inuu si dhan u gutaa oo daacadnimo iyo hufnaan leh, oo ka soo baxaa, kana xil dhacaa wax yar ama wax badanba. Markaas wixii la siiyana (oo xaq u yeeshay ah) qaataa wixii kalena ka joogaa".
 (Muslim)

٢١٦ - وعن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال : لَمَّا كَانَ يَوْمَ خَيْبَرَ أَقْبَلَ نَفْرٌ مِنْ أَصْحَابِ النَّبِيِّ ﷺ فَقَالُوا : فُلَانٌ شَهِيدٌ ، وَفُلَانٌ شَهِيدٌ ، حَتَّى مَرُّوا عَلَى رَجُلٍ فَقَالُوا : فُلَانٌ شَهِيدٌ . فَقَالَ النَّبِيُّ ﷺ : « كَلَّا إِنِّي رَأَيْتُهُ فِي النَّارِ فِي بُرْدَةٍ غَلَّهَا - أَوْ عَبَاءة - » رواه مسلم .

216. Cumar bin Khaddaab (A.K.R.) wuxuu yiri: "Maalintii dagaalkii Kheybar baa koox asxaabtii rasuulka (S.C.W.) ka mid ahi intay yimaadeen ka hadleen iyagoo mid mid u magaacabaya rag dagaalka ku jiray oo lagu dilay iyagoo leh hebel waa shahiiday, hebel waa shahiiday markii dambay waxay soo mareen nin (la dilay) oo yiiraahdeen isaguna sidoo kale waa shahiid. Markaa buu nabigu (S.C.W.) yiri: Xaqiiqdu waa inuusan shahiid aheyn. Haddaa waxaa la i tusay isagoo naaarta ku jira maro uu xaday darteed".
 (Muslim)

٢١٧ - وعن أبي قتادة الحارث بن ربعي رضي الله عنه عن رسول الله ﷺ أنه قام فيهم ، فذكر لهم : أن الجهاد في سبيل الله ، والإيمان بالله ، أفضل الأعمال ، فقام رجل فقال : يا رسول الله أرأيت إن قتلت في سبيل الله ، تكفر عني خطاياي ؟ فقال له رسول الله ﷺ : « نعم إن قتلت في سبيل الله وأنت صابرٌ مُحْتَسِبٌ ، مُقْبِلٌ غَيْرُ مُدْبِرٍ » ثم قال رسول الله ﷺ : « كيف قلت ؟ قال : أرأيت إن قتلت في سبيل الله ، أتكفر عني خطاياي ؟ فقال رسول الله ﷺ : « نعم وأنت صابرٌ مُحْتَسِبٌ ، مُقْبِلٌ غَيْرُ مُدْبِرٍ ، إلا الدين فإن جبريل [عليه السلام] قال لي ذلك » رواه مسلم .

217. Abuu Qataadah Xaaris bin Ribci (A.K.R) wuxuu sheegay in nabigu (S.C.W) ka dhex istaagay si uu ugu jeediyo khudbad asxaabtiisii, wuxuu yiri: Alle oo la rumeeyo iyo jidka Alle oo loo jiidhaado baa camallada wanaagsan u fadli badan. Nin raggii goob joogga ahaa ka mid ah baa intaistaagayyiri : Rasuul Alloow: haddii jidkii Alle aan ku dhinto ma la iigu dambi dhaafayaa? Wuxuu ku jawaabay: Haah, haddii jidka Alle lagu dilo adigoo sabraya oo ajar doon ah, cadowgana horay ugu sii socda aan dib u gurud aheyn. Dabadeedna , nabigu (S.C.W.) wuxuu weydiiyey inuu ku soo celiyo wixii uu yiri: Ninkii baa ku celiyey:Haddii jidka Alle la igu dilo ma la iigu dambi dhaafayaa. Wuxuu ku jawaabay: Haah, haddii lagu dilo adigoo adkaysanaya, oo sabraa ah, ajar doon ah. horay ugu sii socda cadowga aan dhabar jeedis aheyn carar ah. Ha yeeshee deymahaagu kaama dhacayaan. Sidaasna Malag Jabriil baa hadda ii sheegay ".
(Muslim)

٢١٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه ، أن رسول الله ﷺ قال : « أتدرون من المُفْلِسِ ؟ » قالوا : المُفْلِسُ فِينَا مَنْ لَا دِرْهَمَ لَهُ وَلَا مَتَاعَ ، فَقَالَ : « إِنَّ الْمُفْلِسَ مِنْ أُمَّتِي مَنْ يَأْتِي يَوْمَ الْقِيَامَةِ بِصَلَاةٍ وَصِيَامٍ وَزَكَاةٍ ، وَيَأْتِي وَقَدْ شَتَمَ هَذَا ، وَقَذَفَ هَذَا ، وَأَكَلَ مَالَ هَذَا ، وَسَفَكَ دَمَ هَذَا ، وَضَرَبَ هَذَا ، فَيُعْطَى هَذَا مِنْ حَسَنَاتِهِ ، وَهَذَا مِنْ حَسَنَاتِهِ ، فَإِنْ فَنِيَتْ حَسَنَاتُهُ قَبْلَ أَنْ يُقْضَى مَا عَلَيْهِ أُخِذَ مِنْ خَطَايَاهُمْ فَطُرِحَتْ عَلَيْهِ ، ثُمَّ طُرِحَ فِي النَّارِ » رواه مُسْلِمٌ .

218. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W.) wuxuu mar weydiiyey asxaabtiisii : Ma garanaysaan waakee qof kacay (macnaha Mussalifay) ? Asxaabtii waxay ku jawaabeen :

Waxaan qof kacay (musallifay) u naqaan qof aysan faraha wax ugu jirin oo aan laheyn maal ama hanti kale toonna . Nabgiaa (S.C.W.) faahfaahiyey arrintii oo yiri: Qof kacay (mussalifay) Ummaddayda dhexdeeda waxaa ah qof la imaan doona maalinta qiyaamaha camal wanaagsan oo salaad iyo soon iyo seko leh, ha yeeshee xadgudub badanna uu ka dhacay isagoo caayey qof, sharafkiisa meel uga dhacay mid kale, cunay maal qof kale, oo daadiyey dhiig qof uun amaba garaacay qof kale. Markaasaa cid allaale iyo cidduu dulmiyey ay wax ka qaadanayaan dulmiilaha xasanaadkiisa. Haddii xasanaadkiisu dhammaado iyadoo weli wax lagu leeyahay oo dulmi loo heysto, dambiyada kuwii u dulmiyey baa la soo qaadayaa oo dusha laga saarayaa, waxaana lagu tuurayaa naarta."

(Muslim)

٢١٩ - وعن أم سلمة رضي الله عنها ، أن رسول الله ﷺ قال : « إِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ ، وَإِنَّكُمْ تَخْتَصِمُونَ إِلَيَّ ، وَلَعَلَّ بَعْضَكُمْ أَنْ يَكُونَ أَلْحَنَ بِحُجَّتِهِ مِنْ بَعْضٍ ، فَأَقْضِي لَهُ بِنَحْوِ مَا أَسْمَعُ ، فَمَنْ قَضَيْتُ لَهُ بِحَقِّ أَخِيهِ فَإِنَّمَا أَقْطَعُ لَهُ قِطْعَةً مِنَ النَّارِ » .
متفق عليه . « أَلْحَنَ » أي : أعلم .

219. Umami Salamah (A.K.R.) waxay tiri: Nebigu (S.C.W.)wuxuu yiri: : Wax walba ka sokow anigu banii Aadan baan ahay. Doodihiinna iyo garihiinna baa ii imaanaya si aan uga gar qaybiyo. Waxaana laga yaabaa in qaarkiin qaar kaga cod karsan yahay arrinta, oo aan markaas garta ku siiyo sidaas aan ka maqlay. Marka qofkii aan u gooyo wuxuusan mudneyn oo uusan xaq u laheyn, , xalaal uma aha, wuxuu iga qaatayna waa qiimo u naar siistay (macnaha waxaa weeye qofkaa waxaa ku qaatay xaq darrada iyo mudnaan la'aanta wuxuu geli naar " .
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٢٠ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ : « لَنْ يَزَالَ الْمُؤْمِنُ فِي فُسْحَةٍ مِنْ دِينِهِ مَا لَمْ يُصِبْ دَمًا حَرَامًا » رواه البخاري .

220. Ibn Cumar (A.K.R.)Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofka mu'minka ahi diintiisu waa u nabad , waxaana dhowraya iimaankiisa marba haddii uusan gelin dhiig xaqdarro ah. "
(Bukhaari)

٢٢١ - وعن خولة بنتِ عامر الأنصارية ، وهي امرأة حمزة رضي الله عنهما قالت : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « إِنَّ رِجَالًا يَتَخَوَّضُونَ فِي مَالِ اللَّهِ بِغَيْرِ حَقٍّ ، فَلَهُمُ النَّارُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » رواه البخاري .

221. Khawlah bint Caamir (Xaaskii Xamza, nabiga adeerki) (A.K.R.) waxay tiri: Waxaan maqlay Nabiga (S.C.W.) oo leh: " Rag baa waxay xadayaan maalkii Alle (sida xoolaha Baytul Maalka, ama hantida guud ee ummadda ' qaranka') kuwaasu naar bay leeyihiin maalinta qiyaame " . (Bukhaari)

Fiiro gaar ah: Ereyga khiyaano ama dulmi waa erey aad loo isticmaalo oo macna ballaaran leh. Waxaana sidoo kale aad loogu isticmaalaa oo uu tilmaamaa shirkiga, sanam caabudidida, Alle diidnimada, iyo diin la'aanta; shirkiguna waa Alle oo cid kale wax lala wadaajiyo oo lala barbar caabudo. dunuubtana waa la yiraahdaa waa dulmi oo waa lagu magaacaabaa.

Laakiinse cutubkan kore dulmiga uu ka hadlayey waa kan dadka dhexdiisa ah, iyo inuu qof u gacan ama af ama addin dhaaf qof kale, oo xaqiisa duudisyo. Haddii aan laga hor teginna oo wax laga qaban waa arrin waxyeeleneysa nabadgelyada bulshada iyo degganaanteed. Tillaabada hore si looga hortago oo loo joojiyo arrintaa waa in la aqoonsado xaqa uu u leeyahay qofka ama dadka dulmiga iyo dhibaataada loo geystay inuu helo ama ay helaan xaqoodii laga duudsiyey, loogana gooyo kii ama kuwii dulmiyey. Markaa bayna dadweynuhu, markii ay arkaan in kii dulmiga falay aan sidaa looga hareyn ee mudankiisa la marsiinayo , markaa bay ka waantoobayaan oo uu qof waliba ka joogsanayaa in qof kale uu dulmiyo.

٢٧ - باب تعظيم حرّات المسلمين وبيان حقوقهم

والشفقة عليهم ورحمتهم

CUTUBKA 27

WEYNEYNTA WAXYAALAH A CAAGGAN IYO OO LA REEBAY IN LAGU XADGUDBO , IYO MUUJINTA XURMADD'A QOFKA MUSLIMKA IYO CADDEYNTA XAQIISA IYO INAY WAAJIB TAHAY U TURIDDA IYO U NAXARIISASHADIISA

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ وَمَنْ يُعْظِمِ حُرْمَاتِ اللَّهِ فَهُوَ خَيْرٌ لَهُ عِنْدَ رَبِّهِ ﴾ [الحج : ٣٠]

101. " (Taasi waa xukunkii Alle) . Qofkii weyneeya waxyaalaha Alle reebay oo xaaraanta ka dhowrsada iyo inuu xadgudbo, Kheyr baa u ahaan Rabbigiis agti" . Suuradda al-Xaj: Aayadda 30.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَمَنْ يُعْظَمَ شَعَائِرَ اللَّهِ فَإِنَّهَا مِنْ تَقْوَى الْقُلُوبِ ﴾ [الحج : ٣٢]

102. " (Taasi waa xukunkii Alle). Qofkii weyneeya xilalka iyo waajibaadkuu Alle saaray iyo waxyaalaha loogu dhowaado , waxay taasi ka mid tahay oo ay muujineysaa iimaanka qofkiisa iyo daacad iyo hufnaan qalbiyada ah." Suuradda Al - Xaj: Aayadda 32.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَاخْفِضْ جَنَاحَكَ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴾ [الحجر : ٨٨]

103. " Garabkaaga u raarici (jaceyl iyo nugeyl awgi) mu'miniinta ". Suuradda Al-Xijr: Aayadda 88.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ مَنْ قَتَلَ نَفْسًا بِغَيْرِ نَفْسٍ أَوْ فَسَادٍ فِي الْأَرْضِ فَكَأَنَّمَا قَتَلَ النَّاسَ جَمِيعًا .
وَمَنْ أَحْيَاهَا فَكَأَنَّمَا أَحْيَا النَّاسَ جَمِيعًا ﴾ [المائدة : ٣٢] .

104. " Qofkii dila qofaan cidna dilin ama dhul fasahaadin wuxuu la mid yahay isagoo dadka oo dhan diley, qofkii qof noloshiisa badbaadiyana wuxuu la mid yahay isagoo dadkoo dhan noloshoodii badbaadiyey." Suuradda. Al -Maa'idaH : Aayadda 32

٢٢٢ - وعن أبي موسى رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « الْمُؤْمِنُ لِلْمُؤْمِنِ كَالْبُنْيَانِ يَشُدُّ بَعْضُهُ بَعْضًا » وَشَبَّكَ بَيْنَ أَصَابِعِهِ . متفقٌ عليه .

222. Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Xiriirka ka dhexeeya labada qof ee muslimka ah waa sida xiriirka ka dhexeeya dhismaha guriga , qaybba ay xoojineyso oo ay heyso qayb kale. Markaa buu is dhex geliyey faraha labadiisa gacmood, si uu aarintaa u biyaamiyo, tusaalena uga bixiyo. ' (Bukhaari iyo Muslim)

٢٢٣ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ مَرَّ فِي شَيْءٍ مِنْ مَسَاجِدِنَا أَوْ أَسْوَاقِنَا ، وَمَعَهُ نَبْلٌ فَلْيُمْسِكْ أَوْ لِيَقْبِضْ عَلَى نَصَالِهَا بِكَفِّهِ أَنْ يُصِيبَ أَحَدًا مِنَ الْمُسْلِمِينَ مِنْهَا شَيْءٌ » متفقٌ عليه .

223. Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii la arko isagoo dhex maraya masaa-jidyada ama waddooyinkayaga isagoo wax fiiq leh sita, sida tu-saale ahaan fallaar ama (qori iwm), waa in la joojiyaa, ama la faraa inuu afkeedaa gacanta ku daboolo si ayan dhibaato u gaarsiin qof muslim ah". (Bukhaari iyo Muslim)

٢٢٤ - وعن النعمان بن بشير رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ : « مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادُّهِمْ وَتَرَاحُمِهِمْ وَتَعَاطُفِهِمْ ، مَثَلُ الْجَسَدِ إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهْرِ وَالْحُمَى » متفق عليه .

224. Nucmaan ibn Bashiir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Muslimiinta isjeceylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu nixiddooda waa sida jirka qofka oo kale markay xubini ka bukooto ay xubnaha oo dhammi la wadaagayaan dareenka xanuunka xummadda iyo soo jeedka". (Bukhaari iyo Muslim)

٢٢٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قَبِلَ النَّبِيُّ ﷺ الْحَسَنَ بْنَ عَلِيٍّ رضي الله عنهما ، وَعِنْدَهُ الْأَقْرَعُ بْنُ حَابِسٍ ، فَقَالَ الْأَقْرَعُ : إِنَّ لِي عَشْرَةَ مِنْ الْوَالِدِ مَا قَبِلْتُ مِنْهُمْ أَحَدًا . فَظَنَرَ إِلَيْهِ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ : « مَنْ لَا يَرْحَمَ لَا يَرْحَمَ » متفق عليه .

225. Abuu Hurayrah (A.K.R.)Wuxuu yiri: Mar waxaa dhacay in nebigu (S.C.W.) dhunkaday wiilkuu awoowga u ahaa Xasan ibn Cali (A.K.R.). Aqrac ibn Xaabis (A.K.R.) oo markaa la fadhiyey baa arkay, oo yiri: Toban ilmood baan leeyahay weligeyna mid ka mida ah ma dhunkan. Nebigu (S.C.W.) inta fiiriyey buu yiri: " Qofkii aan naxariis u heyn dadka kale kama mudna naxariis Alle " (Bukhaari iyo Muslim)

٢٢٦ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : قَدِمَ نَاسٌ مِنَ الْأَعْرَابِ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، فَقَالُوا : أَتُقْبَلُونَ صِبْيَانَكُمْ ؟ فقال : « نَعَمْ » ، قالوا : لَكِنَّا وَاللَّهِ مَا نُقْبَلُ ! فقال رسول الله ﷺ : « أَوْ أَمْلِكُ إِنْ كَانَ اللَّهُ نَزَعَ مِنْ قُلُوبِكُمُ الرَّحْمَةَ » متفق عليه .

226. Caa' isha (A.K.R.) waxay tiri: " Niman reer miyi ah baa Nebiga (S.C.W.) u yimid waxayna weyddiyeen inuu carruurrtiisa dhunkado iyo in kale. Nabigu (S.C.W.) wuxuu ugu jawaabay : Haah , waan dhunkadaa. Waxay yiraahdeen : annaguse marnaba ma

dhunkanno! Wuxuu yiri : Sidee laygu raacan karaa oo aan mas'uul uga noqon karaa haddii Alle qalbigiinna ka saaray jaceylkii iyo naxariistii".
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٢٧ - وعن جرير بن عبد الله رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ لَا يَرْحَمِ النَّاسَ لَا يَرْحَمُهُ اللَّهُ » متفقٌ عليه .

227. Jariir ibn Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle weynaa oo hufnaaye naxariis uma galo qofkii aan dadka u naxariisan ".
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٢٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه، أن رسول الله ﷺ قال : « إِذَا صَلَّى أَحَدُكُمْ لِلنَّاسِ ، فَلْيُخَفِّفْ ، فَإِنْ فِيهِمُ الضَّعِيفُ وَالسَّقِيمُ وَالْكَبِيرُ . وَإِذَا صَلَّى أَحَدُكُمْ لِنَفْسِهِ ، فَلْيَطْوِلْ مَا شَاءَ » متفقٌ عليه .

وفي رواية : « وَذَا الْحَاجَةِ » .

228. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Markii ay midkiin la soo gudboonaato munaasabad ah inuu dadka iimaam u noqdo oo uu tujiyo, waa inuu soo gaabiyaa (mac-naha waa inuusan dheereyn akhrinta Qur'aanka) maxaa yeelay waxaa dadka ka mid ah oo ku jira qof tabar yar, mid buka, mid waa-yeel ah . Hayeeshee, markii uu kiligi tukanayo qofku ha u dheereysto akhrinta Qur'aanka sidii uu doono" .
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kalena waxay leedahay: " oo waxaa ka mid ah jamaacada tukanaysa qaar dan iyo shaqooyin leh" .

٢٢٩ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : إن كَانَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ لِيَدْعُ الْعَمَلَ ، وَهُوَ يُحِبُّ أَنْ يَعْمَلَ بِهِ ، خَشْيَةَ أَنْ يَعْمَلَ بِهِ النَّاسُ فَيُفْرَضَ عَلَيْهِمْ . متفقٌ عليه .

229. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: " Nabigu (S.C.W.) Waxaa dhi-ci jirtey inuu mararka qaarkood iska daayo camal uu jecel yahay inuu falo, isagoo ka baqaya inay dadku ka daba falaan oo markaas lagu waajibiyo" .
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٣ - وَعَنْهَا رَضِيَ اللَّهُ عَنْهَا قَالَتْ : نَهَاهُمْ النَّبِيُّ ﷺ عَنِ الْوِصَالِ رَحْمَةً لَهُمْ ، فَقَالُوا : إِنَّكَ تُوَاصِلُ ؟ قَالَ : « إِنِّي لَسْتُ كَهَيْئَتِكُمْ ، إِنِّي أَبِيتُ يُطْعَمُنِي رَبِّي

وَيَسْقِينِي « متفق عليه .

مَعْنَاهُ : يَجْعَلُ فِي قُوَّةٍ مِّنْ أَكْلٍ وَشَرِبٍ .

230. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Nabigu (S.C.W.) Jaceyl iyo naxariis iyo turid uu ummaddiisa u turayo awgood wuxuu ka reebay asxaabtiisa soon isku bixis ah (xiriir ah) . Waxay yiraahdeen: Nabi Alloow adba waa aad isku bixisaaye? Wuxu ku jawaabay: " Anigu idinkoo kale ma ahi. Habeenkii Rabbigay baa i siiya raashin iyo cabitaan " . (Bukhaari iyo Muslim)

Taasi macnaheedu waxaa weeye Alle wuxuu siiyaa awoodda iyo quwadda nin wax cuna oo wax cabba.'

٢٣١ - وعن أبي قتادة الحارث بن ربعي رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنِّي لِأَقُومُ إِلَى الصَّلَاةِ ، وَأُرِيدُ أَنْ أُطَوَّلَ فِيهَا ، فَاسْمَعُ بُكَاءَ الصَّبِيِّ فَاتَجَوَّزَ فِي صَلَاتِي كَرَاهِيَةً أَنْ أَشُقَّ عَلَى أُمِّهِ » رواه البخاري .

231. Abuu Qataadah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Salaad baan u istaagaa anigoo is leh aad dheeraysid. Markaasaan ilmo ooyaya maqlaa, markaa bay waxay noqotaa inaan soo gaabiyo salaaddeyda, anigoo nacaya inay akhrintayda suurad dheer ay ku dhibaatooto ilmaha hooyadood" . (Bukhaari)

٢٣٢ - وعن جندب بن عبد الله رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ صَلَّى صَلَاةَ الصُّبْحِ فَهُوَ فِي ذِمَّةِ اللَّهِ فَلَا يَطْلُبُنَّكَ اللَّهُ مِنْ ذِمَّتِهِ بِشَيْءٍ ، فَإِنَّهُ مَنْ يَطْلُبُهُ مِنْ ذِمَّتِهِ بِشَيْءٍ يُذْرِكُهُ ثُمَّ يَكْبُهُ^(٢) عَلَى وَجْهِهِ فِي نَارِ جَهَنَّمَ » رواه مسلم .

232. Jundub ibn Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii salaadda subax tukadaa (salaatul Fajar) Alluu ammaan u yahay. Sidaa awgeed waa inaad isku ilaalisaa gudashada salaadda subax (jamaaca ahaan). (oo aad ka dibdhicin gudashadeeda ama ku xadgubdin qof tukatay oo muslim Alle yaqaan ah) si uusan Alle kuugu yeerin xisaab adag oo uusan kuugu raacan ammaanadaa ; qofkii uu Alle wax ammaandiisa ka mid ah u raacdo, oo uu arkaana inuusan xilkeedii dhowrin oo uu dambiile yahay, Alle waa uu qabanayaa weji wejina ugu harbinayaa naarta Jahannama" . (Muslim)

٢٣٣ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما ، أن رسول الله ﷺ قال : « الْمُسْلِمُ أَخُو الْمُسْلِمِ ، لَا يَظْلِمُهُ ، وَلَا يُسْلَمُهُ ، مَنْ كَانَ فِي حَاجَةِ أَخِيهِ كَانَ اللَّهُ فِي

حَاجَتِهِ ، وَمَنْ فَرَّجَ عَنْ مُسْلِمٍ كُرْبَةً فَرَّجَ اللَّهُ عَنْهُ كُرْبَةً مِنْ كُرْبِ يَوْمِ الْقِيَامَةِ ، وَمَنْ سَتَرَ مُسْلِمًا سَتَرَهُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ « متفق عليه .

233. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Muslim kasta waa walaalka qofka kale ee muslimka ahi; ma uu dulmiyo mana u gacan geliyo cadowgiisa. Qofkii danta walaalki muslimka ah dar yeelana Alle weyne baa dantiisa dar yeela , qofkii qof muslim ah kurbo ka feydana Alle weyne baa ka feyda mid ka mida kurbooyinka maalinta qiyaamaha. Qofkii qof muslim ah u ceeb asturaana Alle weyne baa u ceeb astura maalinta qiyaamaha".
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٣٤ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « الْمُسْلِمُ أَخُو الْمُسْلِمِ لَا يَخُونُهُ وَلَا يَكْذِبُهُ وَلَا يَخْذُلُهُ ، كُلُّ الْمُسْلِمِ عَلَى الْمُسْلِمِ حَرَامٌ ، عِرْضُهُ وَمَالُهُ وَدَمُهُ . التَّقْوَى هُنَا ، بِحَسَبِ أَمْرٍ مِنْ الشَّرِّ أَنْ يَحْقِرَ أَخَاهُ الْمُسْلِمَ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

234. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Muslim kasta waa walaalka qofka kale ee muslimka ah, ma khiyaano; uma sheego been, mana hagrado. Wax kasta oo muslim leeyahay, sharaftiisa, maalkiisa iyo dhiiggiisuba waa ka xaaraan Qof kale ee muslimka ah . Alle ka dhowrsiguna waa halkaan (intuu laabta gacanta saaray) . Waa arrin shar ah oo xun inaad yasto qof muslim ah , ' oo ula dhaqanto sida wax liita oo hooseeya" .
(Tirmidi baa weriyey oo yiri;waa Xadiis xasan ah) .

٢٣٥ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لَا تَحَاسَدُوا ، وَلَا تَنَاجَشُوا وَلَا تَبَاغَضُوا وَلَا تَدَابَرُوا وَلَا يَبِعْ بَعْضُكُمْ عَلَى بَيْعِ بَعْضٍ ، وَكُونُوا عِبَادَ اللَّهِ إِخْوَانًا . الْمُسْلِمُ أَخُو الْمُسْلِمِ : لَا يَظْلِمُهُ وَلَا يَحْقِرُهُ وَلَا يَخْذُلُهُ . التَّقْوَى هُنَا - ويشير إلى صدره ثلاث مرات - بحسب أمرٍ من الشرِّ أن يحقير أخاه المسلم . كُلُّ الْمُسْلِمِ عَلَى الْمُسْلِمِ حَرَامٌ دَمُهُ وَمَالُهُ وَعِرْضُهُ » رواه مسلم .

« النَّجْشُ » : أَنْ يَزِيدَ فِي ثَمَنِ سَلْعَةٍ يُنَادِي عَلَيْهَا فِي السُّوقِ وَنَحْوَهُ ، وَلَا رَغْبَةَ لَهُ فِي شَرَائِهَا بَلْ يَقْصِدُ أَنْ يَغْرَّ غَيْرَهُ ، وَهَذَا حَرَامٌ .

وَالتَّدَابُّرُ : أَنْ يُعْرَضَ عَنِ الْإِنْسَانِ وَيَهْجُرَهُ وَيَجْعَلُهُ كَالشَّيْءِ الَّذِي وَرَاءَ
الظَّهْرِ وَالذُّبْرِ .

235. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Ha xasdin walaalkaa Muslimka ah; ha ku fallisnina iibka qof kaloo muslim ah. Hana u qaadin naceyb qof muslim ah, dhabarkana ha u jeedin, oo yuusan qaarkiin ka dul gadan wax qaarkiin uu gadanayey. Addoommadii Alloow walaallo ahaada; Qofka muslimka ahi waa u walaal qofka kale ee muslimka ahi, dhibaato uma geysto kumana eegto, ma liido oo hoos uma eego, ma ceebeeyo (oo ma hoojiyo) mana hagrado. Alle ka dhowrsiga wuxuu ka soo fulaa oo saldhig u ah laabta (Nabigu (S.C.W.) saddex jeer buu arrintaa ku celceliyey) . qofkana waxaa shar ugu filan inuu yaso (yacni quursado) walaalkiis muslimka ah. Qof kastoo muslim ahna waa ka xaaraan inuu waxyeelo dhiigga, maalka iyo sharafta qof kaloo muslim ah ." (Muslim)

٢٣٦ - وعن أنس رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « لَا يُؤْمِنُ أَحَدُكُمْ حَتَّى يُحِبَّ لِأَخِيهِ مَا يُحِبُّ لِنَفْسِهِ » متفقٌ عليه .

236. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkiin muslim fiican noqon maayo jeer uu walaalkiis la jeclaado waxa uu la jecel yahay naftiisa" . (Bukhaari iyo Muslim)

٢٣٧ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « انصُرْ أَخَاكَ ظَالِمًا أَوْ مَظْلُومًا » فقال رجل : يا رسول الله أنصُرُهُ إِذَا كَانَ مَظْلُومًا أَرَأَيْتَ إِنْ كَانَ ظَالِمًا كَيْفَ أَنْصُرُهُ ؟ قال : « تَحْجُزُهُ - أَوْ تَمْنَعُهُ - مِنَ الظُّلْمِ فَإِنَّ ذَلِكَ نَصْرُهُ » رواه البخاري .

237. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu kaloo yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Walaalkaa u hiilli gar iyo gardarraba .Nin asxaabtiisii ka mid ahaa baa weydiyey: Rasuul Alloow (markii uu gar leeyahy waaban u hiilinayaaye, ee fadaln ii sheeg sida aan ugu hiillinayo haddii uu gar daran yahay. Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: Gardarrada ka celi. Taasaa hiil u ahe" . (Bukhaari)

٢٣٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « حَقُّ الْمُسْلِمِ عَلَى الْمُسْلِمِ خَمْسٌ : رَدُّ السَّلَامِ ، وَعِيَادَةُ الْمَرِيضِ ، وَاتِّبَاعُ الْجَنَائِزِ ، وَإِجَابَةُ الدَّعْوَةِ ، وَتَشْمِيتُ الْعَاطِسِ » متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : « حَقُّ الْمُسْلِمِ عَلَى الْمُسْلِمِ سِتٌّ : إِذَا لَقِيْتَهُ فَسَلَّمَ عَلَيْهِ ، وَإِذَا دَعَاكَ فَأَجَبَهُ ، وَإِذَا اسْتَنْصَحَكَ فَانصَحْ لَهُ ، وَإِذَا عَطَسَ فَحَمِدَ اللَّهَ فَشَمَّتْهُ ، وَإِذَا مَرِضَ فَعَدَّهُ ، وَإِذَا مَاتَ فَاتَّبَعَهُ » .

238. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qof kastoo muslim ahi wuxuu xaq ugu leeyahay shan arrimood qofka kale ee muslimka ah . Waxayna kala yihiin:

1. Ka qaadidda salaantiisa 2. Booqashadiisa markii uu bukoodo. 3. raacidda janaasadiisa (yacni in lagu tukado salaad janaaso ah) markii uu dhinto. 4. Aqbalaadda casumaaddiisa, iyo 5. Markii uu hindiso haddii uu yiraahdo Al-xamdu Lillaah (Allaa mahad leh) waa inaad ku jawaabtaa yarxamukal Laah (Alle ha kuu naxariisto)."
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kalaa waxay ahayd oo saxiixul Muslim ku taal:

" Qof kastoo muslim ahi lix arrimood buu xaq ugu leeyahay walaa-ki kale ee muslimka ah. waxayna kala yihiin : 1. Markii aad la kulanto inaad salaanto adigoo oranaya" As-Salaamu caleykum (oo macnaheedu yahay nabad korkaada ha ahaato) ; 2. Markii uu ku casumo waa inaad aqbasho casumaaddiisa. 3. Hadduu talo ku weydiistana , si daacad ah ula tali hagrasho la'aan ah. 4. Markii uu hindhiso oo Alxamdu lillaahi uu yiraahdo, dheh yarxamukallaah (oo macnaheedu yahay Alle ha kuu naxaaristo). 5. Markii uu bukoodana waa inaad soo booqataa. (6) Markii uu dhintana ka qayb gal oo raac janaasadiisa."
(Muslim)

٢٣٩ - وعن أبي عُمارة : البراء بن عازب رضي الله عنهما قال : أمرنا رسول الله ﷺ بسبع ، ونهانا عن سبع : أمرنا بعيادة المريض ، وأتباع الجنائز ، وتشميت العاطس ، وإبرار المقسم ، ونصر المظلوم ، وإجابة الداعي ، وإفشاء السلام^(١) . ونهانا عن خواتيم أو تحتم بالذهب ، وعن شرب الفضة ، وعن الميائير الحمر ، وعن القسي ، وعن لبس الحرير والاستبرق^(٢) والديباج . متفق عليه .

وفي رواية : وإنشاد الضالة في السبع الأول .

« الميائير » : بياء مئناة قبل الألف ، وناء مئثلة بعدها ، وهي جمع مئثرة ،

وهي شيء يُتخذ من حرير ويخشي قطناً أو غيره ، ويُجعل في السرج وكور البعير
 يجلس عليه الراكب . و« القسي » ، بفتح القاف وكسر السين المهملة المشددة :
 وهي ثياب تنسج من حرير وكتان مختلطين . و« إنشاد الضالة » : تعريفها .

239. Abuu Cumaara al-Baraa ibn Caazib (A.K.R.) wuxuu yiri: Ne-
 bigu (S.C.W.) wuxuu na faray toddoba arrimood , wuxuuna naga
 reebay toddoba waxyaabood. Wuxuu na faray : (1) inaan booqan-
 no Bukaanka (2) inaan raacno Janaasada ; (3) inaan yarxamukal-
 laah niraahno qofka hindhisa haddii uu yiraahdo al-Xamdulillaah;
 (4) inaan fulinno Dhaaraha iyo nidirka. (5) in loo hiilliyo Dulma-
 naha ; (6) in la aqbaloo Casumaadaha ; (7) in la faafiyo Salaanta .

Wuxuuna naga reebay (1) xirishada Kaatummada dahabka ah (oo
 waa ka xaaraan ragga) (2) wax ku cabbidda weelasha qalinka ah.
 (3) ku fariisiga birkimaha xariirta ah ee cas ee la saaro kurusyada
 geela ama fardaha (Waxay aheyd caado in la saaro birkimo xariir
 ah fardaha iyo geela' (4) xirishada maryo laga sameeyey nooc
 dharka ka mid ah oo lagu dheehay xariir iyo cudbi la dhilay , (5)
 xirishada dharka xariirta soocan ah. (6) Xirishada xariirta adag ee
 culus (7) iyo xirishada dharka ka sameysan dun xariir midab leh
 ah ama dahab ama qalin lagu naashnaashay.

Werin kalaa waxay dhigeysay oo ku beddeleysay qodobka ku xu-
 san no. 4 ee toddobada waxyaabood hore ee la is faray oo ka dhi-
 geysay halka ah fulinta dhaaraha iyo nidirka : yaboohinta qofka
 ama waxa lumay ee baadida ah .

(Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah:

Wayaabaha ay danta ugu jidho aadanaha iyo faa'idada waxaa la yi-
 raahdaa waa xuquuqda ay leeyihiin; waajibaadka iyo xilalka la saa-
 rayna waa la yiraahdaa xilal. Xuquuqda iyo xilalkuba waa is ga-
 shan yihiin oo xiriir hoose baa ka dhexeeya. Waxayaabihii ugu
 horreeyey ee Islaamku faray waxay jideenayeen in qof kasta waaji-
 baad saaran yahay xagga noolaha , dad iyo duunyaba, xitaa wax-
 yaabaha aan noolaha aheyn; waxaa oo idil xuquuq bay leeyihiin qof
 kastana waxaa laga dooni inuu gutaa oo dhowro xuquuqdooda inta
 karaankiisa ah. Xuquuqdaa iyo waajibaadka la xiriira waa mabaadi-
 da asaaska u ah nidaamka iyo anshaxa Islaamka.

٢٨ - باب ستر عورات المسلمين

والنهي عن إشاعتها لغير ضرورة

C U T U B K A 28

ASTURIDDA CEEBAHA MUSLIMIINTA

قال الله تعالى : Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri :

﴿ إِنَّ الَّذِينَ يُحِبُّونَ أَنْ تَشِيعَ الْفَاحِشَةُ فِي الَّذِينَ آمَنُوا لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ ﴾ [النور : ١٩] .

105. : " Kuwa jecel in dhilleysiga (iyo waxyaabaha keeni kara sida aflaanta xunxun, buugta jaceyl sheydaanka ka hadla , riwaayadaha xunxun, iyo is dhex galka ragga iyo dumarka aan is gayin iyo sheeko wadaagood).) ay ku dhex faafto bulshada muslimka ah , waxay aakhiro iyo adduunba leeyihiin cadaab xanuun badan" Suuradda an-Nuur : Aayadda : 19.

٢٤٠ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « لَا يَسْتُرُ عَبْدٌ عَبْدًا فِي الدُّنْيَا إِلَّا سَتَرَهُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » رواه مسلم .

240. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofkii asturaa ceebaha iyo meel ka dhacyada qof muslim ah inta adduunka la joogo , ceebaha iyo gefafkiisuu asturaa Alle weyne maalinta qiyaamaha . (Muslim)

٢٤١ - وعنه قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « كُلُّ أُمَّتِي مُعَافَى إِلَّا الْمُجَاهِرِينَ ، وَإِنْ مِنَ الْمُجَاهِرَةِ أَنْ يَعْمَلَ الرَّجُلُ بِاللَّيْلِ عَمَلًا ، ثُمَّ يُصْبِحُ وَقَدْ سَتَرَهُ اللَّهُ عَلَيْهِ فَيَقُولُ : يَا فُلَانُ عَمِلْتُ الْبَارِحَةَ كَذَا وَكَذَا ، وَقَدْ بَاتَ يَسْتُرُهُ رَبُّهُ وَيُصْبِحُ يَكْشِفُ سِتْرَ اللَّهِ عَنْهُ » متفقٌ عليه .

241. Abuu Hurayrah (A.K.R.). wxuu kaloo yiri waxaan maqlay Nebigoo (S.C.W.) leh: " Cid kasta oo ka mida ummadeyda waa la cafinayaa marka laga reebo kuwa aan qarin ceebaha dadka ee bannaanka soo dhiga . Waxaana ka mid ah bannaan soo dhigidda in qofku daaha uu ka qaado xumo uu sameeyey habeenkii, isagoo

Alle asturay. oo Subaxii yiraahda: Hebeloow xalay sidaas iyo si-daasaan yeelay, wuxuu cawo baryay iyadoo Rabbigi asturayo , markaasuu subaxnimadii isagii qudhiisii wax walba daaha ka qaaday, aasturkiina feyday". (Bukhaari iyo Muslim)

(Haddaan tusaale yar ka bixinno arrintaa waa sida wiil xiriir aan bannaaneyn iyo sheeko ay dhex martay gabar uusan meher u dhexeyn, oo inta habeen la soo sheekeystey oo la fara cayaaray , subaxnimadii uga sheekeeyey saaxibbadiis wuxuu sameeyey habeenkii, kuwaa ku dhiirran xumaha iyo kuwa la midka ee xumaha sheeg sheega, aan qarinna ceebaha naftooda iyo ceebaha dadka kale Alle ma cafiyo" .

٢٤٢ - وعنه عن النبي ﷺ قال : « إِذَا زَنَتِ الْأَمَةُ فَتَبَيَّنَ زِنَاهَا فَلْيَجْلِدْهَا الْحَدَّ ، وَلَا يَثْرَبْ عَلَيْهَا . ثُمَّ إِنْ زَنَتِ الثَّانِيَةَ فَلْيَجْلِدْهَا الْحَدَّ وَلَا يَثْرَبْ عَلَيْهَا ، ثُمَّ إِنْ زَنَتِ الثَّلَاثَةَ فَلْيَبْعِهَا وَلَوْ بِحَبْلِ مِنْ شَعْرٍ » متفقٌ عليه .

242. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu kaloo yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Addoontu markay dhilleysato oo inay dhilleysatay caddaato mas'uulkeedu ha jeedlo yuusanna canaanan, haddii ay mar labaad dhilleystona ha jeedlo yuusanna canaanan, haddii ay mar seddexaad dhilleysatona ha iska iibiyo , haba ku iibiyee qiimo dhan xarig timo ah (macnaha waa haba ku iibiyee qiimaha ugu jaban uguna yar ee wax lagu iibiyo) . (Bukhaari iyo Muslim)

« isagoo u caddeynaya qofka uu ka iibinayo ceebteeda, xadka jeedilada addoontuna waa karbaashid konton (50) jeer ah. »

٢٤٣ - وعنه قال : أُتِيَ النَّبِيُّ ﷺ بِرَجُلٍ قَدْ شَرِبَ خَمْرًا قَالَ : « اضْرِبُوهُ » ، قَالَ أَبُو هُرَيْرَةَ : فَمِنَّا الضَّارِبُ بِيَدِهِ ، وَالضَّارِبُ بِنَعْلِهِ ، وَالضَّارِبُ بِثَوْبِهِ . فَلَمَّا انْصَرَفَ قَالَ بَعْضُ الْقَوْمِ : أَخْزَاكَ اللَّهُ ، قَالَ : « لَا تَقُولُوا هَكَذَا لَا تُعِينُوا عَلَيْهِ الشَّيْطَانَ » رواه البخاري .

243. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin khamro cabbay baa waxaa loo keenay nabiga (S.C.W.) wuxuu amar ku bixiyey in la garaaco. Markaasaan nin kab ku dhuftha iyo nin gacantiisa ku dhuftha iyo nin maradiisa ku dhuftha noqonnay. Markii uu dadkiisii u tegay

baa mid yiri: Alle ha ku hoojiyo oo hoos ha kaa dhigo'.

Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Sidaas ha oraninna; oo shaydaanka ha ugu kaalmeynina." (Bukhaari)

٢٩ - باب في قضاء حوائج المسلمين

CUTUBKA 29

KAALMEYNTA MISLIMIINTA BAAHAN

قال الله تعالى: :
Alle weyne kor Ahaaye wuxuu yiri:

﴿ وَأَفْعَلُوا الْخَيْرَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ ﴾ [الحج : ٧٧] .

106. " Khayrka iyo samaha fala aad liibaantaane" Suuradda al-Xaj:
aayadda 77.

٢٤٤ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما أن رسول الله ﷺ قال : « الْمُسْلِمُ أَخُو الْمُسْلِمِ لَا يَظْلِمُهُ وَلَا يُسْلِمُهُ . مَنْ كَانَ فِي حَاجَةِ أَخِيهِ كَانَ اللَّهُ فِي حَاجَتِهِ ، وَمَنْ فَرَّجَ عَنْ مُسْلِمٍ كُرْبَةً فَرَّجَ اللَّهُ عَنْهُ بِهَا كُرْبَةً مِنْ كَرْبِ يَوْمِ الْقِيَامَةِ ، وَمَنْ سَتَرَ مُسْلِمًا سَتَرَهُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » متفق عليه .

244. Xadiiskan waxaynu ku soo marnay No. 233. Xadiiskan ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu kaga warramayaa Nebigu (S.C.W.) hadalkuu yiri in qof kasta oo muslim ahi u walaal yahay qofka kale ee muslimka ahi , sidaa awgeed muslimiintu ay yihiin walaallo aan isdulmin, cadowna isu gacan gelin. Qofkii danta walaalki muslimka ah daryeela oo dhibka ka saara inuu helayo kaalmada iyo daryeelka Alle kolkay isuguna dhibaato la soo gudboonaato. Qofkii qof muslim ah dhibaato ka saara Allaa kaga saaro dhibaato ka mida dhibaatooyinka maalinta qiyaamaha , qofkii qof muslim ah u ceeb qariyaana, Allaa u ceeb qariya maalinta qiyaamaha " .

٢٤٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه ، عن النبي ﷺ قال : « مَنْ نَفَسَ عَنْ مُؤْمِنٍ كُرْبَةً مِنْ كَرْبِ الدُّنْيَا ، نَفَسَ اللَّهُ عَنْهُ كُرْبَةً مِنْ كَرْبِ يَوْمِ الْقِيَامَةِ ، وَمَنْ يَسِّرْ عَلَى مُعْسِرٍ يَسِّرَ اللَّهُ عَلَيْهِ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ ، وَمَنْ سَتَرَ مُسْلِمًا سَتَرَهُ اللَّهُ فِي الدُّنْيَا

وَالْآخِرَةَ ، وَاللَّهُ فِي عَوْنِ الْعَبْدِ مَا كَانَ الْعَبْدُ فِي عَوْنِ أَخِيهِ ، وَمَنْ سَلَكَ طَرِيقًا
يَلْتَمِسُ فِيهِ عِلْمًا سَهَّلَ اللَّهُ لَهُ طَرِيقًا إِلَى الْجَنَّةِ . وَمَا اجْتَمَعَ قَوْمٌ فِي بَيْتٍ مِنْ بُيُوتِ
اللَّهِ تَعَالَى ، يَتْلُونَ كِتَابَ اللَّهِ ، وَيَتَدَارَسُونَهُ بَيْنَهُمْ إِلَّا نَزَلَتْ عَلَيْهِمُ السَّكِينَةُ ،
وَعَشِيَّتُهُمُ الرَّحْمَةُ ، وَحَفَّتْهُمُ الْمَلَائِكَةُ ، وَذَكَرَهُمُ اللَّهُ فِيمَنْ عِنْدَهُ ، وَمَنْ بَطَأَ بِهِ
عَمَلُهُ لَمْ يُسْرِعْ بِهِ نَسَبُهُ « متفق عليه .

245. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii qof muslim ah dhibaato ka saara dhibaatooyinka adduunka ah, Allaa ka saara dhibaato ka mida dhibaatooyinka maalinta qiyaamaha. Qofkii qof danaysan taakuleeyana Allaa taakuleeya aakhiro iyo adduunba. Qofkii qof muslim ah u ceeb qariyaana Allaa u ceeb qariya maalinta qiyaamaha. Allena addoonka waa u kaalmaynayaa inta addoonku walaalkiis u kaalmaynayo. Qofkii waddo cilmi raadin awgi u marana, Allaa u sahlo waddo jan-nada ah. Mar kast oy qoon ku kulmaan guri guryaha Alle ka mid ah (Masjid) iyagoo kitaabka Alle (Qur'aanka kariimka ah) akh-risanaya oo dhexdooda akhrinta wadaagaya xasilooni baa ku soo dagta, naxariis " Alle " baana daboosha , ma laa' igna waxay ku daboosha baalashooda, Allena malaa'igta isaga ag jooga buu u sheegaa . Qofkii camalkiisu reebana dhalashadiisu (yacni nasabkii-su) sooma hormariyo. "

٣٠ - باب الشفاعة

C U T U B K A 30

SHAFEECO (GARAB SIIN)

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قَالَ اللَّهُ تَعَالَى :

﴿ مَنْ يَشْفَعْ شَفَاعَةً حَسَنَةً يَكُنْ لَهُ نَصِيبٌ مِنْهَا ﴾ [النساء : ٨٥] .

107. ' Kii garabeyn wanaagsan garbeeya ajar buu leeyahay" Suuradda an-Nisaa: Aayadda 85

٢٤٦ - وعن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه قال : كان النبي ﷺ إِذَا أَنَاهُ طَالِبٌ حَاجَةً أَقْبَلَ عَلَى جُلْسَائِهِ فَقَالَ : « اشْفَعُوا تُؤَجَّرُوا وَيَقْضَى اللَّهُ عَلَى لِسَانِ نَبِيِّهِ مَا أَحَبَّ » متفق عليه .

وفي رواية : « مَا شَاءَ » .

246. Abuu Muusaa Al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: Mar kastoo qof dan leh uu u yimaado nabiga (S.C.W.) wuxuu weydiin jirey ragga la fadhiya, oo ku oran jirey: " Garab siiya oo gacan ka geysta arrintiisa ajar baad ka helayaane (xag Alle) . Allena wuxuu ku guddoominayaa carrabka nebigiisa (S.C.W.) wixii uu doono." (Bukhaari iyo Muslim)

٢٤٧ - وعن ابن عباس رضي الله عنهما في قصة بريرة وزوجها . قال : قال لها النبي ﷺ : « لَوْ رَاجَعْتِهِ ؟ » قَالَتْ : يَا رَسُولَ اللَّهِ تَأْمُرُنِي ؟ (١) قال : « إِنَّمَا أَشْفَعُ » قَالَتْ : لَا حَاجَةَ لِي فِيهِ . رواه البخاري .

247. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu sheegay isagoo ka hadlaya khi-laafkii iyo murankii ka dhex dhacay Bariira iyo ninkeeda, in nebigu (S.C.W.) ku yiri Bariira: ' Way wanaagsanaan laheyd haddii aad ku noqotid ninkaaga. Waxay tiri: Rasuul Alloow, Ma talo iyo kala dhexgalid bay ka tahay mise waa amar? Wuxuu ku jawaabay: Mayee waa iga asxaanfal iyo kala dhex galid. Waxay tiri: Ma aan rabo." (Bukhaari)

٣١ - باب الإصلاح بين الناس

C U T U B K A 31

SAMA KA TALINTA IYO HESHIINTA DADKA

قال الله تعالى :
Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ لَا خَيْرَ فِي كَثِيرٍ مِنْ نَجْوَاهُمْ إِلَّا مَنْ أَمَرَ بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَيْنَ النَّاسِ ﴾ [النساء : ١١٤]

108." Khayr kuma jiro shirarka badan oo ay yeelanayaan mid sadaqo faray ama wax san ama wax sama ka talin dadka dhexdiisa ah maahee" Suuradda an-Nisaa : Aayadda 14.

وقال تعالى :

﴿ وَالصُّلْحُ خَيْرٌ ﴾ [النساء : ١٢٨]

109. " Sama ka talintaa khayr badan" Suuradda an-Nisaa: Aayadda 128.

وقال تعالى : Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye :

﴿ فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَصْلِحُوا ذَاتَ بَيْنِكُمْ ﴾ [الأنفال : ١]

110. " Alle ka Cabsada oo dhexdiina samo ka taliya " .Suuradda al-Anfaal: Aayadda 1

وقال تعالى : Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَأَصْلِحُوا بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ ﴾ [الحجرات : ١٠] .

111. "Mu'miniinta kaliyaa walaalo ah ee walaalihiin dhexdooda samo ka taliya" Suuradda al-Xujuraat : Aayadda 10.

٢٤٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « كُلُّ سُلَامَى مِنْ النَّاسِ عَلَيْهِ صَدَقَةٌ ، كُلُّ يَوْمٍ تَطْلُعُ فِيهِ الشَّمْسُ : تَعْدِلُ بَيْنَ الْاِثْنَيْنِ صَدَقَةٌ ، وَتُعِينُ الرَّجُلَ فِي دَابَّتِهِ فَتَحْمِلُهُ عَلَيْهَا ، أَوْ تَرْفَعُ لَهُ عَلَيْهَا مَتَاعَهُ صَدَقَةٌ ؛ وَالْكَلِمَةُ الطَّيِّبَةُ صَدَقَةٌ ، وَبِكُلِّ خَطْوَةٍ تَمْشِيهَا إِلَى الصَّلَاةِ صَدَقَةٌ ، وَتُمِيطُ الْأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ صَدَقَةٌ » متفقٌ عليه .

ومعنى « تَعْدِلُ بَيْنَهُمَا » : تُصْلِحُ بَيْنَهُمَا بِالْعَدْلِ .

248. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Sadaqaa lagu leeyahay xubnaha uu ka kooban yahay qofka maalin walba oo qorraxi soo baxdo, (si aad sadaqaa isaga guddo) heshiish iyo samo dhex dhig labo qof oo kala boodsan, taasi waa sadaqo'e. ; ku taageeridda qofkana inuu daabbadiisa fuulo , ama inuu saarto alaabtiisa iyana waa sadaqo; erey san oo la yiraahdona waa sadaqo; tallaabo kasta oo aad qaaddid adoo salaad u socda waa sadaqo; inaad ka qaaddo wax dhib leh waddooyinka la maro waa sadaqo." (Bukhaari iyo Muslim)

٢٤٩ - وعن أمِّ كلثوم بنت عُقْبَةَ بنِ أَبِي مَعِيْطٍ رَضِيَ اللهُ عَنْهَا قَالَتْ : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « لَيْسَ الْكُذَّابُ الَّذِي يُصْلِحُ بَيْنَ النَّاسِ فَيُنْمِي خَيْرًا أَوْ يَقُولُ خَيْرًا » متفقٌ عليه .

وفي رواية مسلم زيادة ، قالت : وَلَمْ أَسْمَعْهُ يُرَخِّصُ فِي شَيْءٍ مِمَّا يَقُولُهُ النَّاسُ إِلَّا فِي ثَلَاثٍ ، تَعْنِي : الْحَرْبَ وَالْإِصْلَاحَ بَيْنَ النَّاسِ ، وَحَدِيثَ الرَّجُلِ امْرَأَتَهُ وَحَدِيثَ الْمَرْأَةِ زَوْجَهَا .

249. Umm Kulthuum bint Cuqbah bin abii Mucayd (A.K.R.) waxay tiri: Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: (beenlow ma'aha kan dadka dhexdiisa nabadda iyo samaanta ka talinaya oo khayrka wada ama sheegaya beenba ha adeegsadee." .
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale ee xadiiska ah oo saxiixul Muslim ku taal baa aheyd: " Kamana maqal isagoo fasaxaya waxay dadku ku hadlayaan , sad-dex arrimood ma'ahee ; goorta dagaalka, sama iyo nabad ka talinta (heshiisiinta) dadka dhexdiisa iyo goorta ninka naagtiisa wax u sheegayo ama iyadu ninkeedu wax u sheegayso" . (Muslim)

٢٥٠ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : سَمِعَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ صَوْتَ خُصُومٍ بِالْبَابِ عَالِيَةً أَصْوَاتُهُمَا ، وَإِذَا أَحَدُهُمَا يَسْتَوْضِعُ الْآخَرَ وَيَسْتَرْفِقُهُ فِي شَيْءٍ ، وَهُوَ يَقُولُ : وَاللَّهِ لَا أَفْعَلُ ، فَخَرَجَ عَلَيْهِمَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ : « أَيْنَ الْمُتَالِي عَلَى اللَّهِ لَا يَفْعَلُ الْمَعْرُوفَ » ؟ فَقَالَ : أَنَا يَا رَسُولَ اللَّهِ ، فَلَهُ أَيُّ ذَلِكَ أَحَبُّ . مَتَّفِقٌ عَلَيْهِ .

معنى « يَسْتَوْضِعُهُ » : يَسْأَلُهُ أَنْ يَضَعَ عَنْهُ بَعْضَ دِينِهِ . وَ« يَسْتَرْفِقُهُ » : يَسْأَلُهُ الرَّفْقَ . وَ« الْمُتَالِي » : الْحَالِفُ .

250. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Nebigaa (S.C.W.) wuxuu maqlay laba nin oo ku doodaya hadal dheer dheer , debedda irridkiisa oo midkood ka codsanayo kan kale inuu wax ka cafiyo deynta uu ku leeyahay oo u naxariisto. Kan kalena leeyahay: Alle baan ku dhaaranayaa inaan yeelayn. Nebigaa (S.C.W.) inta debedda u soo baxay weydiyey: Meeyey kii ku dhaaranayey Alle inuusan asxaan falayn ?Ninkii baa yiri: Waa aniga rasuul Alloow , haatanse wuxuu rabo (kii uu lacagta ku lahaa oo ay is hayeen) waa u yeelayaa." .
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٥١ - وعن أبي العباس سهل بن سعد الساعدي رضي الله عنه ، أن رسول الله ﷺ بَلَغَهُ أَنَّ بَنِي عَمْرٍو بن عَوْفٍ كَانَ بَيْنَهُمْ شَرٌّ ، فَخَرَجَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ يُضْلِحُ بَيْنَهُمْ فِي أَنْاسٍ مَعَهُ ، فَحُبِسَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ وَحَانَتِ الصَّلَاةُ ، فَجَاءَ بِلَالٌ إِلَى أَبِي بَكْرٍ رضي الله عنهما فقال : يَا أَبَا بَكْرٍ إِنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَدْ حُبِسَ وَحَانَتِ الصَّلَاةُ فَهَلْ لَكَ أَنْ تَوَمَّ النَّاسَ ؟ قَالَ : نَعَمْ إِنْ شِئْتَ ، فَأَقَامَ بِلَالٌ الصَّلَاةَ ، وَتَقَدَّمَ

أَبُو بَكْرٍ فَكَبَّرَ وَكَبَّرَ النَّاسُ ، وَجَاءَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ يَمْشِي فِي الصُّفُوفِ حَتَّى قَامَ فِي الصَّفِّ ، فَأَخَذَ النَّاسُ فِي التَّصْفِيْقِ ، وَكَانَ أَبُو بَكْرٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ لَا يَلْتَفِتُ فِي الصَّلَاةِ ، فَلَمَّا أَكْثَرَ النَّاسُ التَّصْفِيْقَ التَّفَتَ ، فَإِذَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ ، فَأَشَارَ إِلَيْهِ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ فَرَفَعَ أَبُو بَكْرٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ يَدَهُ فَحَمِدَ اللَّهَ ، وَرَجَعَ الْقَهْقَرَى وَرَاءَهُ حَتَّى قَامَ فِي الصَّفِّ ، فَتَقَدَّمَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ ، فَصَلَّى لِلنَّاسِ ، فَلَمَّا فَرَغَ أَقْبَلَ عَلَى النَّاسِ فَقَالَ : « أَيُّهَا النَّاسُ مَا لَكُمْ حِينَ نَابَكُمْ شَيْءٌ فِي الصَّلَاةِ أَخَذْتُمْ فِي التَّصْفِيْقِ ؟ ! إِنَّمَا التَّصْفِيْقُ لِلنِّسَاءِ . مَنْ نَابَهُ شَيْءٌ فِي صَلَاتِهِ فَلْيَقُلْ : سُبْحَانَ اللَّهِ ، فَإِنَّهُ لَا يَسْمَعُهُ أَحَدٌ حِينَ يَقُولُ سُبْحَانَ اللَّهِ ، إِلَّا التَّفَتَ ، يَا أَبَا بَكْرٍ : مَا مَنَعَكَ أَنْ تُصَلِّيَ بِالنَّاسِ حِينَ أَشْرَتْ إِلَيْكَ ؟ » فَقَالَ أَبُو بَكْرٍ : مَا كَانَ يَنْبَغِي لِابْنِ أَبِي قُحَافَةَ أَنْ يُصَلِّيَ بِالنَّاسِ بَيْنَ يَدَيْ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، مَتَّفِقٌ عَلَيْهِ .

معنى « حُبْسَ » : أَمْسَكُوهُ لِيُضَيِّفُوهُ .

251. Abuu Cabbaas Sahal ibn Saacid as-Saacidi (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaa nebiga (S.C.W.) soo gaadhey in khilaaf iyo dhibaato ka dhex jirto rag ka tirsan qabiillada reer Camar iyo reer ibn Coof. markaasuu u aaday inuu soo heshiisiiyo isagoo ay rag kalena oo asxaabtiisa ka mida ay wehliyaan. Markii wixii ka dhexeeyey uu xalliyey ayaa waxaa la gudboonaaday inuusan ka tagin marteglintii ay u sameeyeen . Markaa baa waqtigii salaadda la gaaray, Markaasuu Bilaal (A.K.R). Abuu Bakar (A.K.R.) u yimid oo ku yiri: Abuu Bakaroor nabigii (S.C.W.) waa lagu dhagay, salaaddiina waa la joogaa ee dadka ma tujinaysaa ? Wuxuu yiri: Haah, haddii aad doonto. Bilaal (A.K.R.) salaaddii buu aqimay. Abuu Bakarna (A.K.R.) inta horay yimid buu xirtay oo Allaahu akbar yiri , dadkiina waa ku xirteen oo Allaahu akbar ka daba yiraahdeen. Nebigii (S.C.W.) baa yimid oo inta safafkii soo dhex maray safka horé soo galay. Dadkii baa sacab garaacay (si ay ugu baraarujiyaan Abuu Bakar inuu nabigii yimid) abuu Bakarna waxaa caado u ahaa in mar hadduu salaad galo meelna uusan jalleecin, milicsanna waxaan salaadda aheyn. Sidaa awgeed dan uma gelin oo Salaaddiisii buu iska sii watay. Markii sacab garaacii ay sii badiyeen buu Abuu Bakar jalleecay, mise nabigii (S.C.W.) baa taagan , markaasaa nebigu (S.C.W.) U ishaaray inuu salaadda wado, isaguna inta gacantiisa kor u qaaday, oo alxamdulillaah yiri, buu dib dib u soo baxay oo safka soo galay , nebiguna (S.C.W.) hore u baxay oo dadkii tujiiyey. Markii uu dhammeeyey buu inta asxaabtii ku soo jeensaday yiri: Maxaad markii ay salaadda dhexdeeda wax idinku soo kor-dhaan u sacbinaysaan,? Sacbinta haweenkaa leh oo ay caadadood

tahay. Qofkii ay wax ku soo kordhaan isagoo tukanaya ha yiraahdo: subxaanallaahi. Qofkii subxaanallaahidiisa maqlaa waa baraarugayaa. Abuu Bakarow (A.K.R.) maxaad ku diiday inaad sii waddo salaadda markii aan kuu ishaaray inaad sidaa yeesho? Wuxuu yiri: Lama habboona Abuu Quxaafah (waa abuu Bakar) inuu dadka tujiiyo Nebigii (S.C.W.) oo jooga" . (Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah: Abuu Quxaafah waa magaca Abuu Bakar aabbihi.

٣٢ - باب فضل ضعفة المسلمين والفقراء والخاملين

C U T U B K A 32

SHARAFTA SARE IYO QIIMAHA AY MASAAKIINTU IYO KUWA LIITA EE TABARTA YAR KU LEEYIHIIN BULSHADA MUSLIMKA AH DHEXDEEDA .

قال الله تعالى : Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ وَأَصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ وَلَا تَعْدُ عَيْنَاكَ عَنْهُمْ ﴾ [الكهف : ٢٨] .

112. " La Samir kuwa Rabbigood baryaya galab iyo subaxba oo wejigiisa doonaya, indhahaagana iyaga ha dhaafin" Suuradda al-Kahaf: Aayadda 28.

٢٥٢ - وعن حارثة بن وهب رضي الله عنه قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « أَلَا أُخْبِرُكُمْ بِأَهْلِ الْجَنَّةِ ؟ كُلُّ ضَعِيفٍ مُتَضَعِّفٍ ، لَوْ أَقْسَمَ عَلَى اللَّهِ لِأَبْرَةٍ أَلَا أُخْبِرُكُمْ بِأَهْلِ النَّارِ ؟ كُلُّ عُتْلٍ جَوَاطٍ مُسْتَكْبِرٍ » متفقٌ عليه .

« العُتْلُ » : الغليظ الجافي . و« الجَوَاطُ » : بفتح الجيم وتشديد الواو وبالطاء المعجمة : وهو الجموع المنوع ، وقيل : الضخم المختال في مشيته ، وقيل : القصير البطين .

252. Xaarisa bin Wahab (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay nabiga (S.C.W.) oo leh: Ma idiin sheegaa ehlu jannaha? Waa miskiin kasta oo diciif ah oo hadduu Alle ku dhaarto laga aqbalayo. Hadda-

na ma idiin sheegaa ehlu naarka ? waa mid kastoo ah jaahil, wax-
matare, xishoodlaawe, isla weyne kibir badan" .

(Bukhaari iyo Muslim)

٢٥٣ - وعن أبي عباس سهل بن سعد الساعدي رضي الله عنه قال : مرَّ رجلٌ على
النبي ﷺ فقال لرجلٍ عنده جالسٌ : « مَا رَأَيْكَ فِي هَذَا ؟ » فقال : رَجُلٌ مِنْ
أَشْرَافِ النَّاسِ ، هَذَا وَاللَّهِ حَرِيٌّ إِنْ خَطَبَ أَنْ يُنْكَحَ وَإِنْ شَفَعَ أَنْ يُشَفَعَ .
فَسَكَتَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ ، ثُمَّ مرَّ رَجُلٌ آخَرَ ، فقال له رسولُ اللَّهِ ﷺ : « مَا رَأَيْكَ
فِي هَذَا ؟ » فقال : يا رسولَ اللَّهِ هَذَا رَجُلٌ مِنْ فُقَرَاءِ الْمُسْلِمِينَ هَذَا حَرِيٌّ إِنْ
خَطَبَ أَنْ لَا يُنْكَحَ وَإِنْ شَفَعَ أَنْ لَا يُشَفَعَ وَإِنْ قَالَ أَنْ لَا يُسْمَعَ لِقَوْلِهِ . فقال
رسولُ اللَّهِ ﷺ : « هَذَا خَيْرٌ مِنْ مِاءِ الْأَرْضِ مِثْلَ هَذَا » متفقٌ عليه .

قوله : « حَرِيٌّ » هو بفتح الحاء وكسر الراء وتشديد الياء : أي حقيق .
وقوله « شَفَعَ » بفتح الفاء .

253. Abul Cabbaas Sahal ibn Saacid as-Saacidi (A.K.R.) wuxuu
yiri: Nin baa wuxuu soo ag maray Nebiga (S.C.W.) oo meel fa-
dhiya. Nabigaa wuxuu weydiiyey nin asxaabtiisa ka mida oo la fa-
dhiyey: " Muxuu kula yahay ninkan, hadda ina dhaafay ? Saxaabigii
rasuulka la fadhiyey wuxuu yiri: Waa nin dadka sharafta leh ku jira,
Alle baan ku dhaaran, hadduu gabar soo doono waa nin la siinayo,
hadduu cid wejigiisa wax ugu doonana laga yeelayo. Nabigu
(S.C.W.) waa aamusay. Dabadeedna nin kalaa soo maray, Wuxuu
yiri nebigu (S.C.W.) : Kanna muxuu kula yahay ? Wuxuu yiri:
Nebi Alloow waa nin fuqarada muslimiinta ka mid ah . Waa nin
haddii uu gabar soo doono aan la siiyeen , haddii uu cid wejigiisa
wax ugu doonana aan laga yeeleen , haddii uu hadal yiraahdana
aan laga maqleen. Nebigu (S.C.W.) Wuxuu yiri: Kanu (muslimka
faqiirka ah) wuxuu ka khayr roon yahay waxa rag dhulka jira ee
kuwa aad hadda amaaneysay oo kale ah" . (Bukhaari iyo Muslim)

٢٥٤ - وعن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « أَحْتَجِبُ
الْجَنَّةَ وَالنَّارَ فَقَالَتِ النَّارُ: فِيَّ الْجَبَّارُونَ وَالْمُتَكَبِّرُونَ ، وَقَالَتِ الْجَنَّةُ: فِيَّ ضِعْفَاءُ
النَّاسِ وَمَسَاكِينُهُمْ ، فَقَضَى اللَّهُ بَيْنَهُمَا : إِنَّكَ الْجَنَّةُ رَحْمَتِي أَرْحَمُ بِكَ مِنْ أَشَاءَ ،
وَإِنَّكَ النَّارُ عَذَابِي أَعَذَّبُ بِكَ مِنْ أَشَاءَ ، وَلَكَلَيْكُمَا عَلَيَّ مَلُؤُهُمَا » رواه مسلم .

254. Abuu Saciid Al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Dood baa waxay dhexmartay Jannada iyo Naarta. Naartii baa waxay tiri: Waxaa aniga gudaheyga , geli doona jajuubayaashii, khaa'in kasta iyo isla weynayaasha; Jannadiina waxay tiri: waxaa aniga gudaheyga geli doona kuwa tabarta yar iyo kuwa la liido ee fuqurada ah. Markaasaa Alle u gar naqay oo yiri: Adigu jannooy, naxariistaydii baad tahay, adiga dhexdaada baana naxariistay ku siin ciddii aan doono. Adiguna naar baad tahay, meel ciqaabeed, adiga dhexdaada baana ku ciqaabayaa ciddii aan doono. , mid walbaana inaan buuxiyo bay igu leedahay)
(Muslim)

٢٥٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن رسول الله ﷺ قال : « إِنَّ لِيَأْتِي الرَّجُلُ السَّمِينُ الْعَظِيمُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ لَا يَزِنُ عِنْدَ اللَّهِ جَنَاحَ بَعُوضَةٍ » متفق عليه .

255. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Nin weyn oo buuran baa la hor keenayaa Alle maalinta qiyaamaha, aanse Alle agti culeyskiisu, garab kaneeco ka dhammayn".
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٥٦ - وعنه أن امرأة سوداء كانت تقم المسجد (أو شاباً) ففقدتها (أو فقدته) رسول الله ﷺ ، فسأل عنها (أو عنه) ، فقالوا : مات . قال : « أفلا كنتم أدنتموني [به] » قال : فكانهم صغروا أمرها [أو أمره] . فقال : « دلوني على قبره » فدلوه . فصلى عليها ثم قال : « إن هذه القبور مملوءة ظلماً على أهلها ، وإن الله عز وجل . ينورها لهم بصلاتي عليهم » متفق عليه .

قوله « تقم » هو بفتح التاء وضم القاف : أي تكس . و« القمامة » : الكناسه . و« أدنتموني » بمد الهمزة : أي أعلمتموني .

256. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Naag madow (ama nin dhallinyaro ah buu ahaa, weriyaha xadiiska baanan hubin) baa masjidka xaaqi jirtay (xaaqi jiray) . Markaasaa nebigu (S.C.W.) arki waayey (naagtii ama ninkii dhallinyarada ahaa) oo markaa dadkii weyddiiyey. Waxay yiraahdeen waa dhimatay (ama wuu dhintay) . Markaasuu nabigu (S.C.W.) yiri maxaad iisoo ogeysiin weydeen. Sida ay asxaabtii yaraysteen oo ayan ahmiyad siin . Markaas buu weydiistay inay tusaan qabriga meydka. Kolkay tuseen qabrigii buu ku dul tukaday oo u duceeyey wuxuuna yiri: Qabuuruhan mugdi iyo madow badan baa ka buuxa kuna ay heysaa dadka

deggan ee ku jira. Allena wuu u iftiimayaa dadka qubuuraha ku jira salaaddayda iyo ducadeyda awgeed. (Bukhaari iyo Muslim)

٢٥٧ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « رَبُّ أَشْعَثَ أَغْبَرَ مَذْفُوعٍ بِالْأَبْوَابِ لَوْ أَقْسَمَ عَلَى اللَّهِ لِابْرَةِ » رواه مسلم .

257. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Waxaa jira dad badan kuwaasoo u muuqda kuwa basaa-san , timo raamo ah leh, iyo wajiyo engagan oo Albaabada laga xirto oo hadday Alle ku dhaartaan laga Aqblayo wixii ay Alle ka dal-been. " (Muslim)

Fiiro gaar ah: Dadkaa tilmaamaha waxay ku yeesheen baa la yiri sabab jihaad ay ku jiraan , iyo u heegan ahaanti iyo ilaalo iyo gaar ay cadowga ka hayaan, iyagoo isla markaa guta waajibaadkooda kale ee diiniga, sida salaadda, soonka, u diyaargarowga cadowga iwm, taana ay u dheer tahay saboolnimo iyo faqri.

٢٥٨ - وعن أسامة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « قُمْتُ عَلَى بَابِ الْجَنَّةِ ، فَإِذَا عَامَةٌ مِنْ دَخَلَهَا الْمَسَاكِينُ ، وَأَصْحَابُ الْجَدِّ مَحْبُوسُونَ ، غَيْرَ أَنْ أَصْحَابَ النَّارِ قَدْ أُمِرَ بِهِمْ إِلَى النَّارِ . وَقُمْتُ عَلَى بَابِ النَّارِ فَإِذَا عَامَةٌ مِنْ دَخَلَهَا النِّسَاءُ » متفقٌ عليه .

و« الْجَدُّ » : بفتح الجيم : الْحِطُّ وَالْغِنَى . وَقوله : « مَحْبُوسُونَ » أي : لَمْ يُؤْذَنَ لَهُمْ بَعْدُ فِي دُخُولِ الْجَنَّةِ .

258. Usaamah bin Zayd (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Habeenkii Micraajka (Cirka la ii dheelmiyey) kolkaan istaagay Jannada irridkeeda, baan waxaan arkay in waxa galay ay u badan yihiin masaakiintii. Iyadoo dadkii hodonka ahaa loo diiday gelitaanka. Ehlu Naarkiina waxaa amar lagu bixiyey in naarta loo kaxeeyo, oo lagu takhantakheeyo. markaasaan misna waxaan istaagey naarta irridkeeda, mise waxa galay waxaa u badan dumar". (Bukhaari iyo Muslim)

٢٥٩ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « لَمْ يَتَكَلَّمْ فِي الْمَهْدِ إِلَّا ثَلَاثَةٌ : عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ ، وَصَاحِبُ جُرَيْجٍ ، وَكَانَ جُرَيْجٌ رَجُلًا عَابِدًا ، فَاتَّخَذَ صَوْمَعَةً فَكَانَ فِيهَا فَاتَتُهُ أُمُّهُ وَهُوَ يُصَلِّي فَقَالَتْ : يَا جُرَيْجُ ، فَقَالَ : يَا رَبِّ أُمِّي

وَصَلَاتِي فَأَقْبَلَ عَلَيَّ صَلَاتِي فَأَنْصَرَفَتْ . فَلَمَّا كَانَ مِنَ الْغَدِ أَتَتْهُ وَهُوَ يُصَلِّي ،
 فَقَالَتْ : يَا جَرِيحُ ، فَقَالَ : أَيُّ رَبِّ أُمِّي وَصَلَاتِي ، فَأَقْبَلَ عَلَيَّ صَلَاتِي ، فَلَمَّا كَانَ
 مِنَ الْغَدِ أَتَتْهُ وَهُوَ يُصَلِّي فَقَالَتْ : يَا جَرِيحُ ، فَقَالَ : أَيُّ رَبِّ أُمِّي وَصَلَاتِي ، فَأَقْبَلَ
 عَلَيَّ صَلَاتِي ، فَقَالَتْ : اللَّهُمَّ لَا تُعِمَّهُ حَتَّى يَنْظُرَ إِلَى وُجُوهِ الْمُؤْمِسَاتِ . فَتَذَاكِرَ بَنُو
 إِسْرَائِيلَ جُرَيْجًا وَعِبَادَتَهُ ، وَكَانَتْ امْرَأَةٌ بَغِيٌّ يُتَمَثَّلُ بِحُسْنِهَا ، فَقَالَتْ : إِنْ شِئْتُمْ
 لِأَفْتِنْتَهُ ، فَتَعَرَّضْتُ لَهُ ، فَلَمْ يَلْتَفِتْ إِلَيْهَا ، فَأَتَتْ رَاعِيًا كَانَ يَأْوِي إِلَى صَوْمَعَتِهِ ،
 فَأَمَكَّتَهُ مِنْ نَفْسِهَا فَوَقَعَ عَلَيْهَا ، فَحَمَلَتْ ، فَلَمَّا وَلَدَتْ قَالَتْ : هُوَ مِنْ جُرَيْجٍ ،
 فَاتَوْهُ فَاسْتَنْزَلُوهُ وَهَدَمُوا صَوْمَعَتَهُ ، وَجَعَلُوا يَضْرِبُونَهُ ، فَقَالَ : مَا شَأْنُكُمْ ؟ قَالُوا :
 زَيْنَتْ بِهَذِهِ الْبَغِيِّ فَوَلَدَتْ مِنْكَ . قَالَ : أَيْنَ الصَّبِيِّ ؟ فَجَاؤُوا بِهِ فَقَالَ : دَعُونِي
 حَتَّى أَصَلِّي ، فَصَلَّى فَلَمَّا أَنْصَرَفَ أَتَى الصَّبِيَّ فَطَعَنَ فِي بَطْنِهِ وَقَالَ : يَا غُلَامُ مَنْ
 أَبُوكَ ؟ قَالَ : فَلَانُ الرَّاعِي ، فَأَقْبَلُوا عَلَيَّ جُرَيْجٍ يُقْبَلُونَهُ وَيَتَمَسَّحُونَ بِهِ ، وَقَالُوا :
 نَبِيِّ لَكَ صَوْمَعَتِكَ مِنْ ذَهَبٍ . قَالَ : لَا ، أَعِيدُوهَا مِنْ طِينٍ كَمَا كَانَتْ ، فَفَعَلُوا .
 وَبَيْنَا صَبِيٌّ يَرْضَعُ مِنْ أُمِّهِ فَمَرَّ رَجُلٌ رَاكِبٌ عَلَى دَابَّةٍ فَارَاهُ وَشَارَهُ حَسَنَةً ، فَقَالَتْ
 أُمُّهُ : اللَّهُمَّ اجْعَلْ ابْنِي مِثْلَ هَذَا ، فَتَرَكَ التَّدْيِيَّ وَأَقْبَلَ إِلَيْهِ فَنَظَرَ إِلَيْهِ فَقَالَ : اللَّهُمَّ
 لَا تَجْعَلْنِي مِثْلَهُ ، ثُمَّ أَقْبَلَ عَلَيَّ ثَدِيهِ فَجَعَلَ يَرْضَعُ فَكَأَنِّي أَنْظَرُ إِلَى
 رَسُولِ اللَّهِ ﷺ وَهُوَ يَحْكِي ارْتِضَاعَهُ بِأَصْبَعِهِ السَّبَابَةِ فِي فِيهِ ، فَجَعَلَ يَمْصُهَا ،
 قَالَ : « وَمَرُّوا بِجَارِيَةٍ وَهُمْ يَضْرِبُونَهَا وَيَقُولُونَ : زَيْنَتْ ، سَرَقَتْ ، وَهِيَ تَقُولُ :
 حَسْبِيَ اللَّهُ وَنِعْمَ الْوَكِيلُ ، فَقَالَتْ أُمُّهُ : اللَّهُمَّ لَا تَجْعَلْ ابْنِي مِثْلَهَا ، فَتَرَكَ الرِّضَاعَ
 وَنَظَرَ إِلَيْهَا فَقَالَ : اللَّهُمَّ اجْعَلْنِي مِثْلَهَا ، فَهَنَالِكَ تَرَاجَعَا الْحَدِيثُ فَقَالَتْ : مَرَّ رَجُلٌ
 حَسَنُ الْهَيْئَةِ فَقُلْتُ : اللَّهُمَّ اجْعَلْ ابْنِي مِثْلَهُ فَقُلْتُ : اللَّهُمَّ لَا تَجْعَلْنِي مِثْلَهُ ، وَمَرُّوا
 بِهَذِهِ الْأَمَةِ وَهُمْ يَضْرِبُونَهَا وَيَقُولُونَ : زَيْنَتْ سَرَقَتْ ، فَقُلْتُ : اللَّهُمَّ لَا تَجْعَلْ ابْنِي
 مِثْلَهَا ، فَقُلْتُ : اللَّهُمَّ اجْعَلْنِي مِثْلَهَا ؟ قَالَ : إِنَّ ذَاكَ الرَّجُلَ كَانَ جَبَّارًا فَقُلْتُ :
 اللَّهُمَّ لَا تَجْعَلْنِي مِثْلَهُ ، وَإِنَّ هَذِهِ يَقُولُونَ زَيْنَتْ ، وَلَمْ تَزِنْ ، وَسَرَقَتْ ، وَلَمْ
 تَسْرِقْ ، فَقُلْتُ : اللَّهُمَّ اجْعَلْنِي مِثْلَهَا » متفقٌ عليه .

« الْمُؤْمِسَاتُ » بَضْمِ الْمِيمِ الْأُولَى ، وَإِسْكَانِ الْوَاوِ وَكَسْرِ الْمِيمِ الثَّانِيَةِ

وبالسين المهملة ، وَهِنَّ الزَّوَانِي . وَالْمُؤَمِّسَةُ : الزَّانِيَةُ . وَقَوْلُهُ : « دَابَّةٌ فَارِهَةٌ »
بِالْفَاءِ : أَي حَاذِقَةٌ نَفِيسَةٌ . وَ« الشَّارَةُ » بِالشُّينِ الْمُعْجَمَةِ وَتَخْفِيفِ الرَّاءِ : وَهِيَ
الْجَمَالُ الظَّاهِرُ فِي الْهَيْئَةِ وَالْمَلْبَسِ . وَمَعْنَى « تَرَاجَعَا الْحَدِيثَ » أَي : حَدَّثَ
الصَّبِيَّ وَحَدَّثَهَا ، وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

259. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Reer banii Israa'iil dhexdood) saddex qof keliyaa iyagoo (ilmo dhashay) ah hadlay. Mid wuxuu ahaa nebi Ciise (C.S.) mid kalena wuxuu aha Jureyj Saaxiibkiis. Jureyj wuxuu ahaa nin saalix ah oo Cibaado badan , Wuxuu dhistay mowlac yar si uu ugu go'o inuu cibaadeysto .Maalin isagoo salaad ku jira baa hooyadiis u timid oo u yeertay. markaasuu Alle qalbiga ka baryey oo hoos iskula hadlay: Rabbiyoow ma salaaddaan dhammeeyaa mise hooyaday baan uga baxaa (Rabbiyow i solansii sida roon). salaaddii buu doortay oo iska watay, hooyadiina iska tagtay. Maalintii xigtay bay hooyadi u timid isagoo tukanaya oo tiri: ' Jureyj', wuxuu iskula hadlay oo Alle ka baryey ; Rabbiyoow ma salaaddaan wataa mise hooyaan uga baxaa, salaaddii buu doortay oo iska watay. Maalintii seddexaad bay hooyadi u timid isagoo tukanaya oo tiri : ' Jureyj ' wuxuu iskula hadlay misna oo Alle ka baryey ; Rabbiyoow ma salaaddaan wataa mise hooyaday baan uga baxaa .Salaaddii buu doortay oo iska watay. Duqdii waxay tiri: Alloow ha dilin jeer uu sharmuuto wejigeed arko.

Jurayj iyo cibaadadiisa caan bay noqdeen iyo arrimaha ugu horreeya ay isla dhex maraan oo ay ka sheekeeyaan reer banii Israa'iil. Waxaana ka mid ahaa reer banii Israa'iil naag sharmuuto ah , oo quruxdeeda tusaale loo soo qaadan jirey. Waxay tiri: Haddii aad rabtaan anigaa fidmayn kara oo fadeexad u soo jiidi kara. Markaasay isku dayday inay soo jiidato si uu uga dhilleysto ha yeeshee Jurayj waa uu jalleeci waayey , danna uma gelin. Waxay u tagtay qawsaar mowlaca Jurayj ag degganaa, oo intay isu dhiibtay ka dhilleystay uur bayna yeelatay. Markii ay dhashay bay tiri: Jurayj baa dhalay. Reer banii Israa'iil waxay u tageen Jurayj, liideen, meeshii bay ka soo saareen, oo inta mowliciisii dumiyeen, garaaceen
Jurayj baa wuxuu weydiiyey : Maxaad sidan iigu galeysaan ? Waxay yiraahdeen naagtaan dhilada ah baad ka sinaysatay oo ilmo kuu dhashay. Wuxuu yiri: ilmihii meeya? waa u keeneen . Wuxuu yiri: Ii kaadsha aan tukadee. Markaa buu tukadey, markii uu dhameystay salaaddii, buu ilmihii inta u tagay oo ku fariisiiyey dhabtiisii buu weydiiyey: Waa kuma aabbahaa ?wiilkii wuxuu yiri: Waa hebel ina hebel , ee qowsaarka ah. Markaasay reer banii Israa'iil oo dhan u yimaadeen Jurayj , iyagoo dhundhunkanaya oo

inuu ka raalli noqdo weydiisanaya oo ku yiraahdeen: Mowlacaagii oo dahab ah baan kuu dhisaynaa. Jurayj wuxuu yiri: Mayee dhoo-badeedii iiga dhisa oo sideedii ah, waana u dhiseen.

Arrinta saddexaad waxay aheyd ilmo hooyadiis nuugaya. Markaa baa waxaa soo ag maray nin fuushan faras dheereynaya oo bilic leh, ninkaa faraska watayna wuxuu labbisnaa dhar aad u qurxoon. Hooyadi baa baryootantay: Alloow wiilkayga iiga dhig sida ninkan. Wiilkii yaraa inta naaskii ka fuqay oo sidaas u fiiriyey ninkii buu yiri: Alloow ha iga dhigin sida ninkan. Dabadeedna naaskii buu isaga noqday oo iska nuugey. Halkan Nebigu (S.C.W.) tusaale buu ka bixiyey markii uu ilmaha nuugmadiisa ka sheekaynayey, oo inta fartiisa murugsatada ah afka geliyey muudsaday. Markaasuu hadalkii sii watay oo wuxuu yiri: Haddana waxaa soo maray dad badan iyo gabar addoonad ah, nimankuna waxay garaacayeen addoontaa iyagoo ku eedeynayey inay dhilleystay waxna xadday. iyaduna jawaab ahaan laheyd: Xasbiyyallaah wanicmal wakiil' Allaa igu filan oo aan wakiishay. Hooyadii baa tiri: Alloow wiilkayga taasoo kale ha ka dhigin. Markaasuu wiilkii inta naaskii ka fuqay oo sidaas u fiiriyey gabadhii buu yiri: Alloow iga dhig iyadoo kale. Markaasay wada hadallo dhex mareen Hooyadii iyo wiilkii. Waxay tiri hooyadii : Waxaa na soo ag maray nin heybad leh markaasaan waxaan iri: Alloow wiilkayga kanoo kale ka dhig, markaas baad waxaa tiri: Alloow isagoo kale ha iga dhigin. Misna dad baa soo maray iyo addoomad ay garaacayeen iyagoo ku eedayanya dhilleysi iyo tuugo. Markaasaan waxaan iri Alloow wiilkayga taasoo kale ha ka dhigin. markaasaad waxaa tiri Alloow iyadoo kale iga dhig. Wiilkii baa wuxuu ku jawaabay ninkaasi wuxuu ahaa nin jajubaa macangag ah, markaa baan kaa hor imid oo waxaan iri: Alloow kaasoo kale ha iga dhigin. Gabadhase, ay leeyihiin way dhilleysatay, run ahaantii ma ayan dhilleysan. Waxay ku eedeeyeen inay wax xadday, laakiinse waxna ma ay xadin (oo waa gabar mu'minad ah) , Sidaa awgeed baan waxaan iri: Alloow iga dhig iyadoo kale " .
(Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah:

Qur'aanka iyo sunnuha nabigu (S.C.W.) waxay ka hadleen mee-qaanka iyo darajada weyn ay leeyihiin dadka fuqurada iyo masaakiinta ah ee ka fog kibirka iyo isla weynida isla markaana dhowra xudduudda Alle, noolna nolol suubban oo ku saleysan Qur'aanka iyo sunnada. Xadiis uu werinayo Tirmidi wuxuu leeyahay, dadkaa oo idil (fuqurada iyo masaakiinta) waxay gali doonaan jannada 500 oo sano ka hor inta ayan galin hodanka iyo kuwii adduunka ku ladnaa. Fuqurada iyo masaakiinta waxay taa ku muteysteen dhibaataadii adduunka ku heysatay awgeed iyagoo aan ku helin nolol raaxo leh oo fudud adduunka.

٣٣ - باب ملاطفة اليتيم والبنات وسائر الضعفة والمساكين

والمنكسرين والإحسان إليهم والشفقة عليهم
والتواضع معهم ، وخفض الجناح لهم

C U T U B K A 33

WANAAJINTA AGOONTA, DUMARKA, GABDHAHA , DU-
QEYDA, KUWA TABARTA YAR, FUQARADA IYO
MASAAKIINTA IYO IN WANAAG IYO NAXARIIS LOO
MUUJIYO, SI TURID IYO NUGEYL LEHNA LOOLA
DHAQMO , WAXNA LA SHIYO.

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى

: ﴿ وَأَخْفِضْ جَنَاحَكَ لِلْمُؤْمِنِينَ ﴾ [الحجر : ٨٨]

113. " Mu'miniinta garabkaaga (naxariis iyo jaceyl) awgood ugu dibci" . Suuradda Al-Xijri: Aayadda 88.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَأَصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ وَلَا تَعْدُ عَيْنَاكَ عَنْهُمْ تُرِيدُ زِينَةَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا ﴾ [الكهف : ٢٨]

114. " La sabir kuwa galab iyo subaxba Rabbigood baryaya oo we-jigiisa doonaya,. indhahaagana iyaga ha dhaafsiin adigoo doonaya quruxda nolosha adduuunka" Suuradda: Al-Kahaf Aayadda 28.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ فَأَمَّا الْيَتِيمَ فَلَا تَقْهَرْ وَأَمَّا السَّائِلَ فَلَا تَنْهَرْ ﴾ [الضحى : ٩ - ١٠]

115. " Agoonka ha u darnaan , waydiistahana ha guul guulin oo hadal san ku dheh" . Suuradda Ad-Duxaa: Aayadaha 9-10

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ أَرَأَيْتَ الَّذِي يُكَذِّبُ بِالذِّينِ فَذَلِكَ الَّذِي يَدْعُ الْيَتِيمَ وَلَا يَحْضُ عَلَى طَعَامِ الْمِسْكِينِ ﴾ [الماعون : ١ - ٣] .

116. " Ma aragtay kan diinta beeninaya ? Kaasu waa kan agoonka takhantakheeya, wax siinta miskiinkana aan iska xil saarin (dadkana aan ku boorrin) " . Suuradda Al-Maacuun : Aayadaha 1-3.

٢٦٠ - وعن سعد بن أبي وقاص رضي الله عنه قال : كُنَّا مَعَ النَّبِيِّ ﷺ سِتَّةَ نَفَرٍ ، فقال المُشْرِكُونَ لِلنَّبِيِّ ﷺ : أَطْرُدُ هَؤُلَاءِ لَا يَجْتَرِثُونَ عَلَيْنَا ، وَكُنْتُ أَنَا وَابْنُ مَسْعُودٍ وَرَجُلٌ مِنْ هَذِيلٍ وَبِلَالٌ وَرَجُلَانِ لَسْتُ أُسَمِّيهِمَا ، فَوَقَعَ فِي نَفْسِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ مَا شَاءَ اللَّهُ أَنْ يَقَعَ فَحَدَّثَتْ نَفْسُهُ ، فَأَنْزَلَ اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ : ﴿ وَلَا تَطْرُدِ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ ﴾ [الأنعام : ٥٢] ، رواه مسلم .

260. Sacad ibn abii Waqaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Lix innaga ah baa la fadhiyey nebiga (S.C.W.) markuu nabigu (S.C.W.) u bandhigay Islaamka gaalada. Gaaladii waxay yiraahdeen: Kuwan naga eri yeysan nagu soo dhiirrane. Lixdu waxay kala ahaayeen aniga, ibn Mascuud , Bilaal , nin reer Hudeyl ah iyo laba nin oo kale aan magacyadooda garaneyn. Markaasay nebiga (S.C.W.) niyaddiisa wax ku soo dheceen , markaasuu laba laabiyey oo meel dhex noqday, goortas buu Alle ku soo dajiyey : ' Ha eryin kuwa Rabbigood barayaya galab iyo subaxba oo wejigiisa doonaya" . Suuradda al-Ancaam: Aayadda 52. (Muslim)

٢٦١ - وعن أبي هُبَيْرَةَ عَائِدِ بْنِ عَمْرٍو الْمَزِينِيِّ وَهُوَ مِنْ أَهْلِ بَيْعَةِ الرِّضْوَانِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ ، أَنَّ أَبَا سُفْيَانَ أَتَى عَلَى سَلْمَانَ وَصُهَيْبٍ وَبِلَالٍ فِي نَفَرٍ فَقَالُوا : مَا أَخَذَتْ سُيُوفُ اللَّهِ مِنْ عَدُوِّ اللَّهِ مَاخِذَهَا ، فقال أبو بكر رضي الله عنه : أَتَقُولُونَ هَذَا لِشَيْخِ قُرَيْشٍ وَسَيِّدِهِمْ ؟ فَأَتَى النَّبِيَّ ﷺ ، فَأَخْبَرَهُ فَقَالَ : « يَا أَبَا بَكْرٍ لَعَلَّكَ أَغْضَبْتَهُمْ ؟ لَيْتَنِي كُنْتُ أَغْضَبْتَهُمْ لَقَدْ أَغْضَبْتَ رَبَّكَ ؟ » فَأَنَاهُمْ فَقَالَ : يَا إِخْوَتَاهُ أَغْضَبْتِكُمْ ؟ قَالُوا : لَا ؛ يَغْفِرُ اللَّهُ لَكَ يَا أُخِي ؟ رواه مسلم .

قوله « مَاخِذَهَا » أي : لَمْ تَسْتَوْفِ حَقَّهَا مِنْهُ . وقوله : « يَا أُخِي » رُوِيَ بفتح الهمزة وكسر الخاء وتخفيف الياء ، وَرُوِيَ بِضَمِّ الهمزة وفتح الخاء وتشديد الياء .

261. Abuu Hubayrah Caayiz ibn Camar al-Muzani (A.K.R.) oo ka mid ahaa raggii beecada al-Ridwaan (yacni waa nin ka mida raggii raallinimada Alle helay ee dhaarta iyo ballanta ku galay inay naf-tooda iyo maalkooda u huraa Alle markii Xudaybiyya la joogay) . wuxuu yiri: Abuu Sufyaan baa wuxuuku yimid rag ay ka mid yihiin Bilaal , Salmaan iyo Suhayb; kuwaas oo yiri: Waxaan kaga

cad goosannay cadowgii Alle Seefihii Alle, qaarna way sugeysaa " Abu Bakar (A.K.R.) baa wuxuu ku yiri: Sidaas ma odaygii Quraysheed baad ku leedihiin? . Markaa buu intuu (Abu Bakar) Nebiga (S.C.W.) u tegey buu u sheegay wixii dhacay. Wuxuu yiri nabigu (S.C.W.): Armaad ka caraysiisay (raggaa sharafta badan)? haddii aad ka caraysiisay Rabbigaa baad ka caraysiisay. Abu Bakar (A.K.R.) intuu ku noqday buu yiri: Walaalayaaloow, Mi - yaan idiinka caraysiiyey? Waxay ku jawaabeen: May. dembigaaga Allaha dhaafo walaalle.' (Muslim)

٢٦٢ - وعن سهل بن سعد رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « أَنَا وَكَافِلُ الْيَتِيمِ فِي الْجَنَّةِ هَكَذَا » وَأَشَارَ بِالسَّبَابَةِ وَالْوَسْطَى ، وَفَرَجَ بَيْنَهُمَا . رواه البخاري و « كَافِلُ الْيَتِيمِ » الْقَائِمُ بِأَمُورِهِ .

262. Sahal Ibn Sacad (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Aniga iyo kan agoonka daryeela, waxynu gali Jannada innagoo sidaa oo kale ah" wuxuuna kor u qaaday fardhexada iyo murugsatada oo simay oo isu dhaweeyey. (tusaale ahaan). (Bukhaari)

٢٦٣ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « كَافِلُ الْيَتِيمِ لَهُ أَوْ لِغَيْرِهِ أَنَا وَهُوَ كَهَاتَيْنِ فِي الْجَنَّةِ » وَأَشَارَ الرَّاوي وَهُوَ مَالِكُ بْنُ أَنَسٍ بِالسَّبَابَةِ وَالْوَسْطَى . رواه مسلم .

وقوله ﷺ : « الْيَتِيمُ لَهُ أَوْ لِغَيْرِهِ » مَعْنَاهُ : قَرِيبُهُ ، أَوْ الْأَجْنَبِيُّ مِنْهُ ، فَالْقَرِيبُ مِثْلُ أَنْ تَكْفُلَهُ أُمُّهُ أَوْ جَدُّهُ أَوْ أَخُوهُ أَوْ غَيْرُهُمْ مِنْ قَرَابَتِهِ . وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

263. Abu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " aniga iyo kan daryeela agoonka, xigto ha la ahaado, ama shisheeye ha ka ahaadee waxaynu ahaan doonnaa sida labadaa Jannada dhexdeeda; wariyaha xadiiska nabiga ka soo xigtay (oo ah Maalik bin Anas) wuxuu kor u taagay fardhexada iyo murugsatada oo simay si uu arrintaasi u muujiyo". (Muslim)

٢٦٤ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لَيْسَ الْمِسْكِينُ الَّذِي تَرُدُّهُ التَّمْرَةُ وَالتَّمْرَتَانِ ، وَلَا اللَّقْمَةُ وَاللَّقْمَتَانِ إِنَّمَا الْمِسْكِينُ الَّذِي يَتَعَفَّفُ ^(١) » متفقٌ عليه .

وفي رواية في الصحيحين : « لَيْسَ الْمِسْكِينُ الَّذِي يَطُوفُ عَلَى النَّاسِ تَرُدُّهُ

اللُّقْمَةُ وَاللُّقْمَتَانِ ، وَالتَّمْرَةُ وَالتَّمْرَتَانِ ، وَلَكِنَّ الْمِسْكِينَ الَّذِي لَا يَجِدُ غِنَى يُغْنِيهِ ،
وَلَا يُفْطَنُ بِهِ فَيَتَصَلَّقَ عَلَيْهِ ، وَلَا يَقُومُ فَيَسْأَلُ النَّاسَ .

264. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Miskiinku ma aha kan ay celinayso oo ku tagaya xabad timir ah ama laba xabbo ama rudmo ama laba rudmo: miskiinka dhabta ahi waa kan isagoo faqri qaba, ka xishoonaya baryada".
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale waxay ahayd oo isla Bukhaari iyo Muslim ku sugan: ' Miskiinku ma aha kan dadka ku wareegaya isagoo baryootamaya , iyo kan ku tagaya rudmo ama labo rudmo ama timir ama labo xab-boo timir ah. Ee miskiinka dhabta ahi waa kan aan heysan wax ku filan, oo aan muujineynna faqriga iyo dhibaataadiisa si sakada loo siiyo aan u istaagina baryo iyo wax weydiisi " .

٢٦٥ - وعنه عن النبي ﷺ قال : « السَّاعِي عَلَى الْأَرْمَلَةِ وَالْمِسْكِينَ ، كَالْمُجَاهِدِ فِي سَبِيلِ اللَّهِ » وَأَحْسَبُهُ قَالَ : « وَكَالْقَائِمِ الَّذِي لَا يَقْتَرُ وَكَالصَّائِمِ الَّذِي لَا يُفْطِرُ » متفقٌ عليه .

265. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Ninkii u dadaala oo u shaqeeya dumarka da'da ah ee laga dhintay iyo masaakiinta wuxuu heli ajar la mid ah mujaahidka (jidka Alle u diriraya); wariyaha xadiiska wuxuu yiri waxaan u malaynayaa inuu nabigu (S.C.W.) intaa raaciyey : wuxuuna heli ajar la mid ah kan habeenkii oo dhan salaadda u taagan oo aan daalayn iyo kan soomanaha ah ee aan afurin" . (Bukhaari iyo Muslim)

٢٦٦ - وعنه عن النبي ﷺ قال : « شَرُّ الطَّعَامِ طَعَامُ الْوَلِيمَةِ يُمْنَعُهَا مَنْ يَأْتِيهَا وَيُدْعَى إِلَيْهَا مِنْ أَبَائِهَا ، وَمَنْ لَمْ يُجِبِ الدَّعْوَةَ فَقَدْ عَصَى اللَّهَ وَرَسُولَهُ » رواه مسلم .

وفي رواية في الصحيحين عن أبي هريرة من قوله : « بَشَسَ الطَّعَامُ طَعَامُ الْوَلِيمَةِ يُدْعَى إِلَيْهَا الْأَغْنِيَاءُ وَيُتْرَكُ الْفُقَرَاءُ » .

266. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Cuntada waxaa u xun cuntada martiqaadka ah ee aroosyada ee aan looga yeerin dadkii u baahnaa, laguna casumo dad aan dooneyn inay ka soo qayb galaan; qofkii casumaad loogu yeero oo diidana Alle iyo rasuulkiisuu ku caasiyey .".
(Muslim)

Werin kale oo ku sugan Bukhaari iyo Muslim waxay leedahay: " Cunto waxaa u xun cuntada martiqaadka aroosyada ee dadka maal qabeenka iyo hodanka ah looga yeero, saboolkana laga tago." (Bukhaari iyo Muslim)

٢٦٧ - وعن أنس رضي الله عنه ، عن النبي ﷺ قال : « مَنْ عَالَ جَارِيَتَيْنِ حَتَّى تَبْلُغَا جَاءَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ أَنَا وَهُوَ كَهَاتَيْنِ » وَضَمَّ أَصَابِعَهُ . رواه مسلم .
« جَارِيَتَيْنِ » أَي : بنتين .

267. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii laba gabdhood masaruufa (yacni siiya masruuf , marasho, kuna barbaariya barbaarin diini ah iyo Alle ka cabsi) ilaa ay ka qaan gaaraan, wuxuu maalinta qiyaame imaanayaa isagoo sida labadaas aan isku nahay. intuu labada farood isku lammaaniyey. (Muslim)

٢٦٨ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : دَخَلْتُ عَلَيَّ امْرَأَةً وَمَعَهَا ابْتَان لَهَا ، تَسْأَلُ فَلَمْ تَجِدْ عِنْدِي شَيْئًا غَيْرَ تَمْرَةٍ وَاحِدَةٍ فَأَعْطَيْتُهَا إِيَّاهَا فَقَسَمَتْهَا بَيْنَ ابْنَتَيْهَا وَلَمْ تَأْكُلْ مِنْهَا ثُمَّ قَامَتْ فَخَرَجَتْ فَدَخَلَ النَّبِيُّ ﷺ عَلَيْنَا فَأَخْبَرْتُهُ فَقَالَ : « مَنْ ابْتَلَى مِنْ هَذِهِ الْبَنَاتِ بِشَيْءٍ ، فَأَحْسَنَ إِلَيْهِنَّ كُنَّ لَهُ سِتْرًا مِنَ النَّارِ » متفقٌ عليه .

268. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Waxaa ii timid naag wadata labo gabdhood oo ay dhashay oo iyaga wax u baryeysa . waxba ma hayn waqtigaa aan siiyo xabbad timir ah maahee oo aan siiyey. Waxay u kala jeexday labadeedii gabdhood, iyadiina wax ma cunin. Dabadeedna waa kacdoon iska tagtay. Waxaa yimid Nebiga (S.C.W.) oo aan u sheegay arrintaa. Wuxuu yiri: Qofkii lagu imti-xaano gabdho dhalka oo markaas wanaajiya (yacni siiya masruuf, marasho, kuna barbaariya barbaarin diini ah iyo Alle ka cabsi, sida inay ku dadaalaan towxiidka, salaadda, sakada, xijaabka iyo is asturka, iyo waajibyada kale ee diiniga ah oo dhan , dabadeedna u guuriya nin diin iyo dabci wanaagsan leh). waxay xijaab iyo gaa-shaan uga noqon doonaan naarta" . (Bukhaari iyo Muslim)

٢٦٩ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : جَاءَتْنِي مِسْكِينَةٌ تَحْمِلُ ابْنَتَيْنِ لَهَا فَأَطْعَمْتُهَا ثَلَاثَ تَمْرَاتٍ فَأَعْطَتْ كُلَّ وَاحِدَةٍ مِنْهُمَا تَمْرَةً وَرَفَعَتْ إِلَيَّ فِيهَا تَمْرَةً لِتَأْكُلَهَا فَاسْتَطَعَمْتُهَا ابْنَتَاهَا فَشَقَّتِ التَّمْرَةَ الَّتِي كَانَتْ تُرِيدُ أَنْ تَأْكُلَهَا بَيْنَهُمَا فَأَعْجَبَنِي شَأْنُهَا

فَذَكَرْتُ الَّذِي صَنَعَتْ لِرَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ : « إِنَّ اللَّهَ قَدْ أَوْجَبَ لَهَا بِهَا الْجَنَّةَ أَوْ
أَعْتَقَهَا بِهَا مِنَ النَّارِ » . رواه مسلم .

269. Caa' isha (A.K.R.) waxay tiri: Naag miskiin ah baa ii timid iyo laba gabdhood oo ay dhashay . Markaasaan saddex xabbo oo timir ah siiyey. Midba midbay siisay tii kalena inay iyadu cunto damacday. Markay afka la aaday bay labadii gabdhood ka baryeen. Say way u kala jeexday oo kala siisay. waa aan la yaabay falkeedaasi, waxaana u sheegay nebiga (S.C.W.) sidii ay yeeshay. Wuxuu yiri nabigu (S.C.W.) : Alle wuxuu u waajibiyey janno falkeedaasi awgeed; ama Alle naar buu kaga xoreeyey falkeedaasi".
(Muslim)

٢٧٠ - وعن أبي شريح خويلد بن عمرو الخزازي رضي الله عنه قال : قال النبي ﷺ : « اللَّهُمَّ إِنِّي أَخْرَجُ حَقَّ الضَّعِيفِينَ الْيَتِيمِ وَالْمَرْأَةِ » حديث حسن ، رواه النسائي بإسناد جيد .

ومعنى « أَخْرَجُ » : أُلْحِقَ الْحَرَجَ وَهُوَ الْإِثْمُ بِمَنْ ضَيَّعَ حَقَّهُمَا ، وَأَحْذَرُ مِنْ ذَلِكَ تَحْذِيرًا بَلِيغًا ، وَأَزْجُرُ عَنْهُ زَجْرًا أَكِيدًا .

270. Abuu Shurayx Khuweylid ibn Camar al-Khuzaaci (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alloow , waxaan caddeyn inay dambi tahay (dhibaato weynna ay ka soo gaari) qofkii dayaca xuquuqda labada tabarta yar, agoonta iyo dumarka" .
(Nisaa'i)

Fiiro gaar ah : Imaam Nisaa'i wuxuu sheegay inuu xadiiskan xasan yahay sanad wanaagsan .

٢٧١ - وعن مصعب بن سعد بن أبي وقاص رضي الله عنهما قال : رأى سعد أن له فضلاً على من دونه فقال النبي ﷺ : « هَلْ تُنْصَرُونَ وَتُرْزَقُونَ إِلَّا بِضِعْفَائِكُمْ » رواه البخاري هكذا مُرْسَلًا . فإن مصعب بن سعد تابعي ، ورواه الحافظ أبو بكر البرقاني في صحيحه متصلًا عن مصعب عن أبيه رضي الله عنه

271. Muscab ibn Sacad Abii Waqaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Sacad baa wuxuu isu arkay inuu ka sito oo ka sarreyo dadka liita aan siidiisoo kale u ladneyn . Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Waxaa la idiinku hiilliyaa oo la idinku irsaaqaa dadkiinna tabarta yar dar-tood" .
(Bukhaari)

٢٧٢ - وعن أبي الدرداء عويمر رضي الله عنه قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « ابغوني في الضعفاء فإنما تنصرون وترزقون بضعفائكم » رواه أبو داود بإسناد جيد .

272. Abuu Dardaa (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nabiga (S.C.W.) oo leh : " Farxadda iyo raallinimeyda waxaad ka dhex daydaan (daryeelka) dadka tabarta yar, Waayo waxaa la idiinkaga hiilliyaa (cadowgiinna) oo la idinku siiyaa (risiqiinna) dadkiinna tabarta yar dartood. " (AbuuDaawuud)
 Imaam Daawuud baa ku wariyey xadiiskan sanad fiican .

Fiiro gaar ah: Nuxurka iyo dhuuxa aayadaha Qur'aanka iyo axaa-diista nabiga (S.C.W.) ee kor ku xusan waa soo dhoweynta iyo marti gelinta iyo wax tarka dadka, gaar ahaan masaakiinta iyo dadka tabarta yar iyo ka fogaanshaha kibirka iyo isla weynida. Waayo isla weynidu waa sifo iyo tilmaan ku gaar ah Alle , weynaa oo kor ahaaye. mana jirto cid sifadaa iyo tilmaantaa la wadaagta. Sidaa awgeed kuma habboona addoomada Alle inay isla weyni muujiyaan ama naftooda u arkaan sida wax weyn oo sare. Addoommada Alle waxaa waajib ku ah inay ahaadaan kuwa martida soora oo soo dhoweeya oo isla markaa kibir iyo isla weyni ka maran. Waxaana waajib ku ah inay iskula dhaqmaan si nadiif ah oo ilbaxnimo ku jidho iyo naxariis. Intaa waxaa dheer, naxariista iyo jaceylka waa tilmaamo iyo arrimo aan ku koobneyn dadka oo keliya, bal xitaa waxaa la wadaaga nafley kale. Tilmaamahaana waxay ka cayaa-raan dowl weyn hannaanka iyo hab socodka kownka. Sida uu dhi-gayo Qur'aanka kariimka ah , magacaabidda nabi Muxammad (S.C.W.) loo magaacabay xilka Ah " Rasuulkii Alle" waxaaa sab-ab u ahaa naxariista badan iyo gallada Alle .

٣٤ - باب الوصية بالنساء

CUTUBKA 34

WANAAJINTA DUMARKA

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ وَعَاشِرُوهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ ﴾ [النساء : ١٨]

117. " Ula dhaqma (dumarka) si wanaagsan" Suuradda an-Nisaa : Aayadda 19

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَلَنْ تَسْتَطِيعُوا أَنْ تَعْدِلُوا بَيْنَ النِّسَاءِ وَلَوْ حَرَصْتُمْ فَلَا تَمِيلُوا كُلَّ الْمِيلِ فَتَدْرُوهَا كَالْمُعَلَّقَةِ وَإِنْ تُصْلِحُوا وَتَتَّقُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ غَفُوراً رَحِيماً ﴾ [النساء :

. [١٢٩

118. " Kari maysaan inaad xaasaskiinna dhexdooda caddaalad fashaan (si kastoo aad u jeclaataan inaad sidaa yeeshaan). Ee leexasho buuxda ha ka leexannina (middood) oo ha ka tegina sida aad mooddid inay meel ku xiran tahay, haddii aad wanaag fashaan (yacni xaqa raacdaan, xumahana aad ka dhowrsataan), Alle waa dembi dhaafaa naxariis badan".

(Caddaaladdan aan la sameyn karin ee adag waxaa loola jeedaa jaceylka qalbiga iyo galmada, caddaaladda kalese ee la xiriirta hunguriga, hu'ga iyo hoyga waa la iska rabaa oo waa in caddaalad buuxda laga sameeyo oo aan lagu gabood falin).

٢٧٣ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « استَوْصُوا بالنِّسَاءِ خَيْرًا ، فَإِنَّ الْمَرْأَةَ خُلِقَتْ مِنْ ضِلْعٍ ، وَإِنَّ أَعْوَجَ مَا فِي الضِّلْعِ أَعْلَاهُ : فَإِنْ ذَهَبَتْ تُقِيمُهُ كَسْرَتُهُ ، وَإِنْ تَرَكَتَهُ لَمْ يَزَلْ أَعْوَجَ فَاسْتَوْصُوا بالنِّسَاءِ » متفقٌ عليه .

وفي رواية في الصحيحين : « الْمَرْأَةُ كَالضِّلْعِ إِنْ أَقَمْتَهَا كَسْرَتَهَا وَإِنْ اسْتَمْتَعْتَ بِهَا اسْتَمْتَعْتَ بِهَا وَفِيهَا عَوْجٌ » .

وفي رواية لمسلم : « إِنْ الْمَرْأَةُ خُلِقَتْ مِنْ ضِلْعٍ ، لَنْ تَسْتَقِيمَ لَكَ عَلَى طَرِيقَةٍ ، فَإِنْ اسْتَمْتَعْتَ بِهَا وَفِيهَا عَوْجٌ . وَإِنْ ذَهَبَتْ تُقِيمُهَا كَسْرَتَهَا ، وَكَسْرُهَا طَلَاقُهَا » . قوله « عَوْجٌ » هو بفتح العين والواو .

273. Abuu Hurayrah (AK.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Wanaajiya dumarka oo si wanaagsan oo naxariis leh ula dhaqma . Dumarka waxaa laga abuuray feer (feertuna waa qalloocan tahay) Dhinaca ugu qallooc badan feertana waa dhinace sare. Haddii aad damacdo inaad toosiso waa jebinaysaa, haddii aad si-deeda u deysana, qallooceda bay iska ahaan . Marka wanaajiya dumarka oo si naxariis leh ula dhaqma" . (Bukhaari iyo Muslim)

Werin ku sugan Bukhaari iyo Muslim waxay dhigeysaa : " Ha-weentu waa feer oo kale, haddii aad toosi is tiraa inay jabto bay ha -

lis u tahay haddii aad doonina inaad ka faa'ideysato , waad yeeli kadhaa waase iyadoo qalloocan" . (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale oo Muslim ku taal waxay leedahay : " Haweenta waxaa laga abuuray feer mana toosin kareysid. Haddii aad dooneysid inaad ku intifaacdo yeel sidaa inkastoo qallooc ku jiro. Haddii aad toosi is tiraana waad jabineysaa, jabinteedana waa furriinkeeda". (Muslim)

٢٧٤ - وعن عبد الله بن زَمْعَةَ رضي الله عنه ، أنه سَمِعَ النبي ﷺ يَخْطُبُ ، وَذَكَرَ النَّاقَةَ وَالَّذِي عَقَرَهَا ، فقال رسول الله ﷺ : « إِذْ أَنْبَعَتْ أَشْقَاهَا ﴿ أَنْبَعَتْ لَهَا رَجُلٌ عَزِيزٌ عَارِمٌ مَنِيعٌ فِي رَهْطِهِ ﴾ ثُمَّ ذَكَرَ النِّسَاءَ فَوَعَّظَ فِيهِنَّ فَقَالَ : « يَعْمِدُ أَحَدُكُمْ فَيَجْلِدُ امْرَأَتَهُ جَلْدَ الْعَبْدِ ، فَلَعَلَّهُ يُضَاجِعُهَا مِنْ آخِرِ يَوْمِهِ ﴾ ثُمَّ وَعَظَهُمْ فِي ضَحِكِهِمْ مِنَ الضَّرْطَةِ ، وقال : « لِمَ يَضْحَكُ أَحَدُكُمْ مِمَّا يَفْعَلُ » متفقٌ عليه .
وَ« الْعَارِمُ » بالعين المهملة والراء : هو الشَّرِيرُ المفسِدُ . وقوله : « أَنْبَعَتْ » أي : قامَ بسرعة .

274. Cabdullaah ibn Zamca (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo khudbaynaya, khudbaddasoo uu kaga warraamay hashii (nabi Saalax) iyo habaar qabahii faylaha gooyey. Wuxuu ku yiri khudbaddiisaas : ' Markii uu soo baxay hoogahoodii ' Suuradda Ash Shams : Aayadda 13. macnaha waa waxaa hashii u soo baxay madaxoodii, oo shar wale ahaa awood iyo kalmad ku dhex leh qabiilkii Samuud , madaxna u ahaa kaa baa u soo baxay si uu u faylo gooyo hashi. Dabadeed nabigu wuxuu ka dardaarmay haweenka oo yiri: " Midkiin baa haweentiisa garaacaya isagoo ula dhaqmaya sida addoon. Maalinta dhammaadkeedana waxaa laga yaabaa inuu la jiifsado oo u tago. Misna wuxuu ka wacdiyey dhunsada lagu qoslayo , oo wuxuu yiri: ' Bal muxuu qofku ugu qoslayaa qof kale, oo falaya wixii uu isagu (kaa qoslaya) qudhiisu falayey". (Bukhaari iyo Muslim)

٢٧٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لَا يَفْرَكُ مُؤْمِنٌ مُؤْمِنَةً ، إِنْ كَرِهَ مِنْهَا خُلُقًا ، رَضِيَ مِنْهَا آخَرَ - أَوْ قَالَ - : غَيْرُهُ » . رواه مسلم .
وقوله : « يَفْرَكُ » هو بفتح الياء وإسكان الفاء وفتح الراء معناه : يُبْغِضُ ،

يقال : فَرِكَتِ الْمَرْأَةُ زَوْجَهَا وَفَرَكَهَا زَوْجُهَا بكسر الراء يَفْرِكُهَا بفتحها : أي ابغضَها ، وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

275. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Yuusan ninka muslimka ahi wax caro iyo naceyb ah u qaadin haweenta muslimadda ah. Arrin buu ku qoonsan karaa, waxaase laga yaabaa inuu mid kale oo wanaagsan (ka helo) oo uu raalli (Muslim) kaga noqdo".

٢٧٦ - وعن عمرو بن الأحوص الجُشمي رضي الله عنه أنه سَمِعَ النبي ﷺ في حَجَّةِ الْوَدَاعِ يَقُولُ ، بَعْدَ أَنْ حَمِدَ اللَّهُ تَعَالَى ، وَأَثْنَى عَلَيْهِ وَذَكَرَ وَوَعظَ ثُمَّ قَالَ : « أَلَا وَاسْتَوْصُوا بِالنِّسَاءِ خَيْرًا فَإِنَّمَا هُنَّ عَوَانٌ عِنْدَكُمْ ، لَيْسَ تَمْلِكُونَ مِنْهُنَّ شَيْئًا غَيْرَ ذَلِكَ ، إِلَّا أَنْ يَأْتِيَنَّ بِفَاحِشَةٍ مُبَيَّنَةٍ ، فَإِنْ فَعَلْنَ ، فَاهْجُرُوهُنَّ فِي الْمَضَاجِعِ ، وَأَضْرِبُوهُنَّ ضَرْبًا غَيْرَ مُبْرَحٍ ، فَإِنْ أَطَعْنَكُمْ فَلَا تَبْغُوا عَلَيْهِنَّ سَبِيلًا . أَلَا إِنَّ لَكُمْ عَلَى نِسَائِكُمْ حَقًّا وَلِنِسَائِكُمْ عَلَيْكُمْ حَقًّا ؛ فَحَقُّكُمْ عَلَيْهِنَّ أَنْ لَا يُوطِئَنَّ فُرْشَكُمْ مَنْ تَكْرَهُونَ ، وَلَا يَأْذَنَنَّ فِي بُيُوتِكُمْ لِمَنْ تَكْرَهُونَ ؛ أَلَا وَحَقُّهُنَّ عَلَيْكُمْ أَنْ تُحْسِنُوا إِلَيْهِنَّ فِي كِسْوَتِهِنَّ وَطَعَامِهِنَّ » رواه الترمذي ، وقال : حديث حسن صحيح .

قوله ﷺ : « عَوَانٌ » أي : أسيراتُ جَمْعِ عَانِيَةٍ بِالْعَيْنِ الْمُهْمَلَةِ وَهِيَ الْأَسِيرَةُ ، وَالْعَانِي : الْأَسِيرُ . شَبَّهَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ الْمَرْأَةَ فِي دَخُولِهَا تَحْتَ حُكْمِ الزَّوْجِ بِالْأَسِيرِ ، وَ« الضَّرْبُ الْمُبْرَحُ » : هُوَ الشَّقُّ الشَّدِيدُ . وَقَوْلُهُ ﷺ : « فَلَا تَبْغُوا عَلَيْهِنَّ سَبِيلًا » أي : لَا تَطْلُبُوا طَرِيقًا تَحْتَجُونَ بِهِ عَلَيْهِنَّ وَتُوذُوهُنَّ بِهِ ، وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

276. Camar ibn Axwas Jushami (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maq-lay nebiga (S.C.W.) oo ku leh khudbaddiisii sagootiga ee uu ka jeediyeey xajkiisii u dambeeyey markuu Alle hufay oo ammaanay , oo u digay ummaddiisa raacday wuxuu yiri : Dhageysta! ha -weenka wanaajiya oo si naxariis leh ula dhaqma; waa il madow idin la jooga'e iyo maxaabiis gacantiinna ku jira. Wax intaa dheer oo aad ku leedihiinna ma jirto. haddii ay akhlaaq xumo iska cad la yimaadaan , uga guura sariiraha, oo garaaca garaacid aan wax-yeello lahayn, dhaawac iyo dhibaato aan gaarsiineyn. Markaa kad-dib haddii ay idin adeecaan wax kale ha u raacannina. Dhageysta! Haweenkiinna xaq baad ku leedihiin , iyaguna xaq bay idinku leeyi-

hiin, Xaqa aad ku leedihiinna waxaa ka mid ah inaysan gogoshiinna ku fariisin qof aydaan raalli uga ahayn, gurigiinnana soo gelin karin qof aydaan dooneyn.xaqoodana waxaa ka mid ah inaad ha-gaajisaan huggooda iyo hungurigooda (yacni masruufka iyo marashadooda)". Tirmidi baa weriyey oo yiri; waa xadiis xasan ah oo saxiix ah .

٢٧٧ - وعن معاوية بن حيدة رضي الله عنه قال : قلت : يا رسول الله ما حق زَوْجَةٍ أَحَدِنَا عَلَيْهِ ؟ قال : « أَنْ تُطْعِمَهَا إِذَا طَعِمْتَ ، وَتَكْسُوَهَا إِذَا اكْتَسَيْتَ ، وَلَا تَضْرِبَ الْوَجْهَ ، وَلَا تُقَبِّحَ ، وَلَا تَهْجُرَ إِلَّا فِي الْبَيْتِ » حديثٌ حسنٌ رواه أبو داود ، وقال : « معنى « لا تُقَبِّحَ » لا تقل : قبحك الله » .

277. Mucaawiyah ibn Xaydah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan ka codsaday Rasuulkii Alle (S.C.W.) inuu ii sheego waxa ay haween-tu ninkeeda xaq ugu leedahay ?Wuxuu yiri: " Quudi sidaada oo kale, goortaad naftaada quudisadba. Arradtir sii sidaada oo kale ah goortaad arrad tiritaba; wejigana ha ku dhufan; ha af lagaadeyn (ama ha nacladin), markii aad u carootaanna oo aad damacdaan in-aad ka fogaataan, guriga ha ka tegina, oo meel ka mid ah guriga ka jiifsada".
(Abuu Daawuud)

٢٧٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « أَكْمَلُ الْمُؤْمِنِينَ إِيمَانًا أَحْسَنُهُمْ خُلُقًا ، وَخَيْرُكُمْ خِيَارُكُمْ لِنِسَائِهِمْ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

278. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Muslimiinta waxaa u iimaan sarreeya kan ugu dabecad wa-naagsan; waxaana idiinku ikhyaarsan kuwiinna haweenkooda u dabciga san". (Tirmidi) baa weriyey oo yiri;waa xadiis xasan ah oo saxiix ah .

٢٧٩ - وعن إياس بن عبد الله بن أبي ذباب رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لَا تَضْرِبُوا إِمَاءَ اللَّهِ » فجاء عُمَرُ رضي الله عنه إلى رسول الله ﷺ فقال : ذِئْرُنَ النِّسَاءِ عَلَى أَرْوَاجِهِنَّ فَرَخَّصَ فِي ضَرْبِهِنَّ ، فَأَطَافَ بِأَلِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ نِسَاءٌ كَثِيرٌ يَشْكُونَ أَرْوَاجَهُنَّ ، فقال رسول الله ﷺ : « وَلَقَدْ أَطَافَ بِأَلِ بَيْتِ مُحَمَّدٍ نِسَاءٌ يَشْكُونَ أَرْوَاجَهُنَّ لَيْسَ أَوْلَئِكَ بِخِيَارِكُمْ » رواه أبو داود بإسناد صحيح .

قوله : « ذَيْرُنْ » هُوَ بِذَالٍ مُعْجَمَةٍ مَفْتُوحَةٍ ثُمَّ هَمْزَةٌ مَكْسُورَةٌ ثُمَّ رَاءٌ سَاكِنَةٌ ثُمَّ نُونٌ أَي : أَجْتَرَانُ . قوله « أَطَافٌ » أَي : أَحَاطَ .

279. Iyaas ibn Cabdullaah bin abuu Zubaaab (A.K.R.) wuxuu sheegay in nebigu (S.C.W.) u digay (muslimiinta) inay si xun ula dhaqmin dumarka. Muddo kaddib baa Cumar (A.K.R) nebiga (S.C.W.) u yimid oo yiri: Nebi Alloow haweenkii nimankoodii waa ku kibreen oo waxay noqdeen waxaan loo dhowaan karin. Markaasuu nebigu in la edbiyo rukhseeyay. Arrintaa kaddib dumar badan baa u yimid xaasaska nebiga (S.C.W.) oo nimankoodii ka eed sheeganaya. Markaa buu yiri nebigu (S.C.W): " dhowr dumar ah baa xaasaskeyga u yimid oo dhaqan xumada raggoodii ka eed sheeganaya. Raggaas idinku jira ikhyaar ma ahee ogaada" .
(Abuu Daawuud)

٢٨. - وعن عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما ، أن رسول الله ﷺ قال : « الدُّنْيَا مَتَاعٌ وَخَيْرُ مَتَاعِهَا الْمَرْأَةُ الصَّالِحَةُ » رواه مسلم .

280. Cabdullaahi ibn Camar ibn al-Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Adduunyadu waa meel leh waxyaabo wanaagsan , waxa jirana waxaa u wanaagsan haweeney (xaas) fiican".
(Muslim.)

٣٥ - باب حق الزوج على المرأة

C U T U B K A 35

XAQA UU NINKU HAWEENTIISA KU LEEYAHAY

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ الرُّجَالُ قَوَّامُونَ عَلَى النِّسَاءِ بِمَا فَضَّلَ اللَّهُ بَعْضَهُمْ عَلَى بَعْضٍ وَبِمَا أَنْفَقُوا مِنْ أَمْوَالِهِمْ فَالصَّالِحَاتُ قَانِتَاتٌ حَافِظَاتٌ لِّلْغَيْبِ بِمَا حَفِظَ اللَّهُ ﴾ [النساء : ٣٤] .

119. " Raggu iyagaa haweenka mas'uul ka ah , waxa Alle is dheereysiiyey, iyo maalkooda oo ay ku masruufaan (dumarka) aawa-deed. Marka dumarka wanaagsan ee suubanooyinka ah waa ad-deecooyinka dhawra marka laga maqan yahay wixii Alle dhawray (yacni dhowra naftooda iyo arrimaha gurigeeda iyo ninkeeda) ".
Suuradda An Nisaa: Aayadda 34.

Xadiisyadana waxaa ka mid ah kii Camar ibn Axwas oo aan ku soo marnay ciwaankaan soo dhaafnay, waana xadiiska tiradiisu tahay 276.

٢٨١- وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِذَا دَعَا الرَّجُلُ امْرَأَتَهُ إِلَى فِرَاشِهِ ، فَلَمْ تَأْتِهِ فَبَاتَ غَضَبَانَ عَلَيْهَا لَعْنَتُهَا الْمَلَائِكَةُ حَتَّى تُصْبِحَ » متفقٌ عليه .

وفي رواية لهما : « إِذَا بَاتَتِ الْمَرْأَةُ هَاجِرَةً فِرَاشَ زَوْجِهَا لَعْنَتُهَا الْمَلَائِكَةُ حَتَّى تُصْبِحَ » .

وفي رواية قال رسول الله ﷺ : « وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ مَا مِنْ رَجُلٍ يَدْعُو امْرَأَتَهُ إِلَى فِرَاشِهِ فَتَأْتِيهِ عَلَيْهِ إِلَّا كَانَ الَّذِي فِي السَّمَاءِ سَاحِطًا عَلَيْهَا حَتَّى يَرْضَى عَنْهَا » .

281. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Markii uu ninku afadiisa u yeero oo gogoshiisa inay timaad-do ugu yeero, oo ay imaan weydo, oo habeenkii ku seexdo caro uu u qabo, malaai'gtaa nacaladda (haweentaa) ilaa waaberiga".
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kalena oo Bukhaari iyo Muslim ku taal waxay ahayd :

" Habeenkii ay haweentu barido iyadoo gogasha ninkeeda diiddan, malaa'igtaa nacaladda illaa waaberiga".
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay : Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle baan ku dhaaran, ay nafteydu gacantiisu ku jidho, marka nin-ka naagtiisa gogoshiisa ugu yeerto oo ay diiddo waxaa u carays- naanaya iyada kan cirka jira (waa Alle), jeer uu ninkeeda raalli ka noqdo".

٢٨٢- وعن أبي هريرة رضي الله عنه أيضاً أن رسول الله ﷺ قال : « لَا يَجِلُّ لِمَرْأَةٍ أَنْ تَصُومَ وَرَوْجُهَا شَاهِدٌ إِلَّا بِإِذْنِهِ ، وَلَا تَأْذَنَ فِي بَيْتِهِ إِلَّا بِإِذْنِهِ » متفقٌ عليه ، وهذا لفظ البخاري .

282. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Uma bannaana inay afadu soonto (soon sunno ah) ninkeeda

oo guriga jooga, inuu isagu u idmo ma ahee, umana bannaana sidoo kale inay gurigiisa u idanto cid uusan isagu u idmin".

(Bukhaari iyo Muslim)

٢٨٣ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما عن النبي ﷺ قال : « كلکم راعٍ وكلُّکم مسؤولٌ عن رعيته ، والأمير راعٍ ، والرجُل راعٍ ، على أهل بيته ؛ والمرأة راعيةٌ على بيت زوجها وولده ، فكلُّکم راعٍ ، وكلُّکم مسؤولٌ عن رعيته » متفقٌ عليه .

283. Ibnu Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qof walbaa waa mas' uul oo xil baa ka saaran (waajibyada dushiisa ah , waana ka mas'uul wixii ka dhaca cidda iyo waxyaabaha loo xil saaray), Ninka madaxda ahi waa mas'uul (waana la weydiinayaa sida uu xilka uga soo baxay la xiriira dadweynahaa uu mas'uulka ka yahay), Ninku waa mas'uul iyo wakiil oo reerkiisuu mas'uul ka yahay, naagtuna waa mas'uul oo guriga ninkeeda iyo ilmihiisa bay mas'uul ka tahay.Hadal iyo dabuubti qof walbaa waa mas'uul , waana la weydiinayaa wixii ammaana ah oo gacantiisa ku jira iyo howl iyo dadba".

(Bukhaari iyo Muslim)

٢٨٤ - وعن أبي علي طلق بن علي رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « إذا دعا الرجل زوجته لحاجته ، فلتأته وإن كانت على التور » . رواه الترمذي والنسائي وقال الترمذي : حديث حسن صحيح .

284. Abuu Cali Dalq ibn Cali (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Ninku markuu haweentiisa ugu yeerto dantiisa ha u timaaddo xataa haddii ay ku howlan tahay roodhi sameynti oy tinnaar ku jirto (macnaha xataa hadday cunto karineyso) " . (Tirmidi iyo Nisaa'i) Wuxuu yiri Tirmidi waa xadiis xasan ah, saxiixna ah.

٢٨٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « لو كنتُ امرأةً أحدًا أن يسجدَ لأحدٍ ، لأمرتُ المرأةَ أن تسجدَ لزوجها » رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

285. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Haddii ay ahaan laheyd wax bannaan inuu qof u sujuudo qof kale, haweentaan amri lahaa inay ninkeeda u sujuuddo". (Tirmidi) . Wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah, saxiixna ah.

٢٨٦ - وعن أم سلمة رضي الله عنها قالت : قال رسول الله ﷺ : « أَيُّمَا امْرَأَةٍ مَاتَتْ ، وَزَوْجُهَا عَنْهَا رَاضٍ دَخَلَتْ الْجَنَّةَ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن

286. Ummu Salamah (A.K.R.) waxay tiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Naagtii dhimata ninkeeda oo raalli ka ah, jannaday gelay-saa". (Tirmidi). Waa xadiis xasan ah.

Sh. al-Baani wuxuu yiri xadiiskan waa daciif aan xujo iyo daliil laga dhigan karin.

٢٨٧ - وعن معاذ بن جبل رضي الله عنه ، عن النبي ﷺ قال : « لَا تُؤْذِي امْرَأَةً زَوْجَهَا فِي الدُّنْيَا إِلَّا قَالَتْ زَوْجَتُهُ مِنَ الْحُورِ الْعِينِ : لَا تُؤْذِيهِ قَاتَلِكِ اللَّهُ ! فَإِنَّمَا هُوَ عِنْدَكَ دَخِيلٌ ، يُوشِكُ أَنْ يُفَارِقَكَ إِلَيْنَا » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

287. Mucaad ibn Jabal (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Mar kastoo ay naagtu u keenta calool xumo iyo ciil ninkeeda nolosha adduunka , naagtiisa Xuurarcaynta ka mid ah baa waxay ku tiraahdaa (haweentaa): balaayo kugu dhacdaye ha dhibin ninkaaga, waayo, agtaada beri dhexmuu ku yahay (yacni marti) inuu dhawaan xaggayaga (jannada) kaa soo aadaa laga yaabaaye". (Tirmidi) . Wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah .

٢٨٨ - وعن أسامة بن زيد رضي الله عنهما عن النبي ﷺ قال : « مَا تَرَكْتُ بَعْدِي فِتْنَةً هِيَ أَضْرُّ عَلَى الرَّجَالِ مِنَ النِّسَاءِ » متفقٌ عليه .

288. Usaamah ibn Zayd (A.K.R.) wuxuu yiri:Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Kama tegayo gadaashay fidmo iyo imtixaan adag (sabab keenta fasahaad) oo kaga dhibaato badan ragga dumarka". (Bukhaari iyo Muslim)

٣٦ - باب النفقة على العيال

C U T U B K A 36

MASRUUFIDDA CARRUURTA IYO EHELKA

قال الله تعالى: Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿وَعَلَى الْمَوْلُودِ لَهُ رِزْقُهُنَّ وَكِسْوَتُهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ﴾ [البقرة : ٢٢٣]

120. " Hu'ga iyo hunguriga hooyooyinka wax nuujinaya wuxuu saaran yahay oo si fiican ah aabbaha ilmaha " . Suuradda Al-Baqarah: Aayadda 223.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ لِيُنْفِقَ ذُو سَعَةٍ مِّن سَعَتِهِ وَمَن قَدِرَ عَلَيْهِ رِزْقُهُ فَلْيُنْفِقْ مِمَّا آتَاهُ اللَّهُ لَا يُكَلِّفُ اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا مَا آتَاهَا ﴾ [الطلاق : ٧]

121. " Waa in kan ladnaanta iyo maalka heysta, wax u masruufaa si waafaqsan ladnaantiisa, kan meelaha ay waxa ka soo galaan iska kooban yihiinna (ciriiri yihiin) , wuxuu Alle siiyo ha ku masruufo. Alle nafna kuma kallifo wax uusan siin" . Suuradda: Ad-Dalaaq : Aayadda 5.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَمَا أَنْفَقْتُمْ مِّن شَيْءٍ فَهُوَ يُخْلِفُهُ ﴾ [سبأ : ٣٩] .

122. " Wixii aad bixisaanba (oo wax san awgood loo bixinayo) isagaa idiin cawil celinaya " Suuradda Saba: Aayadda 39.

٢٨٩- وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « دِينَارٌ أَنْفَقْتَهُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ، وَدِينَارٌ أَنْفَقْتَهُ فِي رَقَبَةٍ ، وَدِينَارٌ تَصَدَّقْتَ بِهِ عَلَى مِسْكِينٍ ، وَدِينَارٌ أَنْفَقْتَهُ عَلَى أَهْلِكَ ، أَعْظَمُهَا أَجْرًا الَّذِي أَنْفَقْتَهُ عَلَى أَهْلِكَ » رواه مسلم .

289. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Diinnaar (nooc lacagta ka mida) aad jidka Alle ku bixisay , iyo Diinnaar aad madax furasho ku bixisay iyo Diinnaar aad mis-kiin ku sadaqaysatay iyo Diinnaar aad reerkaaga ku masruuftay , waxaa intaas u ajar badan Diinnaarka aad reerkaaga ku masruuf-tay" . (Muslim)

٢٩٠- وعن أبي عبد الله ويقال له أبي عبد الرحمن ثوبان بن بجدد ، مولى رسول الله ﷺ قال : قال رسول الله ﷺ : « أَفْضَلُ دِينَارٍ يُنْفَقُهُ الرَّجُلُ دِينَارٌ يُنْفَقُهُ عَلَى عِيَالِهِ ، وَدِينَارٌ يُنْفَقُهُ عَلَى دَابَّتِهِ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ، وَدِينَارٌ يُنْفَقُهُ عَلَى أَصْحَابِهِ فِي سَبِيلِ اللَّهِ » رواه مسلم .

290. Abuu Cabdullaah oo sidoo kale la oran jiray: Abuu Cabdur Raxmaan Sowbaan ibn Yuxdud (A.K.R.) kaa oo ahaa addoon la xoreeyey uu nabiga lahaa (S.C.W.) wuxuu yiri: " Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Diinnaar uu qofku bixiyo waxaa u fadli badan Diinnaarka uu reerkiisa ku bixiyo; iyo Diinnaarka uu faraskiisa jidka Alle u heeganka ah (yacni jihaad) uu ku bixiyo, Diinnaarka qofka uu wax kaga bixiyaana saaxiibbadiis isagoo wajiga Alle ula jeeda waa ka mid waxyaalaha wanaagsan ee mudan in wax lagu bixiyo. ".
(Muslim)

٢٩١ - وعن أم سلمة رضي الله عنها قالت : قلت يا رسول الله هل لي في بني أبي سلمة أجر أن أنفق عليهم ، ولست بتاركتهم هكذا ولا هكذا إنما هم بني ؟ فقال : « نعم لك أجر ما أنفقت عليهم » متفق عليه .

291. Umm Salamah (A.K.R) waxay tiri: waxaan weydiiyey Ra-suulkii Alle : ajar ma ka helayaa haddaan wax siiyo carruurta (ninkeygii hore Abuu Salamah?) lagagamana tagi karo daryeel la'aan, iyagoo ordaya halkaan iyo halkaa (oo nolol raadis ah) . Intaa oo dhan ka sokowna waa ilmahaygii. Wuxuu ku jawaabay nabigu (S.C.W). : " Haah, waxaadna kaheleysaa ajar wixii aad siisid-ba".
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٩٢ - وعن سعد بن أبي وقاص رضي الله عنه في حديثه الطويل الذي قدمناه في أول الكتاب في باب النية أن رسول الله ﷺ قال له : « وإنك لَنْ تُنْفِقَ نَفَقَةً تَبْتَغِي بِهَا وَجْهَ اللَّهِ إِلَّا أُجِرْتَ بِهَا حَتَّى مَا تَجْعَلَ فِي فِي أَمْرَاتِكَ » متفق عليه .

292. Sacad ibn abii Waqaas (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay oo uu ku wariyey xadiis dheer aan ku soo marnay cutubkii koowaad oo niyadda ku saabsanaa , in Nebigu (S.C.W) yiri: Wixii aad bixiso oo aad wejiga Alle ula jeeddidba ajar baad ka helaysaa, xataa rudmadii aad galisid afka afadaada (wuxuu ahaan doonaa fal san oo ajar leh).
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٩٣ - وعن أبي مسعود البدري رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إذا أنفق الرجل على أهلِهِ نَفَقَةً يَحْتَسِبُهَا ، فَهِيَ لَهُ صَدَقَةٌ » متفق عليه .

293. Abuu Mascuud al-Badri (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Markuu ninku reerkiisa masruuf siiyo isagoo ajarna doonaya waa u sadaqo.'
(Bukhaari iyo Muslim)

٢٩٤ - وعن عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ : « كَفَى بِالْمَرْءِ إِثْمًا أَنْ يُضَيِّعَ مَنْ يَقُوتُ » حديث صحيح رواه أبو دادو وغيره .

ورواه مسلم في صحيحه بمعناه قال : « كَفَى بِالْمَرْءِ إِثْمًا أَنْ يَخْسِرَ عَمَّنْ يَمْلِكُ قُوَّتَهُ » .

294. Cabdullaah ibn Camar ibn al -Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofka waxaa dembi ugu filan inuu dayaco dadka ku tiirsan , oo noloshooda isaga ay ku xiran tahay Alle sokadi. " (Abuu Daawuud) . Waana xadiis saxiix ah.

Werin kalaa waxay ahayd oo Muslim ku taal: " Qofka waxaa dembi ugu filan inuu ciriiriyo cid nolshooda ay isaga saaran tahay Alle sokadi". (Muslim)

٢٩٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال : « مَا مِنْ يَوْمٍ يُضْبِحُ الْعِبَادُ فِيهِ إِلَّا مَلَكَانِ يَنْزِلَانِ فَيَقُولُ أَحَدُهُمَا : اللَّهُمَّ أَعْطِ مُنْفِقًا خَلْفًا ، وَيَقُولُ الْآخَرُ : اللَّهُمَّ أَعْطِ مُمْسِكًا تَلْفًا » متفق عليه .

295. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Maalin kasta, laba malag baa soo daga, oo midi leeyahay :Alloow sii beddel wanaagsan qofka bixiyaha ah : mid kalena leeyahay: Alloow, ka baa'bi'i waxa wanaagsan uu haysto bakheyl kastoo aan wax bixin". (Bukhaari iyo Muslim)

٢٩٦ - وعنه عن النبي ﷺ قال : « الْيَدُ الْعُلْيَا خَيْرٌ مِنَ الْيَدِ السُّفْلَى (٤) » وَأَبْدًا بِمَنْ تَعُولُ . وَخَيْرُ الصَّدَقَةِ مَا كَانَ عَنْ ظَهْرِ غِنَى وَمَنْ يَسْتَعْفِفْ يُعِفَّهُ اللَّهُ ، وَمَنْ يَسْتَغْنِ يُغْنِهِ اللَّهُ » رواه البخاري .

296. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Gacanta sare (yacni kan wax bixinaya) baa ka wanaagsan gacanta hoose (kan wax la siinayo ee qaataha ah) kana billoow (deeqdaada iyo wax siinta) carruurtaada iyo kuwa ku saaran ee adiga kugu tiirsan Alle sokadi, Sadaqana waxaa u wanaagsan tii aad ka bixiso hantidaada dheeriga ah (yacni tii aad ka maaranto, ee aadan u baahneyn) , qofkii doonayana inuu isdhawro , Alle wuu dhowra - yaa. Qofkii is deeqtoonsiiyana oo qaneeco raba, Allaa qaneeco iyo deeq siinaya). (Bukhaari)

٣٧ - باب الإنفاق مما يجب ومن الجيد

CUTUBKA 37
WAX KA BIXINTA WAXA AAD U JECESHAHAY
XOOLAHAAGA IYO WAXA FIICAN ADIGOO DAR ALLE
ULA JEEDA

قال الله تعالى : Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ ﴾ [آل عمران : ٩٢]

123. " Gaari maysaan daacadnimo iyo dhowrsasho jeer aad wax ka bixisaan waxa aad jeceshihiin". Suuradda Aali Cimraan : Aayadda 92.

وقال تعالى : Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَنْفِقُوا مِنْ طَيِّبَاتِ مَا كَسَبْتُمْ وَمِمَّا أَخْرَجْنَا لَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ ، وَلَا تَيَمَّمُوا الْخَبِيثَ مِنْهُ تُنْفِقُونَ ﴾ [البقرة : ٢٧٦] .

124. " Kuwa xaqa rumeeyoow! wax ka bixiya wixii wanaagsan oo aad shaqeysateen, iyo waxa aan dhulka idiinka soo bixinayba, hana damcina (si ula kac ah) inaad kan xun bixisaan (sadaqo ahaan) Suuradda Al-baqara: Aayadda 276.

٢٩٧- وعن أنس رضي الله عنه قال : كَانَ أَبُو طَلْحَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَكْثَرَ الْأَنْصَارِ بِالْمَدِينَةِ مَالًا مِنْ نَخْلٍ ، وَكَانَ أَحَبَّ أَمْوَالِهِ إِلَيْهِ بَيْرَحَاءَ وَكَانَتْ مُسْتَقْبَلَةَ الْمَسْجِدِ ، وَكَانَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ ، يَدْخُلُهَا وَيَشْرَبُ مِنْ مَاءٍ فِيهَا طَيِّبٍ ، قَالَ أَنْسٌ فَلَمَّا نَزَلَتْ هَذِهِ الْآيَةُ : ﴿ لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ ﴾ جَاءَ أَبُو طَلْحَةَ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى أَنْزَلَ عَلَيْكَ ﴿ لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ ﴾ وَإِنَّ أَحَبَّ مَالِي إِلَيَّ بَيْرَحَاءَ ، وَإِنَّهَا صَدَقَةٌ لِلَّهِ تَعَالَى ، أَرْجُوا بِرَّهَا ، وَذُخْرَهَا عِنْدَ اللَّهِ تَعَالَى ، فَضَعَهَا يَا رَسُولَ اللَّهِ حَيْثُ أَرَاكَ اللَّهُ ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « بَيْحٌ ذَلِكَ مَالٌ رَابِعٌ ذَلِكَ مَالٌ رَابِعٌ ، وَقَدْ سَمِعْتُ مَا قُلْتَ وَإِنِّي أَرَى أَنْ تَجْعَلَهَا فِي الْأَقْرَبِينَ » فَقَالَ أَبُو طَلْحَةَ : أَفْعَلُ يَا رَسُولَ اللَّهِ : فَقَسَمَهَا أَبُو طَلْحَةَ فِي أَقَارِبِهِ وَبَنِي عَمِّهِ . متفقٌ عليه .

297. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Abuu Dalxa (A.K.R.) wuxuu ka mid ahaa dadka Ansaar ugu hodansan xagga dhulalka iyo beeraha timirta. Wuxuu jeclaa beertiisii Bayraxaa oo wixii hanti iyo xoolo uu lahaa ugu wanaagsaneyd. Waxayna ka soo hor jeedday qiblada masjidka Nebiga (S.C.W.) Nabiga (S.C.W.) intuu galo buu ka soo cabbi jirey biyo fiican oo ay laheyd. Markii ay soo degtey aayaddan: " Gaari meysaan daacadnimo iyo dhowrsasho jeer aad wax ka bixisaan waxa aad jeceshihiin), buu Abuu Dalxa (A.K.R.) Nebiga (S.C.W.) u tegey oo ku yiri: Rasuul Alloow Alle wuxuu kugu soo dejiyey aayaddan, (Gaarimaysaan daacadnimo iyo dhowrsasho jeer aad wax ka bixisaan waxa aad jeceshihiin) aniguna hantidayda waxaan u jeclahay Bayraxaa. Marka sadaqo ahaan xag Alle baan u baxsaday, anigoo ka rajeynaya ajarkeeda xag Alle . ee iga guddoon Rasuul Alloow oo sidii Alle kuu garto ka yeel. Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Waa khayr, waa khayr, waa maal aayatiin leh. waa maal aayatiin leh. Waxa aad tirina waa maqlay, wa xaase ila fiican inaad xigtadaada u qaybisid." Abuu Dalxa (A.K.R.) wuxuu yiri: Waa yeelayaa Rasuul Alloow, xigtadiisii iyo ilma adeerradiis buuna u qaybiyey." (Bukhaari iyo Musllim)

Fiiro gaar ah:

Aadanahu waa noole bulshoole ah, noloshana bulshada dhexdeeda waxay ku dhisan tahay isii iyo qaado. Iskaashiga oo aasaas u ah noloshu bulshada, suura gal noqonmeyso, hadday dadku diidaan iskaashiga ama in wax loo qabto kuwa u baahan, iyagoo aan waxba ka hagraneyn si daacad lehna u gudanaya howsha. Hase ahaatee camal kaas iyo wax u tarka dadka wuxuu wax ku ool yahay oo keliya, ajar iyo qiimo gal yahay marka dar Alle loola jeedo ee aan loola jeedin dano adduun ku gaar laakiinse loola jeedo si lagu helo raal-linimada Alle oo keliya.

Waxyaabaha la doonayo inay saldhig u ahaato bulshada muslimka ah waa is jeclaan, ammaano dhowris, wada shaqeyn, walaaltinnimo iyo isku kalsooni iyo ku dadaalid samaha iyo kheyrka.

Islaamku wuxuu ahmiyad gaar ah siiyey qaybinta hantida iyo xoolaha sadaqada ah qofka qaraabadiisa dhexdiisa, iyo bulsho weynta u baahan guud ahaan. Marka wax la bixinayana , in lagu dadaalo bixinta waxa wanaagsan xitaa hadday sadaqo tahay. Bixinta waxyaabaha xun ee liita waxay keeneysaa naceyb iyo karaahiyo.

Sidaa awgeed, si loo abuur bulsho caafmaad qabta, loona hormariyo aragtiyooyinka wanaagsan, Islaamku wuxuu dhiirragaliyey qaybinta alaabada iyo hantida wanaagsan marka sadaqo la bixinayo.

٣٨ - باب وجوب أمره أهله وأولاده المميزين
وسائر من في رعيته بطاعة الله تعالى ، ونهيهم عن المخالفة وتأديبهم
ومنعهم عن ارتكاب منهي عنه

C U T U B K A 38

WAAJIBKA QOFKA KA SAARAN IN WIXII UU MAS'UUL KA
YAHAY FARO ADEECIDDA ALLE, KA REEBONA KU
CAASINTA ALLE , UUNA U CIQAABO KAN A CELIYO
HADDAY KHILAAFAAN AMARRADA ALLE.

قال الله تعالى : Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ وَأْمُرْ أَهْلَكَ بِالصَّلَاةِ وَاصْطَبِرْ عَلَيْهَا ﴾ [طه : ١٣٢]

125. "Oo far dadkaagaa cibaadada, ahowna mid ku sugan arrintaa oo daa'ima (yacni faridda dadkaaga cibaadada). Suuradda Daa-ha: Aayadda 132.

وقال تعالى : Wuxuu kaloo yiri:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قُوا أَنْفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا ﴾ [التحريم : ٦] .

126. " Kuwa xaqa rumeeyoow! Ka ilaaliya naftiinna iyo ehelkiin-naba naar shidaalkeedu yahay dadka iyo dhagaxaanta" . Suuradda. At-Taxriim: Aayadda 6.

٢٩٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : أخذ الحسن بن علي رضي الله عنهما
تَمْرَةً مِنْ تَمْرِ الصَّدَقَةِ فَجَعَلَهَا فِي فِيهِ ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « كُخْ كُخْ إِرْمِ بِهَا
أَمَا عَلِمْتَ أَنَا لَا نَأْكُلُ الصَّدَقَةَ » ! متفق عليه .

وفي رواية « أَنَا لَا تَجِلُّ لَنَا الصَّدَقَةُ » .

وقوله : « كُخْ كُخْ » يقال بإسكان الخاء ويقال بكسرها مع التنوين وهي كلمة
زجر للصبي عن المستقذرات وكان الحسن رضي الله عنه صبيًا .

298. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yir : Xasan ibn Cali (A.K.R)
baa wuxuu qaatay xabbad timir ah oo ka mid ahayd timir sadaqo
ah, afkiisana galiyey. Markuu arkay Nebigu (S.C.W.) isagoo miuu-

jinaya ka xumaantiisa arrintaa buu yiri: (akh, akh) , farayna inuu iska tuuro, oo ku yiri: Ma waadan ogeyn inaynaan sadaqada cunin" (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale waxaa ku soo arooray inuu nabigu (S.C.W.) yiri: innaga xaggayaga (waxaa loola jeedaa reerka nabiga s.c.w. sadaqadu) nooma bannaana oo waa innaga xaaraan".

٢٩٩ - وعن أبي حفص عمر بن أبي سلمة عبد الله بن عبد الأسد ربيب رسول الله ﷺ قال : كُنْتُ غِلَامًا فِي حَجْرٍ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ ، وَكَانَتْ يَدِي تَطِيشُ فِي الصَّحْفَةِ ؛ فَقَالَ لِي رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « يَا غُلَامُ سَمَّ اللَّهُ تَعَالَى ، وَكُلْ بِيَمِينِكَ ، وَكُلْ مِمَّا يَلِيكَ » فَمَا زَالَتْ تِلْكَ طِعْمَتِي بَعْدُ . متفقٌ عليه .

« وَ تَطِيشُ » : تدور في نواحي الصفحة .

299. Abuu Xafs Cumar bin Abii Salamah Cabdullaah bin Cabdul Asad, oo ah wiilkii Umm Salamah (A.K.R.) xaaskii nabiga (S.C.W) ay u dhashay ninkeedii hore, wuxuu yiri: Anoo yar, oo gacanta nabiga (S.C.W.) ku jira waxaan yeeli jiray inaan saxanka hadba meel ka qaato markaan raashinka cunayo. Wuxuu igu yir nabigu (S.C.W.): " Maandhow bismilaah dheh, midigtana ku cun , iyo raashinka wixii ku soo xiga." Intii ka dambeyseyna sidaasaan wax u cunaa.

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٠٠ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « كُلُّكُمْ رَاعٍ وَكُلُّكُمْ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ ، الإِمَامُ رَاعٍ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ ، وَالرَّجُلُ رَاعٍ فِي أَهْلِهِ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ ، وَالْمَرْأَةُ رَاعِيَةٌ فِي بَيْتِ زَوْجِهَا وَمَسْئُولَةٌ عَنْ رَعِيَّتِهَا ، وَالْخَادِمُ رَاعٍ فِي مَالِ سَيِّدِهِ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ ، فَكُلُّكُمْ رَاعٍ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ » متفقٌ عليه .

300. Xadiiskan horay buu noo soo maray. Wuxuu ka hadlayana waxaan ku soo sheegnay xadiiska tiradiisu tahay 283.

٣٠١ - وعن عمرو بن شعيب عن أبيه عن جده رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مُرُوا أَوْلَادَكُمْ بِالصَّلَاةِ وَهُمْ أَبْنَاءُ سَبْعِ سِنِينَ ، وَأَضْرِبُوهُمْ عَلَيْهَا وَهُمْ أَبْنَاءُ عَشْرِ ، وَفَرِّقُوا بَيْنَهُمْ فِي الْمَضَاجِعِ » حديث حسن ، رواه أبو داود بإسناد حسن .

301. Camar ibn Shucayb (A.K.R.) wuxuu Aabbihiis ka soo weriyey, Aabbihiisna aabbihi, in Nebigu (S.C.W.) yiri: " Markay ilmihinu gaaraan toddobo sano salaadda fara, una ciqaaba wixii khalad iyo gabood fal ah oo ay salaadda ku sameeyaan markii ay toban jirsadaan, jifkana u kala duwa (wiilasha iyo gabdhaha (markay toban jirsadaan) "(Abuu Daawuud)waa xadiis sanad wanaagsan. Imaam Daawuudbaa wuxuu ku weriyey sanad wanaagsan.

٣٠٢ - وعن أبي ثريّة سبرة بن معبد الجهنّي رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « عَلِّمُوا الصَّبِيَّ الصَّلَاةَ لِسَبْعِ سِنِينَ ، وَأَضْرِبُوهُ عَلَيْهَا ابْنَ عَشْرِ سِنِينَ » حديث حسن رواه أبو داود ، والترمذي وقال : حديث حسن .
ولفظ أبي داود : « مُرُوا الصَّبِيَّ بِالصَّلَاةِ إِذَا بَلَغَ سَبْعَ سِنِينَ » .

302. Abuu Surayrah Sabrah ibn Macbad al-Juhni (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Markii ilmuhu gaaraan toddobo jir salaadda bara, una ciqaaba (hadduu salaadda ka sagsaago) markuu toban jirka yahay." (Abuu Daawuudiyo Tirmidi)

Wuxuu ku weriyey abuu Daawuud xadiiska lafdiga ah : far ilmaha inay oogaan salaadda kolkay toddobo jirsadaan. Waa xadiis sanad wanaagsan.

٣٩ - باب حق الجار والوصية به

C U T U B K A 39

WANAAJINTA QOFKA DERISKA AH IYO DHOWRISTA XU- QUUQDIISA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ وَأَعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا وَبِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسَاكِينِ وَالْجَارِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَالْجَارِ الْجُنُبِ وَالصَّاحِبِ بِالْجَنبِ وَابْنِ السَّبِيلِ وَمَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ ﴾ [النساء : ٣٦] .

127. " Alle Caabuda oo waxba ha u shariig yeelina, labada waalid-na wanaajiya (oo naxariis u muujiya) , iyo qaraabada iyo agoonta iyo masaakiinta iyo deriska qaraabada ah iyo deriska aan qaraabada

aheynta iyo saaxiibkaa safarka iyo tub ku joogga (yacni musaafir-ka ay ka go'een gaari raaca iyo jid marka) iyo (addoomada) ay gacantaadu hanatay". Suuradda An-nisaa: Aayadda 36.

٣٠٣ - وعن ابن عمر وعائشة رضي الله عنهما قالا : قال رسول الله ﷺ : « مَا زَالَ جِبْرِيلُ يُوصِينِي بِالْجَارِ حَتَّى ظَنَنْتُ أَنَّهُ سَيُورُنِي » متفقٌ عليه .

303. Ibn Cumar iyo Caa'isha (A.K.R.) waxay yiraahdeen:Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Malag Jibriil wuxuu mar waliba aad igala dardaarmahayey (xuquuqda) deriska , aad buuna arrintaa u daneyn jiray ayna ugu weyneyd ilaa aan is iri waa intaa oo lagu daro qofka deriskiisa mid ka mida kuwa dhaxalkiisa wax ku leh."
(Bukhaari iyo Muslim)

٣٠٤ - وعن أبي ذر رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « يَا أَبَا ذَرٍّ إِذَا طَبَخْتَ مَرَقَةً ، فَأَكْبِرْ مَاءَهَا ، وَتَعَاهَدْ جِيرَانَكَ » رواه مسلم .

وفي رواية له عن أبي ذر قال : إن خليلي أوصاني : « إِذَا طَبَخْتَ مَرَقَةً فَأَكْبِرْ مَاءَهَا ، ثُمَّ انْظُرْ أَهْلَ بَيْتِ مَنْ جِيرَانِكَ ، فَأَصْبِهِمْ مِنْهَا بِمَعْرُوفٍ » .

304. Abuu Darr (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S. C.W.) wuxuu yiri: " Abuu Daroow markii aad diyaarineysid maraqa xoogay biyo ah ku kordhi, oo eeg hadday dariskaagu wax uga baahan yihiin".
(Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay : Rafiiqaygii (kheyd doon ahaan buu taa u leeyahay) nabiga (S.C.W.) wuxuu igula dardaarmay: (Markii aad diyaarineyso maraqa ku shub biyo badan, oo badi, dabadeedna soo ogow (xaaladda iyo waxa ay ku sugan yihiin) deriskaaga, oo sii xoogaa maraqa ah iyagana sidoo kale.

٣٠٥ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال : « وَاللَّهِ لَا يُؤْمِنُ ، وَاللَّهِ لَا يُؤْمِنُ ، وَاللَّهِ لَا يُؤْمِنُ » ! قِيلَ : مَنْ يَا رَسُولَ اللَّهِ ؟ قال : « الَّذِي لَا يَأْمَنُ جَارَهُ بَوَائِقَهُ » ! متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : « لَا يَدْخُلُ الْجَنَّةَ مَنْ لَا يَأْمَنُ جَارَهُ بَوَائِقَهُ » .

« الْبَوَائِقُ » : الْغَوَائِلُ وَالشُّرُورُ .

305. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Alle baan ku dhaaran, iimaankiisu ma dhamma', Alle baan ku dhaaran muslim fiican ma aha, Alle baan ku dhaaran inuusan ru-meyn". Waxaa la weydiyey : Rasuul Alloow waa cidma? Wuxuu yiri: " Waa qofkii jaarkiisa ayan nabad ka aheyn dhibaha iyo shar-kiisa" .
(Bukhaari iyo Muslim)

Werinta Muslim waxay leedahay : " Kaasi ma gelin doono Jannada aanay deriskiisa nabad ka aheyn dhibaha iyo sharkiisa.

٣٠٦ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « يَا نِسَاءَ الْمُسْلِمَاتِ ، لَا تَحْقِرَنَّ جَارَةً لِّجَارَتِهَا ، وَلَوْ فَرَسِينَ شَاةً » متفقٌ عليه .

306. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Haweenka muslimaadka ahoow! yaysan midiin deriskeeda hoos u eegin oo u arag wax liita xitaa hadday kuu soo dirto ri qan-jaa fuusheedka (qoob riyeed) hadiyad ahaan (oo ha ka aqbasho ugana mahad celiso)." .
(Bukhaari iyo Muslim)

Xadiiskan horay buu noo soo maray laba waji buuna u dhici macna ahaan. wejiga hore inay derisku wax isu hadiyeeyaan, qolo waliba inta karaankoodu yahay, iyo in hadiyada ciddii soo dirta laga aqbaloo oo looga mahad celiyo si weji furnaan leh xitaa hadday tahay hadiyadda wax yar oo qaddar iyo qiimo ahaan la mid ah ri qanjaa-fuusheedka, qalbigana aan wax loogu qaadin, waxnana laga sheegin waxay soo diraan

٣٠٧ - وعنه أن رسول الله ﷺ قال : « لَا يَمْنَعُ جَارٌ جَارَهُ أَنْ يَغْرِزَ خَشْبَةً فِي جِدَارِهِ » ثُمَّ يَقُولُ أَبُو هُرَيْرَةَ : مَا لِي أَرَاكُمْ عَنْهَا مُعْرِضِينَ ! وَاللَّهِ لَأُرْمِينَ بِهَا بَيْنَ أَكْتِفِكُمْ . متفقٌ عليه .

رُوي « خَشْبَهُ » بِالْإِضَافَةِ وَالْجَمْعِ ، وَرُوي « خَشْبَةً » بِالتَّنْوِينِ عَلَى الْإِفْرَادِ . وَقوله : مَا لِي أَرَاكُمْ عَنْهَا مُعْرِضِينَ : يَعْنِي عَنْ هَذِهِ السُّنَّةِ .

307. Abuu Hureyrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: "Yuusan derisku u diidin dariskiisu inuu saqaf alwaaxeedkiisa ku qabto darbigiisa ." Dabadeedna wuxuu Abuu Hurayrah intaa raaciyey: Hadda waxaan arkaa inaad taa dhabarka u jeedinaysaan, Waanse idinku wadi inaan mar waliba idin xusuusiyo."
(Bukhaari iyo Muslim)

٣٠٨ - وعنه أن رسول الله ﷺ قال : « مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلَا يُؤْذِ جَارَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيُكْرِمْ ضَيْفَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيَقُلْ خَيْرًا ، أَوْ لِيَسْكُتْ » متفقٌ عليه .

308. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofkii Alle iyo maalinta aakhiro rumeeyey yuusan u geysan wax dhib iyo xumaan ah deriskiisa. Qofkii Alle iyo maalinta aakhiro rumeeyey ha sharfo martidiisa. Qofkii Alle iyo maalinta aakhiro rumeeyey khayr ha sheego ama ha iska aamuso."

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٠٩ - وعن أبي شُرَيْحٍ الْخُزَاعِيِّ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ ، أَنَّ النَّبِيَّ ﷺ قَالَ : « مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيُحْسِنْ إِلَى جَارِهِ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيُكْرِمْ ضَيْفَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيَقُلْ خَيْرًا أَوْ لِيَسْكُتْ » رواه مسلم . بهذا اللفظ ، وروى البخاري بعضه .

309. Abuu Shurayx al-Khuzaaci (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Qofkii Alle iyo maalinta aakhiro rumeeyey ha wanaajiyo deriskiisa; Qofkii Alle iyo maalinta aakhiro rumeeyey ha wanaajiyo martidiisa; Qofkii Alle iyo maalinta aakhiro rumeeyey ha ku hadlo wax wanaagsan ama ha iska aamuso".

Muslim baa ku wariyey xadiiska ereyadan, halka Bukhaari uu wariyey ereyadan qaarkood.

٣١٠ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : قلت : يا رسول الله إن لي جارين فإلى أيهما أهدي ؟ قال : « إلى أقربهما منك باباً » رواه البخاري .

310. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Waxaan weydiiyey Rasuulkii , Alle (S.C.W.) : Waxaan leeyahay laba daris ee kee baan hadiyad u diraa? Wuxuu yiri: Kii kuu irrid dhaw." (Bukhaari)

٣١١ - وعن عبد الله بن عمر رضي الله عنهما قال : قال رسول الله ﷺ : « خَيْرُ الْأَصْحَابِ عِنْدَ اللَّهِ تَعَالَى خَيْرُهُمْ لِصَاحِبِهِ ، وَخَيْرُ الْجِيرَانِ عِنْدَ اللَّهِ تَعَالَى خَيْرُهُمْ لِجَارِهِ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

311. Cabdullaah ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) Wuxuu yiri: " Saaxiibka wanaagsan Alle agti waa kan u roon saa-

xiibbadiis, Dariska wanaagsanna Alle agti waan kan u roon ee wanaajiya deriskiisa". (Tirmidi) oo yiri waa xadiis xasan ah.

Fiiro gaar ah :

Derisku waa labada qof ee ku nool meelo aad isugu dhow; taana waxaa ka iman kara inuu midkood ka kale dhibaato gaarsiiya nooc ay ahaataba dhibaataadaa, marba hadday deggan yihiin meel u soo dhow. Sidaa awgeed, diinta Islaamka waxay ka shaqeysay inay habeyso xiriirka labadaa qof si jirdaha u goynaysa dhibaato kastoo suura gal ah ama iska hor imaad kasta oo dhex mari kara labadaa qofood, si ay markaas ugu noolaadaan nolol wanaagsan oo nabad ah.

٤٠ - باب بر الوالدين وصلة الأرحام

CUTUBKA 40

WANA AJINTA IYO USAMA FALKA WA ALIDKA IYO XIRIIRINTA QARAABADA

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿وَأَعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا وَبِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسَاكِينِ وَالْجَارِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَالْجَارِ الْجُنُبِ وَالصَّاحِبِ بِالْجَنبِ وَآبِنِ السَّبِيلِ وَمَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ﴾ [النساء : ٣٦]

128. Alle u adeeg oo mididin u ahow. Waxbana ha u shariig yeelin. (una muuji) naxariis iyo samaan waalidkaa, iyo qaraabada, iyo agoonta, iyo baahnaha, iyo deriska qaraabada kula ah, iyo deriska aan qaraabada aheyn iyo saaxiibkaa safarka, iyo tub ku joogga (masaafurka) iyo (addoomaha) ay gacantiinnu hanato". Suuradda An-Nisaa: Aayadda 36

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿وَاتَّقُوا اللَّهَ الَّذِي تَسَاءَلُونَ بِهِ وَالْأَرْحَامَ﴾ [النساء : ١]

129. " Dhab u tixgeli xilka iyo waajibka Alle korkaada uu yeelay, iyo guud ahaan arrimahuu ku faray, Allaahaasoo aad (xuquuqdiinna) mid kiinba kan kale ku weydiisto, sidoo kalena dhowra xuquuqda qaraabada" Suuradda .An-Nisaa : Aayadda: 1.

وقال تعالى :
Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَالَّذِينَ يَصِلُونَ مَا أَمَرَ اللَّهُ بِهِ أَنْ يُوصَلَ ﴾ [الرعد : ٢١] .

130. " Kuwa xiriirinaya waxa Alle faray in la xiriiriyo". Suuradda.
Ar-Racad: Aayadda 29

وقال تعالى :
Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ حُسْنًا ﴾ [العنكبوت : ٨]

131. " Aadanaha waxaan kala dardaarannay wanaajinta waalidkiis iyo inuu naxariis u muujiyo iyo samaan" . Suuradda: Al-Cankaboot: Aayadda 8.

وقال تعالى :
Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَقَضَى رَبُّكَ أَنْ لَا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا إِمَّا يَبُلُغَنَّ عِنْدَكَ الْكِبَرَ أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُلْ لَهُمَا آفٌ وَلَا تُنْهَرُهُمَا وَقُلْ لَهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا ۖ وَأَخْفِضْ لَهُمَا جَنَاحَ الذُّلِّ مِنَ الرَّحْمَةِ وَقُلْ رَبِّ أَرْحَمُهُمَا كَمَا رَبَّيْتَنِي صَغِيرًا ﴾ [الإسراء : ٢٣ - ٢٤]

132. " Rabiggaa wuxuu guddoonshey inaydaan caabudin waxaan isaga ahayn iyo (iyo inaad u muujiso) naxariis iyo samaan labada waalid. Haddii ay waayeelnimo agtaada ku soo gaarto midkood ama labadoodaba uf ha ku oran, hana canaan ee qowl wanaagsan oo naxariisi ku dheehan tahay ku dheh . una raarici garab nugul naxariis darteed dhehna : Rabbiyoow u naxariiso, sidii ay yaraan-tayda ii soo koriyeen" Suuradda Al-Israa: Aayadaha 23-24.

وقال تعالى :
Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَوَصَّيْنَا الْإِنْسَانَ بِوَالِدَيْهِ حَمَلَتْهُ أُمُّهُ وَهْنًا عَلَىٰ وَهْنٍ وَفِصَالُهُ فِي عَامَيْنِ أَنْ اشْكُرْ لِي وَلِوَالِدَيْكَ ﴾ [لقمان : ١٤] .

133. " Aadanaha waxaan kala dardaarannay waalidkiis , hooyadiis waxay ku qaadday tabar yari tabar yari loo geeyey. Ka gurintiisuna naaska waa laba sano dhexdood- igu shukri aniga iyo labadaada waalidba". Suuradda Luqmaan: Aayadda 14.

٣١٢ - وعن أبي عبد الرحمن عبد الله بن مسعود رضي الله عنه قال : سألت النبي ﷺ أيُّ العملِ أحبُّ إلى الله تعالى ؟ قال : « الصَّلَاةُ عَلَى وَقْتِهَا »

قلت : ثم أي ؟ قال : « بِرُّ الْوَالِدَيْنِ » قلت : ثم أي ؟ قال : « الْجِهَادُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ » متفق عليه .

312. Abuu Cabdur Raxmaan Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu sheegay inuu weydiiyey Nebiga (S.C.W.): Alle agti camal-keebaa camallada u wanaagsan oo loo jecel yahay? Wuxuu ku ja-waabay : " Salaadda oo waqtigeeda la tukado.' Waxaan weydiiyey: Misna kee? Wuxuu yiri: Labada waalid oo baarri loo noqdo.' Da-badeedna waxaan iri: Misna kee? Wuxuu yiri: jidka Alle (kor yee-lidda diinta) oo loo halgamo ama loo diriro.' (Bukhaari & Muslim)

٣١٢ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لَا يَجْزِي وَلَدٌ وَالِدًا ، إِلَّا أَنْ يَجِدَهُ مَمْلُوكًا فَيَشْتَرِيَهُ فَيُعْتِقَهُ » رواه مسلم .

313. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Wiil ma jiro u abaal gudi kara aabbihi (wuxuu wanaag iyo ja-ceyl u galay awgeed) inuu helo maahee aabbihi oo addoon ah oo uu soo iibsado oo markaas xoreeyo." (Muslim)

٣١٤ - وعنه أيضاً رضي الله عنه ، أن رسول الله ﷺ قال : « مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ، فَلْيُكْرِمْ ضَيْفَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ، فَلْيَصِلْ رَحِمَهُ ، وَمَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ ، فَلْيُقِلْ خَيْرًا أَوْ لِيَصُمْتَ » متفق عليه .

314. Xadiiskan waxaan horay ugu soo marnay cutubka 39, eeg xadiiska tiradiisu tahay 309.

٣١٥ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى خَلَقَ الْخَلْقَ حَتَّى إِذَا فَرَغَ مِنْهُمْ قَامَتِ الرَّحِمُ فَقَالَتْ : هَذَا مَقَامُ الْعَائِدِ بِكَ مِنَ الْقَطِيعَةِ ، قَالَ : نَعَمْ أَمَا تَرْضَيْنَ أَنْ أَصِلَ مَنْ وَصَلِكَ وَأَقْطَعَ مَنْ قَطَعَكَ؟ قَالَتْ : بَلَى ، قَالَ : فَذَلِكَ لَكَ ، ثُمَّ قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « إِفْرُؤُوا إِنْ شِئْتُمْ : ﴿ فَهَلْ عَسَيْتُمْ إِنْ تَوَلَّيْتُمْ أَنْ تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ وَتَقَطُّعُوا أَرْحَامَكُمْ . أُولَئِكَ الَّذِينَ لَعَنَهُمُ اللَّهُ فَأَصَمَّهُمْ وَأَعَمَّى أَبْصَارَهُمْ ﴾ » [سورة محمد : ٢٢ - ٢٣] متفق عليه .

وفي رواية للبخاري : فقال الله تعالى : « مَنْ وَصَلِكَ وَصَلْتُهُ وَمَنْ قَطَعَكَ قَطَعْتُهُ » .

315. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Alle kor ahaaye markuu uunka oo dhan abuuray baa riximkii istaagay oo yiri: Halkan ma meeshii qofku kaa magansan lahaaba goynta (macnaha waa waxaan ku weydiisanayaa magangal) . Alle wuxuu yiri: Haah, sow raalli kuma noqoneysid inaan u naxariisto kii ku xiriiriya, kana gooyo wanaagga iyo naxariista kii ku gooya? Riximkii wuxuu yiri: Raalli baan ku ahay. Alle wuxuu yiri: Taas baad leedahay .

Dabadeedna nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Haddii aad rabtaan akhriya : " Ma la idiinka yaabaa, haddii aad madax noqotaan inaad dhulka fasahaadisaan oo qaraabadiinna goysaan. Waa kuwaas kuwa Alle nacaladayo, uu markaana dhega tirayo, indhahana ka ri-dayo". Suuradda Muxammad: Aayadaha 22-23 .

(Bukhaari iyo Muslim)

Werinta Bukhaari waxay leedahay, Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri, Kii ku xiriiriya waan xiriirinayaa, kii ku gooyana waan goynayaa."

٣١٦- وعنه رضي الله عنه قال : جاء رجل إلى رسول الله ﷺ فقال : يا رسول الله من أحق الناس بحسن صحابتي ؟ قال : « أمك » قال : ثم من ؟ قال : « أمك » قال : ثم من ؟ قال : « أمك » قال : ثم من ؟ قال : « أبوك » متفق عليه .

وفي رواية : يا رسول الله من أحق بحسن الصحبة ؟ قال : « أمك ثم أمك ثم أمك ثم أباك ثم أذنك أذنك » .

و « الصحابة » بمعنى : الصحبة ، وقوله : « ثم أباك » كذا هو منصوب بفعل محذوف . أي : ثم بر أباك . وفي رواية « ثم أبوك » وهذا واضح .

316. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin baa Nebiga (S.C.W.) u yimid oo weydiyey: Rasuul Alloow dadka kee u mudan inaan samaan iyo wanaag kula dhaqmo oo si fiican ula rafiiqo ? Wuxuu ku jawaabay: ' Hooyadaa .' Ninkii baa weydiyey : Misna kee? Wuxuu yiri: ' Hooyadaa. ' Iyada kaddibna? Wuxuu yiri: ' Hooyadaa.' Iyada kaddibna? Wuxuu yiri: ' Aabbahaa.'

(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay: Rasuul Alloow, dadka kee baa u

mudan inaan wanaajiyo oo si fiican ula rafiiqo ?Wuxuu ku jawaabay ' Hooyadaa, misna hooyadaa, misna hooyadaa, misna Abbahaa, misna sida laguugu kala xigo.'

٣١٧ - وعنه عن النبي ﷺ قال : « رَغِمَ أَنْفٌ ثَم رَغِمَ أَنْفٌ ثُمَّ رَغِمَ أَنْفٌ مَنْ أَدْرَكَ أَبُوَيْهِ عِنْدَ الْكَبِيرِ ، أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَمْ يَدْخُلِ الْجَنَّةَ » رواه مسلم .

317. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W) wuxuu yiri: ' Duf ha ku baxo, oo duf haku baxo, oo duf ha ku baxo, qof soo gaaray labadiisii waalid ama midkood oo sheyb ah oo Jannada geli waayey". (Muslim)

٣١٨ - وعنه رضي الله عنه أن رجلاً قال : يا رسول الله إن لي قرابةً أصلهم وَيَقْطَعُونَنِي وَأَحْسِنُ إِلَيْهِمْ وَيُسَيِّئُونَ إِلَيَّ وَأَحْلَمُ عَنْهُمْ وَيَجْهَلُونَ عَلَيَّ . فقال : « لَئِنْ كُنْتَ كَمَا قُلْتَ فَكَأَنَّمَا تُسِفُّهُمْ الْمَلَّ وَلَا يَزَالُ مَعَكَ مِنَ اللَّهِ ظَهِيرٌ عَلَيْهِمْ مَا دُمْتَ عَلَيَّ ذَلِكَ » رواه مسلم .

وَ« تُسِفُّهُمْ » بضم التاء وكسر السين المهملة وتشديد الفاء و« الْمَلُّ » بفتح الميم وتشديد اللام وهو الرَّمَادُ الْحَارُّ : أَي كَأَنَّمَا تُطْعِمُهُمُ الرَّمَادَ الْحَارَّ وَهُوَ تَشْبِيهُ لِمَا يَلْحَقُهُمْ مِنَ الْإِثْمِ بِمَا يَلْحَقُ أَكِلَ الرَّمَادِ الْحَارِّ مِنَ الْأَلْمِ وَلَا شَيْءَ عَلَيَّ هَذَا الْمُحْسِنِ إِلَيْهِمْ ، لَكِنْ يَنَالُهُمْ إِثْمٌ عَظِيمٌ بِتَقْصِيرِهِمْ فِي حَقِّهِ وَإِدْخَالِهِمُ الْأَذَى عَلَيْهِ ، وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

318. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin baa wuxuu yiri: Rasuul Alloow, waxaan leeyahay qaraabo, waa xiriiriya, iyana waa i gooyaan; waa wanaajiyaa, iyana waa i xumeeyaan; waa u dul qaataa iyana waa igu jaahil falaan.' Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Haddii aad tahay sidaad sheegtay, waa adigoo raran (ciid kulul) siinaya oo kale (waa tilmaan waxa dambi soo gaaraya qoladaas xaqiisii ay ka gaabiyeen awgeed iyo dhibaataada kala soo gudboonaa-ta) , Inta aad sidaas tahayna (buu ku yiri ninkii nebiga) , Allaa mar walba kuu hiillinaya oo kuu gargaari, oo kaa dhowraya xumaanahooda.' (Muslim)

٣١٩ - وعن أنس رضي الله عنه ، أن رسول الله ﷺ قال : « من أحب أن يبسط له في رزقه وينسأله في أثره فليصل رحمه » متفق عليه .

ومعنى « ينسأله في أثره » : أي يؤخر له في أجله وعمره .

319. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qof-kii jecel in risaqa loo fidiyo, iyo in cimrigiisa loo dheereeyo , qaraa-badiisa ha xiriiriyo.' (Bukhaari iyo Muslim)

٣٢٠ - وعنه قال : كَانَ أَبُو طَلْحَةَ أَكْثَرَ الْأَنْصَارِ بِالْمَدِينَةِ مَالًا مِنْ نَخْلٍ ، وَكَانَ أَحَبَّ أَمْوَالِهِ إِلَيْهِ بَيْرِحَاءَ وَكَانَتْ مَسْتَقْبَلَةَ الْمَسْجِدِ وَكَانَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ يَدْخُلُهَا وَيَشْرَبُ مِنْ مَاءٍ فِيهَا طَيِّبٌ فَلَمَّا نَزَلَتْ هَذِهِ الْآيَةُ : ﴿ لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ ﴾ [آل عمران : ٩٢] قَامَ أَبُو طَلْحَةَ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى يَقُولُ : ﴿ لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ ﴾ وَإِنَّ أَحَبَّ مَالِي إِلَيَّ بَيْرِحَاءَ وَإِنَّهَا صَدَقَةٌ لِلَّهِ تَعَالَى أَرْجُو بِرَّهَا وَذُخْرَهَا عِنْدَ اللَّهِ تَعَالَى فَضَعَهَا يَا رَسُولَ اللَّهِ حَيْثُ أَرَاكَ اللَّهُ . فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « بَخِ ذَلِكَ مَالٌ رَابِعُ ذَلِكَ مَالٌ رَابِعُ ! وَقَدْ سَمِعْتُ مَا قُلْتَ وَإِنِّي أَرَى أَنْ تَجْعَلَهَا فِي الْأَقْرَبِينَ » فَقَالَ أَبُو طَلْحَةَ : أَفْعَلُ يَا رَسُولَ اللَّهِ ، فَقَسَمَهَا أَبُو طَلْحَةَ فِي أَقَارِبِهِ وَبَنِي عَمِّهِ ، متفق عليه . وسبق بيان ألفاظه في : باب الإنفاق^(١) مما يجب .

320. Xadiiskan horay baynu u soo marnay . eeg xadiiska tiradiisu tahay 297. cutubka 37

٣٢١ - وعن عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما قال : أقبل رجل إلى نبي الله ﷺ فقال : أبايك على الهجرة والجهاد أبتغي الأجر من الله تعالى . قال : « فهل لك من والدك أحد حي » ؟ قال : نعم بل كلاهما . قال : « فتبتغي الأجر من الله تعالى » ؟ قال : نعم . قال : « فأرجع إلى والدك فأحسب صحبتهم » متفق عليه . وهذا لفظ مسلم .

وفي رواية لهما : جاء رجل فاستأذنه في الجهاد قال : « أحي والدك » ؟ قال : نعم ، قال : « ففيهما فجاهد » .

321. Cabdullaah ibn Camar ibn al-Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin baa inta Nebiga (S.C.W.) u yimid ku yiri: Waxaan rabaa inaan axdi kugula galo inaan haajiro jidka Allena ku diriro, anoo Alle kaga ajar dooni. Nabigu (S.C.W.) wuxuu weydiiyey : waalidkaa mid nool ma jiraa? Ninkii wuxuu yiri: labadadiiba waa nool yihiin. Nabigu (S.C.W.) wuxuu weydiiyey : Alle ajar ma ka rabtaa ? Ninkii wuxuu yiri: Haah, mudane.'. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Haddaba iyaga ku noqo oo si fiican ugu adeeg." (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay : Nin baa yimid oo idin u weydiistay jihaad (u dirirka jidka Alle) . Nabigu (S.C.W) wuxuu weydiiyey ninkii: ' Labadaadii waalid ma nool yihiin ?Ninkii wuxuu yiri: Haah, nabi Alloow. Wuxuu yiri: Haddaba waxaa jihaad kuu ah u adeegooda: macnaha waa u khidmeyntoodaad ka heli ajarkii aad ka heli laheyd jihaadka oo kale.'

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٢٢ - وعنه عن النبي ﷺ قال : « لَيْسَ الْوَأَصِلُ بِالْمُكَافِيءِ وَلَكِنَّ الْوَأَصِلَ الَّذِي إِذَا قَطَعْتَ رَجْمَهُ وَصَلَهَا » رواه البخاري .

وَ « قَطَعْتَ » بَفَتْحِ الْقَافِ وَالطَّاءِ ، وَ « رَجْمَهُ » مَرْفُوعٌ .

322.Cabdullaah ibn Camar ibn al- Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofka wanaagga ku guda wanaag ma aha kaasi qof wanaag iyo kheyr u gala qaraabadiisa oo xiriiriya ; qaraabo xiriirshe waa qofka xiriiriya qaraabadiisa xitaa markii ay gooyaan." (Bukhaari)

٣٢٣ - وعن عائشة قالت : قال رسول الله ﷺ : « الرَّجْمُ مُعَلَّقَةٌ بِالْعَرْشِ تَقُولُ : مَنْ وَصَلَنِي وَصَلَهُ اللَّهُ ، وَمَنْ قَطَعَنِي قَطَعَهُ اللَّهُ » متفق عليه .

323. Caa' isha (A.K.R.) waxay tiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Qaraabannimadu carshigay ku dhaggan tahay oo waxay tiraahdaa: Alle waa xiriirinayaa oo gacan qaban qofkii i xiriiriya oo i gacan qabta; Allana wuu goynayaa qofkii i gooya." (Bukhaari iyo Muslim)

٣٢٤ - وعن أم المؤمنين ميمونة بنت الحارث رضي الله عنها ، أَنَّهَا أَعْتَقَتْ وَلِيدَةً (٣) وَلَمْ تَسْتَأْذِنِ النَّبِيَّ ﷺ ، فَلَمَّا كَانَ يَوْمُهَا الَّذِي يَدُورُ عَلَيْهَا فِيهِ قَالَتْ : أَشَعَرْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنِّي أَعْتَقْتُ وَلِيدَتِي ؟ قَالَ : « أَوْ فَعَلْتِ » ؟ قَالَتْ : نَعَمْ . قَالَ : « أَمَا إِنَّكَ لَوْ أَعْطَيْتَهَا أَخْوَالَكَ كَانَ أَعْظَمَ لَأَجْرِكَ » متفق عليه .

324. Ummul Mu'miniin Maymuunah bint Xaaris (A.K.R.) (oo xaaskii Nebiga S.C.W.ahayd) waxaa laga soo xigtay inay xoreysey addoomad iyadoo aan nebiga (S.C.W.) la socodsiin. Markuu u yimid maalintii dowlkeeda ahayd bay waxay ku tiri: Ma ogtahay Rasuul Allow inaan addoontaydii xoreeyey? Wuxuu yiri: Ma sidaa baa? Waxay tiri: Haah, mudane Wuxuu yiri: Haddii aad abtiyaa-shaa siin lahayd baa kuu khayr iyo ajar badnaan lahayd".

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٢٥- وعن أسماء بنت أبي بكر الصديق رضي الله عنهما ، قالت : قَدِمْتُ عَلَيَّ أُمِّي وَهِيَ مُشْرِكَةٌ فِي عَهْدِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، فَاسْتَفْتَيْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قُلْتُ : قَدِمْتُ عَلَيَّ أُمِّي وَهِيَ رَاغِبَةٌ أَفَأَصِلُ أُمِّي ؟ قَالَ : « نَعَمْ صِلِي أُمَّكِ » مَتَّفِقٌ عَلَيْهِ . وَقَوْلُهَا « رَاغِبَةٌ » أَي : طَامِعَةٌ عِنْدِي تَسْأَلُنِي شَيْئًا ، قِيلَ : كَانَتْ أُمُّهَا مِنَ النَّسَبِ وَقِيلَ : مِنَ الرِّضَاعَةِ وَالصَّحِيحُ الْأَوَّلُ .

325. Asmaa bint abii Bakar as-Sadiiq (A.K.R.) waxay tiri: Hooyaday baa Madiina timid oo Makka ka timid si ay ii soo booqato, iyadoo weli markaa mushrikad ah (gaalad). Waxay u timid inay wax i weydiisato. Markaasaan nebiga (S.C.W.) u tegey oo iri : Nebi Alloow hooyaday oo ii socotaa ii timid waxbayna iga fileysaa. ee ma xiriirin karaa? Wuxuu yiri: ' Haah. wanaaji hooyadaa oo xiriiri. '

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٢٦- وعن زينب الثقفية امرأة عبد الله بن مسعود رضي الله عنه وعنها قالت : قال رسول الله ﷺ : « تَصَدَّقْنَ يَا مَعْشَرَ النِّسَاءِ وَلَوْ مِنْ حُلِيِّكُنَّ » قالت : فَرَجَعْتُ إِلَى عَبْدِ اللَّهِ بْنِ مَسْعُودٍ فَقُلْتُ لَهُ : إِنَّكَ رَجُلٌ خَفِيفُ ذَاتِ الْيَدِ (٢) وَإِنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَدْ أَمَرَنَا بِالصَّدَقَةِ فَأْتِهِ ، فَسَأَلُهُ ، فَإِنْ كَانَ ذَلِكَ يُجْزِيءُ عَنِّي (٣) وَالْأَصْرَفَتُّهَا إِلَى غَيْرِكُمْ . فَقَالَ عَبْدُ اللَّهِ بَلِ اثْبِتِيهِ أَنْتِ . فَاَنْطَلَقْتُ إِذَا امْرَأَةٌ مِنَ الْأَنْصَارِ بِيَابِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ حَاجَتِي حَاجَتُهَا ، وَكَانَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ قَدْ أُلْقِيَ عَلَيْهِ الْمَهَابَةُ ، فَخَرَجَ عَلَيْنَا بِلَالٌ فَقُلْنَا لَهُ : ائْتِ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ فَأَخْبِرِيهِ أَنَّ امْرَأَتَيْنِ بِالْبَابِ تَسْأَلَانِكَ : أُتْجِزِيءُ الصَّدَقَةَ عَنْهُمَا عَلَى أَرْوَاجِهِمَا وَعَلَى أَيْتَامٍ فِي حُجُورِهِمَا (٤) ، وَلَا تُخْبِرِيهِ مَنْ نَحْنُ . فَدَخَلَ بِلَالٌ عَلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَسَأَلَهُ فَقَالَ لَهُ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « مَنْ هُمَا » ؟ قَالَ : امْرَأَةٌ مِنَ الْأَنْصَارِ وَزَيْنَبُ . فَقَالَ

رسول الله ﷺ : « أَيُّ الزَّيْنَبِ هِيَ » ؟ قال : امرأة عبد الله . فقال رسول الله ﷺ : « لَهُمَا أَجْرَانِ أَجْرُ الْقَرَابَةِ وَأَجْرُ الصَّدَقَةِ » متفق عليه .

326. Zaynab as Saqafiyya (A.K.R.) xaaskii Cabdullaah bin Mascuud waxay tiri: ' Nebigu (S.C.W.) isagoo u khudbeynaya koox dumar ah wuxuu yiri: Sadaqa la baxa, dumarkoow, waxaad isku qurxisaanba ha ahaatee.' Markaan taa maqlay baan u tagay ninkeygii kuna iri: Waxaad tahay nin sabool ah oo aan wax heysan, Nebiguna (S.C.W.) inaan wax la baxno buu na faray, ee inta u tagtid soo waydii inay adigu taydu kugu baxayso sadaqo ahaan, haddii kale aan cid kale siiyee.' Cabdullaah bin Mascuud wuxuu yiri: Adigu shakhsi ahaan u tag oo arrintaa weydii. Markaa baan aadey mise haweeney Ansaariyad ah oo sidayda oo kale ah baa irridkii nebiga joogta oo arrinteyda oo kale wadata. Waxaan ka baqnay inaan galno xishood awgi iyo darajeyn rasuulka (S.C.W.) markaasaa waxaa noo soo baxay Bilaal (A.K.R.) waxaynuna ku niri: Fadlan u tag Nebiga (S.C.W.) oo u sheeg in laba dumar ah oo irridka taagan ay doonayaan inay ogaadaan inay sadaqadu noogu baxayso nimankayaga iyo Agoonta ku hoos nool cid aan nahayna ha u sheegin. Bilaal (A.K.R.) wuxuu u tegey nabiga (S.C.W.) oo arrintayadii u bandhigay. wuxuu weydiiyey Nebigu S.C.W. waa kuwama ? Bilaal (A.K.R.) wuxuu yiri: waa haweeney ansaar ah iyo mid kale oo Zaynab la yiraahdo. Wuxuu weydiiyey ' Zeynab badane waa Zeynabtee?' Bilaal (A.K.R.) wuxuu yiri: Waa xaaskii Cabdullaah (A.K.R.) . Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Waxay leeyihiin oo loo qori doonaa laba ajar, ajarkii qaraaba xiriirinta, iyo ajarkii sadaqada. (Bukhaari iyo Muslim)

٣٢٧- وعن أبي سفيان بن حرب رضي الله عنه في حديثه الطويل في قصة هرقل ، أن هرقل قال لأبي سفيان : فَمَاذَا يَأْمُرُكُمْ بِهِ ؟ يَعْنِي النَّبِيَّ ﷺ قَالَ : قلت : يقول : « آعْبُدُوا اللَّهَ وَحْدَهُ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا وَاتْرَكُوا مَا يَقُولُ آبَاؤُكُمْ ، وَيَأْمُرُنَا بِالصَّلَاةِ وَالصَّدَقِ وَالْعَفَافِ وَالصَّلَةِ » متفق عليه .

327. Abuu Sufyaan Sakhar bin Xarb (A.K.R.) wuxuu sheegay in markii uula kulmay Hiraqle, madaxweynihii Roomaanka, inuu Hiraqle weydiiyey : Muxuu nabigiinnu idin faraa inaad fashaan? Waxaan iri: Wuxuu ina faraa inaan caabudno Alle oo keliya, waxbanaan Alle u shariig yeelin, iyo inaannu raacin oo ka tagno caadoo - yinkii iyo dhaqankii aabbayaasheen; wuxuu sidoo kale ina faraa inaan oogno Salaadda, sheegno runta, ku dadaalno oo daa'imno dhowrsoonida (yacni ka fogaanno dhilleysiga iyo waxa u horseeda qofka), iyo inaan xiriirino oo wanaajino qaraabadayada.' (Bukhaari iyo Muslim)

٣٢٨ - وعن أبي ذر رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّكُمْ سَتَفْتَحُونَ أَرْضاً يُذَكَّرُ فِيهَا الْقِيرَاطُ » وفي رواية : « سَتَفْتَحُونَ مِصْرَ وَهِيَ أَرْضٌ يُسَمَّى فِيهَا الْقِيرَاطُ فَاسْتَوْصُوا بِأَهْلِهَا خَيْراً ، فَإِنَّ لَهُمْ ذِمَّةً وَرَجْماً » وفي رواية : « فَإِذَا افْتَحْتُمُوهَا فَأَحْسِنُوا إِلَى أَهْلِهَا فَإِنَّ لَهُمْ ذِمَّةً وَرَجْماً » أو قال : « ذِمَّةً وَصِهْرًا » رواه مسلم .

قال العلماء : الرَّجْمُ الَّتِي لَهُمْ كَوْنُ هَاجِرٍ أُمَّ إِسْمَاعِيلَ ﷺ مِنْهُمْ .
و« الصَّهْرُ » كَوْنُ مَارِيَةَ أُمَّ إِبْرَاهِيمَ ابْنِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ مِنْهُمْ .

328. Abuu Darr (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waxaad qabsan doontaan dal qiiraadka laga magacaabo.'

Werin kale baa waxay leedahay inuu yiri: waxaad qabsan doontaan muddo dhow Masar halkaasoo ay ku taal carro laga magacaabo Qiiraad. Ee dadkiisa wanaajiya , si fiicanna ula dhaqmo oo naxariis leh, maxaa yeelay qaraabannimo iyo xurmaa naga dhexeysa.
(Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay : Markii aad qabsataan , degaan-keeda si wanaagsan oo suuban ula dhaqma, maxaa yeelay waxaa inoo dhexeeya xurmo iyo xididnimo"
(Muslim)

Imaam Nawawi isagoo ka hadlaya riximnimada Masaarida la lahaa nabigu wuxuu sheegay inay tahay tilmaan dhacdada taariikhiga ah oo ah in Haajira, nebi Ismaaciil hooyadi ay Masaari aheyd, iyo Maariya al-Qibdiyya Ibraahim hooyadi, wiilkii nabiga (S.C.W.) inay iyana aheyd Masaari.

٣٢٩ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : لما نزلت هذه الآية ﴿ وَأَنْذِرْ عَشِيرَتَكَ الْأَقْرَبِينَ ﴾ [الشعراء : ٢١٤] دَعَا رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قُرَيْشًا فَاجْتَمَعُوا فَعَمَّ وَخَصَّ وَقَالَ : « يَا بَنِي عَبْدِ شَمْسٍ ، يَا بَنِي كَعْبِ بْنِ لُؤَيٍّ ، أَنْقِذُوا أَنْفُسَكُمْ مِنَ النَّارِ ، يَا بَنِي مُرَّةَ بْنِ كَعْبٍ أَنْقِذُوا أَنْفُسَكُمْ مِنَ النَّارِ ، يَا بَنِي عَبْدِ مَنَافٍ أَنْقِذُوا أَنْفُسَكُمْ مِنَ النَّارِ ، يَا بَنِي هَاشِمٍ أَنْقِذُوا أَنْفُسَكُمْ مِنَ النَّارِ ، يَا بَنِي عَبْدِ الْمُطَّلِبِ أَنْقِذُوا أَنْفُسَكُمْ مِنَ النَّارِ ، يَا فَاطِمَةُ أَنْقِذِي نَفْسَكَ مِنَ النَّارِ ، فَإِنِّي لَا أَمْلِكُ لَكُمْ مِنَ اللَّهِ شَيْئًا ، غَيْرَ أَنَّ لَكُمْ رَجْماً سَابِلُهَا بِيَالِهَا » رواه مسلم .

قوله ﷺ « بِلَالِهَا » هو بفتح الباء الثانية وكسرها و« البِلَالُ » : الماء ومعنى الحديث : سَأَصِلُهَا : شَبَّهَ قَطِيعَتَهَا بِالْحَرَارَةِ تُطْفَأُ بِالمَاءِ وَهَذِهِ تُبْرَدُ بِالصَّلَةِ .

329. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Markii ay soo degtey aayaddan : " U dig qaraabadaada ku xigta "

Nebigu (S.C.W.) wuxuu isugu yeeray (qabiilkii) Quraysh , iyagu-na dhammaan way yimaadeen , caamo iyo madaxba . markaasuu guud ahaan iyo gaar ahaanba u xusay, Wuxuu ku yiri: ' Reer Cabdi Shamsiyooow ! Reer Cabdi luwayoow , Naftiinna naar ka badbaadiya; reer Cabdi Manaafow naftiinna naar ka badbaadiya . ilmo Haashimow naftiinna naar ka badbaadiya . reer Cabdul Muddallibow naftiinna naar ka badbaadiya. Faadumooy naftaada naar ka badbaadi, maalinta qiyaamo xag Alle waxaan idiinka tari karo lama arko, xiriirin qaraabinnimo uun baad igu leedihiin iyada waa aan idiinku xiriirinayaa." (Muslim)

Fiiro gaar ah: Imaam Nawawi wuxuu yiri xadiiskan goynta qaraabada waxaa lagu shabbahay dab kulul, dabkana waxaa lagu baqtiin karaa biyaha, naarta uu qofku ku mudan goynta qaraabadana waxaa looga badbaadi kara xiriirinta qaraabada iyo gudashada xuquuqda ay qofka ku leeyihiin qaraabadiisa. yacni dabku waa kuleyl iyo naar waxaana baqtiya biyaha, qaraabo goyntuna waxaa laga mutaa dab iyo naar waxaana lagaga hortegi karaa xiriirinta iyo gudashada xuquuqda qaraabada.

٣٣- وعن أبي عبد الله عمرو بن العاص رضي الله عنهما قال : سمعت رسول الله ﷺ جَهَاراً غَيْرَ سِرِّ يَقُولُ : « إِنَّ آلَ بَنِي فُلَانٍ لَيَسُوءُوا بِأَوْلِيَائِي إِنَّمَا وَلِيَّيَ اللّٰهُ وَصَالِحُ الْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنْ لَهُمْ رَجْمٌ أَبْلُهَا بِبِلَالِهَا » متفقٌ عليه . واللفظ للبخاري .

330. Abuu Cabdullaah Camar ibn al- Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga (S..C.W.) oo si cad u leh aan sir aheyn : Reer hebel iyo reer hebel ma aha saaxiibbaday iyo gacalkay; saaxiibbaday iyo gacalladay waa Allaah, iyo muslimiinta wanaagsan. Shaki li; waxaa innaga dhexeeyaa reer hebel iyo reer hebelkaa oo keliya xiriir qaraabbannimo oo aan ku xiriirinayo, xaqeedana dhowrayo."

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٣١ - وعن أبي أيوب خالد بن زيد الأنصاري رضي الله عنه ، أن رجلاً قال : يا رسول الله أخبرني بعمل يدخلني الجنة ويباعدني من النار . فقال النبي ﷺ : « تَعْبُدُ اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُ بِهِ شَيْئًا ، وَتُقِيمُ الصَّلَاةَ وَتُؤْتِي الزَّكَاةَ ، وَتَصِلُ الرَّحِمَ » متفق عليه .

331. Abuu Ayuub Khaalid ibn Zayd (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin baa Nebiga (S.C.W.) wuxuu ku yiri: Nebi Alloow waxaad ii sheegtaa camal aan jannada ku galo naartana iga fogeeya. Wuxuu ku jawaabay nabigu (S.C.W.): Alle caabud oo waxba ha u shariig yeelin, oogna Salaadda; bixina sekada; xiriirina qaraabada ."
(Bukhaari iyo Muslim)

٣٣٢ - وعن سلمان بن عامر رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إِذَا أَفْطَرَ أَحَدُكُمْ فَلْيُفْطِرْ عَلَى تَمْرٍ فَإِنَّهُ بَرَكَةٌ ، فَإِنْ لَمْ يَجِدْ تَمْرًا فَالْمَاءُ فَإِنَّهُ طَهُورٌ » وقال : « الصَّدَقَةُ عَلَى الْمِسْكِينِ صَدَقَةٌ ، وَعَلَى ذِي الرَّجْمِ ثِنْتَانِ ، صَدَقَةٌ وَصِلَةٌ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

332. Salmaan ibn Caamir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Markii uu qofkiin afurayo timir ha ku afuro, maxaa yeelay barakaa ku jirta, haddii aadan helin timir, ku afur biyo, maxaa yelay biyuhu waxbay daahiriyaan. Intaa wuxuu raaciyeey : Sadaqada la siiyaa miskiinka waa sadaqo keliya; tan qaraabada la siiyaana labo samaanood bay wadataa; oo marna waa sadaqo, marna waa xiriirin qaraabo oo laba ajar buu qofku halkaa ka heli (Tirmidi baa weriyeey) oo yiri;waa xadiis xasan ah.

٣٣٣ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما قال : كَانَتْ تَحِيَّتِي امْرَأَةً وَكُنْتُ أَحِبُّهَا وَكَانَ عُمَرُ يَكْرَهُهَا فَقَالَ لِي : طَلَّقْهَا : فَأَبَيْتُ ، فَأَتَى عُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ تَعَالَى عَنْهُ النَّبِيَّ ﷺ فَذَكَرَ ذَلِكَ لَهُ ، فَقَالَ النَّبِيُّ ﷺ : « طَلَّقْهَا » رواه أبو داود ، والترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

333. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan lahaa afo (xaas) aan jeclahay , hayeeshee Aabbahay uu necbaa . Sidaa awgeed buu wuxuu i faray inaan furo , arrintaa oo aan anigu diiday . Cumar (A.K.R.) arrintaa buu nabiga u sheegay oo hor dhigay nabiguna (S.C.W.) wuxuu i yiri: ' Fur' . (Abuu Daawuud iyo Tirmidi baa weriyeey) Tirmidina wuxuu yiri waa xadiis xasan ah oo saxiix ah.

٣٣٤- وعن أبي الدرداء رضي الله عنه أن رجلاً أتاه قال : إن لي امرأة وإن أمي تأمرني بطلاقها ؟ فقال سمعت رسول الله ﷺ يقول : « الوالد أوسط أبواب الجنة فإن شئت فأضِعْ ذَلِكَ الْبَابَ أَوْ أَحْفَظْهُ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

334. Abuu Dardaa (A.K.R.) wuxuu yiri: waxaa ii yimid nin ,wuxuu i yiri : Waxaan leeyahay xaas, hooyadayna waxay i tiraahdaa fur.' Abuu Dardaa (A.K.R.) wuxuu u sheegay ninkaa inuu maqlay nabiga S.C.W. oo leh: (U samafalka iyo ku adeecidda waalidka wixii aan dambi aheyn) waa (furaha) irrid dhexaadka jannada, ee haddaad rabto irridkaas furahiisa xafido ama iska dayac.' (Tirmidi baa weriyey) oo yiri waa xadiis xasan ah oo saxiix ah

٣٣٥- وعن البراء بن عازب رضي الله عنهما ، عن النبي ﷺ قال : « الْخَالَةُ بِمَنْزِلَةِ الْأُمِّ » رواه الترمذي وقال : حديث صحيح .

وفي الباب أحاديث كثيرة في الصحيح مشهورة ؛ منها حديث أصحاب الغار ، وحديث جريج وقد سبقا ، وأحاديث مشهورة في الصحيح حذفها اختصاراً ، ومن أهمها : حديث عمرو بن عبسة رضي الله عنه الطويل المُشْتَمِلُ عَلَى جَمَلٍ كَثِيرَةٍ مِنْ قَوَاعِدِ الْإِسْلَامِ وَأَدَابِهِ وَسَادُّكُرُهُ بِتَمَامِهِ إِنْ شَاءَ اللَّهُ تَعَالَى فِي بَابِ الرَّجَاءِ ، قال فيه :

دَخَلْتُ عَلَى النَّبِيِّ ﷺ بِمَكَّةَ يَعْنِي فِي أَوَّلِ النَّبُوَّةِ فَقُلْتُ لَهُ : مَا أَنْتَ ؟ قَالَ : « نَبِيٌّ » فَقُلْتُ : وَمَا نَبِيٌّ ؟ قَالَ : « أُرْسَلَنِي اللَّهُ تَعَالَى » فَقُلْتُ : بِأَيِّ شَيْءٍ أُرْسَلْتَ ؟ قَالَ : « أُرْسَلَنِي بِصَلَةِ الْأَرْحَامِ وَكَسْرِ الْأَوْثَانِ وَأَنْ يُوحِدَ اللَّهُ لَا يُشْرَكَ بِهِ شَيْءٌ » وَذَكَرَ تَمَامَ الْحَدِيثِ ؛ وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

335. al-Baraa ibn Caasib (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri : Hooyo walaasheed (habaryar) waxay la siman tahay oo la mid tahay hooyo.' Tirmidi baa weriyey oo yiri: waa xadiis xasan oo saxiix ah.

Camar ibn Cambasa (A.K.R.) xadiis dheer wuxuu ku sheegay inuu mar booqday nebiga (S.C.W.) maalmahii ay risaaladu horta laheyd ee Makka la joogey. Wuxuu yiri: Waxaan weydiiyey maxaad ta-

hay ?Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: Nebi . ' Markaa baan haddana weydiiyey : Nebi waa maxay ?Wuxuu ku jawaabay : Allaa i soo diray . ' Haddana waxaan sii weydiiyey : Oo muxuu wax (fartiin) ah Alle ku la soo diray ?Wuxuu ku jawaabay in ' qaraabada la xiriiriyo oo la wanaajiyo, sanamadana iyo mabaadida dalligan ee Aadanahu sameystay (wixii khilaafaya Islaamka) la baa'biyo, Allena la waxido oo aan waxba loo shariig yeelin ."

Fiiro gaar ah:

U khidmeynta waalidka iyo adeeciddooda waa waajib iyo xil saaran carruurta . Dhab ahaantii makaanada waalidka aad bay ugu weyn tahay diinta Islaamka, oo kaalin weyn buu ka siiyey xiriirka dadka dhexdiisa ah, cid iyaga ka xaq badanna ma jirto Alle iyo rasuulkiiisa kaddib. Adeecidda Alle waxaa mar walba ku lamaananan adeecidda iyo maqlidda waalidka sida ku cad Qur'aanka iyo sunnaha nabiga (S.C.W.) Waa dad nasiib badan kuwa guta waajibkooda xagga waalidiintood, xuquuqdoodana u oofiya, si wanaagsan oo naxariis lehna ula dhaqma, maqla oo adeeca, dadkaa sidaas ah wuxuu Alle ka cafiyaa dambiyadooda, waxayna muteystaan abaal marin xaggiiisa ah iyo raallinimadiisa, iyo kheyr iyo samaan aan la koobi karin.

٤١ - باب تحريم العقوق وقطيعة الرحم

CUTUBKA 41

WAALID CAASIYADDA IYO QARAABA GOYNTA WAA XAARAAN

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ فَهَلْ عَسَيْتُمْ إِنْ تَوَلَّيْتُمْ أَنْ تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ وَتُقَطِّعُوا أَرْحَامَكُمْ أُولَئِكَ الَّذِينَ لَعَنَهُمُ اللَّهُ فَأَصَمَّهُمْ وَأَعَمَّى أَبْصَارَهُمْ ﴾ [محمد : ٢١ - ٢٢]

134. " Oo ma waxaad ku dhaqaaqi laheydeen , haddii aad madax noqotaan, inaad dhulka fasahaadisaan, qaraabadiinnana goysaan. Waa kuwaasoo kale kuwa Alle naclado, markaasna uu dhego tiro, indhahana ka rido." Suuradda Muxammad: Aayadaha 22-23.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَالَّذِينَ يَنْقُضُونَ عَهْدَ اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مِيثَاقِهِ ، وَيَقْطَعُونَ مَا أَمَرَ اللَّهُ بِهِ أَنْ يُوصَلَ ، وَيُفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ ، أُولَئِكَ لَهُمُ اللَّعْنَةُ وَلَهُمْ سُوءُ الدَّارِ ﴾ [الرعد : ٢٥]

135. " Kuwa axdiga Alle jebinaya adkaysiintiisii kaddib, goynayona wixii Alle faray in la xiriiriyo (sida qaraabada) oo dhulka fasaahadinaya, kuwaasu nacalad bay leeyihiin, daarta xumaantana waa leeyihiin ". Suuradda Ar-Racad: Aayadda 25.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا إِمَّا يَبُلُغَنَّ عِنْدَكَ الْكِبَرَ أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُلْ لَهُمَا أُفٍّ وَلَا تَنْهَرهُمَا وَقُلْ لَهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا وَأَخْفِضْ لَهُمَا جَنَاحَ الذُّلِّ مِنَ الرَّحْمَةِ وَقُلْ رَبِّ أَرْحَمُهُمَا كَمَا رَبَّيَانِي صَغِيرًا ﴾
[الإسراء : ٢٣ - ٢٤] .

136. " Rabbigaa wuxuu guddoonshey inaydaan caabudin waxaan isaga ahayn iyo wanaajinta labada waalid, haddii ay waayeenimo agtaada ku soo gaarto midkood ama labadoodaba uf ha ku oran hana canaan. qawl wanaagsan ku dheh. una raarici garab nugul naxariis darteed, dhehna ; Rabbiyoow u naxariiso sidii ay ii soo koriyeen". Suuradda Al-israa : Aayadaha 23:24.

٣٣٦ - وعن أبي بكرة نُفِيع بن الحارث رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « أَلَا أُنبئُكُمْ بِأكْبَرِ الكَبَائِرِ ؟ - ثلاثاً - قُلْنَا : بلى يا رسول الله . قال : « الإِشْرَاكُ بالله ، وَعُقُوقُ الوَالِدَيْنِ » وكان مُتَكِنًا فَجَلَسَ فقال : « أَلَا وَقَوْلُ الزُّورِ وَشَهَادَةُ الزُّورِ » فَمَا زَالَ يُكْرِرُهَا حَتَّى قُلْنَا لَيْتَهُ سَكَتَ . متفقٌ عليه .

336. Nufayc bin Xaaris (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Ma idiinka warramaa dembiyada waaweyn ? (sed-dex jeer buu ku celceliyey) Waxaynu niri: " Haah, Rasuul Alloow.' Wuxuu yiri: waa Alloo loo shariig yeelo iyo caasi waalidnimada (xusul baana u mudnaaye inta fariistay buu yiri) iyo been sheegidda iyo inaad markhaati been ah gasho. Aad buuna ugu celceliyey ilaa aan jecleesannay inuu joojiyo. (Bukhaari iyo Muslim)

٣٣٧ - وعن عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما عن النبي ﷺ قال : « الكَبَائِرُ : الإِشْرَاكُ بالله ؛ وَعُقُوقُ الوَالِدَيْنِ ، وَقَتْلُ النَّفْسِ ، وَالْيَمِينُ الغَمُوسُ » رواه البخاري .

« اليمين الغموس » التي يحلفها كاذباً عامداً ، سميت غموساً لأنها تغمس الحالف في الإثم .

337. Cabdullaah ibn Camar ibn al- Caas (A.K.R.) wuxuu yiri : Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waxaa ka mida dembiyada kabaa'irta ee waaweyn ee halista ah Alloo wax loo shariig yeelo, iyo waalidkoo lagu caasiyoobo, iyo naf la gooyo, iyo inaad been ku dhaarato"
(Bukhaari)

٣٣٨ - وعنه أن رسول الله ﷺ قال : « مِنْ الْكَبَائِرِ شَتْمُ الرَّجُلِ وَالِدَيْهِ » ! قالوا : يا رسول الله وهل يشتم الرجل والديه ؟ قال : « نَعَمْ ، يَسُبُّ أَبَا الرَّجُلِ فَيَسُبُّ أَبَاهُ وَيَسُبُّ أُمَّهُ فَيَسُبُّ أُمَّهُ » متفق عليه .

وفي رواية « إِنَّ مِنْ أَكْبَرِ الْكَبَائِرِ أَنْ يَلْعَنَ الرَّجُلُ وَالِدَيْهِ » ! قيل : يا رسول الله كيف يلعن الرجل والديه ؟ ! قال : « يَسُبُّ أَبَا الرَّجُلِ فَيَسُبُّ أَبَاهُ وَيَسُبُّ أُمَّهُ فَيَسُبُّ أُمَّهُ » .

338. Cabdullaah ibn Camar ibn al-Caas (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Inuu caayo qofku waalidki waa dambi weyn oo halis ah oo lagu halaagsamo. Dadkii waxay yiraahdeen: Rasuul Alloow! ma nin baa waalidki caayi kara? Wuxuu ku jawaabay: Haah, Haddii uu caayo qof kale aabbihi, qofkii aabbihi la caayey baa isna aargoosasho ahaan caayaya kii wax caayey aabbihi; haddii uu caayona qof kale hooyadi, qofkii la caayey hooyadi baa isna caayaya kii cayda billaabay hooyadi .
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay : ' dunuubta waaweyn ee halista ah waxaa ka mida in ninku waalidki naclado. Nin baa wuxuu weydiyey: Rasuul Alloow! Sidee buu qofku waalidkiis u nacladayaa ? Wuxuu yiri: ' Kolkuu caayo qof kale aabbihi, kii aabbihi la caayey baa isna markiisa kii wax caayey aabbihi caayaya, markuu qofku caayona ruux kale hooyadi, ruuxii hooyadi wax laga sheegay baa isna caayaya kii kale hooyadiis.'

٣٣٩ - وعن أبي محمد جبير بن مطعم رضي الله عنه أن رسول الله ﷺ قال : « لَا يَدْخُلُ الْجَنَّةَ قَاطِعٌ » قال سفيان في روايته : يَعْنِي قَاطِعُ رَجِمٍ ، متفق عليه .

339. Abuu Muxammad Jubayr ibn Mudcim (A.K.R.) wuxuu yiri: Qaraabo goys Janno ma gali doono.'
(Bukhaari iyo Muslim)

٣٤٠ - وعن أبي عيسى المغيرة بن شعبة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى حَرَّمَ عَلَيْكُمْ عُقُوقَ الْأُمَّهَاتِ ، وَمَنْعاً وَهَاتِ ، وَوَادَ الْبَنَاتِ ، وَكَرِهَ لَكُمْ قِيلَ وَقَالَ ؛ وَكَثْرَةَ السُّؤَالِ ؛ وَإِضَاعَةَ الْمَالِ » متفقٌ عليه .

قوله « مَنْعاً » مَعْنَاهُ : مَنْعُ مَا وَجِبَ عَلَيْهِ وَ« هَاتِ » طَلَبُ مَا لَيْسَ لَهُ . وَ« وَادَ الْبَنَاتِ » مَعْنَاهُ : دَفْنُهُنَّ فِي الْحَيَاةِ . وَ« قِيلَ وَقَالَ » مَعْنَاهُ : الْحَدِيثُ بِكُلِّ مَا يَسْمَعُهُ فَيَقُولُ قِيلَ كَذَا وَقَالَ فَلَانَ كَذَا مِمَّا لَا يَعْلَمُ صِحَّتَهُ وَلَا يَظُنُّهَا وَكَفَى بِالْمَرْءِ كَذِبًا أَنْ يَحَدَّثَ بِكُلِّ مَا سَمِعَ . وَ« إِضَاعَةُ الْمَالِ » تَبْذِيرُهُ وَصَرْفُهُ فِي غَيْرِ الْوُجُوهِ الْمَأْذُونِ فِيهَا مِنْ مَقَاصِدِ الْآخِرَةِ وَالْدُّنْيَا ، وَتَرْكُ حِفْظِهِ مَعَ إِمْكَانِ الْحِفْظِ . وَ« كَثْرَةُ السُّؤَالِ » الْإِلْحَاحُ فِيمَا لَا حَاجَةَ إِلَيْهِ .

وفي الباب أحاديث سبقت في الباب قبله كحديث « وَأَقْطَعُ مَنْ قَطَعَكَ » وحديث « مَنْ قَطَعَنِي قَطَعَهُ اللَّهُ » .

340. Abuu Ciisaa al-Muqiirah ibn Shucbah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Alle kor ahaaye wuxuu idinka xaa-raanshey in hooyooyinka lagu caasiyoobo , bakhiilnimda, Boobka iyo Booliyenta (Dhaca iyo xoog ku qaadashada hanti iyo xoolo dad kale) iyo in nolol la xabaalo gabdhaha yaryar ee dhasha, raallina kama aha oo ma jecla ku tiri kuteenta iyo hadalka faa'ida la'aanta ah, su'aalaha badan iyo ku ciyaaridda maalka (ku bixintiisa waxaan faa'ido laheyn ama xaraan ah sida sigaarka, qaadka iwm.).' (Bukhaari iyo Muslim)

٤٢ - باب فضل بر أصدقاء الأب

والأم والأقارب والزوجة وسائر من يندب إكرامه

C U T U B K A 42

XURMEYNTA IYO U SAMA FALKA SAAXIIBBADA
WAALIDKA, QARAABADA, IYO XAASASKA IYO KUWA
LA MIDKA AH EE MUDAN XURMADA .

٣٤١ - عن ابن عمر رضي الله عنهما أن النبي ﷺ قال : « إِنَّ أَبْرَ الْبِرِّ أَنْ يَصِلَ الرَّجُلُ وَدَّ أَبِيهِ » .

341. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Baarrinnimo waxaa ugu sarraysa inuu ninku u samo iyo axsaan falo aabbihi saaxiibadiis.' (Muslim)

٣٤٢ وعن عبد الله بن دينار عن عبد الله بن عمر رضي الله عنهما أن رجلاً من الأعراب لقيه بطريق مكة فسلم عليه عبد الله بن عمر وحمله على حمار كان يركبه ، وأعطاه عمامة كانت على رأسه ، قال ابن دينار فقلنا له : أصلحك الله إنهم الأعراب وهم يرضون باليسير . فقال عبد الله بن عمر : إن أبا هذا كان وداً لعمر بن الخطاب رضي الله عنه ، وإني سمعت رسول الله ﷺ يقول : « إن أبر البر صلة الرجل أهل وداً أبيه » .

وفي رواية عن ابن دينار عن ابن عمر أنه كان إذا خرج إلى مكة ، كان له حمار يتروخ عليه إذا مل ركوب الرحلة ، وعمامة يشد بها رأسه ، فبينما هو يوماً على ذلك الحمار ، إذ مر به أعرابي ، فقال : ألسنت فلان بن فلان ؟ قال : بلى . فأعطاه الحمار ، فقال : اركب هذا ، وأعطاه العمامة وقال : اشدد بها رأسك ، فقال له بعض أصحابه : غفر الله لك أعطيت هذا الأعرابي حماراً كنت تروخ عليه ، وعمامة كنت تشد بها رأسك ؟ فقال : إنني سمعت رسول الله ﷺ يقول : « إن من أبر البر أن يصل الرجل أهل وداً أبيه بعد أن يولي » وإن أباه كان صديقاً لعمر رضي الله عنه ، روى هذه الروايات كلها مسلم .

342. Cabdullaah ibn Diinnaar (A.K.R.) wuxuu yiri: Cabdullaah ibn Cumar baa nin reer miyi ah wuxuu kula kulmay jidka isagoo Makka u socda. Cabdullaah ibn Cumar baa salaamay, oo yiri dameerka ila soo fuul uu fuushanaa, waxna ka fuuliyey, cimaamad madaxa u saarnaydna siiyey. Cabdullaah ibn Diinnaar wuxuu yiri: Aniga ina Diinnaar ah baan waxaan iri: Ibn Cumar, khayr Allaha ku siiyee, ninku waa reer miyi oo wax yar buuba ku qanci lahaa (ee Maxaad waxaan oo axsaan iyo wanaag ah ula jeeddaa aad u galeyso?) Cabdullaah ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Ninkaan aabbihiisaa aabbahay (Cumar ibn Khaddaab) saaxiibki ahaa waxaana nebiga (S.C.W.) ka maqlay isagoo leh: baarrinnimo waxaa u sarraysa in uu ninku wanaajiyo oo uu axsaan iyo khery falo aabbihiis saaxiibadiis.' (Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay: Cabdullaah ibn Diinnaar wuxuu yiri: Ibn Cumar baa markuu Makkah u safro oo uu ka daalo ku so-

codka hal u wadan jiray, kaga wareegi jiray si uu ugu socdo dameer taasoo uu u arkayey inay uga fududdahay hasha. wuxuuna madax ku xiran jiray cimaamad. Marka isagoo maalin dameerkii fuushan baa waxaa ka hor yimid nin reer miyi ah, markaa buu (Cabdullaah ibn Cumar) ku yiri: Sow ma tihid ina hebel , ee uu dhalay hebel ina hebel hebel ? Wuxuu yiri ninkii: Haah, markaasuu Cabdullaah dameerkii siiyey oo yiri: Kaxeyso; cimaamadiina siiyey oo yiri: Tanna madaxa ku xiro. Raggii la socdey baa qaarkood yiri : Dembi-gaaga Allaha dhaafee ma ninkan reer miyiga ah baad siisay dameerkii aad fuuli jirtey iyo cimaamaddii aad madaxa ku xiran jirteyba? Wuxuu yiri: Waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: Waa baarrinnimo sare inuu ninku wanaajiyo oo u axsaan falo saaxiibdii aabbihiis dadkooda markuu aabbihi dhinto kaddib. Ninkani aabbihiisna wuxuu ahaa saaxiibka aabbahay (Cumar ibn Khaddaab) . (Muslim)

٣٤٣ - عن أبي أسيد - بضم الهمزة وفتح السين - مالك بن ربيعة الساعدي رضي الله عنه قال : بَيْنَا نَحْنُ جُلُوسٌ عِنْدَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ إِذْ جَاءَهُ رَجُلٌ مِنْ بَنِي سَلَمَةَ فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ هَلْ بَقِيَ مِنْ بَرِّ أَبِيِّ شَيْءٍ أَبْرُهُمَا بِهِ بَعْدَ مَوْتِهِمَا ؟ فَقَالَ : « نَعَمْ الصَّلَاةُ عَلَيْهِمَا وَالِاسْتِغْفَارُ لَهُمَا ، وَإِنْفَاذُ عَهْدِهِمَا مِنْ بَعْدِهِمَا ، وَصِلَةُ الرَّحِمِ الَّتِي لَا تُوصَلُ إِلَّا بِهِمَا ، وَإِكْرَامُ صَدِيقِهِمَا » رواه أبو داود .

343. Abuu Usayd Maalik ibn Rabiicah as-Saacidi (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay inay la fadhiyeen nabiga (S.C.W.) markii uu u yimid nin reer banii Salama ah oo ku yiri: Rasuulkii Alloow ! Ma jiraan haatan wax un aan wax ugu gali karo oo wanaag iyo samaan ah labadaydii waalid dhimashadooda kaddib? . Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: Haah, waa in loo duceeyaa oo loo dembi dhaaf iyo naxariis dalbaa, oo ballankii ay ka tageen la oofiyaa, oo qaraabada xaggooda ka soo jeeda la wanaajiyaa oo loo samaan iyo axsaan falaa, saaxiibdoodna la xurmeeyaa. (Abuu Daawuud)

Sh. al-Baani wuxuu yiri xadiiskan waa daciif , aan xujo iyo daliil ahaan loo cuksan kareyn.

٣٤٤ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : مَا غَرْتُ عَلَى أَحَدٍ مِنْ نِسَاءِ النَّبِيِّ ﷺ مَا غَرْتُ عَلَى خَدِيجَةَ رضي الله عنها ، وَمَا رَأَيْتُهَا قَطُّ ، وَلَكِنْ كَانَ يُكْثِرُ ذِكْرَهَا وَرُبَّمَا ذَبَحَ الشَّاةَ ثُمَّ يَقَطُّعُهَا أَغْضَاءَ ثُمَّ يَبْعَثُهَا فِي صَدَائِقِ خَدِيجَةَ ، فَرُبَّمَا قُلْتُ لَهُ : كَانَ لَمْ يَكُنْ فِي الدُّنْيَا امْرَأَةً إِلَّا خَدِيجَةَ ! فَيَقُولُ : « إِنَّهَا كَانَتْ وَكَانَتْ وَكَانَ لِي مِنْهَا وَلَدٌ » متفق عليه .

وفي رواية : وإن كان ليدبح الشاة فيهدى في خلائها منها ما يسعهن :
 وفي رواية كان إذا ذبح الشاة يقول : « أرسلوا بها إلى أصدقائ خديجة » وفي رواية
 قالت : استأذنت هالة بنت خويلد أخت خديجة على رسول الله ﷺ فعرفت
 استئذان خديجة فارتاح لذلك فقال : « اللهم هالة بنت خويلد » .

قولها « فارتاح » هو بالحاء . وفي الجمع بين الصحيحين للحميدي :
 « فارتاح » بالعين ومعناه : اهتم به .

344. Caa'isha (A.K.R.) waxay tiri: Ugama maseyri jirin si aad ah xaasaska kale ee nabiga (S.C.W.) sidii badneyd aan Khadiijo ugu masayri jirey oo kale, inkastoo aanan weligeey arag. Nabiga (S.C.W) baa in badan hadal hayn jirey. Mar kastoo neef la qalana, intuu qaybo u googooyo buu qayb u diri jirey Khadijo saaxiibbadeed.'

Werin kale waxay leedahay: Waxaan ku oran jiray nabiga (S.C.W.) ' Waxaad mooddaa markii aad ka hadleyso Khadiija inaysan ad-duunka naag kaleba jirin!. Markaasuu wuxuu yiraahdaa: Waxay aheyd haweeney wanaagsan, carruurna waa ii dhashay !
 (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay ahayd : Mar walba uu ri qalo , wuxuu si joogto ah ugu diri jiray qaybo hilibka ka mid ah Khadiijo saaxiibbadeed hadiyad ahaan, wuxuuna ka siin jiray in deeqda oo ku filan.

Werin kalena waxay aheyd : Marka ri'da la qalo wuxuu oran jiray: u geeya qaybo ka mida Khadiijo saaxiibbadeed.'

Marna waxaa dhacay , in Haalah bint Khuwaylad, Khadiijo walaalshood ay idan weydiisatay nabiga (S.C.W.) inay u soo gasho.. Wuxuu is yiri armay Khadiijo tahay, aad buuna u laab kacay nabiga (S.C.W.) hillaow iyo jaceyl darti (waayo labada walaalo Haalah iyo Khadiijo isku cod bay ahaayeen). Markaasuu kor u dhawaaqay isagoo leh: Allahayow tani waa Haalah bint Khuwaylad.'

٢٤٥ - وعن أنس بن مالك رضي الله عنه قال : خرجت مع جرير بن عبد الله البجلي رضي الله عنه في سفر فكان يخدمني فقلت له : لا تفعل ، فقال : إني قد رأيت الأنصار تصنع برسول الله ﷺ شيئا آلت على نفسي أن لا أصحب أحدا منهم إلا خدمته . متفق عليه .

345. Anas ibn Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan mar isla safar-nay Jariir ibn Cabdullaah al-Bujali (A.K.R.) markaasuu ii adeegaa mar walba, inkastoo uu iga weynaa da' ahaan (yacni uu ka weynaa Anas (A.K.R.) Markaasaan anigu (Anas A.K.R.) ku iri: Fadlan si- daa ha yeelin.' Wuxuu ku jawaabay: Waxaan arkay Ansaarta (Kuwii xaqa rumeeyey ee horay Madiina u degganaa) oo ugu adee- gaya nebiga (S.C.W.) sidaa daacadda leh iyo wanaagga, markaa baan waxaan dhaar ku maray haddii aan qof is raacno asxaabtii ne- biga ka mida in aan u adeego'. (Bukhaari iyo Muslim)

٤٣ - باب إكرام أهل بيت رسول الله

صلى الله عليه وسلم وبيان فضلهم

C U T U B K A 43

XURMAYNTA EHELKII NEBIGA (S.C.W.) IY O
FADLIGOODA

Alle kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى:

﴿ إِنَّمَا يُرِيدُ اللَّهُ لِيُذْهِبَ عَنْكُمُ الرِّجْسَ أَهْلَ الْبَيْتِ وَيُطَهِّرَكُمْ تَطْهِيراً ﴾

[الأحزاب : ٣٣]

137. ' Arrinta uu Alle doonayo wax kale maahee waa inuu xumaha idinka bi'iyo , oo idinka fogeeyo, Ahlu beydkoow. iyo inuu daahi- rin idin daahiriyo.' Suuradda Al- axzaab: Aayadda 33.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى:

﴿ وَمَنْ يُعْظَمَ شَعَائِرَ اللَّهِ فَإِنَّهَا مِنْ تَقْوَى الْقُلُوبِ ﴾ [الحج : ٣٢] .

138. " Qofkii weyneeya camallada iyo waxyaabaha Alle loola jee- do, astaamaha iyo qurbaanniisa ah, shaki li'i arrintaasu waa as- taan iyo mirahii cabsida qalbiyada .' Suuradda al- Xaj 32.

٣٤٦ - وعن يزيد بن حيان قال : انطلقت أنا وحصين بن سبرة ، وعمرو بن مسلم إلى زيد بن أرقم رضي الله عنهم فلما جلسنا إليه قال له حصين : لقد لقيت يا زيد خيراً كثيراً رأيت رسول الله ﷺ وسمعت حديثه وغزوت معه وصليت خلفه ؛ لقد لقيت يا زيد خيراً كثيراً ، حدثنا يا زيد ما سمعت من رسول الله ﷺ ، قال : يا ابن أخي والله لقد كبرت سني وقدم عهدي ونسيت بعض الذي كنت أعي من

رسول الله ﷺ ، فما حَدَّثْتُكُمْ فَاقْبَلُوا وَمَا لَا فَلَا تُكَلِّفُونِيهِ ثُمَّ قَالَ : قَامَ رسول الله ﷺ يَوْمًا فِينَا خَطِيبًا بِمَاءٍ يُدْعَى خُمًّا ، بَيْنَ مَكَّةَ وَالْمَدِينَةِ ، فَحَمِدَ اللهَ ، وَأَثْنَى عَلَيْهِ ، وَوَعظَ وَذَكَرَ ، ثُمَّ قَالَ : « أَمَا بَعْدُ أَلَا أَيُّهَا النَّاسُ فَإِنَّمَا أَنَا بَشَرٌ يُوشِكُ أَنْ يَأْتِيَ رَسُولُ رَبِّي فَأَجِيبَ وَأَنَا تَارِكٌ فِيكُمْ ثَقَلَيْنِ ، أَوَّلُهُمَا كِتَابُ اللهِ ، فِيهِ الْهُدَى وَالنُّورُ فَخُذُوا بِكِتَابِ اللهِ وَأَسْتَمْسِكُوا بِهِ » ، فَحَثَّ عَلَى كِتَابِ اللهِ وَرَغَبَ فِيهِ ثُمَّ قَالَ : « وَأَهْلُ بَيْتِي أَذْكُرْكُمْ اللهُ فِي أَهْلِ بَيْتِي أَذْكُرْكُمْ اللهُ فِي أَهْلِ بَيْتِي » فَقَالَ لَهُ حُصَيْنٌ : وَمَنْ أَهْلُ بَيْتِهِ يَا زَيْدُ أَلَيْسَ نِسَاؤُهُ مِنْ أَهْلِ بَيْتِهِ ؟ قَالَ : نِسَاؤُهُ مِنْ أَهْلِ بَيْتِهِ وَلَكِنْ أَهْلُ بَيْتِهِ مِنْ حُرْمِ الصَّدَقَةِ بَعْدَهُ قَالَ : وَمَنْ هُمْ ؟ قَالَ : هُمْ آلُ عَلِيِّ وَآلُ عَقِيلٍ وَآلُ جَعْفَرٍ وَآلُ عَبَّاسٍ قَالَ : كُلُّ هَؤُلَاءِ حُرْمِ الصَّدَقَةِ ؟ قَالَ : نَعَمْ . رواه مسلم .

وفي رواية : « أَلَا وَإِنِّي تَارِكٌ فِيكُمْ ثَقَلَيْنِ : أَحَدُهُمَا كِتَابُ اللهِ وَهُوَ حَبْلُ اللهِ ، مَنْ آتَبَعَهُ كَانَ عَلَى الْهُدَى وَمَنْ تَرَكَهُ كَانَ عَلَى ضَلَالَةٍ » .

346. Yaziid ibn Xayyaan (A.K.R.) wuxuu yiri: Aniga iyo Xusayn ibn Sabrah iyo Camar ibn Muslim baa waxaan u tagnay Zayd ibn Arqam (A.K.R.) markii aan la fariisannay buu yiri Xusayn: Zaydoow khayr badan baad la kulantay, nebigii baad (S.C.W.) aragtay oo sheekadiisii dhegeysatay; oo jihaadkii ku wehlisay; oo ku daba tukatay salaadahaada. Shaki li'i khayr badan baad la kulantay. Zaydow ! Fadlan wax nooga sheeg wixii aad ka maqashay nebiga (S.C.W.) .Wuxuu yiri: Maandhow waa aan gaboobey, waqtigeeygiina waa tegay; qaar ka mida waxyaabahii aan nebiga (S.C.W.) ka xafidayna waa halmaamay. ee wixii aan idiin sheegana iga qaata hana igu shuqlinnina inaan soo xusuusto waxyaabahaas aan halmaamay. (Dabadeedna wuxuu yiri) Nabiga (S.C.W.) baa mar inoogu khudbeeyey Khuma, tog u dhexeeya Makkah iyo Madiina. Markaa buu nebiga Alle mahdiyey oo ammaanay oo inoona digay isagoo innagu baraarujiyey cadaabta Alle iyo ajarka weyn ee agtiisa yaal haddana mar labaad wuxuu ammaanay Alle oo markaas yiri: I maqla dadow, anigu ma ahi waxaan aheyn qof (idin la mida) wa aana laga yaabaa inay tii Alle ii timaaddo dhowaan oo aan xijaabto. Waxaan idiinka tegeyaa laba arrimood oo muhiim ah. Kan hore waa Qur'aanka kariimka ah, kitaabka Alle; waxaa idiin ku sugan xeerar iyo xukunno iyo hanuun. Waana nuur iyo ileys jidka noloshu lagu iftiinsado. . Dhab u qabsada kitaabkan, oo dhinacna ha uga beyrina.' Wuxuu ahmiyad weyn siiyey oo aad inoogu adkeeyey ar-

rinkaa , oo ku waaniyey dadkii rumeeyey inay noloshooda saldhig uga dhigaan oo ay ku jimeeyaan kitaabka Alle. Markaa kaddib wuxuu yiri: Arrinka labaad , waa ahlu beytkeyga yacni xubnaha reerkeyga . Waxaan idiinku yeerayaa hor Alle, inaad xurmeysaan oo tixgelin iyo qaddarin gaar ah siisaan eheladeyda, waxaana mar labaadna Alle horti idiinku yeerayaa inaad dhowrtaan eheladeyda. Xusayn ibn Sabrah baa markaas wuxuu yiri: Zaydoow, waa kuwee ehelada rasuulka iyo xubnaha reerkiisa? soo ka mid ma aha xaasaskiisu eheladiisa ? Zayd wuxuu ku jawaabay : xaasaskiisu waa ka mid eheladiisa, sidoo kale waxaa ka mid inta sadaqada laga reebay inay aqbalaan ama sakada isaga dabadi.' Xusayn wuxuu weydiiyey: Waa kuwee ? Zayd wuxuu yiri: Waa reer Cali , Caqiil , Jacfar iyo Cabbaas. Intaasoo dhan sadaqada ma laga reebay (bay weydiiyeen)? Zayd wuxuu yiri: ' Haah' (Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay : Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Dhageysta waxaan idiinka tegeyaa laba waxyaalood oo waaweyn midkood yahay kitaabka Alle; waa xariggii Alle . Qofkii raacaa uu jidka toosan ku hanuunayo; qofkii ka tagaana oo dan aan u gelin, uu dhumayo, jidka toosanna ka habaabayo.

Fiiro gaar ah: Xadiiskan, arrimaha dhowrka ah ay ku soo arooreen, wuxuu daaha ka qaaday dabeecadda Aadannanimo ee nabiga (S.C.W.) nabiga oo isagu naf ahaantiisa caddeeyey inuu ahaa Aadane innaga inala mid ah , marka laga reebo inuu ka helay risaalad xag Alle, oo looga waxyooday.

٣٤٧ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما عن أبي بكر الصديق رضي الله عنه مَوْقُوفًا عَلَيْهِ أَنَّهُ قَالَ : أَرْقُبُوا مُحَمَّدًا ﷺ فِي أَهْلِ بَيْتِهِ ، رواه البخاري .

347. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Abuu Bakar as-Siddiiq wuxuu yiri: ' Ku sharfa (Sayidkii sharafta iyo darajada weynaa) Muxammad, (Rasuulkii Alle S.C.W.) inaad sharaftaan eheladiisa.' (Bukhaari)

٤٤ - باب توقيير العلماء والكبار وأهل الفضل

وتقديمهم على غيرهم ورفع مجالسهم وإظهار مرتبتهم

C U T U B K A 44

QADDARINTA CULIMADA, EHELU DIINKA, IYO WAX GARADKA SAMAHA KA TALIYA, IYO IN LAGA HOR MARIYO KUWA KALE OO LA MUUJIYO SHARAFTA IYO MEEQAANKOODA

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri :

قال الله تعالى :

﴿ قُلْ هَلْ يَسْتَوِي الَّذِينَ يَعْلَمُونَ وَالَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ؟ إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُولُو الْأَلْبَابِ ﴾

[الزمر : ٩] .

139. 'Ku dheh (iyagaa, Muxammadow S.C.W.) : Ma siman yihiin kuwa wax yaqaan iyo kuwa aan wax aqooni? Mayee kuwa wax-garadka ah oo keliya baa waansamaya, oo dareemaya wanaagga iyo kheyarka.' Suuradda az-Zumar : Aayadda 9

٣٤٨ - وعن أبي مسعودٍ عقبة بن عمرو البدرى الأنصارى رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « يَوْمُ الْقَوْمِ أَقْرَوْهُمْ لِكِتَابِ اللَّهِ ، فَإِنْ كَانُوا فِي الْقِرَاءَةِ سَوَاءً فَأَعْلَمَهُمْ بِالسُّنَّةِ ، فَإِنْ كَانُوا فِي السُّنَّةِ سَوَاءً ، فَأَقْدَمَهُمْ هِجْرَةَ ، فَإِنْ كَانُوا فِي الْهِجْرَةِ سَوَاءً فَأَقْدَمَهُمْ سِنًا ، وَلَا يُؤْمِنَنَّ الرَّجُلُ الرَّجُلَ فِي سُلْطَانِهِ ، وَلَا يَقْعُدُ فِي بَيْتِهِ عَلَى تَكْرِمَتِهِ إِلَّا بِإِذْنِهِ » رواه مسلم .

وفي رواية له : « فَأَقْدَمَهُمْ سِلْمًا » بَدَل « سِنًا » : أي إسلامًا . وفي رواية : « يَوْمُ الْقَوْمِ أَقْرَوْهُمْ لِكِتَابِ اللَّهِ وَأَقْدَمَهُمْ قِرَاءَةً ؛ فَإِنْ كَانَتْ قِرَاءَتُهُمْ سَوَاءً فَيَوْمُهُمْ أَقْدَمُهُمْ هِجْرَةَ ، فَإِنْ كَانُوا فِي الْهِجْرَةِ سَوَاءً فَلْيَوْمُهُمْ أَكْبَرُهُمْ سِنًا » .

والمراد « بِسُلْطَانِهِ » محل ولايته أو الموضع الذي يختص به و« تَكْرِمَتِهِ » بفتح التاء وكسر الراء وهي ما ينفرد به من فراشٍ وسريرٍ ونحوهما .

348. Abuu Mascuud Cuqbah ibn Camar al-Badri al-Ansaari (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofka ugu habboon inuu tujiyo oo uu imaam ka noqdo salaadaha jamaacada waa kooda kitaabka Alle u badiya, uguna wanaagsan akhrinta Qur'aanka kariimka ah; haddii inta goob joogga ahi, ay isku mid ka yihiin arrintaa, markaas waxaa la eegi kan sunnaha u badiya; haddii ay dhacdo inay isku mid ka yihiin xagga sunnaha sidoo kale, markaa waxaa iimaam noqon kan u soo hor haajiray (yacni kan kheyarka ku horreeyey), haddii ay ka sinnaadeen dhammaantood arrintanna , markaas kan u da' weyn waa inuu tujiyaa oo imaam u noqdaa. Qofnana waa inuusan iimaam ka noqon qof kale meeshi hadduusan u idmin, sidoo kalena waa inuusan qofna kaga fariisan qof kale fadhigi hadduusan u idmin.' (Muslim)

Werin kale oo Muslim dhigayo baa leh: ' Kooda u hor islaamay, halka ah kooda u da' weyn.'

Werin kale baa iyana ah: Dadka ninka tujinaya waa inuu ahaadaa kooda kitaabka Alle u badiya oo u akhrin og; haddii ay akhriska isku mid ka yihiinna kan u soo hor haajirey baa tujinaya; haddii ay haajirida isku mid ka yihiinna, kan u da' weyn ha tujiyo.'

٣٤٩ - وعنه قال : كان رسول الله ﷺ يَمَسُّحُ مَنَاكِبَنَا فِي الصَّلَاةِ وَيَقُولُ : « آسْتُوا وَلَا تَخْتَلِفُوا ، فَتَخْتَلِفَ قُلُوبُكُمْ ، لِيَلِينِي مِنْكُمْ أَوْلُو الْأَحْلَامِ وَالنُّهَى ، ثُمَّ الَّذِينَ يَلُونَهُمْ ، ثُمَّ الَّذِينَ يَلُونَهُمْ » رواه مسلم .

349. Abuu Mascuud Cuqbah ibn Camar al-Badri al-Ansaari wuxuu kaloo sheegay in Nebigu (S.C.W.) saari jiray gacmahiisa garbaha-yaga markaan u safaneyno salaadda wuxuuna oran jirey: Safafka toosiya oo sima oo khilaaf dhexdiinna ha yeelina, haddii kale qu-luubtiinnaa is dhaafeysa heshiis la'aan iyo khilaaf darti. Kuwa i xiga ee igu dhow ha ahaadeen kuwa da'da ah , cilmiga iyo caqliga-na leh, iyo kuwa ku soo xiga ee tilmaamahaa oo kale leh, misna kuwa ku soo xiga oo tilmaan ahaan u dhow. (Muslim)

٣٥٠ - وعن عبد الله بن مسعود رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لِيَلِينِي

مِنْكُمْ أَوْلُو الْأَحْلَامِ وَالنُّهَى ، ثُمَّ الَّذِينَ يَلُونَهُمْ » ثَلَاثًا « وَإِيَّاكُمْ وَهَيْشَاتِ الْأَسْوَاقِ » رواه مسلم .

350. Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Salaadda markaynu tukaneyno ha igu soo xi-geen dadka waaweyn ee cilmiga iyo caqliga leh, Kuwa kuwaas xi-gana ha ahaadeen kuwo u dhow xagga tilmaamahaa da'da, cilmiga iyo caqliga, (seddex jeer buu sidaa yiri) wuxuuna raaciyey intaa: Iska jira oo ha ku hadlina hadallada xunxun ee suuqa markaad masjidka joogtaan.' (Muslim)

٣٥١ - وعن أبي يحيى وقيل أبي محمد سهل بن أبي حثمة - بفتح الحاء المهملة وإسكان الثاء المثلية - الأنصاري رضي الله عنه قال : انطلق عبد الله بن سهل ومحيصة بن مسعود إلى خيبر وهي يومئذ صلح ففرقا فأتى محيصة إلى عبد الله بن سهل وهو يتشخط في دمه (٢) قتيلاً ، فدفعه ثم قدم المدينة ، فانطلق عبد الرحمن بن سهل ومحيصة وحويصة ابنا مسعود إلى النبي ﷺ فذهب عبد الرحمن يتكلم فقال : « كبر كبر » وهو أحدث القوم فسكت فتكلم فقال : « أتخلفون وتستحقون قاتلكم » ؟ وذكر تمام الحديث ، متفق عليه .

وقوله ﷺ: « كبر كبر » معناه : يتكلم الأكبر .

351. Abuu Yaxya ama Abuu Muxammad Sahal ibn Abii Xathmah al-Ansaari (A.K.R.) wuxuu yiri: Cabdullaah ibn Sahal iyo Muxayyisah ibn Mascuud baa waxay aadeen Khaybar intii lagu jiray heshiiskii dagaal joojinta, waa kala leexdeen oo nin walba dantiisii iyo howshii uu halkaa u yimid raacday. Dabadeed Muxayyisah baa wuxuu u yimid Cabdullaah oo la diley, dhiigiisiina uu qooyay. Inta xabaalay buu Madiina ku laabtay. Markaa kaddib Cabdur Raxmaan ibn Sahal iyo Muxayyisah iyo Xuwayyasah, oo ilma Mascuud ahaa, baa markaas Nebiga (S.C.W.) aaday Cabdiraxmaan oo u cod karsanaa intooda baa hadalkii bilaabay ; markaasuu Nebigu (S.C.W.) yiri: Kan idiinku weyn ha hadlo; markaasuu Cabdur Raxmaan oo ugu da' yaraa seddexda hadalkii joojiyey oo uu aamusay oo labadii kale nabiga la hadleen. Nabiguna wuxuu ku yiri: Ma ku dhaaranaysaan arrintaa, oo iga dalbaneysaan in qofkii wax idin ka diley cad-daaladda la hor keeno wuxuuna weriyey xadiiska oo dhan.
(Bukhaari iyo Muslim)

٣٥٢ - وعن جابر رضي الله عنه أن النبي ﷺ كَانَ يَجْمَعُ بَيْنَ الرَّجُلَيْنِ مِنْ قَتْلَى أَحَدٍ يَعْنِي فِي الْقَبْرِ ، ثُمَّ يَقُولُ : « أَيُّهُمَا أَكْثَرُ أَخْذًا لِلْقُرْآنِ » ؟ فَإِذَا أُشِيرَ لَهُ إِلَى أَحَدِهِمَا قَدَّمَهُ فِي اللَّحْدِ . رواه البخاري .

352. Jaabir (A.K.R.) wuxuu yiri: Markuu dhammaaday dagaalkii Uxud kaddib, Nebigu (S.C.W.) wuxuu iskula xabaalayey laba kasta oo shuhadada ka mida hal qabri. Mar kasta oo uu labo xabaalayana wuxuuna dadka weydiinayey : Kee baa labadooda in badan Qur'aanka dusha ka qabtay ? Kii loo sheego buuna hor gelinayey iilka.
(Bukhaari)

٣٥٢ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما أن النبي ﷺ قال : « أراني في المنام أتسوك بسواك فجاءني رجلاًن ، أحدهما أكبر من الآخر ، فناولت السواك الأصغر ، فقيل لي : كبر ، فدفعته إلى الأكبر منهما » رواه مسلم مسنداً والبخاري تعليقاً .

353. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.)wuxuu yiri: ' Waxaan ku riyooday in anoo cadayanaya - laba nin ii timid, oo midi ka weyn yahay kan kale; Waxaan damcay inaan siiyo cadaygii kii yaraa markaasaa waxaa la i yiri sii cadayga kan weyn, markaasaan kii weynaa siiyey.' (Bukhaari iyo Muslim)

٣٥٤ - وعن أبي موسى رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إن من إجلال الله تعالى^(٤) إكرام ذي الشئبة المسلم ، وحامل القرآن غير الغالي فيه ، والجافي عنه^(١) وإكرام ذي السلطان المقسط » حديث حسن رواه أبو داود .

354. Abuu Muusaa (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Dhab ahaantii waa xusid iyo weyneyn Alle inaad ciseysid ci-roolaha muslimka ah; sidoo kale ciseysid Qur'aan yaqaanka ama fahiraha macaanida Qur'aanka ; waxaase shardi ah in qofkaa Qur'aan yaqaanka ama fahiraha macaanidiisa ah uusan ku kordhin Qur'aanka waxaan ka mid aheyn uusanna ku khilaafin ficilka iyo dhaqankiisa; sidoo kale waa ciseyn iyo weyneyn Alle inaad xurmeysa suldaanka caadilka ah.' (Abuu Daawuud Waa xadiis xasan ah oo sanad wanaagsan leh.

٣٥٥ - وعن عمرو بن شعيب عن أبيه عن جده رضي الله عنهم قال : قال رسول الله ﷺ : « لیس منا من لم یرحم صغیرنا ، ویرف شرف کبیرنا » حدیث صحیح رواه أبو داود والترمذی ، وقال الترمذی : حدیث حسن صحیح .
وفي روايه أبي داود « حَقَّ كَبِيرُنَا » .

355. Camar ibn Shucayb (A.K.R.) wuxuu ka wariyey abbahay oo isna ka soo xigtay aabbihi , in Nebigu (S.C.W.) yiri: Qofka aan naxariis u heyn carruurtayada aan xurmeyna waayeelkayaga naga mid ma' aha.' (Abuu Daawuud iyo Tirmidi)

Tirmidi wuxuu yiri waa xadiis xasan ah. Werinta Imaam Daawuud waxay leedahay keennii aan aqoonsan xaqa waayeelkayga , halka ah aan xurmeyn waayeelkayga.

٣٥٦- وعن ميمون بن أبي شبيب رحمه الله أن عائشة رضي الله عنها مرَّ بها سائلٌ ، فأعطته كِسْرَةً ، ومرَّ بها رجلٌ عليه ثيابٌ وهيئةٌ ، فأقعَدته فأكلَ فقيلَ لها في ذلك ؟ فقالت : قال رسول الله ﷺ : « أنزلوا الناسَ منازلَهُم » رواه أبو داود .
لكن قال : ميمون لم يدرك عائشة .

وقد ذكره مسلم في أول صحيحه تعليقاً فقال : وَذَكَرَ عَنْ عَائِشَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهَا قَالَتْ : أَمَرْنَا رَسُولَ اللَّهِ ﷺ أَنْ نُنْزِلَ النَّاسَ مَنَازِلَهُمْ . وَذَكَرَهُ الْحَاكِمُ أَبُو عَبْدِ اللَّهِ فِي كِتَابِهِ « مَعْرِفَةُ عُلُومِ الْحَدِيثِ » وَقَالَ : هُوَ حَدِيثٌ صَحِيحٌ .

356. Maymuun ibn Abii Shabiib Allaha u naxariistee wuxuu yiri: Nin baa wuxuu weydiistay Caa'isha sadaqo waxayna siisay jab rooti ah . Markaasaa nin kaloo wanaag ka muuqda baa u yimid markaa bay ugu yeertay inuu fariisto raashin iyo cuntona siisay. Markii la weydiiyey sida kala duwan ay ula dhaqantay , waxay tiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu na faray : Dejiya qof kasta meeqaanka uu leeyahay.' (Abuu Daawuud)

Xadiiskan waxaa lagu cilleeyey kala go' waayo Maymuun ma soo garin Caa'isha , sidaa awgeed waa daciif. Laakiinse qaybta dambe ee xadiiska wuxuu ku soo arooray Saxiixu Muslimka waana qaybta ka billaabaneysa wuxuu na faray nabiga oo yiri dejiya qof kasta meeqaanka uu leeyahay.

٣٥٧- وعن ابن عباس رضي الله عنهما قال : قَدِمَ عُيَيْنَةُ بْنُ حِصْنٍ فَنَزَلَ عَلَى ابْنِ أَخِيهِ الْحُرِّ بْنِ قَيْسٍ وَكَانَ مِنَ النَّفَرِ الَّذِينَ يُدْنِيهِمْ عُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ وَكَانَ الْقُرَاءُ أَصْحَابُ مَجْلِسِ عُمَرَ وَمُشَاوَرَتِهِ ، كَهَوْلًا كَانُوا أَوْ شُبَانًا ، فَقَالَ عُيَيْنَةُ لِابْنِ أَخِيهِ : يَا ابْنَ أَخِي لَكَ وَجْهٌ عِنْدَ هَذَا الْأَمِيرِ فَاسْتَأْذِنْ لِي عَلَيْهِ فَاسْتَأْذِنَ لَهُ فَأَذِنَ لَهُ عُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ ، فَلَمَّا دَخَلَ قَالَ : هِيَ يَا ابْنَ الْخَطَابِ ، فَوَاللَّهِ مَا تُعْطِينَا الْجَزَلَ ، وَلَا تَحْكُمُ فِينَا بِالْعَدْلِ ، فَغَضِبَ عُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ حَتَّى هَمَّ أَنْ يُوقَعَ بِهِ ، فَقَالَ لَهُ الْحُرُّ : يَا أَمِيرَ الْمُؤْمِنِينَ إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى قَالَ لِنَبِيِّهِ ﷺ ﴿ خُذِ الْعَفْوَ وَأْمُرْ بِالْعُرْفِ وَأَعْرِضْ عَنِ الْجَاهِلِينَ ﴾ وَإِنْ هَذَا مِنَ الْجَاهِلِينَ . وَاللَّهِ مَا جَاوَزَهَا عُمَرُ حِينَ تَلَاهَا عَلَيْهِ وَكَانَ وَقَافًا عِنْدَ كِتَابِ اللَّهِ تَعَالَى . رواه البخاري .

357. Xadiiskan waxaan ku soo marnay cutubka 3 , waana xadiiska tiradiisu tahay 50.

٣٥٨- وعن أبي سعيد سُمرة بن جُنْدُب رضي الله عنه قال : لقد كنت على عهد رسول الله ﷺ غلاماً ، فكنْتُ أَحْفَظُ عَنْهُ ، فَمَا يَمْنَعُنِي مِنَ الْقَوْلِ إِلَّا أَنْ هَهُنَا رَجَالاً هُمْ أَسْنُ مِنْي . متفقٌ عليه .

358. Abuu Saciid Samuurah ibn Jundub (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan ahaa wiil yar waqtigii Nebiga (S.C.W.) waxaana xafidi jiray axaadiista nabiga (S.C.W.) ha yeeshee ma werin jirin wixii aan ka xafiday, waayo waxaa joogay dad iga waaweyn.' .

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٥٩- وعن أنس رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَا أَكْرَمَ شَابٌ شَيْخاً لِسِنِّهِ إِلَّا قِيَّضَ اللَّهُ لَهُ مَنْ يُكْرِمُهُ عِنْدَ سِنِّهِ » رواه الترمذي وقال : حديث غريب .

359. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri : Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Hadduu nin dhallin yaro ah xurmeeyo ruux sheyb ah da'diisa awgeed, Wuxuu Alle u bixiyaa qof xurmeeya goortuu da,diisa oo kale gaaro .' (Tirmidi)

Imaam Tirmidi wuxuu yiri: Xadiiskani ma aha xadiis xoog leh. macnaha siduu yiri sh. al-Baani waa daciif aan xujo iyo cuskasho gelin.

٤٥ - باب زيارة أهل الخير ومجالستهم وصحبتهم ومحبتهم

وطلب زيارتهم والدعاء منهم وزيارة المواضع الفاضلة

C U T U B K A 45

BOOQASHADA DADKA WANAAGSAN IYO LA SOCOD-KOODA IYO LA FARIISIGOODA IYO JECLAANTOODA IYO KA CODSIGOODA INAY KU SOO BOOQDAAN IYO BOOQASHADA MEELAHA XURMADDA LEH.

قال الله تعالى :
﴿ وَإِذْ قَالَ مُوسَى لِفَتَاهُ لَا أَبْرَحُ حَتَّى أَبْلُغَ مَجْمَعَ الْبَحْرَيْنِ أَوْ أَمْضِيَ حُقُبًا ﴾ [الكهف : ٦٠]

إلى قوله تعالى :

﴿ قَالَ لَهُ مُوسَى : هَلْ أَتَّبِعُكَ عَلَىٰ أَنْ تُعَلِّمَنِي مِمَّا عَلَّمْتَ رُشْدًا ؟ ﴾

140. " Waa tii uu Muuse ku yiri adeegihiisii: Socod deyn mahayo jeer aan gaaro kulanka labada badood, waayoba aan socdee. ilaa qowlka Alle kor ahaaye: Muuse wuxuu ku yiri: Si aad i barto dhaqanka suubban iyo waxa lagu hanuuno ee lagu baray ? Suuradda al-Kahaf : Aayadaha 60 -66

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى

﴿ وَأَضْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ الَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ بِالْغَدَاةِ وَالْعَشِيِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ ﴾

[الكهف : ٢٨] .

141. " La samir kuwa Rabbigood baryaya galab iyo subaxba oo wejigiisa doonaya " Suuradda Al Kahaf : Aayadda 28.

٣٦- وعن أنس رضي الله عنه قال : قال أبو بكر لعمر رضي الله عنهما بعد وفاة رسول الله ﷺ : أَنْطَلِقْ بِنَا إِلَىٰ أُمَّ أَيْمَنَ . رضي الله عنها نَزُورُهَا كَمَا كَانَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ يَزُورُهَا فَلَمَّا أَنْتَهَىٰ إِلَيْهَا ، بَكَتْ فَقَالَ لَهَا : مَا يُبْكِيكِ ، أَمَا تَعْلَمِينَ أَنَّ مَا عِنْدَ اللَّهِ خَيْرٌ لِرَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، فَقَالَتْ : مَا أَبْكِي أَنْ لَا أَكُونَ أَعْلَمُ أَنَّ مَا عِنْدَ اللَّهِ تَعَالَىٰ خَيْرٌ لِرَسُولِ اللَّهِ ﷺ وَلَكِنْ أَبْكِي أَنَّ الْوَحْيَ قَدْ انْقَطَعَ مِنَ السَّمَاءِ فَهَيَّجَتْهُمَا عَلَى الْبُكَاءِ فَجَعَلَا يَبْكِيَانِ مَعَهَا . رواه مسلم .

360. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri markii nebigu (S.C.W.) dhintay kaddib Abuu Bakar (A.K.R.) baa Cumar (A.K.R.) wuxuu ku yiri: Ina wad aan Umm Ayman (A.K.R.) soo booqanee siduu nebiguba (S.C.W.) u soo booqan jiray. Markii ay u tageen bay ooydey. Waxay weydiiyeen: Maxaa kaa boohinya sow ma ogid in Alle ajar iyo abaal wanaagsan u hayo nebiga (S.C.W.) oo uga khayr roon yahay wixii adduunkan uu ku heystay ? Waxay tiri: taas ka ooyi maayo oo waa ogahay inay Alle agti Nebiga u khayr badan tahay, waxaan ka ooyayaa waxyiga oo hadda joogsaday . Arrintaa baana calool kicisay labadaas ruux ee sharafta badan si aad ah heer ay markaas la ooyeen iyagana . (Muslim)

Fiiro gaar ah:

Umm Ayman (A.K.R.) waxay aheyd adeegtadii iyo barbaarisadii rasuulka (S.C.W.) oo hooyadiis oo kale bay aheyd, iyadaana soo korisay . Sidoo kale waxay aheyd addoon uu xoreeyey rasuulka (S.C.W.) uuna ku daray Zayd bin Xaarisah (A.K.R.) . Nabigu (S.C.W) aad iyo aad buu u xurmeyn jiray, si joogta ahna wuu u

booqan jiray, wuxuuna oran jiray Umm Ayman waa hooyaday oo kale .

٣٦١- وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ : « أَنْ رَجُلًا زَارَ أَخًا لَهُ فِي قَرْيَةٍ أُخْرَى فَأَرَّصَدَ اللَّهُ تَعَالَى عَلَى مَدْرَجَتِهِ مَلَكًا فَلَمَّا أَتَى عَلَيْهِ قَالَ : أَيْنَ تُرِيدُ ؟ قَالَ : أُرِيدُ أَخًا لِي فِي هَذِهِ الْقَرْيَةِ ، قَالَ : هَلْ لَكَ عَلَيْهِ مِنْ نِعْمَةٍ تَرُبُّهَا عَلَيْهِ ؟ قَالَ : لَا ، غَيْرَ أَنِّي أَحْبَبْتُهُ فِي اللَّهِ تَعَالَى ، قَالَ : فَإِنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكَ بِأَنَّ اللَّهَ قَدْ أَحَبَّكَ كَمَا أَحَبَّتُهُ فِيهِ » رواه مسلم .

يقال : « أَرَّصَدَهُ » لِكَذَا : إِذَا وَكَلَهُ بِحِفْظِهِ . وَ« الْمَدْرَجَةُ » بِفَتْحِ الْمِيمِ وَالرَّاءِ : الطَّرِيقُ وَمَعْنَى (تَرُبُّهَا) تَقَوْمُ بِهَا وَتَسَعَى فِي صَلَاحِهَا .

361. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebiga (S.C.W.) wuxuu yiri: Ninbaa wuxuu booqasho u aaday nin walaalkiis ah oo magaaloo kale oo u dhow degganaa. Markaasaa jidka uu sii marayo Alle wuxuu ugu diyaarshey malag (ilaasha). Markuu ninkii la soo sheegay la kulmay malagga, malaaggii baa wuxuu weyddiiyey: Xaggee rabtaa? Wuxuu ku jawaabay: Waxaan rabaa inaan soo booqdo walaalkay oo magaaladan ku nool. Malaggii baa wuxuu weyddiiyey: Ma waxaad ka dooneysaa dano adduun, oo ujeeddadaas baad ugu socotaa? Ninkii wuxuu ku jawaabay: Maya. Dan kale kama lihi inaan soo booqdo oo keliya maahee, waayo Alle dartiisaan u jeclahay. Malaggii baa wuxuu ku yiri: Anigana Allaa ii soo kaa diray si aan kuugu sheego in Alle uu kuu jecel yahay sida aad u jeceshahayba walaalkaa Alle darti ."

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٦٢- وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ عَادَ مَرِيضًا أَوْ زَارَ أَخًا لَهُ فِي اللَّهِ ، نَادَاهُ مُنَادٍ بِأَنْ طِبَّتْ ، وَطَابَ مَمْشَاكَ ، وَتَبَوَّاتِ مِنَ الْجَنَّةِ مَنْزِلًا » رواه الترمذي وقال : حديث حسن وفي بعض النسخ غريب .

362. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri : Haddii uu qofku booqda qof buka ama walaalki oo Alle darti u soo booqdo iyadoon sabab kale aanay jirin, Dhawaaqe baa wuxuu yiraahdaa: waxsan Allaha ku siiyo, socodkaaga kheyr iyo samaan Allaha kaa siiyo, Jannadana rug iyo raas wanaagsan Allaha kaaga yeelo.'

(Tirmidi)

Wuxuuna yiri waa xadiis qariib ah yacni daciif , inkastoy jiraan axaadiis kale oo la macna ah oo xoojinaya .

٣٦٣ - وعن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال : « إِنَّمَا مَثَلُ الْجَلِيسِ الصَّالِحِ وَجَلِيسِ السُّوءِ ، كَحَامِلِ الْمِسْكِ ، وَنَافِخِ الْكَبِيرِ ، فَحَامِلُ الْمِسْكِ ، إِمَّا أَنْ يُحْذِيكَ ، وَإِمَّا أَنْ تَبْتَاعَ مِنْهُ ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ مِنْهُ رِيحاً طَيِّبَةً ، وَنَافِخُ الْكَبِيرِ إِمَّا أَنْ يُحْرِقَ ثِيَابَكَ ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ مِنْهُ رِيحاً مُتِنَةً » متفقٌ عليه .

(يُحْذِيكَ) : يُعْطِيكَ .

363. Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W) wuxuu yiri: ' Arrinka saaxiibka wanaagsan iyo saaxiibka xun waxay la kala mid yihiin qof miski (barafuun) heysta iyo qof buufin dabeed buufinaya (ama qof bir tume ah). Qofka miskiga (barafuunka) leh waxaa laga yaabaa inuu wax kaa siiyo hadiyad ahaan, amaba aad ka gadato, amaba ugu yaraan ay ku soo gaa-dho carafta udgoon ee barafuunka. Kan kalese ama dharkuu kaa gubayaa, ama ugu yaraan waxaa ku soo gaaraya qaac neefta kugu celiya oo ah dabka ka soo baxaya waxaa uu hurinayo.

(Bukhaari iyo Muslim)

Fiiro gaar ah: Sida uu yiri Sheekh Cali Qaari xadiiskan wuxuu muslimiinta ku dhiirra gelinyaa inay weheshadaan oo la fariistaan, oo la socdaan culimada iyo dadka wanaagsan, waayo arrintaa miro iyo faa'ido badan bay ka helayaan. waana laga reebay oo laga xaaraan-shey inay saaxiibtinnimo iyo la socod la wadaagaan dadka xun xun waayo way ku duni iyo diin seegayaan oo dhibaato weyn baa ka soo gaaraysa adduun iyo aakhiroba.

٣٦٤ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « تُنَكِّحُ الْمَرْأَةَ لِأَرْبَعٍ : لِمَالِهَا ، وَلِحَسْبِهَا ، وَلِجَمَالِهَا ، وَلِدِينِهَا ، فَأَظْفَرِ بِذَاتِ الدِّينِ تَرَبَّتْ يَدَاكَ » متفقٌ عليه .

ومعناه : أَنَّ النَّاسَ يَقْصِدُونَ فِي الْعَادَةِ مِنَ الْمَرْأَةِ هَذِهِ الْخِصَالَ الْأَرْبَعِ ، فَأَحْرَصْ أَنْتَ عَلَى ذَاتِ الدِّينِ ، وَأَظْفَرِ بِهَا ، وَأَحْرِصْ عَلَى صُحْبَتِهَا .

364. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Ninku wuxuu u guursadaa qof dumar ah Afar sababood dar-tood oo kala ah maal ay leedahay awgi, qoys fiican oo ay ka dhala-tay, qurux ay leedahay ama dhaqan iyo diin wanaaggeeda . ee isku day inaad hesho mid ehlu diin ah , aad libaantide.

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٦٥- وعن ابن عباس رضي الله عنهما قال : قال النبي ﷺ لجبريل : « مَا يَمْنَعُكَ أَنْ تَزُورَنَا أَكْثَرَ مِمَّا تَزُورُنَا ؟ فَتَنْزَلَتْ : ﴿ وَمَا نَنْزَلُ إِلَّا بِأَمْرِ رَبِّكَ لَهُ مَا بَيْنَ أَيْدِينَا وَمَا خَلْفَنَا وَمَا بَيْنَ ذَلِكَ ﴾ [مريم : ٦٤] » رواه البخاري .

365. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W) mar wuxuu ku yiri malakul Jabriil: Maxaad intaad na soo booqatid in ka badan noo soo booqan weyday? Markaa bay aayaddan arrintaa la xiiriirta soo degtey : " Innagu (mal'aaig ahaan) kuma soo degno waxaan aheyn amarka Rabbigaa. Isagaa leh waxa horteenna ah oo dhan, iyo wax gadaashayada oo dhan ah iyo wixii intaas u dhe-xeeyaba." Suuradda Maryam: Aayadda 64 (Bukhaari)

٣٦٦- وعن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه ، عن النبي ﷺ قال : « لَا تَصَاحِبْ إِلَّا مُؤْمِنًا ، وَلَا يَأْكُلْ طَعَامَكَ إِلَّا تَقِيًّا » . رواه أبو داود ، والترمذي بإسناد لا بأس به .

366. Abuu Saciid Al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: La saaxiib mu'min keliya, Raashinkaagana ha cuneen oo keliya suubbanayaasha toosan.' (Abuu Daawuud iyo Tirmidi) waa xadiis sanadkiisu uusan xumeyn.

٣٦٧- وعن أبي هريرة رضي الله عنه ، أن النبي ﷺ قال : « الرَّجُلُ عَلَى دِينِ خَلِيلِهِ ، فَلْيَنْظُرْ أَحَدُكُمْ مَنْ يُخَالِلُ » رواه أبو داود ، والترمذي بإسناد صحيح وقال الترمذي : حديث حسن .

367. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Qofku waxay u badan tahay inuu raaco dhaqanka saaxiibkiis. Sidaa awgeed iska eeg qofka aad la saaxiibbayso.' (Abuu Daawuud iyo Tirmidi) baa sanad saxiix ah ku weriyey. Tirmidi wuxuu yiri waa xadiis xasan ah .

٣٦٨- وعن أبي موسى الأشعري رضي الله عنه أن النبي ﷺ قال : « الْمَرْءُ مَعَ مَنْ أَحَبَّ » متفق عليه .

وفي رواية : قيل للنبي ﷺ : الرَّجُلُ يُحِبُّ الْقَوْمَ وَلَمَّا يَلْحَقْ بِهِمْ ؟ قال : « الْمَرْءُ مَعَ مَنْ أَحَبَّ » .

368. Abuu Muusaa Al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofku wuxuu la meel ahaanayaa qofkii uu jecel yahay. ' (Bukhaari iyo Muslim)

werin kale waxay leedahay: ' Nabiga (S.C.W) waxaa la weydiiyey : Ka warran qof qoon jecel ha yeeshee aan wax la wadaagin. ' Wuxuu ku jawaabay: Qof kasta wuxuu la meel ahaanayaa qoladii uu jecel yahay. '

٣٦٩ - وعن أنس رضي الله عنه أن أعرابياً قال لرسول الله ﷺ : متى الساعة ؟ قال رسول الله ﷺ : « ما أعددت لها » ؟ قال : حُبَّ الله ورسوله . قال : « أنت مع من أحببت » متفق عليه ، وهذا لفظ مسلم .

وفي رواية لهما : ما أعددت لها من كثير صوم ، ولا صلاة ، ولا صدقة ، ولكنني أحب الله ورسوله .

369. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin reer miyi ah baa weydiiyey Nabiga (S.C.W.) : Goormay dhici maalinta qiyaamo ? Nabigu wuxuu weydiiyey ninkii wax su'aalayey:Maxaad u diyaarsatay? Ninkii wuxuu yiri: ' (oo keliya) jeceylka Alle iyo Rasuulkiisa (S.C.W) Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waxaad la meel ahaanaysaa kuwaas aad jeceshahay. ' (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa ah: Ninkii reer miyiga ahaa wuxuu yiri: Uma diyaar san qiyaamaha salaado , soon , iyo sadaqo badan toonna , laakiinse Alle iyo Rasuulkiisaan jeclahay.'

٣٧٠ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه قال : جاء رجل رسول الله ﷺ فقال : يا رسول الله كيف تقول في رجل أحب قوماً ولم يلحق بهم ؟ فقال رسول الله ﷺ : « المرء مع من أحب » متفق عليه .

370. Ibn Mascuud (A..K.R.) wuxuu yiri: Nin baa inta u yimid Nabiga (S.C.W.) ku yiri: Rasuul Alloow ! Bal ka warran nin jecel qoon ha yeeshee aan weli ku soo biirin ? Wuxuu yiri nabigu (S..C.W.) : ' Qofku wuxuu la meel ahaanayaa qofkii uu jecel yahay. ' (Bukhaari iyo Muslim)

٣٧١ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « الناس معادن كمعادن الذهب والفضة ، خيارهم في الجاهلية خيارهم في الإسلام إذا فقهوا »

وَالْأَرْوَاحُ جُنُودٌ مُجَنَّدَةٌ فَمَا تَعَارَفَ مِنْهَا اثْتَلَفَ وَمَا تَنَآكَرَ مِنْهَا اخْتَلَفَ . رواه

مسلم .

371. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Dadku waa macaadin sida macaadinta dahabka iyo qalinka oo kale ah. Kuwoodii u gobsanaa waagii jaahilnimada baana u gobsanaan waaga Islaamka, haddii ay yeeshaan weeyaan aqoon diineed iyo faham; nafuhuna waa sida ciidammo kulmay, Kuwooda is leh oo isku jaadka ah , durba way is dhex galayaan oo israacayaan, kuwooda aan is laheynnaa, way kala tegi oo kala fogaan. '

(Bukhaari iyo Muslim)

Imaam Bukhaari wuxuu ka wariyey Caa'isha qaybta dambe ee xadiiska , inta ka billaabmeysa al-Arwaax.

٣٧٢ - وعن أسير بن عمرو ويقال ابن جابر وهو « بضم الهمزة وفتح السين المهملة » قال : كَانَ عُمَرُ بْنُ الْخَطَّابِ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ إِذَا أَتَى عَلَيْهِ أَمْدَادُ أَهْلِ الْيَمَنِ سَأَلَهُمْ : أَيْكُمْ أُوَيْسُ بْنُ عَامِرٍ ؟ حَتَّى أَتَى عَلَى أُوَيْسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ ، فَقَالَ لَهُ : أَنْتَ أُوَيْسُ بْنُ عَامِرٍ ؟ قَالَ : نَعَمْ ، قَالَ : مِنْ مُرَادٍ ثُمَّ مِنْ قَرْنٍ ؟ قَالَ : نَعَمْ . قَالَ : فَكَانَ بِكَ بَرَصٌ فَبَرَأْتَ مِنْهُ إِلَّا مَوْضِعَ دِرْهَمٍ ؟ قَالَ : نَعَمْ قَالَ : لَكَ وَالِدَةٌ ؟ قَالَ : نَعَمْ . قَالَ : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « يَأْتِي عَلَيْكُمْ أُوَيْسُ بْنُ عَامِرٍ مَعَ أَمْدَادِ أَهْلِ الْيَمَنِ مِنْ مُرَادٍ ، ثُمَّ مِنْ قَرْنٍ كَانَ بِهِ بَرَصٌ ، فَبَرَأَ مِنْهُ إِلَّا مَوْضِعَ دِرْهَمٍ ، لَهُ وَالِدَةٌ هُوَ بِهَا بَرٌّ ، لَوْ أَقْسَمَ عَلَى اللَّهِ لِأَبْرَهُ ، فَإِنْ اسْتَطَعْتَ أَنْ يَسْتَغْفِرَ لَكَ فَافْعَلْ » فَاسْتَغْفِرُ لِي ، فَاسْتَغْفِرْ لَهُ . فَقَالَ لَهُ عُمَرُ : أَيْنَ تُرِيدُ ؟ قَالَ : الْكُوفَةَ ، قَالَ : أَلَا أَكْتُبُ لَكَ إِلَى عَامِلِهَا ؟ قَالَ : أَكُونُ فِي غَبْرَاءِ النَّاسِ أَحَبُّ إِلَيَّ ، فَلَمَّا كَانَ مِنَ الْعَامِ الْمُقْبِلِ حَجَّ رَجُلٌ مِنْ أَشْرَافِهِمْ ، فَوَافَقَ عُمَرَ ، فَسَأَلَهُ عَنْ أُوَيْسٍ ، فَقَالَ : تَرَكْتُهُ رَثَّ الْبَيْتِ قَلِيلَ الْمَتَاعِ ، قَالَ : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « يَأْتِي عَلَيْكُمْ أُوَيْسُ بْنُ عَامِرٍ مَعَ أَمْدَادٍ مِنْ أَهْلِ الْيَمَنِ مِنْ مُرَادٍ ، ثُمَّ مِنْ قَرْنٍ ، كَانَ بِهِ بَرَصٌ فَبَرَأَ مِنْهُ إِلَّا مَوْضِعَ دِرْهَمٍ ، لَهُ وَالِدَةٌ هُوَ بِهَا بَرٌّ ، لَوْ أَقْسَمَ عَلَى اللَّهِ لِأَبْرَهُ ، فَإِنْ اسْتَطَعْتَ أَنْ يَسْتَغْفِرَ لَكَ ، فَافْعَلْ » ، فَاتَى أُوَيْسًا ، فَقَالَ : اسْتَغْفِرْ لِي قَالَ : أَنْتَ أَحَدْتُ عَهْدًا بِسَفَرٍ صَالِحٍ ، فَاسْتَغْفِرْ

لي قال : لَقِيَتَ عُمَرَ ؟ قال : نَعَمْ . فَاسْتَغْفَرَ لَهُ ، فَفَظِنَ لَهُ النَّاسُ ، فَانْطَلَقَ عَلَى وَجْهِهِ . رواه مسلم .

وفي رواية لمسلم أيضاً عن أُسَيْرِ بْنِ جَابِرٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أَنَّ أَهْلَ الْكُوفَةِ وَفَدُوا عَلَى عُمَرَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ ، وَفِيهِمْ رَجُلٌ مِمَّنْ كَانَ يَسْخَرُ بِأُوَيْسٍ ، فَقَالَ عُمَرُ : هَلْ هُنَا أَحَدٌ مِنَ الْقَرَنِيِّينَ ؟ فَجَاءَ ذَلِكَ الرَّجُلُ ، فَقَالَ عُمَرُ : إِنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قَدْ قَالَ : « إِنَّ رَجُلًا يَأْتِيكُمْ مِنَ الْيَمَنِ يُقَالُ لَهُ : أُوَيْسٌ ، لَا يَدْعُ بِالْيَمَنِ غَيْرَ أُمَّ لَهُ ، قَدْ كَانَ بِهِ بَيَاضٌ . فَدَعَا اللَّهُ تَعَالَى ، فَأَذْهَبَهُ إِلَّا مَوْضِعَ الدِّينَارِ أَوْ الدَّرْهَمِ ، فَمَنْ لَقِيَهُ مِنْكُمْ فَلْيَسْتَغْفِرْ لَكُمْ » .

وفي رواية له عن عمر رضي الله عنه قال : إني سمعتُ رسولَ الله ﷺ يقول : « إِنَّ خَيْرَ التَّابِعِينَ رَجُلٌ يُقَالُ لَهُ : أُوَيْسٌ ، وَلَهُ وَالِدَةٌ وَكَانَ بِهِ بَيَاضٌ ، فَمُرُوهُ ، فَلْيَسْتَغْفِرْ لَكُمْ » .

قوله « غَبْرَاءِ النَّاسِ » بفتح الغين المعجمة ، وإسكان الباءِ وبالمَد ، وهم فُقَرَاؤُهُمْ وَصَعَالِيكُهُمْ وَمَنْ لَا يُعْرِفُ عَيْنُهُ مِنْ أَخْلَاطِهِمْ وَ« الْأَمْدَادُ » جَمْعُ مَدَدٍ وَهُمْ الْأَعْوَانُ وَالنَّاصِرُونَ الَّذِينَ كَانُوا يُمَدُّونَ الْمُسْلِمِينَ فِي الْجِهَادِ .

372. Usayr ibn Camar (A.K.R.) ee loo yiqiin sidoo kale ibn Jaabir wuxuu yiri : Mar kasta oo uu wafdi Yaman uga yimaado Cumar ibn khaddaab (A.K.R.) wuxuu weydiin jirey ; Aweys ibn Caamir ma idinku jiraa ? ugu dambeyntii mid ka mida wafdiyada waxaa xubin ka ahaa Uways (A.K.R.) Markaa buu amiirkii mu'iniinta Cumar (A.K.R.) weydiiyey: Ma adigaa Uways ibn Caamir ? Uways wuxuu ku jawaabay: Haah'. Haddana waxaa la weydiiyey inuu yahay nin reer Muraad ah, reer Qaranna ka sii ah? Arrintaana wuu qiray. Amiirkii wuxuu sii weydiiyey : Baras ma qabi jirtey oo ma ka biskootey meel Dirham (shilin) le'eg maahee? Wuxuu yiri: Haah. Hooyadaa ma nooshahay? Cumar baa weydiiyey. Wuxuu yiri: haah Markaa buu Cumar yiri: Waxaan nebiga(S.C.W.) ka maqlay isagoo leh : Uways ibn Caamir baa idiin imaan doona isagoo wafdi reer Yaman ah la socda. Waa nin reer Muraad ah oo reer Qaran ka sii ah . Wuxuu qabi jiray baras oo ka biskooday meel Dirham (shilin) le'eg maahee. Hooyadi baa la nool oo uu jecel yahay, baarrina u yahay. Haddii uu dhaarto, isagoo Alle isku halleyn , wax un ugu dhaarto (sida inuu yiraahdo Wallee sidaa buu Alle ka dhigi) Alle

uu fulin lahaa waxaa uu ku dhaartay. ee haddii aad ku qancin kartaan inuu dembi dhaaf Alle idiin ka baryo yeela. Sidaa awgeed baan waxaan ka codsanayaa inaad Alle iiga baridid dembi dhaaf. Uwaysna Alle buu dembi dhaaf Cumar uga baryey. Cumar baa markaas wuxuu weydiiyey :Xaggee rabtaa?Wuxuu yiri: Kuufa.' Cumar (A.K.R.) baa haddana weydiiyey : Qoraal ma kuugu dhii-baa guddoomiyaha Kuufa ah inuu ku caawiya? Uways (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan door bidayaa inaan dadka dan yarta ah (yacni saboolka ah) ka mid ahaado .Sanndkii xigey nin odayaashii Kuufa ka mida baa xajka yimid oo la kulmay Cumar (A.K.R.) , Cumarna wuxuu ka wareystay Uways. Wuxuu yiri duqii reer Kuufa: waxaan ka soo kacay isagoo deggan guri duug ah oo dildillaacay, alaab yarina taal. Cumar (A.K.R.) baa wuxuu ku yiri : Nebigaan (S.C.W.) waxaan ka maqlay isagoo leh: Uways ibn Caamir oo reer Muraad ah, reer Qaranna ka sii ah baa idiin imaan doona isagoo wafdi Yaman ah la socda. Wuxuu qabi jirey baras oo uu ka biskoodey meel Dirham (shilin) le'eg ma'ahee. Waxaa la nool hooyadiis oo uu jecel yahay, baarrina u yahay . Haddii uu dhaarto, isagoo Alle isku halleyntaya , wuxuu doonoba ha ku dhaartee, Alle wuu fulin lahaa oo ka aqbali lahaa waxaa dhaarta uu ku maray ee haddii aad ku qancin kartaan inuu dembi dhaaf Alle idiin kaga baryo yeela .Markaa buu isagiina (ninka odayaasha iyo duqeyda Kuufa ka mid ahaa) u tegey Uways (A.K.R.) weydiistayna inuu Alle kaga baryo dambi dhaaf. Uways wuxuu ku yiri ninkii: Adigaa haatan ka yimid safar khayr (kacbada); sidaa awgeed waa adiga ninka la doonaya inuu iiga baryo Alle dembi dhaaf.' Wuxuuna sii weydiiyey Uways odaygii Kuufa : Ma waxaad la kulantay Cumar (A.K.R.) ? Ninkii wuxuu yiri: ' Haah' waan la kulmay.' Uways (A.K.R.) baa markaa u duceeyey ninkii odayaasha iyo duqeyda Kuufa ka mid ahaa, Allena dambi dhaaf kaga baryey. Markaa kadib dadkii baa ogaadey kheyrka iyo samaha iyo suubbanaanta Alle ku galladeystay Uways (A.K.R.) , Arrintaa oo keentay inuu Uways ka tago meeshaa sidaa oo ay niyaddisu tustay. (Muslim)

Werin kale oo Muslim ku taal baa waxay leedahay: Dad degaankoodu ahaa Kuufa baa wafdi ahaan Cumar ugu yimid, waxaana ku jirey nin aan tixgelinba siin Uways (A.K.R.) . Cumar (A.K.R.) baa weydiiyey : Ma idin ku jiraa nin reer Qaran ahi.? Markaa buu ninkan u yimid. Dabadeed Cumar wuxuu yiri: Nebigu S .C.W. wuxuu yiri: Nin baa idiinka imaan doona Yaman oo la yiraahdo Uways oo aysan Yaman uga dambayn waxaan hooyadiis ahayn.Wuxuu qabi jiray Baras, Alle buu ka baryey inuu ka buskeeyo, waana ka biskooday meel Dirham ama Diinnaar (shilin) le'eg ma ahee. Kiinnii la kulma, ha weydiisto inuu Alle kaga baryo dembi dhaaf. ' Werin kale baa iyana leh: Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: Taabiciinta (taabici) waxaa la yiraahdaa qof kastoo arkay mid ama ka badan asxaabtii

nabiga S.C.W.) waxaa u khayr badan nin Uways la yiraahdo, waxaa la nool hooyadiis oo keliya, wuxuu ku leeyahay baro cad jirkiisa (baras) u taga oo ka codsada inuu idiin dembi dhaaf dalbo.'

٣٧٣- وعن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال : استأذنتُ النبي ﷺ في العُمرة ، فأذن لي ، وقال : « لا تُسْنايَا أُخِيَّ مِنْ دُعَائِكَ » فقال كَلِمَةً ما يَسُرُّني أَنَّ لي بِها الدُّنْيَا .

وفي رواية وقال : « أشركنا يا أُخِيَّ في دُعَائِكَ » .

حديث صحيح رواه أبو داود والترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

373. Cumar ibn Khaddaab (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan ka dalbay fasax Nebiga (S.C.W.) si aan u soo cumreysto. Wuxuu i siiyey fasaxii iguna yiri: Walaaloo! Fadlan i xusuusnow oo ha iga qadin ducadaada . Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Kelmeddaas kuma doorsadeen waxa adduunka jira.' (Abu Daawuud iyo Tirmidi) oo yiri waa xadiis xasan saxiix ah.

Werin kale baa leh Wuxuu yiri: Anigana sidoo kale ii soo ducee, walaaloo ! marka aad duceysaneyso.
Sh. al Baani wuxuu yiri xadiiskan waa daciif aan xujo iyo daliil ahaan loo cuskan kareyn.

٣٧٤- وعن ابن عمر رضي الله عنهما قال : كان النبي ﷺ يزور قُبَاءَ رَاكِبًا وَمَاشِيًا ، فَيُصَلِّي فِيهِ رُكْعَتَيْنِ ، متفقٌ عليه .

وفي رواية : كان النبي ﷺ يَأْتِي مَسْجِدَ قُبَاءَ كُلِّ سَبْتٍ رَاكِبًا وَمَاشِيًا وَكَانَ ابْنُ عُمَرَ يَفْعَلُهُ .

374. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu soo booqan jiray (masjidka) Quba isagoo gaadiid wata ama isagoo luggeeynaya , wuxuuna ku tukan jiray laba rakcaddood (salaad sunno ah) halkaa. (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay: Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu booqan jiray masjidka Quba' sabti walba gaadiid iyo lugba waa ku tegi jiray. Ibn Cumarna sidii oo kaluu fali jirey isagoo rasuulka ku dayanaya.

٤٦ - باب فضل الحب في الله والحث عليه

وإعلام الرجل من يحبه ، أنه يحبه ، وماذا يقول له إذا أعلمه

CUTUBKA 46

ARRIMO KA HADLAYA FADLIGA IN ALLE DARTI LA ISKU
JECLAADO, LAYSKUNA BOORRIYO, QOFKUNA U SHEEGO
RUUXII UU JECHEL YAHAY INUU JECHEL YAHAY IYO
QOFKA MARKA LAGU WARGELIYO ARRINTAA WAXA UU
ORANAYO

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: قال الله تعالى :

﴿ مُحَمَّدٌ رَسُولُ اللَّهِ وَالَّذِينَ مَعَهُ أَشِدَّاءُ عَلَى الْكُفَّارِ رُحَمَاءُ بَيْنَهُمْ ﴾

[الفتح : ٢٩] إلى آخر السورة

142. " Muxammad waa rasuulkii Alle, kuwa la jiraana gaalada waa ku ad adag yihiin, dhexdoodana waa isu naxariis badan yihiin".
Suuradda Al-Fatx: Aayadda 9

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye: وقال تعالى :

﴿ وَالَّذِينَ تَبَوَّأُوا الدَّارَ وَالْإِيمَانَ مِنْ قَبْلِهِمْ يُحِبُّونَ مَنْ هَاجَرَ إِلَيْهِمْ ﴾

[الحشر : ٩]

143. " Kuwii horay Madiina u degganaana xaqana rumeeyey waa jecel yihiin wixii u soo haajirey". Suuradaa Al- Xashar:Aayadda 9

٣٧٥ - وعن أنس رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « ثَلَاثٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ وَجَدَ بِهِنَّ حَلَاوَةَ الْإِيمَانِ : أَنْ يَكُونَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِمَّا سَوَاهُمَا ، وَأَنْ يُحِبَّ الْمَرْءَ لَا يُحِبُّهُ إِلَّا لِلَّهِ ، وَأَنْ يَكْرَهُ أَنْ يَعُودَ فِي الْكُفْرِ بَعْدَ أَنْ أَنْقَذَهُ اللَّهُ مِنْهُ ، كَمَا يَكْرَهُ أَنْ يُقَدَّفَ فِي النَّارِ » متفق عليه .

375. Anas ibn Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waxaa jira saddex tilmaamood qofkii leh dhadhaminayo macaanka iimaanka; tan hore waa qofka Alle iyo Rasuulkiisa (S.C.W.) jecel wax kastaba ka sokow, tan labaad waa qofka Alle darti keliya qof u jecel, tan saddexaadna waa qofka u neceb inuu ku noqdo gaalimo (iyo macaasi) Alle ka koriyey, siduu u neceb yahay in naar lagu tuuro.
(Bukhaari iyo Muslim)

٣٧٦ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي ﷺ قال : « سَبْعَةٌ يُظِلُّهُمُ اللَّهُ فِي ظِلِّهِ يَوْمَ لَا ظِلَّ إِلَّا ظِلُّهُ ؛ إِمَامٌ عَادِلٌ ، وَشَابٌ نَشَأَ فِي عِبَادَةِ اللَّهِ عَزَّ وَجَلَّ ، وَرَجُلٌ قَلْبُهُ مُعَلَّقٌ بِالْمَسَاجِدِ ، وَرَجُلَانِ تَحَابَّا فِي اللَّهِ اجْتَمَعَا عَلَيْهِ وَتَفَرَّقَا عَلَيْهِ ، وَرَجُلٌ دَعَتْهُ امْرَأَةٌ ذَاتُ حُسْنٍ وَجَمَالٍ ، فَقَالَ : إِنِّي أَخَافُ اللَّهَ ، وَرَجُلٌ تَصَدَّقَ بِصَدَقَةٍ ، فَأَخْفَاهَا حَتَّى لَا تَعْلَمَ شِمَالُهُ مَا تُنْفِقُ يَمِينُهُ ، وَرَجُلٌ ذَكَرَ اللَّهَ خَالِيًا فَفَاضَتْ عَيْنَاهُ » متفقٌ عليه .

376. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Toddoba qofood waa kuwa la hoyin doono Harka Alle maalinta qiyaamo maalintaas uusan jiri doonin hoos kale, hooskiisa maahee. Toddobadaa waxaa weeye: Xaakim Caadil ah, qof dhallinyaro ah oo noloshiisa ku dhammeystay Alle ka dambeyn iyo hoggaansanaan uu u hoggaansan yahay, Qof mar walba qalbiga ma-saajidka ku haya; laba qof oo Alle darti isku jeclaaday oo sidaas isugu yimaada sidaasna ku kala taga; nin ay xaaraan ugu yeertay (macnaha inuu ka dhilleysto) haweyney qurux iyo haybad badan oo diiday, yirina: Allaan ka cabsanayaa; qofka la baxa sadaqada si sir ah oo aan caad aheyn, ilaa bidixdiisu ay ogaan weydo waxay midigtiisu bixisay; iyo qofka Alle xusuusta isagoo keli ah oo mar-kaa indhahiisu ilmo soo daayaan. " (Bukhaari iyo Muslim)

٣٧٧ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى يَقُولُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ : أَيْنَ الْمُتَحَابُّونَ بِجَلَالِي ؟ الْيَوْمَ أُظِلُّهُمْ فِي ظِلِّي يَوْمَ لَا ظِلَّ إِلَّا ظِلِّي » رواه مسلم .

377. Abuu Hurayrah (A.K.R.) Wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Maalinta qiyaamo, Alle kor ahaaye wuxuu oranayaa : Aawaye kuwii is jeclaa dartay?maantaan hoyinayaa hooska xag-gayga ka ahaaday. Maanta ma jiro hoos aan hooskeyga aheyn.' (Muslim)

٣٧٨ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ لَا تَدْخُلُوا الْجَنَّةَ حَتَّى تُؤْمِنُوا ، وَلَا تُؤْمِنُوا حَتَّى تَحَابُّوا ، أَوْلَا أَدُلُّكُمْ عَلَى شَيْءٍ إِذَا فَعَلْتُمُوهُ تَحَابَبْتُمْ ؟ أَفْشُوا السَّلَامَ بَيْنَكُمْ » رواه مسلم .

378. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Alle baan ku dhaaran ay naftaydu gacantiisa ku jirto, ma geli doontaan jannada jeer aad rumeysaan (Islaamka), rumeyn meysaanna jeer aad isjeclaataan.Ma idiin sheegaa wax haddii aad fa-shaan aad is jeclaanaysaan? Ku faafiya salaanta dhexdiinna.' (Muslim)

٣٧٩- وعنه عن النبي ﷺ : « إِنْ رَجُلًا زَارَ أَخَاهُ فِي قَرْيَةٍ أُخْرَى ، فَأَرْصَدَ اللَّهُ لَهُ عَلَى مَدْرَجَتِهِ مَلَكًا » وذكر الحديث إلى قوله : « إِنْ اللَّهُ قَدْ أَحْبَبَكَ كَمَا أَحْبَبْتَهُ فِيهِ » رواه مسلم . وقد سبق بالبَاب قبله .

379. Xadiiaskaan waxaan horay ugu soo marnay cutubkii kan ka horreeyey , waana xadiiska tiradiisu tahay 361.

٣٨٠- وعن البراء بن عازب رضي الله عنهما عن النبي ﷺ أَنَّهُ قَالَ فِي الْأَنْصَارِ : « لَا يُحِبُّهُمْ إِلَّا مُؤْمِنٌ ، وَلَا يُبْغِضُهُمْ إِلَّا مُنَافِقٌ ، مَنْ أَحَبَّهُمْ أَحَبَّهُ اللَّهُ ، وَمَنْ أَبْغَضَهُمْ أَبْغَضَهُ اللَّهُ » متفقٌ عليه .

380. Baraa ibn Caasib (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri : Qofka mu'minka ah oo keliya baa jecel Ansaarta, kan munaafiqah ahse waa neceb yahay. Alle wuu jecel yahay ruuxii jecel Ansaarta, Allaana neceb ruuxii neceb iyaga".

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٨١- وعن معاذ رضي الله عنه قال : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « قَالَ اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ : الْمُتَحَابُّونَ فِي جَلَالِي لَهُمْ مَنَابِرٌ مِنْ نُورٍ ، يَغِيْطُهُمُ النَّبِيُّونَ وَالشُّهَدَاءُ » . رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

381. Mucaad bin Jabal (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: Alle kor ahaaye wuxuu yiri: Waxaa kuwaa midba kan kale jecel cabsi darteed weynidayda iyo sharfteyda ah, ay leeyihiin oo sugaya kursiyo sare oo nuur ah oo noqon doonta wax ay kunyadaan (jeclaadaan in iyadoo kalelasiyo) nebiyada iyo shuhadada . (Tirmidi) Wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah saxiix ah.

٣٨٢- وعن أبي إدريس الخولاني رحمه الله قال : دَخَلْتُ مَسْجِدَ دِمَشْقَ فَإِذَا فَتَى بَرَّاقَ الثَّنَائِيَا وَإِذَا النَّاسُ مَعَهُ ، فَإِذَا اخْتَلَفُوا فِي شَيْءٍ ، أَسْنَدُوهُ إِلَيْهِ ، وَصَدَرُوا عَنْ رَأْيِهِ ، فَسَأَلْتُ عَنْهُ فَقِيلَ : هَذَا مُعَاذُ بْنُ جَبَلٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ . فَلَمَّا كَانَ مِنَ الْعَدِ هَجْرَتْ ، فَوَجَدْتُهُ قَدْ سَبَقَنِي بِالتَّهْجِيرِ ، وَوَجَدْتُهُ يُصَلِّي ، فَانْتَظَرْتُهُ حَتَّى قَضَى صَلَاتَهُ ثُمَّ جِئْتُهُ مِنْ قِبَلِ وَجْهِهِ ، فَسَلَّمْتُ عَلَيْهِ ، ثُمَّ قُلْتُ : وَاللَّهِ إِنِّي لِأَحِبُّكَ لِلَّهِ . فَقَالَ : اللَّهُ ؟ فَقُلْتُ : اللَّهُ . فَقَالَ : اللَّهُ ؟ فَقُلْتُ : اللَّهُ ، فَأَخَذَنِي بِحَبْوَةٍ رِدَائِي فَجَبَدَنِي إِلَيْهِ فَقَالَ : أَبَشِرْ ، فَإِنِّي سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « قَالَ اللَّهُ

تعالى : وَجَبَتْ مَحَبَّتِي لِلْمُتَحَابِّينَ فِيَّ ، وَالْمُتَجَالِسِينَ فِيَّ ، وَالْمُتَزَاوِرِينَ فِيَّ ،
وَالْمُتَبَادِلِينَ فِيَّ « حديث صحيح رواه مالك في الموطأ بإسناده الصحيح .

قوله « هَجَرْتُ » : أَي بَكَرْتُ ، وَهُوَ بِتَشْدِيدِ الْجِيمِ ، وَقَوْلُهُ : « أَلَّهِ
فَقُلْتُ : أَلَّهُ » الأول بهمزة ممدودة للاستفهام والثاني بلا مد .

382. Abuu Idriis al-Khawlaani Allaha u naxariistee wuxuu yiri; (Mar baan) waxaan galay masjid Dimishiq ku yaal, waxaan nasiib wanaag arkay nin da' yar oo ilka cad oo dhalaalaya leh. Koox dad ah baana ag fadhidey. Markii ay wax isku qabtaanna isaga ula tagaya wuxuu yiraahdana qaadanaya. Waxaan weydiiyey ciduu yahay, waxaa la ii sheegay inuu yahay Mucaad ibn Jabal (A.K.R.) Maalintii xigtay baan u soo degdegay masjidka, mise waa iiga soo horreeyey oo salaad buu ku jiraa. Waan sugey markii uu salaaddii ka baxay baan u imid oo inta soo hor fariistay, oo salaamay ku iri: Alle baan ku dhaaran waa aan ku jeclahay. Wuxuu yiri: Ma Alle darti? Waxaan ku jawaabay: Haah, Alle darti.' Wuxuu mar labaad yiri: ' Ma Alle darti? Waxaan ku jawaabay: Alle darti.' Markaasuu inta marada tafteda i qabtay oo xaggiisa ii soo jiiidey buu yiri ' Dhageyso bishaaradan wanaagsan ee farxadda leh: Waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: ' Alle wuxuu guddoonshey : Waa igu xaq iyo waajib i saaran inaan jaclaado kuwa midba kan kale u jecel dartey, midba kan kale ula kulmo dartey, midba kan kale u booqda dartey, midba kan kale wax u tara dartey.' (Maalik) waana xadiis saxiix ah.

٣٨٣ - وعن أبي كَرِيمَةَ المَقْدَادِ بنِ مَعَدٍ يَكْرِبُ رَضِيَ اللهُ عَنْهُ عَنِ النَّبِيِّ ﷺ قَالَ :
« إِذَا أَحَبَّ الرَّجُلُ أَخَاهُ ، فَلْيُخْبِرْهُ أَنَّهُ يُحِبُّهُ » رواه أبو داود ، والترمذي وقال :
حديث صحيح

383. Abuu Kariimah al- Miqdaad Macdi Kariib (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Hadduu qofku walaalkiis jecel yahay, waa inuu ogeysiiyaa arrintaa .

(Abuu Daawuud iyo Tirmidi) Wuxuna yiri Tirmidi waa xadiis xasan ah.

٣٨٤ - وعن معاذ رضي الله عنه ، أن رسول الله ﷺ ، أخذ بيده وقال : « يَا مُعَاذُ وَاللَّهِ إِنِّي لِأُحِبُّكَ ، ثُمَّ أُوصِيكَ يَا مُعَاذُ : لَا تَدْعَنَّ فِي دُبُرِي كُلَّ صَلَاةٍ تَقُولُ :
اللَّهُمَّ أَعْنِي عَلَى ذِكْرِكَ وَشُكْرِكَ وَحُسْنِ عِبَادَتِكَ » حديث صحيح ، رواه أبو داود
والنسائي بإسناده صحيح .

384. Mucaad ibn Jabal (A.K.R.) wuxuu sheegay: In nebiga (S.C.W.) gacanta qabtay yirina: ' Mucaad, Alle baan ku dhaaran waa aan ku jeclahay waxaana kugula dardaarmayaa inaad hal-maamin ducadan salaad walba oo farad ah dabadeed: Allaahumma acinnii calaa dikrika washukrika, waxusni cibaadatik'. oo macnaheedu yahay:

' Alloow, gacan igu sii inaan ku caabdudo adiga oo keliya, oo kugu shugriyo, iyo inaan si fiican oo sida la doonayo ah salaadda u ha-gaajiyo, hannaankeedana u toosiyo. (Abuu Daawuud iyo Nisaa'i) Waana xadiis saxiix ah.

٣٨٥ - وعن أنس رضي الله عنه ، أن رجلاً كان عند النبي ﷺ ، فمرَّ رجُلٌ به فقال : يا رسول الله أني لأحبُّ هذا . فقال له النبي ﷺ : « أَعَلِمْتَهُ » ؟ قال : لا ، قال : « أَعَلِمْتَهُ » فَلَجِحُّهُ ، فقال : إني أُحِبُّكَ في الله ، فقال : أَحَبَّكَ الَّذِي أُحِبُّنِي لَهُ ، رواه أبو داود بإسناد صحيح .

385. Anas bin Maalik (AK.R.) wuxuu yiri: Nin baa la fadhiyey nebiga (S.C.W.) markuu mid kale soo ag maray, kii hore ee nabiga la fadhiyey baa yiri: Rasuulkii Alloow (S.C.W.) ninkani waan jeclahay.' Nebigu S.C.W. wuxuu yiri: ' Ma u sheegtay arrintaa adigoo qaddarin iyo xurmeyn tusaya xaqiiqdaa awgeed? Wuxuu yiri: Maya.' Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: haddaba u sheeg .' markaasuu inta ka daba tegey ninkii buu ku yiri: Waan ku jeclahay Alle darti'. Kii kalena wuxuu ku jawaabay: Waxaan Alle ka baryi, aad dartiis igu jeclaatay inuu isna (Alle) ku jeclaado.' (Abuu Daawuud) Waana xadiis saxiix ah .

٤٧ - باب علامات حب الله تعالى للعبد

والحث على التخلق بها والسعي في تحصيلها

C U T U B K A 47

CALAAMADAHA LAGU GARTO ADOONKA ALLE JECEL YAHAY IYO IN ARRIMO LA XIRIIRA SIDA AAD TAA KU GAARI LAHEYD , LOONA HALGAMO SIDII LAGU GAARI LAHAA

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى :

﴿ قُلْ إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ ﴾

144. " Ku dheh (Muxammadow dadka) : Haddii aad Alle jeceshi-
hiin i soo raaca; Alle waa idiin jeclaanayaa oo idiin dembi dhaafa-
yaa. Alle waa dembi dhaafe naxariis badan".

وقال تعالى :
Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا مَنْ يَرْتَدَّ مِنْكُمْ عَنْ دِينِهِ فَسَوْفَ يَأْتِي اللَّهَ بِقَوْمٍ يُحِبُّهُمْ
وَيُحِبُّونَهُ أَذِلَّةٍ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ أَعِزَّةٍ عَلَى الْكَافِرِينَ يُجَاهِدُونَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ
وَلَا يَخَافُونَ لَوْمَةَ لَائِمٍ ذَلِكَ فَضْلُ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلِيمٌ ﴿
[المائدة : ٥٤] .

145. " Kuwa xaqa rumeeyoow! kii kasta oo idinka mid ah oo diin-
tiisa ka riddooba, (ogaada in beddelkiisa) Alle keeni doono dad uu
jecel yahay iyaguna jecel , u nugul mu'mininta , ku adadag gaala-
da, u hura naftooda iyo maalkooda kor yeelidda diinta Alle iyo hir-
gelinteeda, aan ka baqin canaanta xaarxaariye kasta. Taas baa ah
galladda Alle, wuxuuna siiyaa ciddii uu doono. Alle waa waasac
cilmi badan." .

٣٨٦- وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى
قال : مَنْ عَادَى لِي وَلِيًّا فَقَدْ آذَنْتُهُ بِالْحَرْبِ ، وَمَا تَقَرَّبَ إِلَيَّ عَبْدِي بِشَيْءٍ أَحَبَّ إِلَيَّ
مِمَّا افْتَرَضْتُ عَلَيْهِ ، وَمَا يَزَالُ عَبْدِي يَتَقَرَّبُ إِلَيَّ بِالنَّوَافِلِ حَتَّى أُحِبَّهُ ، فَإِذَا أَحْبَبْتُهُ ،
كُنْتُ سَمْعَهُ الَّذِي يَسْمَعُ بِهِ ، وَبَصَرَهُ الَّذِي يُبْصِرُ بِهِ ، وَيَدَهُ الَّتِي يَبْطِشُ بِهَا ،
وَرِجْلَهُ الَّتِي يَمْشِي بِهَا ، وَإِنْ سَأَلَنِي أُعْطِيْتُهُ ، وَلَئِنْ اسْتَعَاذَنِي لِأَعِيذَنَّهُ » رواه
البخاري .

معنى « آذنته » : أعلمته بأنني محارب له . وقوله « استعاذني » روي بالباء
وروي بالنون .

386. Abuu Hurayrah (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in Nebigu
(S.C.W.) yiri: Alle kor ahaaye wuxuu leeyahay: Col iyo dagaal
baan la ahay qof kasta oo cadaawad iyo colaad u qaada mu'min
Alle u hoggaansan. Wax uu addoonkaygu iigu soo dhowaadona
waxaan ugu jeclahay waxyaalaha aan ku faral yeelay. Markuu la
yimaadona nawaafil sida (salaado sunno ah, soon sunno ah, sadaqo
tabaruc ah aan sakadii waajibka aheyd aheyn, cumro iyo xaj iskiis
ah aan aheyn cumradii iyo xajkii cimriga marka waajibka ah iwm)

isagoo doonaya raallinamada iyo deeqdayda markaa baan jeclaa-
 daa addoonkeyga, markii aan jeclaadana, waxaan ahaadaa dhegtii-
 sa uu wax ku maqlo iyo indhahiisa uu wax ku arko iyo gacantiisa
 uu wax ku qabto iyo lugtiisa uu ku socdo, markuu wax i weydiista-
 na waxay ahaadaanba waan siinayaa, markuu doonayana ilaalin
 iyo magangelin waan ilaalin oo magan gelinayaa.' (Bukhaari)

٣٨٧- وعنه عن النبي ﷺ قال : « إِذَا أَحَبَّ اللَّهُ تَعَالَى الْعَبْدَ نَادَى جِبْرِيلَ : إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى يُحِبُّ فُلَانًا فَأَحِبَّهُ ، فَيَحِبُّهُ جِبْرِيلُ فَيُنَادِي فِي أَهْلِ السَّمَاءِ : إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ فُلَانًا فَأَحِبُّوهُ فَيَحِبُّهُ أَهْلُ السَّمَاءِ ، ثُمَّ يُوضَعُ لَهُ الْقَبُولُ فِي الْأَرْضِ » متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : قال رسول الله ﷺ : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى إِذَا أَحَبَّ عَبْدًا دَعَا جِبْرِيلَ فَقَالَ : إِنِّي أُحِبُّ فُلَانًا فَأَحِبَّهُ فَيَحِبُّهُ جِبْرِيلُ ثُمَّ يُنَادِي فِي السَّمَاءِ فَيَقُولُ : إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ فُلَانًا فَأَحِبُّوهُ فَيَحِبُّهُ أَهْلُ السَّمَاءِ ، ثُمَّ يُوضَعُ لَهُ الْقَبُولُ فِي الْأَرْضِ . وَإِذَا أَبْغَضَ عَبْدًا دَعَا جِبْرِيلَ فَيَقُولُ : إِنِّي أَبْغِضُ فُلَانًا فَأَبْغِضُهُ . فَيَبْغِضُهُ جِبْرِيلُ ثُمَّ يُنَادِي فِي أَهْلِ السَّمَاءِ : إِنَّ اللَّهَ يَبْغِضُ فُلَانًا فَأَبْغِضُوهُ ، ثُمَّ تُوضَعُ لَهُ الْبُغْضَاءُ فِي الْأَرْضِ » .

387. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.CW.) wuxuu yiri: " Markuu Alle jeclaado addoon addoomadiisa ka mid ah, Malag jabriil buu u yeeraa Alle una sheegaa in : ' Alle, kor ahaaye jecel yahay hebel, ee adiguna jecloow (baa lagu yiraahdaa) markaasaa Jabriilna jeclaadaa oo waxa cirka jooga u dhawaaqaa in hebel Alle jecel yahay , iyaguna sidaa darteed ay jeclaadaan. markaasay waxa cirka joogana jeclaadaan, dabadeedna aqoonsadaan, oo qof wanaag lagu yaqaan adduunka ka noqdaa (sidoo kale.)"

(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale oo Muslim ku taal baa waxay leedahay: Markuu Alle, kor ahaaye jeclaado addoon ka mida addoomahiisa, wuxuu u yeeraa malag Jabriil ku yiraahdaana: Waxaan jeclahay hebel ina hebel , ee adiguna jecloow. Markaasaa Jabriilna jeclaadaa . Dabadeedna waxaa la ogeysiiyaa waxa cirka jooga oo lagu yiraahdaa: Alle wuu jecel yahay qofka sidaa iyo sidaa la yiraahdo ee idinkuna jeclaada. markaasaa waxa cirka Joogana jeclaadaan. dabadeedna laga aqoonsadaa dhulka oo qof wanaag ku caan ah ka noqdaa. Markii uu Alle u nacana addoon addoomahiisa ka mida , wuxuu u yeeraa malag Jabriil kuna yiraahdaa: Waan u careysnahay hebel sidaa awgeed nebcoow adiguna, markaasaa malag Jabriilna u caroodaa oo nacaa. Markaa baa loo dhawaaqaa waxa cirka jooga in : Alle col iyo da-

gaal la yahay hebel ina hebel , idinkana laydinka doonayo inaad nacdaan oo aad la colloowdaan qofkaa isaga ah. Markaasay la colloobaan. Dabadeedna naceyb baa dhulka loo dhigaa .

٣٨٨- وعن عائشة رضي الله عنها أن رسول الله ﷺ بعث رجلاً على سرية فكان يقرأ لأصحابه في صلاتهم فيختم ب ﴿قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ﴾ ، فلما رجعوا ذكروا ذلك لرسول الله ﷺ فقال : « سلوه لأي شيء يصنع ذلك » ؟ فسألوه فقال : لأنها صفة الرحمن فأنا أحب أن أقرأ بها . فقال رسول الله ﷺ : « أخبروه أن الله تعالى يحبها » متفق عليه .

388. Caa'isha (A.K.R.) waxaa laga xigtay in Nebigu (S.C.W.) madax uga dhigay nin koox ciidan ah oo uu dagaal u diray. Isaga ayaa ninkaa abaanduullaha ah imaam uga ahaa kooxdaa ciidanka ah salaadaha mar walibana wuxuu ku khatimaa akhrintiisa Qur'aanka suuradda al-Ikhlāas (qul-hu-wallaahu Axad) oo ah suuradda 112aad) ! Markii uu ciidankii Madiina ku soo laabtay bay u sheegeen nabiga (S.C.W.) falkiisii, nabiguna yiri: Bal weydiiya muxuu sidaa u yeelayey? Sidii bay ku weydiiyeen wuxuuna yiri jawaab ahaan: Suuraddani waxay ka kooban tahay sifooyinka Alle weyne kor ahaaye, aniguna waxaan jeclahay inaan mar walba Akhriyo taa darteed. Nebigu (S.C.W.) markii jawaabtii ninkaa la gaarsiisay wuxuu yiri: ' U sheega ninkaa in Alle sidoo kale jecel yahay .'
(Bukhaari iyo Muslim)

٤٨ - باب التحذير من إيذاء الصالحين والضعفة والمساكين

C U T U B K A 48

KA DIGID IN LA DHIBO EHLU DIINKA , DUQEYDA, MASAAKIINTA, IYO FUQARADA

قال الله تعالى : : Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ وَالَّذِينَ يُؤْذُونَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ بَغَيْرِ مَا اكْتَسَبُوا فَقَدِ احْتَمَلُوا بُهْتَانًا وَإِثْمًا مُّبِينًا ﴾ [الأحزاب : ٥٨]

146. " Kuwa dhibaya mu'miniinta iyo mu'minadaha iyagoon waxba galabsan, waxay liisheen masabbid iyo dembi iska cad". Suuradda Al- Axsaab : Aayadda 58.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ فَأَمَّا الْيَتِيمَ فَلَا تَقْهَرْ وَأَمَّا السَّائِلَ فَلَا تَنْهَرْ ﴾ [الضحى : ٩ - ١٠] .

147. " Sidaa awgeed Agoonka ha luggoyn oo ha dhibin, weydiistahana ha guul guulin, oo hadal san ku dheh". Suuradda -Al-Duxaa: Aayadaha 9 - 10

وأما الأحاديث ، فكثيرة منها :

حديث أبي هريرة رضي الله عنه في الباب قبل هذا : « مَنْ عَادَى لِي وَلِيًّا فَقَدْ آذَنَهُ بِالْحَرْبِ » .

ومنها حديث سعد بن أبي وقاص رضي الله عنه السابق في باب ملاطفة اليتيم ، وقوله ﷺ : « يَا أَبَا بَكْرٍ لَئِنْ كُنْتَ أَغْضَبْتَهُمْ لَقَدْ أَغْضَبْتَ رَبَّكَ » .

Imaam Nawawi Allaha u naxariistee wuxuu leeyahay xadiisyada ci-waankaan ka hadlaya waa badan yihiin. Waxaana ka mid ah xadiiskii Abuu Hureyrah (A.K.R.) ee horay aan u soo marnay, tiradiisuna aheyd (386). Mid kale waa xadiiskii uu warinayey Sacad bin abii Waqaas (A.K.R.) (tiradiisuna aheyd 258). Nabiguna (S.C.W.) waa tuu ku yiri Abuu Bakar (A.K.R.) : ' Abuu Bakarooow haddii aad ka caraysiisid ragaa waxaa kugu dhacaysa carada Alle (waana xadiiska ay tiradiisu tahay 261) .

٣٨٩- وعن جندب بن عبد الله رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ صَلَّى صَلَاةَ الصُّبْحِ ، فَهُوَ فِي ذِمَّةِ اللَّهِ ، فَلَا يَطْلُبُنَا اللَّهُ مِنْ ذِمَّتِهِ بِشَيْءٍ ، فَإِنَّهُ مَنْ يَطْلُبُهُ مِنْ ذِمَّتِهِ بِشَيْءٍ يُدْرِكُهُ . ثُمَّ يَكْبَهُ عَلَى وَجْهِهِ فِي نَارِ جَهَنَّمَ » رواه مسلم ،

389. Jundub Ibn Cabdullaah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Qofkii tukadaa salaadda subax Alluu Ammaankiisa ku jiraa; sidaa awgeed is jira oo ka cabsada in Alle idiin soo raacdo wax ammaanadiisa ka mid ah (yacni iska jira inaad ku xad gudubtaan qof salaadda subax jamaac ahaan masjidka ugu tukaday) , waayo kii ku xadgudbaa waa qof ku xadgudbay wax ammaana Alle ku jiray, qofkii ku xadgudaana (wax ammaano Alle ku jira) oo dambigaa lagu helo, waxaa qofkaasi af gambi loogu tuuri doonaa naarta Jahannama.' (Muslim)

٤٩ - باب إجراء أحكام الناس على الظاهر

وسرائرهم إلى الله تعالى

C U T U B K A 49

U QABASHADA DADKA WIXII KA MUUQDA DHAQAN
AHAAN, IYO IN LOO DAAYO WIXII U QARSOON OO SIR
AH ALLE WEYNE S.W.T.

قال الله تعالى : Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ فَإِنْ تَابُوا وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ فَخَلُّوا سَبِيلَهُمْ ﴾ [التوبة : ١١] .

148. " Laakiinse haddii ay toobad keenaan oo salaadda tukadaan, sekadana bixiyaan, markaa jidkooda uga leexda) Suuradda. At-tawba : Aayadda 5.

٣٩٠ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما أن رسول الله ﷺ قال : « أَمِرْتُ أَنْ أُقَاتِلَ النَّاسَ حَتَّى يَشْهَدُوا أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، وَأَنْ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ ، وَيُقِيمُوا الصَّلَاةَ ، وَيُؤْتُوا الزَّكَاةَ ، فَإِذَا فَعَلُوا ذَلِكَ عَصَمُوا مِنِّي دِمَاءَهُمْ وَأَمْوَالَهُمْ إِلَّا بَحَقُّ الْإِسْلَامِ ، وَحِسَابُهُمْ عَلَى اللَّهِ تَعَالَى » متفق عليه .

390. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.)wuxuu yiri: " Waxaa la iga faray (xag Alle) inaan wado jihaadka iyo la halgan-ka dadka ilaa ay qiraan inuusan jirin cid mudan in la caabdudo oo laga dambeeyo oo loo hoggaansamo Alle maahee , iyo in Muxammad (S.C.W.) uu yahay rasuulkiisii; salaaddana oogaan; sakadana bixiyaan (xaqa saboolka ah iyo baahnaha). Markii ay sidaas falaanna, iyaga iyo xoolahooduba waa iga dhacsan yihiin oo ammaan bay iga helayaan, loomana raacan karo (qofkii taasi qira oo ku dhawaaqa shahaadada) wixii aan waajibaadka diinta ahayn, wixii u qarsoonna Allaa ku shaqa leh.'

(Bukhaari iyo Muslim)

٣٩١ - وعن أبي عبد الله طارق بن أشيم رضي الله عنه قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « مَنْ قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، وَكَفَرَ بِمَا يُعْبَدُ مِنْ دُونِ اللَّهِ ، حَرَّمَ مَالَهُ وَدَمَهُ ، وَحِسَابُهُ عَلَى اللَّهِ تَعَالَى » رواه مسلم .

391. Abuu Cabdullaah Daariq ibn Ushaym (A.K.R.) wuxuu yiri : Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh : Qofkii qiraa (af , uur iyo addinba) in ilaah jirin xaq ah Alle maahee iyo in Muxammadna yahay rasuulkii Alle, kuna gaalooba wax kasta oo Alle lala barbar

caabudo , waa innaga caaggan yihiin dhiiggiisa iyo maalkiisuba,
xisaabintiisana Allaa ku shaqo leh. ' (Muslim)

٣٩٢- وعن أبي معبد المقداد بن الأسود رضي الله عنه قال : قلت
لرسول الله ﷺ : أَرَأَيْتَ إِنْ لَقِيتُ رَجُلًا مِنَ الْكُفَّارِ ، فَاقْتَلَنَّا ، فَضَرَبَ إِحْدَى يَدَيْ
بِالسَّيْفِ ، فَقَطَعَهَا ، ثُمَّ لَأَذَ مِنِّي بِشَجَرَةٍ ، فَقَالَ : أَسَلَمْتُ لِلَّهِ ، أَقْتَلُهُ يَا
رَسُولَ اللَّهِ بَعْدَ أَنْ قَالَهَا ؟ فَقَالَ : « لَا تَقْتُلُهُ » فَقُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ قَطَعَ إِحْدَى
يَدَيْ ، ثُمَّ قَالَ ذَلِكَ بَعْدَ مَا قَطَعَهَا ؟ ! فَقَالَ : « لَا تَقْتُلُهُ ، فَإِنْ قَتَلْتَهُ فَإِنَّهُ بِمَنْزِلَتِكَ
قَبْلَ أَنْ تَقْتُلَهُ ، وَإِنَّكَ بِمَنْزِلَتِهِ قَبْلَ أَنْ يَقُولَ كَلِمَتَهُ الَّتِي قَالَ » متفقٌ عليه .

ومعنى « أنه بمنزلك » أي : معصوم الدم محكوم بإسلامه . ومعنى « أنك
بمنزليته » أي . مباح الدم بالقصاص لورثته لا أنه بمنزليته في الكفر ؛ والله أعلم .

392. Abuu Macbad Miqdaad ibn Aswad (A.K.R.) wuxuu yiri:
Waxaan ku iri nebiga (S.C.W.) : Nabi Allow bal ka warran had-
daan iska hor nimaadno nin gaalada ka mid ah oo aan dirirno oo uu
labada gacmood middood seeftiisa iiga gooyo, oo uu markaas geed
shishada ka maro si uu dilkeyga isaga dhowro oo yiraahdo; (laa
ilaah illal laah) waa islaamay oo Allaan isu dhiibey , ma ii bannaan
tahay inaan dilo markuu sidaa yiraahdo kaddib ? Wuxuu yiri: ha di-
lin.' Markaasaan iri" Rasuul Alloow (S.C.W.) xitaa hadduu gacan
iga gooyaa oo dabadeed sidaa yiri? Wuxuu yiri: Ha dilin, waayo
haddii aad disho , wuxuu ahaan meeshii aad joogtay ka hor intii aa-
dan dilin (Islaamnimo) , adna waxaad ahaan meeshii uu joogay ka
hor intii uusan ku dhawaaqin kelmadahaas (Gaalnimo).'
(Bukhaari iyo Muslim)

٣٩٣- وعن أسامة بن زيد رضي الله عنهما ، قال : بعثنا رسول الله ﷺ إلى
الْحُرَقَةَ مِنْ جُهَيْنَةَ فَصَبَّحْنَا الْقَوْمَ عَلَى مِيَاهِهِمْ ، وَلَحِقْتُ أَنَا وَرَجُلٌ مِنَ الْأَنْصَارِ
رَجُلًا مِنْهُمْ ، فَلَمَّا غَشِينَاهُ قَالَ : لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، فَكَفَّ عَنْهُ الْأَنْصَارِيُّ ، وَطَعَنَتْهُ
بِرُمْحِي حَتَّى قَتَلْتُهُ ، فَلَمَّا قَدِمْنَا الْمَدِينَةَ ، بَلَغَ ذَلِكَ النَّبِيَّ ﷺ فَقَالَ لِي : « يَا أُسَامَةَ
أَقْتَلْتَهُ بَعْدَ مَا قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ؟ » قُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ إِنَّمَا كَانَ مَتَعَوِّذًا ، فَقَالَ :
« أَقْتَلْتَهُ بَعْدَ مَا قَالَ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ؟ ! » ! فَمَا زَالَ يُكْرِرُهَا عَلَيَّ حَتَّى تَمَنَيْتُ أَنِّي لَمْ
أَكُنْ أَسَلَمْتُ قَبْلَ ذَلِكَ الْيَوْمِ . متفقٌ عليه .

وفي رواية : فقال رسول الله ﷺ : « أَقَالَ : لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَقَتَلْتَهُ » ؟
 قلت : يا رسول الله إنما قالها خوفاً من السلاح ، قال : « أَفَلَا شَقَقْتَ عَنْ قَلْبِهِ
 حَتَّى تَعْلَمَ أَقَالَهَا أَمْ لَا » ؟ ! فَمَا زَالَ يُكْرِرُهَا حَتَّى تَمْنَيْتُ أَنِّي أَسْلَمْتُ يَوْمَئِذٍ .

« الْحُرْقَةُ » بضم الحاء المهملة وفتح الراء : بَطْنٌ مِنْ جُهَيْنَةَ : الْقَبِيلَةُ
 الْمَعْرُوفَةُ . وقوله : « مُتَعَوِّذًا » : أَي مُعْتَصِمًا بِهَا مِنَ الْقَتْلِ لَا مِعْتَقِدًا لَهَا .

393. Usaamah ibn Zayd (A.K.R.) wuxuu yiri: Mar baa Nebigu (S.C.W.) wuxuu noo diray duullaan lagu qaadayo reer Xuraqah oo jilib ka mid ah jilibiyada qabiilka Juhayna. Waxaan gaarnay ceela-

shooda ay ka cabbaan waaberigii. Nin Ansaari ah iyo aniga baa qabtay nin iyagii ka mid ah. Markii uu arkay inuusan innaga baxsan karin buu yiri: laa ilaaha illallaah (kelmedda ashahaadada) ' ilaah ma jiro xaq ah aan Alle aheyn." markuu taa maqlay ninkii ansaariga ahaa farahuu ka qaaday, aniguna dilay anigoo ku dooxay afkii warankeyga. Markii aan Madiina ku soo noqonnay, baa warkii soo gaarey nabiga (S.C.W.) Nabiguna (S.C.W.) wuxuu i weydiiyey : Usaamoow ma markii uu laa ilaaha illal laah yiri kaddib baad dishey ? Waxaan iri: Rasuul Alloow Wuxuu ashahaadada ugu dhawaaqay inuu naftiisa badbaadiyo, oo dhab kama aheyn. ' Wuxuu yiri mar labaad : Ma markii uu laa ilaaha illal laah yiri kaddib baad dishey ? hadalkaasuu ku celceliyey ilaa aan is iri waxaa kuu howl yaraan lahayd oo kuu roonaa inaad Islaamin maalintaa ka hor. (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Ma wuxuu qiray inuusan ilaah xaq ah iyo cid mudan in la caabdudo oo laga dambeeyo oo loo hoggaansamo jirin aan Alle aheyn markaa baad haddana dishey? Waxaan iri: Rasuul Alloow (S.C.W.) baqdin buu u yiri oo keliya uu ka qabo ciidankeenna. ' Wuxuu yiri: inay dhab ka aheyd qalbigiisa ka soo go'day iyo in kale ma adigaa qalbigiisa jeexay oo ogaadey ?' hadalkaasuu ku celceliyey ilaa aan jecleystay inaan Islaamka soo galo wixii maalintaa ka billowday.

٣٩٤ - وعن جندب بن عبد الله رضي الله عنه ، أن رسول الله ﷺ بعث بعثاً من المسلمين إلى قوم من المشركين ، وأنهم اتقوا ، فكان رجل من المشركين إذا شاء أن يقصد إلى رجل من المسلمين قصد له فقتله ، وأن رجلاً من المسلمين قصد غفلته . وكنا نتحدث أنه أسامة بن زيد ، فلما رفع عليه السيف ، قال : لا إله إلا الله ، فقتله ، فجاء البشير إلى رسول الله ﷺ فسأله وأخبره ، حتى أخبره

خَبَرَ الرَّجُلِ كَيْفَ صَنَعَ ، فَدَعَاهُ فَسَأَلَهُ ، فَقَالَ : « لِمَ قَتَلْتَهُ » ؟ فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَوْجَعَ فِي الْمُسْلِمِينَ ، وَقَتَلَ فُلَانًا وَفُلَانًا - وَسَمَى لَهُ نَفْرًا - وَإِنِّي حَمَلْتُ عَلَيْهِ ، فَلَمَّا رَأَى السَّيْفَ قَالَ : لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ . قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « أَقْتَلْتَهُ » ؟ قَالَ : نَعَمْ قَالَ : « فَكَيْفَ تَصْنَعُ بِلَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، إِذَا جَاءَتْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » ؟ قَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَسْتَغْفِرُ لِي . قَالَ : « وَكَيْفَ تَصْنَعُ بِلَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ إِذَا جَاءَتْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » ؟ فَجَعَلَ لَا يَزِيدُ عَلَيَّ أَنْ يَقُولَ : « كَيْفَ تَصْنَعُ بِلَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ إِذَا جَاءَتْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » رواه مسلم .

394. Jundub ibn Cabdullaah (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (S.C.W.) diray ciidan muslimiinta ka mid ah si ay dagaal ugu qaadaan qolo gaalo aheyd. Markay labadii ciidan foodda is dareen, waxaa wacdarro meeshii ka muujiey iyo dagaal aqoon nin mushrikiintii ka mid ahaa oo muslimiintii wax ka laayey. Nin muslimiinta ka mid ah baa raad hayey , wuxuuna ahaa Usaama ibn Zayd (A.K.R.) , wuxuuna daydayanayey fursad uu ku dilo. markii uu seeftii kor joojiyey buu gaalkii durbadiiba wuxuu yiri: laa ilaaha illal laah ' Ilaah xaq ah ma jiro aan Alle aheyn.' , arrintan iyadoo jidha buu Usaamah ibn Zayd diley . Markay muslimiinta guul gaareen, warkaa farxadda lehna ay gaadhay nabiga (S.C.W.), arrintii Usaama ka dhacdayna loo sheegay . Ha loo cid diro buu yiri Usamah (A.K.R.) , markuu yimid Usaamah wuxuu weydiyey nabigu: Maxaad u dishey ninkaa ? Wuxuu ku jawaabay : ' Rasuul Alloow (S.C.W.) nin dhibaato iyo dhaawac xun gaarsiiyey muslimiinta buu ahaa, oo wuxuu dilay hebel iyo hebel iyo hebel (koox buu magacaabay) . Markaa baan xaggiisa ku socday markuuna arkay seefteydii oo gal baxsan, kor joogtana wuxuu yiri: laa ilaaha illal laah ' la caabude xaq lagu caabudo ma jiro aan Alle aheyn.' Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: oo ma dishey markaana?' Wuxuu yiri: Haah, mudane' Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Maalinta qiyaamo, maxaad oran jawaab ahaan markay kula doodo laa ilaaha illal laah dii uu ku dhawaaqay oo ay kugu dacwido?. Usaamah (A.K.R.) wuxuu yiri: Rasuul Alloow (S.C.W.) ii dembi dhaaf dalab.

' Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku celcelinayey isagoo aan wax ku darayn : (Maalinta qiyaamo maxaad oran oo jawaab ku bixin markay kugu dacwido laa ilaaha illal laah dii u yiri ? (Muslim)

٣٩٥ - وعن عبد الله بن عتبة بن مسعود قال : سمعت عمر بن الخطاب رضي الله عنه يقول : إن ناساً كانوا يؤخذون بالوحي في عهد رسول الله ﷺ ، وإن الوحي قد انقطع ، وإنما نأخذكم الآن بما ظهر لنا من أعمالكم ، فمن أظهر لنا خيراً أمناه

وَقَرَّبْنَاهُ ، وَلَيْسَ لَنَا مِنْ سَرِيرَتِهِ شَيْءٌ ، اللَّهُ يُحَاسِبُهُ فِي سَرِيرَتِهِ ، وَمَنْ أَظْهَرَ لَنَا
سُوءًا لَمْ نَأْمَنَّهُ وَلَمْ نُصَدِّقْهُ وَإِنْ قَالَ : إِنَّ سَرِيرَتَهُ حَسَنَةٌ . رواه البخاري .

395. Cabdullaah ibn Cutbah ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri:
waxaan maqlay Cumar ibn Khaddaab oo leh: Waaguu Nebiga
(S.C.W.) noolaa dadka waxaa loo qaban jirey oo caddeyn jiray (gefefkii ka dhaca iyo arrimahooda) waxyiga. Marka haatan hadduu
waxyigii go'ay, waxaan idiin qabanaynaa wixii aad samaynaysaan
oo nooga kiin muuqda. Sidaa awgeed marakan qofkii wax san aan
ka aragnana samaantaa baynu kula dhaqmi , waynuna ka aqbali sa-
maanta, wixii u qarsoonna waxba nagama gelin oo Allaa ku shaqo
leh, qofkii wax xun aan ka aragnana (oo shareecada khilaafsan)
kama aqbaleyno mana u qireyno, xataa hadduu yiraahdo niyadaydu
waa fiican tahay (oo arrintiisa waxaynu u bandhigi kitaabka Alle
iyo sunnada nebiga S.C.W.).' (Bukhaari)

٥٠ - باب الخوف

CUTUBKA 50

KA CABSASHADA ALLE

Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

قال الله تعالى :

﴿ وَإِيَّايَ فَارْهَبُونِ ﴾ [البقرة : ٤٠]

149. " Aniga uun iga baqa" .

وقال تعالى :

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ إِنَّ بَطْشَ رَبِّكَ لَشَدِيدٌ ﴾ [البروج : ١٢]

150. " Run ahaantii! ciqaabta Rabbigaa waa mid adag " .

وقال تعالى :

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

﴿ وَكَذَلِكَ أَخْذُ رَبِّكَ إِذَا أَخَذَ الْقُرَىٰ وَهِيَ ظَالِمَةٌ إِنَّ أَخْذَهُ أَلِيمٌ شَدِيدٌ إِنَّ فِي
ذَلِكَ لَآيَةً لِّمَنْ خَافَ عَذَابَ الْآخِرَةِ ذَلِكَ يَوْمٌ مَّجْمُوعٌ لَهُ النَّاسُ وَذَلِكَ يَوْمٌ
مَّشْهُودٌ وَمَا نُؤَخَّرُهُ إِلَّا لِأَجَلٍ مَّعْدُودٍ يَوْمَ يَأْتِ لَا تَكَلِّمُ نَفْسٌ إِلَّا بِإِذْنِهِ فَمِنْهُمْ
شَقِيٌّ وَسَعِيدٌ فَأَمَّا الَّذِينَ شَقُوا فَيُنْفِقُونَ فِي النَّارِ لَهُمْ فِيهَا زَفِيرٌ وَشَهِيْقٌ ﴾

151. " Waa sidaasoo kale qabashada Rabbigaa markii uu beelaha (ama bulshooyinka) qabto iyagoo daalimiin ah xumaan falaya. Run-tii! Qabashadiisu waa xanuun badan tahay oo adag tahay. Dhab ahaantiina taas calaamaa ugu jirta kii cadaabta aakhiro ka baqaya, taasuu waa maalin dadka la soo kulminayo waana maalin la arkayo taasuye, Waxaan u dib dhigeynaa oo keliya muddo tirsan oo ma-gaacaban. Maalinta ay imaaneynsana nafna ma hadli doonto mid loo idmay maahee. Qaar iyaga ka mid ah waa la hoojin , (qaar kalena) waa liibaani. Kuwa la hoojin (maalintaa) waxay dhex ahaan doo-naan naar olol badan; boohin iyo calaacal bay qaybtooda noqon halkaa." Suuradda Huud : Aayadaha 102-106.)

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَيَحذَرُكُمُ اللَّهُ نَفْسَهُ ﴾ [آل عمران : ٢٨]

152. " Alle naftiisuu idiinkaga digahayaa". Suuradda aali- Cimraan : Aayadda: 28.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ يَوْمَ يَفِرُّ الْمَرْءُ مِنْ أَخِيهِ وَأُمِّهِ وَأَبِيهِ وَصَاحِبَتِهِ وَبَيْنِهِ لِكُلِّ أَمْرٍ مِنْهُمْ يَوْمَئِذٍ شَأْنٌ يُغْنِيهِ ﴾ [عبس : ٣٤ - ٣٧]

153. " Maalinta uu qofku ka cararayo walaalki, iyo hooyadiis iyo aabbihiis, iyo afadiisa iyo ubadkiisa. Maalintaas qof waliba tiisaa cusleesay oo cid kale dan uma gali doono, tiisa oo keliya baa howl ugu filan iyo feker". Suuradda Cabbasa : Aayadaha 34 - 37

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ إِنَّ زَلْزَلَةَ السَّاعَةِ شَيْءٌ عَظِيمٌ يَوْمَ تَرَوُنَّهَا تُذْهِلُ كُلُّ مَرْضِعَةٍ عَمَّا أَرْضَعَتْ وَتَضَعُ كُلُّ ذَاتِ حَمَلٍ حَمْلَهَا وَتَرَى النَّاسَ سُكَارَى وَمَا هُمْ بِسُكَارَى وَلَكِنَّ عَذَابَ اللَّهِ شَدِيدٌ ﴾ [الحج : ١ - ٢]

154. " Dadoow! ka cabsada Rabbigiin. Dhab ahaantii gariirka saacadda (qiyaamo) waa wax weyn oo daran. Maalinta aad arkaysaan, hooyo kasta oo wax nuujinaysay waa halmaamaysaa wixii ay nuujinaysey, mid kasta oo uur lihina waa dhigaysaa uurkeeda, waxaadna (Muxammadow) arki doontaa dadkii oo sida wax sarkhaansan ah mana sarkhaansana, ee xukunka Rabbigaa baa wuxuu ahaan mid ku culus iyaga oo adag" Suuradda al-Xaj: Aayadaha 1 -2

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَلَمَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِ جِتَّانَ ﴾ [الرحمن : ٤٦]

155. " Qofkii hor istaagga Rabbigi ka baqaa jannooyin buu leeyahay". Suuradda ar-Raxmaan: Aayadda 46

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ يَتَسَاءَلُونَ قَالُوا إِنَّا كُنَّا قَبْلُ فِي أَهْلِنَا مُشْفِقِينَ
فَمَنَّ اللَّهُ عَلَيْنَا وَوَقَانَا عَذَابَ السَّمُومِ إِنَّا كُنَّا مِنْ قَبْلُ نَدْعُوهُ إِنَّهُ هُوَ الْبَرُّ
الرَّحِيمُ ﴾ [الطور : ٢٥ - ٢٨]

156. " Qaar iyaga ka mid ahna waxay ku soo dhowaan kuwo kale iyagoo wax is weydiinaya. Iyagoo leh: Runtii waayihii hore, markaynu ehelkayaga la joognay, Mar waliba kuwo cabsada baynu ahayn (yacni ka cabsada cadaabta Alle) . Laakiinse Alle baa galla-diisa na siiyey, oo naga dhowray cadaabta holaca badan. Dhab ahaantii horay baynu u baryi jirnay (Alle) intaan adduunka joognay . dhabtii Isagu Alle waa baarriga naxariista badan". Suuradda ad-Duur - aayadaha 25 - 28 .

والآيات في الباب كثيرة جداً معلومات والغرض الإشارة إلى بعضها وقد حصل .
وأما الأحاديث فكثيرة جداً فنذكر منها طرفاً وباللَّه التوفيق .

٣٩٦ - عن ابن مسعود رضي الله عنه قال : حدثنا رسول الله ﷺ وهو الصادق المصدوق : « إنَّ أَحَدَكُمْ يُجْمَعُ خَلْقُهُ فِي بَطْنِ أُمِّهِ أَرْبَعِينَ يَوْمًا نُطْفَةً ، ثُمَّ يَكُونُ عَلَقَةً مِثْلَ ذَلِكَ ، ثُمَّ يَكُونُ مُضْغَةً مِثْلَ ذَلِكَ ، ثُمَّ يُرْسَلُ الْمَلَكُ ، فَيَنْفُخُ فِيهِ الرُّوحَ ، وَيُؤَمَّرُ بِأَرْبَعِ كَلِمَاتٍ : بِكُتْبِ رِزْقِهِ وَأَجَلِهِ وَعَمَلِهِ وَشَقِيٍّ أَوْ سَعِيدٍ . فَوَالَّذِي لَا إِلَهَ غَيْرُهُ إِنَّ أَحَدَكُمْ لَيَعْمَلُ بِعَمَلِ أَهْلِ الْجَنَّةِ حَتَّى مَا يَكُونُ بَيْنَهُ وَبَيْنَهَا إِلَّا ذِرَاعٌ فَيَسْبِقُ عَلَيْهِ الْكِتَابُ ، فَيَعْمَلُ بِعَمَلِ أَهْلِ النَّارِ فَيَدْخُلُهَا ، وَإِنْ أَحَدَكُمْ لَيَعْمَلُ بِعَمَلِ أَهْلِ النَّارِ حَتَّى مَا يَكُونُ بَيْنَهُ وَبَيْنَهَا إِلَّا ذِرَاعٌ ، فَيَسْبِقُ عَلَيْهِ الْكِتَابُ فَيَعْمَلُ بِعَمَلِ أَهْلِ الْجَنَّةِ فَيَدْخُلُهَا » متفقٌ عليه .

396. Cabdullaah ibn Mascuud (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in : Nebigu (S.C.W.) oo runle la rumeysta ah uu yiri: " Qof waliba wuxuu ku ahaadaa dhibic biyo ah uurka hooyadi afartan beri, had-

dana xinjir oo kale buu ku ahaadaa afartan beri oo kale, haddana goosan hilib ah oo kale buu sii ahaadaa afartan beri oo kale, daba-deedna malag baa loo soo diraa nafta geliya, waxaana la faraa ma-laggaa afar waxyaalood inuu qoro; risiqiisa, ajashiisa, camal kiisa iyo hooge iyo liibaane kuu yahay. Marka Allaha aan ilaah kale oo xaq ah jirin baan ku dhaartaye waxaa dhacaysa in midkiin u dhaqmo sida ehlu jannaha oo markaas u jirsado jannada hal dhudhun, markaas baa wixii loo qoray, ka adkaadaan oo wuxuu billaabaa inuu u dhaqmo sida ehlu-naarka dabadeedna iyadii galaa. Dhinaca kale, midkiin baa wuxuu u dhaqmayaa sida ehlu naarka illaa uu naarta u jirsado in hal dhudhun oo kale ah. markaas baa wixii loo qoray ka adkaadaan, wuxuuna billaabaa inuu u dhaqmo sida ehlu jannaha dabadeedna iyadii galaa." (Bukhaari iyo Muslim)

٣٩٧- وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « يُؤْتَى بِجَهَنَّمَ يَوْمَئِذٍ لَهَا سَبْعُونَ أَلْفَ زِمَامٍ ، مَعَ كُلِّ زِمَامٍ سَبْعُونَ أَلْفَ مَلَكٍ يَجُرُّونَهَا » رواه مسلم .

397. Ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Maalinta qiyaamaha naarta Jahannama baa la keenayaa iyadoo leh toddobaatan kun oo xarig, xarig walbana waxaa haya oo jiidaya toddobaatan kun oo malag." (Muslim)

٣٩٨- وعن النعمان بن بشير ، رضي الله عنهما ، قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « إِنَّ أَهْوَنَ أَهْلِ النَّارِ عَذَابًا يَوْمَ الْقِيَامَةِ لَرَجُلٌ يَوْضَعُ فِي أَحْمَصِ قَدَمَيْهِ جَمْرَتَانِ يَغْلِي مِنْهُمَا دِمَاغُهُ . مَا يَرَى أَنَّ أَحَدًا أَشَدُّ مِنْهُ عَذَابًا ، وَأَنَّهُ لَأَهْوَنُهُمْ عَذَابًا » متفقٌ عليه .

398. Nucmaan ibn Bashiir (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: Cadaabta ugu fudud naarta dhexdeeda waxay ahaan doontaa in laba dhuxulood oo dab ah la dhigi doono labada rays ma gaadho ee qofka dambiihaha ah markaas bay maaskaxdiisu karkari. wuxuu isu arki doonaa inuu yahay qofka ugu cadaab weyn naarta dhexdeeda isagaana u cadaab fudud." (Bukhaari iyo Muslim)

٣٩٩- وعن سمرة بن جندب رضي الله عنه ، أن نبي الله ﷺ قال : « مِنْهُمْ مَنْ تَأْخُذُهُ النَّارُ إِلَى كَعْبِيهِ ، وَمِنْهُمْ مَنْ تَأْخُذُهُ إِلَى رُكْبَتَيْهِ ، وَمِنْهُمْ مَنْ تَأْخُذُهُ إِلَى حُجْرَتِهِ ، وَمِنْهُمْ مَنْ تَأْخُذُهُ إِلَى تَرْقُوتِهِ » رواه مسلم .

« الْحُجْرَةُ » : مَعْقِدُ الْإِزَارِ تَحْتَ السُّرَّةِ وَ « التَّرْقُوتَةُ » بفتح التاء وضم القاف : هِيَ الْعَظْمُ الَّذِي عِنْدَ ثَغْرَةِ النُّحْرِ ، وَلِلْإِنْسَانِ تَرْقُوتَانِ فِي جَانِبِي النُّحْرِ .

399. Samurah ibn Jundub (A.K.R.) wuxuu yiri : Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Dadka qaarkood ee naarta muteystay waxay naartu u joogeysaa ilaa iyo anqawgooda, qaar ilaa iyo lawyadooda , qaar illaa iyo guntimadooda qaarna illaa iyo kalxamahooda (waana si waafaqsan falalka iyo dambiyadoodii). ' (Muslim)

٤٠٠ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما أن رسول الله ﷺ قال : « يَقُومُ النَّاسُ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ حَتَّى يَغِيبَ أَحَدُهُمْ فِي رَشْحِهِ إِلَى أَنْصَافِ أُذُنَيْهِ » متفقٌ عليه .

« الرَّشْحُ » الْعَرَقُ .

400. Ibni Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: " Maalinta qiyaamaha goorta ay dadku istaagi doonaan Alla weyne horti, qaarkood waxaa qarqin doona dhididkooda oo qarin illaa iyo dhegahooda.' (Bukhaari iyo Muslim)

٤٠١ - وعن أنس رضي الله عنه قال : خطبنا رسول الله ﷺ خطبة ما سمعت مثلها قط ، فقال : « لَوْ تَعْلَمُونَ مَا أَعْلَمُ لَضَحِكْتُمْ قَلِيلًا وَلَبَكَيْتُمْ كَثِيرًا » فَغَطَّى أَصْحَابُ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ وَجُوهَهُمْ وَلَهُمْ خَنِينٌ . متفقٌ عليه .

وفي رواية : بَلَغَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ عَنْ أَصْحَابِهِ شَيْءٌ فَخَطَبَ ، فَقَالَ : « عُرِضَتْ عَلَيَّ الْجَنَّةُ وَالنَّارُ ، فَلَمْ أَرَ كَالْيَوْمِ فِي الْخَيْرِ وَالشَّرِّ ، وَلَوْ تَعْلَمُونَ مَا أَعْلَمُ لَضَحِكْتُمْ قَلِيلًا وَلَبَكَيْتُمْ كَثِيرًا » فَمَا أَتَى عَلَى أَصْحَابِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ يَوْمٌ أَشَدَّ مِنْهُ ، غَطُّوا رُؤُوسَهُمْ وَلَهُمْ خَنِينٌ .

« الْخَنِينُ » بِالخَاءِ الْمَعْجَمَةُ : هُوَ الْبُكَاءُ مَعَ غُنَّةٍ وَانْتِشَاقِ الصَّوْتِ مِنَ الْأَنْفِ .

401. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigaa (S.C.W.) wuxuu noo jee-diyey khudbo aanan weligey iyadoo kale maqal, khudbaddaas oo uu ku yiri: Haddaad ogaan lahaydeen waxaan ogahay, in yar baad qosli lahaydeen, in badanna waa aad ooyi lahaydeen.' Markaasaa

intii joogtay meeshaa ee khudbadda dhageysaneysay wada qara-
cantay oo wada ooyday.' (Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale baa waxay leedahay: Warbixinno la xiriira asxaabta
baa nabiga soo gaadhay. Markaaasuu khudbeeyey oo yiri: Jannada
iyo Naartaa la i tusay, marna ma arag illaa maantadan la joogo wax
la mid ah (labadaa) dheefta iyo dhibaataada ay kala leeyihiin. Had-
dii aad ogaan laheydeen waxa aan ogahay, in yar baad qosli laha-
deen in badanna waad ooyi lahaydeen. taasi waxay aheyd maalin-
tii ugu naxdin iyo qarracan badneyd asxaabtii nabiga (S.C.W.)
waxay daboolen wajiyadoodii billaabeenna inay kor u ooyaan.

٤٠٢ - وعن المقداد رضي الله عنه قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « تُدْنِي
الشَّمْسُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ مِنَ الْخَلْقِ حَتَّى تَكُونَ مِنْهُمْ كَمِقْدَارِ مِيلٍ » قال سُلَيْمُ بْنُ عَامِرِ
الرَّائِي عَنِ الْمِقْدَادِ : فَوَاللَّهِ مَا أُدْرِي مَا يَعْنِي بِالْمِيلِ ، أَمْسَافَةَ الْأَرْضِ أَمْ الْمِيلَ
الَّذِي تُكْتَحَلُ بِهِ الْعَيْنُ ، قال : « فَيَكُونُ النَّاسُ عَلَى قَدْرِ أَعْمَالِهِمْ فِي الْعَرَقِ ،
فَمِنْهُمْ مَنْ يَكُونُ إِلَى كَعْبِيهِ ، وَمِنْهُمْ مَنْ يَكُونُ إِلَى رِكْبَتَيْهِ ، وَمِنْهُمْ مَنْ يَكُونُ إِلَى
حَقْوَيْهِ ، وَمِنْهُمْ مَنْ يُلْجِمُهُ الْعَرَقُ الْجَامَأً » . قال : وَأَشَارَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ بِيَدِهِ
إِلَى فِيهِ . رواه مسلم .

402. Miqdaad (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga
(S.C.W.) oo leh: Maalinta qiyaamaha qorraxda waxay noqon mid
ku dhow dadka, sida ay u jirto oo keliya hal mayl. Sulaym ibn Caa-
mir oo ka soo wariyey xadiiskan Miqdaad wuxuu yiri: Alle baan ku
dhaaran ma garanayo waxaa loola jeeday maylka - ma mayl baa
loola jeedaa mise qoriga lagu indha kuusho ee isna mayl la yiraah-
do. Dadkana waxay u dhididi (hadba siday camalladoodu kala
ahaayeen. Qaarkood dhididkoodu wuxuu u joogsanayaa illaa an-
qawiyad, qaar kalena illaa iyo lowyahooda, qaarna illaa iyo gunti-
madooda, qaarna dhidhidku afkuu u galayaa. Nabigu (S.C.W.)
wuxuu tilmaamay afkiisa isagoo arrintaa tusaaleynaya." (Muslim)

٤٠٣ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه ، أن رسول الله ﷺ قال : « يَغْرَقُ النَّاسُ
يَوْمَ الْقِيَامَةِ حَتَّى يَذْهَبَ عَرْقُهُمْ فِي الْأَرْضِ سَبْعِينَ ذِرَاعاً ، وَيُلْجِمُهُمْ حَتَّى يَبْلُغَ
أَذَانَهُمْ » متفقٌ عليه .

ومعنى « يَذْهَبُ فِي الْأَرْضِ » : يَنْزِلُ وَيَغْوُصُ .

403. Abu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wu-
xuu yiri: Dadku aad iyo aad bay u dhididi doonaan maalinta qiyaa-

maha, heer dhulku la qoyi doono dhididkooda, wuxuuna hoos u soo aadi dhididkoodu dhulka illaa iyo toddobaatan dhudhun, dadkana (qaar) waxaa afka u galaya dhididkoodii kolkuu dhidhidkoodaa soo gaaro ilaa iyo dhegahooda." (Bukhaari iyo Muslim)

٤.٤ - وعنه قال : كُنَّا مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ إِذْ سَمِعَ وَجِبَةً فَقَالَ : « هَلْ تَذَرُونَ مَا هَذَا » ؟ قُلْنَا : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ . قَالَ : « هَذَا حَجَرٌ رُمِيَ بِهِ فِي النَّارِ مُنْذُ سَبْعِينَ خَرِيفًا ، فَهُوَ يَهْوِي فِي النَّارِ حَتَّى انْتَهَى إِلَى قَعْرِهَا فَسَمِعْتُمْ وَجِبَتَهَا » رواه مسلم .

404. Abuu Hureyrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Mar waxaynu la joognay nebiga(S.C.W.) kolkaynu maqallay jugta wax meel ka dhacay. Wuxuu ina weydiiyey: ' Ma garaneysaan waxa ay yihiin waxaas? Waxaynu niri: Alle iyo Rasuulkiisaa og. Wuxuu yiri: Waxaasu waa dhagax lagu tuuray Jahannama toddabaatan sano ka hor oo ilaa waqtigaas sii socdey , oo haatan salkeedii gaaray; waxaad haatan maqasheen jugtii sal gaaridda.' (Muslim)

٤.٥ - وعن عدي بن حاتم رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَا مِنْكُمْ مِنْ أَحَدٍ إِلَّا سَيَكَلَّمُهُ رَبُّهُ لَيْسَ بَيْنَهُ وَبَيْنَهُ تَرْجُمَانٌ ، فَيَنْظُرُ أَيَمَنَ مِنْهُ فَلَا يَرَى إِلَّا مَا قَدَّمَ ، وَيَنْظُرُ أَشْأَمَ مِنْهُ فَلَا يَرَى إِلَّا مَا قَدَّمَ ، وَيَنْظُرُ بَيْنَ يَدَيْهِ فَلَا يَرَى إِلَّا النَّارَ تَلْقَاءَ وَجْهِهِ ، فَاتَّقُوا النَّارَ وَلَوْ بِشِقِّ تَمْرَةٍ » متفق عليه .

405 Xadiiskan horay baynu u soo sharaxnay eeg xadiiska tiradiisu tahay 139, cutubka 13.

٤.٦ - وعن أبي ذر رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إِنِّي أَرَى مَا لَا تَرَوْنَ أَطَّتِ السَّمَاءُ وَحَقٌّ لَهَا أَنْ تَنْطُ ، مَا فِيهَا مَوْضِعُ أَرْبَعِ أَصَابِعٍ إِلَّا وَمَلَكٌ وَاصِعٌ جَبْهَتَهُ سَاجِدًا لِلَّهِ تَعَالَى . وَاللَّهُ لَوْ تَعَلَّمُونَ مَا أَعْلَمُ ، لَضَحِكْتُمْ قَلِيلًا وَلَبَكَيْتُمْ كَثِيرًا ، وَمَا تَلَذَّذْتُمْ بِالنِّسَاءِ عَلَى الْفُرُشِ ، وَلَخَرَجْتُمْ إِلَى الصُّعْدَاتِ تَجَارُونَ إِلَى اللَّهِ تَعَالَى » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

و« أَطَّتِ » بفتح الهمزة وتشديد الطاء و« تَنْطُ » بفتح التاء وبعدها همزة مكسورة ، وَالْأَطِيطُ : صوتُ الرَّحْلِ وَالْقَتْبُ وَشِبْهَيْهِمَا ، وَمَعْنَاهُ : أَنْ كَثْرَةَ مَنْ فِي السَّمَاءِ مِنَ الْمَلَائِكَةِ الْعَابِدِينَ قَدْ أَثْقَلَتْهَا حَتَّى أَطَّتْ . وَ« الصُّعْدَاتِ » بضم الصاد

والعين : الطُّرُقَات : ومعنى : تَجَارُونَ : تَسْتَعِيثُونَ .

406. Abuu Darr (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: waxaan arkaa wax aydaan arkayn. Waxaa cirka ka yeeraya bulaan (wax kalena ma ahee waa sababta culeyska badan ee mala'aa'igta sujuudsan) xaq bayna u leedahay inay sidaa yeesho. Ma jirto meel afar farood geli karto uusan joogin malag Alle u sujuudsan . Alle baan ku dhaaran, waxa aan ogahay haddii aad ogaan lahaydeen, in yar baad qosli lahaydeen in badanna waa ooyi lahaydeen; ugama aydaan raaxeysteenna xaasaskiinna sariiraha. waxaadna u bixi laheydeen waddooyinka iyo baadiyaha idinkoo raadinaya maganta Alle. (Tirmidi) baa weriyey oo yiri; waa xadiis xasan ah.

٤٠٧ - وعن أبي برزة - براء ثم زاي - نَضَلَةَ بن عبيد الأسلمي ، رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لَا تَزُولُ قَدَمًا عَبْدٌ يَوْمَ الْقِيَامَةِ حَتَّى يُسْأَلَ عَنْ عُمُرِهِ فِيمَ أَفْنَاهُ وَعَنْ عِلْمِهِ فِيمَ فَعَلَ فِيهِ ، وَعَنْ مَالِهِ مِنْ أَيْنَ أَكْتَسَبَهُ ، وَفِيمَ أَنْفَقَهُ ، وَعَنْ جِسْمِهِ فِيمَ أَبْلَاهُ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

407. Abuu Barzah Nazla ibn Cubayd- ul -Aslami (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: addoonku waa taagnaanayaa oo dhinacna u dhaqaaqi maayo maalinta qiyaamaha ilaa la su'aalo da'diisii, sida uu ku dhammeeyey; iyo aqoontiisii iyo sida uu u isticmaalay; iyo maalkiisii meesha uu ka tabcay iyo waxa uu ku bixiyey, iyo xooggiisii iyo halka uu ku dhammeeyey.' (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis xasan saxiix ah.

٤٠٨ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قرأ رسول الله ﷺ : ﴿ يَوْمَئِذٍ تُحَدِّثُ أَخْبَارَهَا ﴾ [الزلزلة - ٤] ثُمَّ قَالَ : « أَتَدْرُونَ مَا أَخْبَارَهَا » ؟ قَالُوا : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ . قَالَ : « فَإِنَّ أَخْبَارَهَا أَنْ تَشْهَدَ عَلَى كُلِّ عَبْدٍ أَوْ أَمَةٍ بِمَا عَمِلَ عَلَى ظَهْرِهَا تَقُولُ : عَمِلْتَ كَذَا وَكَذَا فِي يَوْمٍ كَذَا وَكَذَا فَهَذِهِ أَخْبَارُهَا » رواه الترمذي وقال : حديث حسن صحيح .

408. Abuu Hurayrah (A.K.R.) waxaa laga soo xigtay in Nebigu (S.C.W.) akhriyey aayaddan : 'Maalintaa waxay (ciiddu) ka warami doontaa wararkeeda ' Suuradda al-Zalzalaha: Aayadda 4; wuxuu ina weydiiyey nabigu (S.C.W.) : Ma garanaysaan wararkeeda?.' Asxaabtiisii waxay yiraahdeen : ' Alle iyo Rasuulkiisaa (S.C.W.) innaga og.' Wuxuu yiri: wararkeedu waxaa weeye inay ku marag furi doonto qof walbaa (lab ama dheddig) wixii uu ku falay dusheeda (kheyir iyo shar) Waxay oran doontaa sidaas iyo sidaa-

saad fashay, maalintaas iyo maalintaa. Warkeedu kaa buu noqon doonaa.' (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah, saxiix ah,

Sh. al-Baani wuxuu yiri xadiiskan waa daciif, aan xujo ahaan loo soo qaadan kareyn.

٤٠٩ - وعن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « كَيْفَ أَنْعَمُ وَصَاحِبُ الْقَرْنِ قَدْ التَّقَمَ الْقَرْنَ ، وَأَسْتَمَعَ الْإِذْنَ مَتَى يُؤْمَرُ بِالنَّفْحِ فَيَنْفُخُ » فَكَانَ ذَلِكَ ثَقْلَ عَلَى أَصْحَابِ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فَقَالَ لَهُمْ : « قُولُوا : حَسْبُنَا اللَّهُ وَنِعْمَ الْوَكِيلُ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

(الْقَرْنَ) هُوَ الصُّورُ الَّذِي قَالَ اللَّهُ تَعَالَى ﴿ وَنُفِخَ فِي الصُّورِ ﴾ كَذَا فَسَرَهُ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ .

409. Abuu Saciid Al-Khudri (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: (sidee baan u damaashoodaa oo farxad u dareemaa marba hadduu Israafiil (malagga u xilsaaran yeerinta buunka maalinta qiyaamo) uu dibnaha (bishimaha) saaray buunka isagoo sugaya inuu maqlo amarka inuu afuufo ah buunka. Arrintaasi aad bay ugu adkaatay asxaabtiisii, sidaa awgeed wuxuu u sheegay inay kaalmeystaan qowlka ah ' Xasbunal - Laah wa nicmal wakiil ' (Allaa nagu filan oo wakiil ugu wanaagsan). (Tirmidi) Wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah,

٤١٠ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ خَافَ أَذْلَجَ ، وَمَنْ أَذْلَجَ بَلَغَ الْمَنْزِلَ . أَلَا إِنَّ سِلْعَةَ اللَّهِ غَالِيَةٌ ، أَلَا إِنَّ سِلْعَةَ اللَّهِ الْجَنَّةُ » رواه الترمذي وقال : حديث حسن .

« وَأَذْلَجَ » بِإِسْكَانِ الدَّالِ وَمَعْنَاهُ سَارَ مِنْ أَوَّلِ اللَّيْلِ . وَالْمُرَادُ التَّشْمِيرُ فِي الطَّاعَةِ وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

410. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Qofkii ka cabsanaya (cadow), wuxuu guureeyaa habeenka qaybtiisa hore; qofkii horey u guureeyaana goobtuu rabey buu gaa-raa. War hooy ogaada badeecada Alle waa qaali, war hooy ogaada badeecada Alle waa janno. (macnaha waa si wanaagsan u camal fasha oo wixii la idin faray ku fartooma, wixii la idinka reebayna ka hara oo ka reebtooma, oo samaha u dheereeya, xumahana ka dhowrsada). (Tirmidi) wuxuuna yiri waa xadiis xasan ah.

٤١١ - وعن عائشة رضي الله عنها قالت : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « يُحْشَرُ النَّاسُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ حُفَاةً عُرَاةً غُرْلًا » قُلْتُ : يا رسول الله الرَّجَالُ وَالنِّسَاءُ جَمِيعًا يَنْظُرُ بَعْضُهُمْ إِلَى بَعْضٍ ؟! قال : « يَا عَائِشَةُ الْأَمْرُ أَشَدُّ مِنْ أَنْ يَهْمَهُمْ ذَلِكَ » .
 وفي رواية : « الْأَمْرُ أَهْمٌ مِنْ أَنْ يَنْظُرَ بَعْضُهُمْ إِلَى بَعْضٍ » متفقٌ عليه .
 « غُرْلًا » بِضَمِّ الْغَيْنِ الْمَعْجَمَةِ ، أَي : غَيْرَ مَخْتُونِينَ .

411. Caa' isha (A.K.R.) waxay tiri: waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh : ' Maalinta qiyaamo waxaa dadka la soo kulmin oo la isu keeni iyagoo cagacad oo qaawan oo buuryo qab ah. Waxaan iri: Rasuul Alloow (S.C.W.) Ma ragga iyo dumarka oo dhan baa meel laysu keeni iyagoo midba kan kale fiiranayo? Wu - xuu yiri: Caa'isha, arrintu maalintaa waxay ahaan mid aad u culus oo dadka argagax iyo amkaag ku riddo, ama ma aha mid fudud uu ruux qof kale ku eegi karo.

Werin kale baa waxay leedahay : Xaaladdu maalintaa waxay ahaan mid adag oo khatar ah oo qofnana dan uma geli doono oo ma fiirin doono qof kale.

Fiiro gaar ah :

Ka cabsashada awoodda iyo weynida Alle waa garab iyo gargaar si uu qofku ugu noolaado nolol suuban kagana nabadgalo xumaha iyo dunuubta.

٥١ - باب الرجاء

CUTUBKA 51 RAJEYNTA IYO IN SAMAAAN LAGA FISHO ALLE

قال الله تعالى :
 Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا عَلَىٰ أَنفُسِهِمْ لَا تَقْنَطُوا مِن رَّحْمَةِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا إِنَّهُ هُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ ﴾ [الزمر : ٥٣]

157. " Dheh : addoommadayda naftooda ku xadgudbayoow! Ha ka quusannina naxaariista Alle, Alle dembiyada oo dhan waa dhaafaaye. Runtii Alle waa dembi dhaafaha Naxariista badan.' Suuradda Al.-Zumar: Aayadda 54

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَهَلْ نَجَازِي إِلَّا الْكَافِرُ ﴾ [سبأ : ١٧]

158. " Weligaya ma ciqaabno waxaan aheyn aabaal ka dhacayaa-sha inkira wanaagga iyo samaha (yacni waxaan aheyn kuwaa aan u hoggaansamin awaamirtayada ee hareer mara) ." ee aan tixgelin galladda iyo abaalka aan u gallay.

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ إِنَّا قَدْ أُوحِيَ إِلَيْنَا أَنَّ الْعَذَابَ عَلَىٰ مَنْ كَذَّبَ وَتَوَلَّىٰ ﴾ [طه : ٤٨]

159. " Waxaa naloo waxyooday in cadaabta uu mudan, leeyahay-na kii beeniya (xaq) oo ka jeensada (yacni aan ku camal falin).'
Suuradda Daaha: Aayadda 48

Wuxuu kaloo yiri kor ahaaye:

وقال تعالى :

﴿ وَرَحْمَتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ ﴾ [الأعراف : ١٥٦] .

160. " Naxariistayduna waxay saameyn oo ay gaari wax iyo cid walba'. Suuradda al-Acraaf: Aayadda 156

٤١٢ - وعن عبادة بن الصاميت رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَنْ شَهِدَ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ ، وَأَنَّ عِيسَى عَبْدُ اللَّهِ وَرَسُولُهُ وَكَلِمَتُهُ أَلْقَاهَا إِلَىٰ مَرْيَمَ وَرُوحٌ مِنْهُ ، وَأَنَّ الْجَنَّةَ حَقٌّ ، وَالنَّارَ حَقٌّ ، أَدْخَلَهُ اللَّهُ الْجَنَّةَ عَلَىٰ مَا كَانَ مِنَ الْعَمَلِ » متفقٌ عليه .

وفي رواية لمسلم : « مَنْ شَهِدَ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ ، حَرَّمَ اللَّهُ عَلَيْهِ النَّارَ » .

412. Cubaada ibn Saamit (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri : Qofkii qira ilaah xaq ah inuusan jirin aan aheyn Alle, midka ah, shariig la'aan. iyo inuu Muxammad (S.C.W.) yahay addoonkii Alle iyo Rasuulkiisii , oo qira in Ciisana yahay addoonkii Alle iyo Rasuulkiisii, iyo kalimaddiisii uu gaarsiiyey Maryam iyo ruux isaga ka timid, iyo in jannadu xaq tahay, naartuna xaq tahay, Alla wuxuu galin doonaa jannada si kastaba camalkiisu ha ahaadee.'
(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale oo Muslim ku taal baa waxay leedahay : " Qofkii qira ilaah xaq ah aan Alle ahayni inuusan jirin iyo in Muxammad

(S.C.W.) Rasuulkii Alle yahay, Alle waa ka xaaraameeyey naarta korkiisa.'

٤١٣ - وعن أبي ذر ، رضي الله عنه ، قال : قال النبي ﷺ : « يقول الله عز وجل : مَنْ جَاءَ بِالْحَسَنَةِ فَلَهُ عَشْرُ أَمْثَالِهَا أَوْ أَزِيدَ ، وَمَنْ جَاءَ بِالسَّيِّئَةِ فَجَزَاءُ سَيِّئَةٍ مِثْلُهَا أَوْ أَغْفِرُ . وَمَنْ تَقَرَّبَ مِنِّي شِبْرًا تَقَرَّبْتُ مِنْهُ ذِرَاعًا ، وَمَنْ تَقَرَّبَ مِنِّي ذِرَاعًا تَقَرَّبْتُ مِنْهُ بَاعًا ، وَمَنْ أَتَانِي يَمْشِي أَتَيْتُهُ هَرَوَلَةً ، وَمَنْ لَقِينِي بِقُرَابِ الْأَرْضِ حَطِيبَةً لَا يُشْرِكُ بِي شَيْئًا ، لَقِيتُهُ بِمِثْلِهَا مَغْفِرَةً » رواه مسلم .

معنى الحديث : « مَنْ تَقَرَّبَ » إِلَيَّ بِطَاعَتِي « تَقَرَّبْتُ » إِلَيْهِ بِرَحْمَتِي وَإِنْ زَادَ زِدْتُ « فَإِنْ أَتَانِي يَمْشِي » وَأَسْرَعَ فِي طَاعَتِي « أَتَيْتُهُ هَرَوَلَةً » أَي صَبَبْتُ عَلَيْهِ الرَّحْمَةَ وَسَبَقْتُهُ بِهَا وَلَمْ أُحَوِّجْهُ إِلَى الْمَشْيِ الْكَثِيرِ فِي الْوُضُوعِ إِلَى الْمَقْصُودِ « وَقُرَابُ الْأَرْضِ » بضم القاف ويقال بكسرهما والضم أصح وأشهر ومعناه : مَا يُقَارِبُ مِلًّا ، وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

413. Abuu Darr (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Alle kor ahaaye wuxuu leeyahay: Qofkii hal arrin oo wanaag ah la yimaada waxaa lagu abaal marin toban laabkeed ama ka badan, qofkii hal xumaan falana dambigaas keliyaa laga goyn oo loo ciq-qabi doonaa, waana uu cafin karaa Alle; qofkii taako (masaafu far iyo suul la fidyey le'eg) ii soo dhawaadana waxaan u soo dhowaanayaa dhudhun, kii dhudhun ii soo dhawaadana waxaan u soo dhowaanayaa dhererka laba dhudhumood, qofkii ii yimaadana isagoo soconaya waxaan ugu tagayaa orod, qofkii ila kulmana isagoo dhulka muggi oo dembi ah xambaarsan, hayeeshee aan waxba ii shariig yeelin wuxuu iga helayaa in le'eg(dhulka muggi) oo dembi dhaaf ah." (Muslim)

٤١٤ - وعن جابر ، رضي الله عنه قال : جاء أعرابي إلى النبي ﷺ فقال : يا رسول الله ما الموجبتان ؟ قال : « مَنْ مَاتَ لَا يُشْرِكُ بِاللَّهِ شَيْئًا دَخَلَ الْجَنَّةَ ، وَمَنْ مَاتَ يُشْرِكُ بِهِ شَيْئًا دَخَلَ النَّارَ » رواه مسلم .

414. Jaabir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin reer miyi ah baa u yimid nebiga (S.C.W.) oo ku yiri rasuul Alloow (S.C.W.) waa maxay labada waxyaalood ee midna janno lagu mudeysto midna naar? Wuxuu ku jawaabay nabigu (S.C.W.) : ' Qofkii dhinta isagoo aan Alle wax u shariig yeelayn jannada ayuu geli doonaa, qofkii dhintana isagoo wax u shariig yeelaya Alle naarta buu geli doonaa' (mancha waxaa

weeye towiidka jannada ayaa lagu galaa, shirkigana naar).
(Muslim)

٤١٥ - وعن أنس رضي الله عنه ، أن النبي ﷺ ، ومعاذ رديفه على الرَّحْل قال : « يَا مُعَاذُ » قال : لَبَّيْكَ يَا رَسُولَ اللَّهِ وَسَعْدَيْكَ ، قال : « يَا مُعَاذُ » قال : لَبَّيْكَ يَا رَسُولَ اللَّهِ وَسَعْدَيْكَ ، ثلاثاً ، قال : « مَا مِنْ عَبْدٍ يَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ وَرَسُولُهُ صِدْقًا مِنْ قَلْبِهِ إِلَّا حَرَمَهُ اللَّهُ عَلَى النَّارِ » قال : يا رسول الله أفلا أُخْبِرُ بِهَا النَّاسَ فَيَسْتَبْشِرُوا ؟ قال : « إِذَا يَتَكَلَّمُوا » فأخبر بها مُعَاذٌ عِنْدَ مَوْتِهِ تَأْتِمًا . متفقٌ عليه .
وقوله « تَأْتِمًا » : أي خوفًا مِنَ الإِثْمِ فِي كِتْمِ هَذَا الْعِلْمِ .

415. Anas (A..K.R.) waxaa laga soo xigtay in Mucaad oo rakuub la saaran nabiga (S.C.W.) uu yiri nabigu . : Mucaadow? Wuxuu yiri Mucaad oo uu ku jawaabay : waa i kan, rasuul Alloow, Alle nabad iyo naxariis ha ku siiyee iyo deeq tiro iyo taran badan.' Seddex jeer buu rasuulku sidaa yiri Mucaadna isla jawaabtaa ku celcelinayey, markaasuu nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: ' Addoon kasta oo qira la caabude (yacni loo hoggaansame) xaq ah aan Alle ahayni inuusan jirin iyo in Muxammad yahay addoonkiisii iyo rasuulkiisiiba, oo sidaa qira si kal iyo laab ah, Alle wuxuu ka xaaraameeyey naarta korkiisa. Mucaad (A.K.R.) wuxuu yiri: rasuul Alloow, Ma ka sheegaa arrintan dadka dhexdiisa si ay ugu farxaan ? . Wuxuu yiri: ' May. Waayo waa isku hallaynayaan (oo ma gudan doonaan salaadaha iyo waajibaadka kale ee diiniga ah) Mucaad wuxuu daaha ka qaaday arrintaa oo uu sheegay oo keliya markuu dhimanayey isagoo ka baqayey inuu dambi ka soo gaaro inuu qariyo arrin uu og yahay, oo uu cilmigeeda hayey.'. (Bukhaari iyo Muslim)

٤١٦ - وعن أبي هريرة - أو أبي سعيد الخدري رضي الله عنهما ، شك الراوي ، ولا يضرُ الشكُّ في عينِ الصَّحَابِيِّ ، لِأَنَّهْمُ كُلُّهُمُ عُدُولٌ - قال : لَمَّا كَانَ غَزْوَةُ تَبُوكَ ، أَصَابَ النَّاسَ مَجَاعَةٌ ، فَقَالُوا : يَا رَسُولَ اللَّهِ لَوْ أَذِنْتَ لَنَا فَفَنَحَرْنَا نَوَاضِحَنَا فَأَكَلْنَا وَأَدَّهْنَا ؟ فقال رسول الله ﷺ : « اِفْعَلُوا » فجاء عُمرُ رضي الله عنه فقال : يا رسول الله إن فعلت قل الظَّهْرُ ، وَلَكِنْ ادْعُهُمْ بِفَضْلِ أَرْوَادِهِمْ ، ثُمَّ ادْعُ اللَّهُ لَهُمْ عَلَيْهَا بِالْبَرَكَاتِ ، لَعَلَّ اللَّهُ أَنْ يَجْعَلَ فِي ذَلِكَ الْبَرَكَاتِ . فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « نَعَمْ » فَدَعَا بِنَطْعِ فَبَسَطَهُ ، ثُمَّ دَعَا بِفَضْلِ أَرْوَادِهِمْ ،

فَجَعَلَ الرَّجُلُ يَجِيءُ بِكَفِّ ذُرَّةٍ وَيَجِيءُ الْآخَرُ بِكَفِّ تَمْرٍ وَيَجِيءُ الْآخَرُ بِكِسْرَةٍ حَتَّى
 اجْتَمَعَ عَلَى النَّطْعِ مِنْ ذَلِكَ شَيْءٌ يَسِيرٌ ، فَدَعَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ بِالْبَرَكَةِ ثُمَّ قَالَ :
 « خُذُوا فِي أَوْعِيَّتِكُمْ » فَأَخَذُوا فِي أَوْعِيَّتِهِمْ حَتَّى مَا تَرَكَوا فِي الْعَسْكَرِ وَعَاءٌ إِلَّا مَلَأُوهُ
 وَأَكَلُوا حَتَّى شَبِعُوا وَفَضَلَ فَضْلُهُ فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ
 وَأَنِّي رَسُولُ اللَّهِ ، لَا يَلْقَى اللَّهُ بِهِمَا عَبْدٌ غَيْرَ شَاكٍّ فَيُحْجَبَ عَنِ الْجَنَّةِ » رواه
 مسلم .

416. Abuu Hurayrah (A.K.R.) ama Abuu Saciid Al-Khudri (A.K.R.) (Weriyaaha xadiiska bayan u kala caddeyn labadaa saxaabi kuu ahaa kan xadiiska uu ka soo weriyey.)

Imaam Nawawi wuxuu heystaa inay arrintaa ayan saameyneyn sugnaanta xadiiska waayo labada ninba waa caddaalad kalsooni ah oo aamin ah) waxaa laga soo xigtay in maalintii duullaankii Tabuuk ay muslimiintu dhibaato ku sugnaadeen gaajo awgeed (waayo waxaa ka yaraaday saadkii) Waxayna yiraahdeen : Rasuul Alloow (S.C.W.). Haddii aad noo fasaxi laheyd, waxaan qalan laheyn geelayaga gaadiidka inoo ah. hilibkoodana waan cuni laheyn kana faa'idysan laheyn dihintooda. ' Rasuulkii Alle wuu fasaxay inay sidaa yeelaan. Cumar baa inta nebiga u yimid yiri: Rasuul Alloow haddii aad u fasaxdo, waxaa innaga yaraanaya xoolaha aan gaadiid ahaanta ugu soo tala galnay. ee taa beddelkeed waxaad fartaa inay keenaan waxa sahaydii uga haray oo markaas codso oo uga dalab Alle barako iyo kheyr; Alle suu u barakeeyo saadka iyo raashinka haray. Rasuulkii Alle (S.C.W.) wuu ka oggolaaday oo u diray inay keenaan dirintiisii oo fidiyey dabadeedna wuxuu faray dadka inay keenaan wixii saad haray. Markaa bay billaabeen inay keenaan. mid wuxuu keenay sacab sareen ah. mid kalena sacab timir ah. mid seddexaad wuxuu keenay jab rooti ah. Sidaa baa xoogaa raashin ah dirintii laysugu soo ururiyey. nebiguna (S.C.W.) baraka buu ugu duceeyey . Dabadeedna wuxuu yiri: xeerooyinkiinna u kala qaata. Qof kasta wuxuu ka buuxsaday xeeradiisii raaashin, mana jirin xeerro qura oo laga tagay iyadoo maran oo xerada tiil. Dhammaantood way cuneen illaa ay ka dhergeen, markaas baa haddana wax u soo hareen. Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Waxaan qirayaa ilaah xaq ah aan Alle ahayn inuusan jirin iyo inaan anigu Rasuulkii Alle ahay. Ma jiri doono addoon Alle oo labadaas shahaado la yimid, oo ay daacad iyo dhab ka tahay, oo laga celin doono jannada.'

(Mulsim)

٤١٧ - وعن عِثْبَانَ بن مالك رضي الله عنه وهو مِمَّنْ شَهِدَ بَدْرًا قَالَ : كُنْتُ أُصَلِّي لِقَوْمِي بَنِي سَالِمٍ ، وَكَانَ يَحُولُ بَيْنِي وَبَيْنَهُمْ وَإِذَا جَاءَتِ الْأَمْطَارُ ، فَيَشُقُّ عَلَيَّ اجْتِيَازُهُ^(١) قَبْلَ مَسْجِدِهِمْ ، فَجِئْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ فَقُلْتُ لَهُ : إِنِّي أَنْكَرْتُ بَصْرِي وَإِنَّ الْوَادِي الَّذِي بَيْنِي وَبَيْنَ قَوْمِي يَسِيلُ إِذَا جَاءَتِ الْأَمْطَارُ فَيَشُقُّ عَلَيَّ اجْتِيَازُهُ فَوَدِدْتُ أَنَّكَ تَأْتِي فَتُصَلِّيَ فِي بَيْتِي مَكَانًا أَتَّخِذُهُ مُصَلًى ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « سَأَفْعَلُ » فَعَدَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ وَأَبُو بَكْرٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ بَعْدَ مَا اشْتَدَّ النَّهَارُ ، وَاسْتَأْذَنَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ فَأَذِنَتْ لَهُ ، فَلَمْ يَجْلِسْ حَتَّى قَالَ : « أَيْنَ تُحِبُّ أَنْ أُصَلِّيَ مِنْ بَيْتِكَ ؟ » فَأَشْرَفْتُ لَهُ إِلَى الْمَكَانِ الَّذِي أَحَبُّ أَنْ يُصَلِّيَ فِيهِ ، فَقَامَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ فَكَبَّرَ وَصَفَّفْنَا وَرَاءَهُ فَصَلَّى رَكْعَتَيْنِ ثُمَّ سَلَّمَ وَسَلَّمْنَا حِينَ سَلَّمَ فَحَبَسْتُهُ عَلَى خَزِيرَةَ تُصْنَعُ لَهُ ، فَسَمِعَ أَهْلَ الدَّارِ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ فِي بَيْتِي فَثَابَ رِجَالٌ مِنْهُمْ حَتَّى كَثُرَ الرَّجَالُ فِي الْبَيْتِ ، فَقَالَ رَجُلٌ : مَا فَعَلَ مَالِكُ لَا أَرَاهُ ! فَقَالَ رَجُلٌ : ذَلِكَ مُنَافِقٌ لَا يُحِبُّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « لَا تَقُلْ ذَلِكَ إِلَّا تَرَاهُ قَالَ : لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ يَبْتَغِي بِذَلِكَ وَجَهَ اللَّهِ تَعَالَى » فَقَالَ : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ أَمَا نَحْنُ فَوَاللَّهِ مَا نَرَى وُدَّهُ وَلَا حَدِيثَهُ إِلَّا إِلَى الْمُنَافِقِينَ ! فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « فَإِنَّ اللَّهَ قَدْ حَرَّمَ عَلَى النَّارِ مَنْ قَالَ : لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ يَبْتَغِي بِذَلِكَ وَجَهَ اللَّهِ » متفقٌ عليه .

وَ « عِثْبَانَ » بكسر العين المهملة وإسكان التاء المثناة فوق وبعدها باءٌ موحدة
وَ « الْخَزِيرَةُ » بِالخاءِ المعجمة والزاي : هِيَ دَقِيقٌ يُطْبَخُ بِشَحْمٍ . وَقَوْلُهُ « ثَابَ رِجَالٌ » بِالثاءِ المثناة : أَي جَاؤُوا وَاجْتَمَعُوا .

417. Citbaan ibn Maalik (A.K.R.) oo Raggii Badar ka mida, wuxuu yiri: Waxaan salaadaheya la tukan jiray tolkey, reer banii Saalim, waxaana jiray tog u dhexeeya gurigeysa iyo masjidka aan ku tukanno ee halkaa ah. Markii uu roob da'ana toggu inta biyo soconaya ay ka buuxsamaan baa waxaa igu adkaada inaan masjidka tago. Sidaa awgeed baan waxaan u tagay nebiga (S.C.W.) waxaana ku iri : ' Araggeygu waa liitaa aniguna ma karo inaan ka gudbo togga iga xira dadkayga. Waxaan aad u jeclaan lahaa inaad gurigayga timaaddid oo meel ka mid ah kaga tukatid si aan meeshaa meel tukasho kaga dhigto.' Wuxuu yiri nebigu (S.C.W.): Waa aan yeelayaa. Maalintii xigtay, goor harsimadii ah, baa nebiga (S.C.W.) yimid gurigeysii waxaana la socday Abuu Bakar (

A.K.R.) nebigu (S.C.W.) wuxuu weydiistay idan uu guriga ku soo galo, waana u idmay. Markaasuu isagoo aan fariisan i weydiyey: 'Xaggee jeceshahay inaan gurigaaga kaga tukado?' Waxaan u tilmaamay meeshii aan jeclaa inaan ku guto salaadaheyga. wuxuu u istaagey nebiga salaad korna ugu dhawaaqay 'Allaahu akbar' (takbiirta salaadda lagu xirto) annaguna gadaashiisii baan safannay oo la xirannay, laba ragcadood buu na tujiyey oo ka baxay , annagana waa ka baxnay ,waxaana u joojiyey saxan bur la shiilay ah iyo raa-shin kale oo isaga loogu talagalay. Kolkay darisku maqleen inuu nebigu (S.C.W.) gurigayga joogo, bay yimaadeen kuna soo urureen guraygii iyagoo tira badan. Nin baa yiri: Maxaa ku dhacay Maalik bin Dakhsham ! halkan iigama muuqda'e? Mid kalaa yiri: Kaasu waa munaafaq aan Alle iyo Rasuulkiisa toonna jeclayn.' wuxuu yiri nebigu (S.C.W.): Sidaas ha oran. Sow ma ogid inuu ku dhawaaqay shahaadada, qirayna inuusan jirin ilaah xaq aan Alle aheyn isagoo wejiga Alle ula jeeda?. Ninkii wuxuu yiri: Alle iyo Rasuulkiisaa og, annaguse waxaan aragnaa mar walba in sheekadiisa iyo la socodkiisuba ay u badan yihiin kuwa munaafiqiinta ah. Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Alle waa uu ka xaaraanshey naarta qofkii qira oo yiraahda: Laa ilaaha illal Laah " Ma jiro cid mudan oo xaq u leh caabudaad iyo in mididin loo ahaado oo laga dambeeyo si buuxdana loogu hoggaansamo aan ka hadal laheyn iyo ka hori maa-sho Alle maahee subxaanahu watacaalaa. ' isagoo shahaadadaa ula jeeda oo keliya wejiga Alle. " (Bukhaari iyo Muslim)

٤١٨ - وعن عمر بن الخطاب رضي الله عنه قال : قدِم رسول الله ﷺ بسبي فإذا امرأة من السبي تسعى ، إذ وجدت صبياً في السبي أخذته فألزقته ببطنها فأرضعته ، فقال رسول الله ﷺ : « أترون هذه المرأة طارحةً ولدها في النار » ؟ قلنا : لا والله . فقال : « لله أرحم بعباده من هذه بولدها » متفق عليه .

418. Cumar ibn Khaddaab (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaa mar dhacay in dad la soo qafaashay la hor keenay nabiga (S.C.W.) Waxaa ka mid ahaa dadkaas haweenay oo si hallow leh hadba meel ugu ordeysa, iyadoo raadineysa ilmo ay dhashay oo ka lumay. Markay heshay ilmiheedii , bay dhabta saartay, isuna dhoweysay, oo nuuji-sey. Nebigu (S.C.W.) wuxuu ku yiri asxaabtiisii: Ma is oran lahey-deen naagtaasi baa ilmaheeda dab ku ridi lahayd ? Waxaynu niri: Maya wallaahay.' Markaasuu nabigu (S.C.W.) yiri: Allaa uga naxariis badan addoommadiisa, in ka badan haweeneydaasi siday ku tahay oo ugu naxariisaneyso ilmaheeda.' (Bukhaari iyo Muslim)

٤١٩ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « لَمَّا خَلَقَ اللهُ الْخَلْقَ كَتَبَ فِي كِتَابٍ ، فَهُوَ عِنْدَهُ فَوْقَ الْعَرْشِ : إِنْ رَحِمْتِي تَغْلِبْ غَضَبِي » .

وفي رواية « غَلَبَتْ غَضَبِي » وفي رواية « سَبَقَتْ غَضَبِي » متفق عليه .

419. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Markuu Alle uunka uumay buu ku qoray kitaab uu ku heysta carshiga kor ah : ' Naxariistayadaa ka qaalib ah oo ka adkaan caradayda" .

Werin kale baa waxay leedahay : Naxariisteydaa ka adag caradayda" .

Werin kalena waxay leedahay: ' Naxariisteyda ka soo dhaqsa badan caradayda' (Bukhaari iyo Muslim)

٤٢٠ - وعنه قال : سَمِعْتُ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَقُولُ : « جَعَلَ اللَّهُ الرَّحْمَةَ مِائَةَ جُزْءٍ ، فَأَمْسَكَ عِنْدَهُ تِسْعَةٌ وَتِسْعِينَ ، وَأَنْزَلَ فِي الْأَرْضِ جُزْءًا وَاحِدًا ، فَمِنْ ذَلِكَ الْجُزْءِ نَتْرَاحُمُ الْخَلَائِقُ ، حَتَّى تَرْفَعَ الدَّابَّةُ حَافِرَهَا عَنْ وَلَدِهَا خَشِيَةَ أَنْ تُصِيبَهُ » .

وفي رواية : « إِنَّ لِلَّهِ تَعَالَى مِائَةَ رَحْمَةٍ ، أَنْزَلَ مِنْهَا رَحْمَةً وَاحِدَةً بَيْنَ الْجِنِّ وَالْإِنْسِ وَالْبَهَائِمِ وَالْهَوَامِّ ، فِيهَا يَتَعَاطَفُونَ فِيهَا وَيَتَرَاحِمُونَ فِيهَا تَعَطَّفُ الْوَحْشُ عَلَى وَلَدِهَا ، وَآخِرُ اللَّهِ تَعَالَى تِسْعًا وَتِسْعِينَ رَحْمَةً يَرْحَمُ بِهَا عِبَادَهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ » متفق عليه .

ورواه مسلم أيضاً مِنْ رِوَايَةِ سَلْمَانَ الْفَارِسِيِّ ، رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « إِنَّ لِلَّهِ تَعَالَى مِائَةَ رَحْمَةٍ فَمِنْهَا رَحْمَةٌ يَتَرَاحِمُ بِهَا الْخَلْقُ بَيْنَهُمْ ، وَتِسْعٌ وَتِسْعُونَ لِيَوْمِ الْقِيَامَةِ » .

وفي رواية : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى خَلَقَ يَوْمَ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ مِائَةَ رَحْمَةٍ كُلُّ رَحْمَةٍ طِبَاقٌ ^(١) مَا بَيْنَ السَّمَاءِ إِلَى الْأَرْضِ ، فَجَعَلَ مِنْهَا فِي الْأَرْضِ رَحْمَةً فِيهَا تَعَطَّفُ الْوَالِدَةُ عَلَى وَلَدِهَا ، وَالْوَحْشُ وَالطَّيْرُ بَعْضُهَا عَلَى بَعْضٍ ، فَإِذَا كَانَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ أَكْمَلَهَا بِهَذِهِ الرَّحْمَةِ » .

420. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay nabiga (S.C.W.) oo leh : Alle naxariista boqol qaybood buu ka dhigay, sa-gaal iyo sagaashan agtiisuu yeelay hal qaybna dhulkuu keenay. Qaybtaasaana uunka oo dhammi midba kan kale ugu naxariistaa, naxariistaa gaadha badnaanteed heer neefku ilmihisa yar cagta ka qaado si uusan waxyeello ugu geysan.

Werin kale baa waxay lahayd: ' Alle boqol naxariisood buu leeyahay, hal mid buuna u soo dejiyey jinka iyo insiga iyo xoolaha iyo cayayaanka, taasayna isugu naxariistaan oo isugu naxaan oo isugu calool debcaan oo ugaartu ilmaheeda ugu turtaa, Allena wuxuu ula haray oo dib ugu dhigay sagaal iyo sagaashan naxariisood ee kale si uu addoomihiisa uu ugu naxariisto maalinta qiyaame'.

(Bukhaari iyo Muslim)

Werin kale oo Muslim ku taal oo laga soo weriyey Salmaan al-Faarisi (A.K.R.) waxay leedahay: Alle boqol naxariisood buu leeyahay, boqolkaa naxariisood mid keliya bay uumanka oo idil isugu naxariistaan, sagaal iyo sagaashanna wuxuu u daayey maalinta qiyaame (si uu uunkiisa ugu naxariisto)

Werin kale baa iyana waxay leedahay: Alle wuxuu abuuray boqol naxariisood maalintii uu abuuray cirarka iyo dhulka; mid walba ay le'eg tahay mugga cirka iyo dhulka. Intaa oo naxariisood mid buu dhulka keenay oo ay hooyo kastaa ilmeheeda ugu naxariisataa; duur joogtuna isugu naxariisataa iyo shimbiruhuba. Markii maalinta qiyaamo la gaaro buu kaamili oo taam yeeli naxariistaas. (taa macnaheedu waxaa weeyey boqolka naxariisoodba wuxuu wada isticmaalayaa oo ugu naxariisanayaa addoomihiisa maalinta qiyaamo'.

٤٢١ - وعنه عن النبي ﷺ فيما يحكي عن ربه ، تبارك وتعالى ، قال : « أذنبَ عَبْدُ ذَنْبًا ، فَقَالَ : اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي ، فَقَالَ اللَّهُ تَبَارَكَ وَتَعَالَى : أذنبَ عَبْدِي ذَنْبًا ، فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ ، وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ ، ثُمَّ عَادَ فَأَذْنَبَ فَقَالَ : أَيُّ رَبِّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى : أذنبَ عَبْدِي ذَنْبًا ، فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا يَغْفِرُ الذَّنْبَ ، وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ ، ثُمَّ عَادَ فَأَذْنَبَ فَقَالَ : أَيُّ رَبِّ اغْفِرْ لِي ذَنْبِي ، فَقَالَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى : أذنبَ عَبْدِي ذَنْبًا ، فَعَلِمَ أَنَّ لَهُ رَبًّا ، يَغْفِرُ الذَّنْبَ ، وَيَأْخُذُ بِالذَّنْبِ ، قَدْ غَفَرْتُ لِعَبْدِي فَلْيَفْعَلْ مَا شَاءَ » متفقٌ عليه .

وقوله تعالى : « فَلْيَفْعَلْ مَا شَاءَ » أي : مَا دَامَ يَفْعَلُ هَكَذَا ، يُذْنِبُ وَيَتُوبُ اغْفِرْ لَهُ ، فَإِنَّ التَّوْبَةَ تَهْدِمُ مَا قَبْلَهَا .

421. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.)wuxuu ka soo xigtay Rabbigi : ' Addoon baa dembi galay markaasuu Alle baryey oo yiri: ' Alloow, ii dembi dhaaf.' Markaasuu Allena kor ahaaye yiri: ' Addoonkaygii baa dembi galay markaasuu wuxuu gartay inuu leeyahay Rabbi dembiga dhaafa, waxna u ciqaaba.' Addoonkii baa misna ku noqday dambigii mar labaad oo haddana

Alle baryey oo yiri: Rabbiyoow ii dembi dhaaf. Alle weyne kor ahaaye wuxuu yiri: addoonkaygii baa dambaabey oo misna gartay inuu leeyahay Rabbi dembiga dhaafa waxna u ciqaaba. Addoonkii baa misna dambi galay oo haddana Alle baryey oo yiri: Rabbi - yoow ii dembi dhaaf. ' Alle kor ahaaye wuxuu yiri: addoonkaygii baa dambaabey oo misna gartay inuu leeyahay Rabbi dembiga dhaafa, waxna u ciqaaba. Waan u dambi dhaafay addoonkayga; ee wuxuu rabo ha falo (Yacni intuu toobad keen yahay addoonku waa loo dambi dhaafayaa, waayo toobadu waxay tirtirtaa dambiya-dii hore oo dhan.) (Bukhaari iyo Muslim)

٤٢٢ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ لَوْ لَمْ تُذِنُوا لَذَهَبَ لِلَّهِ بِكُمْ ، وَجَاءَ بِقَوْمٍ يُذِبُونَ ، فَيَسْتَغْفِرُونَ اللَّهَ تَعَالَى فَيَغْفِرُ لَهُمْ » رواه مسلم .

422. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wu - xuu yiri: Alle baan ku dhaaran oo ah kan ay naftaydu gacantiisa ku jirto , haddii aydaan danbaabteen. Alle wuxuu beddelkiin keeni lahaa qoon dambaaba oo dabadeed Alle dembi dhaaf weydiista, (Muslim) uuna u dembi dhaafo. '

٤٢٣ - وعن أبي أيوب خالد بن زيد رضي الله عنه قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « لَوْلَا أَنَّكُمْ تُذِنُونَ ، لَخَلَقَ اللَّهُ خَلْقًا يُذِبُونَ ، فَيَسْتَغْفِرُونَ ، فَيَغْفِرُ لَهُمْ » رواه مسلم .

423. Abuu Ayuub Khaalid ibn Zayd (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay Nebiga (S.C.W.) oo leh: ' Haddii aydaan danbaabteen, Alle wuxuu abuuran lahaa dad dambaaba oo dembi dhaaf waydiista oo uu u dembi dhaafo'. (Muslim)

٤٢٤ - وعن أبي هريرة رضي الله عنه قال : كُنَّا قُعُودًا مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، مَعَنَا أَبُو بَكْرٍ وَعُمَرُ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا ، فِي نَفْرٍ فَقَامَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ مِنْ بَيْنِ أَظْهُرِنَا ، فَأَبْطَأَ عَلَيْنَا فَخَشِينَا أَنْ يُقْتَطَعَ دُونَنَا ، فَفَزِعْنَا فَقُمْنَا فَكُنْتُ أَوَّلَ مَنْ فَزِعَ فَخَرَجْتُ أَبْتِغِي رَسُولَ اللَّهِ ﷺ ، حَتَّى أَتَيْتُ حَائِطًا لِلْأَنْصَارِ - وَذَكَرَ الْحَدِيثَ بِطَوِيلِهِ إِلَى قَوْلِهِ : فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ : « اذْهَبْ فَمَنْ لَقِيتَ وَرَاءَ هَذَا الْحَائِطِ يَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، مُسْتَيَقِنًا بِهَا قَلْبُهُ فَبَشَّرَهُ بِالْجَنَّةِ » رواه مسلم .

424. Abuu Hurayrah (A.K.R.) wuxuu yiri: Mar annagoo la fadhina nebiga (S.C.W.) ayna nagu jiraaan Abuu Bakar iyo Cumar (

A.K.R.) baa nebigu (S.C.W.) istaagay oo naga tagay waana naga daahay. Sidaa awgeed dareen baa na galay armaa wax gaareen ah saa lama aynu joogina. Dareenkaa na galay awgi baynu wada kacnay si aan u raadinno. waxaan ahaa ninkii u horreeyey oo dareen galo oo raadiya nabiga (S.C.W.) illaa aan imid beer uu iska leeyahay nin ansaari ahi; xadiiskii buu waday, xadiiskaa uu dhammaadkiisa ku sheegay in nebigu (S.C.W.) uu ku yiri: tag oo qof kasta oo aad kula kulantid beertan debeddeeda oo u qiraya si kal iyo laab ah inuusan jirin ilaah xaq ah oo mudan in laga dambeeyo oo loo hoggaansmo oo la caabdudo aan Alle ahayni, ugu bishaaree war-kan farxadda leh ee ah inuu gali doono jannada.' (Muslim)

٤٢٥ - وعن عبد الله بن عمرو بن العاص رضي الله عنهما ، أن النبي ﷺ ، تلا قول الله عز وجل في إبراهيم ﷺ : ﴿ رَبِّ إِنَّهُمْ أَضَلُّنَّ كَثِيرًا مِنْ النَّاسِ فَمَنْ تَبِعَنِي فَإِنَّهُ مِنِّي ﴾ [إبراهيم : ٣٦] الآية وقول عيسى ﷺ : ﴿ إِنْ تُعَذِّبُهُمْ فَإِنَّهُمْ عِبَادُكَ وَإِنْ تَغْفِرْ لَهُمْ فَإِنَّكَ أَنْتَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴾ [المائدة : ١١٨] فَرَفَعَ يَدَيْهِ وَقَالَ : « اللَّهُمَّ أُمَّتِي أُمَّتِي » وبكى ، فقال الله عز وجل : « يَا جِبْرِيلُ أَذْهَبْ إِلَى مُحَمَّدٍ وَرَبُّكَ أَعْلَمُ ، فَسَلْهُ مَا يُبْكِيهِ » ؟ فَأَتَاهُ جِبْرِيلُ ، فَأَخْبَرَهُ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ ، بِمَا قَالَ : وَهُوَ أَعْلَمُ . فقال الله تعالى : « يَا جِبْرِيلُ إِذْهَبْ إِلَى مُحَمَّدٍ فَقُلْ : إِنَّا سَنُرْضِيكَ فِي أُمَّتِكَ وَلَا نَسْؤُوكَ » رواه مسلم .

425. Cabdullaah ibn Camar ibn al-Caas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu akhriyey hadalkii Alle ee Qur'aanka ku soo arooray kuna saabsanaa ducadii nebi Ibraahiim ee aheyd : ' Rabbiyoow waxay dhumiyeen (sanamyadu) in badan oo dadka ka mid ah. ee aniga kii i raacaa iga mid ah. Kiise i caasiya adigaa dambi dhaafe naxariis badan ah'. Suuradda Ibraahiim : Aayadda 36

Iyo wixii uu yiri nabi Ciise (C.S.) , Allena uu Qur'aanka ku sheegay waa qowlka ah:

" Haddii aad cadaabayso , waa addoommadaadii, haddii aad u dembi dhaafeysona adigaa adigu awood badanaha falka san ah.'

Markaasuu nabigu (S.C.W.) inta gacmaha kor u taagay yiri: Alloow ummaddayda , ummaddayda, oohinna la dhacay . Alle wuxuu amar siiyey malag Jabriil oo ku yiri: U tag Muxammad (S.C.W.) Rabbi-gaa baana u ogaal roone, oo waxaad weydiisaa maxaa kaa oohinaya? Sidaa awgeed buu malag Jabriil ugu yimid, nabiguna u sheegay wixii uu Jibriil Alle ka gaarsiiyey. (Alle horay buu u ogaataa). Alle kor ahaaye , wuxuu amray malag Jabriil oo ku yiri: U

tag Muxammad oo ku dheh waan kaa farxin doonnaa xagga um-
maddaada, waxaad ka xumaatana kuma tusi doonno . ' (Muslim)

٤٢٦ - وعن معاذ بن جبل ، رضي الله عنه ، قال : كُنْتُ رَدَفَ النَّبِيِّ ﷺ عَلَى
جِمَارٍ فَقَالَ : « يَا مُعَاذُ هَلْ تَذَرِي مَا حَقَّ اللَّهُ عَلَى عِبَادِهِ ، وَمَا حَقَّ الْعِبَادِ عَلَى
اللَّهِ ؟ » قُلْتُ : اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَعْلَمُ . قَالَ : « فَإِنَّ حَقَّ اللَّهِ عَلَى الْعِبَادِ أَنْ يَعْبُدُوهُ ،
وَلَا يُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا ، وَحَقَّ الْعِبَادِ عَلَى اللَّهِ أَنْ لَا يُعَذِّبَ مَنْ لَا يُشْرِكُ بِهِ شَيْئًا »
فَقُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَفَلَا أُبَشِّرُ النَّاسَ ؟ قَالَ : « لَا تُبَشِّرُهُمْ فَيَتَّكِلُوا » متفق عليه .

426. Mucaad ibn Jabal (A.K.R.) wuxuu yiri : Waxaan la fuushanaa
dameer nebiga (S.C.W.) markaa buu i weydiiyey: Mucaadow, ma
taqaan xaqa Alle addoommadiisa ku leeyahay iyo waxa addoom-
madu Alle xaqa ugu leeyihiin ?Waxaan iri: Alle iyo Rasuulkiisa
(S.C.W.) ayaa yaqaan.' Wuxuu yiri: Xaqa Alle addoommadiisa ku
leeyahay waa inay caabudaan keligi oo aysan waxba u shariig yee-
lin; xaqa Addoommadiisu ay ku leeyihiinna waa inuusan cadaabin
qofkii aan waxba u shariig yeelin.' Markaas baan waxaan ku iri: Ra-
suul Alloow dadka ma ugu bishaareeyaa?Wuxuu yiri: Sidaa ha yee-
lin, anigoo ka baqaya inay dadku si dhan isugu halleeyaan taa oo
ay is dhigtaan.' (Bukhaari iyo Muslim)

٤٢٧ - وعن البراء بن عازب رضي الله عنهما ، عن النبي ﷺ قال : « الْمُسْلِمُ إِذَا
سُئِلَ فِي الْقَبْرِ يَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ ، وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ ، فَذَلِكَ قَوْلُهُ
تَعَالَى : ﴿ يُثَبِّتُ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا بِالْقَوْلِ الثَّابِتِ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَفِي الْآخِرَةِ ﴾
[إبراهيم ٢٧] » متفق عليه .

427. Baraa ibn Caasib (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wu-
xuu yiri: Markii qofka muslimka ah lagu su'aalo qabrigiisa (waa
kuma Rabbigaagu ? waa maxay diintaadu? waa kee kaa la idiin
soo diray?) wuxuu qirayaa mu'minku inuusan jirin ilaah xaq ah
oo mudan in laga dambeeyo oo loo hoggaansamo, oo la caabudo
aan Alle aheyn, iyo in Muxamaad yahay rasuulkiisii (diintiisuna ta-
hay Islaam) . ' Taasaana ah macnaha qowlka Alle:

" Alle wuxuu ku sugaa kuwa xaqa rumeeyey qowl sagan adduun
iyo aakhiraba. ' Suuradda Ibraahiim : Aayadda 27

(Bukhaari iyo Muslim)

٤٢٨ - وعن أنس رضي الله عنه ، عن رسول الله ﷺ ، قال : « إِنَّ الْكَافِرَ إِذَا
عَمِلَ حَسَنَةً ، أُطِعِمَ بِهَا طُعْمَةً مِنَ الدُّنْيَا ، وَأَمَّا الْمُؤْمِنُ ، فَإِنَّ اللَّهَ تَعَالَى يَدْخِرُ لَهُ

حَسَنَاتِهِ فِي الْآخِرَةِ ، وَيُعْقِبُهُ رِزْقًا فِي الدُّنْيَا عَلَى طَاعَتِهِ .

وفي رواية : « إِنَّ اللَّهَ لَا يَظْلِمُ مُؤْمِنًا حَسَنَةً يُعْطِي بِهَا فِي الدُّنْيَا ، وَيُجْزَى بِهَا فِي الْآخِرَةِ . وَأَمَّا الْكَافِرُ ، فَيُطْعَمُ بِحَسَنَاتِ مَا عَمِلَ لِلَّهِ تَعَالَى ، فِي الدُّنْيَا حَتَّى إِذَا أَفْضَى إِلَى الْآخِرَةِ ، لَمْ يَكُنْ لَهُ حَسَنَةٌ يُجْزَى بِهَا » رواه مسلم .

428. Anas (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Markii uu gaalku wax samaan ah falo, Waxaa lagu siiyaa abaal-gudkeeda adduunka, muslimkana, Alle wuxuu u kaydshaa camal-ladiisa wanaagsan si uu uga abaal siiyo aakhirada, wuxuuna siiyaa risiq wanaagsan adduunka daacadiisa awgeed.

Werin kale baa waxay leedahay: Alle uma geysto dulmi cidna. mu'minka waa laga abaal mariyaa wanaaggii uu sameeyo adduun iyo aakhiraba. Gaalkana wixii samaan ah oo uu falo adduunkaa lagu siiyaa, aakhirana markii uu tago wax wanaag ah uma yaallaan' (Muslim)

٤٢٩ - وعن جابر ، رضي الله عنه قال : قال رسول الله ﷺ : « مَثَلُ الصَّلَوَاتِ الْخَمْسِ كَمَثَلِ نَهْرِ جَارٍ غَمْرٍ عَلَى بَابٍ أَحَدِكُمْ يَغْتَسِلُ مِنْهُ كُلَّ يَوْمٍ خَمْسَ مَرَّاتٍ » رواه مسلم .

« الْغَمْرُ » الْكَثِيرُ .

429. Jaabir (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Shanta salaadood waxay la mid yihiin wabi biyo badan oo illinkaa-ga hortiiis socda oo aad maalintii shan jeer ku qabaysato. halkaasoo aad dhammaantaa daahir noqoto, ka meyra wasakh oo dhan jirkii - sa; Waa sidaasoo kale qofka sida joogtada u guta shantiisa salaadood maalin iyo habeen kasta. (Muslim)

٤٣٠ - وعن ابن عباس رضي الله عنهما ، قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « مَا مِنْ رَجُلٍ مُسْلِمٍ يَمُوتُ فَيَقُومُ عَلَى جَنَازَتِهِ أَرْبَعُونَ رَجُلًا لَا يُشْرِكُونَ بِاللَّهِ شَيْئًا إِلَّا شَفَعَهُمُ اللَّهُ فِيهِ » رواه مسلم .

430. Ibn Cabbaas (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: Qof kasta oo muslim ah oo dhinta ay afartan qof oo aan Alle u shariig yeelin janaasadiisa ku tukadaan, Alle waa uu ugu naxariistaa ducadooda. (Muslim)

٤٣١ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه قال : كُنَّا مَعَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ فِي قُبَّةِ (٣) نَحْوًا مِنْ أَرْبَعِينَ ، فَقَالَ : « أَتَرْضَوْنَ أَنْ تَكُونُوا رُبْعَ أَهْلِ الْجَنَّةِ » ؟ قُلْنَا : نَعَمْ . قَالَ : « أَتَرْضَوْنَ أَنْ تَكُونُوا ثُلُثَ أَهْلِ الْجَنَّةِ » ؟ قُلْنَا : نَعَمْ ، قَالَ : « وَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ إِنِّي لَأَرْجُو أَنْ تَكُونُوا نِصْفَ أَهْلِ الْجَنَّةِ وَذَلِكَ أَنْ الْجَنَّةَ لَا يَدْخُلُهَا إِلَّا نَفْسٌ مُسْلِمَةٌ ، وَمَا أَنْتُمْ فِي أَهْلِ الشِّرْكِ إِلَّا كَالشَّعْرَةِ الْبَيْضَاءِ فِي جِلْدِ الثَّوْرِ الْأَسْوَدِ ، أَوْ كَالشَّعْرَةِ السُّودَاءِ فِي جِلْدِ الثَّوْرِ الْأَحْمَرِ » متفق عليه .

431. Ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Rag afartan ku dhow oo raggayagii ah baa nabiga (S.C.W.) teendha la joogay markuu ina weydiyey: Ma jeclaan lahaydeen inaad noqotaan afar meeloodoo meel dadka galaya jannada? Waxaannu niri: Haah, Mudane, misna wuxuu na weydiyey: ' Ma jeclaan laheydeen inaad noqotaan seddex meeloodoo meel dadka galaya jannada? Waxaynu ku jawaabnay : ' Waan jeclaan laheyn ' Wuxuu yiri: Waxaan ku dhaaran Alle ay nafta Muxammad (S.C.W.) gacantiisa ku jirto, waxaan ku rajo weynahay inaad ehlu jannaha barkiis noqotaan. Maxaa yeelay jannada ma geli doono waxaan nafsad muslim ah aheyn (ee Alle si buuxda isugu dhiibay uguna hoggaansamay, tiradiinnana marka loo eego gaalada waxaad la mid tihiin tin cad oo dibi madow ku taal, ama tin madow oo dibi gaduudan ku taal. ' (Bukhaari iyo Muslim)

٤٣٢ - وعن أبي موسى الأشعري ، رضي الله عنه ، قال : قال رسول الله ﷺ : « إِذَا كَانَ يَوْمُ الْقِيَامَةِ دَفَعَ اللَّهُ إِلَى كُلِّ مُسْلِمٍ يَهُودِيًّا أَوْ نَصْرَانِيًّا فَيَقُولُ : هَذَا فِكَائِكَ مِنَ النَّارِ » .

وفي رواية عنه عن النبي ﷺ قال : « يَجِيءُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ نَاسٌ مِنَ الْمُسْلِمِينَ بِذُنُوبٍ أَمْثَالِ الْجِبَالِ يَغْفِرُهَا اللَّهُ لَهُمْ » رواه مسلم .

قوله : « دَفَعَ إِلَى كُلِّ مُسْلِمٍ يَهُودِيًّا أَوْ نَصْرَانِيًّا فَيَقُولُ : هَذَا فِكَائِكَ مِنَ النَّارِ » مَعْنَاهُ مَا جَاءَ فِي حَدِيثِ أَبِي هُرَيْرَةَ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ : « لِكُلِّ أَحَدٍ مَنَزَلٌ فِي الْجَنَّةِ ، وَمَنَزَلٌ فِي النَّارِ ، فَالْمُؤْمِنُ إِذَا دَخَلَ الْجَنَّةَ خَلَفَهُ الْكَافِرُ فِي النَّارِ ، لِأَنَّهُ مُسْتَحِقٌّ لِذَلِكَ بِكُفْرِهِ » وَمَعْنَى « فِكَائِكَ » : أَنَّكَ كُنْتَ مَعْرُضًا لِدُخُولِ النَّارِ ، وَهَذَا فِكَائِكَ ، لِأَنَّ اللَّهَ تَعَالَى ، قَدَّرَ لِلنَّارِ عَدَدًا يَمَلُؤُهَا ، فَإِذَا دَخَلَهَا الْكُفَّارُ بِذُنُوبِهِمْ وَكُفْرِهِمْ ، صَارُوا فِي مَعْنَى الْفِكَائِكَ لِلْمُسْلِمِينَ ، وَاللَّهُ أَعْلَمُ .

432. Abuu Muusaa al-Ashcari (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Maalinta qiyaamaha, Alle wuxuu madax furasho u siin doonaa ruux muslim ahoo naar muteystay qof Yuhuud ama Kirishtaan ah (si loogu beddelo) , wuxuuna oran Alle : Boos-kaagii naarta aad muteysatay gaalkan ha kuu galo beddelkaa oo madax furasho ha kuu noqdo". gaalnimadiisaana kaa Yuhuudiga ah ama Kirishtaanka sidaa badday.

Werin kale baa waxay leedahay: Maalinta qiyaame, dad muslimiin ah baa waxay la imaanayaan dembiyo aad buuro mooddid , Allena wuu cafin doonaa dhammaantood. (Muslim)

٤٣٣ - وعن ابن عمر رضي الله عنهما قال : سمعت رسول الله ﷺ يقول : « يُدْنِي الْمُؤْمِنُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ مِنْ رَبِّهِ حَتَّى يَضَعَ كَنَفَهُ عَلَيْهِ ، فَيَقْرَرُهُ بِذُنُوبِهِ ، فيقولُ : أتعرفُ ذنْبَ كَذَا ؟ أتعرفُ ذنْبَ كَذَا ؟ فيقولُ : رَبِّ أعْرِفُ ، قال : فَإِنِّي قد سترتها عليك في الدنيا ، وأنا أغفرها لك اليوم ، فيُعْطَى صَحِيفَةً حَسَنَاتِهِ » متفقٌ عليهم .

كَنَفُهُ : سِتْرُهُ وَرَحْمَتُهُ .

433. Ibn Cumar (A.K.R.) wuxuu yiri: Waxaan maqlay nebiga (S.C.W.) oo leh: Qof mu'min ah baa u soo dhowaanaya Rabbigi (Alle) maalinta qiyaame wuxuuna Alle ku daboolayaa qofkaa mu'minka ah naxariistiisa. Wuxuu su'aali dambiyadiisii: Ma garan (xusuusan tahay) sidaa iyo sidaa, dambigan iyo dambigan? wuxuu ku jawaabi : Haah : Rabbiyoow , waan garan (xusuusnahay). ' Wuxuu oran: Waan kuu qariyey oo kumaanan kashifin intaad Adduunka joogtay , waana kuu dhaafayaa maanta. . Markaasaa ki-taabkii camalkiisii wanaagsanaa gacanta midig laga siinayaa.' (Buhaari iyo Muslim)

٤٣٤ - وعن ابن مسعود رضي الله عنه ، أَنَّ رَجُلًا أَصَابَ مِنْ امْرَأَةٍ قُبْلَةً ، فَأَتَى النَّبِيَّ ﷺ فَأَخْبَرَهُ ، فَأَنْزَلَ اللَّهُ تَعَالَى : ﴿ وَأَقِمِ الصَّلَاةَ طَرَفِي النَّهَارِ وَزُلْفًا مِنْ اللَّيْلِ إِنَّ الْحَسَنَاتِ يُذْهِبْنَ السَّيِّئَاتِ ﴾ [هود : ١١٤] فقال الرجل ، ألي هذا يا رسول الله ؟ قال : « لجميع أمتي كلهم » متفقٌ عليه .

434. Ibn Mascuud (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin baa wuxuu dhunkaday, naag (shisheeya ka ah) markaasuu nebiga (S.C.W.) u yimid oo qirtay dambigiisa. Goortaasaa Alle soo dejiyey aayaddan:

Oog salaadda billowga iyo dhammaadka maalinta iyo qayb habeen-ka ka mid ah. Samaanuhu waxay tirtiraan xumaanaha'. ' (Suuradda Huud : Aayadda 114) Ninkii la soo sheegay baa wuxuu weydiiyey: Arrintaa ma anigay gaar igu tahay? Nabigu (S.C.W.) wuxuu ku jawaabay: waxaa leh umaddayda oo dhan.'

(Bukhaari iyo Muslim)

٤٣٥ - وعن أنس رضي الله عنه ، قال : جاء رجل إلى النبي ﷺ ، فقال : يا رسول الله أصبتُ حدًا ، فأقمه عليّ ، وحضرت الصلاة ، فصلّى مع رسول الله ﷺ ، فلما قضى الصلاة قال : يا رسول الله إني أصبتُ حدًا فأقم فيّ كتاب الله . قال : « هل حضرت معنا الصلاة » ؟ قال : نعم . قال : « قد غفر لك » متفق عليه .

وقوله « أصبتُ حدًا » معناه : معصيةٌ تُوجبُ التّعزيرَ ، وليس المراد الحدّ الشرعيّ الحقيقيّ كحدّ الزّنا والخمر وغيرهما ، فإنّ هذه الحدود لا تسقط بالصلاة ، ولا يجوزُ للإمام تركها .

435. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nin baa waxaa u yimid Nebiga (S.C.W.) oo ku yiri: Rasuul Alloow (S.C.W.) waxaan galay dambi xun oo ciqaab leh sugan, ee dambigaa ha la iga gooyo. Maa-daamayna aheyd waqtigii salaadda salaad baa la galay ninkiina wuxuu la tukaday nebiga (S.C.W.) . Markii salaaddii laga baxay buu ninkii mar labaad ku yiri nabiga (S.C.W.) : Rasuulkii Alloow ! Waxaan galay dambi xun oo weyn , ee fadlan ha la iga gooyo oo si-duu kitaabka yiri igu jaasa mari. Nabigu (S.C.W.) wuxuu weydiiyey: Ma tukatay salaad oo (salaadda jamaacada) ma nala tukatay? ' Wuxuu ku jawaabay: Haah, Mudane. ' Nabigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Haddaba waa lagu dambi dhaafay (fadliga salaaddan awgeed. ' (Bukhaari iyo Muslim)

٤٣٦ - وعنه قال : قال رسول الله ﷺ : « إن الله ليرضى عن العبد أن يأكل الأكلة ، فيحمده عليها ، أو يشرب الشربة فيحمده عليها » رواه مسلم .

« الأكلة » بفتح الهمزة وهي المرة الواحدة من الأكل كالفدوة والعشوة ، والله أعلم .

436. Anas bin Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Nebigu (S.C.W.) wuxuu yiri: Alle Raalli buu ka noqdaa in addoonkiisu markii uu wax cuno u mahad naqo (macnaha yiraahda alxamdulillaah), mar-

kii uu biyo cabbana u mahadnaqo (oo yiraahda alxamdulillaah).'
(Muslim)

٤٣٧- وعن أبي موسى رضي الله عنه ، عن النبي ﷺ قال : « إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى يَبْسُطُ يَدَهُ بِاللَّيْلِ لِيَتُوبَ مُسِيءُ النَّهَارِ ، وَيَبْسُطُ يَدَهُ بِالنَّهَارِ لِيَتُوبَ مُسِيءُ اللَّيْلِ حَتَّى تَطْلُعَ الشَّمْسُ مِنْ مَغْرِبِهَا » رواه مسلم

437. Xadiiskan horay buu noo soo maray, eeg xadiiska tiradiisu ta-hay 16. cutubka 2

٤٣٨- وعن أبي نجيح عمرو بن عَبَسَةَ - بفتح العين والباء - السُّلَمِيِّ رضي الله عنه قال : كُنْتُ وَأَنَا فِي الْجَاهِلِيَّةِ أَظُنُّ أَنَّ النَّاسَ عَلَى ضَلَالَةٍ ، وَأَنَّهُمْ لَيَسُوا عَلَى شَيْءٍ ، وَهُمْ يَعْبُدُونَ الْأَوْثَانَ ، فَسَمِعْتُ بِرَجُلٍ بِمَكَّةَ يُخْبِرُ أَخْبَارًا ، فَقَعَدْتُ عَلَى رَاحِلَتِي ، فَقَدِمْتُ عَلَيْهِ ، فَإِذَا رَسُولُ اللَّهِ ﷺ مُسْتَخْفِيًا ، جَرَاءً عَلَيْهِ قَوْمُهُ ، فَتَلَطَّفْتُ حَتَّى دَخَلْتُ عَلَيْهِ بِمَكَّةَ ، فَقُلْتُ لَهُ : مَا أَنْتَ ؟ قَالَ : « أَنَا نَبِيٌّ » قُلْتُ : وَمَا نَبِيٌّ ؟ قَالَ : « أُرْسَلَنِي اللَّهُ » قُلْتُ : وَبِأَيِّ شَيْءٍ أُرْسَلْتَ ؟ قَالَ : « أُرْسَلَنِي بِصِلَةِ الْأَرْحَامِ ، وَكَسْرِ الْأَوْثَانِ ، وَأَنْ يُوحِدَ اللَّهُ لَا يُشْرَكَ بِهِ شَيْءٌ » قُلْتُ : فَمَنْ مَعَكَ عَلَى هَذَا ؟ قَالَ : « حُرٌّ وَعَبْدٌ » وَمَعَهُ يَوْمئِذٍ أَبُو بَكْرٍ وَبِلَالٌ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا ، قُلْتُ : إِنِّي مُتَّبِعُكَ ، قَالَ : « إِنَّكَ لَنْ تَسْتَطِيعَ ذَلِكَ يَوْمَكَ هَذَا ، أَلَا تَرَى حَالِي وَحَالَ النَّاسِ ؟ وَلَكِنْ أَرْجِعْ إِلَى أَهْلِكَ فَإِذَا سَمِعْتَ بِي قَدْ ظَهَرْتُ فَأْتِنِي » قَالَ : فَذَهَبْتُ إِلَى أَهْلِي وَقَدِمَ رَسُولُ اللَّهِ ﷺ الْمَدِينَةَ ، وَكُنْتُ فِي أَهْلِي ، فَجَعَلْتُ أَتَخَبَّرُ الْأَخْبَارَ ، وَأَسْأَلُ النَّاسَ حِينَ قَدِمَ الْمَدِينَةَ حَتَّى قَدِمَ نَفْرٌ مِنْ أَهْلِي الْمَدِينَةَ ، فَقُلْتُ : مَا فَعَلَ هَذَا الرَّجُلُ الَّذِي قَدِمَ الْمَدِينَةَ ؟ فَقَالُوا : النَّاسُ إِلَيْهِ سِرَاعٌ ، وَقَدْ أَرَادَ قَوْمُهُ قَتْلَهُ ، فَلَمْ يَسْتَطِيعُوا ذَلِكَ ، فَقَدِمْتُ الْمَدِينَةَ ، فَدَخَلْتُ عَلَيْهِ ، فَقُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَتَعْرِفُنِي ؟ قَالَ : « نَعَمْ أَنْتَ الَّذِي لَقَيْتَنِي بِمَكَّةَ » قَالَ : فَقُلْتُ : يَا رَسُولَ اللَّهِ أَخْبِرْنِي عَمَّا عَلَّمَكَ اللَّهُ وَأَجْهَلُهُ ، أَخْبِرْنِي عَنِ الصَّلَاةِ ؟ قَالَ : « صَلَّى صَلَاةَ الصُّبْحِ ، ثُمَّ أَقْصُرُ عَنِ الصَّلَاةِ حَتَّى تَرْتَفِعَ الشَّمْسُ قَيْدَ رُمُحٍ (٢) ، فَإِنِّي تَطْلُعُ حِينَ تَطْلُعُ بَيْنَ قَرْنَيْ شَيْطَانٍ ، وَحِينَئِذٍ يَسْجُدُ لَهَا الْكُفَّارُ ، ثُمَّ صَلَّى فَإِنَّ

الصَّلَاةَ مَشْهُودَةً مَحْضُورَةً حَتَّى يَسْتَقِيلَ الظَّلُّ بِالرَّمْحِ ، ثُمَّ أَقْصَرَ عَنِ الصَّلَاةِ ، فَإِنَّهُ حِينَئِذٍ تُسَجَّرُ جَهَنَّمُ ، فَإِذَا أَقْبَلَ الْفَيْءُ فَصَلَّ ، فَإِنَّ الصَّلَاةَ مَشْهُودَةً مَحْضُورَةً حَتَّى تُصَلِّيَ الْعَصْرَ ، ثُمَّ أَقْصَرَ عَنِ الصَّلَاةِ حَتَّى تَغْرُبَ الشَّمْسُ ، فَإِنَّهَا تَغْرُبُ بَيْنَ قَرْنَيْ شَيْطَانٍ ، وَحِينَئِذٍ يَسْجُدُ لَهَا الْكُفَّارُ » قال : فقلتُ : يَا نَبِيَّ اللَّهِ فالوضوءُ حدثني عنه ؟ فقال : « مَا مِنْكُمْ رَجُلٌ يُقْرَبُ وَضُوءُهُ ، فَيَتَمَضَّمُ وَيَسْتَنْشِقُ فَيَسْتَشِيرُ ، إِلَّا خَرَّتْ خَطَايَا وَجْهِهِ وَفِيهِ وَخِيَاشِيمِهِ ، ثُمَّ إِذَا غَسَلَ وَجْهَهُ كَمَا أَمَرَهُ اللَّهُ ، إِلَّا خَرَّتْ خَطَايَا وَجْهِهِ مِنْ أَطْرَافِ لِحْيَتِهِ مَعَ الْمَاءِ ، ثُمَّ يَغْسِلُ يَدَيْهِ إِلَى الْمِرْفَقَيْنِ ، إِلَّا خَرَّتْ خَطَايَا يَدَيْهِ مِنْ أَنْامِلِهِ مَعَ الْمَاءِ ، ثُمَّ يَمْسَحُ رَأْسَهُ ، إِلَّا خَرَّتْ خَطَايَا رَأْسِهِ مِنْ أَطْرَافِ شَعْرِهِ مَعَ الْمَاءِ ، ثُمَّ يَغْسِلُ قَدَمَيْهِ إِلَى الْكَعْبَيْنِ ، إِلَّا خَرَّتْ خَطَايَا رِجْلَيْهِ مِنْ أَنْامِلِهِ مَعَ الْمَاءِ ، فَإِنْ هُوَ قَامَ فَصَلَّى ، فَحَمِدَ اللَّهُ تَعَالَى ، وَأَثْنَى عَلَيْهِ وَمَجَّدَهُ بِالَّذِي هُوَ لَهُ أَهْلٌ ، وَفَرَّغَ قَلْبَهُ لِلَّهِ تَعَالَى ، إِلَّا انْصَرَفَ مِنْ خَطِيئَتِهِ كَهَيْئَتِهِ يَوْمَ وَلَدَتْهُ أُمُّهُ » .

فحدث عمرو بن عَبَسَةَ بهذا الحديث أبا أَمَامَةَ صَاحِبَ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، فقال له أبو أَمَامَةَ : يَا عَمْرُوبْنُ عَبَسَةَ ، أَنْظِرْ مَا تَقُولُ ! فِي مَقَامٍ وَاحِدٍ يُعْطَى هَذَا الرَّجُلُ ؟ فقال عمرو : يَا أبا أَمَامَةَ لَقَدْ كَبُرَتْ سِنِّي ، وَرَقَّ عَظْمِي ، وَاقْتَرَبَ أَجَلِي ، وَمَا بِي حَاجَةٌ أَنْ أَكْذِبَ عَلَى اللَّهِ تَعَالَى ، وَلَا عَلَى رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، لَوْلَمْ أَسْمَعِهِ مِنْ رَسُولِ اللَّهِ ﷺ ، إِلَّا مَرَّةً أَوْ مَرَّتَيْنِ أَوْ ثَلَاثًا - حَتَّى عَدَّ سَبْعَ مَرَّاتٍ - مَا حَدَّثْتُ أَبَدًا بِهِ ، وَلَكِنِّي سَمِعْتُهُ أَكْثَرَ مِنْ ذَلِكَ . رواه مسلم .

قوله « جُرَاءٌ عَلَيْهِ قَوْمُهُ » : هو بجيم مضمومة وبالمد على وزنِ عُلَمَاءَ ، أي : جَاسِرُونَ مُسْتَطِيلُونَ غَيْرُ هَائِبِينَ ، هذه الرواية المشهورة ، ورواه الحُمَيْدِيُّ وغيره « جِرَاءٌ » بكسر الحاء المهلمة ، وقال معناه : غَضَابٌ ذُووُ غَمٍّ وَهَمٍّ ، قَدْ عِيلَ صَبْرُهُمْ بِهِ ، حَتَّى أَثْرَفِي أَجْسَامِهِمْ ، مِنْ قَوْلِهِمْ : حَرَى جِسْمُهُ يَحْرَى ، إِذَا نَقَصَ مِنَ الْمِ أَوْ غَمٌّ وَنَحْوَهُ ، وَالصَّحِيحُ أَنَّهُ بِالْجِيمِ .

قوله ﷺ « بَيْنَ قَرْنَيْ شَيْطَانٍ » أي : ناحيتي رأسيه والمراد التمثيل ، ومعناه :

أنه حينئذ يتحرك الشيطان وشيعته ، ويتسلطون .

وقوله « يُقَرَّبُ وَضَوْءُهُ » معناه : يُحْضِرُ الماء الذي يَتَوَضَّأُ بِهِ ، وقوله « إِلَّا خَرَّتْ خَطَايَا » هو بالخاء المعجمة : أي سقطت ، ورواه بعضهم « جَرَّتْ » بالجيم ، والصحيح بالخاء وهو رواية الجمهور . وقوله « فَيَنْتَثِرُ » أي يَسْتَخْرِجُ مَا فِي أَنْفِهِ مِنْ أَدْيٍ وَالثَّرَّةُ : طَرَفُ الْأَنْفِ .

438. Abuu Najjix Camar Ibn Cabasah (A.K.R.) wuxuu yiri: Waagii jaahiliyadda waxaa ii muuqatay in dadku dhunsan yahay oo aysan ku socon wax diin xaq ah. Waxaa caado u aheyd (dadka) inay caabudaan sanamyo. Muddo kaddib baan waxaan maqlay nin Makka jooga oo sheegaya wax cusub. Inta rakuubkaygii soo fuulay baan soo aadey. Waxaan ogaaday inuu yahay Nebiga (S.C.W.) (kaa afkaaraha cusub wata) wuxuuna ka dhuuman jiray indhaha dadkiisa ee cadowga u ahaa, shirqool iyo dilna la doondooneyey. Waxaan ka shaqeeeyey si qorsheysan inaan Makka kula kulmo. Waxaan weydiiyey: Maxaad tahay? Wuxuu yiri: 'Waxaan ahay Nebi.' Markaasaan weydiiyey' Oo nebi waa maxay? Wuxuu yiri: Allaa i soo diray oo aan rasuulkiisii ahay. 'Waxaan misna weydiiyey: oo muxuu kula soo diray (Yacni waa maxay fartiinta iyo risaalada aad ka waddo)? Wuxuu yiri: Wuxuu ii soo diray inaan faro dadka inay u naxariistaan qaraabada oo wanaajiyaan, la baabi'iyoo sanamyada, lana qiraa in Alle mid yahay, cidnana aan loo shariik yeelin.' Waxaan weydiiyey : Yaa ka mida ragga sidaa kugu raacay? Wuxuu yiri: xor iyo addoon (macnaha raggan) markaasna Abuu Bakar (A.K.R.) iyo Bilaal (A.K.R.) waxay la jooheen nabiga (S.C.W.) (macnaha waa raggan baa ka mid ah) Wuxuu yiri : Waxaan iri: aniguna sidoo kale ku raacay, waxaana rabaa inaan kula jiro. Wuxuu yiri: Xaaladda sidan ah kugulama talinayo inaad sidaa yeesho. waad aragtaa xaaladdeyda iyo siday igu yihiin dadka, iyo waxa nakala heysta? U laabo dadkaadii markii aad maqashid inaan ku guulaystey dacwada iyo risaaladayda markaa ii imow. Markaasaan , dadkaygii isaga noqday, anigoo la jooga buuna nebigu (S.C.W.) u soo guuray Madiina. Warkiisaan doon dooni jirey illaa qaar ka mida dadkeygii ay Madiina booqaasho ku tageen. Markay ka soo laabteen baan waxaan weydiiyey: 'Sidee ninka (nabiga S.C.W.) Madiina yimid xaalkiisu yahay? Waxay yiraahdeen: Dadku aad buu u soo raacayey (oo u soo galayeen diinta Islaamka) inkastoo dadkiisii isku dayeen inay dilaan, umana suuroobin,.' Markaasaan aaday Madiina oo hor tagay nabiga (S.C.W.) kuna iri: Rasuulkii Alloow (S.C.W.) ma i garanaysaa? Wuxuu yiri: Haa, waxaad tahay ninkii igula kulmay Makkah.' Waxaan iri: Rasuulkii Alloow (S.C.W.) ii sheeg waxyaabaha Alle ku baray oo aan jaahilka ka ahay . Hor iyo horraanbana wax iiga sheeg salaadda? Wuxuu yiri: